Ku Baadh Telegramka @Somalibooks



TATAAR

WAA TAARIIKHDII TATAARKA BILOW ILAA CAYNU-JAALUUT·

Xaddaaraduhu way baaba'aan,Qaramadu way burburaan,Ilbaxnimooyinkuna way dhalangeddismaan,laakiin qalinka iyo qoraalkiisu way jirayaan inta nololi ka jirto dunida,sidaa darteed ayuu buuggani uga warami doonaa taariikhda tagtadeedii,timaadadeeda iyo tan aynu maanta la noolnahayba!.



[Pick the date]


TATAAR

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Hor-dhac:

Afeef:

Hibeyn:



Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Hordhac

ILAAHAY (swt) naxariis darteed uu u naxariisanayo addoomihiisa ayuu dhulka korkiisa u dhigay taariikho soo jireen ah oo aan gedgedoomayn ,is bedbeddelna aan lahayn.. taariikhdaasi waxay joogtaynaysaa nolosha dadka .. taasayna ku tiirsan tahay jiritaanka ,dhaqdhaqaaqa iyo degaanka bani Aadamku. Haddii xilli kasti uu lahaan lahaa taariikh u gaar ah ,ama meelkasti ay lahaan lahayd sunne ka duwan tan kale nolosha Uumiyuhu way baab'I lahayd..wayna amban lahayd dhamaan khibradihii la soo dhaafay.

Laakiin gallad **ILAAHAY** darteed: khibradihii tegay dhamaantood ma lumin..wixii shalay kugu dhacay way soo noqnoqanayaan maanta way kugu dhacayaan.. wixii maanta kugu dhacayna burrito ayey kugusoo noqonaysaa .. sidaas ayeyna u soconaysaa ilaa maalinta dunidu dhamaato..

Sidaa darteed ayaa muhiimadda laga leeyahay barashada taariikhdu tahay midaas oo qudha uun...

Dhacdooyinka noloshu way soo noqnoqdaan iyaga oo aad mooddo inay isku mid yihiin.. dunida wax ku cusubi ma jiraan.. haddaynu taariikhda derisno taariikhda waxaynu ugaan doonaa dhacdadan oo kale inay waqti dhacday iyadoo wadata duruufta ay maanta wadato oo kale ,sidatona isla huga ay lebbisan tahay , Waxa aynu awoodnaa inaynu kala soo baxno wixii tii hore laga dhaxlay uun ka dhaxallo, Haddii guul laga dhaxlay wadadeedii ayeynu maraynaa si aynu ugu guulaysanno sidii ay ugu guulaysteen kuwii ku guulaystay...

Haddii ay dhacdadu ahayd mid lagu jabay oo foolxun khaladaad ay sameeyeen kuwii la noolaa waqtigaas darteed waynu ka fogaanaynaa si aynaan uga dhaxlin faa'iidadaas xun oo kale.

Barashada taariikhda sidan loo bartaa waxay ka dhigaysaa taariikhda mid nool oo soo jeedda .. barashada taariikhda noocan loo bartaa waa mid leh ujeeddo cad ujeedadaasina waa in laga baadhayo (Cibro) waana midka **ILAAHAY**(swt) ku sheegay kitaabkiisa marka uu yidhi:

لَقَدْ كَانَ فِي قَصَصِهِمْ عِبْرَةٌ لِّأُولِي الْأَلْبَابِ ﴿١١١﴾ (waxaa ugu sugan ku cibroqaadasho taariikhaha kuwa caqliga u saaxiibka ah).

Sababtaas darteed ayaa **ILAAHAY** (swt) saddex meelood oo meel ka dhigay warar iyo qisas ,si ay u akhriyaan Muslimiintu taariikhaha dunida soo maray iyo qoomamkii

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

hore.. iyo inay u ogaadaan dhab ahaan inay yihiin sunankani kuwo sugan..isla markaana la awoodo saadaalinta shay inta aanu dhicin ka hor, iyo ka faa'iidaysigeeda ..Waxana keliya oo lagaga faa'iidaysan karaa iyadoo qiso kasta si qoto dheer looga fekero.. Iyo in la baadho dhankasta si is le'eg. Sidaa darteed ayuu ilaahayQur'aankiisa ku leeyahay: فَٱقۡصُصِ ٱلۡقَصَصَ لَعَلَّهُمۡ يَتَفَكَّرُونَ ١٧٦ (uga waran wararkii dadkii hore si ay u fekeraan).

Waxaa imminka inna hortaalla taariikhaha Muslimiinta kuwa ugu muhiimsan.. ama taariikhda dunida oo dhan guud ahaan.

Waa dhacdo ku saabsan soo bixitaanka awood cusub oo cabsi leh wejiga dunida korkiisa oo dhan qarnigii toddobaad ee taariikhda Hijriga .. waxay geysatay soo bixitaankeedu mid adduunyada oo dhan taariikhdeeda beddeshay guud ahaan.. gaar ahaan Caalamka Islaamka, quwaddaasi waa "Dawladdii Tataar".

Ka waranka Tataarku waa qiso aad u yaab badan.. cajiib dhan kasta marka laga eego. Haddii aanay lahayn ilo wareedyo saxan dhamaantood iyo weliba ,iyo sawirkeeda oo ahaa mid balaadhan oo cid waliba ka warqabtay , Waxaynu odhan lahayn Waa Khayaali,ama waaba sheeko xariireed.

Qiso yaab leh, is bed beddelkeedu waa awood isu rogtay dacfi ama awood yari isu rogaysa awood iyadoo aan muddo badan qaadan..!! maba aha sannado yar maahee inta Ilaahay(swt) dawlad ku cisaynayo mid kalena ku dullaynayo.. sannado yar ka dib ayaa mid ku dullaynayaa haddana mid kalena ku casilayaa!!.

قُلِ ٱللَّهُمَّ مَٰلِكَ ٱلۡمُلۡكِ تُؤۡتِي ٱلۡمُلۡكَ مَن ٢٥
تَشَآءُ وَتَنزِعُ ٱلۡمُلۡكَ مِمَّن تَشَآءُ وَتُعِزُّ مَن تَشَآءُ وَتُذِلُّ مَن
تَشَآءُۖ بِيَدِكَ ٱلۡخَيۡرُۖ إِنَّكَ عَلَىٰ كُلِّ شَيۡءٖ قَدِيرٞ ٢٦ **(waxaad dhahdaa Nebi Maxameedoow NNKA Allaha Mulkiga iska lehoow cidda aad doonto ayaad siisaa Mulkiga ,Cidda aad doontona waad ka siibtaa Mulkiga,waad sharaftaa cidda aad adigu doonto ,cidda aad doontona waad dullaysaa gacantaada ayaa khayr oo dhammi ahaaday wax kastana ilaahoow waad awooddaa).**

Mar kale waa qiso Cajiib ah dhab ahaan dhacdooyinka ku jira darteed ee weliba aad u daran.. ku xeeldheer lambarada dhacdo kasta ..ku xeeldheer tirada dhimashada..tirada ciidamada,tirada magaalooyinka burburay..Bededka dhulalka la kala qabsaday..Tirada khiyaamooyinka iyo asluubeheeda .

Sida kale ee qisadu cajiibka u tahay waa u ekaanteeda waaqica maanta taagan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Subxaanallaaah!!

Wuxuu doonay **ILAAHAY**(swt) inuu inoo caddeeyo sugnaanta Sunankiisa iyo soo noqnoqodka taariikhda. Markaasuu ka dhigay dhacdooyinka maanta ee ay ummadeenu marayso mid la mid ah tii ay maraysay ummaddii Muslimka ahayd ee noolayd qarnigii toddobaad ee Hijriga.. Haddaynu baadhno taariikhda waxaynu kala soo baxaynaa isu ekaansho badan oo kale..hase yeeshee dhacdadan doorashadeeda inay dhacdo maanta ama Maalintaas hore waa mid iska cad ,sababtoo ah wuxuu ku wareegayey saxalku am aka dhacayey meesha ay maanta ka dhacayaan marka loo Eego Caalamka islaamka .. Sidaa darteed waxaa fudud in uu qofka akhrinayaa isku xidho taariikhda iyo waaqica si fudud.. mar labaad qofka akhrinayaa inay u fududaato inay inuu xaqiiqsado Sunnooyinka **ILAAHAY** iyo jiritaankeeda abuurkiisa iyo dhulkiisa.

Ujeedada aynu ka leenahay buugganina maaha in aan galo oo tafaasiil ka bixiyo dhacdo kasta ama aan is dul taago goob kasta taas sharraxeeda ayaa badanaya, Laakiin waxaynu dhacdooyinka u dulmaraynaa si dhakhso ah innagoo ka baadhayna meelaha Cibro qaadashadu ku jirto.. iyo u ekaanteeda casrigan aynu nool nahay ..waxaynu si deg deg ah u xalili doonaa sababaha guul darooyinka si xawli ah iyo sidoo kale sababaha guusha.. ciddii u baahata inay siyaadsato waxay ka raadsanaysaa tix-raacyada waaweyn ee Muslimiintu ku kaydiyeen.

ILAAHAY ayaan waydiisanaysaa in uu innagu anfaco safxad kasta ,kelmed kasta xataa xaraf kasta oo ka mid ah ka waranka qisadan Cajiibka ah.

DR. YUUSUF DUCAALE JAAMAC

* * *

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

soo bixitaankii Tataarka

Awoodda Tataarku waxay soo baxday horaantiiqarnigii toddobaad ee Hijriga weliba qarnigaas isagana horaantiisii, Haddii aynu doonayno in aynu fahamno duruufaha ay kusoo barbaartay awooddani waa in aynu is dultaagnaa xaaladda ay dunidu ku sugnayd samaankaas.

Hadaad waqtigaas dunida sidaas u eegto waxaad arkaysaa in laba awoodood oo isku dhawdhawi ka jireen kana talinayeen.

Tan koowaad miyaa, waa ummadda Islaamka .

Dhul degaameedka Muslimiintu waqtigaas wuxuu ahaa mid ku dhow dunida ilaahay cammiray marka laba loo qaybiyo badhkeed (inta dunida la deggan yahay)..waxay ka bilaabmaysay xuduudda Muslimiintu galbeedka Shiinaha waxay soo dhambashay Aasiya ,Afrika ilaa laga gaadho galbeedka Yurub,oo ah Andalus.

Waa bed aad u ballaadhan,laakiin xaaladda Muslimiintu waqtigaas waxay ahayd mid aad u daran(xun) _mid weliba xanuun badan..Caalamka ay haysteen ballaadhnidiisa, Tiradooda oo mahiigaan ahayd dhinaca dadka.. dhinaca Nolosha kale oo aad u sareeyey sida ,lacagta ,ganacsiga ,hubka iyo cilmiga..dhamaan iyagoo waxaas oo dhan haysta haddana waxaa ka jirtay tafaraaruq aad u daran caalamka Islaamkaa.. loolan

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

dhinaca siyaasadda oo ka dhex aloosnaa dawladihi Muslimka ahaa ee waa weynaa oo dhan.. waxaa la yaab sii ah inta ay dunida Muslimku xaaladdaas xun gashay waxay ahayd sannado yar uun ka dib qarnigii lixaad ee Hijriga..markaas oo ay ummadda Muslimku ahayd mid awood leh, guulaysata markasta ,calan keliya oo isku xidhan leh lagana haybadaysto.. laakiin waa sunne **ILAAHAY** dhigaywaqti hore.

وَتِلْكَ ٱلْأَيَّامُ نُدَاوِلُهَا بَيْنَ ٱلنَّاسِ

((kuwaasi waa maalmo aanu dhex warwareejinayo dadka))

Bal aynu yara eegno caalamka islaamku sida uu ahaa bilowgii qarnigii toddobaad.

1.Dawladdii Cabbaasiyiinta: waxay ahayd dawladd weyn oo qaddiimi ah ,waxayna dhisantay ka dib markay burburtay dawladdii Umawiyiinta ee waynayd sannadii 132H_ bilowgii qarnigii toddobaad ee Hijrigu..aad iyo aad ayey dawladdani u daciiftay illaa ay gaadhay heer aanay si dhab ah u xukumin Ciraaq mooyee, waxaana caasimad u ahayd Baqdaad ilaa sannadkii 132H. Waxaa Ciraaq ku wareegsanaa tobanaan maamul goboleed yar yar oo si toos ah uga goostay khilaafada. Walawba iyadu aanay u aqoonsan waxa ay isku magcaabayaane..waxaad awooddaa in aad tidhaahdo: Dawladda Cabbaasiyiintu dawlad maaha ee waa (sawir dawladeed) sababta oo ah waqtigan may lahayn haykalkii dawladnimo oo dhab ah.. waxay ahayd laakiin hadh ay Muslimiintu jecelyihiin in ay iska jirto oo ay Hadhsadaan yaanayba lahaan waxyaabihii haykal dawladeed oo la taaban karo eh..si la mid ah sida maanta dawladda Ingiriisku u tahay soo jireen taariikhi ah oo qudha,isla markaana aanay ku lahayn xukunka door la sheegi karo,khulafada khaliifkoodu wuxuu si dhab ah u xukumi jiray Ciraaq oo dhan marka laga reebo qaybo yaryar oo waqooyiga.

Wuxuu ahaa mid xukunka Cabbaasiyiintu ay u kala dambeeyaan khulafo kasoo jeeda reer Cabbaas..waxay tuurta ku qaateen magac aad u weyn “KHaliif” laakiin waqtigan ka midka ahaa qarnigii toddobaad Hijriga, kuma sifeysnayn Magacan,run ahaantiina iyagaba dan weyni kagama jirin in lagu sifeeyo asal ahaanba, kuma jirin mid hammigiisu wax dhaafsiisan yahay xoolo ururs i ,iyo in uu ku dangiigsado kursigaas qolladda yar ku jira, kumay eegin marna aragti sax ah waxay shaqadii loo dirtay ahayd shaqadii Madaxweyne yaasha..may fahmin in madaxweyne mas’uuliyaadka saaran ay ka mid tahay in uu sugo amniga waddankiisa, in uu dhiso ciidamo xooggan oo dalku leeyahay,in uu kor u qaado maqaamka nololeed ee shacbigiisa,in uu ka xukumo kii daalinka ahaa oo ummadda ka dhex qabto, usoo celiyo kii wax laga dhacay xoolihiisii, in uu u gargaaro waxna la qabto kuwa la dulmiyey,kuna ciqaabo kuwa daalimiinta ah, toosiyo xaqqa uu(swt) **ILAAHAY** addoomada ku waajibsaday,wanaagga faro,xumahana ka reebo, isla markaana daafaco wax kasta oo Islaamka liddi ku ah, mideeyo safafka Muslimiinta iyo quluubtoodaba..

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

May fahmin hawlahaas culculisi in laga rabo hoggaamiye kasta oo Muslim ah,dhamaantood waxa keliya ee ay doonayeen waxay ahayd inay kursiga ku fadhiyaan waqtiga ugu dheer ee u suurto gala in ay ku fadhiyaan, sida ilmohoodu uga dhaxli lahaa xukunka, inay ku xejiyaan kuwa mansabka haya ee qoysaskooda ka mid ah, inay dadka qoorta kaga taagnaadaan,sidaas darteed waxay ku dedaaleen sidii ay u ursursan lahaayeen xoolo fara badan,waxay u guntadeen boob mar la arag ah,waxay ku dedaali jireen sidii loo qaban lahaa xaflado soojeed(saama-Alleyl) dhegaysiga heesaha,Muusikada lahwi iyo wax aan dhaamin.

Nolosha hoggaamiyuhu waxay ahayd mid aan ka duwanayn dadka caamada ah oo kale halkii laga rabay in uu noqdo hogaamiye ummadeed oo si dhab ah u xukuma ummad Muslim ah.

Dhab ahaan way luntay haybaddii Hoggaamiyenimo sharaftiisiina dhulkay gashay!.

Waxay tani ahayd Dawladdii Cabbaasiyiinta bilowgii qarnigii toddobaad Hijriga.

2. Masar, Shaam, Xijaas, Yaman:waxay ahaayeen gobolladani bilowgii qarnigii toddobaad taariikhda hijriga kuwa ku jira gacanta Ayuubiyiinta (saaxu diin al ayuubi) waxay magaca ka sitaan ninkaa wanaagsan,laakiin nasiib daro_ may ahayn ninkan ay magaciisa sitaan kuwa u dhow ninkaas wayn..waxayba isku qabqabsadeen xukunkii dhexdooda ..wayba qaybsadeen dawladda Ayuubiyiinta ee isku xidhnayd (furfureen) , waa dawladdii jabka lama illaawaanka ah ku dhigtay Kiristaanka (gaalada)meesha la yidhaahdo Xidiin.Maamulo yar yar bay ka yeeleen Shaam waxay ka go'day Masar ,sidoo kale dhamaan Xijaas iyo Yamani waxay ka go'een Shaam iyo Masar.. Shaam oo keliya ayaa u kala googo'day maamul goboleedyo yar yar oo dhexdooda ka dagaalamaya..!! Waxay Ximsa ka Go'day Xalab iyo Dimishiq .. sidoo kale Falastiin iyo Urdun baa kala baxay, marka khasab waa inay dib ugu noqdaan dhulkii uu xoreeyey Saalaxu_diin gacantii gaalada mar labaad kala furfurankan dartii ولا حول لا قوة إلا بالله العلي العظيم!.

3.Maqrib iyo Andalus: waxaa haystay Maamulkii la odhan jiray "dawladdii Muwaxidiin"..waxay ahayd dawlad awood badan taariikhdeedii hore oo dhisan ,isla markaana xukunta dhul bari ka bilaabanta Liibiya galbeedna u joogta Maqrib ,waqooyi Andalus illaa badhtamaha afrika Koonfur.. iyadoo taasi jirto bilowgii qarnigaas toddobaad ee Hijiriga waxay bilowday dawladdani lagu soo xaadiro .. gaar ahaan dagaalkii caanka ahaa ee la magac baxay "Al Ciqaab" sannadkii 609H.Taasoo ahayd isku day in laga takhaluso dawladdan balaadhan dawlatul Al Muwaxidiin.

4 Al Khawaarsim: waxay ahayd dawladdani dawlad ballaadhan oo baallaha la kala baxday.. waxay ahayd mid gacanta ku haysa dhamaan dawladaha Muslimka ah ee Qaaradda Asiya.. waxay ahayd xuduudeedu galbeedka Shiinaha dhinaca bari ilaa qaybo aad u ballaadhan oo Iiraan ah galbeed u joogta.. waxaa dhexyaallay dawladdan is afgarad la'aan aad u daran iyada iyo dawladdii Cabbaasiyiinta .. waxa dhexdooda

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

tiro beelay Mu'aamaradaha iyo dhagaraha ,waxayba ku dhowaatay dawladdan Khawaarsimiya in ay kala googo'do, waxaa dhexdeeda batay Fittankii iyo Inqilaabadii waxay dagaalo badan casrigeedii la gashay maamulladii Salaajiqa ,Gooriyiint, Cabbaasiyiinta iyo kuwa badan oo Muslimiin ah.

5 Hindiya: waxay gacanta ugu jirtay oo xukumayey Suldaankii Gooriyiinta, dagaalo farabadan oo soo noqnoqday ayey la gashay dawladdii Khawaarsimiya.

6 Faaris: waa dhulka imminka loo yaqaan Iiraan , waxaa qayb ka mid ah xukumi jirtay dawladda Khawaarsimiya ,dhinaca galbeedka, dhinac waxay kaga dhegsanayd Khilaafadii Cabbaasiyiinta _ weliba intii ay xukumi jirtay koox yar oo la odhan jiray "Ismaaciiliya" waa koox ka mid ah kooxaha Shiicada weliba aad u dhaqan xun, waxay ahayd koox aad u khilaafsan caqiidada ,waxay ka saari jireen culimada diinta gebi ahaanba .. kooxdani waxay diinta ku badhaxday qaybo Falsafad ah.. Asal ahaanna waxay kasoo jeedeen Majuus(qolada dabka caabuda) Islaamna dushay ka sheegteen Majuusinimadoodiina hoostay ku qarsadeen waxay u macnaysteen Aayadaha quraanka Sida ay jecelyihiin iyagu, waxay ka mid ahaayeen kooxaha aamin san "Qarinta" waa kooxo aaminsan oo yidhaahda :Arrin kasta oo ka muuqda diinta wuxuu leeyahay qayb qarsoon oo aanay ogeyn cidina qolo gaara maahee iyaguna ay yihiin kuwaas, cidna uma sheegaan waxa uu yahay waxaasi illaa aad gashid diintooda waxay diiddan yihiin Rasuulka (NNKHA) iyo shareecada waxyaabaha ugu muhiimsan dalabkooda waa "Mulki iyo Saldanad" sidaa darteed waxay mudnaanta koowaad siiyaan Hub iyo dagaal..

Good ahaan markaan soo duuduubno Ismaaciiliya waa kooxda ugu khatarta badan kooxaha Qarsoodiga aaminsan , waxay sababta koowaad u ahaayeen wax ka beddelka Diinta iyo Caqiidada,Naanayso ay ku dhejiyaan Islaamka , qudhgoynta shakhsiyaadka soo baxaya ha ahaado Khaliif ama shicib ,Ha ahaado caalim ama beerfale, nin iyo gabadh uma aabeyeeli jirin.

7 Anaadool (Turki): gobolkan waxaa haystay Salaajiqadii Rooma,asal ahaanna waxay noqonayaan Salaajiqadu turki, waxay waqtigoodii hore lahaayeen taariikh weyn iyo Jihaad daran,waqtigan waxaa hoggaamiye Muslim ah u ah Salaajiqi la yidhaahdo " Alab Arsaloon" رحمه الله laakiin nasiib darro kuwii hore usoo xukumi jiray gobolkan yar ee xasaasiyadda badan deriskana la kiniisaddii weynayd ee Al Biisnidiya, waxay ahaayeen kuwa liidasho halkii ugu xumayd weliba meesha ugu liidata jooga taasoo ay u sababtay ama dhaxalsiisay dulli iyo darxumo..

Hadaba..

Waa muuqaalkii guud ee ummadda Islaamka ee waqtigaas.

Waxaa inooga dhex muuqday in dhexdooda uu ku baahay Fitnooyin,Mu'aamaraadkii iyo dagaaladu tiro beeleen Muslimiinta dhexdooda iyo walaalohooda diinta, ay ku badatay dhexdooda Macaasida iyo dunuubtu, maskaxdana uu dhamaantood ka

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

qabsaday welef iyo adduunyada oo ay ku dhegsan yihiin,dembiyadii waaweynaa ee kabaa'irta la odhan jiray oo quluubta dadka ku yaryaraaday,illaa ay badatay wax iska caadiyana ay noqotay odhaahani : "hebel ayaa hebel dhacay ama hebel wuxuu dilay hebel , kan kale wuxuu daadiyey hebel dhiigiisii" kelmedahan oo si dhiig qaboow laysaga leeyahay.. waxaadba mooddaa nafahan warka dhegaysanayaa ama kuwa ku waramayaaba in aanay ahayn Naftii basharka lagu yaqaanay..!!

Waxaana la ogyahay qofka derejadan gaadha in ay khasab tahay in uu beddelmo!!.

Markaa wuxuu noqday caalamkii Islaamku mid suga Masiibo garba siman ka dhigta dhamaan waxma tarayaashan aadka u liita ee dunida muslimka oo dhan haysta,si uu u yimaaddo markaas Jiil cusub oo xaaladdan wax ka beddelaa isla markaana Islaamka haybaddiisii usoo celiya iyo khilaafada awoodeedii iyo sharafteedii.

Awooddalabaadna: waxay ahayd qarnigii toddobaad horaantiisii taariikhda Hijriga awoodii Gaalada ee Saliibiyiinta(Kiristaanka) la odhan jiray, waxay xarumaha ugu waaweyn ku lahayd Galbeedka Yurub, halkaasoo ay ku lahaayeen in ka badan gole diineede.. waxay camal ka dhigteen oo ku mashquuleen dagaalo isdaba jooga oo ay kusoo qaadaan Muslimiinta, waxay Nasaarada Ingiriiska ,Faransiiska, Jarmalka Iyo Talyaanigu waxay olole dagaal oo is daba jooga kusoo qaadi jireen waddamada Shaam iyo Masar , Nasaarada Isbayn iyo Burtuqaal _ Faransiiska mar labaad waxaanay kala qoob qaadi jirin oo weeraro is daba jooga kusoo qaadi jireen Muslimiinta Andalus.

Marka lagu daro waxaas oo dhan oo isu habar wacashada ahi , waxaa jiray is gaashaan buursi Nasraani ah oo caalamka intiisa kale ka jiray, waxayna ahaayeen is gaashaan buuraysigaasi mid meel sare maraya dhinaca nacaybka xasadka , xiqdiga ,colaadda ay u qabaan dadka Muslimiinta dagaalada ugu daranina waxay dhex mari jireen iyaga iyo muslimiinta ,isbahaysiyadaasina waxay ahaayeen kuwa ugu caansani sidan soo socota:

1. Imbiraadooriyadii Al Biisandiya: dagaaladeedii ay la geli jirtay dadka Muslimiinta ah waxay ahaayeen kuwo bahalnimo ah oo taariikhi ah, laakiin waqtigaas waxay ahayd mid xaalad awood darri lafaha kasoo gashay kana faraxalatay quwadeedii iyo baaxadeediiba ,sidaa darteed dhinaceeda khatar badan lagama dareemi jirin mar haddii la wada garanayo itaalkeeda Imbiraadooriyaddan Biisandiya.

2. Boqortooyadii Armiiniya: waxay ku taal bariga Faaris iyo galbeedka Turkiga,waxay dagaalo is daba jooga la geli jireen Muslimiinta gaar ahaan Salaajiqa.

3.Boqortooyadii Al Kurji: imminka waa dawladda la yidhaahdo Joorjiya (chorchia)marnaba isma taagin dagaalada ay Muslimiinta la gelayeen gaar ahaan dawladdii Al Khawaarsimiya.

4.dawladihii Nasaarada ee Falastiin Shaam iyo Turki: waxay imaaradahani qabsadeen oo ay gumeysan jireen dhulalkan Islaamka ah laga soo bilaabo qarnigii shanaad dhamaadkiisii(laga bilaabo 491H.) Iyadoo ay jiraan guulo badan oo uu ka

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

gaadhay Salaaxu diin رحمه الله uu ku jebiyey gaalada Xidiin,Baytal Maqdis,iyo dhulal kale oo badan iyadoo waxaas oo dhan lagaga guulaystay haddana weli way sii jiraan maamulladani, iskaba daaye marna ma joojin xad gudubka ay ku hayaan dhulalka Muslimiinta ee ku wareegsan dhulalka ay haystaan waxaana ugu caansanayd Maamuladaas Andakiya ,Caka , Daraabulis iyo Bayruut.

Sidaas darteed ayaa bogcad kasta oo caalamka ka mid ah laysugu haystay oo gaalo iyo muslimiini isu hortaagnaayeen wayna soo siyaadiyeen gaaladu dhibaatooyinka ay ku hayeen Islaamka .

Wuxuu ilaahay doonay in ay ciid u ahaato dhamaadkii qarnigii lixaad ummadda Islaamka jab,hoog iyo halaagna ay u ahaato gaalada _ ilaahay wuxuu idmay dhamaadkii qarnigii lixaad labadii guulood ee waaweynaa ee muslimiintu gaalada ka guulaysteen , mid waa guushii waynayd ee uu geesigii (Salaaxudiin رحمه الله) uu kaga guulaystay goobta la yidhaahdo Xiddiin ee cariga Shaam sannadkii 583H Waxaa ka dambay sideed sano oo keliya markii geesigii Islaamka Al Mansoor رحمه الله (dawladii muwaxidiinta) ka guulaystay meesha la yidhaahdo “Arak” sanadkii 591H.

Iyadoo ay jireen labadaas guulood ee waaweyni Muslimiinta haddana waxaa haystay bilowgii qarnigii toddobaad ee Hijriga tamar-darro dhulka la sintay,sidoo kale waxaa kala furfurmay dawladdii Ayuubiyiinta ee isku xidhnayd ka dib markii uu geeriyooday Salaaxu_diin Al Ayuubi ,mar kale waxaa fur furmay dabarkii isku hayey Ayuubiyiinta ka dib geeridii Al Mansoor رحمه الله. Sidoo kale dhinaca Siliibiyiinta laftooda waxa haystay daciifnimo la mid ah kan muslimiinta haystay oo kale, ma awoodin in ay qabsadaan intay ku duulaan dal ka mid ah dalalka Muslimiinta haddayba jeclaan lahaayeen in ay u dhameeyaan dalkaas oo danahooda oo dhami ku jiraan haddana ma awoodin tamar darro darteed.

Sidaas ayuu ahaa muuqaalka dunidu bilowgii qarnigii toddobaad.

Iyada oo xaaladda dunidu halkaas noocaas tahay ,waxaa soo baxday awood cusub oo firfircoon beddeshay miisaannadii caalamka ,khariiraddii caalamkana daba geddiday uguna yeedhay nafteeda in ay tahay quwad saddexaad ee dunida kusoo korodhay.. Amaba awood u leh in ay tidhaahdo: waxaan ahay quwadda koowaad ee dunida horraantii qarnigii toddobaad taariikhda Islaamka.

Quwaddaasi waa quwaddii dawladdii Tataarka ama Mangooliya!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

WA'AYO TATAAR?

Waxay soo if baxday ku dhowaad dawladda Tataarku sanadkii 603h,waxayna markii hore kusoo baxday magaca (Mangooliya) waqooyiga shiinaha ,hoggaamiyeheedii koowaadna wuxuu ahaa (Jingis_ Khaan).

Macnaha ereyga waa Nijaas afka Mangooliyiinta ama boqorka boqorada Caalamkakii awoodda badnaa:hadba sida loo turjuma weeyaan luuqadda Mangooliyiinta laakiin magaciisa dhabta ah waa ((Tiimojiin)).. wuxuu ahaa dhiigya cab.. wuxuu kale oo ahaa hoggaamiye mullateri oo aad u dhib badan.wuxuu lahaa karti ay dadku kusoo ururaan hareerihiisa ..wuxuu ku bilaabay dhul ballaadhsi dhamaan dalalkii deriska la ahaa , ka dib si xawli ah kama nasan dawladdiisu inay sii waddo dhulballaadhsiga ilaa ay xuduudeheedu gaadheen laga bilaabo Kuuriya ilaa dawladdii Al Khawaarsimiya ee islaamka ahayd galbeed,laga bilaabo buuraha Sayberia waqooyi ilaa badda Shiinaha koonfur (eeg khariiradda lam.3) taas macneheedu waxaa weeye waxay gacanta ku dhigtay dhamaan caalamka oo dhan imminka(Shiinaha,Mangooliya,Fiitnaam,Kuuriya ,Taylaan, qaybo badan oo Saybeeriya ah..ilaa jamhuuriyadaha Walas,Naymaar,Niibaal,Butaan!!).

Wuxuu u bixiyey magaca Tataar_sidoo kale Magool_ qoomamkii ku dhaqnaa waqooyiga Shiinaha saxaraha ((Juubi)), hadday Tataarku ahaayeen qabiiladii asalka ahaa ee ku noolaa meeshan…, qabiilo kale oo ka yimid sida qabiilada ((Magool)) iyo qabiilo ((Turki ah)) iyo ((salaajiqa)) iyo kuwa kale ,markii ay Magoolku qabsadeen_ kuwa uu ka midka yahay Jingis-khaan wuxuu u bixiyey dhamaantood magaca (Magool).

Waxay haysteen Tataarku diin cajiib ah_ waxay isku khaldeen diimo farabadan ka dibna intay isku dhexdareen ayey diin ka samaysteen.. wuxuu soo ururiyey Jingis-khaan qaybo sharciga islaamka ah ,qayb ka mid ah diinta Kiristanka ,qayb ka mid ah diinta Buudhiiska dhinaciisana wuxuu kaga darsaday shuruuc kale markii dambe wuxuu ka sameeyey buug uu Dastuur ka dhigay ay leeyihiin Tataarku wuxuuna ugu wanqalay buugiisaas (Al Yasak) ama (Al Yasah) ama (Al Yasiq).

Waxay dagaalada Tataarku la yimaadeen arrimo aan hore loo arag sida:

1. Argagixin deg deg ah oo laga cabsado.
2. Xukun iyo kala dambayn aad u saraysa.
3. Tirada dadka oo ah diigaanyo(tiro aad u badan)
4. Duruufo dhib badan oo ay adkaysigeeda leeyihiin.
5. Hoggaamin milateri oo aad u tababaran.
6. Iyaga oo aan lahayn Qalbi naxaba..!!.

Waxay ahaayeen dagaaladoodu burburin aan caadi ahayn horena aan uga dhicin dunida.. waxaa iska fududeyd in aad maqashid waxay galeen magaalada heblaayo dhamaanteed dhulka ayey la simeen dadkeediina xabbadi kama firxan iyagoon u kala saarayn nin iyo gabadh,mid jaqaya iyo mid dhalin yaro ah ilma yar iyo mid gaboobay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

,mid daalin ah iyo mid la dulmiyey , mid biri ma geydo ah iyo mid dagaal ku jira toona ..!! gumaad siman oo argagax badan iyo dabeecad dhiigya cabnimo tii u saraysay oo aanay gaadhin xataa Xayaawanka kuwa hilibka cunaa.

Waxaa ay ujeedadooodu ahayd((Amar ku taaglaynta dunida iyo cidhib tirka caalamka ,maal iyo mulki midna ma ahayn)).

7.Ma aqbalaan ra'yi kale_waxay jeclaystaan way sameeyaan iyagoo mabda'a ay ka duulayaan yahay(quwadda koowaad waa annaga) wax wada hadal ahna lama galaan dawladaha ku wareegsan.. waxaa cajiib ah waxay ku andacoonayaan in ujeedada ay dunida u yimaadeen tahay inay diinta toosiyaan,cadaaladina ay dunida wada gaadho, isla markaana ka cidhib tiraan dunida wax allaale iyo wixii fidma wadayaal ah..!!

8.Balan iyo cahdi midna ma leh..wax uga fududi ma jirto inay jebiyaan ballan ay galeen iyo ka bixidda heshiisyada.. ۝٩ لَا يَرۡقُبُونَ فِي مُؤۡمِنٍ إِلّٗا وَلَا ذِمَّةٗ sifooyinkaasi waa sifooyinka aas aaska u ahaa dawladooda ii dhidibada loogu taagay mana jebiyaan marxalad kasta laga soo bilaabo markay unkantay ilaa maalintii ay dhacday.

Taasi waa astaamaha dhabta ah ee ciidanka Tataarka waana sifooyin in badan soo noqnoqda ciidan kasta oo aan qawaaniin ka dhigan shareecada ilaahay samada kasoo dejiyey(swt)_qolo kasta oo awood is bidda fududeysata diinta waxaa khasab ah in ay yeelato sawirkan_ waxay sheeganayeen inay dunuub cidhib tirayaan.. laakiin gunaanadka waxay ahaayeen dembiilayaal.

Waxay ahaayeen dagaaladii kuwii diinta islaamka ka noqday kuwa aan ka fogayn xilligaas..sidoo kale dagaaladii Faaris..dagaaladii Roomaanka.. dagaaladii Siliibiyiinta Shaam iyo Masar..dagaaladii Siliibiyiinta Andalus.. ka dib raadkoodii uun buu daba galay waxaa daba galay gumaystayaashii Isbaanish iyo Burtuqaal,Ingiriiska, Faransiiska, Talyaaniga,Yuhuudda dabadeed Maraykaan..!!

Waxaa keliya oo ay ku kala duwan yihiin muuqaalka duleed,wejiyada iyo jidhkoodu waa kala duwan yahay laakiin Qalbiga waa ka mid keliya ah.. xasadka ,nacaybka xiqdiga ay u qabaan mid kasta oo muslim ah ama xadaarad iyo faham leh..

Ilaahay ayaa xumo ka nasahan markii uu inoo qeexay ee yiri. ۝٥٢ أَتَوَاصَوۡاْ بِهِۦۚ بَلۡ هُمۡ قَوۡمٞ طَاغُونَ

(miyey isudardaarmeen mayee waa duul xadgudbay)

Hadaba.. haddaynu isweydiino immisa quwadood ayaa dunida ka talinayey bilowgii qarnigii toddobaad ee hijriga waxaynu odhan karnaa waxaa ka talinayey saddex quwadood oo waaweyn..

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

1. **Quwadda koowaad waa Umadda Islaamka:** waa quwad leh taariikh culus oo weyn iyo karaamo lagu yaqaanay laakiin waxay imminka dhexmaraysaa wakhti ay soo waajahday tamar darri.. waa dacfi weliba mid aad u daran inkastooy taasi jirto haddana weli kama lumin haybadii ay lahayd si dhamaystiran.. cadawgeedu way garanayeen in asbaabaha guusha iyo sida awoodaha loo isticmaalaa ay tahay beerku taalla umadaha dhexdooda keliya cid soo saarta awoodaas oo hagta .

2.Quwadda labaad waa Siliibiyiinta: waa iyaga oo ku jira tamar darri la mid tan islaamka haysata oo kale iyo khilaaf xagga cilmiga isku khilaafsan yihiin iyo xadaaradaha.. inkasta oo taasi jirtay haddana maaha awood la dhayal san karo.. dhanka cadaawadooda oo badan ..nacaybka ay islaamka u qabaan iyo sida ay diyaarka ugu yihiin dagaalka Muslimiinta ilaa inta aan midh iskaga hadhayn ilaahay run buu sheegay markuu inoogu sifeeyey.

وَلَا يَزَالُونَ
يُقَٰتِلُونَكُمْ حَتَّىٰ يَرُدُّوكُمْ عَن دِينِكُمْ إِنِ ٱسْتَطَٰعُوا۟ ۚ

(Kama suulayaan la dagaalankiina gaaladu ilaa ay idinku celiyaan diintooda haday awoodaan)

Awoodda islaamka iyo awoodda gaaladu waxay ahaayeen kuwo isku mid ah isla markaana ah quwadihii hore u jiray ee dunida haystay

3.Quwadda Tataarka:waa awood aan taariikh lahayn.. xaddaarad lahayn.. waxay ku soo baxday si lama filaan ah, ma laha diiwaan loogu kaydiyo hiddaha iyo dhaqanka,ma laha mid diini ah ma laha mid ilbaxnimo si ay ugula tartanto qayrkeed.. markaa waxaa lama huraan ah in ay ku tiirsanaato awood balaadhan iyo dagaal reer baadiyenimo ah si ay ugu soo jiidato taageerada cidda la socota ..

Waxay ahayd awoodda tataarku mid hormuud u ah dunidan cusub ee ay la garaadsatay.

Waxaa ka mid qawaaniinta ilaahay dunida dhigay (swt)..in uu loolanka dhex dhigo awoodaha is khilaafsan..iska caabintana kooxo kala duwan, waxaa ka mid ah qawaaniinta ilaahay (swt) sidoo kale in kuwa awoodda badani ee diinlaawayaasha ahi aanay oggolaan in cid liidataa ka ag dhowaato..sidoo kale waxaa ka mid ah qawaaniinta ilaahay in baadilku si kasta oo uu u kala fog yahay hadana marka xaq lala dagaalamayo ay u midoobaan..waxaa kale oo ka mid ah in dagaalka u dhexeeyaa xaqa iyo baadilka uu soconayo ilaa maalinta qiyaame.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Marka aynu sunnayaashaas oo dhan wada dhigno maskaxdeena waa in aynu filanaa is xulufaysiga Tataarka iyo Siliibiyiinta_haba ku kala duwanaadeen afkaarta ,aragtiyaha iyo siyaasadaha ay ka kala leeyihiin _dagaalka Muslimiinta.

Sidaa darteed سبحان الله- wixii la filanayey ayaa dhacay.

Waxay soo direen gaaladu wefdi maqaamkeedu sareeyo oo laga soo ururiyey laga bilaabo Yurub ilaa Mangooliya (masaafo dhererkeedu yahay laba iyo tobankun oo kiilo meter tegi taanka oo qudha!!)waxay u socdaan waa maxay waa duulaan lagu qaado wadamada Muslimiinta iyo in la rido khilaafada Islaamka ee ka dhisan Ciraaq (Cabbaasiyiinta) Baqdaad in ay gacanta ku dhigaan waa halkii ugu saraysay markaa caalamka Islaamka, waxay uga warameen arrinka khilaafada Cabbaasiyiinta way u wayneeyeen,waxay u sheegeen.. Siliibiyiintu in ay ka caawin doonaan arrimahaas oo dhan ee lagu samayn doono Muslimiinta weliba ay indho u noqon doonaan oo ay iyagu kala yaqaaniin ka dibna Tataarku si dhamaystiran bay ugu qanceen.

Waxaa dhacay wixii ay filayeen Siliibiyiintu.. Daadkii Tataarku waxa uu u qulqulay dhinacaas iyo boqoradii Cabaasiyiinta ,waxayna go'aan ku gaadheen in ay ku duulaan wadamadaas balaadhan ee qaniga ku ah khayraadka ..intaas oo kali ah kuma heshiin Siliibiyiinta iyo Tataarku ee arrimo badan ayey ku heshiiyeen..dagaalo ayaa ka dhex socda labadooba meelo badan oo caalamka ka mid ah, laakiin safafkooda waa ay mideeyaan marka Ummad Islaam ah lala dagaalamayo.. arrintaasina maaha la yaab ee waa dabeecad lagu yaqaan in ay gaaladu sameeyaan marka ay xaq la dirir yihiin.

Hore ayey isu bahaysteen Mushrikiinta iyo Yuhuuddu Nebi Maxammed ﷺ Iyagoo khilaaf badani dhexyaallo Mushrikiinta iyo Yuhuudda.


Waxaa is kaalmaystay Faaris iyo Room oo colaad guun ahi dhex taallo dagaalo daba dheeraadayna ay ragaadiyeen kumanaan kun oo qof ku kala dhinteen in ay la dagaalamaan Muslimiinta Karaahiyo iyo nacayb ay u qabaan Islaamka dartiis.. Ingiriisku wuxuu kaalmaystay Yuhuuda si ay u ridaan dawladdii Cusmaaniyiinta iyo qabsashada Falastiin,iyo in lagu beero Israa'iiliyiin waddankan barakaysan dhexdiisa.. waadna taqaan cadaawadda ka dhaxaysa Nasaarada iyo Yuhuudda.

Wuxuu kaalmaysanayaa Ruushku Maraykanka si uu uga caawiyo waxa ay ku magcaabeen la dagaalanka argagixisada Islaamka.. Ruushku wuxuu u fududeeyey maraykanka dagaaladii Afgaanistaan, Ciraaq ,iyo Falastiin sababtuna waa Maraykanka ayaa u fududeeyey Ruushka markuu dagaalka kula jiray Shiishaan waxaa loo heshiiyey labadaas xaaladoodba waa Muslimka.

Hadaba.. is xulufaysiga qolada baadilka waddaa ee dhinaca ka ah Muslimiinta waa mid soo noq noqota.. iyo qawaaniin soo jireen ah markaa ma habboona in aynu ku dhaqano odhaahda tidhaahda "cadawgaaga cadawgiisu waa saaxiibkay" waxaa lagama maarmaan ah in ay Muslimiintu ogaadaan cadawyadooda, sidoo kale in ay ogaadaan

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

cadawgaaga cadawgiisu waa cadawgaa sidoo kale..haa waa arrin aan lasoo koobi karin inta jeer ee ay dhacday in Muslimka laysugu habar wacdo.. laakiin arrintaasi maaha diimaha ayaa lays dhexgelinayaa .. iyo xuquuq ayaa cid la waasiinayaa (dhexdooda) digtooni dhamaystiran ayaa dhex taalla,waana waqti cayiman..laakiin arrintu marna gaadhi mayso saaxiibtinimo dhab ah iyo in la ilaawo xuquuqdii uu ilaahay sheegay:



(Kaama raalli noqonayaan Nasaarada iyo Yuhuuddu illaa aad raacdaan diintooda)

Muhiimaddu waxaa weeye ,waxay bilaabeen Tataarku in ay si qoto dheer uga fekeraan ku duulaan wadamada Islaamka ,waxay bilaabeen in ay qorsheeyaan sidii ay u ridi lahaayeen Khilaafadii Cabbaasiyiinta iyo in ay galaan Baqdaad ..caasimadda khilaafadii islaamka.

****

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

duullaankii ugu horeeyey ee Tataarka.

Wuxuu ka fekeray Jingis_khaan wadada ugu wanaagsan ee loo ridi karo dawladda Cabbaasiyiinta ee Ciraaq in ay xarun u tahay gobolada Afgaanistaan,Asbakistaan, waa masaafo aad u balaadhan dhulka u dhexeeyaa Ciraaq iyo Shiinaha , waa in ay jiraan qaanuunno awood badan oo lagu dhaqo Ciidamada Tataarka ee lagu kala bixin doono Ciraaq iyo Shiinaha inta u dhaxaysa.. sidoo kale ay tahay dhul lagu yaqaanay qaaba qawseen,iyo dhul qani ku ah barwaaqooyinka dabiiciga ah iyo khayraadka dhaqaale.. waxa kale oo ay ahayd meelaha Muslimka xarumaha ugu caansan..Khasnadeheeda oo badnaa ..iyo Maalkeeda oo tiro beelay.. waxaa markaas caddaatay in aanu kula dagaalami Karin taaktiko..kama dagaalami karo Ciraaq oo dhabarka ku haysa Muslimiin la dagaalami doonaan ama markuu ciraaq galo ay dhabarka ka jebiyaan wadadana ka xidhaan oo uu laba badood galo.

Markuu dhamaan eegay arrimahaas (Jingis-Khaan) wuxuu ka fekeray in uu dagaalo is daba jooga galaabixiyo gobolladan bariga ee dawladaha islaamka si uu wadada u bannaysto,taas oo waqtigaas loo yaqaanay dawladdii Al Khawaarsimiya dawladdan oo gacanta ku haysay gobollo badan oo aad muhiim u ahaa sida :Afganistaan,Osbakistaan,Tarkuminstaan,Kasakhastaan,Djakistaan,Bakistaan,iyo qaybo ka mid ah Iraan..waxaa caasimad u ahayd dawladdaas ballaadhan (Orjandah) imminka Turkmenistan.

Wuxuu u eegyahay Jingis-Khaan in ay heshiis ku gaadheen boqorka dawladda Khawaarsim (Maxamed bin Khawarsim Shaah) jaar wanaag, inkastoo aanu ahayn Jingis-Khaan nin ballantu ku wayn tahay ama danba ka gala,heshiisyadana oofiya , laakiin heshiiskaas waa uu galay isagoo danihiisa ilaashanaya in aan dhabarka laga jebin oo rabshadi kaga furmin wadamadaas bariga Asiya , ka dib waa markii Shiinaha iyo Mangooliya ay sugmeen,waxaa la gaadhay waqtigii dhulballaadhsiga dhinacaas iyo dawladihii Islaamka!.

Dabcan mana jirto wax u diidayaa in uu ballanta Jebiyo iyo in uu Jarjaro heshiisyadii uu hore u galay.. waaba gaalada dhaqankooda

أَوَكُلَّمَا عَٰهَدُوا۟ عَهْدًا نَّبَذَهُۥ فَرِيقٌ مِّنْهُم ۚ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يُؤْمِنُونَ ﴿١٠٠﴾ (mar kasta oo ay wacad galaan waxaa buriya koox iyaga ka mid ah, badankoodu waa immaanlaaweyaal)

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Haddaba.. si uu dagaalku u noqdo mid ay ku qanacsan yihiin labada dhinacba .. waa in ay jirtaa sabab keenaysa dagaal, Wuu raadiyey Jingis-khaan sabab munaasib ah oo dagaal dhalin karta laakiin ma uu helin mid munaasib ah…

Laakiin سبحان الله waxaa dhacday arrin deg deg ah oo aan loo fadhiyin Jingis-Khaanna aanu sugayn!! Waxayna noqotay mid dagaalka ka dhigaysa mid lagu qanco (dagaal xaq ah)..Haa,waxay ahayd arrin kusoo booddo ah u sahlaysa Jingis-khaan in uu yeelo sidii uu rabay,ma jirto in uu dagaal ku qaadaa wax u diidayaa ,sidoo kale ma jirto wax iska hortaagayaa in uu talaabooyin ka horeysiiyo kuwa kalena uu dib u dhigto.

Waa maxay waxaa waxyaabaha ka caawiyey (Jingis-Khaan) in uu qabsado Khawaarsim Shaah!!?.

Waxaa is raacday koox ganacsato ah oo kasoo Kicitimay Magool kuna soo socda Magaalada (Atraar) ee Muslimka ahayd kana tirsan jamhuuriyadda Al Khawaarsimiya.. markii uu arkay Xaakimkii magaaladu ganacsatadii ayuu qab qabtay oo laayey!. Layntooda way isku khilaafaan taariikh yahannadu dhacdadan sababteed:

Qaarkood waxay leeyihiin: nimankani waxay u socdeen waxay ahaayeen basaasiin uu soo diray Jingis-khaan si ay u soo basaasaan dawladda Islaamka sidaas darteed ayuu badhasaabkii Atraar u laayey.

Qaarkood waxay leeyihiin: maya ee badheedh ayuu u laayey isaga oo u aanaynaya dhaca iyo kufsiga ay ka geysteen Tataarku magaalooyinka webiga ka dambayeeya Muslimiintu deggan tahay.

Qaarkood waxay leeyihiin: waxaay ahayd arrin badheedh loo sameeyey Tataarkana loo tilmaamayey dagaal, dabadeed si uu u galo Maxamed Khawaarsim Shaah gobolka Turkuministaan oo markaas ku jirtay gacanta Tataarka.. hadiiba hadalkaasi noqon lahaa mid macquul u dhow,waxaa bi'isay Maxamed Khawaarsim ma ahayn nin damac la sheegi karo ka geli karo dhulka Tataarka..waxa keliya ee uu doonayey waxay ahayd in loo ballan qaado in uu kusii fadhiiyo kuna cuna duubnaado inta uu xukunkiisu iyadoo aanu midna ku xadgudbayn kan kale..ma aha wax caqliga geli kara in uu dagaal u tilmaamayey Tataarka isaga oo quwadooda iyo ciidamadooda garanaya.. wax caqliga gala maha in aanu waxba kala socon tiradooda iyo awoodooda iyagoo ku dhegsan(la deris ah)..

Waxaa kale oo ay leeyihiin taariikh yahannada qaar ka mid ahi: Jingis-khaan ayaa u diray koox ka mid ah waddamada Islaamka ayna soo laayaan Tijaarta Tataarka si ay suurta gal u noqoto in dagaal lagu qaado dawladdan islaamka ,hadaybase ra'yigan noqon lahayd looma hayo wax caddayn ah.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa qaarkood yidhaahdeen: Khawaarsim Shaah ayaa damac ka galay maalka tijaarta sababtaas darteed ayuuna u laayey..

Dhamaan waxyaabahaas oo dhan waa la sheegaa laakiin Muhiimaddu waa in ganacsadayaashii (basaasiintii) dhegta dhiigga loo daray.. warkii ayaa soo gaadhay Jingis-khaan warqad ayuu u soo diray (Maxamed Khawaarsim Shaah) uu kaga dalbanayo in uu gacan ku dhiiglayaasha gacanta u soo geliyo si uu isagu u xukumo, hase yeeshee Maxamed Khawaarsim wuxuu ka cabbirtay in ay tahay meel ka dhac looga dan leeyahay in lagu sameeyo madaxda muslimiinta haddii uu dhiibo Muslim dambi galay si loogu xukumo dal kale iyo sharci kale.. wuxuu yidhi waxaa xukumaya waddankooda .. haddii ay wax ku caddaadaan ka dib marka la xaqiijiyona la marin doono qaanuunka Biyo kama dhibcaanka ah qaanuunkaas oo ah Shareecada Islaamka.

Hadalkaasi inkasta oo uu yahay hadal asluubi ka muuqato lagana qaadan karo meel kasta oo dunida ka mid ah laakiin ma noqon mid Jingis-khaan ku qanco.. ama waxaabad tidhaahdaa: Jingis-khaan ma doonayn in uu ku qanco, arrintu ma aha mid laysaga baahan yahay xujo iyo daliil ee waa (reer aan doonayey roob maygu eryay).. xaqiiqadu waxay tahay in Jingis-khaan uu diyaariyey qorshe aan hore waxba looga arag oo loogu duulo dhulkaas islaamka , waxaaba uu raadinayey cillad yar oo munaasib ku ah dagaal sababistii,ama weji uun kale in ay colaad horseedi karto,halkan ayey uga furantay wadadii uu raadinayey.

Waxaa soo kicitimay ciidankii Tataarka ee cabsida badnaa dhinaca waddankii islaamka..!!

Waxaa bilaabmay duulaankii ugu horeeyey ee Tataarku u soo kaba illaday dawladii Khawaarsimiya.

Waxa uu la soo baxay Jingis-khaan ciidankiisii tirada badnaa , Maxamed Khawaarsimna Ciidankiisii ayuu la soo baxay waxay iskaga hor yimaadeen labadii Batalyan meel aad u daran birtaa layska aslay afar cisho oo xidhiidh ah, Meesha layska helayaana waa webiga Sayxuun loo yaqaan(imminkana la yari Sardaariya wuxuuna dhacaa dawladda Kaskhstan ee Muslimka ah) waxaa iskaga dhintay labada dhinacba bashar aad u tiro badan..waxaa goobtan oo keliya ah Muslimiinta ku shahaado qaatay labaatan kun oo qof, Waxaa Tataarka kaga dhintay laban laabkeed..ka dib waa laysu nastay dib u gurasho ayuu ku sameeyey ciidankiisii Maxamed Shaah markii uu arkay in ay tirada Tataarku tahay fara dhaaf, waaba uu la baxay ciidankiisi si uu dhufays uga dhigto magaalooyinkiisa waaweyn ee ku dhexyaalla waddankiisa ballaadhan gaar ahaan caasimadda Orjanda. Dagaalkaas dhiigga badani ku daatay wuxuu dhacay sannadkii 716h.

Wuxuu ku mashquulay ((Maxamed Khawaarsim)) ciidan ururasho daafaha dawladdiisa balaadhan ,laakiin ilaabi mayno in uu xidhiidhka ka goostay .. weliba gaboodfalo u geysan jiray Khilaafadii Cabbaasiyiinta ee Ciraaq iyo weliba boqorro kale

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

oo badan oo islaam ah.. kama kaalmay Turkiga iyo Salaajiqada , Gooriyiinta iyo Hindida toonna.. sidaas ayey u ahayd dawladda Khawaarsim mid ka casilan dunida muslimka inteeda kale oo go'doon ka ah.. waxaa u caddaatay in ay kelideed is haleeli doonaan dawladda Tataarka ee xumbada badda oo kale ah (durdur badi darteed).. dawladdani inkastoo ay xoog badan tahay ,oo ay kulankii hore wax iska celisay libna lagala seexan ,haddana ma aha mid u babac dhigi karta dhirbaaxooyinka is daba joogga ah ee Tataarka.

Aragti ayaa odhanaysa Tataarka dhibtooda ,tiradooda wax kaleba uma soo bixin aan ahayn in ay Umaadda islaamka karbaashaan maahaane oo dabadeed awoodi timaaddo,laakiin maaha ee sababtu kala furfurnaanta iyo kala yaacsanaanta iyo kala googo'a dhexyaallay madaxda Muslimiinta ee wakhtigaas ilaahayna(swt) run ayuu sheegay

وَلَا تَنَٰزَعُوا۟ فَتَفْشَلُوا۟ وَتَذْهَبَ رِيحُكُمْ ۖ وَٱصْبِرُوٓا۟ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ مَعَ ٱلصَّٰبِرِينَ ﴿٤٦﴾ (ha murmina si aydaan u fashilmin awoodiinuna aanay u lumin sabirkana ogaada ilaahay kuwa samra ayuu lajiraaye) .

Muslimiinta waxaa dhexyaallay khilaaf ba'an oo joogto ah, marka waxyar ay heshiiyaan sida aynu arki doono ay u midoobaan la dagaalanka Tataarka ayey is khilaafayaan,is dhagrayaan ,iska sir bixinayaan way isdilayaan...!! Waxaa si cad loo ogaaday cidda lagu arko sifooyinka noocan oo kale ahi in aanay lib kala caraabaynin cadawgooda weligood.

روى الإمام مسلم رحمه الله عن ثوبان ﷺ أن رسول الله ﷺ قال: «...وإني سألت ربي لأمتي أن لا يُهلكها بسَنة عامة، وأن لا يسلط عليهم عدوًا من سوى أنفسهم فيستبيح بيضتهم، وإن ربي قال: يا محمد، إني قضيت قضاءً فإنه لا يرد، وإني أعطيتك لأمتك أن لا أهلكهم بسنة عامة، وأن لا أسلط عليهم عدوًا من سوى أنفسهم يستبيح بيضتهم، ولو اجتمع عليهم من بأقطارها ــ أو قال: من بين أقطارها ــ حتى يكون بعضهم يهلك بعضًا، ويسبي بعضهم بعضًا».

Wuxuu Imaamu Muslim (IHN) kasoo weriyey Sawbaan in Rasuulka ILAAHAY(NNKHA) yidhi: "waxaan anigu weydiistay ILAAHAY in aanu halaagin ummadayda guud ahaan halmar,in aanu ku sallidin cadaw iyaga ka baxsan ka dib aan la bannaysan maatidooda,ILAAHAYna

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

wuxuu igu yiri: "Maxammedoow waxaan jaangooyey arrin waxna laga beddeli maayo,anigu waxaan ku siiyey in aanan umadaada guud ahaan u halaagin,in aanan ku sallidin cadaw aan iyaga ahayn oo bannaysa ama xalaalaysta maatidooda xataa haddii afarta geesba laysaga habar-wacdo_ilaa ay iyagu dhexdooda iska halaagaan,badhkoodba badhka kale addoonsado")

Waxay ahaayeen Muslimiintu waqtigaas ..kuwa badhba badhka kale ay halaagayeen ..badhba badhka kale basaasayeen oo dhiibayeen iyagoo iska horeysiinaya.. markaa la yaab maaha haddii uu ka guulaysto Tataarka iyo cid kaleba , weliba ku darso dhibaatooyinka kala furfuranka ummaddu keeno waxaa dhacay khalad ah in (Maxamed Khawaarsim)uu dhufays ka dhigto caasimadda Orjanda,maxaa yeelay wuxuu ka tegay duni aad u balaadhan oo dhinaca bari ah isaga oo aan kaga tegin ciidamo ilaaliya oo ku filan.!..Laakiin.. muxuu u arkayaa hogaamiye dagaal khaladka intaas le'eg ee faashilka ah!?

Ma ahayn khalad loo sameeyey kaarto dagaal bilowgeedii,laakiin wuxuu ahaa khalad damiinimo loo sameeyey ,Akhlaaqi ka madhan tahay bilowgeedii..wuxuu ku hamiyey inuu la baxsado naftiisa ,qoyskiisa ,iyo qaraabadiis. Waxa la yaraatay oo uu aad u fududaystay in uu ilaashado shacabkiisa wuxuu aad u xafiday oo u ilaashaday Khasnihiisii dahabka ahaa iyo kuwii waalidiintiisa wuxuuna dayacay hantidii iyo sharaftii shacabkiisa.. waa caado tusaale looga dhigan karo in ay jabayaan dadka ay majaraha u qabtaan madax noocaas oo kale ahi.. waa caado marlabaad in ay burburaan shacabka baylahdaas la dhigay ee si Maqluub ah loo xukumay iyada oo aan la islaaxin..bal aan eegno waxay midheheedii noqdeen ayaamihii Maxamed binu KHawaarsimi Shaah..!!

Muxuu sameeyey Jingiskhaan dagaalkii koowaad ka dib?.


Kaalay ila eeg tabaalooyinkii la baday waddankii Muslimka ahaa!

Bukhaara:

Dib ayuu u diyaariyey Jingis-khaan ciidankii mar labaad, wuxuuna u degdegay in uu qabsado magaalo kasta oo ka mida Kasakhstaan,wuxuu soo gaadhay magaalada Bukhaara ee Muslimka ahayd (imminkana ka mid ah dawladda Osbakistaan loo yaqaano) waana magaaladii Imaamkii iyo Muxadith kii weynaa Ee Bukhaari رحمه الله، wuu go'doomiyey Jingis-khaan magaaladii Muslimka ahayd sannadkii 616h.dabadeed wuxuu ka dalbay dadkii magaalada in ay is dhiibaan isaguna hadday sidaas yeelaan uu amaan siin doono Maxamed KHawaarsim aad ayuu uga fogaa magaaladan waqtigaas.. arrin ayaa ku caddaatay reer Bukhaara!!.. maxay sameeyaantolow? Waxaa muuqday laba aragti:

Kan hore waxay yidhaahdeen: waan la dagaalamaynaa Tataarka waanuna difaacaynaa magaaladayada.. qoladii kalena waxay yidhaahdeen: amaan ayaa nala siinayaa albaabada ayaanu u furaynaa si aynu dagaal iyo dhiig daata uga fogaanno, miyaanay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ogayn qoladani in aan Tataarku abhin iyo ashaado toonna aqoon 
(uma dhawraan Mu'min ballan iyo axditoonna)sidaas ayey dadkii magaladu ugu kala jabeen laba qaybood: koox Mujaahidiin ahi waxay go'aansadeen dagaal, sidaas darteed dhufays weyn ayey ka sameysteen Magaalada waxaa hoggaminaya Foqohadii iyo Culimadii..kooxda labaadna waa koox is dhiibay waana intii badnayd kooxdani waxay go'aansadeen in ay magaalada albaabadeeda furaan iskuna haleeyaan amaanka uu Tataarku sheegay!.

Waxaa loo furay magaaladii Muslimka ahayd Tataarkii ..wuu soo galay Jingis-khaan magaaladii weynayd,amaankii ayuu siiyey markii hore si uu u dago(khiyaameeyo) si uu gacanta ugu dhigo dhufayskii mujaahidiinta,foqohada iyo culimada.

Go'doomin ayuu saaray dhufayskii Jingis-khaan, dadkiina wuxuu ku amray inay ka caawiyaan duminta godadkii ku wareegsanaa dhufayska si ay ugu fududaato gelitaanka dhufaysku ,way yeeleen kana kaalmeeyeen!!! Toban cisho ayuu go'doomin saaray dhufayskii dabadeed xoog ayuu ku galay..markii uu gudaha u galay wuu dilay cidkasta oo dagaalantay ilaa uu dhamaantood..!! magaaladii bukhaarana mujaahid kuma hadhin.

Halkaas ayuu ka bilaabay Jingis-khaan jebinta ballantiisii khiyaamada ahayd,dadkii ayuu su'aalay in ay soo saaraan khasnadihii lacagta ,dahabka ,fidada..dabadeed dhamaantood waa la siiyey,intaas ka dib way xalaashadeen magaaladii Muslimka ahayd waxay ku sameeyeen waxaan caqligu suurayn Karin!..waxay uga baxayaa hadalka Ibnu Katheer رحمه الله، oo sawir innaga siinaya sida kitaabkiisa (bilowga iyo dhamaad)uu kaga waramay wuxuuna yidhi: "waxay ku xasuuqeen dad aan tiradooda ILAAHAY mooyee cid kale garanayn(swt) waxay addoonsadeen caruurtii iyo dumarkii ,waxay ku sameeyeen dumarkii xumaan ay horjoogaan ehelkeedii ..!! way ka sinaysteen gabadhii iyo inanteedii oo aabeheed arkayo gabadhii oo ninkeedii daawanayo,muslimiinta waxaa ka mid ah mid la dilay isagoo aan waxba la noolayn,mid la kaxaystay oo loo cadaabay siyaabo kala duwan ilmadii ragga,oohintii dumarka iyo yawdii caruurta ayaa isu baxday,dab ayuu shiday intaaas ka dib Tataarku koonayaasha magaalada malcaamado,Masaajiddo,dhismeyaal kale dhamaanteed waa ay oloshay ilaa ay isku bas beeshay..!!"
ولا حول لا قوة إلا بالله!.
ayuu ka baxay Ibnu Katheer hadalkiisi.

Habeen baas ayaa u dumay magaaladii muslimka ahayd!!

Waxaa la halaagay Mujaahidiintii samray ,sidoo kale waxaa la halaagay kuwii is dhiibay ee la khiyaameeye..!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

روى البخاري ومسلم عن أم المؤمنين زينب بنت جحش رضي الله عنها أنها سألت رسول الله ﷺ: يا رسول الله، أنهلك وفينا الصالحون؟ قال: «نعم، إذا كثر الخبث».

waxay weriyeen bukhaari iyo muslim in Saynab bint Jaxashi (Rc)in ay su'aashay rasuulka (NNKHA) miyaa nala halaagayaa iyada oo ay nagu jiraan dad wanaagsani? Rasuulku wuxuu ugu jawaabay "HAA,haddii xumuhu bato".

Dabcan xumaha waxaa ka mid ah in ay diidaan dadka Muslimka ahi in ay kor u taagaan seefohooda si ay ugu difaacdaan diintooda,dalkooda iyo sharaftooda..waxaa ka mid ah xumaha in Muslimiintu ay rumaystaan ballan qaadyada gaalada ilaahay ka kufriday.. Waxaa ka mid ah xumaha in aanay Muslimiintu taagin calankii Jihaadka ee ay cadawgooda iskaga celin lahaayeen.. Waxaa ka mid ah xumaha in la kala googo'o dhexdoodana ka dagaalamaan oo aanay isku xidhnaan,waxaa ka mid ah in aanay Muslimku isku xukumin kitaabka ilaahay(SWT) iyo sunnada Nebigeen(NNKHA).

Sidaas ayey dhamaanteed xumaan u tahay!

waa khasab in halaag dhacaa.

Rasuulka ILAAHAY run ayuu sheegay

Sidaas ayaa Bukhaara degelka loogu rogay sannadkii 616h..!!

Laakiin tani miyey tahay halaagii ugu dambaysay ? miyey tahay Masiibadii ugu dambaysay?..dhab ahaan tani waxay ahayd baalashii ugu horeysay ee sheekooyinka buuggan.. waxay ahayd bilowgii duufaanka,iyo bilowgii dabaylaha..waxay noqonayaan kuwa soo socda kuwa ka madoow oo ka dhiig daadin badan .. waxay geli doonaan muslimiintu sannad kii 617h, waxaana shaki la'aan ah inay uga madoobaan doonto laga dhergi doono dhiigooda waxayna noqon doontaa sannadkii ugu madoobaa taariikhda muslimiinta ee dheer ilaa waqtigii la aas aasay muslimka

Sannadkii 617h.

وإنا لله، وإنا إليه راجعون!.

Sanadahani waxay ahaayeen sanadihii ugu qadhaadhaa ee soo maray dadka Muslimka ah ilaa waqtigii la soo saaray Rasuulka ﷺ iyo ilaa daqiiqaddan aad akhrinaysid buuggan.. waxaa u soo baxay xiddigii Tataarka..waxay gelelefeen caalamkii Muslimka gelelef aan hore loo arag mid la mid ah.. waxay ku fidiyeen dhac,kufsi ,dhiig daadin aan hore loo maqal mid la mid ah lana malaysan Karin oo aan caqligu sawiri Karin.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxay iila muuqatay in aynu uga baxno sawirkeeda taariikh yahankii Muslimka ahaa (Ibnu Atheer aljazari رحمه الله) sida uu kaga waramay buuggiisa la yidhaahdo(Dhamaystirka Taariikhda) muhiimadda hadalkiisu leeyahay oo aan kaga kalsooni badnahay cidkasta oo kale,sababtoo ah casrigaa ayuu noolaa “Cidda aragtay lama mid aha cid looga waramay”.

Akhriso waxa uu Ibnu Atheer leeyahay رحمه الله isaga oo sharaxaya warkii Tataarka ee Muslimiinta dhexdeeda.

“wax badan ayaan ka gaabsaday ka waranka dhacdadan weynaanteeda darteed,karahsanaya sheeg sheegisteeda,waxaan u sheegayaa imminka dhaqaaq joogsi ,waa kuma kan ay u fududahay in uu qoro hoogga Muslimiinta? Waa kuma kan fududaysanayaa sheegisteeda? Hoogayga ee miyaanay hooyaday iba dhasheenba, alla shalaytadayda ee maan dhinto inta aanay dhicin arritani,waxaa igu kallifay sheegisteeda koox asxaabtayda ah in aan sadareeyo(qoro) markaas waxaa ii muuqatay ka tegisteedu in aanay wax faaiido ah lahayn,markaa waxaynu leenahay: qaybtan waxaynu kaga warami doonaa dhacdadii waynayd, iyo Masiibadii balaadhnayd ee ku habsatay maalmo iyo habeeno aan kuwa la mid ah la arag.. dhamaan adduun weynaha ,gaar ahaanna Muslimiinta haddii qof yidhaahdo: caalamka laga soo bilaabo maalintii ILAAHAY abuuray Adam ilaa maanta sida loo imtixaanay hore looguma imtixaamin run ayuu sheegi lahaa, Taariikhda wax la mid ahi ma soo marin xataa wax u dhaw..waxyaabaha ugu waaweyn ee la sheego waxaa ka mid ah {{ Bukhtinasar}} wixii uu ku sameeyey Banii-Israa’iil ee xasuuq ahaa iyo burburintii Baytul Maqdis, kuwaasi waxay burburiyeen Baytal Maqdis laakiin kuwan nacaladdu ku soo degtay waxay burburiyeen magaalooyin mid kasti tahay Baytal Maqdis oo la laban laabay?!! Dilka la laayey reer Banii Israa’iil kuwani magaalo keliya inta laga dilay ayaa ka badnayd reer Banii Israa’iil oo dhan waxaana laga yaabaa basharku in aanay arki doonin dhacdadan oo kale ilaa caalamku geba geboobo, adduunyaduna dhamaato kuwaas oo ah Yuug iyo Yamaayuug.

Dijaal miyaa? Isagu wuxuu nabad gelinayaa cidda raacda wuxuu laynayaa cidda diidda, kuwan miyaa cidba ma siidaynayaan, iskaba daaye waxay laynayaan dumar,caruur iyo ragba waxay jeexayaan caloosha hooyada uurka leh markaasay dilayaan cunugga caloosheeda ku jiray.

ولا حول لا قوة إلا بـالله وإنا لله، وإنا إليه راجعون!. “dhacdadan sharka badan ee dhibkeedii dunida wada gaadhay,isla markaana adduunyadii ka dhigtay sidii daruur ay dabayli ka erida”.

Waxay ahayd hadalkii Ibnu Aseer hordhaciisii hadal aad u dheer oo uu ka buuxo murug hoog iyo halaag werwer iyo walbahaar way iyo tooll’ay.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxay ahayd inkaar loo soo diray Muslimka.. Inkaar dhankasta oo laga eego miisaan kasta oo la saaro marka lagu eego Miisaanadii hore iyo kuwa maanta jiraba .. xataa waa inkaar marka lagu eego miisaanada aayaha (Mustaqbalka).

Maxaa dhacay sannadkii 617h?

Sabarqanda:

ka dib markii ay Tataarku burburiyeen magaaladii bukhaara ee waynayd, ee ay Halaageen dadkeedii ,gubeen daareheedii waxay u amba bexeen magaaladii deriska la ahayd ee Sabarqanda waa dawladda Usbakistaan iyaduna imminka,waxay soo kaxaysteen dad aad u tiro badan oo Muslimiin ah maxaabiis ahaan Bukhaara ayey kasoo kaxaysteen dadkan ibnu Atheer wuxuu leeyahay: "waxay u soo kaxeeyeen sida ugu foosha xun,mid kasta oo ka daala socodka waa ay dilayeen".

Tolow maxay u wataan maxaabiistan? Sababuhu waa ay badan yihiin:

1 .Toban kasta oo ka mid ah waxay u dhiibayeen calan ka mid ah calamada Tataarka oo ay kor u taagaan ,haddii qof meel fog ka arko wuxuu moodayaa Tataar,markaa waxay badinayaan tirada indhaha cadawgooda waa cabsi gelin aan lagu fekerin in lala dagaalami karo,sidaa darteed waxay nafsi (spiritual) ahaan u jebinayaan cidda kasoo horjeedda.
2. Waxay ku khasbayeen Maxaabiista in ay la dagaal galaan.. qofka diida ama muuqaalkiisa ay is yidhaahdaan dagaal ma geli karayona waa ay dilayeen.
3. Waxay ka dhiganayeen gaashaan ay leebabka iyo warmaha isaga dhigaan waxay dhigayeen (maxaabiista) safka hore sidii dharkii hubka oo kale ee nabarka ka celin jiray iyaguna dabadooda ayey ku dhuumanayeen dabadooda ayey kasoo ganayeen leebabka iyo warmaha iyagoo ay gaashaan u yihiin.
4. Waxay ku gawracayeen magaalooyinka hortooda si ay u argagax geliyaan qalbiga dadka kasoo horjeeda iyo ogaysiin ah in iyagana sidaasi u dambayn doonto haddii ay isku dayaan in ay la dagaalamaan.

5.Waxay ku badalanayeen maxaabiista Tataarka ah ee lagu qaqabtay dagaalka tanina waabayarayd,sababtoo ah dagaalo lagu jebiyey Tataarka ayaaba yaraa.

Xaaladda Sabarqada siday ahayd?

Waxay ahayd magaalada Sabarqanda magaalooyinka ugu casri san ee Muslimiinta uguna weyn,waxay kaloo ahayd magaalada ugu qanisan waqtigaas,waxay leedahay meelaha dhufaysyada laga dhigto oo aad ugu wanaagsan dagaalka iyo Jarar aad u dhaadheer .. Istiraatiyad dagaal bay leedahay waa ilaha ugu muhiimsan ee dhaqaalaha , Waxaa uu kaga tegey Maxamed bin KHawaarsim madaxweynihii dawladdani konton kun oo askari si ay u ilaaliyaan, marka loo eego meesha ay magaaladani ku taallo waxay u dhigmayeen kontonkan askari boqollaal kun, Waa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

tiro aad u badan Maxamed Khawaarsim wuxuu fadhiistay caasimaddii dalkan Orjanda.

Wuxuu soo gaadhay Jingis-khaan magaaladii Sabarqanda dhinac kasta waa uu ka go'doomiyey.. waxaa waajib ahayd in ay u soo baxaan ciidankii lagaga tegay dadkan laakiin nasiib darro aad u daran argagax iyo baqdin ayaa laabtooda dabooshay waxay isugu dhejiyeen nolosha si aad u liidata, way iska diideen in ay difaacaan magaaladan Muslimka ah..!!

Waxaa isu soo baxay dadkii magaalada arrintii ayey rogrogeen ka dib markii ay arkeen ciidamadoodii oo laga inaabsaday oo kasoo taagan in ay dadkooda iyo dalkooda difaacdaan.. qayb ka mid ahi waxay goosteen kuwii xamaasaddu haysay una badan dadkii ra'yidka magaalada u badan in ay soo baxaan Tataarkana la dagaalamaan..Waxaa soo baxay toddobaatan kun oo geesiyadii dalka ka mid ah, Raggii dhiiga lahaa ku jiraan,raggii cilmiga lahaa ku jiraan..dhamaantood waxay kusoo baxeen iyagoo lugaynaya mana haystaan fardo iyo waxay fuulaan oo kale tababar dagaal ma haystaan khibrad milateri malaha.. laakiin waxay sameeyeen waajibkii ay gudan lahaayeen ciidankan Masiibadu ku dhacday ee calankood jabay.

Markii ay Tataarkii arkeen reer Sabarqada oo soo baxay waxay go'aansadeen in ay khiyaameeyaan weliba khiyaamo khatar ah, dib ayey u gurteen si Mujaahidiinta Muslimiintu uga soo fogaadaan magaalada sidaa darteed Tataarku way yaaceen iyagoo ciidamadoodiina badh qariyey, way guulaysatay khiyaamadii Tataarku waxay bilaabeen Muslimiintii Xamaasadaysnaa ee aan khibradda lahayni inay baacsadaan ilaa ay raggii Muslimiinta ahaa magaaladii aad uga fogaadeen ka dib dhamaantood Muslimiintii waxaa isku gedaamay ciidamadii Tataarka waxaa bilaabmay hawl galkii loogu talagalay raggii Sabarqada .

Immisa ayaad u malaynaysaa ayaa dagaalkan lagu dilay oo weli aan dil ku waajibin?

Dhamaantood way laayeen..!!

Dhamaantood way shahaado qaateen..!!

Waxay Muslimiintu ku waayeen Sabarqanda toddobaatan kun hal goob halmar,..(ma xasuusataan siday masiibada ugu ahayd Muslimiinta maalintii ay waayeen toddobaatan saxaabi goobtii Uxud?!)dhab ahaantii marka loo eego ma ay ahay la yaab;waxay ahayd wax la fili karo waxay ku bixiyeen muslimiintu lacag intii ay diyaar garoobi lahaayeen,intay caruurtooda bari lahaayeen tababarka milateri,intay dhisan lahaayeen dawlad awood leh sida tan hareeraysay dawladooda oo kale..

Waxay mar labaad kusoo noqdeen Tataarkii Sabarqanda oo go'doomiyeen mar labaad.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxay go'aansadeen ciidamadii Khawarsimi ee nadaamsanaa go'aan aad u liita..!!

Waxay go'aansadeen in ay nabad gelyo waydiistaan Tataarka iyaguna ay albaabada u furi doonaan.. iyaga oo garanaya in aan Tataarku ixtiraamin balan iyo cahdi midna heshiisna aanu ka xidhmin dhankooda dhacdadii Bukhaara ka dhacdayna ma fogayn,laakiin ku dhegsanaantooda nolosha ilaa darajadii ugu hooseysay ayaa sababtay in ay isku xidhaan mala awaal iyo rajo aan macquul ahayn.

Wuxuu ku yidhaahdeen askarta dadkii wax ma garadka ahaa: waar taariikhda Tataarku ay aad ugu caddahay ee wax innaga dhiciya,laakiin waxaa u qudhqudhsan is dhiibis ,iyagoo aan malaysanayn is hortaagga Tataarka,Tataarkuna way la qaateen in ay siin doonaan amaanka ay doonayaan .. ciidankii magaaladii ayey u fureen sida runtii ah mana ay qadderin shacabkooda waxaa ku dhici doona waxay ahaayeen ciidanka Khawaarsimiya kuwa markay shacabkooda la joogaan libaaxyo ah markay cadawga is arkaana Gorayooyin ah..

Magaaladii ayey u fureen Tataarki iyaguna way uga baxeen iyagoo is dhiibay wuxuu ku yidhi Tataarkii: "Annaga nagu soo wareeja hadaad tihiin ciidamada Hubkiina, Gaadiidkiina ,Khasnadihiina idinkuna iska kaaya daba socda"..intiiba way sameeyeen iyagoo dulleysan,markay hubkii gacanta ku dhigeen maxaad filaysaa? Waxa ay ku sameeyeen waxaad aad filatay in lagu samayn doono.. seefohoodii markuu dhulka ka dhigay dhamaantood waa uu laayey..!! waxaa la ولا حول ولا قوة إلا بالله. mariyey abaalkii ay xaq u lahaayeen dabadee waxay galeen magaaladii Sabarqanda ee jannada ahayd, waxay ku sameeyeen wixii ay hore ugu sameeyeen Bukhaara, waxay laayeen wax aan la soo koobin rag iyo dumar iyo caruur, waxay bililiqaysteen dhamaan wixii maal adduunyo dhextaalay, waxay faraxumeeyeen dumarkii dhawrsoonaa waxay dadka ku Cadaabeen dadkii cadaabo kala duwan,waxa dadka lagu cadaabayaanna waa soo saara dahabkiinii iyo lacagtiinii waxay adoonsadeen dumar iyo caruur aad u tiro badan ,qofka aan addoonsi ku wanaagsanayn oo gaboow iyo daciifnimo ka muuqatana way dilayeen,Masjid Jaamacii waynaa way Gubeen magaaladii oo kharaab ahna way iskaga baxeen.

Alla hoogeena.. bal ka waran sida daafaha dunida Muslimku u maqlay ee aanu dhaqaaqyar u samayn!?

Siday u gaadhay daafaha dunida Muslimka ah ee aanay u midoobin la dagaalanka Tataarka?!

Alla maxay barteen sida wax loo dayaco! Diintoodii bay dayaceen, Maalkoodii bay dayaceen,Naftoodii ayey dayaceen iyagoo waxaas oo dhami ku dhaceen haddana may midoobin.. wuxuu xukumayey mid kasta oo madax sheegtaa qobbad yar oo uu calan yar u samaystay uuna u malaynayey in uu amni haysto mar haddaan gobolkiisa yar iyo xuduudkiisa dagaalku ka socon!! Naftooda ayey

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

khiyaamaynayeen oo isku maaweelinayeen mala awaal xattaa haddii dagaalku dhawr mayl oo keli ah u soo jiro..! hala yaabin waxan aad akhrinaysid .. bal ilaahay ayaan kugu dhaariyee waxaad iiga warantaa: immisa ciidan Muslimiin ah ayaa usoo gurmada Falluuja iyo Falastiin??!

Kama fekero madaxweyne Muslim ahi in xaalku yahay “Ninka qayrki loo xiiroow soo qoyso adiguna”oo berrito isaga kawaanka la saari doono.. waxaa Bukhaara iyo Sabarqanda ku dhacayna ma ay ahayn wax aan ka ahayn hor dhiig daadin xanuun badan oo nabar ku ah qof kasta oo Muslim ah aanuna ka badbaadayn mid dhow iyo mid fogi..

Dhamaadkii Dullinimada:

Wuxuu degey Jingis-Khaan magaaladii Sabarqanda ilaahay haw cadhoodee-waxaa cajabisay magaaladii aad u balaadhnayd ee aanu hore weligiis u arag wixii koowaad ee uu ku fekeray waxay ahayd in uu dilo dawladdan uu qabsaday madaxweyneheeda si uu u xalaashado qabsashada dalkan isaga oo aan cidna ka cabsanaynin isu soo bahaysata, wuxuu diray labaatan kun oo ciidan ah si ay u soo qabtaan ((Maxamed Khawaarsim Shaah)) madaxweynii..dirista madaxweynaha loo diray labaata kun oo ciidan ahi waa ku dheeldheelid halkii ugu dambaysay ee Jingiskhaan lagu dheeldheelayo dalkan uu qabsaday.. waxay dhexqaadayaan Malaayiin Muslim ah labaatankaas kun ee Tataarka ahi.. waynu arki doonaa waxa ay sameeyeen labaatankaas kun ee askarta ahi.. wuxuu ku yidhi Jingiskhaan : “waxaad raadisaan Khawaarsim meel kasta oo uu jiro,xataa hadduu samada koro..!!” waxay aadeen ciidankii Tataarku magaaladii (Orjanda)halkaas oo uu deganaa Maxamed Khawaarsim Shaah waa magaalo ku taalla xeebta galbeed ee webiga Jayxuun(Amudaariya) waxay Ciidankii iska soo taageen webiga dhinaca bari markaa labadii kooxood waxaa kala dhexmaray webigaas Jayxuun Muslimiintu way is dhigteen iyagoo is webigan cidina kama soo gudbi karto sidaa darteed amaan ayaad tihiin oo Tataarku doonyo ma laha..!!

Maxay sameeyeen Tataar? Waxay soo ursadeen looxaan, dabadeed waxay huwiyeen saamo lo’aad si aan biyuhu ugu soo gelin,waxay dhex dhigteen looxaantaas hubkoodi, heensihii fardaha, cuntadoodii iyo dhamaan qalabkoodi,fardihii oo ku raran waxaas ayey webiga ku dhexrideen farduhuna waxay yaqaaniin dabaasha (waxay ka mid yihiin xayawaanada dabaasha yaqaan) dabadeed waxay qabsadeen dabada fardaha markaa fardihii way dabaalanayaan ciidankiina fardaha dabbaalanaya ayey dabada haystaan..waxay ku daba dabbaalanayeen fardihii ,qalabkoodii,iyo waxyaabihii kale.

Wadadaas ayey kaga gudbeen ciidankii Tataarku webigii Jayxuun, ma garanayno meesha ay jireen Mukhaabaraadkii Maxamed Khawaarsim! ilaaladiisii meeday?.. si lama filaan ah ayey Muslimiintii Mudh ugu soo yidhaahdeen ciidankii Tataarku iyagoo goonyaha kaga wareegsan ayey arkeen, weliba Tirada Muslimiintu waa ay badan tahay,laakiin waxa quluubtooda Tataarku ka buuxsheen cabsi iyo argagax

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

mana ay filaynin kedisadan oo waxay is lahaayeen waxaa idiin dhaxeeya Webiga Jayxuun iyaga iyo hororada Tataar..imminkase ciidankii waa kuwan.. uma banaana waddo kale oo aan ahayn.. dagaal waa lama huraan saw maaha?!

Maya.. ee waa waddo carar..!!

Sida uu leeyahay Ibnu Atheer رحمه الله "wuu baxay Khawaarsim isaga oo aan haleelin in uu cid ka kaxaysto Ehelkiisi wuxuu u jihaystay dhinacaas iyo Nisabuur (Iiraan ka mida imminka) askartiisiina mid waliba dhinaca uu doono ayuu u kala yaacay,Tataarka miyaa iyagu waxay lahaayeen Muhiimad keli ah oo ah inay raadiyaan (Maxamed khawaarsim) sidaa darteed way iskaga tageen Orjanda waxayna u ambabexeen Nisabuur iyaga oo dhex muquuraya ummad Islaam ah oo weliba tiro dhaaf ah kamana badna labaatan kun!! Jingiskhaan isagu waxa uu iska fadhiyaa Sabarqanda waxaaba laga yaabaa in ay go'doomin saari karaan waddan dhan Muslimiin ah labaatankaas askari ee dhexqaadaya wadamadaas Islaamka laakiin waxaa quluubta ka haysata cabsi aad u daran,marka ay maqlaan meel kasta oo ay galaan waa loo banaynayaa ama laga yaacayaaba si loogu baneeyo iyadoo madaxwenahoodii la baacsanayo isaguna marba dal ayuu gelayaa oo haddana ka baxayaa sida aynu arki doono.

Tataarkuna degaamada ay dhexmarayaan wax dhac, boob, kufsi iyo khalkhal kale toona uma geystaan waayo iyagu hadaf keliya ayey lahaayeen markaa ma doonayaan in ay wakhti iskaga lumiyaan dil iyo dhac iyo xoolo ururs waxay keliya oo doonayeen soo qabashada madaxweynaha muslim ah dhinaca kalena dadka ay dhexmarayaan wax dhibaato ahi kagama imaan!.. sidaa darteed waxay soo gaadheen meel u dhaw magaaladii Niisabuur wakhti aad u dhakhso badan oo aanay u suurto gelin Maxamed Khawaarsim in uu ciidan ururs ado iyo diyaar garoow markuu ogaaday inay soo dhawyihiin wakhtiguna waa ku cidhiidh,Tataarkuna ay ku raad joogaan markuu xaqiiqsaday in ay u soo dhawyihiin wuu ka baxay magaaladii wuxuuna u kacay Magaalada Masandaran oo Iiraan ku taalla markay arriintaas ka war heleen Tataarkii uma baydhin Niisabuur ee waxay u kaceen Masandaran ,Masandaran wuu ka baxay wuxuuna aaday magaalada Ray dabadeed magaalada Hamadan labaduba waxay ku yaallaan Iiraan , Tataarkuna way ku raadjoogaan ka dib wuxuu ku soo noqday magaalada Masandaran waa carar laga xishoodo oo bahdilan..ka dib wuxuu aaday gobolka Dibristan (Iiraani) dhinaca xeebta badda la yidhaahdo Khasr halkaas oo uu ka helay doonni wuu raacay waxay la gashay badweyn,Tataarkiina way kasoo dhaceen waxay isa soo taageen xeebta doonyana ma hayaan ilaa tani webi maaha ee waad bad.

Way guulaysatay Kaartadii odaygu ..!! way guulaysatay kaartadii cararku!!

Wuxuu ku gaadhay cararkii jaziirad ku dhextaalla badda la yidhaahdo Qaswiin halkaas ayuu iska degey isaga oo raalli ku ah qahar iyo qato iyo nolol adag ayaa ku

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

qabsatay..waa madaxweyne xukumi jiray dawlad aad u ballaadhan iyo xoolo lacag tiro beeshay..laakiin sidan ayuu raalli ku noqday si uu uga cararo Geerida!.

وسبحان الله. geerida ma cid ayaa ka baxsata?! Waxyar ka dib halkaas ayuu ku geeriyooday ayaamo yar ka dib Khawaarsimkii waynaa Jaziirad qobbad yar oo ku dhextaalla isaga oo kelidiis ah oo la eryanayo oo weliba faqiir ah,waxaa la waayey wax lagu kafmo, waxay ku kafmeen furaashkii uu ku hurday..!!

أَيْنَمَا تَكُونُوا۟ يُدْرِككُّمُ ٱلْمَوْتُ وَلَوْ كُنتُمْ فِى بُرُوجٍ مُّشَيَّدَةٍ (meel kasta oo aad joogtaan geeridu waa mid idin haleelaysa xataa hadaad gashaan guryo aad loo adkeeyey)

Walaal iyama ayaa sharaf badan?.. in uu ku dhinto madaxweynaha Muslimka ahi isaga oo dullaysan jaziirad yar oo bad ku dhextaalla dhexdeeda iyo isaga oo madaxiisu kor u taagan yahay ciidankiisa dhex taagan qalbigiisu deggan yahay oo kalsooni qaba isla markaana taagan garoonka dagaalka?!

Iyamaa sharaf badan?.. in uu dhinto isaga oo soo jeeda iyo in uu dhinto isaga oo cararaya?!

Iyamaa sharaf badan..in uu dhinto isaga oo cararaya iyo isaga oo shahiid ah?!

Dadku ma doortaan meesha geeridoodu noqon doonto laakiin wuxuu awoodaa in uu doorto sida uu u dhiman doono, geesinimadu ma gaabiso cimriga.. sida aanay fulaynimada ,cararka,iyo baxsadku waxba ugu darin cimriga.. qofkuu ku noolaada geesinimo wuxuu ku dhintaa geesinimo isaga oo shahiid ah xataa haddii uu ku dhinto furaashkiisa.

روى الإمام مسلم عن سهل بن حنيف ﷺ أن رسول الله ﷺ قال: «من سأل الله الشهادة بصدق، بلغه الله منازل الشهداء وإن مات على فراشه».

wax uu soo weriyey imam Muslim kana soo weriyey Sahal bin Xaniif (RC) in rasuulka ilaahay(NNKHA) Yidh: **qofka ilaahay Shahaado weydiista si dhab ah ilaahay wuxuu gaadhsiiyaa derejadii Shuhadada xataa hadduu furaashkiisa ku dhinto"**

Bal haddaba aan dib u yar milicsanno taariikh nololeedka Maxamed Khawaarsim Shaah iyo qofnimadiisa waxaynu ku arki doomaa arrimo yaab badan..marka aad akhrido waxaad arki doontaa Imaam wayn oo ka mid ah culimadii Muslimiinta , marka aad aragto cararkiisa ,Jabkii uu muslimiinta jebiyey noloshiisu sida ay ku geba gebowday waxaa kuu muuqanaysa wax ka duwan arrintii hore.. haddaba waa maxay sirta ku duugan nolosha ninkan?!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxa uu ninkani xukunka hayey kow iyo labaatan sano iyo bilo ku dhowaad wuu fidiyey dawladiisa xukunkiisa wuu balaadhiyey wuxuu wax kula qaybsaday xukunkiisa caalamka laga bilaabo xadka Ciraaaq ilaa Turkistaan iyo dhulka loo yaqaan Khasna(Afganistaan) Hindiya qayb ka mid ah Sajistan,Karmaan(Bakistan), Dubristan, Jarjaan ,Dhulalka buuraha ah,Khuraasaan ,Faaris(dhamaantood waa gobollo ka mid ah Iiran..).

Qodobkani waxa uu caddeynayaa in Mulkigiisu aad u balaadhnaa.. waddan balaadhan ayaa nasiibku gacanta u geliyey muddo badanna uu xukumayey weliba maamulkiisu aad u fiicnaa haddii kale maba xukumeen mudadaas dheer.

Qodobka kale waxa uu ahaa nin u samra dhibaatada oo aan nasan ,raaxada neceb , macmacaanka dunidana aan u joojin, fekerkiisu waxa uu ahaa Mulkigiisa iyo Maaraynteeda,baadidiisa iyo baylahdiisa ururintooda .

Marka aynu ka eegno shakhsiyaddiisa caalim aftahan ah, culimada karaameeya oo cilmiga jecel soo dhoweeya dadka cilmiga leh la fadhiista oo cilmiga dhegaysta dadka diinta lehna agtiisa waa ay ku waynaayeen wuu qaabili jiray isaga oo ka barakaysanaya.

Waa sifadiisa Maxamed Khawaarsim Shaah taasi,jaahwareer weyn ayey ku ridaysaa qofka akhriyayaa taariikhdan.. sidee ayey qofka sifadan wanaagsan leh ugu dhacayaan in uu sidaas foosha xun u jabo?! Oo sidee ayuu dawladda intaas ballaadhka le'eg uga heli waayey ciidamo iska celiya Tataarka .. oo weliba aayihiisu ugu geba geboobay sida aynu aragnay?!

Wuxuu ahaa Maxamed khawaarsim mid dawladda oo dhan xukuma oo aan cid kale waxba uga oggolayn,sidaa darteed qof kasta oo madax ahaa isla markaana xukumayey gobol ay oo gaar ah inta uu dilo ayuu dawladdiisa kusoo darayey si uu kelidiis uun boqor u ahaado, taasina waxay sababtay markay Tataarku jabsheen ma uu helin cid wax ka celisa iyo cid difaacda midna.

Qodobkaasi wuxuu caddaynayaa dhibaatada iyo mashaakilka dhex yaalay Muslimiinta waqtigaas.. dhab ahaan wuxuu ahaa Maxamed Khawaarsim mid aad ugu fiican naftiisa iyo maamulkiisaba laakiin wuxuu jaray dhamaan xidhiidhkii ka dhaxeeyey isaga iyo maamulladii deriskiisa ahaa ee Muslimka ahaa weligii dagaal uguma gar gaarin iskaba daa caawimo ee mid mid ayuu ula dagaalamay.. wuxuu laayey dhamaan madaxdoodii muslimkii ku hareeraysnaa ka dibna sidaan u sheegay dawladiisa ku darsadaa, markaa shaki kuma jiro in dadkaas qalbigooda xasad buuxiyey oo jabkiisa ay ku farxayaan arrintaasina waa mid ka madhan xikmad .. bal u fiirso rasuulka ilaahay ﷺ wuxuu ahaa haddii uu dal qabsado wuxuu madax uga dhigi jiray dadkeeda wax garadka ah waa u dayn jiray kuraastooda,waxaana maamulkeeda meeshaas lahaan jiray dadkeeda sida ay niyadooduna ku samaan doonto kuna jeclaanayaan.. wuxuu u daayey Baxrayn

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Mundir bin Saawi, wuxuu u daayey Cumaan labadeedii madaxweyne,Jayfar iyo Cibaad,iskaba daayoo wuxuu daayey Yaman Ba'adan Samaan AL Faaris markii uu islaamay iyo qaar kale oo badan.. taasi waa Xikmad iyo siyaasad wada jira.. waa maamul iyo kalgacal wada socda.. waa anshax iyo asluub isku dhafan.

Ma warkeenan ayaa yimid wuxuu ku guuldarraystay Maxamed Khawaarsim inuu mideeyo Maamul iyo Jacayl wada socda..wuxuu Boqor ku noqday awoodiisa waxbana kama gelin jacaylka dadka markii uu usoo baahday dadkii waakan waayey.. markii uu gargaar u baahday waa uu ku hongoobay,Loolanku ma ahayn oo qudha Cabbaasiyiinta iyo Isaga oo qudha ee waxa dagaalku ka socday dawladdiisan dhexdeeda iyo debedeedaba, dhagartooduna waa ay tiro badnayd, dabinnaduna waa tiro beeleen marna ma midayn quluubta dadkan cid aan midaysnaynina guuli ka dheer..guuli ma suurtobayso iyadoo ummada oo sidan ahi..

﴿٣﴾ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلَّذِينَ يُقَٰتِلُونَ فِي سَبِيلِهِۦ صَفًّا كَأَنَّهُم بُنْيَٰنٌ مَّرْصُوصٌ ﴿٤﴾

(ILAAHAY wuu jecelyahay duulkii ku dagaalamaya iyaga oo saf saf(macnaha aan is khilaafsanayn) u taagan lana moodo dhismeyaal laysku dhejiyey)

Taasi waa sirta ka dambaysa hoggaamiyaha maamulkiisu balaadho ciidamadiisuna ay bataan..inuu ku dhinto isagoo la eryanayo oo keli ah jaziirad yar oo badweyn ku dhextaalla.

Run ayuu sheegay Rasuulka ilaahay ﷺ markii uu lahaa sida uu soo werinayo An Nisaae iyo Axmed iyaguna kasoo weriyeen Abuu Dardaa رضي الله عنه : isku xidhnaada, waxa uu bahalku cunaa neefka hadafka ah(ama goonni daaqa ah) «عليكم بالجماعة؛ فإنما يأكل الذئب القاصية».

Maxay sameeyeen Tataarku ka dib markii uu cararay Maxamed Khawaarsim? Maxay sameysay kooxdii labaatanka kun ee askari ahayd.. ee dhex qaadaysay Caalamka Muslimiinta?

Weerarkii Faaris:

Waxay ahayd masaafadii ay socdeen kooxdii yarayd iyo halkii saldhigoodu ahaa ee uu fadhiyey Jingiskhaan ((Sabarqanda)) lix boqol iyo konton kiiloo mitir..waa dhul siman iyo dhul aan sinnayn labadaba, hadaad eegtid dhinac waa buuraleey, hadaad dhinac kale ka eegtid waxaad arkaysaa in ay jiraan webiyo u dhaxeeya Masandaran iyo Sabarqanda ,Sabarqanda iyo badda Qaswiin, dhulkan waxaa lagu tiriyaa dhulka aadka u adag in lagu ka qamaadisteedu, kuna darso oo Tataarku

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ma yaqaanaan dhulkan iyo waddooyinkooda sida ay u kala baydh baydhaan.. waxyaabahaas oo dhammi waxay ahaayeen waxyaabo looga faaiidaysan karayey la dagaalanka Tataarka, mar kale hadaad fiiriso waxyaabahaas oo soo sheegnay waxaad arkaysaa in Tataarku ka go'doonsan yihiin xaruntoodii.. si qoto dheer marka aad u fiirisid xaaladdu ((waqti dhibi idin haysato is xaasidid wax ma taryo)) kol kale hadaad eegtid waxyaabahaas oon kor kusoo sheegnay dhinaca degaanka , bulshada ay dhexmarayeen oo usha cirka loo ridaa qof ku dhacaysay badnaan darteed kooxdan oo aan tiro badnayn labaatan kun oo askari keliya..haddana way halaagi doonaan sida aynu arki doono shaki la'aan, hadday dadku usoo bixi lahaayeen tiradoodu way ka badnayd Malaayiin

_Tataarku wax kasta oo dhaca ma gaadhsiiyeen inta ay gaadhsiin doonaan

_ Qalinka ayaa sidaas wax yidhi

_Maxaa ka dhacaya dunida maanta ?!

_waxa aynu arkaynaa waxyaabo yaab leh oo laga xishoodo..!!

Waxaa quluubtooda qabsaday Muslimka jab iyo in ay ku dhegsanaadaan adduunyadooda liidata lamana fahmayo waxay nolosha ku haysteen.. waxayna raalli ku ahaadeen in ay guryaha iyo magaalooyinkooda iska joogaan oo ku sugaan geerida iyo in ay sida idaha u birbireeyaan kooxda yar Tataarka ah ee yar.

عن ثوبان قال: قال رسول الله ﷺ: «يوشك الأمم أن تـــداعى عليكم كما تداعى الأكلة إلى قصعتها» فقال قائل: ومن قلة نحن يومئذ؟ قال: «بـــل أنتم يومئذ كثير، ولكنكم غثاء كغثاء السيل.. وليترعن الله من صدور عدوكم المهابـــة منكم، وليقذفن الله في قلوبكم الوهن»، فقال قائل: يارسول الله، وما الوهن؟ قـال: «حب الدنيا وكراهية الموت».

Sawbaan wuxuu yidhi: Rasuulka ILAAHAY (NNKHA) wuxuu yidhi:

"waxaa iman doonta waqti ay ummaduhu isugu kiin yeedhan doonaan sida ay kuwa wax cunayaa ugu soo yaacaan waxa ay cunayaan ama xeedhada ay waxku cunayaan ee hareeraha looga fadhiisto" waxaa la su'aalay:miyaanu yar nahay markay sidaasi nagu dhacayso? Wuxuu yidhi: "maya ee waad badan tihiin,laakiin waxaad tihiin sida xumbada daadka oo kale.. ilaahayna wuxuu quluubtiina ka siibi doonaa in laydinka haybadaysto,waxa uuna qalbigiina ilaahay ku tuuri doonaa Wahni"waxaa la su'aalay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

rasuulkii ilaahayoow ﷺ waa maxay wahni? Wuxuu yidh: "waa in aad adduunka jeclaatid geeridana aad nebcaysatid"

Waxaa gacanta ku dhigay qalbigooda adduunyo jacayl iyo in ay nebcaystaan geerida ay jidka ilaahay ku dagaalamayaan muslimiintu,markaas ayey noqdeen sida xumbada daadku xambaarsan yahay oo kale.. haddii daadku bari u kaco way ula kacayaan haddii uu u jeesto galbeedna way la socdaan.. ra'yi ,hadaf,doonis midna ma laha.. ilaahayna waa uu ka saaray quluubta Tataarka in ay ka haybadaystaan Muslimiinta ,ismay sii urursan intay soo noqonayeen oo waxaa ilaahay ku tuuray quluubtooda wahni iyo daciifnimo ilaa boqol muslimiin ah ay awood darri darteed iska celin kari waayaan hal qof oo Tataari ah..!! ولا حول ولا قوة إلا بالله.

Maxay sameeyeen kooxdii Khaaska ahayd ee Tataarku?

waxay ka soo noqdeen laga soo bilaabo xeebta badda ((Qaswiin)) ilaa dhulka Masandaran oo Iiraan ku taalla waxay ku qabsadeen wakhti kooban iyadoo weliba leh dhufaysyo ad adag oo ay adag tahay in hawl yaraan lagu qabsadaa , waxay ka mid ahayd meelihii muslimiinta ugu adkaa dhinaca awoodda ..markii ay Muslimiintu qabsadeen wadamadii Akaasira dhamaanteed laga bilaabo Ciraaq ilaa dhulka Khuraasaan xilligii Cumar Bin Khaddaab رضي الله عنه way awoodi kari waayeen in ay furtaan Mazandaran lamana furan ilaa la gaadhay xiligii Sulaymaan Cabdi Malik رحمه الله dawladdii Umawiyiinta..laakiin Tataarku waxay ku galeen si yaab leh oo aad u dhakhso badan, Awoodooda kuma ay furan laakiin waxay ku galeen daciifnimo ay ka heleen nafaha dadka deggan Mazandaran ee xilligaas, markay qabsadeen waxay ku sameeyeen wixii ay ku sameeyeen qayrkeed, way laayeen,cadaabeen ,dhaceen, adoonsadeen,iyo dhulkii oo ay gubeen.

Ka dib markay ka faraxasheen Masandaraan waxay uga gudbeen magaalada Ray (magaalo Iiraan ku taal oo aad u weyn)ilaahay ayaa xumo ka nasahan!! Waxaadba moodaa in uu ilaahay doonay in uu dullinimada u dhamaystiro Maxamed Khawaarsim Shaah ilaa geeridiisi ka dib,Tataarkii iyagoo sii socda wadadii u dhaxaysay Masandaran iyo Ray waxay heleen Madaxweynihii cararay hooyadiis,dumarkiisii , xoolo iyo maal faradhaaf ah hub aan wax la mid ah la maqal dhamaantood iyo xoolohoodii waxay u direen Jingiskhaan xaruntiisii ku taalay "Sabarqanda"..

Dabadeed waxay gaadheen Tataarkii magaaladii Ray iyadana waa ay qabsadeen, boobeen,addoonsadeen,kufsadeen ,waxaay ka sameeyeen waxaan hore loo maqal ,waxaas iyo wax ka daran oo xilleh ayey ku sameeyeen tuulooyinkii iyo dhulalkii u dhowaa magaaladan oo dhan ilaa ay galeen Magaaladii Qaswiin(oo ka mid ah magaalooyinka Iiraan) dhamaanteed waa ay laayeen dadkii degganaa ,waxay dileen

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

reer Qaswiin tiro kor u dhaaftay afartan kun..!!
ولا حول ولا قوة إلا بالله..!!

Duullaankii Adribayjaan:

Waxay u jihaysteen Tataarkii galbeedka badda Qaswiin halkaas oo ay ku ay yaaliin gobolkii Adribayjaan ee muslimka ahayd .

Waxay soo mareen wadada Tabriis(waxay ahayd waqtigaas magaalo ka mid ah Adribayjaan imminkana ka mid ah Iiraan) waxa uu go'aansaday ninkii haystay Adribayjaan oo la odhan jiray((Osbik bin Bahlawaan)) waxa uu waqtigaas ku sugnaa maglaada Tabriis, in uu macaamil la sameeyo Tataarka siiyona xoolo,gaadiid dagaal iyo dhar,hal marna kama fekerin in uu dagaal la galo, waayo jaanisba kama helin cabbitaanka Khamriga uu habeen iyo maalinba uu cabbayo!! Intaas ayey raalli ku noqdeen Tataarku maba gelin magaaladii Tabriis waayo jiilaan ba'an ayaa ka jiray waa ayna adkayd geli taankeedu magaalada Tabriisna aad ayey u qaboowdahay,waxay aadeen Tataarku xeebta galbeed ee badda Qaswiin waxayna bilaabeen in ay dhinaciisa bari ee Adribayjaan iyaga oo u socda dhinaca waqooyi.

Duulaankii Armiiniya iyo Joorjiya:

labadan gobol waxa ay dhacaan galbeedka iyo waqooyiga Adribayjaan, waxay u dhaqaaqeen labadan gobol inta aanay wada qabsan Adribayjaan, sababtuna waxa ay maqleen in ay isku ururSanayaan qabiilo ka mid ah "Kuurj" qabiilada Kurjigu waa ku dabka caabuda, Nasaaraduna waxay degaan gobolka Joorjiya oo Ruushka ah , waxaa iyaga iyo Muslimiinta ka dhaxeeyey dagaalo daba dheeraaday oo aan dhamaad lahayn, waxay markaa ogaadeen in khatarta Tataarku usoo dhawdahay markaa waxay isku ururSadeen magaalada Tafliis (oo Joorjiya ah imminka)waxa halkaas ka dhacay muddo soconayey oo dhexmaray iyaga iyo Tataarka, wuxuu ku geba geboobay in ay Tataarku guulaystaan iyo in ay qabsadeen ARMINIYA iyo JOORJIYA, waxaana Kurjiga laga laayey dagaaladaas wax aan tiro iyo cadad lagu soo koobi karayn.

Muxuu falay Jingiskhaan sannadkii 617h ka dib markii uu baacsaday Maxamed Khawaarsim Shaah?

Ka dib markii uu Jingiskhaan arkay sida madaxweynihii dawladda intaas baaxadeedu le'eg tahay koox yar oo Tatari ahi magaaladuu galoba ka saarayso waxa uu bilaabay in uu isku balaadhiyo waddanka oo dhan mar haddaanay jirin cid iska hor taagaysaa, mandaqadihii ku xeernaa Sabarqanda iyo goboladii Muslimiinta ahaa ee waaweynaa koonfurta iyo waqooyiga Sabarqandaba in uu u dhaqaaqo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Wuxuu ogaaday gobollada ugu waaweyn uguna awoodda badan dawladda Khawaarsimiya in ay yihiin gobolka Khawaarsim iyo gobolka Khuraasaan.

Khuraasaan miyaa waxaa ku yaalla magaalooyin aan midina mid u dhiiban kala ballaadhay tiradooduna aad ay u badan tahay waxaana ka mid ahaa Balakh, Marwa ,Niisabuur,Haraat,Qazna iyo kuwo kale(imminka waa bariga Iiraan iyo Waqooyiga Afganistaan).

Gobollada Khawaarsim miyaa waa qalbigii dawladda waxay caan ku tahay Dhufaysyo,Qalcado dagaal ,khayraad aad u badan,gumaysi nacayb,waxayna ku yaalaan waqooyi galbeed magaalada Sabarqanda ee uu maro webiga Jayxoon(imminaka ah dawladda Osbakistaan iyo Turkumanistaan).. laakiin Jingiskhaan waxa uu damcay in uu dagaal ku galo,raad ku yeesha nafaha Muslimiinta intii aanu ku duulin goboladan ka hor waxa uu go'aamiyey dabargoyn, cidhib tirid iyo burburin si uu baqdin iyo argagax ugu fidiyo quluubta dadka Muslimka ah ee ku nool labadaas gobol ee aadka u waaweyn KHAWAARSIM IYO KHURAASAAN saddex kooxood ayuu u kala saaray ciidankiisi Jingiskhaan:

Kooxda burburinta gobollada "Farqana" ee imminka Osbakistan tahay ilaa shan boqol oo kiilo mitir ayuu bari ka xigaa magaalada Sabarqanda.

Kooxda baabi'inta Magaalooyinka "Tarmud" oo Turkuministan ah imminka waa magaaladii Imaamkii Tirimidi ka yimid boqol kiilo mitir ayey koonfur ka xigtaa Sabarqanda.

Kooxda burburinta dhufaysyada "Kalaaba" wuxuu ahaa dhufaysyada muslimiintu leeyihiin kuwa ugu wanaagsan ee webiga Jayxoon ku yaallay.

Waxay kooxihii saddexda ahaa bilaabeen in ay gutaan hawl galladii loo xilsaaray ee burburinta, sidii uu amrayey Jingiskhaan waxay ku kala baxeen dhamaan gobolladan,waxay kula dhaqantay dhamaantood Maxaabiisnimo,addoonsi, dil, dhac,burburin,gubis iyo si alaale sida ay doonaan ayey ka yeeleen waxkasta oo bani aadan lagu caddibi karayona waa ay u caddibeen.

Dadkiina waxaa quluubtooda laga dhaadhiciyey warqad odhanaysa: Tataarku kuma haraad baxaan waxaan dhiig ahayn,badhaadhohoodu iyo Liibaantoodu waa mar ay meel oodda u rogaan ee la baabi'iyo lamana jebiyo(mana jabaan) hadalkaasi wuxuu degay quluubtii magaalooyinkii Camirnaa ولا حول لا قوة إلا بالله. markay ciidamadii fushadeen dhaqankoodii xumaa ee burburinta ahaa wuxuu bilaabay Jingiskhaan tii ugu xumayd..inuu toos u weeraro Khawaarsimka iyo Khuraasaan.

1.Duulaankii Khuraasaan:

Magaalada Balkh iyo hareereheeda (waqooyiga Afganistaan imminka):

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxay ku taal magaaladani Koonfurta Tirmid tii ay burburiyeen Tataarku maalmo yar uun ka hor shakina kuma jiro in akhbaartii Tirmid iyo wixii ka dhacay ay wararkoodii soo gaadheen..waxaa hadheeyey quluubta dadka deggan magaalooyinkan baqdin iyo argagax aad u daran oo ay ka qaadeen Tataarka iyo sida ay wax u galaan iyo ficiladooda xun xun ee aan dunida hore uga dhicin loogana maqlin, markii ay ciidamadii soo duldegeen Tataarka ahaa waxay ka dalbadeen amaan waxaan caadadooda hore u ahaan jirin bay sameeyeen oo waa way magan geliyeen,kulamana kicin wax dhac iyo adoonsi ah midna waxaan la yaabay waxa ay reer Balkh kala kulmeen Tataarka! Waxa la yaab ah oo kale waxa ay u leyn waayeen sidii caadada u ahayd?! Waxa laakiin la yaabkii tegey ayaamo ka dib,waxa uu ku noqday Jingiskhaan Magaaladii Balkh si ay u caawiyaan magaalo kale oo Muslim ah oo kale waa “MARWA” Sida innoo imaan doonta, tan layaab ka lehi waxay tahay in reer Balkh ay raaceen oo la dagaal galeen si loo furto Marwa..!! Muslim ayaa loo kaashanayaa Muslim kale iyana ay yeelayaan..laakiin jabitaanka nafsiga ah ee daran ayaa ay la daala dhacayeen reer Balkh ayaa ku keentay in aanay kasoo hor jeesan amarada Jingiskhaan.natiijadii kasoo baxday ficilkaas foosha xun waxay gaadhay magaaladii jaarka la ahayd ee Tirmid taas oo caddaynaysa in Tataarkii awood kale oo Muslim ah heleen oo ay layn doonaan walaalohood..!! sidaa darteed Jingiskhaan wuxuu helay awooddaas cusub iyo in uu isku garaaco Muslimiinta badhba badhka kale.

Waxaa xusid mudan oo kale ,ama aynu meelo badan oo Muslimiinta ka mid ah ku aragnaa arrintaas oo kale,waxaynu aragnay Maraykaanka oo adeegsaday kuwan laftooda dega waqooyiga Afganistaan (gobolkan Balkh laftiisa) markii uu la dagaalamayey Kabul sannadkii 2002m, iyo Maraykanka oo adeegsaday Kurdiyiinta waqooyiga Ciraaq dagaalkii Ciraaq حول ولا قوة إلا بالله.

2. Duulaankii Daaliqaan:

Waxay u dhaqaaqeen gaaladii fadhiday Sabarqanda dhinaca gobolka Daaliqaan (waqooyi bari Afganistaan kuna dhaw Djakistaan) waxa ku adkaatay furashadeedii dhufaysyo adag oo ay lahayd darteed, waxaa loo yeedhay Jingiskhan waa uu yimid magaaladii waa uu go’doomiyey muddo bilo ah ka dib waa uu furtay, rageedii waa ay laayeen,dumarkeedii iyo caruurteediina waa ay adoonsadeen xooleheediina waa ay boobeen dhac iyo qulubaa geddi ayey ku sameeyeen sidii caadada u ahayd.

3.Rogankii Marwa:

Waxay soo mareen magaalo aad u waynayd waqtigaas oo ku taalla imminka dawladda Turkaministan ee Muslimka ah,fogaanshaheedu waa afar boqol iyo konton kiilo mitir ayey magaalada Balkh galbeed ka xigtaa,waxaa tegay ciidan aad u badan oo Tataar ah waxaa madax ka ah wiil ka mid ah wiilashii Jingiskhaan, waxay u kaalmaysteen magaaladan dadkii reer Balkh ee Muslimiinta ahaa sidii aan horeba usoo sheegnay..way soo dhaqaaqeen ciidankii Tataarku iyaga oo aad

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

looga cabsanayo aadna u fara badan lamana garanayo tiradooda oo dhab ah,laakiin waxay ahaayeen ciidan fara dhaaf ah oo lagu qiyaasay boqolaal kun..intaas kumaba noola waqooyiga Afganistaan oo dhan,markay magaaladi usoo dhawyihiin waaba reer Marwa oo isu ururs aday dagaalna diyaar u ah, waa laba boqol oo kun oo ciidan ah, waa ciidan aad u wayn marka lagu qiyaaso waqtiga ay joogeen, waxaa dhacay dagaal aad u daran oo birtu dheregtay albaabka marwa ayuu ka dhacay..waxaa dhacday musiibo iska haystay muslimiinta oo dhamaantood ku dulwareegaysay ,waa laga adkaaday Muslimiintii waa la birbireeyey oo birta laga aslay ilaa intoodii badnayd la laayey intii kalena la addoonsaday, ismana dhiibin waxyar maahane,waxaa la qaatay xoolohoodii ,hubkoodii,iyo gaadiidkoodiiba ciidankan..Taariikh yahanka Muslimka ah Ibnu Atheer sida uu ka waramayo bal aan eegno “markii ay Tataarku soo gaadheen reer marwa waxay la kulmeen ciidan waa la dagaalamay waa ay samreen muslimiintu gaalada miyaa guuldarradaba ma yaqaaniin”.

Bal ka waran askari la dagaalamaya cadawgiisa isaga oo aaminsan in cadawgani aanu guuldarradaba aqoonin.. siday noqonaysaa naftiisa iyo mooraalkiisuba?

Waxaa ku dhacday muslimiinta jab qadhaadh dhinaca Muslimiinta waxaa la furtay albaabadii dayrkii ku wareegsanaa magaalada Marwa ee waaweynaa,waxaa deggenaa in ka badan toddoba boqol oo kun oo ah rageeda, dumarkeeda, iyo caruurteeda.

Way go’doomiyeen Tataarku magaaladan weyn.. quluubtii dadka ayaa argagax awgeed galgalatay ka dib markii ciidankoodii iyaga oo arka shufbeeleen albaabadeedii ma ay furan Tataarku ilaa afar cisho,maalintii shanaad ayuu hoggaamiyihii Tataarku (ina Jingiskhaan) warqad u diray ninkii magaalada haystay ee muslimka ahaa uu ku leeyahay “naftaada ha halaagin iyo dadkaaba, iska soo bax waxaanu kaaga dhigaynaa dhulkan oo dhan amiir laga amar qaato oo maamula waanuna iskaga kaa tegaynaa”

Waa uu rumaystay ninkii magaaladani warqadda uu soo diray horjoogihii Tataarku, ama aynu nidhaahdo naftiisa ayuu ku khasbay in ay rumaysato warka ninkan waa uu soo baxay, waxaa loo qabtay xaflad soo dhowayntiisa,waa la ixtiraamay la soo dhoweeyey ka dibna wuxuu ku yidhi Nijaaskii “ xil ayaan kugu wareejinayaa sidaa darteed ii keen ahalkaagii ,odayaashiini, waxgaradkiinii si ay markhaati uga noqdaan amiirka aan kaa dhigayo iyo si aanu u eegno inta diyaarka u ah iyo inta diidan inay adeegayaal daacad ah noqdaan oo aanu u siinno waxa ay u baahan yihiin,cunaqatayntana aan uga qaadno oo ay annaga naga mid noqdaan” waxa uu diray odaygii la khiyaameeyey adeegayaashiisii wasiiradiisii iyo askartiisiiba inay kasoo qayb galaan kulankan ay la yeelanayaan ina Jingiskhaan iyadoo aan qof ka maqnayn..wefdi balaadhan ayaa u soo baxay Tataarki dhamaantood markii ay gacanta ku dhigeen ayey qaqabteen mid walba xadhig ayaa lagu giijay!.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Dabadeed waxaa la dalbay in laga qoro laba liis oo dhaadheer:

Liiska hore: waxaa lagu qorayaa Tijaarta caanka ah ee waaweyn magacyadooda dadka maalka lagu yaqaan ee xoolaha iska haya magaaladan Marwa.

Liiska labaad: waxaa lagu qorayaa magacyada dadka farsamo yaqaanada ah isla markaana leh xirfadda aqooneed hadday tahay hubka samayntiisa.. ka dib waxa uu amray ina Jingiskhaan in dadka magaalada dhamaantood la hor keeno cidnaba aan laga imaanin magaalada dhexdeeda magaaladana gacanta lasoo mariyo(baadho) waxaa la keenay kursi dahab ah ina Jingiskhaan ayaa ku fadhiistay ka dib amaradii ayuu soo rogay:

Amarka koowaad: waa in la keenaa madaxweynihii magaaladan iyo duqaydeedii iyo waxgaradkeedii dhamaantoodna waa in lagu hor laayaa caamada horteeda!! Dhab ahaanna waxa la keenay weftidii balaadhnayd waxaana la mariyey seefta dadkuna iyaga oo eegaya oo ilmaynaya

Amarka labaad: dhamaan waa in lasoo saaraa dadkii xirfadleyaasha ayaa ee aqoonta sancada waxka yaqaan,waa in loo diraa Mangooliya si looga faaiidaysto khibradooda.

Amarka saddexaad: waa in la karbaasha, la caddibaa,la garaacaa dhamaan maalqabeenada ilaa iyo inta ay ka sheegayaan meesha ay xoolohoodu ku jiraan(dhigtaan) dhamaantoodna waa lagu sameeyey sidaas,waxaa ka mid ahaa mid ku dhintay caddibaadda daran darteed helina waayey wax ay ku furtaan naftooda.

Amarka afraad: waa in la baadhaa magaalada guryaha iyo meelkastana la laanrogo wax allaale iyo waxkasta oo naf lehna laga soo qaado ilaa baadhitaankii gaadhay heer ay soo qodaan boqor la odhan jiray Sanjar qabrigiisi iyaga oo rajaynaya inay bal wax uun dahab ah iyo xoolo ka helaan lala aasay.

Baadhitaankaasi waxa uu socday muddo saddex cisho ah.

Ka dib amarka shanaad oo ugu agagax badnaa:ka dib waxa uu amray ina Jingiskhaan ilaahay naxariistiisa haka fogeeyo isaga iyo aabihiisba _in dhamaan dadkan la xasuuqo!!..!!

Waxa ay bilaabeen Tataarku in ay gumaadaan dadkii degganaa magaalada Marwa..iyagoo laynaya ragga..dumarka.. caruurtaba..!!

Waxay yidhaahdeen: magaaladani waa ay iska keen celisay waa ay innala dagaalantay cidkasta oo isku dayda in ay iska kaaya celiso cidhib dambeedkeedu sidaas ayuu noqon doonaa.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxa uu leeyahay Ibn Atheer_رحمه الله "waxa uu amray ina Jingiskhaan ka dib markii laayey dhamaan waxii ku noolaa magaaladan in loo soo tiriyo maydadka waxayna noqdeen toddoba boqol oo kun oo mayd"فإنا لله وإنا إليه راجعون!!"

Waxaa magaaladii Marwa lagu dilay toddoba boqol oo kun oo muslim iyo muslimad,waa wax aan la malaysan karin,dhab ahaantii waa wax aan basharka soo marin ilaa wakhtigii la abuuray Aadan wax la mid ah ficilladan oo kale taariikh dhaw iyo mid fog toonna ولا حول لا قوة إلا بالله.

Magaaladii la odhan jiray Marwa halkaas ayey taariikhdeedii kaga hadhay dunida oo wax la ilaabay ku noqotay.

4.weerarkii Niisabuur:

Waa magaalo weyn oo kale kana mid ah magaalooyinka ku yaal gobolka Khuraasaan(imminkana waxay ku taal waqooyi bari ee Iiraan) xageeda ayey u jahaysteen Tataarku ka dib markii ay dhulka dhigeen magaaladii Marwa, waa ay go'doomiyeen magaaladii Niisabuur muddo shan cisho ah, iyada oo aan weliba ciidan Muslimiin ahi isku ururSanin, waxaa soo gaadhay magaaladan wararkii Marwa iyo wixii ka dhacay argagax iyo muraaradilaac ayey madluum la tahay,ma ay awoodaan in ay Tataarka is hortaagaan,magaaladii ayey iska soo galeen Tataarkii, dadkeediina dhamaantood waxay uga baxeen saxaraha, habaar qabe war la rooraya ayaa u yimid ina Jingiskhaan uu leeyahay in ay jireen magaaladii Marwa dad seeftii aanay dilin oo ay sii noolaayeen oo nabarku ku dhacay laakiin aanay dilin, Tataarkuna u malaynayeen in ay dhinteen, sidaa darteed waxa uu amray ina Jingiskhaan in dhamaan la gumaado dadka magaalada Niisabuur,welibana qof kasta madaxa laga jaro si loo hubiyo dhimashadooda, ka dibna waa uu addoonsaday nijaaskaasi dumarkii Niisabuur,waxa ay baadhitaan ku wadeen magaaladan iyo guryaha iyaga oo maal iyo dahab ka baadhaya iyo wax kasta oo faa'iido leh ka dib waxay ka tageen magaaladii Niisabuur raadkeedii oo keliya laakiin iyadu wax jira aanay ahayn ولا حول لا قوة إلا بالله.

5.Weerarkii Harraat:

Waa magaalada ugu dhufaysyada wanaagsanayd ee wadamada Muslimiinta , waxa ayna ahayd magaalo aad u weyn, ku taal waqooyi galbeed Afganistaan, iyada ayuu aaday ina Jingiskhaan isaga oo wata ciidamadiisii diigaanyada ahaa, ma anay ka nabad gelin masiibadii ku dhacday magaalooyinkii Marwa iyo Niisabuur dhamaanteed raggii waa uu laayey dumarkiina adoonsaday magaaladiina gubay..waxaa haysta nin la yidhaahdo "Malik Khaan" waxa uu kaxaystay oo ciidankiisa ka mid ah una cararay Qasna oo ku taal koonfurta Afganistaan !! sidaas ayey ahaayeen boqoradii iyo madaxdii waqtigaasi way isku raacsanaayeen cararka markay shacabkoodu galaan gaws dambeedka Nibiriga!!.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Dhicitaanka Harraat waxa uu dhamaystirayaa in gobolkii Khuraasaan dhamaantii gacanta lagu dhigay..kamana hadhsana magaalo keliya, dhamaantood dhacdooyinkani waxa ay dhacayaan sannad gudihiis sannadkaasina waa lix boqol iyo toddoba iyo tobankii Hijriga.. waa waxyaabaha ugu layaabka badan ee taariikhda lagu arkay..!!

Duulaankii Khawaarsim:

Khawaarsim waa dhulka ay deggan yihiin qoyska madaxweynihii cararay Maxamed Khawaarsim ,waxaa isku ururssaday Muslimiin tiradoodu badi awgeed lama qiyaasi karo, dhufaysyadooduna waxay ahaayeen kuwa ugu adag ee muslimiintu lahaayeen waxay ku taalla imminka xuduudka u dhaxeeya Osbakistaan iyo Turkiministaan waxay si toos ah u dhacdaa webiga Jayxuun,waxay kale oo ahayd xarunta dhaqaalaha muslimiinta difaaca iyo istaraatijiyadda siyaasadda.

Gobollada muhiimadda noocaas ah leh ayuu u jihaystay Jingiskhaan isaga oo wata ciidamadiisii tiro dhaafka ahaa uguna xoogga badnaa,magaaladan waxa uu go'doomiyey muddo shan bilood ah isaga oo aan furan, waxay ka dalbadadeen Jingis-khaan gurmad dheeraad ah,ka dib wuxuu usoo diray khalqi aad u badan oo ciidamo ah,waxaa lagu soo qulqulay waddankan qulqul aan caadi ahayn,ilaa ay cadaadis aad u badan saareen magaaladii,xataa ay kusoo xoomeen dayrarkii magaalada,ciidamadii Muslimiintuna way soo baxeen waxaa layska helay baniig cad waxaa halkaas ka dilaacay dagaal aad iyo aad u qadhaadh oo dhexmaray muslimiinta iyo Tataarka waa laysu jilib dhigay waxa iskaga dhintay khalqi aad u tiro badan, gurmad aad u badan ayaa imanaya gegida dagaalka oo u imanaaya Tataarka Muslimiintu laakiin go'doomin ayey shan bilood kusoo jireen gurmadna uma yimaaddo, sababtaas awgeed muslimiinta waxaa ku dhacay jab dilkiina waa uu ku batay,waxay bilaabeen muslimiintii carar, kala firdhad mid god gala mid gebi yar oo magaalada ka mid ah ku dhuunta, mid daaraha gala, waxay ku kaceen Tataarkii arrin aad u naxdin badan, ka dib markii ay ku kaceen duminta Barkad weyn oo webiga (Jayxoon) magaalada lagaga xidhay loona diiday in ay magaalada kusoo butaacaan, sidaa darteed ayey webigii magaalada kusoo fatihiyeen magaaladii Khawaarsim dhamaanteed webiga ayaa qaaday oo lagu daray, god kastana iyo dayr walba waa ay galeen biyihii qarqiyeena dadkii ku jiray, waxay daarihii magaaladu u dumeen sidii duufaan qaatay oo kale, hal qof kama badbaadin dadkii magaalada degganaa siday u dhamaayeen!! Qofkii ka badbaaday dagaalkii waxa aanu ka samata bixin dumistii daaraha ama waxaa aanu ka firxan webigii Jayxuun biyihiisi waxaa lagaga tegay magaaladii cammirnayd oo kharaabado ah, waxay ka tageen Tataarku Khawaarsim oo laga tirtiray dhulka dushiisa halkii ay ahaan jirtayna biyihii webiga Jayxuun ay beddeleen, haddii qof soo maro intaas ka dib magaaladan ma uu arkaynin wax raad nololeed ah oo ka muuqda ama inay magaalo ahaan jirtay, taariikhda dheer ee dunida soo martay arrintan oo kale lama arag,haddii laga tegi waayo waa qoomkii nebi Nebi Nuux (Cs)

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ilaahay ayeynu ka magan galnay dullaysasho gaalo ka dib guul ولا حول ولا قوة إلا بالله.

Waxay ahaayeen mar labaad dhacdooyinkan madaw ee wada dhiigga iyo gumaadka ahi sannadkii 617h..!!

Tataarkii oo u jeestay koonfurta iyo badhtamaha Afganistaan:

Burburinta gobolladii Khuraasaan iyo Khawaarsim waxay noqonaysaa in ay imminka Tataarku gacanta ku dhigaan dhamaan gobollada waqooyi iyo badhtamaha dawladii Khawaarsim ee ballaadhnayd, waxay socodkoodii ku gaadheen galbeed ilaa meel ku dhaw dhamaadka dawladdan (xuduudka Ciraaq) laakiin dhinaca koonfureed ee dawladdan uma ay soo dhowaan..qaybta koonfureed ee dawladda Khawaarsim waxaa gacanta ku haya "Jalaaladiin Bin Maxamed Khawaarsim Shaah" waxaa dhalay madaxweynihii bilo yar ka hor ka cararay Tataarka ee Jaziiradda badda Qaswiin ku dhintay.

Koonfurta dawladdani waxa ay gacanta ku haysaa Afgaanistaan Bakistaan waxaa kala qaybiya iyada iyo Hindiya webiga Sindi, Jalaaludiin waxa uu imminka yahay madaxweynaha keliya ee ka hadhay dawladdan dalkeedii iyo dadkeediiba la rogey, magaalo madax waxa uu ka dhigtay "Qasna" xarun ayey u tahay Qasna(imminka waa dawladda Afganistaan waxay koonfur ka xigtaa ilaa boqol iyo konton kiilo mitir magaalada Kaabul, waa magaalo aad u dhufayso badan kuna taalla buuraleyda Baaruba Maysuus ee Afgaan)

Markii uu Jingiskhaan dilay Maxamed Khawaarsim Shaah dawladdiisiina uu riday waxa uu bilaabay in uu u fekero ku duulimaadka badhtamaha Afganistaan si uu dagaal ula galo "Jalaaludiin Maxamed" wuxuu aaday dhinaca Qasna isaga oo wata ciidan mahiigaan ah..

Dabcan, Jalaaludiin warar ku saabsan Tataar kuma seegana iyo weliba duulaanka kusoo aaddan gobollada waqooyi iyo badhtamaha dawladdii Khawaarsimiya, waxaa weliba soo gaadhay wixii qabsaday odaygii dhalay(aabihii) iyo sida xun ee uu ugu dhintay jaziirad ku taal badda Qaswiin isaguna uu imminka yahay madaxweynaha xaqqa ah ee dawladdan, laga bilaabo imminkana ay aad u weynaatay masuuliyadda saarani, sidaa darteed waxa uu bilaabay in uu diyaar garow dagaal sameeyo oo uu la galo Tataar, wuxuu diyaariyey ciidan aad u balaadhan, waxaa kale oo u yimid boqor ka mid ah boqoradii Turkiga oo magaciisa la yidhaahdo " Sayfudiin Baqraaq" wuxuu ahaa dagaalyahan dagaallada ku caan baxay, wuxuu kale oo ahaa khabiir xagga ra'yiga iyo dhagaraha dagaalka,wuxuuna wataa soddon kun oo dagaal yahan oo Muslimiin ah, ka dib waxaa kale oo kusoo darsamay lixdan kun oo isugu jira kuwa ka firxaday magaalooyinkii la baabi'yey wax jibbo dagaal keentay, waxa kale oo kusoo darsamay "Malik Khaan" waa Amiirkii xukumi jiray magaalada Haraat ee cararay ka dib markii uu dumiyey Jingiskhaan.. sidaa darteed waxa uu gaadhay ciidankii Jalaalu diin ciidan aad u

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

fara badan oo kumanaan gaadhaya, ka dib waxa uu Jalaaludiin ciidankiisii ula dhaqaaqay magaalada deriska la ah Qasna ee Balq waana magaalo buureed oo farduhu aanay ku dagaalami karin dhinac kastana buuro kaga wareegsan yihiin.. halkaas wada dhufayska ah ayey ku Sugeen ciidankii Tataarka .. ka dib way soo dhigteen ciidankii Tataarku!.

Waxaa dagaal ba'ani dhexmaray isbahaysigii Jalaaludiin watay iyo xoogagii Tataarka waa dagaalkii ugu adkaa ee abid soo mara Tataarka ayaa ka dhacay meesha, waxay dagaalameen Muslimiintu dagaal Nafhurid ah .. waa dhamaan dacalladii dawladdii Khawaarsimiya, haddii jab dhaco uma hadhayo hal boqor oo dhiig ka galgashaa ama qof keliya oo madax ahi, waxaa haysay dadka Muslimiinta xamaasad iyo dhulka ay ku dagaalamayeen oo ahaa dhul dabiici ahaan dagaal ku wanaagsan, tirada Muslimiinta oo ah markii ay ugu badnayd geesinimada Turkiga ciidankiisa ee uu watay dagaalyahan Sayfudiin Baqraaq hoggaaminta goobta dagaal ee ay haystaan dhamaan intaas oo laysu geeyey ayaa raad ku yeelatay in ay sugmaan Muslimiintu una babac dhigaan huwanta Tataarka.

Saddex maalmood ayuu dagaal aan waxba laysula hadhin socday

Ka dib wax yar ayaa ilaahay soo dejiyey Muslimiinta Nasrigiisi..Jabkii ugu horreeyey ayaa ku dhacay Tataarka ee lagu jebiyey dhul Muslimiin!! Dhimashadii ayaa ku badatay intii hadhayna waxay u carareen taliskoodii uu degganaa Jingiskhaan oo xarun ay u ahayd Daaliqaan oo ku taal waqooyiga Afganistaan.

Waxaa kor u kacday rajadii Muslimiinta si wanaagsan..waxaa ka baxday qalbigooda kuwo badan dagaalkan ka hor in aan Tataarka la jebin,laakiin waa kuwaas huwantii muslimiintu warkaas ku beeniyeen Qasna kagana gaadheen midhihii..goobtani waxay midaysay ciidamadii Jalaaludiin iyo kuwii aabihiis,kuwii Turkiga ahaa ee uu watay Sayfudiin Baqraaq,kuwii Malik khaan,Muslimiinta oo doortay meel ku munaasib ah dagaalka asbaabtaas oo laysu geeyey ayaa keentay inay guulaystaan.

Ciidankiisi ayuu isku habaystay Jalaaludiin, ka dib Jingiskhaan ayuu warqad u diray oo jooga Daaliqaan isagoo ugu yeedhaya dagaal cusub..waxa uu dareemay werwerkii ugu horeeyey Jingiskhaan,waxaa uu soo diyaarsaday ciidan ka awood badan kuwii hore wuxuu soo diray mid ka mid ah wiilashiisi la dagaalanka muslimiinta, ciidankii muslimiintuna waa ay diyaargaroobeen, waxay ku kulmeen labadii ciidan Kaabul caasimadda Afganistaan.


Magaalada Kaabul waa magaalo Muslim ah dhinac kastan ay kaga wareegsan yihiin dhufaysyo aad u adag iyo buuro,waqooyigeeda waa buuraha Hindokoosh galbeedkana waa buuraha Baarooba Maysuus koonfur iyo barigan waa buuraha Suleymaan.

Goobtan Kaabul ayaa foodda lays daray dagaal aad u daran..waa dagaal aan waxba laysula hadhin..isuma dhowa xagga adkaanta kii ka dhacay Qasna .. waa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ay samreen Muslimiintu waxaanay xaqiijiyeen guul aad u qaaliya mar labaad waxayna soo furteen kumanaan Muslimiin ah oo maxaabiis ahaan loo haystay kuna jiray gacanta Tataarka.

Dareenkii Muslimiinta ayaa istaagay oo kacay tiro aad u badan ayaa laga laayey Tataarka,waxaa la badbaadshay maxaabiistii Muslimiinta,waxaa ay Muslimiintu kala hadheen Qaniimo aad u badan oo tiradeedan aan la qiyaasi karin,laakiin Subxaanallaah, halkii ay Muslimiinta u noqon lahayd nimco iyo badhaadhe u soo hoyatay dadka muslimiinta,waxay ku noqotay dhiig iyo dhunkaal hoog iyo halaag xaaraan maqdac ah!!


روى البخارى ومسلم عن عمرو بن عوف ﷺ قال: قال رسول الله ﷺ
«..فوالله ما الفقر أخشى عليكم، ولكني أخشى أن تبسط عليكم الدنيا كما بسطت على
من كان قبلكم، فتنافسوها كما تنافسوها، وتهلككم كما أهلكتهم».

Waxa uu Muslim iyo Bukhaari kasoo weriyeen Cumar bin Cawf RC inuu yidhiRasuulku **"walaahi ayaan ku dhaartaye faqri idiinka biqi maayo,laakiin waxaan idiinka cabsanayaa in adduunyada laydin siiyo sidii kuwii idinka horeeyey loo siiyey oo aad ku loolan taan sidii ay ugu loolameen ka dib ay idin halaagto sidii ay u halaagtay".**

Sidaynu hore u soo aragnay waxay ahayd qalbiga dadka Muslimiinta ah mid bugta waxayna la buktay waxaa degtay waxaa degtay adduunyo dhamaantood inyar oo ilaahay u naxariistay maahaane,waxay ku saabsanaayeen amaba sababi jiray dagaaladooda inta badan adduunyo qabyaalad ..dagaalo dano gaar ah laga leeyahay iyo hawadooda .. marnaba may ahayn dar ilaahay..waxay guushooda ahayd danta laga leeyahay oo keliya in uu kursiga kusii negaado iyo xukun jacayl iyo ka cabsasho shirqool iyo dil laga takhaluso kursiga..waxaas oo dhami xumaantoodu waxay soo baxday markii xoolo badan la helay,

Muslimiinta waxaa ku dhacday fitno..!!

Waxay isku qabsadeen sidii xoolaha loo qaybsan lahaa..!!

Waxaa istaagay "Sayfudiin Baqraaq" Hogaamiyihii Turkiga waxaa istaagay hogamiyihii kale waa Malik khaan ninkii haystay Harrat.

Mid kasta oo joogay dhinaciisa ayuu istaagay isagoo dalbanaya in badhkiisa la siiyo xoolaha laga helay meesha.. khilaaf baa cirka isku shareeray.. hadalkaa taagtaagmay..ka dibna Seefta ayaa hooyaashay..!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Haa. Seefta ayaa laysla galay iyadoo laysku dilayo sidii loo qaybsan lahaa Qaniimada gaalada laga hadhay iyadoo ciidankii Tataarkuna magaalo kasta oo Muslimiin ah ka buuxaan..!!

Waxaa ka dhex dhacay Muslimiintii gacantooda ku baxay,waxaana ka mid ahaa dadka ku dhintay meesha Sayfudiin Baqraaq walaalkiis,Sayfudiin aad ayuu u cadhooday waxana uu go'aan ku gaadhay in uu dagaalka iskaga baxo ciidankiisana kaxaysto weliga soddon kun oo ciidan tababaran ah!! Ka go aad u daran ayaa ku dhacay Muslimiinta dhexdoodi,waxa uu isku dayey Jalaaludiin in uu xalliyo mashaakilka waxa uu ka codsaday in uu kusoo noqdo safka Muslimiinta waayo maalintaas Muslimiintu xataa hal askari waa ay u baahnaayeen iyo awood kasta oo kusoo korodha ,ra'yi kasta oo lagu soo biiriyo maaha mid laga dhimo,iyadoo taasi jirto waad garan karaysaa raadka ay ku yeelaynayso inta hadhay haddii ciidamadaaski ka baxaan saftak Muslimiinta, yeelkeed ayuu go'aansaday waana ku adkaystay inuu iska tago ciidankiisana kaxaysto si kasta waa uu u baryey Jalaaludiin ninkan waddo kasta oo uu u fahmi karona waa uu maray Jihaad inay ku jiraan ayuu u sheegay ilaahay in uu ka cabsado ayuu xasuusiyey.. laakiin waxaas dheg uma dhigin Sayfudiin waana uu iskaga baxay dhabtii farantii!!.

Waxaa muslimiinta ku dhacay jajab aad u daran,waxay u kala jajabeen muuqaal ahaan iyo nafsi ahaanba.. !!

Kuma guulaysan Muslimiintu in uu midho dhal u noqdo guusha qaaliga ah ee ay ka xaqiijeen Qasna iyo Kaabuul.

روى مسلم عن أبي سعيد الخدري ﷺ قال: قال رسول الله ﷺ: «إن الدنيا حلوة خضرة، وإن الله مستخلفكم فيها، فينظر كيف تعملون، فاتقوا الدنيا واتقوا النساء».

Muslim waxa uu Abii Saciid Khudri kasoo weriyey in Rasuulku yidhi "adduunyadu waa macaan,ilaahayna gacanta ayuu idiin geliyey wuxuuna eegayaa sida aad u isticmaashaan,ka cabsada adduunyada isla markaana ka cabsada dumarka"

May garan Muslimiintu xaqiiqadaas rasuulku sheegay iyo in ay tahay daar jirabaad loogu talo galay iyo hoy Imtixaan oo weliba mixnad badan ee aanay ahayn goob degganaansho dhab ah laga helayo ama lagu waarayo,waxay ilaabeen Muslimiintu Imtixaanka rabbigood umana ay diyaar garoobin imtixaankaas.

Ilaabe Muslimiintu digniintii Nebiga "**ka cabsada adduunyada**"..markaas ayey jabeen Muslimiintu jab aan caadi ahayn.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Halkaas iyada oo maraysa ayuu iska soo dhigta JINGISKHAAN laftiisa oo ciidanka hoggaaminaya su uu usoo arko Muslimkaas ka adkaaday laba jeer.. waxaa Muslimiinta hadheeyey cabsi iyo baqdin .. tiradoodii ayaa yaraatay ..waxaa burburtay niyadoodii..waxaa uu arkay Jalaaludiin in tiradii ciidankiisu yaraatay.. muxuu sameeyaa?

Ciidankiisi ayuu kaxaystay waxana uu bilaabay in uu u jeesto koonfur isaga oo ka cararaya ciidanka Jingiskhaan ama ugu yaraan in uu ka fogaado dagaal dhexmara Jingiskhaan isaga oo xaaladdan ku jira.

Laakiin Jingiskhaan aad ayuu u xiisaynayey la dagaalanka ninkan waxa uu usoo degdegay inuu ka daba yimaaddo Jalaaludiin..!!

Waxa uu bilaabay Jalaaludiin in uu sameeyo wixii uu aabihii sameeyey mar hore..!! wuxuu bilaabay in uu ka cararo magaalo una cararo magaalo kale isagoo u soconaya dhinaca ilaa uu soo gaadhay seerimada Bakistaan wuu soo dhambalay ilaa uu xagga kale uga soo booday wuxuu soo gaadhay webiga Sindi kaasoo waqtigaas kala qaybin jiray Bakistan iyo Hindiya..waxa uu damcay Jalaaludiin in uu macaa ciidankiisa kala talaabo webiga si uu Hindiya u gaadho iyadoo aanay weliba wanaagsanayn cilaaqada isaga iyo boqorka Hindiya ka dhaxaysay aanay wanaagsanayn.. laakiin waxa uu doorbiday inay dhaanto inuu la dagaalamo Jingiskhaan gelitaanka Hindiya..!!

Waxaa ay soo gaadheen Jalaaludiin iyo ciidankiisi webiga Sindi laakiin doonyo ma haystaan ay webiga kaga gudbaan meel fog ayey ka dalbadeen doonyo iyaga oo doonyihii sugaya ayaa uu soo dhigtay JINGISKHAAN..!! *waa lama huraan mawd inayska hortimaadaan*

Doorasho kale oo aan dagaal ahayni ma jiro dabadooda webigii Sindi ayaa soo madoob,hortoodana Jingiskhaan ayaa soo cartamaya,waxaa dhacay dagaal yaab leh oo laga cabsado dhinac kasta oo laga eego kelmed aan ahayn laga cabsado uma garanayo dagaalkan..ilaa ay yidhaahdeen kuwii goobjoogeyaasha ka ahaa : dhamaan dagaaladii hore ee dhacay marka loo eego dagaalkan waxay noqonayaan ciyaar.. waxa uu socday dagaalkan dhiiga badani saddex maalmood oo xidhiidh ah..birta ayaa layska aslay dhimashada ayaa cirka u baxday..waxaa ka mid ahaa dadka ku dhintay halkan Malik khaan.. kii ay Sayfudiin shalay isku haysteen Qaniimada..waakaas halkan ku dhintay isaga oo aan waxba kala tegin adduunyada bal iskaba daaye waataas adduunyadii dishay , lama dhaafin waqtigiisi hal ilbidhiqsi.. laakiin kala mudan midka ku dhinta isaga oo Muslimiinta hiil iyo hooba la garab taagan iyo kan dhintay isaga oo fitno sababtay jab qadhaadh muslimiinta dhexdhigay.

Maalintii afraad ayey ciidamadii kala gurteen dhimashada oo ku badatay,waxay bilaabeen labada dhinacba inay farsamooyinka dagaal waxka beddelaan ,dhaawacadooda dawaystaan dib u eegis ku sameeyaan kaartada dagaal diyaar

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

garoow cusubna sameeyaan dagaalka xiga,iyadoo kala nasashaas lagu jiro ayaa waxa soo gaadhay doonyihii webiga Sindi,Jalaaludiin waqti iskaga lumin in uu ka fekero waxbadan waxa uu gaadhay go'aan degdeg ah "CARAR..!!" wuxuu ku booday hoggaamiyihii Muslimiintu doonyihii isaga oo ay la socdaan ciidankiis khaaska ahaa iyo intii ku dhodhowaa..waxay ka dhex tallaabeen webiga Sindi una gudbeen Hindiya waxay kaga tageen daanta galbeed ee webiga Sindi Tataarkii.

Laakiin..Miyey uga tageen Muslimiintu Tataarka oo keliya dhulkan?

Maya..!! waxay uga tageen dalalkii Muslimiinta,magaalooyinkii Muslimiinta,Tuulooyinkii Muslimiinta..waxay kaga tageen dadkii deganaa iyada oo aan looga tegin cid ilaalisa,waxaad ogtahay Tataarku ma kala saaraan Biri ma geydo iyo dagaal yahan.. weliba ku darsoo cadhada ba'an ee uu qabo Jingiskhaan taasoo ka kacday ciidanka faraha leh ee laga laayey ayaamihii ugu dambeeyey,dib wuxuu ugu laabtay Jingiskhaan wadamadii Muslimiinta si uu ugu cadho burburo..uguna sameeyo wax allaale waxa ay Tataarku doonaan inay sameeyaan iyo wax ka badanba.

Waxaana magaalooyinkaas ugu darnayd magaalada Qasna,waayo waa magaaladii ay Muslimiintu kaga guulaysteen maalmo ka hor ama bilo aan fogeyn markii ay midaysnaayeen..magaaladii waynayd ayuu soo galay.. caasimaddii Jalaaludiin Ina Maxamed Khawaarsim,dhamaan raggeedi si aan loo kala reebin ayaa loo laayey,caruur iyo dumar waa qafaashay iyadoo aan la kala reebin,daareheediina waa la gubay iyadoo aan mid la dhaafin waxaa laga tegay sida uu Sheegay Ibn Atheer_meel la degay ayaa laga dhigay aanad moodayn inay shalay xataa la degganaa..!!

Waxaa xusid mudan in la tilmaamo waxaa uu ka helay magaaladan caruurtii Jalaaludiin markaas ayuu amray in la bireeyo dhamaantood.

Sidaa ayuu u dhadhamiyey xoogga iyo halaagga ay dhadhamiyeen Malaayiin Muslimiin ah oo shacabkiisa ka mid ahi.

روى البيهقي بسند صحيح، رواته ثقات إلا أنه من مراسيل أبي قلابة - رحمه الله - أن رسول الله ﷺ قال: «كن كما شئت، كما تدين تدان».

Sidaa darteed waxa uu dhabeeyey Jingiskhaan riyo uu in badan sugayey ma uu filayn inay sidan fudud u dhici doonto riyadaasi waxay ahayd inuu qabsado Afganistaan..!!

Laakiin..maxaa qabsashada Afganistaan ugu noqotay riyo uu higsado Jingiskhaan iyo kuwa la midka ah ee kale?maxayse qabsashada Afganistaan raad ugu yeelatay dhicitaanka ummaddii Islaamka?maxayse waajib u noqotay dhicitaanka

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Afganistaan halis digtoonideeda ay mudan tahay inay ka qaataan ummadda Islaamku?

Waqtigan la joogo dhicitaanka Afganistaan waxa uu xambaarsan yahay masiibooyin dhawr ah:

KOW: Afganistaan dabeecad ahaan waa dhul buuraley ah oo taagan sidaa darteed waxay u fududeynaysaa cidda qabsata inay dhinac kasta u duusho,waxaa kale oo dhulkeedu u fududeynayaa in aan hore looga gacan sarrayn oo buurahaasi difaac ay u noqonayaan,Afganistaan haddii la qabsado meel kasta oo deris la ahaydna waa ku daysay.

LABA: Afganistaan waa waa meel Istraatiji ah oo la ahmiyad gaar ah leh taas macneheedu waxaa weeye,hadaad Afganistaan qabsatid waxaad fadhidaa Aasiya oo dhan badhtankeedii Ruush ayaan kaa nabad gelayn,Shiinaha ayaanad Amaan siinaynin,Ciraaq ayaan kaa nasanaynin,cid alaale iyo cidkasta waad ku duuli gartaa afarta jiho,

SADDEX: Waxaa lagu yaqaan buuraleyda Afganistaan dadka dega in ay yihiin dad dagaalka ku ba'an oo neceb cabiidsiga wax iska celintuna ay ku talaalan tahay markaa dadka noocaas ahi haddii la qabsado meelaha kale sida loo qabsadaana waa ay kasii fududdahay.

AFAR: dadka degaankan deggani waxay ku faanaan oo ku raaxaysta Islaamka waxaa kale oo iskaga jirta ruux Jihaadka jecel,ma sahlana in ay aqbalaan gumeysiga taasina waxaa caddaynaya sida ay labada jeer uga guuleysteen Tataarka,halka ay ciidamada Muslimiinta kale oo dhammi ku fashilmeen inay sidaas yeelaan oo xaqiijiyaan guusha intaas le'eg,

SHAN: dhamaan waxaa aan kor kusoo sheegnay marka laga yimaaddo waxaa raad xun ku noqonaya dhinaca Muslimiinta,raad fiicanna ka noqonaya dhinaca Tataarka waa saamayn wayn ku yeelan doona dhacdooyin taariikhda ku suntan oo ah in ummad quus taagani aanay weligeed isku dayeynin inay istaagto oo wax iska dhiciso,sidoo kale ummad dhadhamisay macaanka guushu leedahay,ay adag tahay inay guushaas si fudud farahooda uga baxdo!!

Sidaas darteed ayey Tataarku noqdeen kuwo gaadhay laga bilaabo Shiinaha ilaa Kasakhistaan,ka dib Osbakistaan,ka dib Turkuministaan ka dib Afganistaan, ka dib Iiraan ,ka dib Adrebayjaan,ka dib,Armiiniya,ka dib Joorjiya, ka dib waxayba kusoo dhowaadeen Ciraaq.

Dhamaan waxaas oo dhammi waxa ay gacan galeen sannad keli ah gudohood 617h.ilaa uu leeyahay qoraaga Muslimka ah ee Ibn Atheer uu yidhi

"waxay ka dhigeen Taariikhda waxaan hore iyo dambeeto mid dhow iyo mid dheer toona loogu arag looguna maqal ayey sameeyeen Kooxdaas Tataarku,kooxdaasi

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

waxay ka soo baxday xuduudka shiinaha sannad kuma qaadan in ay badhkood gaadhaan waddanka Armiiniya,Ciraaq waxay kasoo gaadheen dhinaca Hamadan, ilaahay ayaan ku dhaartaye waxaan shaki igaga jirin in cidda looga waramaa arrintaasi xaqiiqadeeda ay odhan doonto wax caqliga geli kara maaha! Laakiin dhabtii waan kuu waadigan akhriyaya,

Qofka ay ku adkaato in uu rumaysto ha ogaado waxa aanu qornay,cidkasta oo taariikhda waxka ururisaana samaankan,cid kasta oo joogtay waqtigaasna way garanaysaa dhacdadan ogaanshaheeda cidkasta oo cilmi leh waa garaysaa cidkasta oo jaahil ahna waxaa baray caan ahaansheheeda.

waxaa soo galay sannadkii 618h.

ku noqoshadii Tataarka Adriibayjaan:

waxay ku noqdeen Tataarku gobolkii Adriibayjaan ee Muslimka ahayd mar labaad waxay galeen magaaladii (Muraaqa) oo muslimad ah ..waxaa yaab leh magaaladan waxaa xukunta gabadh! Mana garan karo waxay Muslimiintu hoggaaminta ugu doorteen gabadh weliba waqtigan xaassaasiga ah?! Haddaan magaaladan loo waayin rag hoggaamiya..!!

way go'doomiyeen Tataarku Muraaqa waxay goonyaha kaga garaaceen Madaafiicdii waqtigaas oo dhagxaan sida wadhafka oo farsameeyey ah..magaaladii dhinac kasta waa ay ka garaaceen..markii dambe ayey dadkeedii dagaal usoo baxeen,mise waaba Tataarkii oo maxaabiistii Muslimiinta iska soo horeeysiiyey oo lagu khasbay inay la dagaal galaan kii dib uga dhaca dagaalka ama daala waa ay dilayeen..waxa ya bilaabeen Maxaabiistii Muslimiintu inay la dagaalamaaan walaalahooda kale ee Muslimiinta Muraaqa iyagoo inyar damac nolosha ka hayo.. وسبحان الله! waa lama huraan mawd inayska hortimaadaan! Bal maxaad walaalkaa u dili inta aan lagu dilin ka hor?! Hadiiba ay maxaabiistu ka guulaystaan Tataarka caadifad Muraaqa darteed ah fursad badbaado ayey u noqon lahayd Muslimiinta kale..laakiin fahamkii saxnaa ayaa lumay,waana ay indho beeleen ولا حول ولا قوة إلا بالله.

.

waxay galeen Tataarkii magaaladii Muraaqa ee Muslimadda ahayd sannadd 618 bishii Safar afarteedii taariikhda Hijriga,waxa ay dul dhigeen seeftoodii habaarka qabtay,waxay la dilay waxkasta oo dad loo arko waxay dhaceen oo qaateen dhamaan hantideedii wax allaale iyo wixii la qaadi karayey,waxa ay qaadi kari waayaan siday u gelayeen tolow? Waa la gubayey!! Waxa ay soo qaadaan xariir aad u qaali ah markaasay dab sudhayeen..!!

waxa uu leeyahay Ibn Atheer_ رحمه الله inay gabadh Tataar ahi gelaysay guri oo koox dad ah kusoo laynaysay!! Waxay kale oo sheegayaan oo isaga laftiisu ka maqlay dad reer Muraaqa ah in nin Tataar ahi uu galay derbi ay ku jiraan boqol

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

nin oo Muslimiin ah ka dib sidii uu mid mid ugu dilayey uu ku dhameeyey boqolkiiba..nin keli ahi gacanta dhinaciisa uma soo fidinayo..!! waa dad ay dullinimadu dul degtay naftooda,wax yar iyo wax weyn midna naftooda kama difaaci karaan ilaahay ayeynu ka magan galnay dullinimo intaas le'eg..!!

caga jugleyn in waqooyiga ciraaq lagu duulo.

Waxay bilaabeen Tataarku in ay ka fekeraan sidii duulaan loogu qaadi lahaa magaalada "Arbiil" oo ku taalla waqooyiga Ciraaq,baqe iyo argagax ayaa alla ku tuuray reer Arbiil sidoo kale magaalada Mawsil oo galbeed ka xigta Arbiil,waxa ay dadka deggan magaalooyinkan qaarkood ku fekereen inay usii faaruqiyaan oo magaalooyinka uga baxaan,boqorkii xukumayey ciraaq waqtigaas oo la odhan jiray Naasir li Diinillaahi in inta lasoo cuno Arbiil iyo Mawsil dhinaciisa loo soo jeesto,inta uu hurdada ka kacay ayuu qaylo qarka saaray magaalo kasta oo ciraaq ka mid ah ciidan ayaa laga soo ulay waxa ay bilowday inay diyaariso Khilaafadii Cabbaasiyiintu ciidankeedi.

Tolow magaalooyinka Ciraaq oo dhan ayeynu nidhi ayaa ciidankan laga soo daabulay immisa ayaa laysu keenay?

Waxa Khilaafadii dhamayd ciidankeedi noqday sideed boqol oo nin keliya!!

Ma garan karo sida uu ugu gargaarayo sida magiciisa ka muuqata diinta ilaahay kol haddii ciidankiisu intan yahay?!

Meeyay ciidankii xooganaa?maye ciidankii khilaafada difaaci jiray?! Aaway tababarkii Milateri ?! meeday naftii jihaadka loogu talo galay?! Laguma sheegi karo Naasir li diinillaahi khaliif laakiin waxaa la odhan karaa waa "sawir khaliiif" ama " hadh khaliif".

Ma awoodo hoggaamiyihii ciidankan loo dhiibay " Mudfir diin" in uu tiradan kala hortago Tataar oo dad iyo dameeroba cunay caalamkaba sannad waxka yar kala badh ku qabsaday laakiin waxa uu sameeyey dib u gurasho,halkaas ayey Tataarkiina moodeen inay tani tahay dhagar loo maleegayo ee aanay macquul ahayn in ciidanka Khilaafadu intan iyo wax u dhaw toona ahayn..sidaa darteed waxay go'aansadeen in aanay dagaal gelin iyaguna ciidamadoodii ayey dib ula baxeen.

Markaa dib u gurashada Tataarku waxay inooga baahanaysaa in aan wax yar is dultaagno..baqdin ayaa ilaahay ku tuuray qalbiga Tataarka waayo hore Sumcaddii ay dunida ugu lahaan jirtay ayaa weli magaceedii sii noolyahay wacdarihii ay dunida ka dhigtay ayaa maqalka iyo aragga dunidaba ka buuxa,waxay ahayd mid qayrkeed ku dhaaftay sumcad iyo sharaf weliba taariikh dheer ah una dheer tahay sharaf balaadhan,markaa shaki kuma jiro dawlad yar oo gebigeeduba jirtay dhawr sano sida Tataarka oo kale inay xisaabsanayso dawladdani kun sano ku dhowaad ama taariikhdooda ay kusoo laban laabmayso in ka badan shan boqol oo

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

sano,sidaa darteed waxa ay u qadderinayaan Tataarku dawladdan waxa hore taariikhda ugu galay laakiin ka fog waxa ay imminka tahay wax badan,markaa waxa ay goosteen in aan Khilaafadan loo weerarin si toos ah beddelkeedase waxay ka dhigeen waxa loo yaqaano (dagaal ku dhufo oo ka dhaqaaq ah)iyo hadba in ay cid kale usoo adeegsadaan ama in go'doomin muddo dheersaarnaan doonta in lasaaro ugu hanjabay iyo waddo kale oo ah la xulufaysi cidkale si ay gaashaanbuuraysi ku weeraraan xulufaysigaas oo ah maamullada yaryar ee Ciraaq deriska la ah dagaalka ciraaqna dani ugu jirto oo dhan ayuu kaxaystay.

Dib ayey isagala noqdeen ciidankoodii Tataarku cimri dhererna arrintaasi waxay u noqotay madaxdii ciraaq haysatay markaas weliba dhawr sannadood.

Qabsashadii Hamadan iyo Ardool:

Labadooduba waa magaalooyin ku yaalla imminka Iiraan..waxa uu go'doomiyey Tataarku Hamadan ka dibna dagaal ayaa ka dhex oogmay ilaa inta ay cuntadii ka go'aysay waxa iskaga dhintay labada dhinacba tiro aad u badan laakiin gebagebadii waxaa guushu raacday Tataar gacantay ku dhigeen waddankii oo dhan, waxay daadiyeen dhiigii dadkii degganaa dhulkoodiina waa ay gubeen,dabadeed waxay u gudbeen Ardool way mulkiyeen way ka baxeen iyagoo gubay dhamaanteed.

Tabriis:

Waxay aadeen Tabriis.. waa magaalo weyn oo Iiraani ah ..magaaladan mar hore waxaynu soo sheegnay in ay yimaadeen Tataarku oo xoogaa lacag iyo maryo ah loo dhiibay ka dibna iskaga tageen isla markaan uu haystay nin khamriyo cab ahi haystay (Osbik Bahlawaan)ma gelin magaaladii markaas , waayo waxa ay yimaadeen xilli Jiilaal qaboobe ah..laakiin imminka waxa ay yimaadeen iyada oo cimiladu aad u wanaagsan tahay cirkuna saafi yahay ballan iyo cahdina ma yaqaaniin oo waad ogtahay.

Laakiinse..markay wadada soo socdeen arrinka magaaladan in uu wanaagsan yahay oo wax iska beddeleen..waa uu ka tegey khamriya cabkii Osbik ina Bahlawaan meeshiina uu qabsaday nin kale oo la yidhaahdo (Shamsudiin Daqraa'iy)waa nin Mujaahid ah diintiisa iyo adduunyadiisana fahamsan waxa uu bilaabay ilaahay haw naxariistee in uu dadka xamaasad geliyo in ay xoog ciidan iyo awood diyaarsadaan..dadka quluubtoodii ayuu xoojiyey isaga oo uga waramaya cidhib xumada ay leedahay dullinimo la qaayibo iyo dugsashada nolosha liidata..waxa uu ogeysiiyey wax ay indhaha uun ka arki jireen laakiin aanay hoos u dhaadhaceeda u fiirsan jirin,xaqiiqada Tataarkana waa uu taabsiiyey wax aanay hore noloshooda ugu hoomaayin.. wuxuu u sheegay: in aan qofna dhaafaynin waqtigiisa geerida weligiis..risiqiisa iyo ajashiisana la qoray dhalashadiisa ka hor,muslimiintuna si kasta oo ay ugu ixsaan falaan Tataarka aanay nabad gelinaynin haddii ay Muslimiintu seefohooda ku dhuuntaan iyo duruucda

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

dagaalka xaquna in aanu ku imaanaynin duco meel lala fadhiisto ee ficil loo baahan yahay.

Way galaan hadaladaasi quluubtii reer Tabriis waxay bilaabeen inay hoggaamiyohooda wanaagsan ku raacaan oo dhufayso bilaabaan samaysigooda,deyrarka debedda magaalada oo la hagaajiyo,godad dhufaysyo oo la waasiciyo,hubkooda oo ay diyaarsadaan,dabinno la dhigayo meelaha ay kasoo gelayaan,safafka dagaalka oo ay hagaajistaan dadkii si fiican ayey u diyaar garoobeen..markii ugu horeeysay muddo dheer jihaad ka dib..!!

Tataarkii way maqleen xaalka magaaladan iyo diyaar garowgeeda balaadhan.. way maqleen in jihaad lagaga dhawaaqay magaalada iyo diyaar garowga dagaalka.. waxaas oo dhan way ka warheleen maxay tolow sameeyeen?

Waxaa laga yaabaa dhalinyarada qaarkood inay filaan Tataarka oo cadhooday madoobaaday ,codadkooda oo is beddelay dhiiga oo kuwada kacay iyo ciil dartii inay dibinta ruugeen,ciidamadoodiina laysugu yeedhay go'aanna lagu gaadhay in magaaladan yar la dhalaaliyo

Haka yaabin..walaalahayga muslimkow_waxaas oo dhammi ma ay dhicin..!


Waxay qaateen Tataarku go'aan yaableh..!!

Waxay goosteen in aanay usoo banbixin magaalada Tabriis,magaaladoodana la gelin meeshan calanka Jihaadka kor u taagtay weliba jidka ilaahay iyagoo ku dagaalamaya.. ilaahay ayaa quluubtooda baqdin dhexdhigay Tataarkii badidoodiina waa la qariyey

Waxaa loogu gargaaray Rasuulka ﷺ argagax iyo baqdin gaalada la gelin jiray markay u jiraan nebiga meel bil loo socdo ee rasuulku soo aado.

Calanka jihaadka ee la taagay waxa uu la yimid wixii lagu yaqaanay..hadda dadkani maba ay dagaalamin ee waxay niyeysteen niyad dhab,way diyaargaroobeen intii ay awoodeen markaas ayaa ballankii ilaahay dhaboobay_kaas oo aan laga baxaynin_waana argagaxin quluubta cadawga_tanina waxa ay noqotay cashar lama illaawaan ah.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks



(U diyaarsadagaalada waxaad awoodaan ee cudud ah,fardaha xidhashadooda ah,xaal aad ku cabsi gelinaysaan kaa aad diyaarsateen cadawga ILAAHAY iyo cadawgiina, Kuwo kale oo ka sokeeya, Oo aydaan garanaynin idinku ILAAHAY ayuun baa garanaya,waxaad bixisaan ee wuxuun ah jidka ILAHAAYna aad ku bixisaan waa laydiin Oofin,waxaa laydiin Oofin idinka oo aan waxba laydinka dulmiyin).

Waxay arrintani ahayd iftiin ka dhexbidhaamay dunidan degel madoobaatay ilaahay haw naxariisto Shamsudiin waa ninka magaaladii shalay baadda bixinaysay iyadoo muslim ah nooleeyey.

Qabsashadii Biilqaan:

Imminka waa magaalooyinka Iiraan,nasiib darro iyadu ma yeelin sida ay Tabriis yeeshay,waxay magaalada soo galeen Tataarku ramadan 618h,dabka ayaa la saaray,kama tegin mid yar iyo mid weyn nin iyo gabadh,xataa waxa ay sida uu qoraaga muslimka ah ibn Atheer leeyahay sameynayeen caloola doox hooyada uurka sidda caloosha inta la dooxo canugga la dilayey,dumarka ayey ka sinaysanayeen ka dibna dilayeen,markii ay kasoo jeesteen basharka layntiisi dhac iyo boobkii ayey bilaabeen ka dib ka baxeen oo sii gubeen.

Kunja:

Hore ayey ugu dhaqaaqeen magaalada Kunja ee Muslimka ahayd,dadkeedii waxay sameeyeen wixii ay Tabriis samaysay ,Tataarkuna waxay ka yeeleen wixii ay Tabriis ka yeeleen.

Waxay is ogaysiiyeen reer Kunja jahaad,waana ay diyaar garoobeen intii ay awoodayeen,ma gelin magaaladoodii hal Tataar waaba ay iskaga tageen.

Innagama ay fogeyn in meesha kor u taagta calanka jihaadka una diyaar garoowda ay tahay magaalooyinka aan Tataarku jiidhin..waa qawaaniin ilaahay dhigay magaalo kasta oo magaalooyinka Muslimiinta ka mid ah hadday sidaas yeeli lahayd sidan ba looma rogmadeen cagahooda nijaasta ahna ma dhigeen magaalo muslim ah dhexdeeda.. sannado iyo sannado ayey dadkan Muslimka ahi ilaaliyeen magaalooyinkan..tiro badnaan maaha heshiisyo siyaasadeedna maaha ..waxa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

keliya ee ay ku ilaaliyeen waa jahaad dhab ah,dhiig bed qaba ,iyo wadna daahir ah(qalbi).

Qawaaniinta ilaahayna maaha mid la khilaafayo_haddii khilaaf yimaadona waxa uu ka yimaadaa dhanka addoomada.

Ilaahayna SW dadka waxba kama dulmiyo_laakiin dadka ayaa iyagu naftooda dulmiya.

Daaqistaan iyo Shiishaan:

Labaduba waxay ku yaallaan gobolka Adriibayjaan dhul xeebeedka badda Qaswiin dhinaca badda galbeed,labadooduba waa dhul muslim oo hoos taga gumeysigii Ruushka ilaa imminka ilaahayna waxa aan ka baryeynaa in uu xornimo buuxda siiyo,waxay Tataarku ku sameeyeen caadadoodii ahayd burburin wax kasta,dhamaan waxii ay waddooyinka ka heleen way laayeen,magaalada ugu adkaydna ee u diiday Tataarku inay galaan waxay ahayd magaalada la odhan jirey SHaamikhi (imminkana ah Daaqistaan).

Koonfur galbeed Raashiya:

Waxay sii wadeen Tataarkii inay u sii socdaan dhinaca waqooyi,markii ay kasoo faaruqeen Shiishaan ilaa ay gaadheen waadiga Alfawja ee Raashiya dagaaladii ayaa ka hugmay gobolladan,dhamaantoodna waa Nasaara ,waa ragaadiyeen dagaaladu,hadimooyin badanina waa ay kala gaadheen kuwo la mid ah kuwii muslimiinta kala gaadhay.

Sidaa darteed waxa uu ku dhamaaday sannadkii 618h,Tataarkii waxay gaadheen Raashiya,waxay dunidii noqotay inta u dhaxaysa bariga Shiinaha ilaa galbeedka Ruushka duni ay iyagu maamulaan.

Sannadkii 619aad hijgriya:

Sannadkan waxaa ay hawl gallada Tataarku ka socdeen waddanka Raashiya,waxay isku hubsadeen inay waddan aad u ballaadhan oo Islaamiya gacanta ku dhigeen,waa inta u dhaxaysa Shiinaha ilaa Ciraaq,meel kasta oo ay xukumi jirtay dawladdii Khawaarsimiyana cagta ayey hoos geliyeen markaa waxay koobeen imminka dawladahan magacyadoodu soo socdaan bari iyo galbeedba:

1. Kasakhistaan .
2. Qiirqistaan.
3. Dajakistan.
4. Osbakistan.
5. Turministan.
6. Makistan (marka laga reebo gobollada koonfureed ee loo yaqaan_Karmaan.)

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

7. Afganistaan.
8. Iiraan inta badan _marka laga reebo xuduudda galbeed ee ay ciraaq wadaagaan isla markaana deggan yihiin Ismaaciiliya.
9. Adriibayjaan.
10. Armiiniya.
11. Joorjiya.
12. Koonfur galbeed Raashiya.

Sannadkii 620aad ee Hijriga:

Isaga oo iska sii wata dhulballaadhsigiisa Jingiskhaan ee Khawaarsim iyo dhulka kale ee la midka ahba,weeraro is daba joog ahna uu ku hayo Raashiya.

Waxaan odhan karaa sanadkan waxaa dhacay afar dhacdo oo aan isleeyahay waxa ay daaha innooga qaadi doontaa xaaladda dhabta ah ee Muslimiintu ku sugnaayeen waqtigaas,waxaan kale oo jecelahay in ay jawaab celin innaga siiso isweydiinta maskaxdaada ku wareegaysa ee ah Maxaa Tataarka u fududeeyey in ay dhulka intaas le'eg ku qabsadaan mudadaas aadka u yar? waxa ay iftiimin doonaan dhacdooyinkaasi xanuunada sababay inay dhacaan Masiibooyinkan foosha xumi.

Dhacdada koowaad.

Tataarku duulaan ballaadhan ayey ku qaadeen Raashiya guulo la taaban karona waa ay kasoo hooyeen,laakiin geba gebadii waxay is haleeleen koox Raashiya ka mid ah oo la yidhaahdo Bulgaar (waa raashiyaan laakiin maaha Bulgaariyiin) waxaa dhex maray dagaal aad u ba'an oo lagu jebiyey Tataarka markii ugu horeysay tan iyo intii ay soo galeen Raashiya bashar aad u tiro badan waa lagaga laayey waxaa joogsaday daadkii weerarada Tataarka ee ku qulqulayey Raashiya,xataa tiradoodii ilaa ay gaadhay heer ay xukumi kari waayeen gobollada galbeedka badda Qaswiin (Raashiya, Joorjiya,Armiiniya,Shiishaan,Daaqistaan,Adriibayjaan,iyo waqooyiga Iiraan)..tani waxay fursad u ahayd dadka Muslimiinta ah si ay dib isugu habeeyaan safafkoodii dagaalka,diyaar garoowgoodana dib u cusboonaysiiyaan si ay Tataarka isaga dhiciyaan,Tataarka oo kala daadsan jabkii ka qabsaday Bulgaar darteed.

Taasi waxay ahayd mid la filayey..laakiin ma dhicin..!!

Laakiin ta dhacday waxay ahayd mid Amiiradii muslimiinta ka mid ah oo degganaa Mandaqadda Armiiniya_ inta uu ciidan ururSaday weerar galaabixiyey qabaa'ilka Kurjiga ee degganaa Joorjiya..Amiirkani waxa uu hoos tegi jiray boqortooyadii Ashraafta ee uu haystay Muuse bin AL Caadil waa ninkii haystay Jasiira (waa Kurdiyiinta haystay waqooyiga Ciraaq).

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxase la yaab ahayd,inkastoo dagaalo daba dheeraaday ay soo dhexyaalleen Kurjiga iyo Muslimiinta imminkase lagu jiray waqti xabbad joojin aan rasmi ahayn,xikmad maaha caqli fayow kasoo maxaatay in dagaal labaad oo jabhadaysan la bilaabo iyadoo cadaw awood badan layska eegayo, cadawgaasina waa Tataar,iyada oo taasi jirto haddana Kurjigu waa ay nebcaayeen Tataarka,dhibta ay muslimiinta ku hayeen mid la mid ah ayey ku hayeen..waxaa laga filayey Muslimiinta waqtigan inay is gaashaanbuursadaan weliba si digtooni ka muuqato Kurjiga hal dhinacna uga soo wada jeestaan Tataarka, ama ugu yaraan iyagu heshiis hoosaad dhex maro in aan dagaal doceed kale la qaadin inta dhan loo kala dhacayo Tataarka,weliba Kurjigu waxay kala garanayeen dhufaysyada iyo meelaha lagu dhuunto oo dhan,haddii Tataarku ka gacan sarreeyaan laakiin dagaalkani waxa uu Muslimiinta ku ahaa dhabar jab.

Muslimiinta waqtigaas waxaa lagu imtixaamay wax aan ugu yeedhi karon (jaah wareer siyaasadeed!!)waxaa ka luntay aragtidii saxda ahayd, xikmaddii dagaalka,oo yoolkoodii oo mid ahaa,inay midayaan ummadda Muslimiinta,dhaqdhaqaaqa muslimiinta oo dhan waxaa ka muuqda inay ka madhan yihiin miisaamid sax ahi,kala furfurnaan badan ayaad ka arkaysaa,waxaad kale oo kaaga muuqanaya aqoon darri !!

Kurjigii iyo Muslimiintii ayaa dagaal ka dhex curtay labadooduba waxay dagaalkii ku waayeen tiro aad u badan oo la dilay,sidii ay u waayeen kalsooni dhexdooda in ay ka abuuraan isla markaana u midoobaan Tataarka.. sidaa darteed Muslimiintu kama faaiidaysan fursaddaas dantoodu ku jirtay,taas ayaana sabab u ahayd daciifnimadooda..ka dib dagaalkoodii ayaa is taagay,heshiis ayaa la dhaliyey cusub,laakiin xaddi badan oo awood ahi markii ay iskaga dhamaatay labada dhinacba.

Dhacdada labaad:

Natiijada kasoo baxday jabka la gaadhsiiyey Tataarka,waxaa ka faaiidaystay oo soo baxay wiil uu dhalay (Maxamed Khawaarsim Shaah) waxay walaalo ahaayeen Jalaaludiin kii ka talaabay webiga Sindi ee Hindiya u cararay,Waxa uu kasoo baxay waqooyiga Iiraan magaciisuna waxaa la yidhaahdaa “Qayaasudiin Maxamed” Ciidan ayuu ururiyey,isaga oo ka faa’iideysanaya maqnaanshiiyaha Tataarka ay ka maqan yihiin gobolkan markaas ayuu gacanta ku dhigay,magaalooyinkii uu qabsadayna waxaa ka mid ahaa Ray iyo Asbahaan,waxa uu maamulkiisa cusubi gaadhay ilaa gobolka Karmaan(koonfurta Iiraan) waan gobol aanay gaadhin Tataarku.

Hadaba Qayaasudiin waxa uu maamulkiisu qabsaday gobollada waqooyi,koonfur iyo galbeedka Iiraan,gobolada bariga iyo waqooyi bari ee Iiraan (waa gobolka Khuraasaan oo dhan) waa dhul ay Tataarku haystaan..sidaas waxa uu ku noqonayaa Qayaasudiin xayndaab kala dhexyaalla Tataarka iyo Khilaafada Cabbaasiyiinta.

Waxaa laga filayey Naasir li Diinillaah khaliifadii Cabbaasiyiinta waqtigaas in ay kaalmo siiyaan Qayaasudiin uu kusii haysto dhulka uu qabsaday,waxaa laga filayey

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

in uu is illowsiiyo khilaafyo raagay oo duugoobay kuwaas oo dhexmari jiray khilaafadan iyo dawladdii Khawaarsimiya.. sababta oo ah waxay waajahayaan cadaw isu kaashaday oo awood u saaxiib ah waa Tataarka eh.

Waxaa la filayey inuu..hadii aanu diin,walaalnimo,iyo u gargaarid Muslimiin midna u difaacaynin,sabab u ahaado Istraajiyad dagaal uga fogeynayo oo muhiim ah kuna sugayo dhidibada Qayaasudiin ee goboladan.. sababtoo ah Qayaasudiin waa ninka isagu si toos ah u waajahaya Tataarka..waxaa uu noqonayaa waardiyaha khilaafada Cabbaasiyiinta Baqdaad..haddiiba ay Tataarku jabsadaan Qayaasudiin waxay khilaafadu noqonaysaa kayd u nasanayey oo iyagoo hor leh ayey soo gelayaan dagaalka.

Laakiin khaliifkani indheer garad ma uu noqon..waxaa hayey xanuunkii indho la'aanta siyaasadda.. waxa uu ahaa sida ay sheegeen taariikh yahannadu_ nin dulmi badan oo fasaad badan,cashuuro iyo lacago kallifaad ah ayuu meel kasta kusoo rogi jiray iyadoo dhibaato kasta oo dhaqaale ay jirto cashuur cusub ayuu soo rogaa,waxa uu doonaa dhib kasta oo kusoo korodha naftiisa inuu kaga baxo dadka oo lagu soo rogo wax kale magaca uu doono ha u bixiyee oo aan la awoodaynin.

Muhiimaddiisa ugu wayni waxa ay ahayd xaflado ugaadhsi iyo ciyaar..waxaa waqtigiisi dalka hadheeyey fasaadkii,qiimihii maceeshadda ayaa kor u kacday,waxaa yaraaday wixii dalka laga dhoofin jiray iyo wixii soo gelayeyba.. waa nin ku faana aragti dheeraan iyo faham qoto dheer in uu leeyahay,weligiina dan kama geli jirin dhibaatooyinka faraha badan ee waqtigiisi dhacayey.

Muxuu sameeyey Naasir Li Diinillaah?.. ma uu ilaawin khilaafaadkii gaboobay ee dhex yaalay isaga iyaga iyo dawladdii duntay ee Khawaarsimiya.. waxa uu doonay in uu udubada u siibo xukuumadda halkaas ka hanaqaaday,isaga oo illowsan in uu isaga iyo Tataarka u dhaxeeyo..waxa uu warqad u diray Qayaasudiin abtigiis magaciisana la yidhaado "Iiqaan Daa'isi" waa nin weyn oo aqoon badan u leh kaartooyinka dagaalka,hoggaamiye ayuu u yahay ciidamada Qiyaasudiin,Qiyaasudiin arrin ma goosto ilaa uu isaga kala tashado..warqad ayuu u diray uu ku jeclaysiinayo in uu inqilaabo wiilka uu abtiga u yahay isagan xukunka hunguri ayaa ka hayey,sidaa darteed arrintaas waa uu u ballan qaaday khaliifkii Baqdaad welibana uu Qayaasudiin ka fogeyn doono mandaqadda..dan kama gelin fitnada ballaadhan ee ka dhacaysa hareerihiisa.

Fekreddani waa ay cajebisay Daa'isi hore madaxiisa ayey ku wareegaysay laakiin awood ayaanu haysan,laakiin markii ay khilaafadii balaadhnayd fartay una ballan qaaday inay caawimo siinayso islaweyni ayaa gashay, ciidamo ayuu ursaday,markii uu yara xoogsaday,dadkii raacayna ay bateen ayuu muujistay mucaaradnimadiisa iyo weliba inqilaabka uu rabo inuu fuliyo,intii raacday ayuu kaxaystay dalkana waa uu iskaga baxay, magaalooyinka ayuu dhacaa waddooyinka ayuu goostaa waxa uu helona gacanta ku dhigaa,dadkii ayaa garan waayey meesha uu ka yimid belaayadan halaagani?! Ma ciidamada Tataarka ayey ka socdaan mise ciidamada Muslimiinta?!..

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

waxa uu Daa'isi ururiyey ciidan xoogbadan oo ah dadka fasaadka iyo kharbudaada ku talo galay!.

Waxaas oo dhami waxay iyo Tataarku waxay isu jiraan talaabooyin_khaliifadu waa ay ku faraxsan tahay dhibaatooyinka ka dhacaya geyigeeda!..ka dib Iiqaan Daa'isi waxa uu goostay in uu la dagaalamo inanka ay walaashi dhashay dagaal lagu kala baxo weliba!!.

Waxay isla galeen labadii kooxood ee Muslimiinta ahayd, waxa ka dhexdhacday dagaal aad u diran tiro aad u badan ayaa iskaga dhimatay,oo ay galaafteen seefaha Muslimiintu..waxaa lagu jebiyey Iiqaan Daa'isi abtigii Qayaasudiin,waxaa ciidamadiisi laga laayey tiro aad u badan,intii soo hadhayna waa la kaxaystay maxaabiis ahaan,waxay u carareen isaga iyo intii soo hadhay iyagoo dullaysan Adriibayjaan..

ولا حول لا قوة إلا بالله.

.

روى مسلم والترمذي عن جابر بن عبد الله رضي الله عنهما قال: قال رسول الله ﷺ: «إن الشيطان قد أيس (فَقَد الأمل) أن يعبده المصلون (وزاد في رواية مسلم: في جزيرة العرب) ولكن في التحريش بينهم».

Haddaynu la yaabbanahay waxyaabahaas ka dhex dhacayey Muslimiinta gudohooda waqtigaas,taasoo markhaati ka ah in dhibaatooyinka debedda ka haysta ay sababta koowaad iyagu lahaayeen oo sida Tataarku u galay aanay dhacdeen hadday muslim caadiya yihiin,waxaynu kale oo eegaynaa kuwa kale oo la mid ah kuwaas aan kor kusoo sheegnay sidoo kalena dhexmaray Muslimiinta.. waxaa kale oo aad u yarayd inta u arkaysa in ay mashaakil balaadhan haystaan ummadda Muslimiinta ah oo.. immisa Muslimiin ah ayaa mashaakil dhul dhexyaalay waa Masar iyo Sudaan oo Xalayb? Liibiyo iyo Tashaad oo isku haysta SHARIID OOSUE? Marooko iyo Jazaa'ir oo isku haysta saxaraha galbeed? Sinigaal iyo Morataaniya oo isku haysta webiga Sinigaal? Sucuudiga iyo Yemen oo isku haysta gobolka Casiir..? Imaaraatka iyo Iiraan oo isku haysta Jaziiradda Abi Muusa? Suuriya iyo Turkiga oo isku haysta maamulka Aleksandariya (alexsanderia)… iyo qaar kale oo badan kana jira halkan iyo halkaasba.. dabcan dhamaanteen waan ka warqabnaa khasaaraha naf iyo maalba uu geystay dagaalkii Ciraaq iyo Iiraan ka dibna Ciraaq iyo Kuwayt.. khilaafaat aafeeyey ummadda Muslimiinta dagaamadeeda inta ugu badan iyo sida aanay u dareensanayn waxaa waxku qaadasho kuugu filan Jaraa'idka maalinlaha,maalin kasta waxaad maqlaysaa Masiibooyinka ka taagan Falastiin,Ciraaq,Shiishaan,Kashmiir,Soodaan,Jasaa'ir,Nayjeeriyaiyo Soomaaliya..kuwa kale oo badan immisa innaga mid ah ayaa akhriyaya wararkaas saxaafaddu qorayso laakiin aan waxba dareemaynin dhib weynna aan u arkaynin iskaba daa inay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

jidhiidhico iyo murugo midna aanay asiibayn?, sidaas oo kale ayey Muslimiinta waqtigii Tataarka ahaayeen oo wararkaas waa ay maqlaan laakiin waxba isma dareensiiyaan gudo iyo dibadba dhibtaas ayaa ka haysatay markaas ayey haddana wada bilaa dhiig ahaayeen jidhiidhico iyo jidh dubaaxin midna ma lahaynin..!! waxaad moodaaba in aanay iyaga khusaynin mid dhow iyo mid fogi toonna.. tanise walaahi waxay ahayd meesha masiibadu kaga dhacday Muslimiinta.. Masiibo weeye hadduu Muslimku u noolaado naftiisa oo keliya! Masiibo hadday dani kaa geli weydo naftaada iyo tan qoyskaaga maahee! Masiibo hadaad ka damqan waydo dhiiga muslimka la daadinayo, la duminayo hoygiisi, la qabsanayo dhulkiisa ama ooriyihiisa la faraxumaynayo..dhinac kasta oo lagaa eego miyaanay Masiibo ahaynin?..

Dhacdada saddexaad

Dhacdadan waxaa sheegay Ibnu Atheer buuggiisa “dhamaystirka Taariikhda”waxa uuna u bixiyey dhacdo aan weligeed hore u dhicin.

Waa dhacdo yaableh runtii, waa Muslim fogaaday waxa aynu odhan karnaa.

Dhacdadani waxa ay sheegaysaa in boqortooyadii Joorjiya ee Nasaarada ahayd ay qabsatay gabadhi waqti uu dhamaaday heshiiskii dhexyaalay Muslimiinta gabadh ayaa Madax u ah dawladdan,waxa ay talo ku gaadheen wasiiradii iyo laamihii dawladdu in gabadhan loo guuriyo nin si uu arrimaha waddanka u maamulo.. weliba indhaha cadawgu ay u arkaan ninkan dalka haysta,si uu uga qayb galo heshiisyada waddanku la gelayo dawladaha kale iyo wada haddalada iwm, waxay jeclaatay markaa in ay guursato nin boqortooyo kasoo jeeda ama meel sharaf leh.. laakiin kama ay helin Joorjiya dhexdeeda nin u qalma guurkeeda, waxaa warkaas maqlay mid ka mida boqoradii Muslimiinta waa “Muqiisudiin Daqral Shaah) waxa uu ka mid ahaa boqoradii Salaajiqada waxaana uu xukumi jiray gobolka Anadool ee imminka ah (Turkiga) waxa uu lahaa inan caruurtiisa ugu weyn warqad ayuu u diray boqoradii uu leeyahay wiilkayga guurso,waa ay diiday arrinkaas boqoraddii waxaanay tidhi gacanta dalkayaga u gelin mayno Muslim.

Muxuu sameeyey Muqiisudiin Daqral Shaah?

Wuxuu yidhi: wiilkaygu waa uu kuu gaaloobayaa ee guurso..!!

Sidaas ayey ku heshiiyeen wiilkiina waa uu gaaloobay,waxa uu guursaday boqoraddii Joorjiya waxa uu u wareegay boqortooyadaas si uu xaakim uga noqdo,Nasraanigiisi ayuu iska ahaaday .. ولا حول ولا قوة إلا بالله..!!.

Waxay gaadheen derejadaas Muslimiintu bal muxuu ku keenay boqorka Muslimka ahi wiilkiisu in uu Nasraani noqdo? Wiilkuse siduu u yeelay, iyo fulinteedaba,hadduse dalka wada xukumi lahaa waxbaba kaama dhibteen gaalnimadiisa ka dib.. waxa uu xukunkeeda haystay Anaadool waa boqortooyo balaadhan, haddii awood yaraan iyo daciif ka muuqdo waxa aan odhan lahayn: danta ayaa ku khasabtay haddiise

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

boqortooyo lasoo bandhigay oo weliba iyaga la doonayo waxa wataa miyaanay inkaar ahaynin..!!

Waxa layaab ah cidda u bixisay magaca “Muqiithu_diin”? ma garanayo waxa gargaar ah oo uu diinta u taray? Maba garanayo diinta uu sheegayaa tan ay tahay?ma diinta Islaamka ayuu u gargaaraa mise diinta Kiristaanka?!

فَإِنَّهَا

لَا تَعْمَى ٱلْأَبْصَٰرُ وَلَٰكِن تَعْمَى ٱلْقُلُوبُ ٱلَّتِى فِى ٱلصُّدُورِ ﴿٤٦﴾ iyagu ma la’a indhaha aragtida ee waxa ay la’yihiin indhaha qalbiga ee laabta ku dhexjira)

Bal aan yar milicsanno halka cidhib dambeedkiisi noqday..isaga iyo mid kasta oo aakhiradiisa ku iibsada adduunyo sida uu ku dambayn doono.

Wiilkani diintii Nasaarada ayuu qaatay,boqoraddii Joorjiya waa uu guursaday markuu waxyar joogayba waxa uu ogaaday inay gabadhani ku xidhan tahay adoon u shaqeeya,waxay kula hadashaa hadalo aad u kakan,kelidiis ayuu iska fadhiyaa qolkan, ka dib maalin ayuu ugu soo galay qofkiisi addoonkii oo kula hurda furshaaskiisi,gaashaanka ayuu u daruuray arrintaas,waxa uu doonay inuu ka jaro xidhiidhka ninkan ay la waddo waxay ugu jawaabtay si isla wayni ka muuqato “hadaad sidaa raalli ku tahay joog haddii kale joogi maysid”.., wuxuu yidhi kama raalli ahi sidan, waa ay fogeysay (waddan kale) waxa ay u wakiilatay cid u diida socsocodka xorriyaddii ay gebi ahaanba kala wareegtay,wax kastana waa ay ka xajartay,ka dibna nin kale ayey iska guursatay..!!

Ilaahay ayeynu ka magan galnay dullinimo,ilaahay waxa aynu waydiisanaynaa in uu ka dhigo camalladeena kuwa ugu khayr badan khaatumadeeda,maalinta ugu khayrka badan maalinta aan ilaahay la kulmayno.

روى مسلم عن أبي هريرة ﷺ قال: قال رسول الله ﷺ: «بادروا بالأعمال فتناً كقطع الليل المظلم، يصبح الرجل مؤمناً ويمسي كافراً، أو يمسي مؤمناً ويصبح كافراً، يبيع دينه بعرض من الدنيا».

Muslim waxa uu ka weriyey Abi Hurayra (RC) In uu yidhi rasuulku (NNKHA): “U deg dega camallada fitnada ah sida mugdiga saqda dhexe gudcurkeeda,ninku waxa uu waaberiistaa isaga oo mu’min ah markaas ayuu galabaystaa isaga oo gaal ah,waxa uu

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

galabaysanayaa isaga oo mu'min ah markaas ayuu waaberiistaa isaga oo gaal ah,diintiisa ku iibsanaya waxyar oo adduunyo ah".

Dhacdada afraad:

Waxa dhacday sannadkii (620h) arrin ay qaar aamin san yihiin in uu yahay male awaal,nooceeduna cusub yahay,masiibooyinka ummadda haleelay waa badnaayeen sannadahaas,xaaladaha dhaqaale aad u liiteen weliba soo noqnoqonayeen,xaaladda siyaasadeed,ciidan iyo akhlaaqeed ayaa dhintay..dhamaan masiibooyinkaas waxa ugu sarreysay waxaa dhulka muslimiinta gobollo badan oo ka mid ah Ayax waxa uu cagta mariyey sida Ciraaq,Jasiira Bakar,Shaam,Faaris iyo kuwa kale..

Ma taas baa male awaal ah?!

Haka yaabin walaahi.. kitaabka ilaahay ayaa lagu sheegay

وَلَوْ أَنَّ أَهْلَ ٱلْقُرَىٰٓ ءَامَنُوا۟ وَٱتَّقَوْا۟ لَفَتَحْنَا عَلَيْهِم بَرَكَٰتٍ
مِّنَ ٱلسَّمَآءِ وَٱلْأَرْضِ وَلَٰكِن كَذَّبُوا۟ فَأَخَذْنَٰهُم بِمَا كَانُوا۟
يَكْسِبُونَ ﴿٩٦﴾ haddii

dadka magaalooyinka dadka deggani iimaan dhab ah laga heli lahaa,waxaanu u furi lahayn barakooyinka samada iyo kuwa dhulkaba,laakiin,laakiin way beeniyeen markaas ayaanu ka qaadnay waxay kasbadeen darteed.

Waa xaqiiqooyin ku sugan kitaabka ilaahay kor ahaaye


Haddii alle ka cabsigu ummadda maasheeyo waxaa loo furi lahaa nimcooyinka dhulka iyo kuwa samada

Haddii alla ka cabsiga laga waayo ummadda dhexdeeda sida aynu ka aragnay taariikhda dadkan Muslimka ahaa ee samankaas noolaa

Waxaynu aragnay rafaad,dhib xaalado aad u adag masiibooyin tiro beelay.

Waxaaba Ilaahay (sw) ku sheegay Ayaxa laftiisa sifo ka mid ah sifooyinka uu ku tusayo awooddiisa cidda qaadan wayda shareecadiisa iyo manhajkiisa_ wuxuu yidhi isaga oo ka waramaya qoomkii fircoon

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks


فَأَرْسَلْنَا ﴿١٣٢﴾
عَلَيْهِمُ ٱلطُّوفَانَ وَٱلْجَرَادَ وَٱلْقُمَّلَ وَٱلضَّفَادِعَ وَٱلدَّمَ
ءَايَٰتٍ مُّفَصَّلَٰتٍ فَٱسْتَكْبَرُوا۟ وَكَانُوا۟ قَوْمًا مُّجْرِمِينَ

(waxaanu ku siidaynay markay ka jeesteen aayadahayagii duufaan,Ayax,injir ama koron korro,ama daani,rah,dhiig,aayado la kala dhig dhigay, waa ay is kibriyeen waxa ayna noqdeen duul dembi falayaal ah).

Waa aynu arkaynaa Ayaxa lagu salliday caalamka Islaamka muddo sannad ah ama ka badan..ma aha inkaar ilaahay dadka la maagay ee waa waxa ay galabsadeen ayey ila tahay ayna u ekayd inay dib isugu noqdaan taariikhdana dib u xasuustaan..isuguna yeedhaan inay xagga ilaahay u noqdaan.. sidaas hadday sameyn waayaan socdaalka Ayaxu ma noqonayo mid iska soo kudaalay ee waa mid amar ku soconaya..ilaahay waxa aynu ka magan galnay cadhadiisa.. waxa aynu ilaahay waydiisanaynaa in uu nagu irsaaqo cabsidiisa,badhaxtirid iyo camal wanaagsan.

Dhacdooyinkii sannadkii 621Hijriga:

Sanadkan waxa uu isku dayey Qiyaasudiin in uu xukunkiisa salka u dhigo gobollada Faaris (koonfurta iyo galbeedka) laakiin waxaa dhexmartay fitno isaga iyo nin la yidhaahdo “Sacaadadiin Dakla”oo madax ka ahaa gobolladan dagaal ayaa ka dhex qarxay muddo dheer socday sannadkan oo dhammi waxa uu ku dhamaaday dagaal ilaa ay labadii dhinac ku heshiiyeen in ay kala qaybsadaan waddanka!.

Markan uu Qayaasudiin mashquulka ku ahaa la dagaalanka Sacaadadiin ee koonfurta Iiraan ayaa koox yar oo Tataar ahi soo weerareen oo aan ka badnayn saddex kun magaalada Ray seefta ayey duldhigeen sida ay doonaan ayey u laayeen dhulkana dhaceen oo iskaga baxeen,waxay galeen magaalada Saawa sida tii hore oo kale ayey ku sameeyeen,waxay galeen magaalada Qum (koonfurta Dahraan imminka) iyo magaalada Qaashaan waa ay burburiyeen dadkiina laayeen,ka dibna waxay u jeesteen Hamadan waxay degdeg u bilaabeen in ay tirtiraan addoonsadaan dhacaan oo bililiqaystaan waa ay iskaga baxeen sidii ay uga baxeen kuwii hore,ka dibna iyagoo bed qaba ayey ku noqdeen Jingiskhaan..!!

Saddex kun oo askari ayaa sameeyey waxa aynu soo sheegnay bal ka warama..!!

Ilaahay (sw)ayaa ka dhigay indhaha Muslimiinta markay arkayaan Tataar sidii in ay arkayaan oo kale Libaaxyo,marka Tataarku ay arkaan Muslimiintana waxaa u muuqda Bisado,markaas ayaa haybaddii Tataarku kor u kacday haybaddii Muslimiintuna hoos u dhacday.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waayo?! Sababtu waa Muslimiinta oo iyagu isku mashquulay,markaas ayey kala garan waayeen cadowgooda iyo saaxiibkooda,iimaankooda ayaa yaraaday,adduunyadii ayaa la waynaatay,tarbiyadoodii ayaa xumaatay oo muddo dheer xumayd midhihii ka dhashay tarbiyad xumadaasna waa aynu aragnaa/aragnay.

Wuxuu yidhi Ibnu Atheer “sannadahan waxaa yaraaday roobabkii dhulka heli jiray markaas ayey hadba wax yari meel ka da’aan aan waqtigii loo bartay ahayn dhibaatada ay taasi keentayna waxay ahayd dadkii oo kala garan waayey xilli ay wax beertaan,intaas ka dib waxaa soo baxa geedo yar geedahaas yar ayaa haddana lagu sallidaa Ayax, ka dib dhulkii ayaa isugu baxay gabaahiir waxa uu ahaa (Ayaxu) mid ka baxsan xadka maceeshaddii ayaa cirka isku shareeray Ciraaq,Mawsil,iyo Jasiiraddi Bakar waxaa yaraaday waxii la quudanayey”.

Waxa dhacay waqtigan ee Masiibooyin ah Ayax,abaaro,midhihii oo laba waayey iyo waxyaalo kale oo badan laysna gartay in ay ahayeen Imtixaan xagga ilaahay ka yimid.

Haddii uu Muslimiinta soo maro waqti maceeshaddu kacdo,nabaadkii dhulkana la waayo,dhaqaaluhu dhulka galo,noloshunka ku adkaato,waa in ay dib ugu noqdaan nafahooda,si dhab ahna u xisaabiyaan naftooda, isla markaana ilaahay u bandhigaan kitaabkiisa naftooda.

Waxaa khasab ah in ay cudur helayaan isla markiibana dawada helayaan nooca uu doono cudurku ha noqdee.

مَّا فَرَّطْنَا فِي ٱلْكِتَٰبِ مِن شَىْءٍ

(“Waxba kagama aanu tegin kitaabka”)

Dhacdooyinkii Sannadkii 622Hijriga.

Labadan sano waxaa yara khafiifay weeraradii Tataarku ku hayeen galbeedka dawladdii Khawaarsimiya (galbeedka iyo waqooyiga Iiraan) waxay ku jeesteen in ay dawladooda isku xidhaan iyo sida ay ugu cago dhigi lahaayeen dhulka ay ka qabsadeen una xasilin lahaayeen bariga Khawaarsimiya ee ay haystaan iyo gobollada webiyada Sayxuun iyo Jayxuun,waqooyiga Afganistaan iyo bariga Iiraan.

Laakiin labadan sano waxaa dhacay wax cusub ka dib markii uu saaxadda kusoo noqday (Jalaaludiin Maxamed Khawaarsim Shaah) waa kii shan sano ka hor u cararay Hindiya (617h) waxaa ku adkaatay in uu noloshiisa ku dhamaysto ama u cuntami wayday aan nidhaahdo,waayo markii horeba lama lahayn boqorada Hindiya xidhiidh wanaagsani,ka dib waxa uu ogaaday in Tataarku ka tageen Faaris,Jingiskhaanna uu ku noqday waddankiisi si uu u soo xalilo arrimo siyaasadeed oo halkaas ka jiray hogaamiye kalena kaga tegay ciidamadii

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Tataarka,iyo in walaalkiis Qiyaasudiin uu haysto Faaris inta badan oo ay ku dagaalameen Sacaadadiin Dakla ka dibna ay ku heshiiyeen in ay waddanka kala qaybsadaan,oo badhkii badnaa uu qaatay Qayaasudiin heshiiskaasina waxa uu dhacay sannadkii 621h sidaan hore usoo sheegnay.

Waxa uu arkay Jalaaludiin in ay jaanis tahay uu ku soo ceshado maamulkiisi Khawaarsim, isaga oo raadinaya Mulkigii uu lumiyey,laakiin aragtidiisa si dhugleh uma eegin,mana baadhin xanuunadii dadka qalbigooda ku habsaday waqtigaas..ma uu garan in kala furfurashada dhiiga dadka mucaaridka ah oo la fududaysto ee weliba Muslimiinta ah in ay sababta ugu weyn ee dhibaatadan dhacday keentay ay tahay.

Ma uu garan Jalaaludiin in uu ummaddan iswada haysta ee itixaaman ,ee gobolba gobol la dagaalam isu soo dhoweeyo oo walaaleeyo laakiin mushkiladdii ayuu qayb ka mid noqday,waa mashaakil cusub oo usoo kordhay ummaddii Islaamka.

Muxuu sameeyey Jalaaludiin Maxamed?!

Waxa uu kasoo talaabay waadiga Sindi wuxuu soo galay gobolka Karmaan (koonfurta Bakistaan)waxa uu usoo dhaafay koonfurta Faaris(koonfurta Iiraan) ka dib waxa uu bilaabay in uu ursado ciidamo waxa uu u tegay (Sacaadadiin Dakla) waxa uu ugu biiray sida ay isugu kaashan lahaayeen la dagaalanka walaalkiis..!!

Waxa uu bilaabay Jalaaludiin in uu weeraro galaa bixiyo koonfurta iyo waqooyiga Faaris isaga oo la dagaalamaya walaalkiis Qayaasudiin ilaa uu gaadhay galbeedka Iiraan una dhowaaday Khilaafadii Cabbaasiyiinta,xidhiidhka ka dhaxeeyey Khilaafada iyo Khawaarsimiyana sidaan soo sheegnay ma uu ahayn mid wanaagsan,awood ayuuba is biday Jalaaludiin tamar darrona waxa uu ka dareemay Khilaafadii Cabbaasiyiinta,dagaal ayuu ogeysiiyeyba khilaafadii cabbaasiyiinta..(arrinkani waxa uu dhacayaa xilli Tataarkiina soo kulaalayaan bariga Iiraan!!!)layaab ma leh oo dadkan waynagii nidhi waxaa ku dhacay xanuun ah “indho la’aan siyaasadeed”Jalaaludiin ciidankiisi ayuu soo geliyey Basra,muddo laba bilood ah ayuu go’doomin ku hayey,ka dib waa uu iskaga tegay waxa uu uga dhaqaaqay waqooyi si uu ugu dhowaado Baqdaad oo ah caasimadda khilaafada,waxaa cabsi gashay khaliifkii Naasir Li Diinilaah ciidamadiisi ayuu heegan geliyey si ay isaga celiyaan Jalaaludiin,laakiin intaas wuu isku halleyn waayey,waxa uu sameeyey arrin aad iyo aad u foolxun oo laga yaqyaqsado,waxa uu gargaar waydiistay Tataarka uu leeyahay iga kaalmeeya la dagaalanka Jalaaludiin..!!!

Magacaa ba’

Ma Tataar buu u tegayaa isaga oo garanaya taariikhdooda iyo dagaalada ay Muslimiinta la galeen si ay uga caawiyaan la dagaalanka Jalaaludiin?! Xataa haddii uu gardarro kasta ku hayo Jalaaludiin,waxay kula dagaalamayaana uu

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

yahay xaq Tataar ma u imaanayaa si uu u badbaadiyo?! Miyaanuse ogayn hadday u yimaadaan oo ka takhalusaan Jalaaludiin talaabada labaad in ay iyaga noqonayso lana tirtirayo khilaafadan Cabbaasiyiinta sida ay u dhan tahay?!

Maxaad damacday khilaafadii Muslimiintaay?!

Ma waxaad damacsan tahay in aad kursigaaga ayaamo kusii fadhido?!

Ma waxaad damacday in aad dhimato adiga oo adoon Tataarka u ah kana dhowaysanaya in aad addoon u noqotid Jalaaludiin?!

Sidaas maaha _ma difaacayo Jalaaludiin_ waxaan si xun ugu dhaleecaynayaa sida uu umadda muslimka ah u kala qoqobay ee shar iyo dhibaato u dhexdhigay dhiigoodii xalaashaday iyo weliba sida uu ugu egyahay Saddaam Xuseen!! Sida uu ugaga tegay ummaddii Muslimka ahayd duni wada ololaysa guryohood iyo garaacdoodba ku ba'day ayuu doonayaa in uu imminkana la dagaalamo Cabbaasiyiinta..sidaas oo kale ayuu Saddaam markii ay damceen reer galbeedku Falastiin,Afganistaan ,Kashmiir.. waxaas oo dhan intuu iska indho tiray ayuu Kuweyt iska weeraray!!!

Marnaba mashaakilka dhulka Islaamka xalkeedu kama dhalan karo gacan shisheeye oo weliba gaalo ah,iyaga uun baa garanaya xanuunka hayaa nooca uu yahay daawadiisana garanaya.

Waxa uu ahaa Khilaafada Cabbaasiyiinta..sida nin tuug yari gurigiisa usoo dhacay oo kale,oo inta uu cararay tuugtii magaalada oo dhan u yeedhay isaga oo uga dacwoonaya oo tuugtii waaweynaydna gurigii oo dhan xadeen,weliba gurigiisa qudha kuma joogine guryihii deriskana ku dareen..!! waxaa la mid ah kaalma weydiisiga khaliifka ee Tataarka uu kaalmo weydiisanayo,laakiin reero Tataar waxay mashquul ku ahaayeen dalballaadhsigoodi iyo maamulka dhulalkii aadka u balaadhnaa ee ay qabsadeen sidaa awgeed iyaga iyo Jalaaludiin wax dagaal ahi ma dhexmarin ilaa laga gaadhayey sannadkii 622h dhamaadkiisi..mudadaas ayaa Jalaaludiin isaguna ka faa'iideystay inuu qabsado dhamaan gobolladii ku xeersanaa Baqdaad,ka dib waqooyiga Ciraaq, ka dib waqooyiga Faaris,ka dibna waxa uu bilaabay in uu galo Adriibayjaan iyo wixii ku hareeraysnaa ee ahaa Muslimka

Waxa ay ahaayeen dagaaladiisu_dagaalo aad u fasaad badan dhiig badani ku daatay iyadoo waxa meesha isku dilayaana yihiin dad Muslimiin ah..! waxyaabaha uu samaynayey waxa ka mid ahaa dil, addoonsi,burburin,iyo dhacba..waxaadba mooddaa inuu ka bartay Tataarka sida ay wax u cadaabaan,halkii ay ahayd in uu ka barto sida loogu naxariisto oo dhibtii ay gaadhsiiyeen(dil,kufsi,dhac,jidhdil,gawrac,soconayey sannado) loo illowsiiyo dadkaas walaalihiis ah.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Ka dib dhul fidsigiisi wuxuu ku qabsaday mandaqadda Joorjiya ee Nasaarada ahayd ka dib markii uu si aad u foolxun dagaal ugu jebiyey,walaalkiis Qiyaasudiinna waxa uu la galay heshiis muddeysan,ciidamadiina waa laysku daray laakiin labadooduba waxa ay ku kala jireen digtooni midba kan kale iska eegayo.

Maamulkii Jalaaludiin waxa uu gaadhay koonfurta Faaris ilaa waqooyi galbeed badda Qaswiin,in kasta oo ay tahay dhul aad u balaadhan haddana qalaaqulka iyo dhibaatooyinka dhexyaalay waa ay buuxeen,weliba waxaa sii dheer waxa uu cadaawad ku abuuray quluubtooda Jalaaludiin oo ah dadkii dhulkan uu qabsaday haystay waxaa ka mid ah Khaliifka Cabbaasiyiinta Naasir Li Diinillaah..siyaasad cadaawadeysan,dhagar badan,xadhig maran ah waa siyaaddii uu ka dhaxlay aabihiis Maxamed Khawaarsim Shaah oo aan hore uga soo sheekaynay..hoog iyo halaag waxaan ahaynna uma soo kordhin Muslimiinta..

Dhamaadkii sannadkii 622h waxaa geeriyooday Khaliifkii daalinka ahaa ee fasahaadka badnaa Naasir Li Diinillaah.. ka dib markii uu xukumayey toddoba iyo afartan sannadood oo xidhiidh ah,aad ayey u foolxun tahay ka sheekaynta taariikhdiisu,waa uu kharibay Ciraaq,dulmiyey dadkeedii,xoolahoodi iyo hantidoodii ayuu iska qaatay,dhibaatooyin aanay qaadi karin ayuu u geystay,cashuur iyo kallifaad joogto ah ayuu ku hayey,xukun ayuu iskaga xukumi jiray dulmi ah,waxaas oo dhan waxaa u dheeraa denbi aad u weyn oo uu galay kaasoo wax kasta oo la dhinac dhigo ay yaraanayaan waa gargaarka uu Tataarka weydiistay iyo ummadda Islaamka ah oo uu cadawgii madhin lahaa ugu yeedhay.

Dhacdooyinkii sannadkii 623 Hijriga.

Waxaa khilaafadii la wareegay Daahir Naasir Li Diinillaah,aad iyo aad ayuu uga duwanaa aabihiis waxa uu ahaa nin saalix ah ilaahay ka cabsada sama talis ah,caddaaladdii iyo wanaaggii ayuu soo celiyey waloow ay ahayd dal dhan oo xumaaday isla markaana muddo gaaban aan lagu wanaajin karin, taariikh yahankii casrigaas noolaa wuxuu leeyahay : “haddii la yidhaahdo khaliifkan oo kale khilaafada ma qabanin ka dib Cumar bin Cabdi Casiis run ayuu sheegi lahaa” cashuurihii dadka lagu amray ayuu joojiyey,dadkii xaqooda la dulmiyey ayuu usoo celiyey,kuwii dulmi dartii jeelasha loogu guray ayuu oodda ka qaaday,waxa uu wax siin jiray foqorada ilaa laga yidhi: yaab ayuu lahaa marka loo eego casriga uu noolaa oo fasaadku dunida qabsaday.

Waxa uu leeyahay Ibn Atheer isaga oo casrigiisan noolaa “waxa aan ka baqayaa in ifka loo sii dayn waayo,waayo casrigan waalan iyo dadka sidaa u wanaagsani isuma qalmaan..!!”ilaa heerkaas ayey umaddani fasaadsanayd.

Subxaanalaah, waa ay rumawday hadalkii Ibn Atheer deg deg ayaaba uu u geeriyooday Khaliifkii Wanaagsanaa Daahir Naasir Li Diinillaah,xukunkaba waxa uu hayey sagaal bilood iyo maalmo keliya,waqtigaas yar maceeshaddii ayaa hoos u

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

dhacday,dhaqaalihii ayaa wanaagsanaaday Ciraaq,waa calaamado aan qofka caqliga leh ka qarsoomaynin.. ilaahay ayaa xumo ka nasahan dhulka dhigay qawaaniin aan is beddelaynin!! Laakiin ma jirtaa cid wax ku qaadanaysaa?!!

Geeridiisa ka dib waxaa xukunkii la wareegay Al Muntasir Billaah,waxa uu xukumayey ilaa 640h muddo aan ka yaraynin toddoba iyo toban sano.

Xilliga xaaladda noocaas ahi jirtay Jalaaludiin waa uu sii waday dagaaladii uu mandaqadda ka waday lama dagaalamayo Tataar,laakiin waa Muslimiin!! Waxa uu qabsaday magaalooyin iyo gobollo waxaana ka mid ahaa waxyaabihii yaabka lahaa markii uu go'doomiyey magaalada "Khalaad" ama "Akhlaad" waa magaalo Muslim ah kuna taal(bariga Turkiga imminka) dad badan ayaa uu ka laayey wax kasta oo ay lahaydna waxay gacanta u galeen ciidamada Khawaarsimiyiinta dhac iyo boob xataa waxay faraxumeeyeen dumarkii Muslimaadka ahaa..!!

Dhab ahaan wax lagu sheego la garan maayo akhlaaq xumada heerkan gaadhay,siyaasaddan sillan,iyo xikmad darradan dhaqanka iyo diintaba ka madhan…haddaan hadalkani lahayn tixraacyo badan oo dadkii noolaa waqtigaas ay qoreen caqliga ma geli karteen..!! ka dib waxaa dhacay arrin Muhiim ah sannadkii 624h arrin kaasina waa geeridii Jingiskhaan,waa hoggaamiyihii dembiilaha ahaa dhiigya cabka ahaa ee Tataarka hogaamin jiray, cimrigiisana lagu sheegay laba iyo Toddobaatan jir,waxa ka buuxa oo uu la dhintay dil,dhac,boob,kufsi,kharbudaad,cidhibtir iyo cagta marin.

Waxa uu dhisay Maamul aad u balaadhan intii uu xukunka hayey laga bilaabo Kuuriya barigeeda ilaa Faaris galbeedkeeda..waxa lagu qabsaday dunidan dhiig dad iyo maalkoodii(inta ugu badani tahay Muslimiin!)laakiin canaan oo dhan waxaa iska leh kuwa daciifay illaa heerkaasna daciifnimo ka gaadhay isla markaana uu jaanis ka helay Faasidkaasi in uu dhulka Muslimiinta ka sameeyo waxa uu doono.

Geerida Jingiskhaan arrimihii oo dhan ayaa isku dhexdaatay Tataarkiina waxa ay ku dedaaleen in ay waxii dadka Muslimiinta laga qaaday hanti iyo dhulba ay adkeystaan laga bilaabo dhulalka Muslimiinta ilaa badhtamaha Iiraan,waqtigaas oo Jalaaludiin ku jiro dhul ballaadhsigiisi ku wajahnaa gobolada galbeed ee Iiraan iyo galbeedka badda Qaswiin..waxaadba moodda labada daraf in mid kasti raalli ku yahay waxa uu hantiyey,lagana siman yahay qolo kasti in ay ilaashato waxa gacanta ugu jira ee ay isu haysato in ay xaq u leedahay.

Waqtigii 624h ilaa 627h:

Waa waqtigii degganaanshaha iyo nasashada ay keentay geerida Jingiskhaan.

Muslimiintu xaalad noocma ah ayey waqtigaas ku jireen?

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Siday hore u ahaan jireen ayey ku jireen waa ay is cunayeen is dilayeen,shaqaaqooyin badani u dhexyaaleen..ismay odhan ka maydha dhibtii uu mudada dheer ku hayey Jingiskhaan masiibo ku dhacday ,dib uma ay midoobin ma walaaleynin dadkii Muslimka ahaa,kuma ay dedaalin in ay dhulkooda ka xoreeyaan haaweyda qabsatay inta ay geerida Madaxweynahooda ku mashquulsan yihiin.

Khilaaf ayaa ka dhex cusboonaaday Jalaaludiin iyo walaalkiis Qiyaasudiin,ilaa uu Qiyaasudiin walaalkiis u adeegsaday cadaw kale oo gacan ka siiya la dagaalanka walaalkiis.

Ma aha intaas oo keliya,waxay ahayd mandaqadda oo dhami mid qalalaase hadheeyey,maaha mandaqadda Ciraaq iyo Faaris oo keliya,laakiin meel kasta oo dad Muslimiin ahi deggan yihiin,waa dagaalo u dhaxeeya madaxda Shaam iyo Masar,oo joogto ah weligoodna ma midoobin oo labadaba ay haysteen dad qaraabo/ehel ah, sida Ayuubiyiinta oo kale,mararka qaar walaalo ayey dagaaladani dhex mari jireen,arrimahaas midhihii laga dhaxlay waxay noqotay arrin foolxun sannadkii 626h,arrintaasina waa markii la dhiibay Baytal Maqdis (waa masjidkii uu Salaaxudiin ka xoreeyey Siliibiyiinta hadda ka kor)!..!! Muslimiinta Shaam ayaa isku afgartay in ay dhiibaan Maqdis ay dhaafsanayaan in ay Siliibiyiintu ka tagaan gobolo yar yar oo ka mid ah Shaam oo gaaladu haysato.

Waa daciifnimo qaado markaad quwadda lahayd ka dib,dullinimo qaado adoo cisi leh ka dib,is jebi adigu markaad kuuleysatay ka dib..!!

Jalaaludiin dagaaladiisi ayuu sii waday waa dagaalo indho la'aan ah magaaladii Khalaad ayuu mar labaad go'doomin saaray ka dib markii ay kasoo horjeesatay xukunkiisa,waxaa ku dheeraaday waqtigii uu go'doominta ku hayey ilaa ay dadkii cuneen fardihii,dameerihii..ka dibna Eydii iyo Bisadihii.. Jiirarkii!! Ka dib waa ay u jabtay waxay u gacan gashay Jalaaludiin intii ugu badnayd waa uu laayey,waa uu addoonsaday burburiyey magaaladii caruurihii ayuu qaatay ka dibna waa uu iibiyey Caruurtii dhamaantood..!! sida uu leeyahay Ibn Atheer: "waxa uu sameeyey wax hore loo maqlay ma ahayn waxaana khasab ah in aan ilaahay arrintaas ku dhaafaynin" inkasta oo ilaahay naxariistiisu ballaadhan tahay haddana waa uu u kala cadaalad qaadayaa addoomada mid kastana waxa uu xaq u yeesho la siinayo.

Waxaa halkaas jawaabteedu inooga soo baxaysaa sababta ilaahay ugu salliday Tataarka dadka sidaas ula dhaqmaya Muslimiinta walaalihiis ah in lagu soo saari doono nooc kale oo cadaab ah kaas oo dhadhansiiya waxa uu dadka dhadhansiinayo,kamana guuleysanaysid inkaartaas lagugu salliday illaa aad adigu ilaahay xidhiidh dhab ah la yeelato,hadaad sidaasi yeeshose cidi kaama adkaanayso.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

إِن يَنصُرۡكُمُ ٱللَّهُ ﴿١٥٩﴾
فَلَا غَالِبَ لَكُمۡۖ وَإِن يَخۡذُلۡكُمۡ فَمَن ذَا ٱلَّذِي يَنصُرُكُم مِّنۢ
بَعۡدِهِۦۗ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلۡيَتَوَكَّلِ ٱلۡمُؤۡمِنُونَ ﴿١٦٠﴾

haddii ilaahay idin guuleeyo ma jirto cid idinka gacan saraynaysaa,haddii uu idin hoojiyona waa kuma kan idiinka gargaarayaa,ILAAHAY ha talo saartaan Mu'miniintu.

****

Duullaankii labaad ee Tataarka

Waxaa soo galay sannadkii 628h oo sidda mawjado weeraro Tataar oo aad u xoog badan kuna wajahan umadda Muslimiinta ah iyo dhulkooda..arrimo dhawr ah ayaa keenay in uu duulaankani ka xoogbato kii bilaabmay 617h ilaa 620h ka xawaare badan oo ka xoog badan arrimahaasina waa kuwan soo socda.

1. Waa ay gilgilshay geeridii Jingiskhaan dawladdii Tataar,illaa xukunkii uu la wareegay nin la yidhaahdo "Okitay"nidaamkii iyo kala dambayntii dawladdiisa ayuu sugay oo ay xarun u ahayd Mangooliya iyo Shiinaha waana sannaddii 624h ilaa 627h.

Intaas markii uu kasoo jeestay ayuu feker cusubi ku dhashay,fekerkaas oo ah duulaan in lagu kala bixiyo caalamka Islaamka iyo in uu dhamaan gacanta ku dhigo waddanka Ruushka _waayo waatii ay mar hore jebiyeen ciidamada Tataarka..iyo isku day ah inuu dhamaan cariga reer Yurub gudaha u galo oo furto..waxaa ay u egtahay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

duulaan uu ku qaado Khilaafada Cabbaasiya iyo dawladda Baqdaad riditaankeedu riyooyinkiisa uguma jirin,laakiin waxa ay Diiraddiisu saarneyd Yurub,intii uu waqti badan iyada hortaagnaan lahaa,waxaa lagu sababayn karaa arrintan dhufaysyadeeda oo adkaa,degaanadeeda oo ku adkaa,ama waxa uu iska fogeynayey in uu dhamaan Muslimiinta Ciraaq,Shaam,Masar isku soo jeedin doono hadduu rido Khilaafada Cabbaasiyiinta oo Muslimiinta u ahayd Taash si kasta oo dadkeedu diciif u yihiin..sidaa darteed waxa ay ka dhigeen talaabooyinka ugu dambeeya furashadeeda..waa arrin aad looga fekeray oo caqli badan lagu daray.

Waxa uu soo saaray Okitay,ciidan aad u xooggan oo loogu talo galay in aan meelina celin isla markaana uu hoggaamiye uga dhigay nin la yidhaahdo 'Shormujaan'wuxuu ciidankan Tataar usoo qalab qaatay caalamka Islaamka.

2.waxaa la arkay sannadkaas (628h)kala daadsanaanta ummadda Islaamka oo xoggaamiye kasta uu xil iska saarayo xuduudiisa haba yartaa,xataa qaar ayaa xukumayey magaalo keliya iyo tuulooyinka ku xeeran,waxaa laga waayey mid intaas dhaafsiisan,iyaga ayuun baa laysku dhaqaajiyey midba midka kale ayuu dhagrayey waxaa laga waayey laba is aaminta..laba feker oo midaysanina maba jirin.

3.waxa uu sannadkani xambaarsanaa_mar labaad_cidhib xumadii Jalaaludiin Khawaarsim Shaah!.

Mar alaale iyo markii ay Tataarku weerar soo galaabixiyeen caalamka Muslimka,waxaa soo gaadhay warar sheegaya in Jalaaludiin uu jilicsan yahay sannadka ka dib laba guuldarro oo isu raacday waa Ashraf Caadil oo haystay Diyaaru Jasiira oo dhacda waqooyiga Ciraaq iyo Koonfurta Turkiga,waxaa jirtay koox Ismaaciiliya la yidhaahdo oo Shiico ahayd oo gobollo Faaris ka mid ah xukumi jirtay.. waxay waraaq u direen Tataar ay kaga waramayaan taag darrada Jalaaludiin,sababtoo ah dagaalo ayaa ka dhexeeyay iyaga iyo Jalaaludiin,markaa waxay doonayeen in ay kaga aargoostaan warkiisa xun ee ay gudbinayaan.

Waxaa timid huwantii Tataarka waxa ay arkaanba intii jidka ay kusoo jireen cagta ayey soo mariyeen waana burburiyeen waxkasta oo burburintoodu u suurto gashay,bisayl iyo ceedhiinba waa ay soo liqeen..ujeedada ugu weynina waxa ay ahayd in ay qabtaan Jalaaludiin Khawaarsim..

Waxaa layska helay goob si xun loogu jebiyey,cago ayuu is dhigay Tataarka oo arkaya ka dib markii ciidankiisina kala furfurtay,waaba isaga oo la kulmi doona wixii aabihii ku dhacay oo kale kow iyo toban sano ka hor..wuxuu gelaya tuulo oo ka baxayaa,magaalo mid kale uga baxayaa..Tataarkuna dabadiisa ayey dilayaan dhacayaan,boobayaan,ilaa uu cararkii ku galay Jasiirada Ciraaq waqooyigeeda ku taal halkaas oo uu ciidankiisiina kaga lumeen dhamaantood,waa kelidiis,la baacsanayo sidii ku dhacday Aabihiis,meel uu jaan iyo cidhib dhigay ayaa la waayey bilo xidhiidh ah,ma jirto cid garanaysaa in la dilay ama uu u talaabay waddan kale.. ka dib waxa uu u talaabay tuulo yar waxa uu kula kulmay nin Kurdiyiinta Ciraaq ah oo beer

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

falanaya waxa uu su'aalay waar kuma ayaad tahay?beerwalihii oo la yaabban waxa uu ninkani dahab iyo Jawhar sito,wuxuu ugu jawaabay: waxaan ahay boqorkii Khawaarsimiya..sidaas waxa uu u leeyahay si uu cabsi ugu rido beerwalahan,laakiin meeshan arrin ilaahay ugu talo galay ayaa la fulinayaa oo aan cidina is hortaagi kareynin..waxa ay dileen ciidamada Khawaarsimiya ninkan beerwalaha ah walaalkiis!! Mar alla iyo markii uu hadalkaas maqlay gartayna in ninkani yahay qofka uu sheeganayo waa uu soo dhoweeyey karaameeyey,

Cunto u keenay ilaa uu kala degay Jalaaludiin oo iska seexday,markay halkaas marayso Beerwalihii ayaa iska kacay Faash/Faas ayuu soo qaatay isaga oo hurda ayuu kurka hordhigay,dahabkii iyo Jawhartiina qaaday oo u geeyey Shahaabudiin Qaasi waa ninka meeshan xukuma..kii dulmi geystaa hoogga Jalaaludiin dhadhamiyey ha sugo!!

Sidaas ayey cidhib dambeedkii daalimiintu noqotay..kuwii kibray..ku qooqay in ay Muslimiinta addoonsadaan..dadkii ayey iska yeesheen,ma ay ilaalin xaq ilaahay(SWT) ku leeyahay ma ay garan xaq ay ku leeyihiin kuwii ay dusha kaga fadhiyeen,ma siin Rixim xaqa uu ku leeyahay naftooda oo keliya ayey u noolaadeen run ayuu sheegay kii yidhi "ma istaahilo in uu dhasho qofka naftiisa oo keli ah u nooli".

Sumbo dhego adaygaa diloo saara weligeed,Suburdhena intuu ladan yahay buu talada seega!

روى البخارى ومسلم عن أبي موسى الأشعري ﷺ أن رسول الله ﷺ قال:
«إن الله ليملي للظالم.. حتى إذا أخذه لم يفلته.. ثم قرأ: ﴿وَكَذَلِكَ أَخْذُ رَبِّكَ إِذَا أَخَذَ الْقُرَى وَهِيَ ظَالِمَةٌ إِنَّ أَخْذَهُ أَلِيمٌ شَدِيدٌ﴾ [هود:١٠٢]».

waxaa Bukhaari iyo Muslim ay kasoo weriyeen Abi Muusa Al Ashcari in uu Rasuulku (NNKHA)Yidhi: "ilaahay daalinka waa u seeto dheerayaa..hadduu qabto se kama baxsado.. ka dibna waxa uu akhriyey : Sidaas weeye Qabashada Rabbigaa hadduu magaalo qabto daalimad ah qabashadiisu aad bay u daran tahay"

4.Natiijada arrimaha aan kor kusoo sheegnay , dhaxalka tarbiyad xumada, iyo la'aanshaha fahamka saxda ah ee Islaamka,ku dhegsanaanta adduunyada ilaa heerka ugu hooseeya,dadka oo aan hadaf cad lahayn.. ma kala garanayaan kan cadawga u ah iyo kan saaxiibka la ah,Natiijada dagaaladii Tataarka ee lasoo dhaafay,iyo taariikhdii madoobayd ee magaalo kasta iyo tuulo kasta oo ay mareen Tataarku..dhamaan arrimahaas oo dhan waxaa ka dhashay in ay dadku u dhinteen nafsiyan oo ay jabeen iyada oo aan cadawba u imaanin,ma awoodaan in ay seef sare u qaadaan,Faras in ay fuulaan,xataa asal ahaan waxa ka baxdayba maskaxdooda in wax layska celin karo..markaa shaki kuma jiro muhiimadda ay arrintaasi Tataarka u

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

leedahay,waa in ay helaan magaalooyin iska furan oo looga yaacay,iyo kuro badan oo diyaar u ah in la jaro..!!

Waxa uu ka waramayaa taariikh yahanka Muslimka ahi Ibn Atheer dhacdooyin yaab leh oo dhacay lix boqol iyo sideed iyo labaatankii qaarna uu dhegihiisa ku maqlay qaar kalena laga qoray xilliyadaas ay jireen oloha dabargoynta dadka Muslimka ee Tataarku wuxuu leeyahay:

- Waxa uu soo gelayey hal qof oo Tatari ahi tuulo dad badani ku noolyahay markaas ayuu ku bilaabaa in uu mid mid u laayo,hal qof oo ku dhiirada waa laga waayaa in uu is iska celiyo ama ugu yaraan is difaaco..!!
- Nin Tatari ah ayaa nin buu qabtaa isaga oo aan hub sidan markaas ayuu ku yidhaahdaa madaxa dhulka dhig,markaas ayuu dhigaa,Tataarigii ayaa Seef doonta isagoo sidii dhulka madaxa ugu haya kusoo noqdaa oo ka jaraa kurka..!!
- Nin Muslim ah ayaa uga sheekeeyey Ibn Atheer :waxa aan la joogay toddoba iyo toban rag ah,waxaa noo yimid nin Tatari ah,waxa uu amar nagu siiyey in midkayoba mid qabsado,waxa ay u deg degeen asxaabtaydi in ay sameeyaan sidii uu nagu amray,waxaa idhi: waar waa hal nin keliya ee maxaynu inta aynu dilno u carari weynay?!! Waxay yidhaahdeen:waan ka cabsanaynaa waxaan idhi: waar waa uu idin laynayaa wax saacad ka yarba mayd baynu nahay ee aan iska celino Walaahi ayaan mid igu raacin,waxaan la soo baxay Mindi waan dilay ka dib waanu cararay anagoo badbaadnay dhamaantayo tusaalaha noocaas ahi waa uu badan yahay..!!
- Waxa ay Tataarku soo galeen magaalo la yidhaahdo Badliis oo imminka ku taal koonfurta Turkiga waa magaalo wada dhufays ah hal waddo ayaa gebigeedaba gasha oo cidhiidh ah dhinac walbana buuro ka xigaan wuxuu leeyahay mid ka mid ah degaankeeda :haddi aanu heli lahayn shan boqol oo farda fuul.. hal qof kama badbaadeen Tataarka,wadada ayaa cidhiidh ahayd,koox yarina waa ay ku jebin kartaa koox badan.. laakiin dadkeedii waxa ay uga yaaceen buuraha magaaladiina waxay uga yaaceen Tataarkii iyaguna waa ay gubeen magaaladii gebi ahaanteed..!!
- Muslim kasti inta aan la dilin ayuu dhaartaa ilaahay baan kugu dhaarshee hay dilin “maya Walaahi hay dilin” kelmeddani waxa ay noqotay waxa ugu badan ee ay maqlaan Tataarku,markaa hees bay ka dhigteen “Maya Walaahi..”.. waxa uu leeyahay nin Muslim ah oo ku dhuuntay daar laga qaxay oo burbursani:waxa aan ka arkayey Tataarka daaqad guri raggii markay laayeen dumarkiina addoonsadeen ay gaadiidkooda fuulayeen iyagoo ciyaaraya oo qosqoslaya lehna “Maya Walaahi..Maya Billaahi”.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Xaalka Muslimiintu heerkaas ayuu gaadhsanaa waqtigaas.. Niyad jab dambaska ka dhigay iyo duulaanka Tataarka oo aad u xoog badan.

Shoormujaan muxuu sameeyey ka dib geeridii Jalaaludiin?

Waxa uu Shoormujaan isku qabsaday waqooyiga Faaris (imminkana ah waqooyiga Iiraan)ilaa Imbiraadooriyadda Tataarka sannadkii 629h,ka dib waxa uu ku jahaystay gobollada Adriibayjaan wuxuu duldejiyey huwantiisi (khariiradda eeg lam 8).

Guulahaas Tataarka waxa ka qayb qaatay geeridii Jalaaludiin ee aynu soo marnay,waxaa ay sababtay in dhamaan gobolka Faaris uu u gacan galo Tataarka,marka laga reebo luuq yar oo ay degganaayeen Ismaaciiliyadii Shiicada ahayd ee aynu soo tilmaanay,(eeg khariiradda lam 9)

Ka dib waxa uu bilaabay in uu dhamaystiro maamulkiisana dejiyo duulaamadana uu joojiyo ilaa inta uu yara nasanayo,ciidankiisana sugayo iyo in uu barto degaamada ku xeeran meelaha ku dhow goboladan uu qabsaday.. weliba waxa uu sheegtay in uu Suldaan u noqdo dhulkan.

Waxa uu degganaa halkan Shoormujaan muddo shan sano oo dhamaystiran..laga bilaabo 629h ilaa 634h mudadaas shanta sano ahi koox mucaarad ah oo Muslimiin ah lama arag.. wax dhaq dhaqaaq guumaysi diid oo Muslim ah lama arag!! Dhinac kasta waxa ka buuxay gobolladan Adriibayjaan,Faaris,Ciraaq,Mawsil,Masar,Xijaas iyo kuwo kale..laakiin mid waliba waxay la ahayd in ay arrintani u taalo Faaris iyo Adriibayjaan umana arkin in ay Masiibo guud tahay oo dunida Muslimka badhna halaagtay badhna u hadhay..!! ma ay dareemin inkaartani in ay tahay mid dhamaan degi doonta dhulka Muslimiinta waajibna ay tahay in wax laga qabto si kastaba halooga qabtee..sidoo kale ma ay fahmin in masiibadan wareegaysaa maalin uun dul degi doonto maalintay doontoba ah ahaatee..intaas waxa dheer in Muslimiinta Shaam,Ciraaq,Xijaas iyo Masar badankoodu isku ahaayeen Carab,halka inta ugu badan Muslimiinta Adribayjaan,Mandaqadda Faaris bariga dawladdii Khawaarsimiya aanay ahayn iyagu Carab..maqnaanshaha fahamkii saxda ahaa ee Muslimka..waxaa kale oo maqnaa dhamaan aas aaskii dhabta ahaa ee diintan Muslimku ku aas aasantay,qofka Muslimka ah ee weliba carabka ahi carab kale oo Muslim ah uma arkaynin walaalkiis laakiin waxa uu u arkayey cadawgiis..waxaadba moodaa in ay isu ahaayeen dab iyo gaas.. halkii ay ka ahayd in ay walaalo noqdaan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

«إنما المؤمنون إخوة».

Mu'miniintu waa walaalo"

Waa arrin aad u foolxun in Carabka Muslimka ahi uu u arki waayo Carabka walaalkiis,Afgaanigu walaalkiis u arki waayo Afgaani kale Hindiga,Shiishaani,iyo Faariskub...arrin aad u xun weeye...waay Diinta Muslimka iskuma xidho Jinsiyad,midab,dhaqan dhaqaale..laakiin waxaa dabar u ah oo isku xidhaa waa Ilaahay(swt) iyo Rasuulkiisa (NNKHA) la rumeeyo diintun waa taas..isku xidhka caqiidada..wax kale oo ka oo isku xidhaa ma jiro.

Sidaa darteed ayuu Nebigu leeyahay:

روى الإمام أحمد بسند مرسل عن أبي نضرة - رحمه الله - قال: قال رسول الله ﷺ:«يأيها الناس، ألا إن ربكم واحد، وإن أباكم واحد، ألا لا فضل لعـــربي علـــى أعجمي، ولا لعجمي على عربي، ولا لأحمر على أسود،ولا أسود على أحمر إلا بالتقوى».

waxa uu soo weriyey Imaam Axmed isagoo u tiirinaya Abi Nadra in rasuulka ilaahay yidhi:{waar dadoow ilaahay waa keli,Aabayaashiina waa mid,waar hooy carab kama fadli badna qof aan carab ahayn,mid aan carab ahaynina kama fadli badna carab,kan casi kama fadli badna kan madoow,kan madawina kama fadli badna kan cas waxa aan ka ahayn alla ka cabsi".

Sidaa darteed ayey qaacido kasoo baxday odhanaysa,islaamka looma eego isir iyo midab midna,maqaamka iyo cabsida ilaahay uun weeye.

Waxaba uu Rasuulku (NNKHA)u qaybiyey Muslimiinta laba qaybood oo waaweyn isla markaana uu ku saleeyey Cabsida saddex maaha..waxa ay arrintaasi dhacday xadiiska ay werinayaan Tirmidi,Axmed,iyo Abuu Daa'uud, sidoo kale Ibn Khasiima iyo Ibn Xabbaan saxeexooda in Cabdullaahi Cumar (Rc) yidhi Rasuulku wuxuu yidhi "waar dadoow ilaahay waxa uu idinka kaxeeyay ceebtii Jaahilnimada iyo Kufaankeedii,waar dadoow,dadku waa laba, mid Mu'min ah oo ilaahay ka cabsada oo ilaahay u wanaagsan adeeca amarkiisana u fuliya sida loo faray,iyo mid xun oo faajir ah ilaahayna yaraysta amaradiisa oo dhib badan..ceebtuna waa Faanka iyo kibirka.

Muslimka dhabta ahi waa kan ay xamaasadda iyo cadhadu ka qabato cidda caqiidada ilaahay cid la wadaajisa midabkuu doono ha lahaado,dhalashaduu doonana ha sito laakiin dabarka ka dhaxeeyaa waa caqiidada.

Sidaa darteed miisaanka keli ah ee Islaamka dhexyaallaa waa caqiiqadada.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Weeraradii u dhaxeeyey 634 ilaa 639h.

Ka dib sannadahan shanta ka dib labadan gobol ee Faaris iyo Adriibayjaan wuxuu ka bilaabay (shoormujaan)sannadkii 634h,in uu ku kala bixiyo badda Qaswiin iyo nawaaxigeeda isaga oo ka bilaabaya dhinaca galbeed una dhaqaaqaya waqooyi si uu u dhamays tiro furashadeeda..deg degna waxa uu gacanta ku dhigay mandaqadda Armiiniya,Joorjiya(maamulkii Kurjiga ee Nasaarada ahayd)Shiishaan iyo Daaqistaan.

Ka dib waxa uu bilaabay ciidan kale oo ka mid ah ciidamadii Tataarka oo uu hoggaaminayo nin la yidhaahdo (Baato bin Jaaji) badda Qaswiin,sannadkaas gudihiisa (634h) waxa uu qabsaday qabiiladii Turkiga ahaa ee la odhan jiray ee degganaa hareeraha waadiga ALFawja,ka dib waxa uu u dhaqaaqay wadamada Ruushka ee balaadhan,sidoo kale sannadkii 635h.

Waxa uu bilaabay ciidankaas Tataarku ficillo aad u argagax badan oo gawrac u badan oo ay kula kaceen Nasaaradii Ruushka.. wuxuu qabsaday magaalooyin badan oo Ruush ah,waxaasi waxay dhaceen labadii sano ee 634h,iyo 635h..magaalooyinka ku hoos dhacay ciidamadaas waxaa ka mid ahaa magaalada (Raydaan)ka dibna (Kalumuuna) waxyar ka dibna (Falaadimiir/Falaadimuur) tii aadka u waynayd oo ku qaadatay lix casho keliya inay ku qabsadaan,qabsashadeeda ka dibna birtay ayey ka asleen ka dibna waa ay jabtay,ka dibna waxaa ku xigtay (Suudaal)ka dibna waxa ay u jeesteen ciidamadii Tataarku magaalooyinkii ugu waaweynaa ee Ruushka (Moosko)dhamaanba waa ay qabsadeen ka dibna ay burburiyeen ka dibna waxaa ku xigtay magaalada (Yuuriif),(Jaaliish) iyo (Baariisalaaaf) iyo (Roostuuf)iyo (Yaarusalaaf) ka dibna waxaa gacantii Tataarka ku dhacday magaalada (Toorsuuk) sidaas ayey dawladdii Ruushku Tataarka u gacan gashay dhamaanteed!! (bedkeeduna waxa weeye toddoba iyo toban Malyuun kiiloo mitir oo isku weer ah..tirada iyo dadka degganaana waxa ay ahaayeen kuwo aad u faro dhaaf ah,sidoo kale degaankeeda oo u badan dhul aad u qabaw oo barafley ah waxaa lagu qabsaday oo keli ah laba sano!!)

Sannadkii 628h waxay u dhaqaaqeen ciidamadii Tataarka ee dhinaca galbeed isla markaana uu hoggaaminayey (Baato Jaaji) waxay qabsadeen dawladdii Yukrayn gebi ahaanteedba (bedkeeduna waa lix boqol oo kun oo kiilo mitir isku weer) waxa ay degeen caasimadda (Kayiif) waxa ay cagta mariyeen Kunuusteedii waaweynayd dadkeedi deganaana inta badan waa ay laayeen.

Sannadkii 639h waxaa soo dhaqaaqday koox Tataar ah oo uu hoggaanka u hayo nin lagu magcaabo (Baydar) waxay kaga soo bilaabeen waqooyi galbeed dawladdii Yukrayn ilaa Boolan waxa ay burburiyeen inteedii badnayd laakiin xukunkeedii waa ay la wareegi kariwaayeen illaa ay kaalmeeyeen Fardo fuullo Jarmal ah oo u dhowaa.(Jarmalku waxa uu ku yaallaa galbeedka boolan si toos ah) waxaa yimid ninkii Jarmalka haystay markaas ayuu ciidankiisi ku darsaday ciidankii Tataarka

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

waxa uuna iskaga dhigay hal ciidan,haddaanay kaalmadaas ka helin Jarmalka waxaa ku dhici lahayd Tataarka Jab aanay kasoo waaqsan,sidaa awgeed ayey dawladii Boolan ku dhacday gacantii Tataarka!.

Kolkii sannadahan lagu gudo jiray sannadkaa 639h laftiisa waxaa hoggaamiyihii Tataarka ee Baato la ambabaxay ciidankii xaruntiisu ahayd Yukraayn,kooxdii Tataarka ee Mandaqaddan haystay,waxa uu u jaheeyay ciidankiisi dhinaca galbeed Majar,halkaas oo dagaal xoogani dhexmaray boqorkii Majar halkaas oo dhamaantood lagu cidhib tiray ciidankii Majar ka dibna waa la qabsaday Majarna!.

Ka dib waxa uu kasoo degay(Baydar) laga soo bilaabo Boolan dhinaca koonfureed ayey u soo baxeen Ciidamadii Tataarku uuna hoggaaminayo Baato oo jooga Majar markay socdaalkan waxay cagta soo mariyeen dawladdii Isloofaakiya dhamaanteed waxaa qabsaday dawladdii Tataarka..!!

Waxay ku qulquleen ciidamadii Tataarku dawladdii Kureeshiya waa ay qabsadeen!!

Sidaa darteed waxa ay gaadheen ciidamadii Tataarku xeebaha Adriibaati(waa badda kala dhexmarta Talyaaniga iyo Kureeshiya) taas macneheedu waxa weeye kala badh ayey Yurub haystaan Tataarku imminka (eeg khariiradda lam.10).

Waxaa suurto gal noqon lahayd in ay ciidamada Tataarku gacanta ku dhigaan Yurub gebi ahaanteedba sida ay marba meel u furanayaan waayo waxay gaadheen laga soo bilaabo Jarmal ilaa ay kaabi soo saareen Talyaaniga_ haddii aan arrin culusi ku dhicin Tataarka arrintaasina waa “Okitay”geeridiisi sannadkii (639h.)waxaa ku dhacday Baato Jaaji inuu mawjadihii weerarada ahaa ee uu ku hayey Yurub hakiyo, una doorto cid madax u noqota dhulka uu furtay,kuna noqdo “Qaraarooran”caasimaddii Tataarka ee Mangooliya si uu uga qayb galo doorashada Madaxweyne cusub oo hoggaamiya dawladdan dunida haysata.

Heshiiskii lagu xallinayey khilaafkii xilka laysku qabsaday sannadkii 639h iyo wixii ka dambeeyey.

1) Waxay gaadhay xuduudda dawladdii Tataar Kuuriya bar,galbeedna Boolan,waqooyi Saybeeriya,badda Shiinaha koonfur,waa masaafo aad loola yaabo waqti yar oo koobanna lagu qabsaday..markaa waxay noqotay dawladdii Tataar quwadda koowaad ee dunida bilaa muran.(eeg khariiradda lam 11)
2) Waxaa xukunkii la wareegay geeridii Okitay ka dib inankiisi (Kuyuuk Okitay) wuxuu la yimid ninkan cusubi siyaasad cusub oo ah in la sugo dawladda khal khalkii soo dhexgalay darteed,si fiicanna loo hanto dhulalkii la qabsaday intaan kuwo cusub la furan oo kolkaas ay wada maamuli kari waydo,sidoo kale in la hanto shacabka deggan dhulkan la qabsaday iyo ciidamadoodaba,ka dib waxaa yaraaday duulaamadii furashada dhul cusub waqtigii hoggaamiyahani haystay,in kasta oo ay ilaashadeen wadamadii ay qabsadeen.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

3) Waxa ay laqeen furashadoodii hore kala badh ummadda Muslimka ah dhamaan Muslimiintii bari ah,waxay haysteen ugu badnaan gobolladii Aasiya iyo dawladahoodiiba,dhamaan waxay u dhameeyeen wixii xadaarad ka jirtay gobolladaas,siday u dhameeyeen cid kasta oo isku dayday wax iska caabbin ee gobolladaas kala kulmay,waxay arrintu noqotay markaa “Ninka qayrkii loo xiiroow soo qoyso adiguna”.
4) Waxay dunidii Muslimiintu noqotay candho dhexe oo ah Masar iyo Ciraaq kuwa kala fog iyaguna kala furfuran,oo xataa aan iska xejin karin aragtida ciidamada Tataarka oo ah waxa Amiiradii caalamkaba jebinayey muuqaalkooda,waxaa ragaadiyey loolan dhexdooda ah markaas ayaa khilaafkii dhexyaallay sii waynaadey.
   Sidoo kale waxaa jiray Muslimiinta ku noolaa galbeedka waxaana ka mid ahaa Liibiya,Tuunis,Jasaa’ir,Marooko,iyo galbeedka Afrika..qaybtanina aad ayey u kala daadsameen ka dib markii ay burburtay dawladdii Muwaxidiin la oran jiray.
5) Waxay dhadhamiyeen Nasaaradii reer Yurub dhibtii iyo halaaggii ay Muslimiintu dhadhamiyeen (amba dhamay qadhaadhkee waa in aad dhadhamisaa) waxaa laga gawracay boqolaal kumanaan malaayiin,waxaa la dumiyey Kiniisadahoodii,waxaa la gubay magaalooyinkoodii waxay ugu hanjabeen hanjabaad aad u daran in ay geli doonaan duminna doonaan kiniisadoodii weynayd ee Kaatoliga ahayd kuna taalay Rooma.
6) Waxay arkeen reer Yurub gaar ahaan galbeedka Nasaarada ahi(Ingiriiska,Faransiiska,Talyaaniga Jarmalka in Tataarka waxa kasoo salaglihii ay yihiin wax aan la dhayalsan karin,iyadoo sidaas ah haddana ay tahay wax muddo yar uun socon doona dhamaanayona waqti ka mid ah waqtiyada,laakiin dagaalada ka dhexeeya Siliibiyiinta Nasaarada iyo Muslimiinta ay yihiin mid weligeed jiraysa oo aan weligeed dhamaanayn.. sidaa darteed waxa ay goosteen wadamadaas aan soo sheegnay madaxdoodii in ay caawiyaan Tataarka si loo cidhib tiro Muslimka hadda waa ay iska ilaaween ama danba kama laha malaayiin laga laayey,magaalooyin laga gubay iyo kiniisado la dumiyey waxaasba waxaa kala weyn Muslimiinta oo la dabar jaro..!!
   Haddaba maxay ugu maleeyeen reer Yurub in dagaalka Muslimiintu weligiis jirayo laakiin kan Tataarku yahay mid muddo kooban soconaya?sababtu waxay noqonaysaa dagaalada Siliibiyiinta iyo Muslimiintu waa dagaalo caqiido waa cadaawad diineed loolankooduna weligiis waa uu jirayaa..Nasaarona dagaal joojin mayso ilaa labada kooxood mid la galo(diintooda) sida ilaahay Kitaabkiisa ku sheegay

﴿وَلَنْ تَرْضَى عَنكَ الْيَهُودُ وَلَا النَّصَارَى حَتَّى تَتَّبِعَ

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ملّتهم

kuma nabad gelinayaan Yuhuud iyo Nasaara ilaa aad diintooda raacdo.

Dagaalada Tataarka miyaa iyagu ma aha dagaalo caqiido,caqiidada Tataarku waa mid Jaah wareersan.. waxaa laysu keenay diimo badan oo kala duwan..hal hoggaamiye keliya oo Tataarka ahi ma fidin caqiidadan hal dal oo ay qabsadeen ma gaadhsiinin,waxa keliya ee ay doonayeen waxay ahayd dhiigyacabnimo burburin iyo dhulka oo la fasahaadiyo..xoolo la ururso dumar la kufsado caruurta oo la addoonsado,markaa way iska caddahay in aanay sii soconaynin muddo dheer.

Sidaa darteed iyadoo aynu ognahay waxa dad iyo duunyo ku maqan gacanta Tataarka ee kaga maqan reer Yurub,haddana waxa ay sii wadaan reer galbeedku in ay diyaar garoobaan si ay ula soo dagaal tagaan Tataarka Muslimiintana lagu soo duulo waa Shaam iyo Masar lagaga bilaabayo,halkii ay ahayd in ay iyagu isu kaashadaan Tataarka,waqtigaas ayaa haddana rajo ka haysay in ay suurto galtahay cidhibtirka Muslimiinta caalamka.

7) Waxyaabaha kale ee beddelay ama isfahanka Tataarka iyo gaalada reer Yurub waxaa ka mid ahaa.. Tataarkii waxa ay guurguursadeen hablihii Nasaarada weliba kuwa u badan ee guursaday waxa ay ahaayeen madaxdoodii,sidaa darteed waxaa bilaabmay is dhexgal diimeed iyo mid xidid oo dumarkii la guursaday ayaa loo raray Mangool markaa halkaasna waxaa ka bilaabmay xidhiidh hoosaad..arrintaasina waxay sii suurto gelisay in ay iskaashadaan Tataarka iyo Nasaaradu.
8) Waa ay socdeen dagaaladii u dhaxeeyey Siliibiyiinta Yurub iyo Muslimiinta ee Masar iyo Shaam,Muslimiinta Masar iyo Shaam ka talinayey waqtigaasna waxay ahaayeen nimankii la odhan jiray Ayuubiyiinta,laakiin waxay ahaayeen kuwii ugu dambeeyey Ayuubiyiinta,iyaga laftooda ayaa dhexdooda is afgaran waa siyaasadeed ka dhextaagnaa,iyaga oo awalba laba dab dhexdooda ku jiray waa dab Tataarka ah iyo dab Siliibiyiinta ah,ayaa haddana ay iyagu is qaniinsan yihiin.
9) Sannadkii 640h waxaa geeriyooday Khaliifkii Muntasir Billaah ee Cabbaasiyiinta,waxaa xukunkii la wareegay inankiisi Al Muctasim Billaah bin Muntasir Billaah wiilkaas oo da'diisu ahayd xilligaas soddon jir,waxaa hoggaankan lagu yaqaan in uu Quraan akhris badan yahay,tafsiirka quraanka iyo faham dheeraad ah u leeyahay Fiqiga,camalladiisa khayrka ayaa badnaa,isaga oo intaas oo dhan leh..haddana wax badan iyo waxyartoona!! kama fahamsanayn_ Siyaasadda,ma uu ahayn nin rag waxka yaqaan,sidaa darteed meel uu kaga bilaabo ayuu garan waayey,taasina waxa ay sii kordhisay in ay badato taag darradii awalba Khilaafada haysatay,waa aynu usoo noqon doonaa taariikhdiisa waxa uu noqon doonaa Khaliifkii ugu dambeeyey Cabbaasiyiinta waana kan ay la dumi doonto Baqdaad.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

10) Ma jiro wax allaale iyo wax kala dhex taagan Tataarka iyo Khilaafada marka laga reebo teed yar oo Faaris ah(galbeedka Iiraan)..haddana waa laga rajo qabi karaa_aadba haw yaraadee,waxaa deggan teedkan oo ku nool koox la yidhaahdo Ismaaciiliya shiico weeyaan dagaalkana belaayo ku qaba,waxay leeyihiin dhufaysyo iyo qalcado aad u adag waxana usii dheer dhulka buuraleyda ah ee dabiiciga ah..Deerada ayaa kala dhexmiranaysay (khilaaf ayaa muddo badan dhexyaallay) iyaga iyo Khilaafada Cabbaasiyiinta.. waxa ay aad u nebcaayeen madhabka Sunniga ah,waxay ahaayeen kuwa gacan siiya markasta cadawga Muslimiinta.. mar ay waraaqo u diraan Tataarka iyo mar ay Siliibiyiinta war u geeyaan..Tataarkuna waa ay ogaayeen in nimankani meesha ku noolyihiin,laakiin aamin kama ay ahayn waayo Tataarku marnaba ma ogolayn in ay wax awood lihi ha yaraato ama ha waynaatee iyaga oo jooga dunida dulsocoto..geba gebadii marka aynu ka nimaadno Iftiimintaas yar ninkii la odhan jiray “Kiyuuk Okitay”hogaamiyihii Tataar waxa uu dhidbaha u taagay dawlad aad u awood badan isla markaana cidi kula doodeyn quwadda koowaad ee dunida.. iyaga oo dhib aad u xanuun badan la gaadhsiiyey Siliibiyiinta haddana weli waxay kaalmo siinayaan Tataarka si Muslimiinta loo laayo (billaahi calaykum bal meeshay ka gaadhsiisan tahay cadaawaddu u fiirsada oo si deggan uga fekera),Muslimiintuna iyagii ayaa khilaaf hadheeyey,dhinac waxaa uga soo socda Tataar,dhinacna waxaa kaga soo maqan Siliibiyiintii dhanna uma feyooba,hal hoggaamiye Muslim ahi kuma hadhin waqtigan dhexdooda leh aragti mid yar iyo mid weyn kay doonto ha noqotee_dalka hala xoreeyo addoonsigana halaga baxo,keliya sidaan soo sheegnay waxa ujeedadoodu ahayd in uu kusii fadhiyo kursiga inta aan loo iman ama ha taag darraado ama daciifkasta ha ahaadee wax intaas dhaafsan waxba kama gelin.

Intii u dhaxaysay 639 ilaa 649Hijriga:

Markii uu xukunka la wareegay Kiyuuk waxa uu joojiyey gebi ahaanba duulaamadii lagu furanayey dalal cusub,waxase uu diiradda saaray in dhidibada loo aaso si fiicanna loo hanto dalalkii kala duwanaa ee ay qabsadeen, waxa uu Madaxweyne ahaa “Kiyuuk” laga soo bilaabo 639h ilaa 646h,mudadaas toddobada sano ah ma ay furan Tataarku dal cusub ilaa dhif ayey ahayd hadday jirtayna.. waxay ahayd waqti ay xasilooni dareemeen dalalkii Jaarka la ahaa Tataar,inkastoo aanay haddana ka dhib la’ ayn oo dulmi iyo daandaansigoodu ku badnaa,markii ay gaaladii Reer galbeed gaar ahaan galbeedka Yurub ay arkeen in aanu hore ugu soo maraynin Kiyuuk waxaa kor u kacday rajadoodii ay ka qabeen in ay is xulufaystaan Tataarka oo Muslimka laysu raaco waxa uu diray Albaabaa(Inisant kii afraad) fariin loo dirayo Safaaraddii Mangooliya fariintaasina waxa ay ahayd ujeedadeedu in ay la midoobi doonaan isla markaana Muslimiinta kuwada duulaan weliba Masar iyo Shaam (bal eeg hammigoodu maaha in gumeysiga laga daayo Nasaarada dalalkeeda la qabsaday ee

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

reer Yurub iyo Aasiya) waa uu la Kulmay Kiyuuk warkii Safiirku siday ee ka yimid Baabaaga Nasaarada,laakiin markii uu akhriyey warqaddii Kiyuuk waxaa uga dhex muuqatay_in dalabkiisa ay ku jirto waxa aynu midaynaynaa ciidamada markaynu Muslimka ku duulayno_waxaaba uu mooday inay Nasaaradu amarsiinayaan isaga oo ay yihiin wax siman ka dibna meel ka dhac ayuu kugu sameeyey Baabaagu ayuu qallitay,iyo in Diinta Nasaarada loogu yeedhayo, adiga oo Madaxweyne Tataar ah sidaa laguugu yeedhi karaa kaalay oo diintayada soo gal?! maya sidee ayaaba amar laguu siin karaa?!! Waa cadhooday kii Baabaagu diray ayuu dib u celiyey una sii dhiibay warqad odhanaysa dhamaan waxa madax sheegta ee reer Yurub waa in ay Mangooliya yimaadaan isla markaana wada qiraan ay taageersan yihiin addeecayaanna Madaxweynaha dawladda Tataar iyo Mabaad'ideeda.. ka dibna uu dhici doono heshiiska is xulufaysigu..boqoradii Yurubna waa ay diideen Amarkaas sidaas darteed Siliibiyiinta hadafkoodii waa fashilmay.

Laakiin Baabaagii Kaatooligu kama quusan fashilkii ku dhacay ergadiisi,waxaba uu diray ergo kale oo Siliibiyiin ah laakiin markan waxa uu u diray hoggaamiye kale oo madax ka ahaa magaalada Tabriis ee Muslimiinta laga qabsadey kuna taala Faaris oo ku dhegsan Khilaafada Cabbaasiyiinta magaciisana la odhan jiray {Biijo} sannadkii 645h,waxa uu u taabtay Baabaagu sida uu u jecel yahay weerar iyo cadaawadda uu u hayo Muslimiinta,waxa kale oo uu sheegay in arrintan hadday iska kaashadaan dhul badan oo ballaadhani ka maqan yahay,waxay weftigani kala kulmeen Biijo soo dhowayn diirran,waayo waxa uu saadaaliyey weerar ay Siliibiyiintu ku qaadaan Muslimiinta Masar iyo Shaam ay ka mashquulinayso Muslimiinta in ay difaacaan Khilaafada Ciraaq oo ay kaga mashquulayaan dagaalka ay kaga jiraan Masar iyo Shaam..sidaa darteed ay fududaanayso furashada Ciraaq.. laakiin kama qarsoona cidna in faa'iidooyinka (Biijo) ugu jiraa arrintaas ay badan yihiin,haddana ma fududa go'aan ka gaadhista isgaashaan buuraysiga labadoodu waayo waa arrin siyaasiyan halisteedu badan tahay..ninka la yidhaahdo Kiyuuk isagu weli ra'yigiisi kama tegin ahaa in aan weli dhul cusub la furan iyo in aan wax is kaalmaysi ahi dhexmarin Siliibiyiinta waayo waxa uu uga shakiyey in ay dagaan,sidaa darteed mar labaad waa ay ku fashilmeen hammigoodi.

Waqtiyadaas nin la odhan jiray (Luwis Taasic)oo Faransiiska haystay waxa uu diyaariyey ciidan waxana uu qorsheeyey in ay ku duulaan Masar,waa dagaalkii la magac baxay Weerarkii Siliibiyiinta Ee Toddobaad,waxa uu ciidamadan isaga soo ururiyey jasiiradda Qubrus sannadkii 646h waxa u muuqday (Luwis Taasic)ra'yi ah in aan weli laga rajo dhigin in la gargaarsado Tataar waxaa uu u diray wefdi Saddexaad Tataarka uu ka dirayo Qubrus ilaa Mangooliya kuna dalbanayo in lagu xoojiyo ciidan isaga oo u diray Kiyuuk codsigaas kuna sheegayo in aan Masar dambe la maqli doonin haddii ciidan lagu soo xoojiyo,waxa kale oo uu usii dhiibay wefdigan hadiyado iyo alaabo qaaliya oo Kiyuuk loo sido,sidoo kale waxaa la socota alaabo dagaal oo Qaaliya.. laakiin markii ay wefdigani soo gaadheen Qaraaqooran ayay la kulmeen geeridii madaxweynihii Tataarka (Kiyuuk) kamana tegin (Kiyuuk) caruur aan ka ahayn saddex yar yar oo aan xil qaban karin da'yari darteed, waxaa xukunkii

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

qabsadaygabadhiisi lana yidhaahdo (Oogool Qiimiish) oo uu ku dardaarmay kolkuu bakhtiyi rabay,dabadeed waa uu is beddelay hoggaankii Mangooliyiintu laga bilaabo sannadkii 646h waxaana ay xukumaysay muddo saddex sano ah .

Iyada ayey la kulmeen weftigii loo diray Kiyuuk iyaduna waa ay ka cudur daaratay in ay ciidamo ku kaalmayso Siliibiyiinta sababtoo ah ay la tacaalayaan mashaakil badan oo dawladooda dhexdeeda ah salna ay u tahay geeridii (Kiyuuk),intaas waxaa dheer dhamaan hoggaamiyayaasha ciidamada Tataarka oo aan isku waafaqsanayn in xukunka dawladdan dunida ugu xoogga badan ay gabadhi hayso,weliba dawlad bilowgeedii lagu soo aas aasay awood sheegasho,gacan bir ah oo ay cid walba ku qabatay iyo gabood fal badan oo ay dunida ka gashay..markaa arrimaha dhexyaalay waqtigaas Mangooliya ma ahayn kuwo sal ku fadhiya.

Halkaas markay marayso (Luwis Sagaalaad) waxa uu goostay in uu dagaalka galo iyada oo aan wax ciidamo ah ka helin Tataar,waxa uu ka dhaqaaqay Qubrus ilaa Masar,waxa uu soo degay Diimaad sannadku markii uu ahaa 647h wuxuu qabsaday Diimaad ka dibna waxa uu usoo dhaafay gudaha Masar_waxa uu kasoo talaabay waadiga Niil isagoo u jeeda Qaahira,laakiin ciidamadii Masaaradu waxay kula kulmeen Al Mansuur,waxaa la jooga hogaamiyihii Masar (AL Saalax AL Ayuubi)kaas oo saddex cisho ka dib markii dagaalku bilaabmay ku geeriyooday ALMansuur,waxaa xukunkii Masar la wareegtay (Shajaratu Aldurr) waa gabadhii ALSaalax Al Ayuubi,waxay qarisay geerida ninkeedii,waxay dirtay Tawraan Shaah ibn Malik Saalix Najmudiin Ayuubi,wuxuu ka mid ahaa hogaamiyeyaasha gobollada Turkiga mid ka mid ah_waxay samaysay SHajaratu Al Durr_waxay la xidhiidhay hogaamiyeyaashii dagaalka Faaris Diin Aqday iyo Rukni Diin Baybaras_waxay u dooratay si ay u hoggaamiyaan,maamulaan dagaalkan ALMansuur ka dhacaya ee lala gelayo Saliibiyiinta,waa ay guuleysteen muslimiintu goobtan ka dib waxaa soo gaadhay Masar Tawraan Shaah Malik Najmudiin Masar xukunkeedii ayuu la wareegay,mar labaad ayuu ka guulaystay Saliibiyiinta meesha la yidhaahdo Faaskoor waxa dagaalkan laftiisa lagu qabtay Luwis Taasic sannadkii 648h ka dib waxaa dhacay Masar dhexdeeda fitno,waxaa la dilay Tawraan Shaah,ka dib waxaa xukunkii la wareegtay marlabaad Shajaratu ALDurr,laakiin ra'yiga dadweynaha ayaa aqbali kari waayey in dawladda Masar ay gabadhi xukunto,waxa ay guursatay mid ka mid ah hogaamiyeyaashii Mamaaliikta oo la odhan jiray (Cisadiin Aybak) ka dib isaga ayaa Suldaan ka noqday dalkii Masar,ka dib sidaas ayey Mamaaliiktu usoo galeen xukunka Masar ka dib Ayuubiyiinta dib ayeynu ka sheegaynaa waxa ay ahaayeen Mamaaliiktu iyo meesha ay ka yimaadeen markoodii hore.

Laakiin waxaa muhiim ah dhacdooyinkaas in aan sheegno soo bixitaanka Mamaaliikta iyo awoodoodii iyo jebintii weerarkii Saliibiyiinta Toddobaad,taas oo aan shaki ku jirin in ay gaalada u kordhisay uun colaad iyo nacayb waxana lagama maarmaan noqotay in looga baahan yahay Tataarka ciidamo ka xoojiya la dagaalanka Muslimiinta.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Haddaan dib u yara eegno xaaladdii Tataarka weli ma sugmin; ma awoodaan in ay qabadhii Kiyuuk u aqoonsadaan madaxweyne ama boqorad ka dib waxaa laysugu yeedhay golihii wasiirada la taliyeyaashi madaxweynaha ee rasmiga ahaa kulan loogu magac daray (Bilqooriiltay) ayaa dhacay sannadkii 649h,waxaa la go'aansaday in Madaxweyne cusub la doorto,waxaana halkaas lagu doortay nin la yidhaahdo "Monkokhaan"si uu u noqdo Madaxweynaha cusub ee Tataar.

Doorashada Monkokhaan waxay keentay isbeddel weyn oo dhinaca Siyaasadda Tataar ah,is beddelku xataa waxa uu saameyn ku yeeshay meelihii ka agdhowaa Tataarka,waxay siyaasaddani ahayd siyaasad dhulballaadhsi ah una eg siyaasaddii Jingiskhaan aas aasihii koowaad ee dawladdan Mangooliya,siyaasad mar labaad u eg siyaasaddii Okitay oo furtay Yurub wakhtigiisi.. ka dib Monkokhaan waxa uu bilaabay in uu fekero,kuna fekero in la qabsado Khilaafada Cabbaasiyiinta..iyo wixii ka dambeeyey ee dhulka Muslimiinta ka hadhay.

Nasiib darrada haysatay Muslimiinta xilligan loo fekerayo intoodii yarayd ee hadhay hadda waa xilligan uu hogaanka Tataar qabsadey "Monkokhaan"weliba iyaga oo ku guuleystay goobtii AlMansuur ee Masar sannadkii 648h waxay aad ugu mashquulsanaayeen gudohooda,maamulkasta oo yari waxa uu la tacaalayey dhibaatada gudihiisa ah,loolanka xukunka,dagaalo joogto ah ayaa dhexmari jirey maamulladan yar yar ee Muslimiinta ah dhimasho iyo dhaawac ayaa dhexdooda ka dhalan jiray ay iyagu isu geysteen.

Waxaa dhexmaray dagaalkii weynaa ee labadii ciidan Masar oo uu hogaaminayo Cisidiin Aybak iyo ciidankii reer Shaam ee uu soo diray Naasir Yuusuf amiirkii Xalab oo Dimishiq ka mid ah haystay,dagaal culus ayaa ku dhexmaray meesha loogu magac daray (AL Cabbaasiyah) oo siddeed iyo toban kiilo mitir bari ka xigta magaalada la yidhaahdo AL Saqaasiiq ee Masar ku taala imminka,waxaana ku guuleystay ciidankii Masaarida,waxa aanan garanaynin sida ay ugu niyadsan yihiin in dagaaladan oo kale ay iskala hor yimaadaan,weerarada gaaladuna waa ay ku socdaan oo marnaba kama nastaan Tataarkiina waxa ay taagan yihiin albaabkii khilaafada Cabbaasiyiinta !.

Waxaa runtii aad u yaab badan madaxdii waqtigaas_shacabkoodii xataa Culimadii waxa ay iska ilaaween in badhkii hadhay ummadii Islaamka ahayd ay qabsan doonaan Tataar,waxay ay ilaaween in ay Tataarkii kaabi u saaran yihiin siday u qabsan lahaayeen Khilaafada Cabaasiya,ka dibna Xijaas,Masar iyo Shaam ilaa xad ay leeyihiin Taariikh yahannadu maba aad moodi jirin dunida waxaa ka dhacayaa dhexdooda in waxbaba jiraan shidanaaba shidan..!!

Bal aan tusaale usoo qaadanno uu qoray Ibn Katheer kitaabkiisa la yidhaahdo{bilowga iyo dhamaadka}ilaahay haw naxariistee uu qoray waqtigii 639h ilaa 649h,waa xiligii uu xukumayey Tataar "Kiyuuk"ka dibna gabadhiisi,waa xilli ay joogsadeen dhul ballaadhsigii Tataarku,waxaad moodeysay in ay mashaakilkii Tataarku yar degtay haddana kama tegin Ibn Atheer,waxyar oo tixraaceedu yaraaday maahee iyo wararka Shaam iyo Masar oo ku yaraa marka laga reebo weliba ku dar Ciraaqna waxaa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

akhbaarta u kala gudbin jiray ciidanka Tataarka ama kuwa Muslimiinta sidaa darteed waxaa looga tegay xaqiiqadooda oo aan rajo badan lagu qabin awgeed.

Waxaad ka helaysaa ilaahay haw naxariisto Ibn Katheer isaga oo sifaynaya xaaladda caadiga ah iyo nolosha dabiiciga ee ay ku noolaayeen reer Ciraaq,Masar,Shaam mudadaas tobanka sano ah;waxaa khilaafada soo food saartay dhaqaale xumo aad u daran,markaas ayaa Masaakiinta loo baaheyaa(sadaqad loo ururiyaa) abaar ayaa timaadda waxay u baahataa xallinteeda,waxaa badatay shaqo la'aantii dadka,markaas ayaa dadkii aad u dhibtooday waxay ku kalliftay inay lacag bixiso ay kaga hor tegayso camal la'aanta mid Malcaamad loo furo,Mid meel uu dadka ku daaweeyo loo furo,kan kale meel uu kabaha ku farsameeyo la siiyo,xaaladda waqtiyadaas la gaadhay waxaad maqlaysaa: hebel ayaa dhintay oo gabyaa ahaa,hebel ayaa dhintay oo abwaan weyn ahaa,hebel ayaa dhintay oo dadka la karaameeyo ka mid ahaa,hebel oo wasiir ahaa!..laakiin maye culimadii dadka kala hadli lahaa Mimbarada ee u sharrixi lahaa khatarta Tataarka..iyo Masiibada haysta wadamada ku dhacay gacanta Tataarka? Maye hoggaamiyeyaashii dadkooda ku dhiiri gelin lahaa in ay u diyaar garoobaan maalin shaki la'aan imaan doonta? Waxaas adaaba sheegaya!.. ka dib waa ay ka qarsoontay sheegitaankeedu bugaagta Taariikhda !.

Sidaa darteed waqtigan aan taagannahay waxaa la saadaalinayaa in ay dhacaan weeraro cusub oo Tataar hoggaaminayo oo hor leh,weerar la mid ah weerarkii Tataar ee ugu horeeyey gadh wadeenna uu ka ahaa Jingiskhaan,ama la mid ah kii labaad ee xilligii uu Tataarka haystay Okitay..lagana yaabo in uu ka daran yahay kana dhib badan yahay,sababtoo ah markasta oo ay badato dhoohanaanta Muslimiintu waxaa kor u kacayey damaca Tataarka iyo waxay cago ku xaadhaanba,markasta oo meel Muslimiintu ay dhiibtoba waxay cadawga Muslimiintu ku hammiyayeen halka ku xigta waana dabeecad lagu yaqaanno dadka xadgudubka caadeystay,bal adiguba is barbar dhig taariikhdaas hore iyo tan maanta la joogo!!

****

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks



Mudadii uu xukunka la wareegay (Monko_khaan) isagoo hammigiisa ugu weyni ahaa riditaanka dawladda Cabbaasiyiinta iyo qabsashada Ciraaq ka dibna Shaam iyo Masar..isaga oo Monko khaan Mar labaad ahaa hoggaamiye awood iyo go'aan leh,laakiin la taliyihiisi dhinaca siyaasadda oo raadeyn badan ku lahaa kana mid ahaa walaalihiisi saddexda ahaa kii ugu weynaa oo la joogey (Qaraaqooram) caasimaddii Mangooliyaanka si uu ula agaasimo Imbiraadooriyaddan balaadhan ayaa gacan ku lahaa in uu ka dhab sheego riyooyinkiisi..walaalkiis magaciisana lagu sheego "Ariiq Boqa" walaalkiisa labaadna oo la odhan jirey "Qabiilaay"wuxuu u wakiishay in uu maamulo gobollada bari sida Shiinaha iyo Kuuriya iyo sidoo kale dhamaan wixii la halmaala..kan ugu yari waa "Hoolaako"waxa uu noqdey Mas'uul si fiican u agaasima gobolada Faaris iyo inta hoos timaadda,waa ciidanka ku jihaysan duminta Khilaafada Cabbaasiya si toos ah..shakina kuma jiro in ninkan magaciisa "Hoolaako"ay maqleen hadda ka hor..!!

Hoolaako waa hogaamiyeyaashii Tataarka ee ugu dhiigya cabsanaa..waa nin aan inyar oo diir nax ah laguba dhalin,waa nin aan inyar oo bani aadantinimo ah lahayn ha yaraato hase badnaatee.. waa nin aan ujeedadiisu wax kale ahayn aan ka ahayn

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

daadinta dhiiga dadka.. waaba sidii Jingiskhaan Ilaahey Naxariistiisa haka dheereeyo labadoodaba.

Holaako wuxuu ku jiraa dadka ugu Taariikhda xun ee dunida soo maray intii dhulka la korsaarnaa..!!

Waxaa loo wakiishay in uu hoggaamiyo gobollada Faaris iyo waxa ku hareeraysan,waxaa kuu muuqda in shaqadiisa ugu weyni tahay duullaanka dhulka Muslimka..dhiigii ugu badnaa ee uu daadiyeyna waxa uu ahaa dhiig Muslimiin..dhamaan waxa uu xanuun iyo dhibaato ku abuuray qalbiga Basharka dunida waxa ugu badnaa Quluubta Muslimiinta..weliba waxaad mooddaa xalka cadaawaddu ka gaadhay iyo nacaybku xiqdiga in aanay ku filnaan burburinta dhulka oo qudhi,waxa uu guursaday gabadh aan isaga ka yaraysan xiqdiga iyo Fasaadka dulmiga iyo burburinta Aadamaha..waxay ahayd reer Mangooli waa waxa aynu dunidan cusub u naqaan marwada koowaad ee Tataarka waxaa magaceeda lagu sheegay “Daqsi Khaatuun” waxay ahayd gabadh awood badan fulinteeduna ay markaba hirgasho lagana wada yaqaan arrinteeda Maangool oo dhan,waxaa intaas u dheerayd waxay qaadatay diinta Nasaarada markaas ayey aad ugu dhegsanayd,nacayb aad u badan iyo karaahiyada ay Islaamka u qabto aan la koobi karin.

Sidaas ayey ku midoobeen Holaako iyo gabadhiisa Daqsi khaan si ay cadhadooda ugu wada shubaan Muslimka dushiisa.. ujeedadooduna waxay ku cadeyd maskaxda Holaako waxayna ahayd in uu dhulka la simo Khilaafada Cabbaasiya..ka dibna uu usii dhaafo wixii kale.

Mudadaas Holaako loo igmaday in uu gobolkaas Faaris hogaamiyo wuxuu u diyaar garoobayey duulaanka ka dhan ah Baqdaad..waxa uu ahaa diyaar garoowgiisu mid kaga naxsi ah aan la dhaadeynin.. marka loo eego awoodda Muslimiinta xataa haddii loo diyaar garoobo ayaaney iska celin karin..marka loo eego sida aynu soo sheegnay xaaladda Muslimiinta waxaa iska cad in uu guuleysan doono Hoolaako xataa diintiisa jacburka ah marka lagu daro _Muslimiinba ha noqdaan, sababtoo ah Ilaahay (SWT) dunidan waxa uu dhigay sunno aan is bedbelayn,ciddii qaadata sababaha lagu guuleysto ilaahay guusha waa siinayaa adduunyadan inta la joogo Gaalba ha ahaado,kan aan u diyaar garoobin maalinta la kulanka wuu jabay if iyo Aakhiroba gaalo iyo Muslimiinba..

مَن كَانَ يُرِيدُ ٱلْحَيَوٰةَ ﴿١٤﴾
ٱلدُّنْيَا وَزِينَتَهَا نُوَفِّ إِلَيْهِمْ أَعْمَٰلَهُمْ فِيهَا وَهُمْ فِيهَا
لَا يُبْخَسُونَ ﴿١٥﴾

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

(ciddii ahaatay mid u jeelan oo doonaysa nolosha adduunyo iyo quruxdeeda waannu siineynaa waxay ka qabsadeen iyada oo aan waxba laga dhimin).

Sidaa darteed ayuu Holaako doortay nolosha adduunyo,una diyaar garoobey diyaar garoow aad u fiican,markaa wuxuu helay nasiibkiisi uu adduunyadan ku lahaa isaga oo aan waxba laga reebin/khasirin/dhimin.

Holaako Muxuu Sameeyey Si Uu Rido Khilaafada Cabbaasiyiintu?

Shaqadiisi ayuu bilaabay Holaako Sannadkii 649h si xamaasadi ka buuxdo ayuu u bilaabay deg degna aanu ka madhnayn,sidaas waxaa wehelisay isagoo dulqaad,deganaan iyo degtooni dheeraada ku daray talaabo kasta oo uu qaadayo..isagoo xiqdi aad u daran wata iyo jacaylkii uu u qabay in uu rido Khilaafadii Cabbaasiyiinta iyo weliba hilowga dheeraadka ah ee ay u hilaacayeen khasnadaha Cabbaasiyiintu intaas oo laysku daray waxaad ku ladhaa badnida ciidamadiisa,khibradda degaal ee aad u sareysay ee uu lahaa..waxaas oo dhan isaga oo isku darsadey haddana kuma deg degin go'aan qaadashada in uu ku dhawaaqo dagaal lagaga takhalusayo Cabbaasiyiinta..wuu iska diyaar garoobey isagana sabray ilaa ay qaadatay muddo shan sano ah oo buuxda 639_654h isaga oo intaas jimicsi iyo tababar ku jirey si uu u noqdo mid gaashaaman oo aan waxba ka dhineyn markuu duullaan damco.

Bal aan u yar fiirsanno qodobada uu ka duulay Holaako iyo sida uu ula dhaqmay ummaddii Muslimiinta ahayd! Talaabooyinkii Holaako dib aan ugu noqonno:afar xadhig ayuu ka duulay oo isku laxan dhow ama midiba mid ku lifaaqan tahay,afartan xadhig waxay aad u fududeysan in laga gacan sareeyo Cabbaasiyiinta,dhamaantood wuxuu qaadayaa afartaas talaaboba ka hor intaan ciidanku dhaqaaqin,iyo intaan la soo caga dhigin ciidda Baqdaad..

Waxaa sheegis mudan in diyaar garoowgan sirtiisa ugu weyni ahayd in aan la ogaanin Muslimiin iyo cid aan Muslimiin ahaynba..!!

Arrinta koowaad: waa Muhiimadda ay leedahay in dhisme hosaad la bilaabo,in la qorsheeyo sida hawlgalladu u dhacayaan,daadkiisa duulaan iyo hogaaan kasta cidda u qabanaysa;

I. Wuxuu bilaabay Holaako in uu hagaajiyo dhamaan waddooyinka u dhaxeeya Shiinaha ilaa Ciraaq waa masaafo aad u fog,laakiin waa uu ka shaqeeyey si ay ciidamadiisa faradhaafka ahi usoo maraan si ay ugu fududeyso maadaama ay tahay dhul u badan dabiiciyan buuraley dhibteedu aanay yarayn meelaha ugu daranina waa Djakistaan ,Afganistaan,Faaris oo caan ku ah waxyaabo badan oo abuur ah.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

II. Wuxuu dhisay Biriishyo tiro badan oo ka talaaba dhamaan wixii webi ah ee ciidamadiisa xannibaad ku keeni kara waxaana ka mid ah webiga Sayxuun,Jayxuun,iyo in la dhigo awood ku filan oo ilaalisa webiyadaas si aan kala go'ugu imaan socodka ciidamada,isla markaasna waxay waddo ay ka baxaan u noqoneysaa ciidamada Tataarka haddii la jebiyo oo kale.

III. Wuxuu diyaariyey Holaako koox aad u awood badan oo qaadda dhamaan qalabka wax lagu go'doomiyo iyagoo kasoo qaadaya Shiinaha ilaa Ciraaq,si aanay waqti badanba u qaadan in la keeno Macadaad aad u culus muddo kooban iyagoo lasoo maraya masaafo aad u dheer.

IV. Wuxuu bilaabay Holaako in gacan bir ah lagu qabto magaalo kasta oo la jaar ah waddooyinka ay marayaan si aanay u dhicin gaadmo iyo jidgoyn midna marka ay marayaan.

V. Arrinta yaabka leh ee ay ka muuqato fariidnimo dheeraad ah oo uu sameeyey Holaako waxay ahayd in dhamaan wadadaas u dhaxaysa Shiinaha iyo Baqdaad aan wax xayawaan ah lagu arki karin ha ahaadaan duur joog ama dab joog,sababta uu sidaas u yeelayna waxay ahayd in aanay dhulka xaalufin ee geedaha iyo midhuhu ay isaga baxaan isla markaana cunta ahaan ugu filaato ciidamadiisa aan tiro iyo xisaab midna lahayn,ha ahaadaan fardaha la fuushan yahay ee dagaalka iyo kuwa qalabka dagaalka sida,kuwa cuntada iyo saadka sida iwm.. sidoo kale uma baahanayo in uu cunto xayawaanku leeyahay daba qaado.. oo aanay ugu dhicin in raashinkii xayawaanku go'o si lama filaan ah,raashinkaasina wuxuu ka dhignaa shidaalka gaadiidka aynu maanta u Isticmaalno..xayawaanna kaama yeelayo cunto lama hayo ee sida baabuur shidaalkii ka go'ay ayuu kuu sugayaa ilaa aad shidaal keento.

Arrinta labaad: diyaar garoow siyaasadeed iyo mid dibloomaasiyeedba:

Waxa ay Tataarku bilaabeen heshiisyo ay la saxeexdeen xoogaga kale ee dunida daafeheeda kala jooga isla markaana khilaaf siyaasadeed hore uga dhaxayn jiray,arrintani waxay u lahayd muhiimad gaara una damaanad qaadeysa in ay guul ka gaadhaan,guushaas oo ah Tataarkii isbeddelka siyaasadeed ee ay sameeyeen waayo hore looma arag Tataar oo cid isgaashaan buureysanaya si dibloomaasiyadeysan ama heshiis la gelaya khaasatan awood shisheeye oo weyn.

Mar haddii ay tani noqotay isbeddel siyaasadeed oo Tataar sameeyeen,waxay dhinaca kale ka ahayd is xulufeysigani cidhibtirka wax khatar ku ah iyaga ama geba gebayntii halista ayaan odhan karnaa,waxaa heshiisyadaas fulinaya isla markaana dusha u ridanaya wixii eed ka timaadda madaxweynihii Tataar waa Monkokhaan qof ahaantiisa,wax talo ah uu kala socodsiiyey ma jirin Holaako inkastoo Holaako yahay qof ra'yigiisa meel mariya hadday marxaladaas gaadho.

I. Wuxuu ka oggolaaday Monkokhaan qoladii Nasaaradu wefdigii ay soo direen 651h ee hore warqaddii uu soo diray Luwis Taasic iyo dalabkiisi ahaa in aanu

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

weli ka quusan in ay gacan ka siiyaan dagaalka ay Masar ku qaadayaan iyadoo dabcan nacayb iyo cadho kasii qaaday jabkii ay kala kulmeen ALMansuur sannadkii 648h,kooxdan uu soo diray Baabaagu waxaa wata nin wadaada kiristaanka "Doominikaani" magaciisana lagu sheegay "Wilyam Robrok" waxa uu soo hor fadhiistay Monko_khaan wada hadaladii ayaa bilaabmay ahaa is gacan siinta,laakiin wax badanba may qaadan intii ay qalinka ku wada duugeen heshiiskaas sababtuna waxay ahayd Monko_khan waxa uu ahaa nin aad u dhiiran laakiin ma ahayn nin dibloomaasi ah oo arrimaha heshiisyada caalamiga ah iyo isgaashaanbuuraysiga xariifku ah,sidoo kale ma aqoon siyaasadda reer galbeedka,sidaas si la mid ah wax garasho ah kama haysan hababka dhinacyada badan ee ay ku dhaqmaan reer galbeedku,sida hadal aad si wada saxeexdeen oo ay boqol weji u samaynayaan,iyaga oo heshiis dusha kaaga muujinaya haddana ay ku Minjaxaabinayaan,waxay caan ku yihiin in ay walaalahaa oo kale yihiin inta waxay doonayaan agtaada yaallo kuna qaataan shaygaas iyada oo aan dhinaca kale dareemin,waxba kama aqoonin Munaafaqnimada reer Yurub,ama dhoolla caddeynta dusha ah iyo hoosta oo waabey nacayb ahi ka buuxdo.. dhamaan waxaas aan soo sheegnay oo dhan waxba kama aqoon..wuxuu iska ahaa nin iska caadiya hadalkiisu cad yahay,toosan tahay odhaahdiisu doonistiisuna ay xad leedahay macnaha aan kala daadsanayn.

Waxa uu hadalkiisa ku yidhi Monkokhaan bilowgii wada hadalladiisa:in aanu marnaba aqbalaynin in uu dunida jiro mudane la mid ahi!! Haba yaraatee in aanu aqoon waxa la yidhaahdo (saaxiib) laakiin wuxuu yaqaan kelmedda la yidhaahdo (daba socde)macnaha isaga uun la daba socdo..!! saaxiibadii waa cidda I raacda uun..hor qaada calankiisa ee taageera isaga ..cadawgiisuna waa kuwa la dagaalama isaga..ma diida in ay aqbalaan taageeradiisa.. kuwaasina waa kuwa aanay ka aqbalaynin wada hadal waayo maba dhexyaalo wada hadal ee waxa dhexdooda yaal waa seef iyo dabargoyn.

Siyaasad hankeedu aad u hooseeyo!!waa siyaasad ku dhisan anigu aan dunida kan ugu madaxtaagan noqdo keliya..!!

Caalamkii wuxuu u kala qaybiyey dawlad uu saaxiib la yahay(daba socota) iyo dawlad amar diido ah (dawlad cadaw ay isku yihiin)!.

Markii u horeysayba waxa uu diiday boqorkii faransiisku qodobka ugu horeeya iyo kan ku xigaba ka dib halkaas waxaa ku fashilmay wada hadalkii ugu horeeyey ee Tataar iyo reer galbeedka Yurub.

II. Hadii ay Nasaarada reer galbeed iyo madaxdoodii diideen in ay kaalmo ciidan iyo in ay daba dhilif u noqdaan Monkokhaan,waxaa jira madax kale oo iyagu oggolaaday sida maantaba dunida ka jirta.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa fekeray (Haythuum) waa boqorkii Armiiniya ee Nasaarada ahayd kuna arrinsadey in uu la midoobo Tataarka wuxuu is tusay in uu ku qanacsan yahay dabadhilifnimada sida uu doonayo Monkokhaan;boqorkani waa uu garanayaa awoodda iyo cududda Tataar,waddankiisii waa la burburiyey,iyagaana burburiyey waqtigii Jingiskhaan ka dib xilligii Okitay..sida uu u ogyahay in dawladdiisu tahay dawlad aad u taag daran oo dhulka jiifto aan wax allaale iyo wax ay Tataar kusoo kordhinaysaa aanay jirin,bedka Armiiniya gebigiisuba waa wax ka yar 30 kun oo kiilo mitir isku weer,xataa Somaaliya ma gaadho waayo soomaaliya waa 246,200 kiiloo mitir oo isku weer.. ugu dambayn boqorkani waxa uu ka warqabaa in uu laba daran dhexdood ku jiro dhinac waa Tataar dhinaca kalena waa Muslimiinta cadaawad guun ah ayaa dhextaalay isaga iyo Muslimiinta,in duulaan lagu qaado Muslimiinta farxad cuntadaba waa ka soomi lahaa,Cabbaasiyiinta oo la rido waa uu ka soomi lahaa xataa biyaha..haddii aanu maanta oggolaanin daba dhilifnimo berrito ayaa oodda loo rogayaa xilo iyo xoolana uu siyar ku waayayaa.

Waxaas oo dhami maskaxda Haythuum ayey ka guuxayaan,isagu cidba ma dirin ee wuxuu go'aansadey in laftiisu ka kulmo Monko khaan caasimadiisa Qaraaqooramna ugu tago ee Mangooliya..wuxuu ogaadey in Monko khaan imminka wax uga bilaaban yihiin waddooyinka siyaasadda..wuxuu sii diyaarsadey markaa hadalladii uu kula hadli lahaa ee ugu macquulsanaa,waxa uu usoo dhoweeyey si heersare ah oo xaflad ayaa loo qabtay maqaamkeedu sareeyo,waxaa loo qaabilay si haybadi ku dheehan tahay Haythuum,wuxuu ula dhaqmay sidii boqor ma aha sidii dabadhilif,haba u ahaato tiir dhexaad heshiiska in aan lays fahmayn ilaa maahaane mudane iyo dabadhilif ma jirayaan boqor iyo boqor.

Ka dib qaabilaaddii qiimaha lahayd boqorkii Armiiniya(kii ka dhaadhiciyey naftiisa in uu kaba qaad u noqdo) Monko khaan..wuxuu bilaabay Monko khaan in ninkan la siiyo xoolo badan iyo hadiyado..isagoo kaga iibsanaya alaabadan iyo hadiyaddan boqornimadiisi uguna beddelaya daba socde.. Muxuu siiyey boqorkan (Monko khaan)

Wuxuu siiyey waxyaabahan soo socda:

1) Waxa uu damaanad qaaday in dhamaan loo nabadgelinayo waxa uu hanti leeyahay (Haythuum).
2) Dhamaan kiniisadaha iyo goobaha ay ku cibaadeystaan cashuurta laga dhaafi doono.
3) In laga caawin doono Armiiniyasidii ay usoo ceshan lahayd magaalooyinkii ay ka qaadeen Salaajiqadii Turkigu xiliyadii ay dagaalamayeen.
4) In uu boqorkani noqon doono la taliyaha Madaxweynaha Tataar Monko khaan gaar ahaan arrimaha galbeedka Aasiya.

Sidaas ayuu ku raacay boqorkii Armiiniya talooyinkii Tataarka.

Laakiin miyaanay ahayn in aynu isweydiino muxuu sidan oo dhan ugu jajaban yahay Tataarku boqorkan yar ee Miskiinka ah welibana Nasraaniga ah? Haddaynu ka eegno

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

xaq ciidan waxaad arkaysaa in aan awoodda militari ee Armiiniya aanay u dhoweyn tan Tataar sidaa awgeed kuma soo kordhinayso wax saameyn togan ah,haddaa muxuu ka xodxodanayaa oo kale?

Haddaynu hoos u eegno waxaa inoo soo baxaya waxan:

kow: wuxuu ka faa'iideysanayaa boqorkan Armiiniya khibradda uu u leeyahay dagaalada Muslimiinta..xidhiidhka ay lahaan jireen Armiiniya iyo Muslimiinta waa mid aad u fac weyn,ninkanina waa uu ka waramay waddamada Muslimiinta iyo dabeecadohooda..shakina kuma jiro wararka uu ninkani bixinayo ee wada runta ahi in ay saameyn weyn ku yeelanayso Muslimiinta xilliga dagaalka (miyaaney ahayn sidii uu Mareekaanku isagoo aad u awood badan ula midoobey Ingiriis oo aad u awood yar;keliya waxa uu khibrad iyo waaya aragnimo u lahaa dhulkii Muslimiinta ee Ciraaq..).

labo: wuxuu u baahan doonaa boqorka Tataarku cid ka caawisa maamulidda dunidaa baaxadda leh ee uu qabsadey,ma hadduu ninkani yahay nin dhulkaas kala garanaya isagana daba socda lana dagaal galay isaga ayaa ku fiican arrimaha debedda iyo maamulideedaba,waan kuu qabanayaa dhushana kaaga ilaalinayaa u cago jugleynta shicibka iyo digdigta adigaana maamulaya.

Saddex: talaabadani waxay u fureysaa boqorka Tataarka xidhiidh cusub in uu dhexmaro isaga iyo Nasaarada mar labaad,taasoo ay u baahnaayeen inta uu ka dhameysanayo furashada Masar iyo Shaam,wuxuu kale oo uga baahan yahay boqorka Armiiniya in uu isu soo jiido isaga iyo boqoradda kale ee reer Yurub si wada hadal u dhexmaro,hadda ku darso oo wuu la socdaa in ay quluubta Nasaarada ka buuxdo Karaahiyo iyo nacayb ay u qabaan Tataarka,sababtuna ay tahay gawracii iyo xasuuqii lama aragta ahaa ee ay ka geysteen Tataarku Raashiya iyo bariga Yurub..fursaddan heshiiska lala gelayaa boqorka Armiiniyana waxay ku baaqeysaa in layska caawiyo ilaalinta Masaalixda innaga dhaxaysa.

Afar : la midoobidda boqortooyadan Armiiniya waxay tahay wuxuu u noqonayaa nin uga shaqeeya Muslimka dhexdiisa,la dagaallanka Tataar waa arrin gaar ah,la dagaallanka isbahaysiguna waa arrin kale,saameyn xun ayey ku yeelanaysaa nafaha dadka marka ay maqlaan isbahaysi.

Shan: wuxuu u wakiishay in xoogaga Armiiniya kala midoobaan ciidamadiisa haddii ay timaaddo arrin culusi,waxa uu sidan u leeyahay haddiiba khasaare dad yimaaddo dhinaca Armiiniya waa inay kala qayb qaadataa,sidoo kale hadduu Armiiniya soo gaadhona waan idinka gacan siinaynaa.

Halkaas waxaa innooga soo baxday in aan haba yaraatee heshiiskan dan mooyee wax khasaare Tataar ugu jiraa jirin,wada hadalkuna uu dhexmaray boqor waxkasta haysta iyo miskiin daba gale ah oo aan waxba haysan,waana dabeecad ay iska leeyihiin dhamaan madaxda waaweyn ee caalamku,waxay heshiisyada la galaan madaxda yaryar ee aan sidan sifooyinkii madaxnimada magac maahaane,markaas

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ayey u wakiishaan arrimo aad ugu muhiim ah kan yarna aanay waxba kasoo gelayn in uu iska agfadhiyo maahaane oo ay ugu yeedhaan magacyo ay waaweyneyeen sida (la taliyaha weyn ee Tataarka waxna laga weydiiyo galbeedka Aasiya) ama boqorkii aanu saaxiibada ahayn! Ama dawladdii saaxiibtinimadu naga dhaxaysay,ama xidhiidh qoto dheer ayaa labada dal ka dhexeeya,ama Jaangooyaha talada Madaxweynaha,ama Cimaamadda boqorka..

"sidaa waxaa ka dhigan Somaliland iyo Itoobiya) ama kaba hooseysa waxaad maqleysaa: ciidamadii Itoobiya ayaa Wajaale intay soo galeen qof ku dilay,askar Itoobiyaan ah ayaa Wajaale jeelka laba qof kala baxay ama meel heblaayo ayey soo galeen waxan iyo waxaas ka sameeyeen waxaa keliya oo lagaga jawaabaa: Itoobiya waxaa innaga dhaxeeya xidhiidh aad u fog jaar ayeynu nahay waa walaaleheen!

Aan dib ugu noqonee waa magacyo aanad ku naaxeynin gaajona kaama bi'inayaan dhib mooyee aan lahayn dheef,run markaynu u hadleyno waxaa xuquuqda ilaaliyaa waa awood uu imminka tiirarka uu heshiiskani ku dhisan yahay oo dhan waxaa iska leh Tataar..waana sida dunida ka dhacda meelkasta iyo markastaba tan uunbaa soo noqnoqota.

Sidaas ayuu ku noqdey boqorkii Haythuum isaga oo mahadinaya heshiiskan,ku faanaya xidhiidhka cusub ee uu la sameystay boqorkii dunida,wax weyn in uu qabtay uga dhigaya shacabkiisa..waayo siyaasaddiisa waxaa lagu sheegay in uu yahay nin xikmad badan isla markaana boqortooyada aanu dhexfadhiyin ee soo dagaal tago..!!

3_waxa kale oo Monkokhaan doonayey in uu heshiis sidan oo kale ah la samaysto madaxda Siliibiyiinta ah ee reer Shaam,Maamulo badan ayey ku lahaayeen Andaakiya,Daraabulis,Xeefa/Xiifa,Siida iyo Caka,danta ugu weyn ee uu heshiiskan ka lahaana waa in Muslimiinta lagu mashquuliyo Shaam si aanay u difaacin Ciraaq haddii lasoo weeraro.

Waxay kale oo u ahayd Boqoradaas dhiiri gelin in boqorkii Tataar ka soo xidhiidhay kana doonayo inay is gaashaan buursadaan kala xidhiidhaan arrintaas boqorka Armiiniya saaxiibkiisa cusub,isagaana safaarad cusub u noqday Tataarka una fulinayo dhamaan waxyaabaha ay uga baahdaan Yurubta kale ama goboladan .. waxaa dhiirigelin labaad ah in boqorka Tataarku uu siin doono madaxdan Siliibiyiinta Baytal Maqdis hadiyad ahaan markii ay isku afgartaan heshiiskan ka dib.. wuxuu ahaa Baytal Maqdis markan mid ku jira gacanta Muslimiinta oo waxaa xoreeyey mar labaad Salaaxudiin Al Ayuubi ilaahay haw naxariisto sannadkii 643h ka dib markii ay madaxdii Shaam u hadiyadeeyeen Siliibiyiinta sannadkii 626h.. waxaadba moodaa in Monko khaan uu gacantiisa imminka ku jiro sida uu hadiyad ahaan ugu bixinayo isaga oo aan weli gaadhinba Shaam..isaguna uu hadiyad ahaan u siinayo cidda xaq u leh!! Waana arrin gumeystayaasha lagu yaqaan in uu siiyo cidda uu doono waxa uu jecelyahay siiyona cid aan xaq u lahayn..taariikhduna been ma sheegto..!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Marka waxaas oo dhiiri gelin ah laysku daro,hadana dhamaan madaxdii boqortooyooyinkii Shaam arrintaas inay aqbalaan waa ay ka war wareegeen marka laga reebo boqorkii Andaakiya ee Bohmanda la odhan jiray oo isagu soo dhoweeyey markiibana isku tiriyey Tataarka.

Oo maxaa dhacay toloow oo madaxdani u aqbali waayeen fekerkan?

Sababtoo ah iyagu:

Kow: waa ay garanayaan in aan Tataarku ballan lahayn,ayna doonayaan inay afmadhan waxku kala iibsadaan,iyo inay leeyihiin baayacaad keliya aan waxku kala iibsanno macnaha wax aan iyaga(madaxdan) dani ugu jirin..ama aan waxbaba lays dhaafsanin.

Laba:waxay ku dhexjiraan badhtamihii caalamka Islaamka,sidaa darteed khatarta Muslimiintu ay la tahay oo kale khatarta Tataarka,mayee Muslimiinta khatartooda ayaaba u dhow labada..markaa xamaasadi ma qaadin madaxdan oo layskagama degdegin ogeysiiskan Tataarka,mana ay diidin si cad,laakiin waxay ula dhaqmeen si siyaasasad munaafaqadeysani ku jirto oo ay caanku yihiin,dhinac waa ay uga dhoolacaddeynayaan iyo hadal dedan oo aan hore loo fahmayn,waxana ay doorteen inay meel dhexdhexaad ah is taagaan laba gebi dhexdood,gebiga Tataarka iyo gebiga Muslimiinta,ka dibna ay u degdegi doonaan kooxda guuleysata labadan: u sacabin doonaan,tahniyadayn doonaan u bushaareyn doonaan ka dibna aamini doonaan..kuna cudur daaran doonaan haddii(aanay duruuf adagi jirin) oo waqtigaas dhulkoodu ku jiray ay guusha kala qayb qaadan lahaayeen.. arrintani waa waxa qaarkeen ugu yeedhaan (Siyaasad)..!!

4.waxa uu mar kale ku dhawaaqay heshiis uu la gelayo Nasaarada Shaam iyo Ciraaq,laakiin doorkan heshiisku madax kuma socdo ee waa Nasaaradii ku dhex nooleyd Muslimiinta Shaam iyo Ciraaq.. laakiin heshiiskani ma uu ahayn heshiis rasmiya lana ogeysiiyey,laakiin waxay ahaayeen heshiisyo qarsoodi ah oo lala galay qaar ka mid ah madaxda Nasaarada,taasina waxay fududeynaysaa soo gelitaanka Tataarka dhulkan ay soo galaan,iyo inay wararka ka qaadaan halka ay joogaan una gudbiyaan Tataarka..waxa uu ku guuleystay Monkokhaan tiro aad u badan oo dadkan ah inay u fuliyaan hawlahan uu u igmaday waxaana dadkan madax u ahaa nin la odhan jiray Badriik oo joogay baqdaad,magaciisa dhabta ahina waa Maakiik,wuxuu ahaa kaalmeeye ka shaqeeyey sidii loo soo galay Baqdaad.

5.Monkokhaan wuxuu heshiis la sameeyey boqoraddii Joorjiya ee Nasaarada ahaa,iyadoo ay taariikh madaw ahi ka dhaxaysay Tataarka iyo Joorjiya..sida la ogyahay Taariikhda Joorjiya iyo Muslimiinta ka dhaxaysay ayaa tan hore kasii madoobayd,laakiin waxa ay Nasaarada Joorjiya doorbideen inay la midoobaan cadawgooda cusub ulana midoobaan la dagaalanka cadawgoodii hore ee Muslimiinta taasna waxa sababay laba arrimood:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Tan hore;Tataarku inay haystaan awood aad u badan markaa la hubo inay ka guuleysan doonaan Muslimiinta,

Tan labaad;dagaalka ka dhexeeya Nasaarada iyo Muslimiinta waa mid caqiido oo weligeed jireysa,sidaan hore usoo sheegnay,nacayb aad u badanina ka dhexeeyo labada dhinac,mana dhacayso caqiidada cid iska beddelaysaa,sidoo kalena ma jirto cid beddelaysaa nacaybka ay dhinaca kale u hayso..maqnaanta nacaybku waa iyada oo caqiidadu meesha ka baxdo.

وَلَا يَزَالُونَ
يُقَٰتِلُونَكُمْ حَتَّىٰ يَرُدُّوكُمْ عَن دِينِكُمْ إِنِ ٱسْتَطَٰعُوا۟

ma daynayaan inay idinla dagaalamaan ilaa ay diintoodii idinku celiyaan hadday awoodaan!!

Laakiin dagaalka Tataarku wuxuu ahaa dagaal daneed,hadaad danahooda u diidid dagaal filo,hadaadse danahooda u fulisaan heshiis baad tihiin saaxiibona waad tihiin..waxaa is waafaqay danihii Joorjiya oo Nasaaro ahayd iyo danihii Tataarka oo bilaa diin ahaa markaa hal waddo ayey wada marayaan sida inoo muuqata..taasina mar labaad waa waxay ku sheegaan (Siyaasad..)..!!

6.haddii dhamaan wada hadallada iyo heshiisyada aan soo sheegnay hal keffed wada saarnaayeen kuwan kale ee aan sheegi doonona waxay saaran yihiin keffed kale..uma sheegayo oo qudha muhiimadda ay lahaayeen laakiin waxaan u sheegayaa yaabka ay lahaayeen..amaba dheh liidashadooda..!!

Heshiisyadani waxa ay dhexmareen qaarka mid ah Madaxda Muslimiinta si looga khafiifiyo garaacista dhulalka Muslimiinta..!!

Waxan oo is afgarad dunida uu la sameeyey Monkokhaan madaxdan Muslimiinta lama samaynin waayo aad iyo aad ayuu u yasay,waayo mid kasta oo ka mid ahi waxa uu xukumayey dhawr kiiloo mitir,markaas ayuu haddana isagu isku magcaabayaa Amiir ama Madaxweyne,amaba waxa uu isku naanaysayaa magacyo waaweyn sida kii ugu sharafbadnaa madaxda oo kale iwm.

Monkokhaan waxa uu u wakiishay wada hadalladan dulleynta ah, walaalkii Holaako,waa kuwan usoo kala degdegaya Muslimiintii taagta yaraa heshiiskan ay la geli doonaan Tataarkii awoodda badnaa.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

فَتَرَى ٱلَّذِينَ فِى قُلُوبِهِم مَّرَضٌ يُسَـٰرِعُونَ فِيهِمْ يَقُولُونَ ﴿٥١﴾
نَخْشَىٰٓ أَن تُصِيبَنَا دَآئِرَةٌ ۚ فَعَسَى ٱللَّهُ أَن يَأْتِىَ بِٱلْفَتْحِ أَوْ أَمْرٍ مِّنْ عِندِهِۦ
فَيُصْبِحُوا۟ عَلَىٰ مَآ أَسَرُّوا۟ فِىٓ أَنفُسِهِمْ نَـٰدِمِينَ ﴿٥٢﴾

Waxaad arkaysaa kuwii quluubta ka bukay oo u degdegaya dhinaca gaalada waxay leeyihiin: waxaan ka cabsanaynaa in inkaari nagu habsato,waxaa la arkaa in ilaahay uu keeno furasho ama arrin kale oo agtiisa ah,markaas ayey ka murugoodeen waxay naftooda u qariyeen.

_waxaa Holaako u yimid (Badrudiin LuLu) waa hoggaamiyihii Mawsil si uu ula gaashaan buursado.

_waxaa yimid labadii Suldaankii ee Salaajiqada (Kawkaaskii labaad) iyo (Qarji Arsalaankii afraad) si ay ula midoobaan Tataarka,waxayna joogeen meel aad u xasaasi ah,labadooduba waxay joogeen waqooyiga Ciraaq (imminka ah Turkiga) la midowgooduna waxa uu gacan ka geysanayaa in go'doominta Ciraaq dhinaca waqooyi,weliba labadan Kawkaaskii labad mid aad u liita oo qalbiga ka jeclaa gaalada oo gaadhay heer ay iyaga Tataarku burburiyeen!.

Ka dib waxaa is keenay ninkii la odhan jiray (Naasir Yuusuf) oo ugu xukun balaadhnaa Dimishiq iyo Xalab,isaga oo uu uga tegay shiikhii waynaa ee Salaaxudiin Al Ayuubi رحمه الله.

Waxa xilkan kaga tegay hogaamiyihii Mujaahidka ahaa ee Salaaxudiin,dhinacna kama shabbaho akhlaaqdii iyo dhaqankii Mujaahidkaas,waxa uu ahaa mid aad u liita oo gaadhsiisan ilaa heer uu inankiisi u diray Holaako uu farayo in uu aqbalo oo keliya,kana mid noqdo ciidamada Tataarka oo keliya.

Sidoo kale waxaa yimid Ashraf Ayuubi waa guddoomiyihii Ximsa si Tataarku uga aqbalaan codsiga,waxan oo dhammi waxay ahaayeen arrimo khatartooda leh..waxay kale oo leedahay liidashadeeda iyo yasid halkii ugu dambaysay,waxay kale oo siyaasidenaysaa awoodda Tataarka ee go'doomin doona Ciraaq dhinac kasta,waxayna ogaan doonaan wararka dalka Ciraaq si sahlan,intaas oo dhan waxaa kasii daran waxay niyad jab aad u xun u gaadhsiinaysaa dadka shicibka ah marka ay arkaan hoggaamiyahoodii waxa uu sameeyey ka dibna waxaa la jabayaa col hortii!! Waxaa taag dareeyey markaa quluubtii shacabka oo dhan,go'aanadii ayaa kala daatay,waxaa dhamaan curyaamay kalsoonidii hoggaamiyaha lagu qabay,ka dib waxaa meesha ka baxday wejigii laysku hortaagi lahaa Tataar.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Dhamaan wada hadalladani waxa ay ahaayeen kuwo dunuubi ka buuxdo dhinac kasta oo laga eego..

7.waxa uu gaadhay dedaalkii Holaako ee siyaasadda iyo dibloomaasiyadda isugu jiray inuu ugaadhsado shakhsiyaadkii madaxda ahaa Cabbaasiyiinta dhexdooda..wuxuu xidhiidh la sameeyey wasiirkii ugu sareeyey dawladda Cabbaasiya,waana shakhsiga labaad marka laga yimaaddo Khaliifka..waa Mu'ayid Al Calqami oo (Shiici ahaa)..!!

Mu'ayid waa nin aad u xun faasid ah samaha ka dheer oo diidmo badan wuxuu diidanaa ka hor Khaliifnimadii Abi Bakar iyo Khilaafadii Cumar ilaahay labadoodaba raalli ha ka ahaadee,shiiconimaduna aad bay ugu fogeyd,aadna waxa uu u nebcaa Sunniga iyo dadka reer Sunniga ah,waxaa la yaab ah haddana sida uu derejadan sare u gaadhay oo qof noocaas ahi ugu hayey dawladdan Muslimiinta ee weliba Sunniyiinta ah xilkan intan le'eg,laakiin shaki kuma jiro in faham la'aan darteed arrintani udhacday,iyo garashada oo laga abaarsadey,iyo qorshaha Muctasim Billaah oo aad u liitay waayo umaba dhiibteen xilka intaas le'eg ninkan khatarta ku ah dawladooda.

Wasiirkani waxa uu ka mid ahaa kuwa shaqooyinka ugu xun xun ka fuliya Cabbaasiyiinta,marka cid kasta oo caqli lehna kama qarsoona shaqo xumadaasi midheheedu ay yihiin in uu dalka fasahaadiyo, shicibkana Halaago.

أن رسول الله ﷺ قال:«ما استخلف خليفة إلا له بطانتان: بطانة تأمره بالخير وتحضه عليه، وبطانة تأمره بالشر وتحضه عليه، والمعصوم من عصم الله».

Arrinta waxan oo ka dhan ka darani waxay ahayd in aan wasiirkani aanu xilkan haynin bil iyo laba ama sannad iyo laba sanotoona laakiin waxa uu hayey xilkan muddo afar iyo toban sano ah oo buuro ah laga bilaabo sannadkii 648h ilaa 656h markii ay dhacday Baqdaad..mar haddii aanay intaas oo dhammi khaliifyada Cabbaasiyiintu fahmin ninkan khatarnimadiisa,taasi waxay daliil cad u tahay caqli yaraantooda dhamaan madaxdii Ciraaq.

Waxa uu lasoo xidhiidhay Holaako Mu'ayid Diin Isaga oo ka faa'iideysanaya fasaadkiisa,xumaantiisa iyo Shiiconimadiisa iyo weliba nacaybkiisa uu u qabo Sunniga,waxa ay isla afgarteen in uu u fududeeyo soo geli taanka ciidamada Tataarka ee Baqdaad,iyo in uu ka kaalmeeyo fekerada lagu duminayo iyo in uu la socodsiiyo dhamaan dhaqdhaqaaqa khilaafada gaar ahaan Muctasim Billaah taasina ay u fududahay waayo waxa uu dhexfadhiyaa xukunkii dawladda oo dhan,isla markaana isagu xukunka la wareegi doono marka la rido Khaliifkan Khilaafada meesha laga

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

saaro..saameynna waxa uu ku lahaa go'aannada dawladda iyo dhamaan dhacdooyinka ka dhacayey waqtigaas geyiga Cabbaasiyiinta.

Dhamaan dedaalladan dibloomaasiyadeed ee ay sameeyeen Monkokhaan iyo Holaako waxay uga ka mid ahaayeen diyaar garoowgii aadka u darnaa ee ay ugu diyaar garoobayeen weerarkoodan argagixisada ah,isla markaana biyadhaciisu ahaa arrin aan dunida hore uga dhicin inay sameeyaan..mar keliya ayuu dhacay..waa riditaankii caasimaddii Muslimiinta.

Gebgebadii dedaaladii dibloomaasiyadeed ee Tataarku waxay kusoo urureen inay la gaashaan buursadeen boqortooyadii Armiiniya,Joorjiya,Andaakiya dhamaantoodna Nasaaro ahaa,xidhiidh adag oo aan hore u jirin ayey la sameysteen dhamaan madaxdii Nasaarada ee Shaam,waxay la sameeyeen xidhiidho qarsoodi ah Nasaaradii Shaam iyo Ciraaq,sidoo kale qaar ka mid ah madaxdii Muslimiinta oo ku jiro wasiirkii Faasidka ahaa ee Mu'ayid diin waa shiicigii weynaa.

Marka laysku wada daro dedaalladan dibloomaasiyadeed ee Tataarka shaki kuma jiro inay gacan weyn ka geysteeen guusha qorshahoodii riditaanka khilaafadii Muslimiinta.

Waxaa caqliga ku adag_muslimiinta guud ahaan mid mid dhif ah maahee_hal mawqif ayey ka taagnaayeen arrintan,aad moodid in aanay danba ka lahayn..ama iyaga oo dareemaya ayey haddana wada ahaayeen kuwo laga inaabsaday oo ka baqaya inay dhiig ka galgashaan

Xadhigga saddexaad:**dagaal nafeed oo lagu soo qaaday Muslimiinta:**

Marka laysku daro waddooyinka badan ee Tataarku u mareen arrintan iyo hay'adaha badan ee ay sameysteen iyo dedaallada dibloomaasiyadeed ee ay ku keceen Tataarku waxay guuleysay qorshihii Tataarka ee ahaa Khilaafada oo dhulka la dhigo,Holaako ayaa mar kale wuxuu soo qaatay hub aad u argagax badan arrintaasina waa dagaal nafsi ah dhinaca Muslimiinta.

Waddooyin badan oo kale uu Muslimiinta ku jebinayo dagaal hortiiba waa uu isticmaalay.

Waddooyinkaas waxaa ka mid ahaa_tusaale ahaan

1) In laga fuliyo olole argagixin ah degaannada ku xeeran Ciraaq,kuwaas oo aan ujeeddo kale laga lahayn aan ka ahayn baqdin gelin,iyo fidinta wararkooda,kuwaas oo soo taxnaa ilaa waqtigii Jingiskhaan iyo Okitay..duulaankii ugu horeeyey ee waqtigii Jingiskhaan waxa ay ahayd ku dhowaad ku dhowaad soddon sano,waqtiga waxaa la helayey jiilal Muslimiin ah oo aan hore u arag tan oo kale,laakiin ka maqlay awooweyaashood iyo aabayaashood..kan looga sheekeeyey lama mid aha kan arkay..ololihii labaad ee Tataarku wuxuu ahaa waqtigii Okitay,ujedadiisuna waxay ahayd burburin

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

iyo dabargoynta dhulka Muslimiinta,salkeeduna waxaa uu ku salaysanaa Raashiya,bariga Yurub iwm,ka dib saameyn weyn kuma yeelan dhulalka Muslimiinta.

Sidaa darteed waxa uu doonay Holaako in uu hawl gal Milateri oo burburin iyo argagixin ah loogana gol leeyahay in Muslimiinta la ogeysiiyo in dagaalada Tataarku aanay joogsan..iyo in ay ciidamada Tataarku weli awoodoodii leeyihiin adduunyadana ku fidayaan.

Arrintaas waxaa tusaale u ah in koox Tataar ahi ay duullaan ku qaadeen sannadkii 650h gobollada Jasiiradda,Suruuj iyo Sinjaar,waa gobollo ku yaal waqooyiga Ciraaq,waxay ka geysteen dil,dhac,iyo qafaalasho,waxyaabaha ay weerarkan ku sameeyeen waxaa ka mid ahaa inay ka qaadeen oo la wareegeen xoolo aad u tiro badan oo ahaa safar ganacsi oo u maqnaa degaannadan,xoolahaas waxaa lagu qiyaasay lix boqol oo kun oo Diinaar waa waxa ay imminka ku tilmaamaan booli kaydsi.

Shaki kuma jiro in ay khasaare aad u balaadhan gaadhsiinayso khilaafada Cabbaasiyiinta arrintani,isla waqtigaas haddana waxaa hoos socotay weerarkan diyaar garoowga ciidamada Tataarka ee dhinaca dhaqaalaha,waxaa kasii saraysa waxay ahayd dhoola tus,dalbarasho cilmi baadhis juquraafiga Ciraaq..waxyaabahaas oo dhan isku soo wada duuboo waa fidinta argagixin iyo cabsi ku abuuris Muslimiinta.. waxay kale oo dagaaladani u muuqdeen dagaalo ku tiiqtiiqsi ah..aad ayeyna u daciifiyeen tamartii Khilaafadii Cabbaasiyiinta..waxaa saameysay cimilo dagaal..dagaalada noocan oo kale ahi taariikhda waa ay kusoo noqnoqdaan..gawracii ka dhacay Dayru Yaasiin,iyo waxay cidhib xumo ka tagtay ma aha wax innaga fog.

2.waddooyinka dagaal ee Tataarka isticmaaleen isla markaana bahda ay kaga saarayeen dadka Muslimiinta waxaa ka mid ahaa dhinaca warbaahinta oo ah dagaalka ugu xun,waxaana u qaabilsanaa arrintaas qolada daba dhilifyada u ah Tataarka ee joogay dhulalka Muslimiinta,suuqyada dhexdooda ayey kaga sheekeeyaan awoodda xad dhaafka ah ee Tataarka,iyo diyaar garowgooda oo ah mid si heer sare ah u agaasiman,waxay mar walba is barbar dhigaan awoodooda iyo tamarta Muslimiinta..waxaas oo dhan waxay geliyaan warbaahintii waqtigooda jirtay..warbaahiyeyaasha casrigaasna waxaa ugu horreeyey gabyaayada iyo abwaanada,dadka sheeko xariireedka yaqaan iyo taariikh yahannada..waxa ay ku muujiyeen qoraaladooda waxa ay ka fali doonaan Muslimiintu dagaalka Tataar iyo sida loo tunjaleecsan doono sida.

- Wararka Tataarku dunida waa ay gaadheen,laakiin wararkiinu meelna ma gaadhin(waxay u jeedaan hoogga iyo halaagga ay ka sameeyeen caalamkii ay qabsadeen,isla markaana sirdoonkoodu aad u sarreeyo,idinkana war sireedadiinu geedkaa ma gaadhaan).
- Tataarku hadday meel muraadaan intay u diyaar garoobaan ayey hal mar gacanta saaraan,lamana ogaado ilaa ay soo galaan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

- Tataar dumarkoodu waxa ay u dagaalamaan sida raggooda..(raggii Muslimiintuba waxay ka sii baqeen dumarkii)..!!
- Fardahoodu waxay qodaan dhulka ilaa ay xididada dhirta soo qodaan,waxay cunaan dhididka dhirta,geedana uma baahdaan!.
- Tataar hilib oo dhan way cunaan..xataa kan banii aadamka ayey cunaan..!!

Shaki kuma jiro qoraalada noocan oo kale ahi inay iskaba yihiin argagax iyo naxdin guud ahaan..nafaha qaarkoodna ay gaar ahaan u saameynayso..belaayadan laga waramayo ayaa dadkii waalli ku abuurtay..ama sideeda ayeyba waalli u tahay.

3.waxyaabaha kale ee dagaalka dhinaca mooraal jebinta ah ee ay Tataarku u isticmaaleen Muslimiinta waxaa ka mid ahaa waraaqo cago jugleyn iyo hanjebaado aad u cabsi badan,oo loo dirayey madaxda Muslimiinta,markaas ayey nacasnimo awgeed markay soo gaadhaan dhambaaladaasi ayey dadka u akhriyi jireen Muslimiinta madaxda sheeganayaa,waraaqahani waxa ay ka waramayaan inkaar qabayaashani siday wax u galaan,waxaa ka mid ahaa fekredaha xariifnimada leh ee ay Tataarku adeegsan jireen waa inay adeegsadaan kuwa keenaya wararkan iyo Munaafiqiinta si ay ugu qoraan waraaqahan,iyaga oo ugu qoraya luuqad ay aad u fahmaan,iyo xadhkaha lagala hadlayo,taasina ay ka raadeyn badan tahay luuqad la turjumayo oo aan waxbadan laga fahmaynin,waxay gaadhsiiyeen heer ay dadka u sheegaan in ay Muslimiin yihiin,gaalona aanay ahayn,kitaabka ilaahayna ay aaminsan yihiin (Quraanka) asalkoodii horena uu Islaam ahaa,dhulkanna aanay u iman waxaan ahayn inay dulmiga ka saaraan,iyo in Muslimiinta cagta qoorta lagaga hayo u gar gaaraan gaar ahaan shicibka (uma aanu iman waxaan ahayn in aan xoreyno Ciraaq!!) qabashadoodana aan cidi ka baxsan karin taasina waa caan cid walibana waa ay ogtahay,hadalladaas oo dhami waxay si toos ah ugu dhacayaan kuwii qalbiga ka bukay iyo kuwii iimaankoodu tamar yaraa,markaas ayey soo dhoweynayaan Tataarka,isuna dhiibayaan Seefta,soo dhoweynayaan kuwii guusha u ahaa ee xoreynayey sida ay moodayaan,xilkana ka tuurayaan inkaar qabayaashan haysta.

Dhambaaladan Tataarka ee waqtigaas jiray casrigeenan waa ay innagu badan yihiin,laakiin markii ay gacanta u galaan,naf ahaanna loo jabo,raad taban ayey ku yeelanaysaa raadkaasina ma hadhayo.

Waraaqahaas aan soo sheegnay waxaan ka xusi doonaa hal waraaq oo Holaako u diray mid ka mid ah madaxdii Muslimiinta.

“waxaanu nahay ciidan ilaahay.

Mid kasta oo wax is bida waan soo hoggaan barnaa,cid kasta oo libaax iska dhigana bisad ayaanu ka dhignaa,amar ilaahay ayuun baanu ku qabanaa.

Adduunyadii waanu halaagnay,basharkiina waanu dabargooynay,dumar iyo caruur waanu xasuuqnay.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Kuwiina hadhayoow,waxaad ka daba tegaysaan kuwii tegay.

Waar dhoohanayaashoow,waad raacaysaan.

Ujeedadayadu waa aargoosi,weerarkayagana cidi ma celin karto.

Caddaaladd maamulkayagu waa mid uu caan ku yahay,Seefahayaguna meel looga baxsan karaa ma jirto.

Waanu baabi'nnay adduunyadii,caruurtiina waan agoomaynay,addoomadiina waan halaagnay,cadaabna waanu dhadhansiinay.

Kuwii ugu tunka waynaa ayaanu yaraynay,hoggaamiyahoodiina maxbuus ayaan ka dhignay.

Waxaad u malaynaysaan in aad naga badbaadeysaan,lana idinsoo gaadhi karin,waxyar ayaad ka garanaysaan meesha aad u cararaysaan,qof kuu digayna kuma dilin"

Shaki kuma jiro in waraaqaha noocaas oo kale ahi marka ay ku dhacaan qalbiga qof baqaya ama fulay,weligii awood uma helayo in uu sameeyo dhaqaaq yar ka dib marka uu akhriyo,waraaqahan iyo waxyaabaha ay ka hadlayaan waa wax lagu rajo weyn yahay in ay dhacaan oo la fili karo..!!

4_waxyaabaha kale ee ay warbaahinta u marinayeen Muslimiinta si ay u baqo geliyaan Muslimiinta waxaa ka mid ahaa in ay u sheegaan la midowga Armiiniya,Joorjiya iyo kuwo kale,welibana ay aad u soo dhoweynayaan inay heshiis caawimo ah la galaan madaxda Yurub is ay isu kaashadaan,si ay Muslimiintu ugu maleeyaan in wixii dunida joogay oo dhammi la dagaalamayaan,taasna aanay awood u haynin la dagaalankooda,iyada oo taariikhdii hore ee Muslimiintu ay guulo ka gaadheen kuwan oo kale,iyo laban laabkood,laakiin Muslimiinta ayaa Taariikhdoodii ilaaway,kuna hambabaray cadawgooda iyo is xulufaysigiisa.

5_mar kale waxyaabaha Tataarku warbaahinta u adeegsadeen si ay u niyad jebiyaan Muslimiinta waxaa ka mid ahaa in ay xidhiidh la sameeyeen madaxda Muslimiinta sidaan kusoo sheegnay dedaalkii Dibloomaasiyadda, shaki kuma jiro in shacabka Muslimiintu haddii uu majaraha u qabto hoggaamiye garanaya waajibaadkiisa uu maamulayo agaasimayo,isla markaana difaacayo,Naftiisana uu ku beddalayo amniga dadkiisa iyo dalkiisa,kan u malaynaya in uu heshiis la gelayo Tataarka ee doonaya in uu kaalmeysto,una diyaar garoobaya in uu hadiyad ka mida kuwiisa ugu qaali san ku bixin doono arrintaas.. shaki kuma jiro shicib Muslim ah haddii uu helo kan oo kale in shicibkaasi dhulka gelayo siina dhiman doonaan inta aan la leynin ka hor,una jabi doonaan si aan looga waaqsan..waayina doono dhamaan xamaasaddii uu ku difaaci lahaa dhulkiisa iyo waddankiisa.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waddooyinkaas aan soo sheegnay iyo kuwo kaleba waxa ay awoodeen oo ku guuleysteen Tataar inay baqdin iyo holac ku abuuraan quluubta Muslimiinta,sidaa darteed waxaa hadhaysmay cimilo ay aad u fiican tahay in ay gudaha u galaan awoodaha Tataar ee hubeysani.

Xadhiga Afraad: wiiqiddii Ciidamada Khilaafada Cabbaasiyiinta:

Holaako waxa uu kusoo tiirsaday Wasiirkii faasidka ahaa ee (Mu'ayid Diin) in uu ku qanciyo Madaxweynaha (Muctasim Billaah) in uu dhimo Miisaaniyadda ciidamada,iyo in uu yareeyo tiradooda, iyo in aan dhaqaalaha dawladda loo geysan gabood fallo ah in hub la iibsado iyo dagaalo aan dalku u baahnayn oo laga rido dalka ee dhaqaalaha waxyaabo kale oo faa'iido leh in lagu qabto,waxaba uu u beddelay ciidamadii dalka shaqaale shicib ah oo ka shaqeeya beeraha iyo wershedaha iyo wax la mid ah..dhamaan maanta waan aragnaa sida loogu mashquuliyey ciidamadii dalalka Muslimiinta inay ka shaqeeyaan beerista Khudaar iyo dhisidda Biriijyo..cunto samaynta iyo ciyaaraha iwm...!! Iyada oon wax mudnaan ah la siinaynin dhisidooda iyo tababarkooda dagaal iyo Jihaadka..! waxa uu u sameeyey arrintaas aan sheegnay wasiirkii daba dhilifka gaalada u ahaa kas iyo ula kac,la yaabna ma aha isaga iyo kuwa la midka ahi,laakiin waxaa wax laga Khajilo ah ka hor sida ay ahayd Khilaafadani,sida uu sameynayey wasiirkan faasidka ah oo kale,dhinacna uu iska muujinayo in uu yahay nin nabadeed aan dagaal rabin!.. waxay khaliifadii sameysay inay dhinto miisaaniyaddii ciidamada,hadana waxa ay yaraysay tiradii ciidamada,ilaa uu noqday ciidankii baqdaad ee Muslimka ahaa ee tiradiisu ahayd boqol kun oo dagaal yahayn Muctasim Billaah ka hor aabihiis (Muntasir Billaah)markuu haystay 640h mid aan ka badnayn toban kun oo dagaal yahan oo keliya sannadkii 654h..!! waa hoos u dhac aad looga naxo oo dhinaca ciimada kaga dhacay khilaafada..intaas oo keliya maahee waxa ku habsaday ciimada dhaqaale la'aan aad u daran iyo dayac gaadhsiiyey heer ay dadka suuqa wax ku waydiisan jireen!.. tababarna meesha ayuu ka baxay,meelba waa loo waayey ciidankii dalka gebi ahaantiisba,lamaba tirsan mid lahaa awood hogaamineed,mid lahaa qorshaynt iyo maamultoona,waa ay ilaaween Muslimiintu fanniyadii dagaalka..waxa kale oo maskaxdooda ka baxay qiimihii uu Jahaadku lahaa..!!

Taasina walaahi waa khiyaamo cad..iyo dembi WEYN..!!

Wuxuu leeyahay Ibnu Atheer_isaga oo canaananaya Mu'ayid Diin Alcalqami talooyinkiisii uu u soo jeedinayey Muctasim Billaah,laakiin canaanta ugu weyn waxa uu saaray khilaafada lafteeda..waayo waxay aqbashay waxan oo bahsid (bahdilaad) ah,oggolaatay dullinimadan,iyo mooganaantiisa ay maskaxdiisa ka baxday madaxweyne ahaan in uu isaga waajibaad ka saaran yahay Ilaalinta nabadgelyada dadkiisa iyo dalkiisa,iyo in uu ciiddiisa iyo dalkiisa ka difaaco cadaw kasta oo kusoo duula,kana feejignaado qabsashada dhulkiisa,iyo in uu dedaalkiisa ugu badan ku bixiyo xoojinta ciidamada dalka iyo hubayntooda,iyo in uu dhamaan dhiirigeliya dadka ra'yidka ah dhamaantiis_ma aha ciidamada oo qudha,jeclaysiinta bulshada ee Jihaadka dar ilaahay loo dagaalamayo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Ma uu samaynin Muctasim Billaah arrimahaas oo dhan,umana cudur daarayno,xukun ayuu haystay uu ku gaadhi karo go'aanka uu doono isagu..laakiin naftu hadday tamar darrayso ma gaadhi karto go'aan afbadan leh oo wax goyn karaya.

Waxyar waxaa mudan in aan is dultaagno Holaako iyo warkiisa sannadkan 654h ka dib diyaar garoow dhamaystiran iyo u qalab qaadasho balaadhan oo dagaal weyn:

Kow: dhamaan waddooyinka isku xidha Shiinaha iyo Ciraaq waxaa uu ka dhigay ku u diyaar ah inay soo maraan ciidamo fara dhaaf ah oo Tataariyiin ah,waxaana laga dhisay Biriijyo waaweyn oo laga gudbiyo alaabooyinka culculus,waxaa laga nadiifiyey waddooyinka waaweyn iyo wadiiqooyinkaba dhamaan xayawaan dab joog iyo duurjoogba si ay u daaqaan fardaha Tataarku.

Laba: waxay gacanta ku dhigeen dhamaan dhulalkii ku hareeraysnaa waddooyinka Ciraaq ilaa Shiinaha si ay ciidamadu nabad gelyo ugu maraan wadadan iyo dhambalidooda dhulkan aadka u balaadhan.

Saddex: waxaa gaadhay Holaako warar tafatiran oo ku saabsan Ciraaq iyo dhulkeeda,dhufaysyada Baqdaad,tirada ciidamada Cabbaasiyiinta iyo awoodooda dagaal,dhamaan wuxuu kale oo warkooda daalacday waxa ay dhaqaale haystaan,waxa kale oo uu ka war helay meelaha ay u jilicsan yihiin iyo meelaha ay u adagyihiin,iyo dhamaan magacyada dadka isbeddelladani saameyn ku yeelan doonaan dhacdadani ka dib,iyo guud ahaan wararka shicibka iyo sida niyaddoodu tahay,waxa ay doonayaan iyo waxyaabaha ay madaxdooda kaga soo hor jeedaan.

Dhamaan macluumaadkan waxaa soo gaadhsiiyey basaasiintiisa iyo dad uu ku dhex beertay Muslimiinta dhexdooda iyo qaar daba dhilifyo ah oo gaadhsiisan ilaa heer wasiiro.

Afar: waxaa Tataar la galeen heshiisyo is bahaysi ku ladhan yahay wadamada Armiiniya,Joorjiya,Andaakiya, waxayna ballan ku qaadeen inay ka caawin doonaan dhinaca dagaalka iyo wararka oo ay si hagar la'aan ah u soo gaadhsiin doonaan.

Shan: wuxuu dhamaystiray mideynta madaxda Yurubta galbeed,mideyntaasi wejigeedii hore ma ahayn siyaasad,waxayse ahayd mid madaxda ah uuna ugu yeedhay mideynta ra'yiga iyo hubka.

Lix: ka dib waxa uu heshiis la galay madaxdii Muslimiinta ee waqooyiga iyo galbeedka Ciraaq (Turkiga iyo Suuriya) wuxuuna heshiis kula galay inay bixinayaan nabadgelyo buuro ah,iyo inay gacan siin doonaan iyaga oo aan wax shuruud ah ku xidhin Holaako,haddaa waa marka uu dagaalka Baqdaad ku jiro,waxaa nasiib darro ah inta ugu badan madaxdani waxay ahaayeen Kurdiyiin iyo Axfaad(salaaxudiin AL Ayuubi ilaahay haw naxariistee ayey kasoo jeedeen)!.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Toddoba: waxa uu hubsaday Holaako in ay niyad ahaan u jabeen dadkii Muslimiinta ahaa ee reer Ciraaq iyo hareereheeda isla markaana ay isku mid noqdeen kii xukunka haystay iyo kii uu xukumayeyba.

Sideed:waxaa uu Holaako la samaystay heshiis aad loogu kalsoon yahay wasiirkii koowaad ee dawladda Mu'ayid Diin al Calqami ee shiiciga ahaa,wuxuuna u ballan qaaday in uu si buuxda xilka ugu wareejin doono (xilka Khilaafada).

Sagaal:wuxuu xaqiiqsaday Holaako tamar darrada ciidanka Cabbaasiyiinta iyo xeelad yaridooda,markaa waxaa u soo baxday in aanay naftooda difaaci karin iska daa inay Baqdaad difaacaane..!!

Toban: Holaako dhan kasta waa uu ka ogaaday khaliifka (Muctasim Billaah) khaliifada Muslimiinta saabaankeeda iyo saadkeedaba,awoodeeda iyo itaalkeedaba.

Dhamaan arrimahani waxay usoo gebageboobeen Holaako sannadkii 654h.

Hadaba_ ka dib diyaar garoow shan sano ah waxaa u muuqday Holaako jawi iyo cimilo sheegaysa inay tahay xilligii dagaalka lagu qaadi lahaa Ciraaq,lana ridi lahaa Khilaafadii Cabbaasiyiinta..waxa uu bilaabay in uu ciidamadiisii ciidda oo dhaqaaqday isla markaana ciidankii ugu badnaa ilaa iyo intii dawladda Tataarka la aas aasay..waxaa jiray ciidamo keliya loo watay go'doominta Baqdaad,kuwaas go'doominta waxaa lagu sheegay laba boqol oo kun oo askari,marka laga tago ciidamada ilaahay uun garan karo tiradooda ee lagu ekaysiiyey waqooyiga iyo bariga Ciraaq,waxaa dheer ciidamada loogu talo galay inay ilaaliyaan waddooyinka ciidanku marayo amnigana sugaan,waa marka aan la tirin ciidamada ilaalada ah iyo kuwa loogu talo galay horbaxanyaha

Waxaynu awoodnaa markaa inaynu kala abla ablayno siday u dagaal galeen oo ah sidan:

Kow: ciidanka Tataarka ee dhabta ah,waa kuwii ay xarun u ahayd muddo sannado ah Faaris iyo Adribayjaan bariga Ciraaq.

Laba: wuxuu magcaabay Holaako ciidan kale oo fadhigiisu ahaa webiga Alfoolga ee Raashiya,kuwaas oo uu hoggaaminayey dagaalyahankii caanka ahaa ee (Baato) ee furtay (Yurub) laakiin doorkan Baato ma marayo ee waxa uu soo diray saddex wiil oo uu walaalkii dhalay,Baato iyo qoyskiisu waxay degganaayeen gobolka webiga Folga waxayna isugu yeedheen (isu bixiyeen) (qoyskii Dahabka ahaa) qoys nasab sheegta ayeyna kasoo jeedeen,imminkana ku daba fayla boqorka guud ee (Monko khaan).

Saddex: ciidan kale oo xaruntiisu ahayd Anaadool (dacallada Turkiga) ayuu cid u diray Holaako,waa ay yimaadeen iyada dagaalgeliyahoodii waynaa ee reer Mangooliya lana odhan jiray (Biijo) wato,iyaga oo soo dhambalay Turkiga iyo waqooyiga Ciraaq isla markaana ku Jihaysan Baqdaad,lamana kulmin haba yaraatee wax iska caabin ah intii ay kusoo jireen socdaalkoodaas dheer,sababtuna waa hoggaamiyeyaashii

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

dhulalkan Muslimiinta ahi waxay heshiis la galeen Tataar heshiiskaas oo ahaa ISMA DAARNO,markaas ayey nabadgelyo u mareen Tataar,Anaadool,Mawsil,Xalab,iyo Ximsaba!.

Afar: waxa uu cid u diray Holaako saaxiibkiisii siyaasadda ee Armiiniya haystay,waa uu yimid (Haythuum) isaga oo laftiisu wata ciimadii dalkiisa.

Shan: wuxuu kale oo ka dalbaday boqorkii Joorjiya in uu soo diro ciidamo ka kaalmeeya go'doominta Ciraaq,si dhakhso ah ayey uga jawaabeen dalabkaas.

Lix: wax uu magcaabay Holaako kun warmooley ah oo ku caan baxay shiishka leebka lagu dhejiyo dabka ee la rido isaga oo ololaya.

Toddoba: waxa uu ciidankiisi ugu wanaagsanaa u dhiibay hogaamiyeyaashiisa kuwii ugu wanaagsanaa oo la odhan jiray (Katbuqaa Nuwiin) oo ay aad u sarrayso khibradda uu u leeyahay dagaalada,farsamooyinkiisan khabiir ku ah isla markaana Nasraani ahaa,sidaa darteed waxa uu awoodaa in uu xidhiidh la sameeyo oo uu u yeedho ciidamo aad u badan oo Nasaaro ah isla markaana dagaalka kala qayb qaata..sidaa darteed waxa uu isu keenay ciidamo safafkoodu gaadheen soddon ah kuwii ugu khatarsanaa ee ciidamada Tataarku leeyihiin ee la arko taariikhda Tataarka waana Katbuqaa,Holaako iyo Biijo.

Siddeed: waxa uu Holaako cid u diray madaxweynihii Andaakiya ee (Bohmaan) laakiin waa uu ka cudur daartay Bohmaan in uu soo cidleeyo Shaam oo aado Ciraaq,laakiin si buuxda ayuu ugu diyaar garoobay dagaal,si marka Baqdaad laga Takhaluso uu uga qayb galo riditaanka Shaam.

Sagaal: Naasir Yuusuf waa guddoomiyihii Dimishiq waxa uu diray inankiisi si uu uga mid noqdo ciidamada Holaako.

Toban: Guddoomiyihii Mawsil (Bedrudiin Lu,Lu)waxa uu diray ciidan xoojiya ciidamada Tataarka labadaas ciidan ee waaweyni iyaga oo ah Jab aad u weyn oo ay u geysteen Muslimiinta laakiin waxa kale oo ay xambaarsanaayeen macneyaal badan..waakuwaas Tataarkii oo Muslimiini la dagaal gelayso si loola dagaalamo Muslimiin!! Waxayba dagaalka ugu jiraan hawl gal ah (xoreynta Ciraaq) Ciraaqiyiin ayaa la safan Tataar..!! Ciraaqiyiintu wax kasta waxay dhaafsadeen kursigaas si looga tuuro,ama xukuumaddan daashay ama daarahan gaboobay..ama noloshaba seejiyaan..nolol dhamaanteed.

Diyaar garoowgan maqaamkiisu sareeyo waa uu u dhamaystirmay Tataar,waxaa bilaabantay inay kaga soo gurguurtaan Faaris dhinaca galbeed,Holaakona waa uu diyaarsaday kaartadiisii dagaal.

Markii uu xogtan ursursanayey Holaako waxa uu is dareensiiyey in kooxda la yidhaahdo Ismaaciiliya ee Shiicada ahi ay khatar ku tahay xaruntooduna tahay galbeedka Faaris iyo Bariga Ciraaq,kooxdani waxay caan ku tahay awoodda ay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

dagaalka u leeyihiin,dhufaysyo aad u ad adag,iyo tababarro heerkoodu sarreeyo,kooxdani waa kuwo aan ballan iyo axdi midna lahayn.. Tataarkuna waa ay ogyihiin in kooxdan khilaaf daba dheeraaday ka dhexeeyo Cabbaasiyiinta ,waayo mar hore ayey warqad u soo direen ay kaga waramayeen itaal darrida Jalaaludiin Khawaarsim Shaah intaan la dilin ka hor sannadkii 629h,waa Munaafiqiin had iyo jeer u xagliya dhinaca awoodda badan..iyada oo waxaas oo dhami jiraan haddana Tataarku waa ay aamini waayeen inay u dhaqaajiyaan ciidamadooda dhinacaas iyo Ciraaq oo dhabarkoodana ay kaga Tagaan ciidamadii Ismaaciiliya..waxaa intaas dheer aano raagtay oo u dhaxaysay Tataarka iyo Ismaaciiliya.. kooxdan Ismaaciiliya waxa ay dileen wiil uu dhalay Jingiskhaan oo la odhan jiray (Jigtaay) waa markii uu Jingiskhaan duulaamada ku hayey Faaris waa muddo ka badan soddon sano..!! aanadaas ma ay ilaawin Tataar waayo hoggaamiyohoodii aas aasay dawladdan ayaa laga galay aanadan,waa kii ka dhigay inay noqoto dawladda ugu awoodda badan dunida,sidoo kale hoggaamiyeyaasha Tataar oo dhami waxay qaraabo wada yihiin ama kasoo jeedaan qoyskii Jingiskhaan,arrintan ka dhaxaysa Ismaaciiliya waxaabay u arkaan arrin shakhsi oo qoyskooda laga galay,xataa waxay ahaayeen Ciidamada Tataarku marka ay dagaalka ku jiraan kuwa ku dhawaaqa magaca Jigtaay si ay xamaasad ugu kordhiso dagaalkana usii holciso..loona xasuusto in uu in loo aargudo mudan yahay.

Arrimahaas oo dhan markii laysla eegay waxaa geba gebadii go'aan lagu gaadhay in horta Ismaaciiliya cagta la mariyo.. waxana ay amarradani kasoo fuleen sheegaya cidhib goynta kooxdan Qaraaqooran Mangooliya oo ah caasimaddii Tataar.

Waxa ay ciidamadii Tataar usoo dhaqaaqeen buuraleydii ay kooxdan Ismaaciiliya degganayd,waxayna usoo dhowaadeen dhufeysyadoodii kii ugu awoodda badnaa waa dhufayskii la odhan jiray (goobta Mawdka) oo ah galbeedka Faaris,wax aan ayaamo ka badneyn markii la garaacay waa la furtay dhufayskii,markii uu hoggaamiyihii Ismaaciiliya(Ruknudiin Khoorshaah) in aan ciidan intan le'eg oo aanu wax la mid ah weligiis arag cid is hortaagi kartaana aanay jirin iyaguna ay noqonayaan waxyar oo lagu sii nasto uun inta aan la gaadhin Baqdaad.. laakiin waa lama huraan inay isgalaan ilaa koleyba la deyn maayee.

Waxa ay foodda isku dareen Holaako iyo Ruknudiin Khoorshaah,oo hore u caddeeyey in uu khiyaamayn doono,oo markii hore ayuu yidhi dhufayska aniga ayaa idiin furay,laakiin waxaa diidey in uu amarkaas qaato ninkii dhufayska haystay,si buuxdana waa uu u diidey amarka madaxweynihiisa isla markaana sheegay in uu dagaal ka xigo,ka dib dhufeyskan isna waa la furtay maalmo yar dabadood,wax allaale iyo wixii loogu dhextegay waa la gawracay,Ruknudiin isagana waxaa la amray in loo diro Monkokhaan wada hadalna dhexmaro labada hoggaamiye lagana doonayo dhamaan dhufeysyada Ismaaciiliya u amro in laga hor banneeyo si dhibyarna lagu galo iyaga oo ku beddelanaya ballan qaadyo loo sameynayo,waa la diray Ruknudiin inta la raaciyey koox Tatariyiin ah,laakiin Monkokhaan waa uu diidey in uu la kulmo aadna waa uu u xaqiray isaga oo leh "Holaako waa uu khaldamay in uu fardaha

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

qaaliga ah ee Tataarka safarkaas dheer usoo geliyo iyaga oo sida Miskiinkan aadka u liita..” ka dibna waxa uu ciidamadiisi ku amray in ninkan lagu celiyo meeshii laga keenay, wadada markii lasii socday ayaa la dilay Ruknudiin Khoorshaah sida ay yidhaahdeen(safarkii dheeraa ayaa khasbay in la khaarajiyo) safarna waxmayeeleen ee waxaa iska cad in Monkokhaan kusoo ballamiyey in wadada lagusii dilo,laakiin ka baxsan waddanka Mangooliya si aanay dhegxumo ugu soo jiidin waddankiisa!.

Markii la dilay Ruknudiin Khoorshaah ayuu Holaako sameeyey khiyaamo aad u xun aadna uu uga fekeray dhamaan gobollada Ismaaciiliyana ay ka siman yihiin,waxa uu sheegay in uu heshiis diyaar u yahay,isla markaana ay iska kaalmaystaan labadoodu gelitaanka Baqdaad,waxa uu sheegay in uu ka doonayo xoogaga Ismaaciiliya inay iyagu ciidan walba horkici doonaan magacoodana ku gelayaan si looga cabsado isla markaana tiradooda ay iyagu badin doonaan isku soo wada duuboo waxa uu heshiiskan midhihiisu noqonayaan,ninkan Holaako_sida uu sheeganayo in uu ka baqayo inay dhaafaan intay halkan ku madhan lahaayeen meelaha iyo derejooyinka ugu sareeya ee dalka la qabsanayo,xeeladdan iyo kaartadani waxay noqotay inay Ismaaciiliya isaga yeedhato dhamaan dhulkii ay kala joogeen,xataa Ciraaq ayaa ciidan uga yimid sidoo kale Shaam markay isu wada yimaadeen tiro ciidan oo aad u badanna noqdeen ayuu amray in dhamaantood dhegta dhiigga loo daro,waa uu dilay wixii gacantiisa soo galay oo dhan,mana uu ilaawin in uu koox rag ah intuu nolol u daayo u diro(Saaliqaan) kooxdan oo loogu aari doono inankoodii Jigtaay,sidaa darteed waxa uu amray in gacanta loo geliyo islaantii Jingiskhaan si ay uga aarsato oo gacanteeda ugu layso uguna ilowdo inankeedii ku maqnaa gacanta Ismaaciiliya..

Sidaas ayuu kusoo gebageboobay sannadkii 655h cidhibtirkii Ismaaciiliya,iyo in Mandaqaddanba laga tirtiro,kamana badbaadin waxaan ahayn firxad u cararay Ciraaq ama Shaam.

Imminka ayey wadadii noqotay mid aamin ah oo furan ilaa Baqdaad..imminka ayey ciidamadii Tataar ee ku xidhnaa Faaris bilaabeen inay usoo dhaqaaqaan dhinaca Ciraaq si deg deg ah,laakiin nidaamsan,una soo jiheystay dhinaca caasimadda ee Khilaafada Cabbaasiya.. waxay noqotay in waqtiyar oo kooban kusoo ururo cimrigii Caasimadda..waqti aad u yar..!!

Intaanu dhicin go’doomintii Ciraaq iyo riditaankeedii ayaan jeclaystay in aan tilmaamo ama sharraxo diyaar garoowga dagaalka Holaako ee ka dhan ah khilaafada,maaha soo bandhigista fiiro dheerida Holaako iyo soo shaacsaarista ahbalnimada iyo liidashada Muslimiinta ee waa Holaako ayaa wuxuu raadinayey hadaf cad oo guul aan shaki ku jirin uu ku gaadhi karayo isaga oo u maraya dariiq ku sallaysan argagixin ka dibna markay dadku dhinaca nafta ka jabaan ka dibna uu ka gaadho guushii aan caadiga ahayn ee uu ka gaadhay markii uu riday Baqdaad.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Qofka eega waxa usoo baxaya isagoo aan hoosba usii dhugan,daraasad dulka xaadis ah marka uu sameeyo waxaa usoo baxaya su'aal: maxaa ilaahay ugu oggolaaday Tataarka oo ah kuwa dunida ugu Nijaasaysan dunida,diinlaaweyaal,daalimiin,dhiigyacabyo,ma xishoodayaal aan xaaraan iyo xalaal midna aqoon,kuna sameeyey Muslimiinta wixii ay ku sameeyeen..Muslimiintuna haba jilicsanaadeen laakiin waa kuwa ilaahay keli yeela,salaadda ooga,akhriya Kitaabka Ilaahay?!

Waxaan jeclaaday in aan falanqeyn yar ka bixiyo mawduucan aadka u balaadhan aniga oo soo koobaya,waayo waxbadan oo diyaarin ah ayey iga qaadatay dhinaca Muslimiinta iyo in hooggooda laga sheekeeyo..iyo leeleelkooda.

Kan ku tiirsada oo keliya Muslim ayaan ahay oo ilaahay ayaan keli yeelaa,ee aan wax diyaar garow ah la imaanin, sidoo kale aan la iman sababihii lagu guuleysan jiray..Tataarku kagama guuleysanayaan Muslimiinta karaamo iyo sharaf ay ilaahay agtiisa ku leeyihiin_waa shacabka dunida ugu xun,iyaga ayaa ugu Akhlaaq xun dunida,laakiin waa ay diyaar garoobeen si buuxda..waxay qaateen dhamaan sababihii lagu guuleysan jiray oo dhan markaas ayey u dhaboowdey qorshohoodii ay sameysteen.

Sannadkan.. ayaad arkeysaan Yuhuud,Nasaaro, Hinduus dabka caabuda oo Muslimiinta ka guuleysanaya,way diyaar garoobeen arrimahan lagu guuleystona waa ay qaateen Muslimiintuna waa ay baal mareen arrimahaas markaa waa laga guuleysanayaa.

Ujeedadeydu maaha inay dadku isku xidhaan oo aaminaan kuna tiirsadaan,oo ay ka tagaan kii asbaabta lafteeda keenayey (swt)..laakiin ujeedkaygu waxa uu yahay in dedaal la muujiyo dhamaystiran iyada oo gacmaha sare loo taagayo oo ilaahay laysku xidhayo lana weydiisanayo in uu tawfiiqda Waafajiyo guushana siiyo..marka uu dhamaystirmo guushu la yaqiinsado in ay tahay gargaarka ilaahay,aynaan isweynayn isna odhan kaartadiinii diyaar garoowgiini,raganimadiini ayey ku timid,ama aynaan aaminin in ilaahay mar walba Muslimka iska guuleeyo taasi waa caqiido khaldan (swt).

Taariikhduna waa ay soo_ noqnoqonaysaa.

Hadday Tataar sameeyeen diyaar garoow Muslimiinta ka dhan ah kuwa kale oo badan ayaa sameeyey dabadood.

Waxay Muslimiintaasi sameeyeen ee ahaa isbahdilaad iyo habacsanaan ilaa halkii ugu hooseysay Muslimiin badan oo ka dambeeyey ayaa sameeyey.

Hadday ahaayeen midhihii soo baxay waqtigii Tataar soo baxay kuwo sidan u eg, shaki kuma jiro kuwa casrigeenan soo baxayaana inay noqonayaan kuwaas oo kale,haddii aanay Muslimiintu fahmin Masaladan oo aanay si tartiib ah u diyaar garoobin isla markaana ka qaadan faham sax ah.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Sidaas awgeed ayaan taariikhda uga sheekaynaynaa.

Ee ma jirtaa cid waxku qaadanaysaa..!!

***



Waxa uu isugu yeedhay Holaako la taliyeyaashiisii kuwii ugu waaweynaa golihiisi dagaalka waana kalfadhigii dagaal ee ugu muhiimsanaa taariikhda Tataar, waxay qaateen in lagu duulo caasimaddii (Baqdaad),Holaako waxa haystay werwer ah inay soo baxaan waxyaabo aan la fileynin, ha ahaato nimankan Muslimiinta ah ee la xulafoobay ciidamadiisa,sidaa darteed waxa uu u sameeyey koox ilaalisa oo la socota dhaqdhaqaaqooda,laakiin cabsidiisana ma aha mid ka joojinaysa in dib looga noqdo go'aankii ay gaadheen,nimankan Muslimiinta ah ee ku darsadey

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ciidamadoodii ciidankiisa,kumaba baraarugsana waxan uu ka baqayo Holaako ee ah inay dagaan(ku badhi furaan),waxaa laakiin ka go'naa-go'aan buuro ah oo aan laga noqonaynin duminta (Baqdaad)..!!

Kalfadhigan dagaalka waxaa lagu qabtay magaalada (Hamadan) ee Faaris (imminkana ah Iiraan) waxay ku taalla masaafo lagu qiyaaso 450km marka laga bilaabo Baqdaad ee waqooyi bari looga kaco..

Fadhigan ayuu Holaako ku go'aansaday in uu ciidamadiisa u qaybiyo saddex waaxood:`

Waaxda koowaad:waa wadnaha ciidanka waana ciidanka ugu balaadhan,waxaana hoggaamin doona Holaako laftiisa,waxaa soo gaadhi doona gurmadka uu soo diro (Baato) hoggaamiyihii kasoo jeeday qoyska Dahabka ahaa ee reer Tataar,sidoo kale waxaa soo gaadhaya haddii uu xoojin u baahdo ciidamadii boqortooyadii Armiiniya iyo Joorjiya,waaxdani waxa ay dhambalidoonaan buuraha ku yaalla galbeedka Faaris isla markaana ku beegan Baqdaad si toos ah waxayna sii mari doonaan magaalada Karmaan Shaah,waxayna noqonaysaa waajibaadkiisu ciidankan go'doominta Baqdaad dhinaca bari.

Waaxda labaad: waa baalka bidix ee ciidanka Tataarka,waxaana hoggaaminaya (Katbuqa) hogaamiyeyaasha Holaako kan ugu wanaagsan weeye,wuxuu u dhaqaaqi doonaa kelidiis dhinacaas iyo Baqdaad isaguna,laakiin dhinaca koonfureed ayuu ka xigaa ciidankii hore,waxaana laysu jirsiiyey labada ciidan meel aanay awoodin basaasiinta Muslimiintu inay gartaan tirada ciidamada Tataarka oo sax ah,weliba ku darsoo,tirada ciidamada oo ahaa waxqiyaasta ka baxsan labadaba haddii la arko iyo mid haddii la arko midna lama qiyaasi karayn, ciidankani waxaa muhiimaddiisu ahayd in uu dhexqaado wadiiqooyinka Baqdaad,laakiin marka hore waa inay Baqdaad go'doomin ka saaraan dhinaca koonfur bari.

Iyaga oo 450km keliya u jira Baqdaad ayuu awooday haddana Holaako in ciidanka intaas tiradiisu tahay ka qariyo indhaha Cabbaasiyiinta_haddiiba ay halkaas ka jireen indho_ ma ay ogaan Cabbaasiyiintu ciidankaas ilaa markii uu usoo jiray kiilo mitiro tirsan Baqdaad maahee..!!

Waaxda Saddexaad miyaa: waa ciidankii Tataarka ee fadhigiisu ahaa Anaadool(waqooyiga Turkiga), waana ciidankii loogu talo galay inay furtaan Yurub ka hor,ciidankan waxaa madax u ahaa hogaamiyihii weynaa ee Tataar (Biijo),waxaa ciidankan la faray inay kasoo kicitimaan dhulkan ay deggan yihiin dhinaca koonfureed ilaa ay soo gaadhaan Baqdaad waqooyigeeda,ka dibna halkaas ay ku nastaan si ay uga go'doomiyaan Baqdaad dhinaca galbeed, markaa imminka waxa go'doomin ku haya Baqdaad Holaako bari,Katbuqa koonfur bari,Biijo dhinaca galbeed.

Laakiin laba mushkiladood ayaa horyaallay ciidankan saddexaad:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Mushkilladda hore: waqtiga loo qabtay inay Baqdaad kusoo gaadhaan oo cidhiidhi ku ahaa lagana doonayey inay ku yimaadaan isla marka uu Holaako yimaaddo,haddii kale waxay foodda is dari doonaan Cabbaasiyiintii haddii ay yimaadaan goor hore,haddii uu dib dhacona waxa ay imanayaan Holaako oo ka tegay.. haddii aynu arrintan yare eegno dhaqdhaqaaqyadani waqtiga ay dhacayaan ma jirin gaadiid dheereeya markaba soo qaadayaa.. sidoo kale ma jirin Isgaadhsiin lagu wada xidhiidho aan ahayn Fardo..mana jirin waddooyin kale oo looga xeeladeysto arrimahan adag..iyada oo taasi jirto haddana Biijo waxa uu soo gaadhay Baqdaad waqti aad u munaasib ah,waxay tusaysaa sida uu waqtiga ugu xisaabtamayey,iyo khibradda uu u leeyahay socodsiinta ciidankan ballaadhan.

Mushkiladda labaad: waa ay ka weyn tahay mushkiladdii hore.. waxayna tahay ciidankan saddexaad_ si uu usoo gaadho Baqdaad_ waa in uu soo dhambalaa masoo shan boqol oo kiilo mitir ah oo dhulka Turkiga ah,haddana shan boqol oo Kiilo mitir oo kale dhulka Ciraaqiyiinta ah..waxan oo dhami waa dhul Muslimiin..!! waxa uu soconayaa masaafo kun kiiloo mitir ah oo ah badhtamihii caalamka Muslimiinta ilaa uu kasoo gaadhayo Baqdaad..waxaadna xasuusataa in aan samankaas jirin diyaarado..macnaha ma jirin duulaan dhinaca cirka ah oo u sahlayey inay si nabad qabta kusoo gaadhaan Baqdaad,damaanadna ma haysto ah in uu burburiyo cidkasta ama waxkasta oo socdaalkooda caqabad ku noqda..khatarta ugu yar ee ciidankani waxay ahayd in la ogaado,oo la waayo_ugu yaraan inta tiradiisa la ogaado loo diyaariyo ciidan Cabbaasiyiin ah inta aanay soo gaadhin Baqdaad,ma khatar ugu weyn ayaa ahayd in ay la kulmaan iska caabbin xooggan oo degaanada ay marayaan dadkeedu isugu habarwacdaan dhamaantood hadday dhacdo habar wacasho waxay noqonayaan Muslimiin,in dabin loo dhigo, ama la majare habaabiyo ilaa waxay u socdaan oo gelayaan dhul aanay weligeed hore u tegin oo ay imminka ugu horeyso noloshiis_laakiin nasiib wanaag/darro waxaas oo dhammi ma dhicin.. waxa uu jaray Biijo 90% oo wadadii ah(macnaha 950km) iyada oo aanay Cabbaasiyiintu warkiisa waxba ka ogeyn..!! way ka war heshay Biijo khilaafadii Cabbaasiyiintu ka dib markii uu usoo jiro konton kiilo mitir oo keliya Baqdaad dhinaceeda waqooyi galbeed!! Way ogaatay Cabbaasiyiintu ciidankii Biijo si buuxda,sida ay u ogaadeen ciidanka Holaako oo kale ka dib markii ay labada ciidanba soo jireen in hal maalin looga socdo Baqdaad..!!

Haddaynu nidhaahdno: ciidanka Holaako waxay ku dhuumanayeen buuraha,waxayna marayeen meelihii ay gacanta hore ugu haynin Tataarku,sidee ayeynu u fasiran karnaa socdaalka intaas le'eg iyo ciidanka tiradaas leh ee Biijo iyo sida ay Baqdaad kusoo gaadheen..?!! socdaalka Biijo ee uu soo dhex dhambalay waxaas oo dhul Muslimiin ah waxa ay keentay laba Masiibo oo waaweyn.

Masiibada hore: waa Mukhaabaraadkii Muslimiinta oo si buuxda looga waayey saaxadda,waxa kale oo meesha ka caddaatay in aan ciidamada Cabbaasiyiintu aqoon iyo garasho midna u lahayn maamulka dagaalka iyo xeeladihiisa.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Masiibada labaad: oo ah tan weyn waa khiyaamo aad u culus oo ay geysteen madaxdii Turkiga iyo Mawsilee Muslimiinta ahaa..khiyaanadani waxay albaabada ka furtay ciidamadii Tataar,mana dhicin haba yaraatee wax iska caabbin ahi,waa ay iska soo socdeen ciidamadii Tataarku si deggan waxaabad mooddaa inay dabbaal deg ku jiraan,iyaguna wadada intay kusoo jireen gawrac iyo wax kale midna ma geysan si aan indhaha khilaafadu u qaban,dadkiina waxay arrini kaga ururtay kuwan sharkooda ilaahay maydin dhaafiyaa,waxay iska ilaaliyeen inay fartaabsiiyaan oo iyaguna ay ficil aargoosi ah ka muujiyaan.

Khiyaanadii weynayd ee Kiikoowkii labaad iyo Qarji-Arsalaan madaxdii Turkiga.

Khiyaanadii Badrudiin Lu'Lu guddoomiyihii Mawsil.

Badrudiin waa ay ku filaan weyday in uu ku joogo fududeyntii uu gaalada u fududeeyey inay soo galaan waddankiisa,oggolaansho u siiyey inay soo maraan waddo ahaan dhulkiisa,waxa uu ku daray ciidan ka caawiya hawl galka loogu magac daray (Xoreynta Ciraaq) waa xukunka khilaafada Cabbaasiyiinta..!!

Waxaa yaab ah in Badrudiin uu ku kaco khiyaamada intaas le'eg_isaga oo da'diisu tahay siddeetaneeyo sano! Waa la yidhi: boqol..!!! waxa amankaag ah in uu dhintay khiyaamadan markii bilo yar ay kasoo wareegtay..!!

Ilaahay ayeynu waydiisanaynaa cidhib dambeed wanaagsan.

Intaasi waxay ahayd dhaq dhaqaaqyadii Tataarka.

Bal Baqdaadna arrinkeedu siduu ahaa?

Waqtigaas Baqdaad waxay ahayd magaalada dunida ugu dhufeysyo adag,dayrkeeduna wuxuu ka mid ahaa kuwa ugu adag dunida..waa caasimaddii Cabbaasiyiinta muddo ka badan shan qarni..waxaa lagu bixiyey dhisidda dhufeysyadan xoolo aad u badan iyo dedaal aan yarayn..laakiin waxaan aad uga xumahay magaaladii dhufeyska samaysan ahayd..!!

Waxay dhufeysyadu u baahdeen rag..waxase lagu goblamay raggii waqtigaas joogey!.

Yaa dawladdan ka madax ah?

Waa khaliifkii toddoba iyo soddonaad uguna dambeeyay khulafadii Reer Cabbaas ee Baqdaad.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waa (Muctasim Billaah..)

Magac weyn (Muctasim Billaah..) iyo naaneys weyn: (Khilaafada Muslimiinta).

Laakiin maye waajibaadkii khaliifnimada (Muctasim Billaah)?.

Marka aad akhridid sifooyinka khaliifnimada laftiisa ee aad ka akhridid bugaagta taariikhdii Khulafada ee Siyuudi ama Bilowgii iyo DHamaadkii uu qoray Ibn Katheer ama bugaagta kaleba waxaad arkaysaa arrin yaab leh.

Waxaad arkaysaa nin dad baro dheerayey,dad la dhaqankiisuna aad u sareeyo (waxyaabaha wanaagsan uu dadka kaga duwan..sida ay sheegaan).

Wuxuu leeyahay Ibn Katheer tusaale ahaan (wuxuu ahaa nin qurux badan,Sariirtiisu cusub tahay,caqiidadiisu saxsan tahay,aabihiina kaga dayda (Muntasir Billaah) caddaaladda,wax bixintiisu badan tahay,culimada karaameeya iyo dadka cibaadada lehba.. wuxuu ahaa nin Sunni ah oo si toos ah u haysta Madhabkii Salafka..)

Garan maayo waxa uu uga jeedo Madhabkii Salafka?!.

Jihaadku miyaanu ahayn Madhabkii Salafka?!

Miyaanu ku jirin Madhabkii Salafka u diyaar garoowga dagaalku?!

Miyaanu ku jirin Madhabkii Salafka in daraasad lagu sameeyo dunida laysuna miisaamo awoodaada?!

Miyaanay ku jirin Madhabkii Salafka in laga diiro dhiigga Muslimiinta ee meel walba Ciraaq,Faaris,Adriibayjaan iwm qulqulaya?!

Miyaanay ka mid ahayn Madhabkii Salafka in la Midoobo,ummaddana laysu soo ururiyo layskuna xidho?!

Khaliifkan Muctasim naftiisa ayuun buu u wanaagsanaa..wuxuu ahaa nin wanaagsan..laakiin ku guuldarraystay arrimo badan oo aan u bannaaneyn madaxweyne Muslim ah in uu ku guuldarraysto.

- Wuxuu ku guuldarraystay in uu awoodo maamulidda arrimaha iyo xaaladaha.
- Wuxuu ku guuldarraystay kartidii hoggaamineed.
- Wuxuu ku guuldarraystay in uu yeesho han,wuxuu ku guuldarraystay inuu dunida Sayidka noqdo,cadawgana ka guuleysto,iyo in uu diinta ilaahay fidiyo.
- Wuxuu ku guuldarraystay geesinimadii u horseedi lahayd in uu go'aan dagaal ku qaato waqtigii ay ku habboonayd.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

- Wuxuu ku guuldarraystay in uu safafka Muslimiinta toosiyo,Qalbigoodana mideeyo,una diido kala firidhka,iyo in uu kor u qaado calanka Muslimka oo Mid ah.
- Wuxuu ku guuldarraystay in uu doorashada ka caawiyo taageerayaashiisa,markaas ayaa jaanis laga helay,wasiiradii ayaa xadaya,askartii ayaa dulmiyaya,hoggaamiyeyaashii ciidamada ayaa jebinaya isaga..!!.
- Wuxuu ku guuldarraystay la dagaallanka fawdada,markaas ayey qaskii iyo fitnadii dalkiiba qabsadeen..waxaa batay in xoolaha dawladda layska lunsado..RISHWADII ayaa wax caadiya noqotay dalkoo dhan..waxaa badatay meelaha Fasaadka,xumaanta,iyo waalli oo dhan lagu sameeyo.. waaba layska bannaystay si cad!! Waxaaba loola soo baxay Faras-magaalayaasha!!dumarka Jaasaya ee qaaqaawani isma qarinayaan waddankaas dhan ee Muslimka ah..waabay is magcaabayaan si cad..!

Haa wuxuu ahaa mid ku fiican gudashada waxyaabaha diintan astaanta u ah sida Salaadda,Soonka,Sakada.. haa wuxuu ahaa carrabkiisu mid saafi ah..wuu jeclaa dadka faqiirka ah iyo culimada.. waxaas oo dhammi waa wax qurux badan marka loo eego dantiisa.. laakiin meeday dantii ka saarnayd dadkiisa iyo dalkiisa?

Si buuxda ayuu u kari waayey in uu qaado masuuliyaddii Shicibka.

Wuxuu awood u heli karayey in uu ku maamulo Ciraaq dhexdeeda boqol iyo labaatan kun oo Fardo Fuul ay weliba dheer tahay dad iska jibbaysan iyo kuwo kale oo soo Jihaad tegay..ciidanka Baqdaad go'doominta ku hayeyna waxay ahaayeen laba boqol oo kun oo dagaal yahan,marka waxaa rajo aad u badan laga qabi lahaa inay iska waabiyaan hadba markay kusoo sullaacaan..laakiin khaliifkii ayaa noqday mid isagu is jebiyey..naftii amri lahayd wax iska celin gebi ahaanteedba wuu iska dhex waayey,sida aanu shicibkiisa ugu rabbaynin Jihaadka iyo xeeladaha dagaal midna.

Tolow.. maanta maye Saldhigyadii lagu tababari lahaa dhalinyarada Muslimiinta si aanay u dhicin tii dhacday casrigii Tataar?!

Meeday muhiimaddii ay lahayd barashada Dabbaasha,Shiishka iyo Fardafuulnimadu?!

Meeday dhiiri gelintii Muslimiintu si aanay dadku nafta u waayin marka laysu yimaaddo?!

Mise innagu ma sidano magac Khaliifo oo sidaa darteed wax laynooga baahan yahay maaha..?!

Khaliifkani wuxuu dadkan haystay wax aan ka yarayn lix iyo toban sano..!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Arrinku kuma ahayn kusoo booddo..sidoo kale xaaladdu deg deg kuma qabsan.

Waxaa lagu soo koriyey in uu noqdo Khaliif,xilkana waxaa lagu wareejiyey markay da'diisu ahayd dhawr iyo soddon..wuxuu ahaa shabaab soo jeeda oo caafimaad qaba cilmina leh..wuxuu helay fursad ku filan in uu dalkan maamulo..kursigan waxa uu ku fadhiyey lix iyo toban sano oo buuro ah..haddii aanu ahayn inkaari ku dhacday waxay ahayd in uu ka diyaar garoobo oo waqtigaasina ahaa mid ku filan oo waddanka xoojiyo,haybaddiisana kor u qaado,ciidankiisana xoojiyo,sharaftiisa,waddankiisa iyo tan ummaddiisaba ilaaliyo..intaas haddaanu samaynin dembi oo dhan isaga ayaa iska leh_waa hadday run ka ahayd in uu badbaadsado xukunka..tani ma aha masuuliyad qoys ama qabiil..waa masuuliyad umadeed..umad culus oo taariikh dheerleh oo soo jireen ah..ummad ah umadaha tii ugu khayrka badnayd ee dad loo soo saaro.

Laakiin khaliifadani midna ma samaynin..uma diyaar garoobin dagaal oo ciidan ma diyaarsan,hanti uu isku laaluushona ma bixin si xukunkiisa loogu nabad geliyo,xoolo wuu bixin karayey shacabkiisana waa uu ka ururin karayey.

Ugu yaraan badbaadada shacabkiisa waxbay u tari lahayd hadduu laaluush bixiyo.

Waadna arki doontaan sida lacagtii baylah looga qaatay..!!

Waddankuna ma ahayn mid dhaqaale yari haysay,hubkaa lagu iibin jiray,lagu samayn jiray..khasnadaha dawladda waxaa ka buuxay hub,laakiin waa qaddiimi wada daxalaystay..hub cusubina waa yaallay oo aan noociisa hore loo isticmalin laakiin nasiib darro looma tababarna isticmaalkiisa.

Midheheediina: waxay noqdeen in ciidanka Cabbaasiyiintu noqdo waxyar oo dulleysan oo iska daa khilaafadan weyn ee aan lagu halayn karayn magaalo yar.

Arrinta Baqdaad taallayna sidaas ayey ahayd..!!

Waxaa timid xukuumaddii Baqdaad..arrinkeedu siduu ahaa?!..waxay ahayd magac u yaal,hoggaamiyeheeduna waxa uu ahaa magac u yaal..xukuumaddu waxay ahayd_sida ciidanka oo kale_liidata taag daran oo xanuunsanaysa..ka kooban (fuleyayaal) wasiiro! Hammigooda keli ahi yahay xoolo ururs iyo khayraad raadsi,iyo kursiga oo laysku balaadhiyo,waxa xukunkoodu ahaa inay addoonsadaan dadkan ilaahay addoomada u ah oo ay qoorta iskaga taagaan,ku kibraan kii sharafta lahaa iyo mid aan sharaf lahaynba inta ka dhaxaysa,tartan iyo is garabyaac foolxun oo mansab raadin ah ilaa badhi wale laga gaadhayo..! golahan wasiirada ah ee Saaqidiinta ah waxaa ka mid ahaa wasiirkii khaayinka ahaa ee dalka iyo dadkaba iibiyey,isla markaana ahaa cadawgii umadda.. waxay ahaayeen wasaaradahani seefo bilaa gal ah oo ku wajahan madaxa iyo maalka Muslimiinta..wax xidhiidh ahna lama lahayn

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Muslimiinta..kuwa ilaalinayey,ma jirin xidhiidhkii walaaltinimo.. ee waxaa ka dhaxaysay oo keli ah hal xidhiidh,kaas oo ahaa xidhiidhka ka dhaxeeya madaxda iyo addoomadooda.

Bal ka waran shacabka Baqdaad?

Siday ahayd dabeecaddiisu? Siday ahayd rajadoodu?!

Ha u malaynin shacab xukuumaddiisi dulmiday..shacab madaxdiisu taakaynayso in uu shacab noqdo.

(**Geedka aad beerato ayaad midhihiisa gurataa)**

Shacabka reer Baqdaad walaw ay ahaayeen shacab fac weyn oo balaadhan..waxay tiradoodu ahayd saddex malyuun marka laga soo qaado ugu yaraan,sidaa darteed waxay ahayd Baqdaad magaalooyinka dunida ugu saxmadda badan waqtigaas, sidoo kale marka la eego dhinaca degaanka,magaalooyinka iyo tuulooyinka ku xeeran..ma ay ahayn mid khalqi yari ku nool yahay..laakiin waxay ahaayeen shacab magac u yaallo ah..ku raalli ah nolol iska xasiloon oo tan xooluhu ku noolyihiin oo kale ah cun,cab,oo iska raaxayso.. intoodii haysatay diintooda waxay kaga ururtay barashada cilmiga,salaadaha oo masaajidada lays keeno iyo quraanka oo la akhriyo,iyaga oo hilmaamsan faralkii uu jideeyey Rasuulka Ilaahay ﷺ ee uu yidhi: Kuruska Islaamku waa Jihaadka, intoodii aan diinta ku dhaqmaynina waxay iska raaceen hawadooda,iyo macmacaanka waxay ku mashquuleen midabada cuntada iyo dharka, tirada jaariyadaha,noocyada guryaha iyo beeraha,gaadiidka iyo wixii la hal maala,waxaa soo raacda dhegaysiga heesaha iyo ka fogaanshaha dhegaysiga Qur'aanka iyo Xadiiska,waxaa ka mid ah mid khamri cabbay,waxaa ka mid ah mid xoolo xaday,waxaa ka mid ah mid cid dulmiyey, intaas oo dhan waxaa ka daran muddo afartan sano ku dhow waxay maqlayeen gawraca Muslimiinta ee laga simay walaalohooda Afgaanistaan,Osbakistaan,Turkuministaan,Faaris,Adriibayjaan iyo Shiishaan.. way maqlayeen dhamaan xasuuqyadaas ismana dhaqaajiyaan..waxay maqlayeen haweenka Muslimaadka ah ee la faraxumeeyay ismana dhaqaajiyaan..waxay maqlayeen caruurta Muslimiinta ah ee la qafaashay ismana dhaqaajiyaan..waxay maqlayeen dumarka Muslimiinta ah ee la uurdooxay ismana dhaqaajiyaan..waxay maqlayeen xoolaha Muslimiinta ee la dhacay,Daaraha la burburiyey,Masaajiddo la gubay ismana dhaqaajiyaan,iskaba daaye waxay maqlayaan in Khaliifadooda Naasir LiDiinillaah uu gacan siinayey Tataarka si ay Khawaarsimiya u dabargoyso ismana dhaqaajinayaan..!!

Waxaas oo dhan way maqleen iyo wax dheerba ismana dhaqaajin.

Waa khasab markaa **(anba dhamay qadhaadhkee waa inaad dhadhamisaa)**

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Maalin ayaa imaan doonta uu shacabkani dhadhamin doono dhamaan wixii ay dhadhamiyeen Muslimiinta kale ee aanay usoo juuqin,mararka qaarkooda ay gaalada lasoo safanayeen,oo aan iyagana loo juuqi waayo sidii ay sameeyeen oo kale Tataarka la soo caawin doono..wareegtaa waa silsilad.

Hana is odhan: shacabka awoodda waa laga haystay..shacabka aqbalay waxaas oo alle ka fogaad ah iyo shareecada oo sidaas looga dheeraaday maba istaahilaan Nolosha.. shacab aan ka fekerayn wax aan ahayn quutal daruuri oo aan madaxaba sare u qaadaynin.

Maye Culimadii? Maye Raggii? Maye dhalinyaradii? Maye Mujaahidiintii?

Aaway kuwii wanaagga farayey? Aaway kuwii xumaha reebayey?

Maye dhaqdhaqaaqyadii wanaajin lahaa bulshadan fasahaadday?

Meeyay fahamkii saxda ahaa ee Shareecada,iyo Asalkii diinteena?

Baqdaad miyaanu ku jirin hal nin oo hanooniye ahi?!

Waataas Baqdaad.

Duleedka Baqdaadna waxaa hoganaya Ciidamo u jeel qaba inay cagta mariyaan,una hilowsan ciqaabka Muslimiinta,waxay sugayaan oo diyaar u yihiin Cadaabkaas.

Waxaa bilaabantay Go'doomintii !!.

Iyada oo Muslimiintu ku sugan yihiin xaalad noocaas ah,waxaaba soo muuqday ciidankii Holaako si lama filaan ah,dhinaca bari ee magaaladii waynayd (Baqdaad) arrintaasina waxay ahayd 12 Muxarram ee sannadkii 606h.. waxa uu bilaabay Holaako in uu iska soo horeysiiyo Dabaabaadkii go'doominta loogu talo galay,sidoo kale waxaa yimid 'Katbuqa' garabka bidix ciidamadiisu si ay magaalada uga koobaan dhinaca Koonfur bari.

Wuu salbabakhay khaliifkii Muslimiintu..wuxuu qabtay shir deg deg ah,shirkaas oo uu isugu yeedhay la taliyeyaashiisi ugu waaweynaa,oo uu ugu wayn yahay wasiirkii daalinka ahaa ee Mu'ayid Diin Al calqami.

Sidaynu ka yeelnaa masiibadan? Sidee loo badbaadayaa? Xagee loo carari?

﴿فَنَادَوْا وَلَاتَ حِينَ مَنَاصٍ﴾ [ص: ٣].

way wakhtigeedii maaha qayliyeen laakiin

Markay halkaas arrini marayso Mu'yid diin iyo taageerayaashiisu way iska aqbalayeen dulleysiga Tataar,iyo in la dumiyo Muslimiinta,mana jiro wax u diidayaa inay tanaasulaan,markiiba waxa uu soo bandhigay Mu'ayid awoodda Tataar iyo waxa ay haystaan Muslimiintu si aanay u jirin wax yar oo rajo wax iska celin ahi.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Ra'yigaasi wuxuu kala firdhiyey shirkii laysugu yimid..waayo waan aan isdhiibno shuruud la'aan!

Laakiin ummaddan weli khayrkii kama dhamaan.

Laba nin ayaa istaagay oo wasiiradii ka mid ah waxaanay u soo jeediyeen khilaafadiixamaasad Jihaad..Jihaadkuna waa kelmed ku cusub jiilkan iyo dawladdan Cabbaasiyiinta ee casrigan joogta..laakiin wax diidayaa ma jiraan soo jeedinta ra'yiga haba ahaadee mid aan la fileynine!..waxaa istaagay Mujaahid Diin Aybak iyo Suleymaan Shaah iyo dhiiri gelinaya wax iska celin..waxaay timid ishaaradii waqti aanay waxba qaban karaynin.. aad usoo habsaantay..waayo waqtigii diyaar garoowgu wuu dhamaaday,waxaana soo dhowaaday waqtigii lays imtixaami lahaa..laakiin labadooduba waxaa laga yaabaa inay tilmaamayaan waqtigii jihaadka oo aan midkoodna maqlin.. sidoo kale waxa la ogyahay in aanay wanaagsanayn xidhiidhka Mu'ayid Diin iyo Mujaahid Diin Aybak arrintaasina ay taagnayd muddo dheer..waana khasab in xidhiidhka qof khaayin ah iyo Muumin aanay wanaagsanaanaynin..laakiin nasiib darro waxa uu maqlay khaliifkii ra'yigii khaayinka!.

Laakiin aqbalaaddiisu dagaal xoojin mayso dagaalka,hadalkii Mujaahid Diin Aybakna dhegaha ayuu ka dabooshay khaliifkii,bal muxuu ku raacay,ilaa taariikhda Tataar waynu naqaan oo weligood nabadi kamasoo sheegin,sidoo kale waxa uu ogyahay in aan xuquuq(laysa siin) ee (layska qaado).

Khaliifkii wuu u riyaaqay, markii dambena go'aan rasmiya ayuu ku gaadhay.

Wuxuu dhegaystay hadal uu soo jeediyey nin caqli leh oo ah aan wax iska celino..laakiin kuma dhicin daciifnimadiisa darteed..

Jahaadkuna waxba kama taro sifaadkan oo kale.

Jahaadku maaha go'aan ku dhisan xamaasad.

Mujaahid laguma helo laab la kacnimo..!!.

Jahaad..tarbiyad..hibeyn aad nafta hibeyso iyo maalkaba.. wada tashi dheer oo ku salaysan Iimaan.

Jahaadku waa derejooyinka sare oo la koro.. koro xagga sare.. ilaa aad gaadho kuruska uu ku suntan yahay ee Islaamka..laakiin xaalad kasta waa in aan (dedaal la nimaadna) inaga oo uga jeedna tijaabo iyo in aan ogaanno awooddeena ciidan heerka ay gaadhsiisan tahay.

Waxaa baxday kooxdii yarayd ee liidatay ee Cabbaasiyiinta oo uu hoggaaminayo (Muhaad Diin Aybak) si ay ula kulanto Jamaahiirtii Holaako.. markay soo baxeen ciidanka Cabbaasiyiinta ee usoo baxay inay la dagaalamaan Tataar ayaa waxa uu ka warhelay (Mujaahid Diin Aybak) inay jiraan ciidammo kale oo Tataar ah kana soo gelaya dhinaca Waqooyi, waana ciidankii (Biijo) ee kasoo kicitimay Yurub soona

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

dhexmaray wadamada Turkiga,waqooyiga Ciraaq, ciidankaasi wuxuu kasoo galay degaamada Ciraaq dhinaca webiga Dajla, ilaa uu soo gaadhay Mawsil webiga Dajla iyo dhinaciisa galbeed,ka dib dhulka ay ciidankani go'doominta ku hayaan waa dhulalkii u dhaxeeyey labada webi ee Dajla iyo Furaat ilaa ay usoo dhowaadeenba Baqdaad,waxayba u soo jiraan konton kiilomitir oo keliya, dadkii dhulalkaas ka dhowaa ayaa wararka soo gaadhsiiyey Mujaahid Diin Aybak.

Mujaahid Diin waxa uu fahmay haddii ay ciidankaasi soo gaadhaan Baqdaad waxay ku habsan doonaan dhinaca waqooyi iyo galbeed ka dibna caasimadda dhamaanteed waxay ku jirtaa go'doomin,halkaas ayuu feker ka qaatay ah in uu si deg deg ah ugu jeediyo ciidamadiisa dhinaca waqooyi gaar ahaan dhulka u dhexeeya labada webi ee Dajla iyo Furaat,si ay ula kulmaan ciidanka Biijo, siday filayeen waxay kula kulmeen ciidankii Tataarka gobolka Anbaar,gobolkani waa gobolkii uu guusha weyn ee waartay ka gaadheen Muslimiintu hadda ka hor, in ka badan lix boqol oo sano hortood, gacantii Khaalid bin Waliid ilaahay raalli haka ahaadee,laakiin markan -nasiib darro-guul kama gaadhin khaliifkii Muslimiintu.. wuxuu bilaabay Biijo isaga oo aad mooddo in uu uga aqoon badan yahay dhulka dadkii deganaa dib u gurasho sidii wax cararaya oo kale,Muslimiintuna way daba galeen, ilaa uu la yimid magaalada Mustanqicaat ee qarka webiga Furtaat ku taalla,ka dib waxa uu dhanka webiga u diray Injineero si ay u jaraan webiga waddooyinkii dhexmari jiray oo aan cidina ugusoo gurmanin,sidoo kale waxa uu ka jaray waddooyinkii hadday yaacaan ay ka tallaabi lahaayeen ciidamada Cabbaasiyiintu, ka dibna waa uu go'doomiyey Biijo, ciidamadii Ciraaq waa la dabargooyey oo gam laga dhigay, waxa uu awoodey Mujaahid Diin iyo tiro yar oo Cabbaasiyiinta ahi inay fakadaan ilaa ay ku noqdeen Baqdaad, laakiin nasiib darro ciidanka Cabbaasigu badankiisu waxay ku le'deen Anbaar!.

Dhacdadaas xanuunka badani waxay dhacday Muxarram sagaal iyo tobankeedii, toddobaad uun ka dib markii uu Holaako kasoo mudhay dayrarka Baqdaad, hore ayuu isaga soo maray Biijo intaas ka dib si toos ah,waqtina iskama lumin ilaa uu soo gaadhay Baqdaad dhinaceeda waqooyi maalintii labaadba, ka dib wuxuu markiiba eeg eegay magaalada iyo halkii uu duqeynta kaga bilaabi lahaa,dabcan waa dhinaceeda galbeed,sidaa darteed waxay gashay caasimaddii Muslimiintu laba Af dhexdood mid waa Holaako dhinaca bari iyo Biijo dhinaca galbeed.. waxaa batay cidhiidhigii lagu fakan lahaa..go'doomintiina waa ay ku badatay Caasimaddii gebi ahaantoodba..!!

Khaliifkii – caruurtii khulafadii hore iyo salaadiintu marna kuma fekerin in tan oo kale ku dhici doonto weligood.. markan madaxii ayaa ballaadhay feker dartii..!!

Waxaa yimid Mu'yid Diin si uu fursaddan uga faa'iideysto.

Khaliifyohow.. waa khasab in aan la fadhiisano Tataarka (miiska wada hadalka).

Laakiin khaliifku wuu fahamsan yahay haddii uu la fadhiisto ninkaas aadka u awoodda badan iyo isaga oo aad u taag daran taas macneheedu maaha (wada hadal) Abadan ee waxa weeye (Isdhiibis)buuxda.. isdhiibisna waa in uu aqbalo kan laga

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

adkaaday in uu fuliyo dhamaan shuruudaha kan guuleystay isaga oo aan isumiisaami karayn diidina karayn wax kasta oo loosoo ban dhigo waxa khasab ah in uu qaato.

Isaga oo sidaas u fahamsan hadana khaliifkii miskiinka ahaa waa uu aqbalay isaga oo madaxa hoos u lulaya in uu is dhiibo.

Una jeeda in uu wada hadal gelayo!.

Wuxuu go'aan ku gaadhay in uu diro laba nin oo uga qayb gala wada hadalka.. Yuu diray tolow!?.

Wuxuu diray Mu'ayid Diin ALcalqami, waa ninkii uu qalbigiisa ka buuxay nacayb uu u qabay khilaafada Cabbaasiyiinta..!!

Wuxuu ku daray (Makiika..) Badriik waa ninkii Nasraaniga ahaa ee Baqdaad ku sugnaa..

Sidaa darteed, wefdiga rasmiga ah ee metalaya khilaafada (Muslimiinta) waxa ay noqdeen laba nin keliya.

Mid waa Shiico kan kalena waa Nasaaro..!!

Faah faahinna ma leh..!!.

Waxaa bilaabmay wada hadalkii u dhaxeeyey Holaako iyo labadan metalaya dawladdii Cabbaasiyiinta iyaga oo ku bilaabmay weji qarsoodi ah, waxay u qaadeen ballamo ah inay ku kaalmayn doonaan riditaanka Caasimadda, waxaana ugu muhiimsanaa ballamahan inay labadan nin ka noqon doonaan xubno muhiim ah xukunka cusub ee marka khilaafadan la rido la samayn doono macnaha dawladda cusub ee Tataar markay qabsadaan ka dib loo dhisi doono Ciraaq, iyaga oo leh (markaan xoreyno) ka xoreyno khilaafadan!!!

Dabcan laba nin khilaafada metelayeyna way soo dhoweeyeen arrintaas.

Waayo labadoodaba waxa qalbigoodu la holcayey jacaylka ay u qabeen riditaanka khilaafada haddaanba wax mushqaayad ah lagu siineyn xataa, bal maxaad u malaynaysaa marka uu jiro ballan qaadyo jagooyin sar sare ah,maamul iyo weliba maal.. yaana ballan qaadaya? Waa Holaako ninka adduunyada oo dhan xukuma.

Waa ay soo noqdeen labadii sumood iyag oo ka yimid Holaako kuna socda Khaliifkii una sida dalab aad u cajiib ah oo ay ka sidaan mudanihii Tataar.. waxa Holaako uu maqlay Muslimiinta ku adadag diinta(xag jirka ah) inay joogaan Baqdaad dhexdeeda, kuwaas oo ku dhawaaqaya arrin aad u khatar badan.. waxay ku dhawaaqayaan (Jahaad).. yeedhmadaas jahaadku waxay burinaysaa dhamaan isku daygii lagu raadin lahaa nabadda.. waxaa ku waajib ah khaliifka Muslimiinta in uu gacanta u soo geliyo Holaako madaxda dhaq dhaqaaqa Muslimiint ee Baqdaad ka jira.. weliba waa in uu

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

waqti xadidan kusoo dhiibaa (Mujaahid Diin Aybak) iyo (Suleymaan Shaah)labadii keenay Fekredda wax iska celinta iyo Jahaadka.

Arrintaas siyaabo badan ayaa loo kala sheegay, markaa garan mayno in la dhiibay iyo in aan la dhiibin toonna.. laakiin waxaa si cad loo wada sheegay oo laysku raacsan yahay waxyaabihii ay soo ban dhigeen Tataar..waxaa kale oo cadaatay doonista cadawga Muslimiinta iyo in ay had iyo jeer neceb yihiin mabda'a wax iska celin ku salaysan diin.

Arrintii way sii adkaatay.. Dhibaatadiina way cakirantay.

Ergadii u dhaxaysay Holaako iyo Khaliifkuna ma kala go'in.

Ergaduna dabcan waa dadkii uu ku kalsoonaa Khaliifku: (Mu'ayid Diin Alcalqami) Nasraanigii (Makiika..)..!!!

Waxaa soo baxay maxsuulkii wada hadallada (oo ah kuwo liita) waxaa sida uu ugu sawiray ALcaqami khaliifka.. mudane Calqami waxa uu keenay ballan qaadyo uu ku tilmaamay guulo siyaasadeed oo waaweyn, sidoo kale waxaa jira shuruudo (fudud) oo ah in khaliifku fuliyo.

Ballan qaadyada:

1.in la dhameeyo xaaladda colaadeed ee u dhaxaysa labada dawladood,loona dhiso nabadgelyo waarta.

2. in la dhameeyo loona guuriyo inanka uu dhalay Holaako hoggaamiyaha wayn ee dawladda Tataar, ninka daadiyey kumaan kun oo Muslimiin ah dhiiggooda gabadha uu dhalay khaliifka Muslimku (Muctasim Billaah).
3. In aan laga qaadayn (Muctasim Billaah) kursigiisa.
4. In Ammaan buuxa la siin doono reer Baqdaad dhamaantood.

Waa ballan qaadyadii, waxaa ballan qaadyadan loo sameeyey waxaa la dhaafsaday shuruudahan:

1. Burburi dhufeysyada Ciraaq.
2. Dumi godadka dagaalka.
3. Soo dhiiba hubka.
4. Oggolow xukunka Baqdaad waxa uu hoos imanaya gacan ku haynta dawladda Tataarka

Wuxuu ku soo gebo gebeeyey Holaako ballan qaadyadiisi iyo shuruudihiisiba isaga oo usoo dhiibaya qoladii u kala dab qaadaysay isaga iyo khaliifka, in aanu u imaanin dalkan wax aan ahayn in uu dhidibada u taago caddaaladda,xorriyadda iyo nabadgelyada..sidoo kale hadaad nala qirtid arrimahan, naguna raacdid

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

aragtidayadan_ waddankayagii ayaanu iskaga noqon,reer Ciraaqna waan iskaga tegaynaa si ay iyagu Dastuurkooda u dejistaan,una maamulaan arrimaha waddankooda weliba gacmohooda ugu maamulaan.!

Waxaa soo noolaatay rajadii khaliifka..!!

Ballannadiisa tolow ma rumeeyaa Holaako?!

Shaki weyn ayaa laga qabaa qalbigiisa.

Ka dib shuruuduhu way soo adagyihiin.. waxaa laga geba gebeeyey dhan kasta oo wax iska caabbin ah.. hase yeeshee_dhinaca kale_ wuxuu dalka ka noqon doona guddoomiye oo qudha.. haa guddoomiye hoos taga dawladda wayn ee Tataarka.. ama wuxuu ku hoos noolaan doonaa cagta Tataarka.. hase yeeshee_ ugu dambayn_ wuxuu iskaga fadhiyi doona kursigii xukunka, taasi waa haddii uu dhiigyacabka Holaako ka run sheego arrintaas!.

Laakiin sidaasi waa gumaysiye!.. Ma aqbalayaa?

Oo muxuu u aqbali waayayaa?! Mar haddii saaxiibadii leeyihiin: arrintani waa siyaasadda lagu magcaabo: (siyaasadda joogtada ah)..!! haddii uu diido miyaa,waxaa xoog lagu furtay albaabadii magaalada Baqdaad, khasabna waa uu dhimanayaa.. haddii uu naftiisa ma jixin jixe Holaako u dhiibo in uun ayaa rajo laga qabaa haba yaraatee in uu nafta la badbaado..!!

Haa dullinimo buu ku noolaan doonaa.. laakiin waa nin nool uun.

Haa dayac buu ku noolaan doonaa..laakiin waa nin nool uun.

Haa waxkasta wuxuu ku iibin doonaa bakhsid.. laakiin waa nin nool uun.

Khaliifkii ayaa labac labacleeyey.

Shacab aad u ballaadhanina dabadiisa ayey la walaacsan yihiin khaliifkooda.

Dhawaaq Jihaad waxay kasoo baxayaan dibnaha dad tiro yar oo tirsan.. dadka badankooduse waxaa quluubta ka saartay go'doominta dhan kasta ah iyo waxa dul gayduuda.

Adduunyadii ayaa indhahooda ku waynaatay,markaas ayey ku adkaatay inay nafta hibeeyaan.

Xumaanta ayaa ku badatay Baqdaad.. fusuquna waa tiro beelay inay dhowaan halaagsami doonto way caddahay..!!

Waqti ayuu u baahday khaliifkii uu ku fekero.. go'aanku aad buu u adagyahay runtii..wuxuu u baahday la taliyeyaal isaguna uu istikhaaraysto!!(laba rakcadood ee la tukado marka aad laba arrin go'aan ka gaadhayso)_ Laakiin_dhinaca kale_ Holaako

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ma haysto waqti la dayaco, ciidan aan la tirin Karin ayaa u fadhiya duleedka Baqdaad oo maalintiiba cunaya malaayiin kharash ah..go'doomintu waa bishii Muxarram 656h kuna beegan bishii Yanaayer sannadkii 1257.. jawiga waxaa ka dhacaya qaboow aad u daran.. intaasba waxaa u dheer xiisaha uu u hayo aragtida Baqdaad gudeheeda iyo quruxdeeda.!

Geeridii "Curfa"!!.

Holaako ma sugin waqti dheerba.. mana siinin (saaxiibkiis)wax waqti ah si uu ugu fekero si qoto dheer, laakiin wuxuu sameeyey si uu fekerka u dedejiyo, sidaasina waa waxa uu bilaabay in uu magaalada ku garaaco madhaafiic dab iyo dhagxaan ah waa hubkii garaacista ee ugu casri sanaa waqtigaas, waxaa bilaabmay duqeyntii argagixisada ahayd ee Tataarka, gaar ahaan Dayrarkii ,dhufaysyadii, qasriyadii iyo daarihii magaalada Baqdaad,waxa ay bilowday magaaladani argagax markii ugu horreysay in ku dhow taariikhdeeda.

Duqeyntu waxay bilaabantay bilowgii bisha Safar ee sannadkii656h,wuxuuna socday afar cisho oo xidhiidh ah.. mana jirin wax iska caabin la sheego ah.

Wuxuu sheegayaa Ibn Katheer (AHN)_ buuggiisa bilowga iyo dhamaadka taariikhda wax yar oo iska caabbin ahi way jirtay laakiin aniga macno ballaadhan ii samaysay.

Wuxuu leeyahay Ibn Katheer "waxay Tataarku isku meegaareen qasrigii khaliifada,iyaga oo dhinac walba kaga ganayey Naabaallo, sidii loogu waday ayey qaadatay gabadh ka (ciyaaraysay) khaliifka hortiisa oo qoslaysa,waxayna ka mid ahayd dumarkii u ciyaari jiray, waxaana la odhan jiray (Curfa) Leeb ayaa kaga dhacay dhabarka ka dibna shafka ayuu kasoo baxay waanay dhimatay iyada oo ku ciyaaraysa ciyaar qoobka ciyaar ah khaliifka hortiisa,wuu ka naxay khaliifkii arrintaas, aad ayaanu u argagaxay, wuxuu soo qaatay leebkii gabadha ku dilay hortiis mise waxaa ku qoran ((Haddii uu ilaahay doono in uu fuliyo xukunkiisa, wuxuu ka siibaa garaadka kuwii lahaa garashada)) halkaas markay marayso wuxuu khaliifkii amar ku bixiyey in la adkeeyo Albaabada,daarta khaliifkana loo badiyo waxyaabaha hubka celiya iyo sitaaradaha"!!.

Waa yaab in uu Ibnu Katheer warkaas inoo sheego isagoo aan sharraxaad ka bixin..!!

Dhacdo_ sida laynoogu sheegay waa si kooban _laakiin macneyaal aan lasoo koobi Karin xambaarsan.

Si buuxda ayey adduunyadu ula wareegtay quluubta dadka reer Baqdaad, waxana ugu horreeya Khaliifkan.. waakaas khaliifkii loo wakiishay ilaalinta umadda ku jirta xaaladdaas aadka u khatarta badan wuxuu kusoo jeedaa heesaha iyo ciyaaraha noocaas ah habeenkii oo dhan.. haa waxay noqon kartaa gabadhaasi Addoon uu isagu leeyahay, oo waxay u noqon kartaa mid Xalaal u ah.. haddii aanay jirin cid kale oo daawanaysaa dhibi kuma jirto in uu khaliifku eego iyada oo ciyaaraysa kelidiis.. laakiin caqligii xaggee ayuu ka maray madaxa khaliifka?! Caasimaddii Muslimiintu

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

waa go'doonsan tahay waana la duqeynayaa, dhimashadii ayaa dhawr tallaabo usoo jirta, Madaafiicdii Mangooliya ayaa dhan walba ka dhawaaqaya,leebabkoodii dabka ahaa ayaa Ololaya, shacabkiina qiiro-qiiro iyo cidhiidhi buu ku jiraa,khaliifkiina wuxuu ku raaxaysanayaa gabadh yar oo u ciyaaraysa..!!

Miyirkii meeyay?! Oo caqligii aaway?!

Waxay isu beddeshay ciyaartii hablaha yar yari dhiig, sida cuntada iyo sharaabka ayey noqdeen..khasabna waa uu noqonayaa.. mana sharrixi karo sababta ay naftiisu u aqbashay in uu ku mashquulo arrimahan oo kale, iyada oo dhulkii dadkii isaga laftiisu ay xaaladdan ku sugan yihiin.

Waxaa kelmed aad u xeeldheer ah odhaahdii lagu soo qoray leebka dushiisa ((Haddii uu ilaahay doono fulinta qadderkiisa iyo xukunkiisa, kuwa caqliga leh ayuu ka siiba caqliga)) ilaahay (SW) wuxuu u qoray Baqdaad halaag, ka dibna khaliifkii, la taliyeyaashiisi iyo shacabkiiba caqligooda ayaa laga siibay garashadii, shakina kuma jiro inay tahay kelmed ka timid Tataarka oo ayna ogaadeen intii ay cilmi baadhista dagaalka wadeen ee dhawrka sano ahayd,mar kale waa nooc ka mid dagaallada nafsiga ah ee ay Tataarku aadka ugu dhaqmi jireen.

Waxaa kuu caddaynaysa in uu caqligu ka maqnaa khaliifka,markii gabadhu dhimatay, dadkii kuma uu amrin inay dagaal u diyaar garoobaan,waayo khatartii ayaaba daartiisi soo gashay oo wax ku dishay, laakiin keliya waxa uu amray in dayrka la adkeeyo, sidaa darteed daartiisi ayuunbaa dhawr sitaaradood oo kala dambeeya loo sameeyey, si uu ugu dhuunto iyo si loo badiyo ka hortagga, iyo in la qariyo hablaha ciyaarta u darban.

ولا حول ولا قوة إلا بالله. {xeelad iyo awood ilaahay uun baa iska leh.}

Geba gebadii wada hadallada:

Tataarku way iska wadeen garaaciistii magaalada muddo afar cisho ah,oo ka bilaabmaysa bisha Safar bilowgeedii ilaa maalintii afraad ee sannadkii 656h,maalintii afraad ee Safar waxaa bilaabmay inay dumaan dayrarkii dhinaca bari.. dumitaanka dayrarka dhinaca bari waxaa dhinac socda dumitaankii khaliifada gebi ahaanba.

Waxaa ka hadhay cimrigeedii daqiiqado aad u yar oo tirsan.

Halkaas ayuu khaliifkii isugu dhiibay saaxiibkiisi khaayinka ahaa ee Calqami.. maxaan sameeyaa ayuu su'aalay? Wasiirkii khaayinka ahaana waxa uu talo ku siiyey in uu isu dhiibo Holaako,si uu wada hadallada halkii uga sii amba qaado.

Raggii la diray ayaa Holaako uga waramay in uu khaliifkii imaanayo, waxa uu amar ku bixiyey Holaako in khaliifku yimaaddo,laakiin kelidiis maaha,waxaa laga doonayaa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

in uu soo kaxaysto raggii ugu waaweynaa dawladdiisa, wasiiradiisi, khubaradii cilmiga diinta aadka ugu xeel dheeraa, culimadii Islaamka, waxgaradkii dadka,dhamaantood waa inay yimaadaan si ay uga qayb qaataan wada hadallada,si ay u noqdaan ayuu yiri Holaako wada hadalladu kuwo dhamaan lagu qanacsan yahay oo rasmi ah, waa sida uu sheeganayo wiilkan Holaako.

Ra'yi kalena uma banaana Khaliifkan taagta daran.

Wuxuu soo ururiyey khaliifkii dadkii ugu magac iyo maamuus badnaa dawladdiisa,isagiina waa uu soo raacay,waxay kusoo baxeen wefdi balaadhan iyaga oo ku socda Teendhadii Holaako oo ku taal dayrarka dhinaca bari ee Baqdaad meel bari kasii xigta.. wuu soo baxay isaga oo ilmadu indhihiisa ku qallashay,dhiiggiina ku dhex qaboobay xididada jidhkiisa, xawaare aad u daran ay ku soconayaan garaaca wadnihiisu,aadna u neef tuuraya.

Wuu soo baxay khaliifkii isaga oo aad u dulleysan oo tunjileecsi badani ka muuqdo, waa ninkii wefdiyada ku qaabili jiray qasrigiisa,madaxda iyo boqoradaba, waa ninkii awoowayaashii dunida ay ka hoggaamin jireen daartan uu kasoo baxay imminka.

Waa wefdi balaadhan oo gaadhaya ilaa toddoba boqol oo dadkii u arrimin jiray reer Baqdaad ah, waxaa ku jira wasiirkii khaayinka ahaa ee Calqami, wefdigii waxay kusoo dhowaadeen teendhadii Holaako, laakiin intii aanay u gelin mudanihii reer Mangooliya,waxaa joojiyey wefdigii koox Tataarkii boqorka ilaalin jiray ah,umana oggolaanin inay dadku dhamaan u wada galaan Holaako,waxayba yidhaahdeen: waxaa gelaya khaliifka oo ay la socdaan toddoba iyo toban qof oo keli ah, inta hadhay miyaa_ wayna sugayaan ilaa inta aan amar siinayno_ sababtuna wax kale maahee waxaa lagu sameynayaa baadhitaan xeel dheer.. waxaa u galay Holaako khaliifkii oo ay la socdaan raggiisi, waa la kala qariyey qaybtii u gashay iyo kuwii la reebay.. laakiin may samaynin baadhitaan iyo wax kale toona.. waxaa lagu fuliyey dhamaantood..dil..!!

Wefdigii waa la gumaaday intuu tiro le'ekaa marka laga reebo khaliifkii iyo midhadhkii la socday, waa la laayey, madax dhaqameedkii, wasiiradii khilaafada,wax garadkii dadka, aqoon yahan iyo culimadii khilaafada Cabbaasiya oo dhan.

Khaliifkii isaga ma dilin,waayo Holaako ayaa doonaya in uu dano kale u adeegsado.

Waxa uu bilaabay Holaako in uu awaamiirta soo saaro imminka weliba si adag.

Khaliifkii way u caddaatay in wefdigiisi la laayey gebi ahaanba.

Waxaa u caddaatay khaliifka wax hore cid walba u muuqday.. laakiin isagu aanu hore u arkaynin imminka mooyee..waxaa u caddaatay khaliifkii in aan Tataar iyo kuwa la midka ahi aanay ballan iyo axdi midna lahayn.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

لَا يَرْقُبُونَ فِي مُؤْمِنٍ إِلًّا وَلَا ذِمَّةً ۝٩

Ballan iyo axdi midna uma eegaan Mu'minka

Waxaa kale oo u caddaatay khaliifkii in xaqu u baahan yahay mar kasta awood ilaalisa, hadaad xaqa ku taagan tahay oo aadan awood haysan baadilka oo awood haysta wuu ku jebinayaa.. hadaad iskaga tagto xaqaagii oo aadan ilaashan cid aan naftaada ahayn ha canaanan.. laakiin-nasiib darro-dhamaan waxan oo dhami waxay wada caddaadeen waqti aad u habsaan ah.

Waxaa bilaabantay amaradii kasoo fulayey dhiigya cab Holaako:

1. Khaliifka waxaa ku waajib ah in uu dhamaan reer Baqdaad amar ku siiyo inay soo qubaan waxa ay hub hayaan, kana mamnuucaa inay isku dayaan wax iska celin.. waaba arrin sahlan, waayo dadka magaalada badankoodu ma awoodeyn inay hubqaataan..mana jeclaynba qaadashadiisa.
2. In la xidh xidho Khaliifka Muslimiinta lana dhexmariyo magaalada isaga oo silsiladihiisa jiidanaya, si uu usoo tuso Tataarka khasnadihii Cabbaasiyiinta iyo kunuustii Dahabka, Fiddada, macdanihii qaaliga ahaa,iyo waxkasta oo qiimo leh qasriga dhexdiisa iyo xoolaha iyo maalkii dawladda oo dhan.
3. Dil in lagu fuliyo wiil uu dhalay khaliifku isaga oo arkaya!! Waa la dilay inankii ugu waynaa carruurta, Axmed Abu Cabbaas, sidoo kale waxaa la dilay wiilkii dhexe ee khaliifka Cabdi raxmaan Abu Fadaa'il, wiilkii saddexaadna waa la addoonsaday Mubaarik Abu Munaaqib,sida loo addoonsaday saddex hablood oo ay khaliifka walaalo ahaayeen: Faadumo, Khadiijo,Maryam.
4. In uu naga tusiyo rag cayiman khaliifku Baqdaad dhexdeeda,raggaasi waa rag uu magacyadooda gudbiyey wasiirkii khaayinka ahaa ee Calqami, waa rag Sunniyiin waaweyn ahaa,maadaama uu Shiico ahaa waxa uu aad u nebcaa culimada sunnaha,dhamaantoodna waxaa soo wada saaray Calqami, ninku wuxuu kasoo baxayey gurigiisa isaga oo ay la socdaan caruurtiisi iyo xaaskiisi waxayna u baxayeen meel ka baxsan magaalada Baqdaad oo ay Tataar deggan yihiin xabaalo ayey dhinacooda tegayeen,markaas ayaa Caalimka iyo canugga sida Idaha oo kale loo gawracayey,ama caruurta iyo dumarka qaarna waa la addoonsanayey qaarna waa la laynayey..Masiibo ayaay ahayd dhinac kasta oo aad ka eegto.!!

Raggii caynkaas loo gawracay waxaa ka mid ahaa Sheekh Muxiyadeen Sheekh Yuusuf Ibn Sheekh Abufarji Bin Jawsi(caalimkii Islaamka).waxaa la gawracay wiilashiisi saddexda ahaa Cabdullaahi, Cabdi raxmaan, iyo Cabdi kareem,waxaa la gawracay Mujaahid Diin Aybak iyo saaxiibkiis Suleymaan Shaah waa labadii nin ee hoggaaminayey fekreddii Jihaadka,waxaa la gawracay Caalimkii Culimada, Sadrudiin Cali Bin Niiraan,intaas ka dib waxaa la gawracay dhamaan wixii masaajidada ka khudbadayn jiray, Imaamadii masaajidda iyo dadkii quraanka xambaarsanaa..!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Dhamaan waxaas oo dhan khaliifku indhihiisa ayuu ku daawanayaa, Ma malayn karo inta uu le'egyahay xanuun iyo murugada,hoogga iyo baqdinta uu dareemayo inta ay tahay. Laakiin waxaan shaki ku jirin in uu hubo haddii uu maamulkiisa hagaajin lahaa in arrintu maanta sidan ay ka duwanaan lahayd_ daqiiqadoba ha noqotee sawirkan oo kale ayuu ku dambaynayaa taasna wuu hubaa, sida aan waxbadan dunida uga soo joognayna waqti kaa tegay lama soo celiyo, khaliifkii waxa uu arkay in Holaako si fiican ula dhaqmayo wasiirkii daba-dhilifka u ahaan jiray ee Calqami, si cad ayey ugu muuqatay in uu ka dhaxayn jiray xidhiidh muddo socday oo lays fahamsan yahay, wax waliba hortiisa ayey yimaaddeen, wuxuu ogaaday midhaha laga dhaxlo xilka loo dhiibto cid aan u ehel ahayn..laakiin waxan oo dhami waxay muuqdaan xilli aan waqtigoodii ahayn.

"Jalabutayntii Baqdaad"

Ka dib markii ay shacabkii hubkoodii dhiibeen, ka dib markii laga soo jeestay dilkii kooxdii la xasuuqay, ka dib markii Holaako ciidamadiisi la dhexqaaday Suuqyada Baqdaad ee kala duwan wuxuu soo saaray amar aad looga naxo.. waa inay galaan Baqdaad Ciidamada Tataar oo bannaystaan macnaha ciidamadu waxay ka samayn karaan magaalada dil..kufsi..qafaalasho.. sino.. tuugo.. burburin..gubid..wax allaale iyo waxa huwantaas u suurto gasha inay sameeyaan ha sameeyaan..!!

Way galeen wuxuushtii dadyahannada ahaa oo u muhanaya jidhka dadka Muslimiinta ah.

Caasimaddii Muslimiinta ee waynayd ayey ku qamaameen.

اللهم لا حول ولا قوة إلا بك.

Maxaa ciidan jidka ilaahay u dagaalamaya ka baxay Magaaladan..!!

Maxaa culimo fadhiistay dadka diintooda fahamsiinaya magaaladan..!!

Maxaa dhalinyaro aqoon usoo raadsatay magaaladan..!!

Waad hoogtay Baqdaadeey.. cidina kuuma hadhin!.

Meeyay Khaalid Bin Waliid?!.

Meeyay Mathni Bin Xaarith?!.

Meeyay Qac-qaac Bin Cumar?!.

Meeyay Nucmaan Bin Maqran?!.

Meeyay Sacad Bin Abi Waqaas?!.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Maxaa xamaasaddii ka siibay quluubtii ragga?!.

Meeyay dareenkii caruurtii Muslimiinta lagu yaqaanay?!

Meeday sharaftii iyo karaamadii?!

Aaway kuwii Jannada dooni jiray?

Aaway kuwii jidka ilaahay ku dagaalami jiray?

Bal waayee Aaway kuwii sharafta haweenkooda iyo ciyaalkooda,guryohooda iyo maalkooda difaacan jiray?

Aaway..!!!

Cidna..!!

Cadawgeedii ayey Baqdaad albaabadu u furan yihiin.

Ma jirto wax iska caabin..mayee dhaqaaqba ma jiro.

Baqdaad rag kuma hadhin.. kuwo u ekise way ka buuxaan..!!

Waxaa la galay magaaladii Iimaan Abu Xaniifa, Shaafi,iyo Axmed Ibn Xambal.

Waxaa la galay magaaladii Rashiid..ninkii sannadna Xajka tegi jiray sannadna Jihaadi jiray.

Waa magaaladii Muctasim..ninkii furtay Rooma.

Waa caasimaddii Muslimiinta ee dhisnayd in ka badan shan qarni..!!

Tataar waxay ka sameeyeen magaaladii waxaan Caqligu suureyn Karin..!!

Waxay bilaabeen inay Muslimiinta ku ciqaabayeen meel kasta oo Suuq iyo xaafadba ah.. guri kasta iyo beer kasta,Masaajid kasta iyo Maktabad kasta..wadhato ayaa uu noqday dilkii Muslimiinta.. Muslimiintuna garab iyo gaashaan midna ma haystaan,waa ay cararaan Muslimiintu oo guri hooska ka xidhtaan albaabka,markaas ayey Tataarkuna gubaan Albaabka oo ku dhex laayaan,Muslimiintu waa ay cararaan oo guryaha dushooda u baxaan,Tataarka ayaa kasoo baxa xagga dambe oo ku dul gawraca,ilaa uu dheegoodii badi dartiis sida Manjaroorka oo kale daarwalbana dhiig ka shubmayey sida biyuhu xilliga roobka uga shubmaan Manjaroorrada.

Dilka Tataar kuma koobnayn oo keli ah ragga xoogga ah oo qudha.. waxay laynayeen kan gaboobay, Sheekha,waxay dilayeen dumarka ilaa mid la wanaagsanaata oo ay qafaashaan maahee,waxay laynayeen caruurta..ilaa kuwa naaska Jaqaya ayey dilayeen..!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Askari Tataari ahi waxa uu helay afartan caruur ah oo hooyooyinkood la laayey lagu qariyey guri,afartankiiba waa laayey dhamaantood..!!

Qalbigoodu waa dhagxaan..kaba daran xagga adeygga..!!

Maydkaa is dhextuuray magaaladii dhankastood eegtoba.

Waxaa socotay maalintii koowaad,labaad, saddexaad,tobnaad..dilkuna ma joogsan..dabargoyntuna ma dhamaan.

Waabin xataa ma jirto.. dadka waxay aamin san yihiin Tataar lama jebiyo..ma dhaawacmaan.. xataa maba dhintaan..!!

Dhamaan waxaas waa uu daawanayaa Khaliifkii Muslimiintu.. daawashadaas ayaa cadaab u ah isaga.

Bal ka warama dareenka khaliifkaas daawanaya oo weliba la laayey.

1. Laba wiil oo uu dhalay.
2. Wiil uu dhalay ayaa la kaxaystay.
3. Saddex hablood oo walaalihiis ayaa la kaxaystay.
4. Wasiiradiisi ayaa la laayey.
5. Dhamaan culimadii magaaladiisa,kuwii masaajidka iyo kuwii quraanka xambaarsanaaba waa la laayey.
6. Waxaa u caddaatay khiyaamadii ninkii uu aaminay ee Calqami.
7. Ciidankiisa oo dhan isaga ayaa burburiyey.
8. Waxaa la qaatay khasnadihiisi,Kunuustii dahabka,khayraadkiisi iyo maalkiisi gebi ahaanba.
9. Waxaa la gubay caasimaddii dhamayd ee dawladdiisa,lana dumiyey dhismeyaasheedii qurxoonaa.
10. Waxay Tataar wejiyadoodii fooshaxumaa ee gaalada ahaa kula dareereen bogcad la yidhaahdo Baqdaad, sida Ayaxa oo dega bogcad cagaaran markaasuu ka dhigaa cawliin iyo siigo.
11. Waxaa la sudhay silsilado qoortiisa,gacmihiisa iyo addimadiisaba..markaas ayaa loo hoggaamiyey sida awrta loo hoggaamiyo.bal suureyn murugta iyo qoomamada taalla qalbigiisa.

Shaki kuma jiro in uu ku celcelinayo :

قَالَتْ يَٰلَيْتَنِي مِتُّ قَبْلَ هَٰذَا وَكُنتُ نَسْيًا مَّنسِيًّا

alla hoogeygee maan iska dhinta intaan waxani dhicin oo aan ahaado wax layska ilaaway.

Markale shaki kuma jiro inuu la murugoonayo oo leeyahay:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

﴿مَا أَغْنَى عَنِّي مَالِيَهْ ۞ هَلَكَ عَنِّي سُلْطَانِيَهْ﴾ waxba iima tarin maalkaygii,mulkigaygiina waa halaagsamay.

Waxaa maskaxdiisa ku jirta canjalad ay ka baxayso:

قَالَ رَبِّ

ٱرْجِعُونِ ﴿٩٩﴾ لَعَلِّيٓ أَعْمَلُ صَٰلِحًا فِيمَا تَرَكْتُ

Ilaahayoow I celi, waxaa la araka inaan camal wanaagsan soo sameeyo,wixii aan ka imid(ka gaabiyey).

روى أبو داود وأحمد ـ رحمهما الله تعالى ـ عن عبد الله بن عمر رضي الله عنهما أن رسول الله ﷺ قال: « إذا تبايعتم بالعينة (نوع من الربا)، وأخذتم أذناب البقر (العمل في رعي المواشي)، ورضيتم بالزرع، (أي رضيتم بالاشتغال بالزراعة، والمقصود عملتم في أعمال الدنيا أياً كانت في وقت الجهاد المتعين)، وتركتم الجهاد، سلط الله عليكم ذلاً، لا ينزعه حتى ترجعوا إلى دينكم».

Waxa Abu Da'ud iyo axmed ay ka soo weriyeen-ilaahay haw naxariisto labadoodaba_ Cabdullaahi ibn Cumar ilaahay labadoodaba raalli haka ahaadee in Rasuulka ilaahay (NNKHA) uu yidhi: markaad ribada cuntaan,ee aad xoolo dhaqasho ku mashquushaan, beerahana aad raalli ku noqotaan(waxaana loo jeedaa aad shaqada adduunyada kaga mashquushaan khayrkii ama ha ahaato xilli Jihaad oo cayiman ama yaanay ahaane),oo aad jihaadka iskaga tagtaan,ilaahay wuxuu idinku sallidayaa dulli,aanu idinka saari doonin ilaa aad diintiini ku noqotaan.

Waxay ka shaqeeyeen reer Baqdaad xaqiiqadu siday tahay oo weliba ku mashquuleen,beeraha, wershadaha, qoraalka,ganacsiga..cilmiga iyo waxbarashada.. waxay iskaga tageen jihaadkii jidka ilaahay..midhihii ka dhashayna waxay noqdeen dulligaas aynu aragnay.

Duruustani waxay aad muhiim ugu tahay qof kasta oo muslim ah..mid wax xukuma iyo mid la xukumoba.. mid caalim ah iyo mid wax baranayaba..mid yar iyo mid waynba..nin iyo gabadh midkuu doono ha noqdee.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

- Waxaa muhiim ah xaqqu in uu leeyahay awood ilaalisa.

Xuquuqda waa layska qaadaa ee laysma siiyo..si kasta oo ay qaali u tahayna waa lagaa beddelayaa.

Qoomna jihaadka kama tago illaa waa ay dulloobaan.

Cadawga ummaddani ballan iyo cahdi midna ma laha.

Waa la kaxeeyey khaliifkii (Muctasim Billaah) cidhib dambeed xun.. ka dib markii uu arkay waxaas oo dhan ee ku dhacay caasimaddiisi iyo waayaha Daartii khilaafada ku dhacay,mayee daartiisiiba.

Wuxuu soo saaray dhiigya cabkii Holaako in la diyaariyo khaliifkan miskiinka ah..laakiin waxay taageerayaashiisi talo ahaan kusoo jeediyeen..! waxay yidhaahdeen: Haddii khaliifka dhiiggiisu dareemo Muslimiinta raad ayey ku yeelanaysaa xataa haddii waqtigu fogaado ka dib, markaa waa in aan u dilnaa si aan dhiiggiisu u dareerin ama qulqulin.. loomana baahna in la isticmaalo seef!

Sidanina dabcan waa nooc ka mid ah Nacabnimada..waayo waxaa laga yaabaa inay doonaan dhiigga khaliifkoodi, iyo dhamaan dhiigga Muslimiinta uu Holaako laayey isaga iyo ciidankiisu taasina ay ku dhaliso aargoosi.

Laakiin Holaako waa uu soo dhaweeyey.. waxaadba mooddaa in ilaahay doonayey sidata, in xataa khaliifku sidan u dhinto sifadaas dulleynta ah.. kuma dhicin weligeed khaliif ka horreeyey isaga sidani,lamana maqal hal qof oo madaxdii dunida soo martay ah..Muslim ha ahaado ama yaanu ahaane.

Waxa uu Holaako amray in lagu dilo (cagta iyo Jaanta)..!!

Dabcan khaliifkii Cabbaasiyiinta waxaa la dhigay dhulka, waxay ku bilaabeen Tataar inay cagta la dhacaan khaliifkii Muslimiinta.

Bal malay qof sidii loogu jaamaynayey nafta lagaga saaray..!!

Dhinaca xanuunka..dhinaca bah dilka..dhinaca dulleynta..!!

Waxay la dhacayeen jaamo iyo cago ilaa ay naftu ka siibatay jidhkiisa.

وإنا لله.. وإنا إليه راجعون.

Baqdaad ma dumin oo qudha!!

Waxaa dumay oo kale khaliifkii ugu dambeeyey ee Binu Cabbaas ayaa dumay.

Waxaa kale oo raacay shacabkiisi oo dhan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Arrintaasina waxay dhacday maalintii tobnaad ee la furtay Baqdaad albaabadeeda.. waa 14 Safar sannadkii 656h.

Masiibadii iyo mashaakilkii kuma dhamaan dilka Khaliifka.. waxa uu amray Holaako_ilaahay naxariistiisa haka dheereeyee_ in lasii wado hawl galka gumaadista dadka reer Baqdaad.. waa magaaladii ugu waynayd dunida casrigaas la joogay.. waxay rabaan inay ku cibro qaataan sida ay Baqdaad ka dhigeen cid kasta oo maqashaa.

Gumaadka iyo xasuuqani waxa uu socday afartan cisho laga bilaabo markay galeen.

Bal maleeya inta lagu dilay Baqdaad ee Muslimiin ah?!

Waxaa lagu dilay boqol kun oo Muslim (hal Malyuun) oo u dhaxeeya rag, dumar iyo caruur!!

Boqol kun oo Muslim ayey ku dileen afartan cisho keliya..!!

Bal ka warama ummad halmayuun oo dadkeedii ah goob keliya ku wada wayday afartan cisho keli ah.

Masiibo lama arag ah!.

Waxan arrintan u xuseynaa dhibaatooyinka maanta Muslimiintu ku jiraan si kasta oo ay u adag tahay_ way ka sahlan tahay marka loo eego masiibooyinka hore u soo maray ummadda Muslimiinta_ waynuna arki doonaa Muslimiinta oo fadliga ilaahay kasoo kacay masiibadaas wayn- si aan u ogaano in aan ilaahay idankiisa ka soo kaban karno masiibooyinka ilaahay qaddaray.

Waxaa la ogyahay in aan dilkii Baqdaad cidina aanay ka badbaadin marka laga reebo Jaaliyad Nasaaro ah keliya..!!

Haddii koox Tataar ahi ku mashquulsanaayeen xasuuqa dadka Muslimiinta ah iyo daadinta dhiigooda, koox kalena waxay u jeesatay fal dembiyeedyo aad u xun.. fal aan loo baahnayn marka laga reebo nacayb ay Muslimiinta u qabeen oo qalbigooda xoqayey, nacaybkaas oo gaadhsiiyey heer ay nacaan cid kasta oo ku nool carriga Muslimiinta..arrintaasi waa xadaarad ay Muslimku dunida ku hogaamin jireen iyo ilbaxnimo qotodheer.. waxay dareemeen Tataar in qoladan iyo iyaga faraq aad u balaadhani dhexyaalo,iyo xadaarad hore u martay,Muslimku waxay lahaayeen taariikh dheer dhinaca cilmiga,waxbarashada,iyo Akhlaaqdaba ah.. tobanaan kun oo culimo waaweyn ah dhamaanna leh laamaha cilmiga ee kala duwan, weliba aqoonta maadiga ah.. Cilmigaasina uu keenay xadaaraddan qoladani la yaabban tahay.. halka aanay Tataar wax xadaarad ah lahayn.. asal ahaanna aanay u lahayn. Ee ay yihiin ummad baraarugtay halmar.. ku kortay saxaraha waqooyiga Shiinaha, ku dhisan shareecad ururis ah oo laysu keen keenay.. waxay u dagaalantay ummaddani sida duurjoogtu u dagaalamaan.. waxay u noolaadeen sida xayawaanadu u noolyihiin.. mana doonayaan inay adduunyada dhisaan oo cammiraan amaba inay hagaajiyaan

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

gebigooduba.. waxay u noolyihiin arbushid kharibaad iyo burburin iyo dabar goyn.. alla kala fogaa umaddan iyo umadda Islaamku, aan idhaahdo alla kala fogaa umadaha dunida oo dhan iyo ummadda Islaamku.. sidaa darteed burburkii aynu aragnay ee Baqdaad waxaa ah shay aan caqliga geli Karin in uu tirtiro ama xumeeyo taariikhda ummaddani leedahay ee wayn.

Maxay sameeyeen gaboodfalayaashii Tataar?!

Koox Tataar ah oo inkaar qabeyaal ah ayaa yaacay, waxay bilaabeen burburin iyo baab'in, waxay burburiyeen Maktabaddii Baqdaad ee waynayd.. waa Maktabadduu ugu waynayd dunida korkeeda casrigaas, waa daartii cilmiga iyo fekerada lagu ururinayey muddo ka badan lix boqol oo sannadood.. waxaa lagu ururiyey nooc kasta oo cilmi leeyahay, suugaani leedahay,dhaqan leeyahay..culuumta sharciga ah sida tafsiirka Qur'aanka, axaadiista, fiqiga,caqiidada, Akhlaaqda, Culuumta nolosha, sida Caafimaadka, Cilmi falagga, Injineerinka,Kimisteriga,Fiisigiska,Juquraafiga iyo cilmiga dhulka. Cilmiga bini aadanimada sida Siyaasadda, Dhaqaalaha, shirarka suugaanta,Falsafadda,Taariikhda iyo waxyaabaha la midka ah.. waxaas dhamaantood oo weliba lagu daray malaayiin meeris oo gabayo ah, tobanaan kun oo sheekooyin iyo dhacdo ah.. dhamaan waxaan soo sheegnay waxaa dheer turjunka ku qornaa luuqadaha afafka kale ajaanibna ay lahaayeen sida Giriigga, Faaris,Hindida iyo kuwa la midka ah waxaad ogaanaysaa inay waqtigaas dhacday mucjiso ka mid ah mucjisooyinka dunida ee xaqiiqada ah.

Maktabaddaas ma jirin Maktabad usoo dhow waynaanta marka laga reebo Maktabadda Qurduba ee Muslimiinta kuna taallay Andalus (spain).. subxaanallah Maktabaddii Qurdubana waxaa ku dhacday wixii ku dhacay Maktabaddii Baqdaad..!!

Markii Qurduba ay u gacan gashay Nasaaradii Andalus 636h (labaatan sano keliya ka hor dhicitaankii Baqdaad)!! Dhamaanteedba waa ay gubeen maktabaddii Qurdaba.. arrintaasna waxaa sameeyey mid ka mid ah Qasaawasada Nasaarada lana odhan jiray ((Kambiis)) sidoo kale wuu gubayey dhamaan wixii gacantiisa soo gala ee ah qarniyo kuwa la qorayey la ururinayey feker aad u dheeri ku baxday lacag aad u badanina ku baxday soo saaritaankooda, dhidid iyo dedaal badanna lagu soo saaray.

Dagaaladoodu waxay ahaayeen dagaalo ay kula dagaalamayaan ilbaxnimada iyo xaddaaradda, dagaalo ka dhan ah magaalooyinka, dagaalo ka dhan ah, mayee dagaalo ka dhan ah Islaamka,mayee dagaalo ka dhan ah bini adantinimada.

Inta aynaan ka sheekay sida loo galay maktabaddii baqdaad aan yar milicsanno maktabaddan baqdaad.

Maktabaddii Baqdaad

Waa Maktabaddii ugu waynayd waxaa cimrigeedu gaadha Shan qarni oo xidhiidh ah_ cilmiga yaalla xajmiga ay le'eg tahay melena uma dhowa dunida korkeeda.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa aas aasay Khaliifkii Muslimiinta Haaruun Rashiid ee xukunka Muslimiinta qabtay 170_193h ka dib waxay Maktabaddu caadi u hana-qaadday cahdigii Ma'mun khaliifkii Muslimka ee xukumayey 198_218h ka dibna khulafadii Cabbaasiyiintu kitaabkii la qoroba waa ay keenayeen Maktabadda ilaa ay noqotay guriga cilmiga loo soo doonto lana malaysan Karin waxa aqoon dhextaal..!!

Waxaynu ka waramaynaa daartii aqoonta oo ka koobnayd malaayiin safxadood(volume) waqtigaas fog.

Malaayiin buug oo yaalla maktabad keliya,weliba casri aanay jirin daabacado.

Lama malayn karo inta aqoon lagu halaagay maktabaddaas, haddii la qiyaasona waa malaayiin.

Arrintaasina waa mid badanaa soo noqnoqota ilaa casrigan aynu nool nahay,waxaa kaaga filan oo keliya Maktabaddii Daraabulis ee Libnaan_taas oo aan ahayn mid weligeed u dhigmaysa Maktabaddii Baqdaad_ Siliibiyiinta reer Yurub waxay ku gubeen ((Saddex Malyuun!!)) oo Majalladood markii ay ku dhacday gacantooda..!! bal ka waran immisa Majalladood ayey taas Baqdaad noqonaysaa.

Waxaa ka shaqayn jiray boqollaal cilmiga ka raacan jiray oo dawaafi jiray, kuna xidhnaan jiray cusboonaysiin jiray sida (Naasikhuun) cilmi si hore loogu sheegay oo haddana si kale oo xaqiiqada ah la helay markaa kii hore wax laga beddelayo ama lagu darayo,kuwo kale oo dadka u sharrixi jiray kutubta una soo qaqaban jiray kuwa meelaha sar sare saaran sidaa darteed u tilmaami jiray, kuwo kale oo iyaguna turjumi jiray Bugaagta ajaanibku leeyihiin, baadhayaal ayaa jiray kuu baadhaya mawduuca aad doonayso meelaha lagaga hadlay isaga oo faahfaahsan kaagana soo dhex saaraya badweyntaas cilmiga ah.!

Waxay lahayd qolaal khaas u ah Mudaacalacada,qolaal khaas u ah waxbarashada ,meelaha falanqaynta u baahan in lagu eego ayey khaas u lahayd,meelo cuntada iyo cabbitaanka loogu talo galay ayaa ku yaallay.. waxay lahayd dhul loogu talo galay inay degaan ardayda ka yimid meelaha fog fog ee cilmiga usoo doontay.

Markaas waxaynu ka waramaynaa waa jaamicad.. laakiin maaha maktabad la mid ah maktabadaha dunida ka jira.

Waxaa maktabaddan la taagay casrigii fekerka aadamaha ee dunida.

Waxa uu ahaa Ma'mun mid ku darsada wada hadalladasii uu la geli jiray boqorradii Rooma ee uu guulihii caanka ahaa kasoo hooyey inay u oggolaadaan Muslimiintu inay turjuntaan bugaagtii taalay maktabaddii Qisdan-diiniya.. khulafadii bani Cabbaasna waxay ku dari jireen wixii cilmi lasoo kordhiyay ee turjumka ah iyo mid kale oo ay baadhitaan ku heleenba waxaa la dhigi jiray Maktabaddan laakiin waa marka ay eegaan oo baadhaan culimo mutakhasisiin ah iyo khubaro cilmigaas ku talaxtegay.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa lagu turjumay maktabaddan bugaag ku qoran afka Giriiga,Suuriyaan,Hindiya,Faaris iyo kuwo la mid ah.

Waataas Maktabadda Baqdaad.!!

Maxay ku sameeyeen Maktabaddan Tataar.

Waxay qaateen oo xammaasheen dhamaan buugaagtii qaaliga ahayd.. malaayiin kitaab oo qaali ah..cilmina nooc kasti ka buuxo si aan jaahilnimo iyo nacasnimo aanay ka maqnayn ayey ugu daadiyeen webiga Dajla dhamaan..!!

Waxaa la filayey inay cilmiga qaaliga ah u qaadan doonaan Tataarku ((Qaraaqooram)) caasimadoodii si ay uga faa'iideystan, maadaama ay bilow u tahay xaddaaradduba..laakiin Tataar waa ummad dhego xidhan.. waxba akhrin doonaynna inay wax bartaan,u nool waxay jecel yihiin ee naftoodu doonto oo qudha.

Hadafkooda keli ay adduunyada ka lahaayeen waxa uu ahaa inay adduunyada kharibaan..!!

Waxay Tataar dhigeen dedaalladii quruumihii ka horeeyey oo dhan webig Dajla.. ilaa ay isu beddeleen biyihii webiga Dajla midabkoodu madab ah khadkii ay kutubtu ku qornayd.. ilaa la yidhi ninka faraska fuushan ee Tataarka ahi wuxuu kaga gudbi jiray webiga waraaqo waaweyn oo gaadhaya dacal ilaa dacal webiga faraskiisa oo dulmarin jiray..!!

Dembigani maaha oo qudha mid Muslimiinta laga galay.. Ee waa mid laga galay bani aadannimada gebi ahaanteed..!!

Waana dunuub kusoo noqnoqota taariikhda.

Sidan oo kale ayey sameeyeen Siliibiyiintii Nasaarada Andalus_maktabaddii Qurduba ee waynayd.

Mar kale ayey Siliibiyiintii Nasaaradu ka sameeyeen maktabaddii Qarnaadah(Granada) markii ay duntay, markaas ayey ku gubeen halmalyuun oo kitaab mid ka mid ah goobaha dadweynaha ee cilmiga buugtiisa lagu iibiyo, waxaa ka mid ahayd Ishbiiliya,(Seville) Sarqasdah (real Saragoza)iwm.

Waxaa sameeyey Nasaaradii Shaam oo waxay gubeen Maktabaddii Daraabulis ee Libnaan saddax malyuun oo Kitaab.

Waxaa sameeyey Nasaarada Falastiin oo waxay gubeen Maktabadihii Qasa,Quddus iyo Qaysalaan.

Intaas ka dib waxaa sameeyey gumeystayaashii reer Yurub ee soo degay dunida Islaamka qarnigii sagaal iyo tobnaad,laakiin kuwani waa ay ka caqli badnaayeen kuwaas hore oo iyagu ma ay gubin kutubtii laakiin waa ay xadeen,waxay u qaateen

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Yurub ilaa maantana waa laga helayaa maktabadahooda waaweyn kutubta ugu waaweyn oo ay allifeen dad Muslimiin ahi.. shakina kuma jiro kutubta ay hayaan reer Yurub inay ka badan tahay kutubta taalla dhulkii ay ka qaateen oo dhan laftooda..!!

Aan ku noqonno Tataar..Baqdaad.

Ka dib markii ay ka faraxasheen baab'inta maktabaddii waynayd ee Baqdaad, waxay u jeesteen daarihii quruxda badnaa iyo dhismayaashii dhaadheeraa ee bilicda lahaa markaas ayey dhulka ku dhigeen dumin iyo gubitaan.. dhamaanna waxii qaali ahaa ee dhexyaallay waa ay qaateen wixii qaaliga ah ee ay qaadi kari waayaan miyaa waa la gubaa..!! sidaas uun ayey ku wadeen ilaa intii badnayd ee magaaladu u ekaatay duni la rogay iyo boholo aad ka arkaysid caarada ololka gudaha kasoo baxaya iyo qiiqa oo keliya.

Arrintaas xanuunka badani waxa ay soconaysay afartan cisho oo buuro ah.. waxaa iska buuxiyey suuqyada baqdaad dhexdeeda maydadka fuuray ee uraya, waxaa kale oo suuqa midabkiisi wada noqday midabka casaanka,wax dhaqaaqa maqli maysid aan ahayn qosolka Tataarka.. ama codka baroorta Dumarka ooyaya iyo caruurtoodii kadib markii ay wax kasta waayeen.

Halaas_ afartan cisho ka dib markii ay dhamaatay ayuu Holaako uga baqay ciidankiisa in xanuun ka dhashay maydka qudhmay ee Halka Milyan ahi ka dilaaco meesha oo askartu kaga madhato wuxuu soo saaray amaro cusub.

1. Dhamaan inay ciidamada Tataarku iskaga baxaan Baqdaad oo u guuraan magaalo kale oo ku taalla waqooyiga Ciraaq, si aan ciidanka ugu qarxin xanuuno iyo daacuun,inyar oo ilaalisa ayaa lagaga tegay,intaasina aanay magaalada soo gelin waayo wax laga cabsanayaa mandaqadda kuma hadhin.
2. Amaan xaqiiqo ah in uu siiyey Baqdaad, hal qof oo dambe laguma dili karo baqdaad hadii uu yahay shicib afartankaas cisho ka dib..arrintaasna waxaa si buuxda u bixiyey Tataar si ay Muslimiintu uga soo baxaan meelaha ay ku dhuumanayaan oo u aastaan maydadkooda.. arrintaasina waa arrin aad u adag oo dhib badan isla markaana waqti u baahan (malyuun dhintay) haddii aan wax laga qabanna jawiga ayaa is beddelaya_Baqdaad oo keliya maaha ee dhamaan waddanka Ciraaq iyo Shaam,waxaana dilaaci doona xanuuno badan oo dilaa ah, laakiin aan kala saari doonin Muslim iyo Tataar,sidaa darteed waxa uu Holaako damcay inay Muslimiintu arrintaas qabtaan.

   Sidii la filayey waa ay soo baxeen Muslimiintii ku dhuumanayey godadka,xabaalaha iyo barkeduhu.. way soo baxeen iyaga oo muuqaalkoodii is beddelay,jidhkoodii meesha ka baxay, midabadoodii is beddeleen,ilaa ay iyagii is garan waayeen..!!

Mid kasti waa uu soo baxay si uu uga dhex baadho koox dhan oo mayd qudhmay ah inankiisi, ama walaalkiis, ama Aabihiis ama..!! waa masiibo weyn..!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxay bilaabeen Muslimiintu inay Aasaan maydadkooda..

laakiin sidii uu saadaaliyey Holaako waxaa dilaacay xanuunkii si aad u daran ilaa uu Muslimiinta ka laayey tiro aad u badan..! sida uu leeyahay Ibn Katheer: “qofkii Seefta ka badbaaday kama badbaadin Daacuunka” Masiibo aad u daran ayaa ku dhacay Baqdaad.

ولا حول ولا قوة إلا بالله.

3. Sidii Holaako u soo saaray go’aan ah in uu Mu’ayid Diin Calqami ee shiicada ahaa madax uga dhigi doono golaha xukunka cusub meel cayiman oo Tataar dusha ka maamulaan inta aan lagu dhawaaqin ka hor dabcan waa in la siiyaa dardaarannadii Tataaraysnaa.. Mu’yid Diin in aanu naftiisa u arkin wax ka wayn xaakin magaalo oo keliya, Maamulka iyo hoggaamintana waxaa keliya oo leh Tataar, waxyaabaha yar yar aad qabanayso waxaad u daba fadhiisanaysaa Tataar weliba maaha Holaako ee waa askari yar oo askarta Tatarka ka mid ah waa si naftiisa loo burburiyo oo aanu isu arag in uu leeyahay haba yaraatee wax awood ah, dabcan una ahaado dabasocod oo keliya!.

Haweenay Muslimad ah ayaa aragtay isaga oo saaran awrkiisi,ciidamada Tataarkuna ay Ulaynayaan si ay ula deg degto,oo ay dhengedaynayaan hasha, dabcan waa liidid iyo wiiqid halkii ugu hooseysay lagula kacayo guddoomiyaha cusub ee Baqdaad.. waxay tidhi haweenaydii Muslimadda ahayd ee caqliga badnayd “ma sidaas ayey kuula dhaqmi jireen Cabbaasiyiintu?” waxay la yaabtay gabadhani sida uu wasiirku naftiisa u halligay,sida uu u halligay shacabkiisi.. wuxuu ahaan jiray wasiir wayn oo laga dambeeyo dawladdii Cabbaasiyiinta.. wuxuu ahaa kan ugu horeeya wasiirada dhiggiisa ah..kelmeddiisu waxay ahayd mid wayn oo ay wada maqli jireen dhamaan dadka reer Baqdaad ilaa khaliifka marka lagu daro.

Maxaa ka fadeexad badan..! waxaa hatigaya askar yar oo Tatari ah cidina u garan mayso magiciisi.. waxaaba laga yaabaa xataa Holaako laftigiisu in aanu garanaynin..! sidaas oo kale walaalaha akhrisanayoow qofkasta oo iibiya diintiisa,waddankiisa,iyo naftiisu in uu qiima dhacayo oo noqonayo qof rakhiis ah cidina aanay waxba ka dhegaysan sababtoo ah ninka diintiisa iyo dalkiisa soo iibiyey cid waliba way garanaysaa in aanu mid kale wax kusoo kordhinaynin,xataa cadawgu wuxuu kuu baahan yahay inta qorshaynta duullaanka lagu guda jiro oo qudha, markay u dhamaato dantoodii halkaas ayey kugu dambaysiinayaan.

Waxay ku tidhi gabadhii Muslimadda ahayd kelmed gilgishay Mu’ayid Diin naftiisi,wuu iska baxay isagoo aad u murugaysan,wuu iskaga dhex ictikaafay,waxaa dhakada ka fuulay hammigii dunida oo dhan,werwer iyo walaac ayaa hadheeyey,cidhiidhi ayey naftiisi gashay..wuxuu ka mid ahaa kuwii ugu horreeyey ee ku khasaaray soo gelitaanka Tataar ee Baqdaad.. haa imminka waa horjoogaha Baqdaad (Xaakim) laakiin waa xaakim bilaa awood ah..wuxuu xaakim u yahay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

magaalo la burburiyey oo waaql'a ah.. wuxuu xaakim u yahay waa Maytaad iyo bukaan.

Ma awoodin wasiirkii khaayinka ahaa in uu la tacaalo xaaladdan cusub.. ka dib ayaamo cidhiidhi badan iyo walbahaar.. wuu ku dhintay ina Calqami gurigiisa..!!

Wuxuu dhintay bilo yar ka dib sannadkaas laftiisa ay Tataarku galeen Baqdaad..sannadkii 656h.. kuma raaxaysan xukun,boqornimo,khiyaamo..!! si uu wax lagu cibro qaato ugu noqdo cid kasta oo ka dambaysa oo khaayinimo ku kacda.

وَكَذَٰلِكَ أَخْذُ رَبِّكَ إِذَآ أَخَذَ ٱلْقُرَىٰ وَهِىَ ظَٰلِمَةٌ ۚ إِنَّ أَخْذَهُۥٓ أَلِيمٌ شَدِيدٌ ﴿١٠٢﴾

Sidaas ayey tahay qabashada ilaahay,haddii uu qabto magaalo dulmi falad ah,qabashadiisu aad ayey u xanuun badan tahay.

Tataarkii waxaay xukunkii ku wareejiyeen wiil uu dhalay Calqami, wiilku aabihii ayuu ka dhaxlay khiyaamadii..laakiin..ilaahay xukunkiisa.. waxaadba moodaa in jagadani ay sun u tahay ciddii qabsataba.. waxyar ka dib ayuu dhintay wiilkii khaayinka ahaa ee labaadna.. sannadkii ay Baqdaad duntay ayuu geeriyooday ee sannadkii 657h bilowgiisi..!!

La yaab maaha!!

Qofna adduunyo iskuma dhejiyo,haddii ay dhacdona way halaagtaa.

Qofna iskuma dhejiyo madaxnimo, haddii ay dhacdo sidaasina way halaagtaa.

Wasiirkii khaayinka ahaa ayaa isku dhejiyey oo waynu aragnay cidhib dambeedkiisi

Wiilkiisi ayaa qabsaday oo wuu ku halaagsamay.

Shacabkii Baqdaad ayaa adduunyo u dareeray oo way halaagtay.

Rasuulka ilaahayna run ayuu sheegay NNKHA.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

وصدق رسولنا الكريم ﷺ الذي قال فيما رواه الترمذي- وقال: صحيح- عن عمرو بن عوف ﷺ:«..فوالله ما الفقر أخشى عليكم، ولكني أخشى أن تبسط الدنيا عليكم كما بسطت على من قبلكم، فتنافسوها كما تنافسوها، فتهلككم كما أهلكتهم».

Run ayuu sheegay Rasuulkeenii wanaagsanaa (NNKHA) markii uu yidhi sida uu soo werinayo Termidi: Rasuulku wuxuu xadiis saxiix ah ku yidhi: "ILAAHAY baan ku dhaartaye idiinka cabsan maayo faqri,laakiin waxaan idiinka cabsanayaa in adduunyada laydiin fidiyo sidii loogu fidiyey kuwii idinka horeeyey oo kale, oo aad u baratantaan sidii ay ugu beritameen,ka dibna ay idiin halaagto sidii ay iyagaba u halaagtay".

Wararkii Baqdaad waxay gaadheen dunid jaarka la ahayd oo dhan.

Caalamka islaamka miyaa, dhicitaanka Baqdaad wuxuu ku ahaa dhabar jab argagax leh oo aan la rumaysan Karin..Baqdaad may ahayn magaalo caadi ah..marka laga tago inay ahayd magaaladii dunida guudkeeda ugu waynayd casrigaas, marka laga yimaaddo inay ku noolaayeen bashar kor u dhaafaya saddex malyuun oo Muslimiin ah,marka laga yimaado inay adduunyada ugu horreysay xaddaaradda iyo ilbaxnimada,marka laga yimaaddo inay ahayd xudduntii Muslimiinta ee qaddiimiga ahayd..dhamaan waxaas oo dhan marka laga yimaaddo waa caasimadda khilaafadii Cabbaasiyiinta ee Islaamka ahayd..!!

Waa maxay macnaha dhicitaanka Baqdaad?!

Waxay dadku isa su'aaleen su'aashaas khatarta ah.

Waa maxay macnaha Baqdaad waa dhacday?!

Macneheedu waa maxay khaliifkii waa la dilay,iyada oon khaliif kalena la magcaabin?!

Su'aal kale oo khatar ah.

Adduunyadu wax macna leh uma arkaynin khilaafo la'aan Muslimiinta.. tamar darro kasta haka muuqatee,gaar ahaan Cabbaasiyiinta sanidihii ugu dambeeyey,waqtiyadan ay Baqdaad dhacday xataa khilaafadu waxba ma xukumaynin aan ahayn Baqdaad keliya iyo qaybo yar yar oo Ciraaq ah laakiin waxay u ahayd Muslimiinta meel lagu soo hirto.

Haddii ay khilaafo halkaas jirto_inkastooy daciif tahay_waxaa iman doona waqti ay awood yeelan doonto oo ay xoogaysan doonto,dadka Muslimiinta ahina ay kusoo ururi doonaan calankeeda.. haddii aanay khilaafo jirin miyaa.. in laysu keenaa Muslimiinta aad ayey u adag tahay.. weliba waa arrin rajo yar laga qabo inay dhacdo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Masiibada ugu darni waa iyadoo la waayo khilaafo.. Masiibada kasii darani waa iyadoo la waayo Khaliif.

((adduunyo)) bilaa khaliif ah..!!

Ilaahay ayeynu waydiisanaynaa xukuumad islaami ah oo Muslimiinta ku xukunta calan keliya iyo manhajkii Rasuulka NNKHA.

Dhicitaankii Baqdaad Muslimiinta waxaa ku noqotay arrin layaab leh,maskaxdooda ayey arrintaasi qabsatay ilaa la gaadhay in aan wax kaleba laga sheekaysan,ummaddana wuxuu ugu fiday si aad u dhakhso badan oo cajiib ah,dadkuna waxay caado u leeyihiin inay ka sheekaystaan waxyaabaha cajaa'ibka ah.

Waxaa la aaminay in soo bixitaanka Tataar, jabka Muslimiinta, dhicitaanka Baqdaad in tahay calaamadihii saacadda qiyaamada, ((Mahdigiina)) uu dhowaan soo bixi doono,si uu u hoggaamiyo ciidamada Muslimiinta uguna guuleysan doono Tataar..!!

Aniguna waxaan leeyahay: haa waa soo bixi doonaa maalin,Haa wuu soo degi doonaa Ciise (cs) haa waxay noqon doontaa saacaddii.. dhamaan arrimahaas oo dhan waan ognahay inay dhacayaan.. si dhab ah ayey u dhacayaan..laakiin waa goorma? cid garanaysaa ma jirto..!!

يَسْـَٔلُكَ ٱلنَّاسُ عَنِ ٱلسَّاعَةِ قُلْ إِنَّمَا عِلْمُهَا عِندَ ٱللَّهِ وَمَا يُدْرِيكَ
لَعَلَّ ٱلسَّاعَةَ تَكُونُ قَرِيبًا ﴿٦٣﴾ waxay ku

waydiinayaan dadku saacadda iyo warkeeda,waxaad ku tidhaahdaa cilmigeedu ilaahay agtiisa ayuu yaal,maxaa ku ogeysiiyey waxaa laga yaabaa inay saacaddu dhowaan iyo in kale.

Marka ay dhacaan arrimahaas jaah wareerka ahi oo kale, waxay dadku ku wareegaan mar marsiinyo,mar marsiinyahaasina waxa uu sal u yahay dadka oo quustay isla markaana is dhiibay dhamaantood gacanta taagay,kolkaas ayey uga ashkatoonayaan asbaabihii guusha cadawgii ilaahay..waxay dadkii yaqiinsadeen in aanay wax awood ah lahaynin awoodda Holaako ciidamadiisa.. sidaa darteed xal kale ayey raadiyeen oo ah mid fudud oo sahlan.. xalkaasina waa ((Mahdigii)) aan sugno in intuu soo baxayo.. isaga ayaan ka dhinac dagaalami doonaa.. intaas ka hor miyaa ma awoodno dagaal.!

Is dhiibid..quusasho..niyad jab..!!

Waxyaabahaas oo dhammina ma aha sifooyinkii dadka Mu'miniinta..

لَا يَا۟يْـَٔسُ مِن رَّوْحِ ٱللَّهِ إِلَّا ٱلْقَوْمُ
ٱلْكَـٰفِرُونَ ﴿٨٧﴾

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Hadaba waa kuma kan sugayaa ilaa maalinta uu soo baxayo Mahdigu,ogoow xasuuso haddii aad dhimatid inta aanu soo bixin Mahdigu in ilaahay swt kula xisaabtami doono, ogaanshahaaga maaha noloshaada.. haddii ilaahay kugu simo soo bixitaankiisana waxaad ka mid noqon doontaa ciidamadiisa..ciidankiisana ilaahay ayaa dooran doona.. doorashaduna waa bakhtiyaa nasiib.. xaasha lillaah.. wuxuu noqon doonaa in loo eego iimaanka iyo camalkaaga.

Ilaahay ayeynu waydiisanaynaa in uu inna baro diintiisa.

Taasi waxay ahayd xaaladda uu ku sugnaa caalamka Islaamku dhicitaankii Baqdaad ka dib.

Haddaba caalamka Nasaaraduna sidee ayuu ahaa?

Waxaa camiray damaashaad iyo farxad daafaha caalamka Nasaarada dhamaantiis.. waana arrin la filayey..sidii aan bilowgii Buuggan ku sheegay awoodaha caalamka ee waqtigaas inay ahaayeen saddex: caalamka Islaamka,caalamka Nasaarada,iyo Tataar..dagaalada u dhaxeeyey Muslimiinta iyo Nasaaraduna ay ahaayeen kuwa ugu daran, markaa tani waxay ahayd darbad xoog badan oo ku dhacday caalamka Muslimiinta kana soo gaadhay Tataar.. markaa shaki kuma jiro inay Siliibiyiintu damac kaga jiro inay lasoo noqdaam Masar iyo Shaam.

Waxa kale oo sii siyaadiyey farxadooda waa inay isu kaashanayeen Tataar duulimaadyadan cusub.. waa galay boqorkii Armiiniya,Joorjiya,Andakiya amiirkeedii xisbiga Tataar..waxaa sii siyaadiyey farxadda Nasaarada,waxaa u rumooday balantoodii,waayo waxay ku ballan qaadeen inay mar uun Baqdaad gaadhsiin doonaan xumaan tan oo kale ah arrintaasna way xaqiijiyeen,waxaaba Holaako ku siiyey Hadiyado qaali ah ((Maakiik)) batriik Nasaarada,wuxuuna siiyey Qasri qaali ah oo ka mida qasriyadii Cabbaasiyiinta oo dulsaaran webiga Dajla,wuxuuna ka dhigay la taliyeyaashiisa,iyo xubin ka mid ah xukuumadda cusub,iyo dadka ra'yigooda sida fiican uu u dhegaysan doono.

Waxyaabahaas oo dhan ayaa sababay inay Nasaaradu yidhaahdaan: Tataar waa qalab ilaahay ugu talo galay aargoosashada, lagaga aargoosto cadawga Ciise ina Maryama,dabcan waxay u jeedaan waa Muslimiinta.. iyada oo waqti aan fogeyn Tataarku ay laynayeen Nasaarada Yurub laftooda.. laakiin hadalladoodani macne badan ma samaynayn.. Nasaaradu way ilaabayaan waxa iyaga lagu sameeyey maadaama ay Muslimiin la laynayaan, sida ay u ilaabeen waxa Nasaara ay Yuhuudi u geysatay maadaama oo ay Muslimiin laynayaan..Taariikhduna iyadaa isku soo noqnoqota.

Kelmedahan ay Nasaaro ka tidhi Tataar, caydani , waxay la mid tahay hadalladii iyo caydii ay lahaayeen markii ay dhacday Qarnaada_Andalus وسبحان الله..!! qofka akhristay dhicitaanka Qarnaada wuxuu arki doonaa waxyaabo cajiib ah oo ay iskaga mid yihiin dhicitaankii Baqdaad.. qofka Taariikhda

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

dib u daraaseeyaa wuxuu la kulmi doonaa waxyaabo cajiib ah iyo inay taariikhdu si aan caqligu basharku malayn Karin isugu noq noqoto..!!

*****



Warkii Baqdaad waa dhamaaday,Tataarkiina waa ay ka baxeen afartan cisho ka dib dil iyo burburin,waxay bilaabeen dhamaan: Tataar,Muslimiin,Nasaaro inay dib u habaystaan waraaqo cusub markii laga faraxashay Baqdaad ka dib.

Holaako isagu waa uu iskaga baxay Baqdaad wuxuuna u kacay Hamadan oo ku taalla Faaris,ka dib wuxuu uga kacay qalcadda ((Shahaa)) oo ah xeebta badda yare e ((Ormiya)) oo imminka ah (waqooyiga Iiraan) qalcaddaas ayuu dhigtay dhamaan wuxuu kunuus iyo khayraad ka soo qaatay qasriyadii Cabbaasiyiinta,iyo xoolihii loogu talo galay Muslimiinta arrimahooda in lagu maamulo,iyo Tijaartii reer Baqdaad xoolohoodii oo dhan..

Dabcan Holaako wuxuu kaga tegay Baqdaad koox ilaalisa, si fiican imminka wuxuu u bilaabay in uuka fekero talaabadiisa labaad.. talaabada ku xigta Ciraaq_ shaki kuma jiro inay noqon doonto Suuriya (Shaam..) wuxuu bilaabay Holaako in uu daraasad ku sameeyo gobolkaas.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Isaga oo wada cilmi baadhistii, oo is barbar dhigaya meelaha ay awoodda u leedahay iyo meelaha ay u taag daran tahay, ayey qaar ka mid ah madaxdii islaamku go'aansadeen inay la midoobaan Tataar..waxaa iska soo daba dhacay wefdiyo Muslimiin ah oo ka dalbanaya hogaamiyaha Tataarka inay la midoobaan Tataar heshiisyona ay la galaan ((saaxiibka)) cusub,ninka masuulka dunida uga ah colaadda iyo nabaddaba: Holaako..!!

Iyada oo aanay weli qallalin malyuun Muslimiin ah dhiigoodii Baqdaad uu ku daadiyey oo aan deero deero u hirdiyin , qolyahani uma arkaan in uu dhib geystayba ,hadday arkaana dan kama laha waayo waxay aaminsan yihiin: in aad wax kasta ku guuleysato hadaad la midowdo ayaa waxay ka wanaagsan tahay inaad cidla iska fadhido,ama ugu yaraan waxay guul u arkaan inay ninkaas awoodda leh dhinaciisa kasoo jeedaan sharkiisana iskaga raacaan oo ciqaabka Muslimiinta iska indha tiraan..

﴿٧١﴾ وَإِنَّ مِنكُمْ لَمَن لَّيُبَطِّئَنَّ
فَإِنْ أَصَٰبَتْكُم مُّصِيبَةٌ قَالَ قَدْ أَنْعَمَ ٱللَّهُ عَلَيَّ إِذْ لَمْ أَكُن
مَّعَهُمْ شَهِيدًا ﴿٧٢﴾ waxaa

idinka mid ah,mid haddii masiibo idin haleesho odhanaya ilaahay ayaa ii nimceeyey,mar hadaanan la joogin

Shaki kuma jiro in madaxdani ku faraxsanaayeen in aanay kala qayb gelin Cabbaasiyiinta difaacidda Baqdaad, shaki sidoo kale kuma jiro inay isaga dhigayeen Shacabkooda madax kabad baadisay shacabka hooggii iyo halaaggii dagaalka.. shaki kuma jiro inay khudbadahoodu ahaayeen kuwa xamaasadaysan oo beerlaxawsi leh..!!

وَإِن يَقُولُوا۟
تَسْمَعْ لِقَوْلِهِمْ ۖ كَأَنَّهُمْ خُشُبٌ مُّسَنَّدَةٌ haddii

ay hadlaan oo aad hadalkooda maqashid waxaad moodeysaa looxaan la tiirtiirshay.

Shakina kuma jiro inay jirtay culimo ku taageersanaa ra'yigooda una barakaynayey dhaq dhaqaaqooda,shacabkana ku dhiirigelinayey inay raacaan madaxdooda raallina ka noqdaan ficilka ay sameynayaan madaxdoodu.

Shakina kuma jiro in ay culimadaasi tusaale dadka uga dhigayeen sunnihii nebiga madharkiisa_ oo ay odhanayeen tusaale ahaan: Rasuulka ilaahay heshiis ayuu la galay Mushrikiinta, heshiiskaas oo la odhan jiray Xudeybiya, maxaynu innagu ula geli waynay heshiis Tataarka?!! Sidoo kale Rasuulka ilaahay (NNKHA) heshiis ayuu la galay Yuhuuddii madiina innaguna maxaynu ula geli waynay heshiis kaas Tataar markii ay Baqdaad kusoo duuleen?!! Kuwaas iyo wax la mida..!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Ka dibna Tataar way doonayeen (Nabad) inay innagula noolaadaan, ilaahayna SW wuxuu leeyahay kitaabkiisa.

﴿وَإِن جَنَحُوا لِلسَّلْمِ فَاجْنَحْ لَهَا وَتَوَكَّلْ عَلَى اللهِ إِنَّهُ هُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ﴾[الأنفال:٦١].

Hadday idiin soo bandhigaan heshiis,la gal ilaahayna talo saaro,maxaa yeelay ilaahay waa kan ugu maqal badan uguna cilmi badan.

Tataarkuna heshiis ayey inoo soo ban dhigeen.!

Ma shareecada ayaad khilaafaysaan?!

Ma dhiig la daadiyo ayaad rabtaan?!

Ma daaro la burburiyo ayaad iska doonaysaan?!

Ma dhaqaalaha waddanka ayaad doonaysaan inaad burburisaan?!

Sida xikmaddu ku jirto_ee ugu wanaagsani_isla markaana uu samayn karayo Amiirkeenu waa in aan heshiis la gallo Tataar lana midowno.

Waa in aan bilowno baal cusub oo ah jacayl basharka oo dhan ah!!

سبحان الله..!! ﴿يَلْوُونَ أَلْسِنَتَهُمْ بِالْكِتَابِ لِتَحْسَبُوهُ مِنَ الْكِتَابِ وَمَا هُوَ مِنَ الْكِتَابِ وَيَقُولُونَ هُوَ مِنْ عِنْدِ اللهِ وَمَا هُوَ مِنْ عِنْدِ اللهِ وَيَقُولُونَ عَلَى اللهِ الْكَذِبَ وَهُمْ يَعْلَمُونَ﴾[آل عمران: ٧٨]

Waa ay yimaadeen madaxdaasi iyaga oo quluubtoodu ay ruxmayso,naftooduna deg degayso.

Ma aqbali doonaa Holaako la xulufaysigooda ay doonayaan?!

-waxaa ugu horeeya Bedrudiin Lu-lu waa amiirkii Mawsil.

-Amiirkii Kiikooskii labaad iyo Amiir Qarji Arsalaan kii afraad ee dhulkii la odhan jiray Anaadool (badhtamaha iyo galbeedka Turkiga).

-Amiir Ashraf Ayuubi Ximsa.

-Amiir Naasir Yuusuf (xafiid Salaaxudiin Ayuubi) Xalab_Dimishiq.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Madaxdani waxay u badan yihiin waqooyiga Ciraaq, Shaam iyo Turkiga.. waa ay iska fududaatay mashaakilkii horyaallay Holaako.. albaabada ayey u fureen dhulalkii Islaamka iyada oo aan laguba kallifin dagaal.

Laba Mushkiladood ayaase u muuqday Holaako.

Koowaad: waxay ahayd mid ka mida madaxda Muslimiinta ayaa diiday inuu is hoos dhigo Holaako isuna dhiibo, sidoo kale waxa uu diiday in uu heshiis nabadeed la galo Tataar, waxaanu go'aan ku gaadhay in uu jahaad la galo Tataar ilaa ay naftu ka baxayso,dabcan Holaako ninkan wuxuu ku suntay nin ((Argagixiso)) ah, doonayana in uu khal khal geliyo xasilloonida mandaqadda, shakina kuma jiro in Holaako yidhi: ninkaasi ma meteli karo Diinta Islaamka;waayo diinta Islaamku waa diin Saamixid ah, Raxmad ah,Jacayl iyo nabadgelyo ah..!!

Amiirkaas Muslimka ah ee ilaashaday sharaftiisa ,karaamadiisa, diintiisa waa Amiir ((Kaamil Maxamed Ayuubi)) ilaahay haw naxariisto_Amiirkii (Miyafarqiin).

(Miyafarqiin) waa magaalo ku taalla bariga Turkiga ilaa galbeedka badda yare e (Waan)..

Ciidamada Kaamal Maxamed waxay gacanta ku hayeen bariga Turkiga marka lagu daro,ilaa mandaqadda Jasiiradda ah,waa mandaqad ku taalla labada webi ee Dajla iyo Furaat dhexdooda,dhinacooda waqooyi' macnaha wuxuu ka xukumayaa dhinaca waqooyi galbeed ee Ciraaq, iyo waqooyi bari Suuriya.

Hadaba markaynu xisaabinno doonista Holaako ee ah inuu Suuriya qabsado,waxaa ka hortaagan gobolkaas jasiiradda ah ee uu xukumo Kaamil Maxamed ilaahay haw naxariistee_is dulleynta,is dhuldhigista iyo daba dhilifnimada madaxdii kale mar haddii la haysto jaziiraddan yar waa in xoog lagu jiidhaa_lama huraan weeye.

Taasi waa mushkiladdii koowaad ee soo foodsaartay Holaako,weliba tani waxay ahayd mushkilad xaqiiqa ah,weliba magaalada Miyaafarqiin waa magaalo aad u dhufaysyo badan,waxayna ku dhextaal buuraha silsiladda ah ee ku wareegsan badda madaw.. iyo sida shacabka ummadda Muslimiintu ahi uga cago jiidayaan inay gacan siiyaan Kaamil Ayuubi.

Labaad: Tani may ahayn mushkilad rasmi ah, waayo waxay ahayd madaxda Muslimiinta ee doonayey inay la xulufaystaan Holaako waxay jeclaysanayeen oo doonayeen inay jagooyinkooda iskaga sii fadhiyaan, kuna xukumaan wadamada ay haystaan xukun ay iyagu iska leeyihiin,haba ku hoos noolaadeen Dalladda Tataarka'e, Halka Holaakona doonayey in uu dalalkani sida ay u dhan yihiin gacanta ugu dhigo una maamulo, kan uu doono magcaabo,kan uu doono casilo,Holaako ma doonayo qof kale oo mudane la yidhaahdo in uu dunida korkeeda socdo,maxaad u malaynaysaa madaxdan xaabo gurida ah?!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Laakiin Holaako khibrad uu lahaa awgeed,si tartiib ah ayuu u kala horeysiinayaa hawlaha isaga oo weliba weji wanaagsan tusinaya indhaha ku maqan,waxa uu markaa talo ku goostay in uu horta ka takhaluso dhaq dhaqaaqa Kaamil Maxamed Ayuubi_ilaahay haw naxariisto_ka dib wadadiisu ugu banaanaato ilaa Shaam, halkaas arrimahaas haddii uu u soo bandhigo mid ka mida xaabo guridan madaxda sheeganaya ra'yi kama dhiiban karo ee wuxuu ku khasban yahay in uu ku raaco.. weliba raacitaan ah anigays baday.

Muxuu sameeyey Holaako si uu meesha uga saaro caqabaddaas?

Go'doomintii ((Miyaafarqiin)):

Wuxuu u bilaabay Holaako si sahlan oo fudud isla markaana aan ahayn kallifaad, wuxuu isku deyay argagixin (Kaamil) si uu maskaxdiisa uga saaro fekredda Jihaadka, wuxuu u diray ergay,ergaygaasi oo u sheegaya in uu isa soo dhiibo si nabadgelyo ah oo aan lahayn wax shuruud ah,kuna soo biro kooxdan Madaxda Muslimiinta ah..Holaako wuxuu si aad u caqli badan u xushay ergayga,waayo ma uu dirin Ergay Tataari ah,waxa uu diray ergay carab ah oo Nasraani ah magaciisana la odhan jiray (Qisiis Yacquubi) ergaygani dhinac waxa uu awoodaa in uu fahmo Kaamil waayo afkiisa ayuu ku hadlayaa,markaa jaanis buu helayaa uu ku sheego Holaako iyo awooddiisa aan iyo dhibaatada uu dunida gaadhsiiyey,dhinaca kale waa Nasraani,sidaa darteed Kaamil uu u ogaado inay Nasaaradu is kaashanayaan Tataar isla markaana dhinac kasoo wada jeedaan,istiraatijiyad muhiim ahna ay u tahay,waayo marka aad eegto juquraafi ahaan meesha ay ku taal Miyaafarqiin dhinaca bari Turkiga dhinaceeda barina waxaa ku qabsan Armiiniya isla markaana xuduud wadaagaan oo Nasaaro ah isla markaana xulufo la ah Tataar,xuduudeeda waqooyi barina waa Joorjiya iyaduna Nasaaro ah isla markaana xulufo la ah Tataar.

Sidaas ayuu ku noqday Kaamil Maxamed jasiirad yar oo Mu'minad ah dhinac walbana ay ka xigaan waddamo waaweyn oo Nasaaro,Munaafiqiin iyo Mushrikiin ah iyo weliba kuwo u shaqeeya.

_bari Armiiniya Nasaaro Nasaaro.

_waqooyi bari Joorjiya Nasaaro.

_koonfur bari maamulkii Mawsil oo u shaqaysa Tataar.

_galbeed Salaajiqadii Turkiga oo u shaqaysa Tataar.

_koonfur galbeed Xalab oo la shaqaysa Tataar.

Miyafarqiin waxay arrinteedu noqotay mid khatarteedu aad u badan tahay!

Muxuu ku sameeyey Kaamil_ilaahay haw naxariisto_ ergaygii Holaako u soo diray?

Wuu qabtay oo dilay!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Iyada oo aynu ognahay in aan la dilin qofka Ergayga ah,haddana Kaamil arrintaas wuu sameeyey si uu uga dhigo ugaysiin rasmi ah inay dagaal diyaar u yihiin, iyo daawayn laga dawaynaya laabaha Muslimiinta ee quustay ka dib markii ay arkeen Malyuun lagu gawracay Baqdaad,una sheegaan in aan Tataar wanaag aqoonin nololna ixtiraamin.

Wuxuu ahaa dilka (Qisiis) ergay la diray keliya shaqadiisu waxay ahayd inuu fariintaas ka qaado Holaako gaadhsiiyona Kaamil, markan waxaa u caddaatay Holaako in aanu gali Karin Shaam ilaa laga takhaluso Kaamil Maxamed..(waynu sharrixi doonaa ergada la dilo halkay ka taagan tahay diinta Islaamka).

Holaako wuxuu leeyahay ujeeddo muhiim ah, waayo waxa uu ogaaday caqabadda koowaad ee Mandaqadda inay tahay Miyaafarqiin, sidaa darteed waqti iska lumin maayo, si deg deg ah ayuu u diyaariyey ciidan xoog leh madaxna waxa uu uga dhigay inankiisi (Ashmud Holaako) waxaana ciidankaas lagu Jiheeyey Miyaafarqiin si toos ah ka dib markii uu Amiirkii Mawsil u fasaxay inay sii dhex maraan dhulkiisa.

Wuxuu u jiheystay (Ashmud Holaako) ciidankiisi Ayaxa ahaa dhinaca Miyaafarqaan gaar ahaan meelaheeda ugu adag, dhufayskii ugu adkaa ayey beegsadeen, waa dhufays aad looga shaqeeyay oo ku yaalla Miyaafarqiin lafteeda,oo uu ku noolyahay (Kaamil Maxamed))naftiisu,waxa uu ahaa Alkaamil Maxamed mid diyaariyey ciidamadiisa qalcaddaas Jaraar dhamaantood, sababtuna waa haddii uu ciidamadiisa ku kala firdhiyo labada webi dhexdooda awood buuran yeelan maayaan oo ay ku qaabilaan ciidamada Tataar.

Waa ay yimaadeen ciidamadii Tataar,waxayna markiiba Go'doomin saareen Miyaafarqiin,sidii la filayey waxaa kale oo yimid ciidamadii Armiiniya,Joorjiya, si ay dhinaca bari uga go'doomiyaan Miyaafarqiin,go'doomintaas bahalnimada ahi waxay dhacday bishii rajab 656H_ ka dib burburintii Baqdaad afar bilood_(eeg khariiradda 13).

Waa ay isdifaacday magaaladii, iska caabbin xoogleh ayey kala kulmeen,geesinimo yaableh ayuu muujiyey Kaamil Maxamed,kuna dhiiri geliyey shacabkiisa sugnaan iyo geesinimo.

Wuxuu ahaa amiir wanaagsan waqtigii xumaanta!!

Geesi xiligii fuleyada!!

Nin wax fahamsan dabcan samaan dunida ka buuxsantay doqonimadu!..doqonnimo tii ugu xumayd!!

Waxaa waajib ku ahayd go'doomintaas daran ee lagu hayey Miyafarqiin in la helo maamulladii Muslimiinta ee badnaa inay ka hesho gargaar.. laakiin may dhicin.. xataa mid ka midi kuma taakulayn waxyar oo hub,cunto,iyo daawo midna.. madaxdii Muslimiintu waxay ixtiraameen qawaaniinta cusub ee maamulkooda cusub uu

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

faray,waana mudanihii koowaad ee dunida_Tataar_ walaalahoodii rag iyo dumar,caruurtoodii, dumarkoodii,hooyooyinkooda Muslimiinta ah dan kama laha.

Maanta ayaan la yaabbanahay madaxdii gartaye siday shacabku uga jawaab bixiyaan..!!

Shacabkii xaguu jiraa..?!!

Yacnii haddii ay madaxdii sidan aan sheegnay yihiin akhlaaq ahaan,maxaa aamusiyey shacabkii?maxay u dhaqaaqi waayeen si ay u bad baadiyaan walaalohooda diinta iyo caqiidada, xataa walaalohooda dhiig iyo nasabnimadu ka dhaxayso, xidhiidhada ka dhaxeeyey ayaa ahaa mid aad u kala tagsan.

Way ka aamuseen aamuskaasina wuxuu dhaliyey khataro aad u badan.

Kow: shacabku waxba kama geddisanayn madaxdooda.. waxay jeclaysanayeen nolosha.. noloshuna siyaabo badan ayey noqon kartaa.

Laba: waxaa ka jiray gobolka oo dhan (maskax maydhan) dhamaan shacab kasta oo ku nool gobolladaas iyo kuwii kale ee aan soo marnayba..shaki kuma jiro in madaxda,wasiirada ,culimadaay dadka ku qancinayeen inay siyaasadoodu wanaagsan tahay,xikmad ku maamulayaan.. shakina kuma jiro inay eedaynayeen oo canaanayeen Kaamil Maxamed (Mujaahid) difaacday karaamadiisa,karaamada shacbigiisa, xataa sharaftii Muslimiinta.

Waxaan shaki ku jirin inay ku odhanayeen khudbadahooda tusaale ahaan:

(Kaamil miyaa,waa in uu tanaasulaa, si uu shacbigiisa uga badbaadiyo burburinta dagaalka..!)

Ama mid yidhaahda: ((Kaamil haddii uu dhiibi lahaa hubkiisa,way dhamaan lahayd mushkiladdu,laakiin hubkiisi ayuu ka qarinayaa dawladdii koowaad ee dunida:Tataar,taasina waa khalad ay ku mutaysanayaan reer Miyaafarqiin dabargoyn dhamaantood!))

Shakina kuma jiro in uu Holaako diri jiray waraaqo uu ku leeyahay : in aanu u imaan magaaladan nabdoon aan ahayn in Kaamil laftiisa maahee, laakiin shacabka reer Miyaafarqiin iyo Holaako aanay cadaawadi ka dhaxaynin.. waxaynu ku wada noolaan doonaa nabadgelyo iyo jaar wanaag!.

Waa hawl gal lagu maydhayo maskaxda shacabka,laguna dejinayo xamaasadda shacabka,laguna kala furfurayo isku xidhnaantooda iyo isku duubnidooda.

Saddex: qofka aan aqbalin hadalkan,beerlaxawsigan iyo khiyaamadan.. wuxuu aqbali doonaa Seef!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Shacabkii waxaa qabsaday qahar, adayg,dulmi uu sabab u yahay siday u arkayeen xukunku.

Karaahiyo iyo cadaawad ayaa ka dhex bilaabantay kii la xukumayey ee shacabka ahaa iyo kuwii xukumayey oo madaxdoodii ah, fekredahaas xun xun ee qaawan,waxay fududeysay inay soo geba gebowdo,go'doomintii Miyaafarqiin,waxaan u baahannahay in aan fahamno sida ay u fududeysay,waxaa dultaallay shacabkii Muslimka ahaa Seeftii geerida, madax iyo shacabtooni uma soo dhaqaaqin weliba kuwii jaarka la ahaa.

Haddii aynu fahamnay liidashada qaawan ee uu aqbalay Amiirkii Mawsil Bedrudiin Lu'lu, iyo madaxdii Salaajiqada (galbeedka Turkiga) Kiikooskii Labaad Qarji Arsalaankii afraad,doqonnimada iyo xayawaanimada uu ogolaaday (Naasir Yuusuf Ayuubi) waa madaxweynihii Xalab iyo Dimishiq xataa wuxuu gaadhay derejo aan la fahmi Karin..!!

Ninka waxaa Kaamil Maxamed kaga xidhaya cilaaqaad muhiim ah..waxaa ka sareeya cilaaqaadka Diinta,jaarka,caqiidada, cilaaqaadka istiraatijiyada fog ee Xalab-Dimishiq,hadaba waxay dhacdaa Miyafarqiin bariga Xalab, haddii la jebiyo talaabada labaad waxay noqon doontaa Xalab si toos ah... intaas oo dhan waxaa dheer waxaa jira cilaaqaad dhiig iyo rixim..labadooduba waxay ka soo jeedaan reer Ayuub,waqti dhaw ayey ahayd markii awoowgood geesigii Muslimiinta ee waynaa Salaaxudiin AL Ayuubi رحمه الله، oo aan geeridiisa ka soo wareegin toddobaatan sano (Salaaxudiin wuxuu dhintay رحمه الله، sannadkii 589h) dhacdooyinkii uu gaadhsiiyey cadawga Muslimiintana ma aha mid la ilaawi karo,siduu u noqon karaa Naasir Yuusuf oo durriyadiisi ahi in uu aqbalo dullinimada intaas le'eg?

Su'aashaasi aad bay u adag tahay..Naasir Yuusuf dhafoor uma dhanaana.. dhinaca sharciga iyo dhinaca caqligaba.

Waxa uu ka dalbaday Kaamil (IHN) Naasir Yuusuf gar gaar iyo cudud, si aad u adag ayuu ugu diiday..muu rog rogin.. muu fekerin.. wax kasta waa uu iibsaday,gatay oo ku wareejiyey Tataar.. miyaanu ogeyn markuu sidaas sameynayey in aan Tataar ilaalin ballan iyo cahdi midna..haddiiba ay Tataar run ka sheegaan ma Muslimiinta ayuu ka iibin doonaa Tataar haddey gaadhayaan Kunuusta dunida?!

Ka dib Naasir Yuusuf kama soo noqon go'aankii uu u sheegay Kaamil Maxamed,kamana noqon go'aankiisi ahaa in uu ka qayb qaato go'doominta Miyaafarqiin, xataa warqad ayuu u diray Holaako uu usii dhiibay inankiisi, dhambaalkaas oo uu ku sheegayo in uu kala qayb geli doono Tataarka weerarka (Masar) iyo xil ka caydhinta Mamaaliikta.

Bal kawarama .. isaga oo duruuftaas ku xeeran tahay ayuu Naasir Yuusuf ka dalbanayaa Tataar in uu kala qayb galo duulaanka lagu qaadi doono Masar..!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Ma illowsana Naasir Yuusuf dabcan in uu inankiisi xambaarsan yahay hadiyad qaali ah iyo sooryo aad u qiimo badan loona diray ((saaxiibkiisa)) cusub Holaako.

Laakiin ilaahay ayaa Xumo ka nasahan.. geel doono geeso dhiigley dhashaa..!!

Wuu is kibriyey Holaako, kana cadhooday inanka sida alaabadan,muxuu isagu u imaan waayey inta uu inankiisa iisoo dirayo, madaxdii kaleba iyaga oo gucleynaya ayey ii yimaadeen,wuxuu kale oo ka xanaaqay in Naasir Yuusuf ka dalbado in uu ka caawin doono dagaalka Masar, dabcan Holaakona waxa uu damacsan yahay waa Shaam iyo Masar labadoodaba in xukunkiisu qabsado,laakiin ma jirayo xukun yar oo dhinac socdaa sida Naasir Yuusuf iyo xukuumaddiisa oo kale.. Halkaas ayey cadho wig ka tidhi, wuxuuna u soo diray waraaq uu kusoo qoray erayo halis ah.. inta waxani dhacayaan oo dhan inankii Naasir Yuusuf dhalay wuxuu ka mid yahay ciidamada Tataar ee Muslimiinta ku duuli doona..!!

Layaabna maaha.. libaaxii ayaa uu gacanta ugu jiraa.

Bal aan wada jir u akhrino warqaddii Holaako u soo diray Naasir Yuusuf madaxweynihii Dimishiq.. waxaana caddaan iska ah in Muslimiin is beddeshay ay ku jirtay ciidamada Tataarka,oo ay u beddelayeen waxa uu yidhaahdo luuqadda Carabiga faseexa ah, sida aad ka arki doontid asluubta ugu munaasibsan ee ay ugu qoreen.

Wuxuu yidhi Holaako:*((wuu ogyahay Boqorka Naasir saaxiibka Xalab,in aanu ku furanay Baqdaad seefihii ilaahay, oo aanu laynay geesiyaasheedii,burburinay dhismeyaasheedii,qafaalanay dadkeedii sida ilaahay kitaabkiisa leeyahay*

قَالَتْ إِنَّ الْمُلُوكَ إِذَا دَخَلُوا قَرْيَةً ﴿٣٣﴾
أَفْسَدُوهَا وَجَعَلُوا أَعِزَّةَ أَهْلِهَا أَذِلَّةً ۖ وَكَذَٰلِكَ يَفْعَلُونَ ﴿٣٤﴾

boqoradu haddii ay magaalo galaan way fasahaadiyaan,dadkeedii sharafta lahaana way dulleeyaan,sidaas ayey sameeyaan.

Waanu u yeedhnay khaliifkeedii,su'aalo ayaanu waydiinay,been ayuu ka sheegay,waxaanu badnay wax laga murugoodo,dil ayuu naga mutaystay,wuxuu ahaa mid ururSaday xoolo qaali ah,naftiisuna waxay ahayd mid liidata oo doqon ah,xoolo ayuu kayd saday,rag ilaaliyase ma samaysan,sheeg sheegiisa ayaa waynaaday,magaciisa ayaa shaac baxay, annaguna ilaahay ayaan ka magan gelaynaa dhamaystir dabadii nusqaan iyo jab.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Haddii shay dhamaystirmo waa soo dhaadhacaa.

Hadaad nimco ku sugan tahay waa la ilaashadaa,waa macaasidu way kaxaysaa nimcada, immisa wiil ayaa nimco ku sugnaa,markaas ayey geeridiiba ilaaween ilaa lagu habsaday.

Markaad hesho warqadaydan, ula soo dhakhso,ragaaga,xoolahaaga,fardahaaga, si aad ugu adeecdo suldaanka dunida ee koowaad,hadaad sidaas samayso ayaad ka nabad gelaysaa sharkiisa,khayrkiisana heli doontaa, sida ilaahay ku leeyahay kitaabkiisa kariimka ah:

﴿٣٨﴾ وَأَن لَّيْسَ لِلْإِنسَٰنِ إِلَّا مَا سَعَىٰ ﴿٣٩﴾ وَأَنَّ سَعْيَهُۥ سَوْفَ يُرَىٰ

﴿٤٠﴾ ثُمَّ يُجْزَىٰهُ ٱلْجَزَآءَ ٱلْأَوْفَىٰ ﴿٤١﴾ dadku waxay leeyihiin uun waxay shaqaysteen,shaqadoodana way arki doonaan,ka dibna waa laga abaal marin doonaa,abaal marin wafaysan.

Marnaba hays hortaagin ergaygaas aan kuu soo diray,sidaad isu hortaagtay oo aad u ajiibi wayday ergaygii hore, wanaag ku qabo,ama kusoo daa si wanaagsan,waxaa nasoo gaadhay,in Tijaartii Shaam iyo dumarkoodii ay u yaaceen Masar (dabcan arrintaasina way jirtay inay u yaaceen Masar markii ay ka warheleen inay soo dhow yihiin Tataar) hadday buuraha fuulaan waan afuufi doonaa,hadday dhulka joogaanna waanu la goynaynaa,

Xagee tolow loo cararayaa iyada oo addunkoo dhammi gacantayda ku jiro,haybadayada libaaxyada ayaa u dulloobay,dhamaan waxa dunida madax jooga iyo wasiirona halkan ayaan ku hayaa.

Way dhamaatay warqaddii Tataar ee argagaxa badnayd.

Wadnihii Naasir Yuusuf ayaa ku dhacay gomodihiisa..!!

Muxuu sameeyaa?!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Naasir Yuusuf oo Jihaad ku dhawaaqay!!

Waxay caddeeyeen wakiiladii Holaako,isaga oo doonaya in uu Kaamil isa soo dhiibo,iyo in uu baacdan doono Tujaarta carartay iyo shacabka raacay..iyo sheegitaanka Holaako cidhib dambeedkii khaliifkii Cabbaasiyiinta ee murugta lahayd..wax kasta ma wuxuu u dhiibi doonaa Holaako? Isaga maxaa u hadhaya? Jacaylka boqornimada,iyo saldanaddu waxay raacday dhiigiisa,haddii Holaako ka qaado keliya kursiga maxaa u hadhaya, ilaa wax kasta oo kale dhiibye?

Sidaa darteed wuxu goostay Naasir Yuusuf go'aan aan marna maskaxdiisa ku soo dhicin intuu noolaa.. waa go'aan ((Jihaad)) ka dhan ah Tataar..!!

Waxaana cid waliba ka warqabtaa in Naasir Yuusuf aanu ahayn nin Jihaad..wax xamaasad ahna aanu u haynin DIIN iyo Caqiido midna,misana wuxuuse ku dhawaaqay jahaad uu u dagaalami doono jidka ilaahay..!!

Waxay noqotay yeedhmo lagu qoslo,ninka hantidiisi oo dhan ilaa dadkiisi ku iibsaday inuu kursiga kusii fadhiyo saacad ama laba saacadood iyo wax la mid ah!.

Waxaa ayey ahaayeen wixii dhacay!!

Wuxuu taagay Naasir Yuusuf calankii waddankiisa,wuxuuna ku qoray «الله اكبر»، wuxuu bilaabay inuu shicibkiisa xamaasadeeyo,jihaad kursiga dartiisa ah.. laakiin uu ugu sheegay jidka ilaahay!!

Waa Naasir ninka jihaadka naadinayaa!!

Naasir Yuusuf_ waa ninkii Luwis Taasic boqorkii Faransiiska u dirayey fariintii ahayd in uu ka caawin doono dagaalka Masar,si isagana uu u siiyo Baytal Maqdis_ ayaa jihaad naadinaya..!!

Naasir Yuusuf_ ninkii taageeray gelitaanka Tataar ee Baqdaad, kuna hambalyeey Holaako guushiisa wayn ee uu ka gaadhay Baqdaad_ ayaa jihaad naadinaya..!!

Naasir Yuusuf_waa ninkii ku gacan saydhay Kaamil Maxamed markuu gargaarka waydiistay ee weliba u diiday xataa inuu cunto ku caawiyo_ayaa Jihaad naadinaya..!!

Naasir Yuusuf_ waa ninkii ayaamo yar ka hor Holaako ka dalbanayey in uu kala qayb qaato duullaanka lagu qaadi doono Masar_ ayaa jihaad naadinaya..!!

Naasir Yuusuf_ oo dhamaan waxaas oo fashil siyaasadeed ahi kasoo kor baxeen_ ayaa Jihaad naadinaya..!!

Wadhi!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Walaalayaal: ﴿إِنَّ اللهَ لاَ يُصْلِحُ عَمَلَ الْمُفْسِدِينَ﴾ ilaahay ma wanaajiyo camalka dadka xun xun fasaadiyeyaasha ah.

Wuxuu ahaa Naasir Yuusuf mid ku guuraya caadifadda uu shicibkiisa ku abuuray..waxaa soo ifbaxday akhlaaq xumadiisi,fasaadkiisi.. doqonnimo halkuu ka gaadhay waa ninka aaminsan in ilaahay SW gacantiisa ugu gargaari doono Muslimiinta..!!

Qaar ayaa oggolaaday xamaasaddii uu waday, ka dibna go'aansaday inay ka hoos dagaalamaan calanka cusub,laakiin gurdan raacis ayey kula socdeen, sida maantaba dhacda iyo sida taariikhdu sheegaysoba waxaa la hubaa inay kulanka dagaalka yaaci doonaan..Naasir kuma sugnaan doono goobta dagaalka waxyar maahee.. xataa wuxuu carari doonaa intaan dagaalku bilaabminba.. saacaddaasna wuxuu ku imaan doonaa kooxdan xamaasadda diintu hayso,qoladaasna khaladkoodu maaha inay cararaan oo nafahooda la baxsadaan mar haddii amiirkoodiiba cararay, laakiin khaladkooda ugu wayni waa aaminadda ay aamineen in Naasir Yuusuf iyo kuwa la midka ahi qaadi karaan calanka Jihaadka ee Culus..!!

Markaad maqashaan_walaalayaal_ yeedhmo Jihaad eego cidda ku dhawaaqaysa yeedhmadaas..cibaadadani waa kuruska iyo halka ugu sarraysa Islaamka.. xaqna uma laha inay ku dhawaaqaan cid aan ahayn ragga waaweyni, waxaan uga jeedaa waaweyni dhinaca cibaadada,dhinaca aqoonta,dhinaca suhdiga,dhinaca waraca iyo xalaal miirashada,iwm.

Muhiimadda waa Naasir Yuusuf wuxuu ku dhawaaqay Jihaad wuxuuna ciidan ku diyaariyey waqooyiga magaalada Dimishiq,gaar ahaan magaalada Barsa,waxayna ahayd in uu ciidamadiisa usoo dhaqaajiyo dhinaca magaalada Xalab si uu u ilaaliyo,waayo waa magaalada ugu muhiimsan magaalooyinka ay xukuumaddiisu maamusho,ayna isku qaabilaan ciidamada Holaakona waa bartilmaameedkiisa ugu horeeya ee Shaam, ama waxay ahayd in uu ciidankiisa geeyo Miyaafarqiin si uu awooddiisa ugu biiriyo awoodda Kaamil Maxamedoo ay u siyaaddo awoodoodu,markaa fursad guuleed ayaa la fili lahaa,laakiin waxaas oo dhami xisaabta uguma jiraan Naasir Yuusuf, wuxuu ku diyaariyey ciidankiisi Dimishiq badhtamaha Shaam,xataa haddii Holaako uu yimaaddo uu u heli karo fursad baxsi ah,ma doonayo in uu naftiisa qaaliga ah u ban dhigo khatar halka ugu yar!.

Ka dib waxa uu bilaabay Naasir Yuusuf in uu madaxdii Muslimiinta u diro fariimo uu leeyahay kalaya aan isu gaashaan buuraysanee dagaalka Tataar,wuxuu u diray amiirkii Kark bariga badda dhimatay (imminkana ah Urdun) oo magaciisa la odhan jiray ((Muqiis Fatxu Diin Cumar)) Muqiis macneheedu waa waraabiye,mana uu ahayn mid naftiisa waraabiya waxaan ahayn,Fatxudiin macneheedu waa diinta ayuu furtay mana ahayn mid diin wax u taray,mana ahayn mid Cumar meelna uga eg.. balse wuxuu ahaa Naasir Yuusuf oo kale marna Tataarka la dagaalamaya, kolna iyaga gargaar iyo garab waydiisanaya, waa nin xalaadda iyo duruuftu ged gediyeyso..!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Amiiro kale ayuu u diray codsigaas uma malaynayo inay cidi usoo jawaabayso abid.. wuxuu u diray Amiirkii Masar si hiil ugaga helo dagaalka Tataarka..!!

سبحان الله!.. shalay ayuu ahaa cadawga amiirka Masar, weliba uu dalab u diranayey Tataarka si uu uga gacan siiyo dagaalkooda Masar, maantana wuxuu cadaw la yahay Tataar, markaasuu Amiirkii Masar gargaar waydiisanayaa iyo caawimo dagaal ka dhan Tataar..!!

Ma jiro mabd'a.. qaaciido.. asal.. waa dan shakhsi oo keliya.

Aan halkaas kaga tagno Naasir Yuusuf iyo diyaar garowgiisa jihaadka oo aan ku noqonno Holaako oo deggan qalcaddii ((Shahaa)) ee Hamadan oo uu xarun uga dhigtay inuu ka maamulo dagaallada iyo arrimaha uu ka wado bariga dhexe.

Holaako waxa uu bilaabay inuu dib u eegis ku sameeyo waraaqihiisi midho dhalka ahaa iyo horuu marka cusub ee u qabsoomay,sidoo kale hawlaha u qorshaysan ee foodda kusoo haya.. kuwaas oo ku wajahn gobolkan balaadhan ee(bariga dhexe..)

Kow: xidhiidhka Tataar iyo Nasaaro oo sii xoogeystay,gaar ahaan markii ay soo baxeen qaar ka mida madaxdii Muslimiinta oo mucaarid ku ah Tataar, halkaas waxaa ka muuqata inay awoodda Tataar iyo qabashadoodu sii siyaadeyso kaalmaynta Nasaarada darteed, si dhib yarna lagu bakhtiiyo kooxaha kacdoonka wada ee mucaaradada la yimid oo dhinac ah, khibrad in lasiiyo dhinac kale,maamulka arrimaha Shaam marka la rido ka dib dhinaca saddexaad.. halkaas ayuu kaga dhawaaqayaa kuna guddoonsiinayaa Holaako abaal marino iyo hadiyado,Haythuum boqorkii Armiiniya,sidoo kale boqorkii Joorjiya,iyo ((Bohmand)) amiirkii Andaakiya(Turkiga qayb ka mida).

Labo: go'doominta saaran Miyaafarqiin in aan laga qaadin,go'doomintaasna waxaa hoggaaminaya inanka uu dhalay Holaako (Ashmud) waxaa isaguna si ba'an oo geesinimo leh u dagaalamaya oo isu difaacaya Kaamil Maxamed inkastoo culays badan ay saareen,gaar ahaan ciidamada Armiiniya iyo Joorjiya Muslim Amiira oo usoo dhaqaaqayaana ma jiro.

Saddex: cadaawad ayuu muujiyey Naasir Yuusuf Ayuubi amiirkii Xalab iyo Dimishiq,saldhigna wuxuu ka samaystay Dimishiq,ciidamo Tataar la kulmi doonana waa uu diyaarsaday,laakiin diyaarintaasi marna uma babac dhigi karayso Holaako,wuu garanayaa waxa uu haysto,sidaa darteed Holaako wuxuu u arkaa arrin aan cago adag ku taagnayn.

Afar: waddanka Ciraaq waa badhtamaha- waxaana ugu muhiimsan magaalooyinkeeda Baqdaad,waa la ogyahay inay gebi ahaanteed ku jirto gacanta Tataar ayna tahay Amaan,sidoo kale in Amiirkii Mawsil xilkii kula wareegay Tataar si buuxda,sidaa mar hadday tahay waqooyi bari Ciraaqna waa aamin.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

shan: magaalooyinka ugu awoodda badan Shaam waa Xalab iyo Dimishiq.. haddii labadaasi dhacaan macneheedu waxa weeye Shaam oo dhan ayaa dumtay dhamaanteed,magaalada Xalab waxay ka xigtaa Dimishiq waqooyi wax aan ka yarayn saddex boqol oo kiiloo mitir.

Markuu Holaako is hordhigay qodobadan wuxuu arkay inay munaasib tahay in si toos ah loogu dhaqaaqo labadaas magaalo qabashadoodu: Xalab iyo Dimishiq.. tee ayuu ku horeeyey Holaako?

Holaako waxaa u muuqatay hadduu u jeesto Xalab,waa in uu u marka hore u dhaqaaqaa waqooyiga Ciraaq,ka dib uu Suuriya kasoo galo waqooyi bari,wuxuu dhambalay waqooyiga Suuriya xuduudka Turkigana dhinac kaga teedsan yahay.. ilaa uu ka gaadhay Xalab ee waqooyi galbeed Suuriya.. gobolladani waa gobollo webiyadu ku badan yihiin..webiyaduna waa caqabado dabiici ah oo ay adag tahay in laga gudbiyaa ciidamo aad u tiro badan,waase dhul cagaaran,beero leh,biyo leh oo aan lagu harraadayn, waxaa u dheer waxay wadadani u dhowdahay Miyaafarqiin haddii ay gurmad uga baahdaan oo kale way soo gaadhi karayaan waqti kooban.

Laakiin Holaako haddii uu u jeesto Dimishiq marka hore_ inay ku noqoto lama filaan naxdin ku ah Muslimiinta Dimishiq,maxaa yeelay Holaako wuxuu kasoo gelayaa meel aan laga filaynin_ laakiin Holaako, si uu sidaas u sameeyo waa inuu foolka saaraa saxaraha baadiyaha ah, Saxaraha Samaawah dhamaantiis dhexqaada sida uu saxarahaas dabada u hayona ku gaadhaa Dimishiq, waa saxare qaawan oo qallalan,ciidanka tiradiisa lagu sheegay laba boqol iyo konton kun khatar aad u daran ayey ku keeni kartaa, Holaako ma awoodo in uu talaabadaas qaado.. hadduu sidaas lama filaanka ah ku samayn lahaa ciidanka Naasir Yuusuf wuxuu qaabilayaa quwaddii Muslimiinta ee gobolkan ku noolayd.

سبحان الله! waqtigaas ka hor lix qarni, iyada oo waxyaabo ka yar waxyaabaha uu sito Holaako,ay haystaan ayuu Khaalid Bin Waliid (Rc) ayuu saxarahaas dhex qaadsiiyey ciidamadiisi uu kala baxay Ciraaq kagana naxsaday ciidamadii Roomaanka ee degganaa meel u dhow Dimishiq,kagana guuleystay guul lama ilaawaan ah.. laakiin kala fogaa Khaalid Saxaabi ah رضي الله عنه iyo Holaako oo dhiigya cab ah ilaahay naxariistiisa haka dheereeyo.

Isku soo wada duuboo Holaako wuxuu go'aansaday inuu ciidamadiisa u dhaqaajiyo Xalab inankiisuna go'doominta ku hayo magaalada Miyaafarqiin.

Wadadii loo maray ((Xalab))

Wuxuu bilaabay ciidankii balaadhnaa ee Tataar inay kasoo ambabaxaan fadhiyadoodii ahaa Hamadaan iyagoo galbeed usoo jeeda,soo dhex maray buuraha galbeed ee Iiraan,ka dib waxay ka soo galeen xuduudka Ciraaq dhinaca waqooyi bari,ka dib waxay soo galeen magaalada Irbiil,way soo dhaafeen waxay soo gaadheen magaalada Mawsil ee amiirkeedi la shaqaynayo Tataar,waxay foolka saareen webiga Dajla,waa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

caqabaddii biyaha ee koowaad ee kala kulantay gobolkan,waana caqabad khatar badan runtii,waxaa laysku aamini karaa webigan iyada oo gobolkani aad laysaga hubo amaankiisa,mar kale khatarteeda ayey ku leedahay ciidanka intan faro le'eg,mana jirin meel kale oo biyo mareen ah kana fudud halkan mandaqadda oo dhan..!! ka dib ciidamadii waxay cagta soo dhigeen dhinaca galbeed ee webiga dhulka yar ee jasiiradda ah si ay u gaadhaan magaalada ((Nisabiin)) (koonfurta Turkiga ah imminka) waa magaalo u jirta Miyaafarqiin ilaa 170km oo keliya, sidaa darteed isaga oo usoo dhowaaday inankiisi Ashmud ayaanu hadana u tegin si aanu khal khal u gelin kalsoonida inankiisa.

Wuxuu qabsaday Holaako magaaladii ((Nisabiin)) iyada oo aanay kala kulmin iska caabin la sheego,ka dib galbeed ayuu uga dhaqaaqay si uu u hantiyo magaalooyinka ((Xaraan)) ka dibna ((Ilbiirah)) dhamaantood magaalooyinkani waa koonfurta Turkiga,wuxuu Holaako uga dan lahaa magaalooyinkan uu cagta mariyey oo dhan si uu uga soo dego ((Xalab)) waqooyiga markaa wuxuu iska sii xaadhayaa inay dhacdo waxyar oo dhabarjebin ah kagana timaadda dadyowga Muslimka ah ee uu dhexmarayo.

Magaalada ((Ilbiirah)) (eeg khariiradda 14) wuxuu Holaako dhex jeexay webiga wayn ee Furaat laga bilaabo barigiisa ilaa galbeedkiisa, taasi waxay noqonaysaa in uu teedkii labaad ee biyaha ahaa ka gudbay isaga oo aan wax dhibaato ah oo la sheegi karaa ka hor iman, ka dib waxa uu uga jeestay webiga galbeedkiisa koonfur si uu uga gudbo xuduudka Turkiga Suuriya ilaa magaaladii Xalab ee dhufaysyada badnayd, aadna waxay ugu dhowdahay xuduudka Turkiga (waxay u jirtaa ilaa kontoneeyo kiiloomitir keliya).

Socdaalkan diigaanyada Tataarku wuxuu kasoo bilaabmay dhulka Faaris, ka dibna Ciraaq, ka dibna Turkiga, ka dibna Suuriya intaas oo dal waxay ku qaadatay halsano oo buuro ah sannadkaasina waa.. 657h wuxuuna Holaako soo gaadhay Xalab bishii Muxarram sannadkii 658h.

Waxay dhan walba ka garaaceen wuxuushtii Tataarku magaaladii Muslimadda ahayd,laakiin Xalab way diiday inay isu dhiibto Holaako,waxaa magaalada madax ka ah Tawraan Shaah,Naasir Yuusuf Ayuubi adeerkiis,laakiin wuxuu ahaa Mujaahid dhab ah mana ahayn sida inanka uu adeerka u yahay, waxaa magaaladii lagu hadheeyey madaafiicdii la odhan jiray MIJANIIQYADA (waa madaafiicdii casrigaas ugu casri sanayd ee magaalooyinka lagu duqayn jiray) duqayntii Tataarku is daba joog ayey ku noqotay magaaladii Xalab.. dabcan Naasir Yuusufna ciidamadiisa wuxuu ku hayaa meel aad uga fog, masaafo gaadhaysa saddex boqol oo kiilomitir koonfurta dimishiq..!!

Dhicitaankii ((Miyaafarqiin))!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Halkaa hadday xaaladuhu marayaan ayaa waxaa dhacday dhacdo xanuun badan oo naxdin leh, waxaa soo gashay cagaha Tataarka magaaladii Miyaafarqiin, ka dib go'doomin aad u daran oo saarnayd sannad iyo badh!.

Sideed iyo toban bilood oo xidhiidh ah intaasna lagu jiray iska caabbin,la tacaalid iyo jihaad.. intaasna aanu inyar u debcin qalbiga amiiradii Muslimiinta ahaa ama boqor ka mida boqoraddii.. sided iyo toban bilood oo Naasir, Ashraf,Muqiis nimankaas magacyada waaweyn lahina ay eeganayeen waxay ku danbayso balse aanay samayn inyar oo dhaq dhaqaaq ah!.

Way dhacday magaaladii Miyaafarqiin cagta ayaa la mariyey xurmooyinkeedii ayaa si lama arag ah loola dhaqmay, Ashmud wuxuu ka yeelay magaaladan si ay ugu cibroqaataan magaalo kasta oo isku dayda inay ka hor timaaddo Tataar oo gobolkan ku taal.. dhamaanteed dhegta ayaa dhiigga loo daray, daaraheedii ayaa la gubay,burburin tii ugu darnaydna waa la burburiyey.. laakiin may dilin Kaamil Maxamed _ رحمه الله _ nolol ayey ku haysteen si ciqaabka iyo cadaabta ay ugu badiyaan wuxuu u diray aabihiis, oo go'doomin ku haya magaalada Xalab.

Holaako wuxuu isu geeyey sharkiisi oo dhan si uu uga aargoosto amiirkii geesiga ahaa Kaamil Maxamed Ayuubi (IHN) wuu qabtay oo xidh xidhay, ka dibna jidhkiisa ayaa marba qayb la jarayey isaga oo nool kuna khasbayey inuu u cuno jidhkiisa oo hilibkiisa ayaa afka lagaga gurayey..!! cadaabka sidaas u daran ayuu ku waday ilaa ilaahay SW Amray naftii inay u baxdo rabbigii abuuray ee naxariista badnaa.

﴿وَلاَ تَحْسَبَنَّ الَّذِينَ قُتِلُوا فِي سَبِيلِ اللهِ أَمْوَاتًا بَلْ أَحْيَاءٌ عِنْـدَ رَبِّهِـمْ يُرْزَقُـونَ ۞ فَرِحِينَ بِمَا آتَاهُمُ اللهُ مِن فَضْلِهِ وَيَسْتَبْشِرُونَ بِالَّذِينَ لَمْ يَلْحَقُوا بِهِم مِّنْ خَلْفِهِمْ أَلاَّ خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلاَ هُمْ يَحْزَنُونَ ۞ يَسْتَبْشِـرُونَ بِنِعْمَـةٍ مِّـنَ اللهِ وَفَضْـلٍ وَأَنَّ اللهَ لاَ يُضِـيعُ أَجْرَ الْمُؤْمِنِينَ﴾ [آل عمران: ١٦٩-١٧١].

haw malaynina kuwii loo dilay jidka ilaahay kuwo dhintay,mayee way noolyihiin ilaahay agtiisaana lagu quudiyaa,iyaga oo ku faraxsan waxa ilaahay siiyey galladdiisa una bushaaraynaya kuwa kale ee aan soo gaadhin kana dambeeya una sheegaya cabsiyi korkiina ma ahaan hana murugoonina,waxay ku bushaaraysanayaan nimcada ilaahay iyo galladiisa,ilaahayna ma dayaco ajarka iyo abaal marintaiinta Mu'min.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

روى البخارى ومسلم عن أنس بن مالك ﷺ قال: قال رسـول الله ﷺ: «ما من عبد يموت ـ له عند الله خير ـ يسره أن يرجع إلى الدنيا ـ وأن له الدنيا وما فيهـا ـ إلا الشهيد، لما يرى من فضل الشهادة، فإنه يسرّه أن يرجع إلى الدنيا، فيقتـل مـرة أخرى».

Waxaad odhan kartaa: waxaa loo dilay Kaamil Maxamedkii is difaacay, sidii loo dilay Muctasim Billaah khaliifkii Baqdaadee is dhiibay!.. laakiin waxaan idin leeyahay walaalayaal “kala fogaa labadaas midna is dhiibay midna wax iska celiyey ilaa laga dilay,

kala fogaa labadaas midna dhintay isaga oo madaxa kor u qaadaya oo rag la halgamayo,iyo kan dhintay isaga oo dullaysan hoosna u foorara oo gorodda laalaadinayo.

Kala fogaa labada ku kala dhintay mid seeftiisa isaga oo haysta la dilay,iyo kan isaga oo is dhiibay oo gacmaha taagay la dilay.

Kala fogaa kan lagu dilo leeb laabta kaga dhaca isaga oo soo jeeda iyo kan leebku dhabarka ka haleelay isaga oo sii cararaya.

Kaamil Maxamed رحمه الله_ wuxuu ku dhintay ballan uu qaaday Ilaaha Caalamiinta.. ballankaas oo ah in aanu waqtigiisa ilgibidhsina ka hor marayn,il bidhiqsina ka dib dhacayn: sidaas oo kale Muctasim Billaahna wuxuu ku dhintay wuxuu ku dhintay ballan uu qaaday Ilaaha Caalamiinta.. ballankaas oo ah in aanu waqtigiisa ilgibidhsina ka hor marayn,il bidhiqsina ka dib dhacayn.

Walaahi walaalahayga Iimaankoow:

Fuleynimaduna cimriga ma dheerayso, geesinimona cimriga ma gaabiso.

Si fiican weedhaas u xafida!!

Xaqiiq..fuleynimo cimri kuuma siyaadinayso,geesinimona kaa naaqusi mayso.

Laakiin meeday Yaqiintii?!

Wuxuu shahiiday Kaamil Maxamed Ayuubi, waxaana lagu tilmaami karaa shammac ka iftiimaya Caalam mugdi ah, wuxuu ka goostay dhiigyacabkii Holaako madaxiisi,wuxuuna amar ku bixiyey in madaxiisa lala mara magaalo kasta oo ka mid

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ah Shaam, si uu ugu noqdo Cibro Muslim kasta,wuxu ku soo dhamaaday dawaafkii lala wareegayey Madaxa Kaamil Dimishiq, waxaa la sudhay mid ka mid ah albaabada Dimishiq laga soo galo, waana albaabkii la odhan jiray Baabu ALFaraadiis, markii dambena halkaas ayaa lagu aasay rukun masaajid oo markii dambe loogu magac daray masaajidkii madaxa.

Ilaahay ayaan u waydiinaynaa in uu ka mid dhigo dadka Jannada.

Dhicitaankii ((Xalab))!!

Duqayntii ayaa ku badatay magaaladii Xalab,waxaa kor u kacday xamaasaddii Tataarka dilka Kaamil Maxamed iyo furashada Miyaafarqiin, waxaa kale oo daciiftay awooddii dadka Muslimiinta ah duqayntan faraha badan darteed,waxaa kale oo hoos u dhacay mooraalkoodii dila la dilay geesigoodii Kaamil Maxamed Ayuubi dartiis.

Go'doomintu waxay saarnayd magaalada Xalab toddoba cisho oo keliya,ka dib wuxuu ogeysiis ku bixiyey Tataarku inay dadka iyo magaalada ammaan siin doonaan hadday albaabada u furaan magaalada iyada oo aanay jirin wax iska caabbin ah, laakiin duqii magaalada Tawraan Shaah wuxuu ku yidhi: taasi waa khiyaamo,Tataarna ma laha ballan iyo axdi toonna,laakiin dadka waxaa quus geliyey dhicitaankii Miyaafarqiin,iyo iyada oo aanay wax gurmad ah ka helin madaxweynahoodii Naasir Yuusuf,iyo inuu iska fadhiyo Dimishiq,uuna isaga tegay iyaga iyo duqeynta Tataar.. quustaasi waxay shacabkii u horseeday inay doorbidaan is dhiibis.. dadka intiisii badnayd waxay ku dhaqaaqeen inay albaabada furaan Holaako hortiis,laakiin Tawraan Shaah iyo koox Mujaahidiin ahi way diideen,waxayna galeen Qalcad ku dhextaalla magaalada.

Dadkii reer Xalab waxay u fureen magaaladii Tataar ka dib markii ay sheegeen Amaan,waxay kusoo qamaameen ciidamadii Tataar magaaladii Xalab,intii waxyar aan la jooginba waxaa ka wada muuqday qudhunkii Tataar ee foosha xumaa,waxaa u cadaaday shacabkii Xalab wixii u caddaaday mar hore Tawraan Shaah,laakiin nasiib xumo waxay caddaatay waqti habsan ah aad..! wuxuu amar kusoo saaray Holaako in dhamaan wixii Muslimiin ah la laayo,lana daayo wixii Nasaaro ah..!! sidanina waa khiyaamo la filayey,khaladkana waxaa iska leh shacabkan hoosiiska hadh moodey..! sidaas ayaa lagu bilaabay gawraca ragga,dumarka, caruurtii reer Xalab,magaaladana waxaa laga simay burburintii ka dibna waxay dumiyeen dayrkii magaalada ku wareegsanaa,si aanay isugu deyin mar kale wax iska caabbin,ka dib wuxuu u jeestay qalcaddii ku dhextaallay magaalada ee ay galeen Tawraan Shaah iyo kooxdii Mujaahidiinta ahayd waxaa lagu bilaabay duqayn, duqeyntii ayaa ku badatay Qalcaddii,dhinac kastana waxaa lagaga hadheeyey leebab,laakiin qalcaddii way adkaysatay,wayna iska caabbisay, garaacistaasi waxay ku socotay afar toddobaad oo xidhiidh ah,ilaa ay jabtay oo gacanta Holaako ku dhacday,albaabada ayaa la jabsaday,Holaakona wuu laayey sidii la filayey_ dhamaan wixii ku jiray Qalcaddaas,laakiin wuxuu daayey oo aanu dilin Tawraan Shaah!.. taariikhyahannada qaar waxay sheegaan wuxuu sidan Holaako u sameeyey wuxuu ka yaabay geesinimada ninkan wayn iyo raganimada ku jirta, laakiin Holaako ma aha sifooyin

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

lagu yaqaan in uu cid raganimo ku daayo.. laakiin waxaa muuqata in uu kala lahaa dano kale oo xunxun sida,cafisku dhinac wuxuu ka noqonayaa mid siyaasadaysan oo dhagaraysan,uuna uga dan leeyahay mar haddii uu cafiyey inay soo baxaan dhamaan waxa Ayuubiyiin Shaam ku nool oo dhami,gaar ahaanna ayaamo aan fogeyn ka hor waxa uu dilay Kaamil Maxamed Ayuubi, markaa haddii la dilo odeygoodii macneheedu waxaa weeye dhamaantood waa la laynayaa, Hana ilaawin in rag badan oo Ayuubiyiin ahi ay xulufo la yihiin Holaako,waxaana ka mid ah Ashraf Ayuubi amiirka Ximsa_ isaguna ma doonayo in uu arrimaha Shaam daba geddiyo.. taasi waa dhinac marka laga eego,dhinaca kale, in uu furo albaab cusub, oo madaxda kale ee Muslimiintuna ay Isu soo dhiibaan si nabadgelyo ah iyaga oo aan samayn wax iska caabbin ah.

Holaako_ sida lagu yaqaan_waan nin fariid ah,waan nin fiican,waa nin nabadeed, xataa ma dilayo kii la dagaalamay.. maxaad u malaynaysaa kan ku biira ee la xulufaystana..!! ka dib aan dhinac saddexaad haddaan ka milicsanno Tawraan Shaah wuxuu adeer u yahay Naasir Yuusufka ciidamada ku haysta Dimishiq amiirka khaayinka ah,qabashada Tawraan Shaah ee aan la dilin waxay noqon kartaa waddo loo mari karo waan waan,layskulana oggolaan karo in laysugu yimaaddo miiska wada hadalka,halkaasna uu ku baaqdo dagaalkii Holaako ay kaga dhiman lahaayeen tiro ciidamadiisa ka mid ahi.

Waxaan aaminsanahay tusaaleyaashaas oo dhami_sidii la doono haloo dhigee_waa qaar munaasib ku ah dabeecadda Holaako, haddii la odhan lahaa Holaako waxaa saameyn ku yeelatay akhlaaqda iyo raganimada Tawraan Shaah, markaa waxa soo baxay nin akhlaaq iyo ragannimo ka badan tiisa sita.. taasi maaha mid weligeed laga fili karo Holaako oo kale..!!

Holaako wuxuu ku sugnaaday Xalab, waanu afjaray dhamaan wixii wax iska celini ku jirtay,dhamaan dayr iyo qalcadna waa la dumiyey.. ka dib wuxuu damcay in uu uga diga rogto meel kale oo ka mid ah Shaam, wuxuu u yeedhay Holaako Ashraf Ayuubi_ amiirkii Ximsa, waana mid ka mida amiiradii khiyaamoolayaasha ahaa ee waqti hore la midoobay Tataar,wuxuu u karaameeyey si aan caadi ahayn....! Wuxuu siiyey maamulka magaalada Xalab iyo magaalada jaarkeeda ah ee Ximsa,sidaasna waxa uu u sameeyey si uu ugu damaanad qaado in uu ka mid yahay xisbiga Holaako,iyo si uu u yaqiinsado Ashraf, in maslaxadiisa shakhsiyadeed ay ku jirto in uu Holaako dalka haysto,waayo kursigiisi ayuu iskaga fadhiyayaa, laakiin dabcan Ashraf waxaa lagu dhuftay shaambad Tatari ah oo la mid ah ciidamada Tataarka askari ka mid ah,Ashraf Ayuubi wuxuu noqday Xaakimka maamulaya magaalada,taas macneheedu waxaa weeyey wuxuu noqonayaa Xaakimka magaalada masuulka ka ah,halkii uu ahaa markii hore mid ka mid ah hoggaamiyeyaasha Tataarka laakiin aanu haynin wax maamul ah,cidda wax laga waydiinayo,masuuliyadda magaalada ee looga dambaynayo isla markaana haysata dhamaan ciidan iyo awood maamulba waa Ashraf Ayuubi.!

Ka dib Holaako wuxuu u dhaqaaqay galbeed markuu Xalab dumiyey ka dib,ilaa dhufeyskii la odhan jiray ((Xaarim)) ee Muslimka ahaa (wuxuu u jiraa Xalab ilaa konton kiiloo mitir) waxaana ku jirtay unug Muslimiin ah oo diidday inay isu dhiibaan

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Holaako, dhinacyada ayaa layskaga wareejiyey dhufayskii,iyaguna iska caabbin ayey galeen aad u daran,waa laga awood batay dhamaan wixii ku jirayna waa la gawracay.

Ka dib socdaalkiisi dhanka galbeedka ayuu iska watay ilaa uu gaadhay Andaakiya,waa maamulkii Nasaarada ahaa isla markaana xulufada la ahaa Tataar madaxna uu ka ahaa ((Bohmand)) Holaako wuxuu fadhiisin uga dhigay ciidamadiisi magaalada duleedkeeda,ka dibna wuxuu ku dhawaaqay kulan, kulankaas oo lagu gorfayn doono waxyaabaha dhiman ee aan u qabsoomin sidii qorshohoodu ahaa iyo sidoo kale sidii loo xaqiijin lahaa xulafooyinkani taageeradoodu halka ay gaadhsiisan tahay (laakiin kulankani wuxuu ku salaysan yahay aragti Tataar) waxa ay bilaabeen xulufayoonkiisi deganaa gobolkani inay usoo kala dheereeyaan isla kulankaasna waxay ka caddeeyeen inay waajib tahay in la adeecaa Tataarka laguna kalsoon yahay inuu maamulo..waxaa yimid boqorkii Armiiniya Haythuum, waxaa kale oo yimid amiirkii Andaakiya Bohman,sidoo kale waxaa u yimid madaxdii Salaajiqada ee Muslimiinta ahaa: Kiikoos Saani iyo Qarji Arsalaan, waxay maamuladoodu ka dhisnaayeen meelo aan ka fogeyn Andaakiya.

Ka dib Holaako wuxuu guda- galay inuu soo saaro go'aano iyo awaamiir.

Kow: in lagu abaal mariyo boqorkii Armiiniya abaal marin wayn, taasoo ah dhamaan wixii xoolo laga soo qaatay Xalab,taasina waa qadderin lagu qadderinayo in uu qayb libaaxle ka qaatay dumintii Baqdaad,ka dibna Miyaafarqiin,ka dibna Xalab.

Labo: labada Suldaan ee ka socda Salaajiqa Kiikoos Saani iyo Qarji Arsalaan Raabic inay ku celiyaan oo siiyaan qaybo ka mid ah dhulkii ay Muslimiintu hore u furteen oo ahaa magaalooyin iyo qalcado boqorka Armiiniya,taasina waa si loo balaadhiya maamulka Armiiniya, xukunkiisuna si fiican cagaha isugu taago uguna noqdo saaxiib dhow oo istiraatiji ah Holaakon.. arrintani_ dabcan_ may ahayn mid soo bandhigid ah iyo doonista labada Suldaan ee Muslimiinta ah!

Saddex: in la abaal mariyo (Bohmand) laguna abaal mariyo taageeradiisa Holaako, waana in la siiyaa magaalada Laadiqa ee Muslimku leeyahay, uuna ku darsado imaaradaha yar yar ee Andaakiya, Laadiqa waxay ka mid ahayd magaalooyinkii laga xoreeyey Siliibiyiinta ayaamihii Salaaxudiin Al Ayuubi ilaahay haw naxariistee_ ka dibna waxay ka mid noqotay magaalooyinka Muslimiinta ilaa imminka,laakiin waxaa hadiyad loogu bixiyey hal kelmed oo keliya, labada go'aan ee labaad iyo saddexaad waxay oofinayaan qaaciido caam ah oo gumeystuhu iska leeyahay, qaaciidadaasina waa gumeystuhu wuxuu siiyaa wax aanu lahayn cid aan mudnayn ama xaq u lahayn..!! si ay meeshaas rabshadeedu usii jirto weligeed, waxaad ogtahay Soomaaliya iyo Ethiopia ama Hindiya iyo Bakistan ee Ingiriis ayaa sii dhigay Muxuu ukala dhowaysanayaa markuu dhulka Soomaaliyeed siinayo Itoobiya,ilaa Soomaalida ayaaba kala dagaal gashay "Barma iyo Cuba" dagaalkii koowaad ee dunida, waa laba dal oo Afrikaan ah isla markaana deris ah, hadduu eegayo kan ayaa wax kula qabtay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Soomaali ayaa cudud ciidan ku taageertay, arrintu laakiin sidaas maaha ee wuxuu doonayaa in uu ka tago raad weligiis jira si aan Ingiriis wuu tegay oo keliya loogu illaawin laakiin xukunkiisu si dadban usii jiro.

Afar: go'aankaas afraad wuxuu ahaa go'aan aad u cajab badan,waa go'aan aan maslaxad u ahayn boqorka Armiiniya iyo amiirka Andaakiya midna,laakiin waa go'aan hooska ka xariiqaya in adduunkoo dhan imminka uu ku jiro gacanta mudanaha cusub ee dunida_Holaako_ isagana loo daba fadhiisanayo, boqoradan yar yarina aanay ahayn wax aan ahayn hoos joogeyaal isaga daba socda mooyee wax kale.

Go'aan kaas yaabka badani waxa weeye in uu u magcaabi doono wadaad cusub Kiniisadda ku taalla Andaakiya ee dawladeedu asal ahaan tahay Nasaarada!.. hadda ma aha Baqdaad oo kale tusaale ahaan ama Xalab, laakiin Andaakiya,waxaana aynu ognahay in aanu Holaako ahayn Nasaari.. go'aanku marka hore wuxuu ka imaanaya mid aan waxba ka fahamsanayn Nasaaro,intaas waxaa dheer wadaadkan cusub maaha reer Andaakiya,waxaaba kasii yaab badan wadaadkan cusubi ma haysto Mahdabta Nasaaro ee ay haystaan Bohman iyo Haythuum..!! arrintanina waa arrin khatar ah oo kusoo biirtay diintii Nasaarada.

Ku dhawaaqistii Kiniisadda!!

Wuxuu magcaabay Holaako wadaad cusub oo dhalashadiisu tahay Giriig ((Yuuminimiyoos)) maaha wadaad Laatiini (Talyaani) kii u keenay imminka ka hor ciidamadiisa, waxa kale oo aynu ognahay maamullada Siliibiyiinta ee Shaam inay iska leeyihiin Yurubta galbeed,oo dhamaantoodna ay wada haystaan Madhabka Kaatoliga ah (Catholic) halka wadaadkan cusub ee reer Giriigna uu haysto Madhabka (Orthodox) waana madhabka Yurubta bari, halkaas waxa ka muuqda faraq aad u wayni inuu u dhaxeeyo labada madhabood,xataa waxaa ka dhexeeya loollan ba'an labada madhabood, talaabadan uu qaaday Holaako waxay ka mid ahayd talaabooyinkiisi ugu qadhaadhaa khatarteeduna aad u badnayd..ma joogteynayso in ay labadooduba lasii lahaadaan xidhiidh wada shaqayneed iyo Iskaashi Holaako si isku mid ah marka labaad: isaguna ma aqbalayo boqor ama amiir samayn kara maamul balaadhsi oo ka gudba xadkii uu u xadeeyey iyadoon Holaako oggolaansho laga helin marka saddexaad: Holaako wuxuu doonayey in uu cilaaqaad cusub la sameeyey Imbiraadooriyaddii Giriigga,sidaa darteedna uu u damaanad qaado sugnaanshaha Imbiraadooriyadda Giriigga ee Shaam iyo Anaadool,waana dhul jaarwadaag la ah imbiraadooriyadda Giriigga, ka dib marka uu geba gebeeyo arrimaha ANAADOOL dhamaantood wuxuu u fekerayaa sidii uu waraaqihiisa mar labaad u tartiib san lahaa.

Tallaabadani waxay ahayd dulleysasho iyo bahdilaad, laakiin wuxuu ahaa wayd aan waxba ka odhan Karin xataa soo jeedin feker aan ku darsan Karin sidaa darteed wuxuu door biday in uu aqbalaadda badiyo waxbana aanu ka odhanin,waxaasi si adag uga soo horjeestay madaxdiisa dadkii ugu sar sareeyey ee ay ka midka ahaayeen wasiiradu, wuxuuse Bohmand ku adkaystay in uu u hoggaansanaado Holaako,iyagiina waxa uu u sheegay awoodooda dhabta ahi intay tahay,waxay maamulaan Imaarad yar oo aanad ku arkaynin khariiradda caalamka, halka Tataarna ay yihiin dawlad gaadhsiisan waqtigaas laga soo bilaabo bari

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

KUURIYA ilaa BOOLAND galbeed,gebi ahaanba intay dunidaas intaas le'eg soo jibaaxaysay waxay soo leqaysay boqoradii Muslimiinta, idinka oo og dagaalada dhexmaray Muslimiinta iyo Siliibiyiinta_ hadday tahay Duullaankii reer Yurub ee Muslimiinta ee soconayey tobanka sano haddana kuma guuleysan inay qabsadaan imaaradihii yar yaraa ee ku kala firidhsana Turkiga, Suuriya, Libnaan,Falastiin, imaarad kastina ma le'ekayn hal magaalo madax.

Sidaas ayuu isaga cago dhigtay Holaako waqooyiga Suuriya iyo koonfurta Turkiga,ka dib wuxuu ka fekeray in uu u jeesto Koonfur si uu u qabsado magaalada ((Xama))marka hore, ka dibna hore ugu sii socdo si uu ugu xejiyo magaalada ((Xims))waana magaaladii amiirkii khaayinka ahaa ee Ashraf Ayuubi una shaqeeya Holaako,ka dib si uu u gaadho ugu dambayn (mujaahid) Naasir Yuusuf Ayuubi iyo ciidankiisa ku darban waqooyiga Dimishiq!.

Is dhiibistii ((Xammat))!!

Iyada oo ciidanka Tataarku u diyaar garoobayaan inay u dhaqaaqaan dhinacaas iyo magaalada Xammat,waxaa Holaako u yimid wax garadkii iyo waayeelkii Xammat oo sida furayaashii magaalada Xamaat,isna dhiibeen iyada oo aan wax dagaal ahi dhicin.. arrintaasina waxay ku timid doonistooda iyo oggolaanshahooda,wax dalab ah oo Holaako dhinaciisa uga yimidna ma jirin..!! wuu ka aqbalay Holaako furayaashii magaalada ammaan buuxana waa uu siiyey,markanse waa ammaan xaqiiqi ah,waxay kale oo arrintani dhiiri gelin u tahay magaalooyinka kalena inay isa soo dhiibaan oo aanay is halaagin.

Holaako wuxuu ciidankiisi faraha badnaa ula dhaqaaqay koonfur,wuxuu soo maray Xammat iyaga oo aan gelin,sidoo kale wuxuu soo maray Ximsa(magaaladii saaxiibkiis) Ashraf Ayuubi,iyadana ma gelin,toos wuxuu u qaabilay Dimishiq oo Ximsa u jirta 120km keliya.

Naasir Yuusuf wuxuu ciidankiisi ku horjoogaa meel ka baxsan Dimishiq,warar xun xunina waa soo yeedhayaan oo ah riditaankii Miyaafarqiin iyo sida loo burburiyey dhufeysyadeedii,sidoo kale dilka Kaamil Maxamed ee loo dilay si taariikhda ku cusub oo aad u argagax badan,ka dib waxaa kasoo daba dhacaya dhicitaankii Xalab iyo sidii cagta loo mariyey, ka dib dumintii dhufeyskii Xaarim iyo sida loo gawracay dhamaan wixii ku jiray, ka dib is dhiibitaanka Xamaat iyo Ximsa iyaga oo aan dagaalamin.. talaabada ku xigta ee Tataarkuna waa_ shaki la'aan_ Dimishiq..!!

Tolow muxuu samaynayaa boqorkii fuleyga ahaa ee Naasir Yuusuf ee dagaalka aanu awooddiis lahayn iskaga dhawaaqay.. keliya maaha awoodda Tataar oo qudha ee asal ahaan daciifnimadiisa?

Wuxuu isugu yeeshay kulan wada tashi oo muhiim ah oo ay gadhwadeen ka yihiin hoggaamiyeyaashii ciidamadiisu.

Sidaynu yeelnaa?

Geesi ku qanacsan dhibaatada!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa ka mid ah dadkan shirka hoggaaminaya taliyeyaashii ciidamada,waxaana ka mid ah taliye Sayn Diin Alxaafidi, waxaa ka mida oo kale Ruknu Diin Baybaras Albunduqadaari,oo ka mid ahaa raggii ka cararay Masar xilligii ay fitnadu ka dhexdhacday Mammaaliikta,ka dibna Naasir Yuusuf ayaa qaabilay khibraddiisa dagaal iyo hoggaamintiisa ciidan oo aad u saraysay darteed.

Shirkii ayuu furay,isaga oo aan qarin karayn oo ay korkiisa ka muuqato cabsida iyo baalla daymoodku Naasir Yuusuf,taasoo markii dambena u gudubtay madaxdiisi ciidamada.

Haddana waxaa si cad u muuqatay in aanu ahayn Naasir Yuusuf mid dhinac dagaal u janjeedha,awood uu Tataar foodda isku daraana aan haysan,sidoo kale madaxdiisu,shirkii wuxuu bilaabay inay jabka isu soo jeediyaan oo iyagu is hoojiyaan,waayo mid waliba wuxuu kaga hadlay shirka faraqa aadka u wayn ee u dhaxaya iyaga iyo Tataarka,ka dib hadalkii wuxuu u gudbay taliyihii ciidamada taliye, Sayn Diin Alxaafidi,markaas ayuu bilaabay waynaynta Tataarka iyo daciifinta Muslimiinta,talo ahaanna wuxuu ugu soo geba gebeeyey Naasir Yuusuf in aanu dagaalamin.

Halkaas ayuu ka xanaaqay Ruknudiin Baybaras,oo xamaasad diinta u hayey,aadna u jeclaa inay Tataarka hawshiisa geba gebeeyaan,kuna riyaaqsanaa inay Tataar foodda is daraan..laakiin wuxuu ogaaday inuu ku dhex jiro rag ah col hortii jabayey iyo khaayimiin.

Wuu qayliyey Ruknudiin isaga oo la hadlaya Sayn Diin ka dibna waa uu caayey weliba si xun u caayey,weliba wuu is hayn kari waayey oo gacanta ula tegay oo ku dhuftay isagoo ku leh: adiga ayaa ka masuul ah inay halaagsaman Muslimiintu.

Dabcan hadalka (Baybaras) wuxuu ku wajahnaa Sayn Diin,laakiin waxa uu u duur xulayey wuu ahaa Naasir Yuusuf laakiin Sayn Diin wuu ku raad gadanayey.. waayo isaga ayaa ahaa sababihii ugu muhiimsanaa jabka Muslimiinta.. laakiin Baybaras wuxuu la hadlayaa koox beri hore wada dhintay oo reer aakhirood ah.. maydadkuna waxba ma maqlaan..! kelmedi kuma dhicin quluubtii dhegaysanaysay mid ka mida.

﴿إِنَّكَ لاَ تُسْمِعُ الْمَوْتَى وَلاَ تُسْمِعُ الصُّمَّ الدُّعَاءَ إِذَا وَلَّوْا مُدْبِرِينَ﴾ [النمل:٨٠].

Adigu ma maqashiinaysid maydadka iyo dhegoolayaasha yeedhmada haddey jeestaan oo oo kaasii socdaan.

Kuwanina way dhinteen..! waa dhegoolayaal..! dhabarkayna jeediyeen.. ka dib go'aankii ugu munaasibsanaa ra'yigooda ayey qaateen…….go'aankaasina……. cararid!!!..!!

Madaxwaynihii Naasir Yuusuf wuu carari doonaa, taliyeyaashuna way carari doonaan,ciidamaduna iska kala carareen,magaalada Dimishiq iyo shacabkeedii balaadhnaana waa laga cararayaa iyada oo aan haysan wax ilaaliya iyo wax difaaca midna.

وإنا لله وإنا إليه راجعون.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Wax xal ah uma helin kuwan Ruknudiin Baybaras,wuxuu iska aaday Qasa,Falastiin, wuxuu waraaq u dirtay Madaxweynihii Masar Quddus,ninkii madaxda Masar ka ahaana wuu aqbalay si fiicanna wuu u soo dhoweeyey dib ayaan ka sharrixi doonaa arrintan inshaa allaah.

Dimishiq madaxina ma joogto cid ilaalisana ma jirto,jihaadna way naadisay.

Magaalada Dimishiq waa magaalo wayn,oo dhufeysyo badan,waxaa la filayey inay muddo dheer is difaaci doonto oo aanay hore u jabi doonin,laakiin madaxda Naasir Yuusuf oo kale waxay dadka amraan inay wax iska caabiyaan iyaguna dhul fog ayey nafta kula eertaan,weliba waxay dadka u sheegaan inay wax iska celinaay marka laga fogyahay, kolka xaaladdu labada qar qar soo gaadhona daqiiqadda ugu dambaysa ayey go'aankooda ku beddelaan.. Carar iyo baxsad.

Sidaas ayaa ku dhacday Dimishiq, weligeedna way dhacdaa haddaynu eegno taariikhda madaxdu kan oo kale ah.

Is dhiibistii ((Dimishiq))!!

Waxay ku dhacday reer Dimishiq nasiib darro wayn..maxay sameeyaan?! Ciidamadii Tataar way soo gelayaan ayaamo aad u yar ka dib.. Tataarna cagaar iyo cawliin tooni kama nabad galo, shacabka Dimishiqna jihaad uma tababaran mar hore waayo waa shacab,mana laha xeelad dagaal, askartii loo carbiyey,taliyeyaashoodii iyo madaxdiina waxay kaga carareen xaaladda noocaas ah.

Waxaa isu yimid dadkii reer Dimishiq iyo waayeelkoodii,waxay isku afgarteen inay sameeyaan sida ay sameeyeen reer ((Xammat)) waxay qaadeen furayaashii magaalada,waxay gacanta u geliyeen Holaako,ka dibna waxay ka dalbadeen amaan inuu siiyo, arrintaasna iskumay khilaafin marka laga reebo waxyar oo Mujaahidiin ah maahee kuwaas oo galay dhufays ku yaallay qalcad magaalada Dimishiq ku dhextaallay go'aansadayna inay isdifaacaan ilaa gebagebada.

Waa u rumowday malihii Holaako markii uu reer Xammat siiyey amaan si ay magaalooyinka kalena ugu daydaan oo uu marba magaalo isaga galo iyadoon cidina kaga dhiman.

Wefdi balaadhan ayaa soo baxay,waxay sidaan waa furayaashii magaalada Dimishiq iyo in uu xukunkeeda la wareego.

Geeridii ((Monkokhaan))

Iyada oo arrimahaas lagu guda jiro,waxaa dhacay arrin aan xisaabta ugu jirin Holaako waqtiyadaas.. waxaa dhintay ((Monkokhaan)) madaxwaynihii ugu sareeyey dawladda Tataar,waxay soo gaadheen wararkaasi Holaako intaanu soo gaadhin Dimishiq,dabcan

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

arrintani waxay ahayd xasaasi khatarteeda ku lahayd Tataar,Monkokhaan waa madaxwayne xukuma dawladda is ballaadhisay waqti kooban oo qiyaasan, wax kasta oo kaga dhaca dhinaca xukunka wuxuu khal khal gelin karaa dawladda oo dhan iyo inay kala furfur u keento,waxaa shaki la'aan ah inuu ka mid yahay Musharixiinta u sharraxan xukunka dawladda Tataar,waa walaalka Monkokhaan,waana inankii uu Jingiskhaan awoowga yahay,guulo waaweyna oo badanna wuu soo hooyey,wuxuu furtay furasho dhif ku ah dunida.. faanna waxaa ugu filan waa kii ugu horeeyey ee riday khilaafo Islaami ah taariikhda Muslimiintu intii ay jirtay, arrimahaas oo laysu geeyey ayaa ka dhigaya Holaako kuwa ugu horeeya ee isu sharraxa madaxwaynaha dawladda Tataar gebi ahaanteedba,iyada oo keliya uun la beddelayo hoggaamiyaha xukumi doona bariga dhexe.

Sidaa darteed markii uu soo gaadhay warka sheegaya geerida Monkokhaan,kama war wareegin in ka tegitaanka ciidanka,deg degna wuxuu u go'aansaday in uu ku noqdo Qooraqooram caasimaddii dawladda Tataar si uu uga qayb galo doorashada dawladda cusub iyo madaxdaweynaha lagu beddelayo Monkokhaan,wuxuu ciidankiina hoggaamiye uga dhigay mid ka mida hogaamiyeyaashiisi ciidan kuwii ugu waaweynaa waa (Katbuqa Nuwiin) oo sidaan hore u sheegnay ka mid ah Tataarka Nasaarada ah.

Deg deg ayuu u baxay ilaa markii uu gaadhay gobolka Faaris, ay soo gaadheen rag laga soo diray Qoora qooram sidana warar sheegaya inay doorashadii dhacday madaxweynena loo doortay walalkiis ((Qubilaay)), arrintaasi dhabar jab ayey ku ahayd riyadii Holaako, waxayna ahayd arrin khilaafsan sidii uu filayey,xataa waxay khilaafsanayd qawaaniintii wax loo dooran lahaa ee uu sii dhigay Jingiskhaan, laakiin arrintii intuu si deggan u aqbalay, ayuu ku fekeray in uu iska dego bariga dhexe, haddana waxaa is tusay kala doorashooyin badan,laakiin wuxuu go'aansaday in aanu mar dambe ku noqon Shaam,wuxuu tegay Tabriis (Iiraan Imminka ah) wuxuuna ka dhigtay xarun uu arrimaha ka maamulo oo dhamaan looga tiriyo taliyeyaasha ciidamada iyo boqorada faraha badan,Tabriis waxa kale oo uu ku doortay dhulkeeda oo dhul wada dhufays ah iyo jawigeeda oo ah mid dhex dhexaad ah, waxay kale oo u dhaxaysa dhul aad u baladhan oo dawladda Tataar gacanta ku hayso, hadda waxaa gacantooda ku jirta marka laga soo bilaabo bilowgii xukuumadooda gobolladii Khawaarsim oo ay ka mid ahaayeen, Kasakhastaan,Turkuministaan,Osibakistan, Afgaanistaan,Bakistan, waxay ku fiday gobolada Faaris,iyo Adriibayjaan, waxa ay ku geba gebeeyeen wadamada Ciraaq,Turkiga iyo Shaam.. waxyaabaha ku dhiirigeliyey in aanu ku noqonin Shaam waxa uu ogaaday in ay gebi ahaanba gacanta ku dhigeen Shaam oo dhan marka laga reebo qaybo yar oo basiid ah isla markaana aan lahayn magaalooyin waaweyn, dabcan waxa uu ka warhelay inay carareen Naasir Yuusuf iyo ciidankiisi intii aanu soo noqon ka hor,una baxsadey koonfur iyo Falastiin isaga oo aan kaga tegin cid ilaalisa Dimishiq.. warqad ayuu u diray muhiim ah (Katbuqaa) uu ku amrayo in uu gacanta kusoo dhigo jir jiroolahaas (Naasir Yuusuf Ayuubi).

Dimishiq dhicitaankeedii ka dib..

Aan ku noqonno Dimishiq.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa yimid bulshada qaybeheedii kala duwaana ee magaalada Dimishiq ku noolaa oo furayaashii magaalada u sida Tataar,wuu soo dhoweeyey hoggaamiyihii cusbaa ee Katbuqaa, is dhiibistiina waa uu ka aqbalay,amaana waa uu siiyey, ciidamadiina waxay ku qamaameen magaaladii waynayd ee Dimishiq!.

Waa taas ((Dimishiq)) caasimaddii khilaafadii Umaawiyiinta u dhaqaysa sidii ay horteedba u dhacday ((Baqdaad)) caasimaddii khilaafadii Cabbaasiya..!!

Way dhacday Dimishiq..! mid ka mid ah magaalooyinka Muslimiinta kuwii ugu waweynaa uguna hor marsanayd.. ugu muhiimsanayd dhinaca duullaamada Jihaadka.. dhinaca cilmigana aad ugu tagtay.

Waa kuwaas ciidamadii Tataarku usoo gurguuranaya dhinaca magaalada Dimishiq,iyaduna ay albaabada ballaqatay ilaa guradeeda iyada oo aanay jirin waxyar oo isku day layskaga caabiyaana aanu jirin..!!

Allaah yaa Dimishiq..!!

Kuruskii Shaam iyo wadnihii caalamka Muslimiinta..!!

Meeyey Abuu Cubayda Bin Jaraax,Khaalid Bin Waliid, Sayid Bin Abu Sufyaan,Camru Bin Caas,iyo Sharxabiil Bin Xassanah dhamaantood ilaahay raalli haka ahaadee,waa kuwii furtay magaaladan muddo ka badan lix qarni ka hor?

Meeyey Mucaawiye Bin Sufyaan ﷺ ee adduunyada magaaladan lafteeda ka xukumay?

Meeyey Cumar Bin Cabdi Alcasiis_ رحمه الله ee dunidaba caddaaladda gaadhsiiyey magaaladana ka deganaa?

Maye khulafadii reer Banii Umaya ee furtay dhulkan balaadhan ee maanta ay duminayaa Tataar?

Maye Camaadu Diin Sinkiy iyo Nuuradiin Maxamed_ رحمهما الله kuwii ku qoray jahaadkooda Aayadaha sharafta, karaamada iyo weliba faanka ?

Meeyey Salaaxudiin Al Ayuubi رحمه الله ee maanta ku aasan magaalada Dimishiq?

Waataas Dimishiq oo ay ku socdaan wax aan marna ku soo dhicin maskaxda basharka Muslimiintuna ay daawanayaan.

Waxay arkaan Muslimiintu saddex hoggaamiye oo Kiristaan ah fardahoodiina saaran oo ciidanka ugu horeeya,kana soo gelaya albaabada Dimishiq,kana qaylinaya shaarica magaalada Muslimka ah ee wayn.. waxaa ugu horeeya ciidamada Katbuqaa Nuwiin,hoggaamiyaha ciidamada Tataarka,waxaa ku xiga boqorkii Armiiniya Haysuum oo Kiristaan ah iyo amiirkii Andaakiya Bohmaan oo Kiristaan isaguna ah.. dhamaantood waxay soo galeen magaaladii Muslimiinta ee sharafta lahayd..waa markii koowaad ee Kiristaan ay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

soo galaan magaalada ilaa iyo markii laga qabsaday madaxdii Roomaanka waqtigii Hiraqle iyo Qaysar ee Ruum,waana furashadii Muslimiinta 14H.

ولا حول ولا قوة إلا بالله!!

Tataarku waxay dabcan siiyeen reer Dimishiq amaan xaqiiqi ah ooh al qof lagama dilin,marka laga reebo kuwa dhufeyska ka dhigtay qalcaddii Dimishiq..qalcaddan go'doomin ayaa la saaray, dhawr toddobaad markii la garaacayeyna way jabsadeen dhamaan wixii ku jirayna way laayeen.

Dimishiq waxay dhacday maalmihii ugu dambeeyey bisha safar ee sannaddii 658H, Waa labo sano oo buuro ah dhicitaankii Baqdaad ka dib,waa waqti u qiyaasan Tataar oo ay guulo u calaamadsan gaadheen,waayo waxay gacanta ku dhigeen dhulal aad u waaweyn,magaalooyin badan ayey ka rideen Ciraaq,Turkiga iyo Suuriya (eeg khariiradda 15).. haa magaalooyin waaweyn saddex waa Baqdaad,Xalab Dimishiq.. laakiin magaalooyinka kalena may ahayn magaalooyin yar yar oo aan macno lahayn.. degaanka wadamadanina aad ayuu fara dhaaf u ahaa,dalsankeeda awgeed dhinac, qaddiimigeeda iyo taariikhdeeda dhinac kale, nolosheeda,ganacsigeeda iyo xadaaradeeda oo aad u sarraysay dhinaca saddexaad.

Waxaa dhulka galay mooraalkii umadda Muslimka dhamaantiis ilaa halka ugu hooseysa.. waxa ay dadka intii ugu badnayd ee Muslimiintu yaqiinsadeen in Tataarka loo soo diray inay dunida ka tirtiraan diinta Islaamka iyo dadkeeda,halka kuwa kalena is tuseen in cimriga u hadhay ummadda Muslimiinta uu aad u yar yahay.

Waxay bilaabeen Tataar inay la wareegaan maamulkii Dimishiq iyaga oo Kiristaan ah..ka dib markii ay dhulka la simeen dayrarkii iyo dhufeysyadii magaalada.. waxay u dhiibeen maamulkii magaalada nin Tatari ah oo magaciisa la odhan jiray ((Ibil Sayaan)), isagu_ inkastaanu ahayn Kiristaan, haddana wuxuu si xad dhaaf ah u waynayn jiray diinta Kiristaanka,aad wuxuu u jeclaa dadka Kiristaanka ah,waxa u bilaabay Dimishiq inay noolaato taariikhdeeda kuwii ugu cajabta badnaa ee soo maray.!

Waxay soo guurinay qayb ka mid ah hadalkii Ibn Kasiir oo ka waramaya.

Wuxuu leeyahay Ibnu Kasiir " ***wuxuu isugu yeedhay Ibil Sayaan_ llaahay haka dheereeyee naxariistiisa_ koox Kiristaankiisi ka mid ah markaasuu waynayey,wuxuu soo booqday Kiniisadahoodii,iyaguna way soo dhoweeyeen iyaga sheeganaya inay dawladi kusoo gaadhay sababtiisa,koox waxay aadayba Holaako (Tabriis)iyaga oo u sida hadiyado iyo abaal maarino,wuxuu iska soo horeysiiyey isaga iyo wixii la socdayba qolo amaankiisa sugta,waxay kasoo galeen magaalada albaabka la yidhaahdo Tooma,iyaga oo sita calaamaddii Kiristaanka (isku tallaabtii)..kor ayey u taagayeen meel ka sarraysa madaxyada dadka iyaga oo ku dhawaaqaya halku dhegyo (waxaa timid Diintii saxda ahayd diintii Nebi ciise) Diinta Islaamka iyo dadkeeda caayaya,waxay siteen weel uu khamri ku jiro,may soo marayn masaajid albaabkiis illaa waxay ku rusheynayeen Khamri,meelaha dadka***

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Muslimiinta ahi joogaan intay soo maraan ayey khamri wejiga kaga saydhayeen iyo maryahaba si loo wasakheeyo,waxay amar ku siinayeen xaafadda iyo suuqa ay soomaraanba inay dadku isu taagaan Saliibkooda,mid ayaa isku taagay kaabad dukaan uu lahaa nin Muslim ahi,markaasuu amaanay diinta Kiristaanka, oo caayey diinta Islaamka iyo dadka haystaba فإنا لله وإنا إليه راجعون. ***.***

Ka dib waxay la galeen khamri masaajidkii jaamica, halkaas markuu arrin marayo ayey cadhoodeen wadaadadii masaajidada,markhaatiyaashii arkayey iyo dadkii cilmiga lahaa,waxay galeen qalcaddii uu deganaa Ibil Sayaan iyaga oo uga ashkatoonaya xaaladdan taagan, si liidata inta uu u eegay ayuu soo eryay, waxaa saxan waxa ay samaynayaan Kiristaankuna ugu jawaabay فإنا لله وإنا إليه راجعون. ***“.***

Sidaas ayey arrintani u xambaarsanayd masiibo xaqiiqo ah.. Muslimiintii Dimishiqna waxaa ku dhacday kud ka guur oo qanjo u guur, waa Tataar iyo Kiristaan.. waxaana dhamaantood u caddaatay is kaalmaysigoodu in uu xambaarsan yahay arrimo waaweyn oo badan, marka hore abbaan duulaha ciidamada ee Shaam oo dhami waa Tatari Kiristaan ah,kuwa deggan Dimishiq ee Kiristaanka ahina waxay garanayaan meelaha Muslimiinta wax ugu qarsoon yihiin oo dhan wayna sheegayaan.. shakina kuma jiro kaalmaysigooda Tataarku in uu nabar culus ku noqonayo Muslimiinta.

Qabsashadii Falastiin

Ka dib wuxuu go’aansaday Katbuqa inuu qabsado Falastiin,wuxuu u diray koox ciidamadiisi ka mid ah waxay qabsatay Naabulis,ka dibna Qasa, uma ay soo dhowaan ciidamadii Tataarku imaaraddii Kiristaanka reer Yurub ee ku taalay Falastiin,sidii aanay ugu soo dhowaan imaaraddii Kiristaanka ee Suuriya iyo Lubnaan oo kale..

Sidaa darteed Falastiin waxay u kala qaybsantay Tataar iyo Kiristaan.

Inay is kaashanayaan Kiristaan iyo Tataarna waxay ahayd wax iska cad oo Katbuqaa wuxuu ku soconayey manhajikii Holaako weliba isagu_ waa Kiristaan_ sidaa darteed uma oggolaanaynin in wax xumaato ah la gaadhsiiyo Kiristaankii Shaam iyo Yurub midna, haddii ay dhacdona uu ka baxayo xukunkiisa iyo dawladdiisa iyo qorsheyaashiisaba ayey hore u kala qaateen.

Arrintaas tusaale ahaan,wixii ku dhacay ((Juuliyaan)) amiirkii Siidaa, taas oo ay haysteen Kiristaanka reer Yurub, markii uu arkay loollanka dhex maraya Tataar iyo Muslimiinta,wuxuu is yidhi inay tahay fursad uu ku balaadhsan karo maamulkiisa,wuxuu ku duulay Biqaac Alkhasab markaasuu u qabsaday si fudud, cid uga digeysa arrintaas ayuu u diray Katbuqaa, laakiin dheg uma dhigin digniintii, arrintaas Katbuqaa wuxuu kaga jawaabay ciidan aad u badan ayuu u diray si ay u garaacaan una dumiyaan Siidaa gebi ahaanteedba,waana la burburiyey Siidaa sida runta ah,laakiin Juuliyaan wuu baxsaday

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

isaga oo badda ka tallaabay, ka dib amarkaas oo kale ayuu siiyey ((Yuuxanaa)) amiirkii Bayruud,ka dib markii uu ku duulay Jaliil.

Arrintaasi waxay caddeynaysaa inay Tataarku doonayeen in mar walba gacantooda ku jirto mindida daabkeedu,ciddii doonaysa iskaashina ay tahay uun duul iyaga iska daba socda,saaxiibna ma jiro heshiis ay wax ka wada dhaxeeyaanna ma jiro..waana nidaam ku salaysan inay ahaadaan kan koowaad ee caalamka wax laga waydiiyo,kaasoo aan aqbali doonin wax awood sheegta oo soo biqlaysa.

Shaki kuma jiro markaa arrimahan uu kala debberayo Katbuqa ama kan uu manhajkiisi raacayo ee Holaako ay gacanta midig ku haysteen Kiristaanka xataa magcaabistii wadaadkii Kiniisadda.. shaki kuma jiro inay arrimahaasi saamayn ku yeelanayaan qalbiga boqoradii Kiristaanka ee Shaam ku noolaa, waxay kale oo istusayaan inay iska xassiloonaayeen ka intaanay soo bixin Tataar,waayo waxay iskaga xassiloonaayeen Muslimiinta taag darridooda,iyo in aanay u labadooda midna iska celin Karin Tataar,laakiin waxaa kasoo baxay Tataar ee uu ka midka yahay dulleysigii amiirkii Andaakiya, ka dibna amiirkii Siidaa,ka dibna amiirkii Bayruut ayaa ka dhigay madaxdii Kiristaanku inay diidaan Tataarka si qarsoodi ah, sidoo kale waxaa ay is tuseen in Tataarku ay degayaan gobolka, marka ay ku xidideystaanna ay ku samayn doonaan madaxda Kiristaanka ee Shaam sidii ay ku sameeyeen Kiristaankii Yurubta bari markii ay duullaanka ku kala bixiyeen casrigii Okitay ina Jingiskhaan.

Si kastaba aha ahaatee_ iyada oo was waaskaas daran iyo walaacaas qotada dheeri jiro_ waxba iyaga oo aan caddeysan madaxdii Kiristaanku waxay dooneen inay xaaladda debedda ka daawadaan iyaga oo aan soo dhex galaynin.. ma jirin mid ka mid ah oo garanaya waxa dhici doona ayaamaha soo socda.

Qabsashadan ugu dambaysa Tataar ee ay qabsadeen Falastiin,riditaankoodii Ciraaq intii ugu badnaydama dhamaanteedba, ka dibna Turkiga dhamaantiis, ka dibna Suuriya dhamaanteed,sidoo kale waxay rideen Lubnaan.. ka dib Falastiin..!! waxaas oo dhamina ay dhaceen labo sano keliya gudahood..!!

Sidaan soo sheegnay waxay Tataarku qabsadeen Falastiin ilaa Qaza, waxay u soo jirsadeen masaafo ka yar shan iyo soddon kiilomitir Siinaa, waxaa noqotay wax layska wada garanayo in talaabada labaad ee Tataar si toosa ugu socoto.. qabsashada Masar..!!

Arrintaasina uma baahna in caqli badan lagu lumiyo.. qof kasta oo la socda taariikhda Tataar wuu garanayaa inay Masar u tahay hadaf aad u muhiim ah, sababo badan darteed,waxaana ka mid ah:

Kow : siyaasadda Tataarku waa dhul balaadhsi,ma dhamaanayso,markay waddan geba gebeeyaanba waxay u dhaqaaqayaan waddanka ku xiga,Masarna waa tan sida tooska ah ugu xigta Falastiin.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Labo: kuma hadhin caalamkii Islaamka awood lays odhan karo way gilgili karaysaa awoodda Tataar Masar maahaane,dhamaan Muslimiini waxay boqor lahayd,qalcad lahayd ,dhufeys lahayd waa lasoo dhameeyey waxaa hadhay kobtii ugu dambaysay.

Saddex: Masar waxay ku taallaa meel istiraatiji ah juquraafi ahaan oo aad muhiim u ah,waxay kala badhaa caalamkii qaddiimka ahaa, socdaalka ganacsiga eek a gudba Masar cidna kama qarsoomayo.

Afar : Masar waxay ku taallaa albaabka laga galo Afrika,Masar haddii la rido Tataar waxay wada furanayaan waqooyiga Afrika siduu u dhan yahayba,waqooyiga Afrikana waqtigaas kama jirin awood keliya oo wax iska caabin kartaa,waayo soo gelitaanka Tataar ee Shaam waxaa dhinac socday dawladdii la odhan jiray ((Dawlatu_Almuwaxidiin))ee jirtay Maqrib dhicitaankeedii ay gebi ahaanba dhacday si buuxda,ka dibna waqooyiga Afrika u kala furfurmay boqortooyooyin yar yar,haddii Masar dhacdo shaki kuma jiro inay boqortooyooyinkaasina sida ugu dhibta yar u dhacayaan.

Shan: badnaansha degaankeeda, waxa uu ahaa dhulka caadiga loo dego ee Masar mid ka badan laban laab dhulalka kale ee Muslimiinta.

Lix: xamaasadda iyo taageerista diinta ee reer Masar oo aad u sarraysay.. weliba si ba'an u sarraysay .. markaa waxay ka cabsanayeen Tataar haddii uu hoggaanka u qabto nin wanaagsan oo saalix ah isla markaana ka Mujaahid ahi in waddan wayn , xamaasad diineed leh, Islaamnimada jecel, aadna uga dambeeya arrimaha diintu in uu xaaladda bogga kale u rogi karo,beddelina karo xaaladda lagu sugan yahay,sidoo kale ka gilgili karo Tataar mandaqadda oo dhan.

Sababahan dartood_ waxay u diyaar garoobayeen Tataar inay Falastiin usii dhaafi doonaan Masar,si deg deg ahna isu raacin doonaan sidii lagu yaqaanay,markaad u fiirsato dhacdooyinkana ay kuu muuqanayso in duullaanka Tataar ee ku wajahan Masar uu noqon doono dhowaan.

Si ay isaga ilaaliyaan Tataarku inay Fursad siiyaan Masar ay dagaal ugu diyaar garoowdo.

Laakiin siday ahayd Xaaladda Masar marka ay Tataar qabsanayaan Shaam iyo Falastiin?

Waxaa ka jiray waqtigaas Masar dhibaatooyin badan oo isku wada xidh xidhan,siyaasad xumo dhinac ah,ciidan xumo dhinac ah, dhaqaale xumo dhinac kale ah, arrimo aad u badan oo aan dib kaga warami doono haddii ilaahay oggolaado.

Laakiin waxaa muhiim ah in aan xusno inay Mamaaliiktu xukunoooda la bilaabeen Masar,Suldaankooduna uu ahaa Quddus رحمه الله- waa ninka ku fadhiya kursiga madaxtooyada ee Masar waqtigan.

Intaynaan ka waramin qorshaha weerarka Tataar ee ku wajahan Masar, siday uga jawaabtay dawladdii Masaaridu,sidoo kale intaynaan ka waramin xaaladda siyaasadeed,ciidan iyo dhaqaale ee Masar,waxaan jeclaystay in aan sharrax ka bixiyo hor dhac ah_ haba yaraadee_

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

koritaankii Mamaaliikta,iyo siday ku gaadheen xukunka dawladda Masar oo dhan,iyo sida Quddus u hantiyey,hoggaaminta waddankan, iyo dhamaan waxa ku xeeran ee haddana looga soo saari doono ciidan u babac dhiga dawladdii Tataar.

Dhamaan dhacdooyinkani waxay inoo tilmaami doonaan si qoto dheer in aan u xallin karno Mushaakilkeena haddeynu nahay ummadda Muslimiinta ah,kalana baxna casharo iyo cibro qaadasho,iyo sidoo kale asbaabaha keenay midhaha aynu arki doono.

Aan si wada jir ah ugu gudubno Mamaaliik.!!

*****

barbaaristii Mamaaliikta

Waxaa dhacday inay noqoto xiligii xukunka Mamaaliiktu soo baxay mid ku jira taariikhaha aanay garanayn wax badan oo Muslimiinta ka mid ahi, xataa dadka aqoonta Islaamka leh ayaan inta badani aqoonin,arrintaasi waxay keenaysaa in dib loogu noqdo waqti badan taariikhda, waxaana la odhan karaa xilliyadaas aynu ka sheekaynayno inay ugu muhiimsan tahay dhinaca ummadda Muslimiinta ah, xilligaas waxaa haystay dunida Islaamka kala tafaraaruqsanaan badan, ilaa ay bateen

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

imaarado iyo dawlado yar yar oo aad xukunkooda iyo awoodooduba u yar tahay oo meelaha qaarkood aanay xukumeynin wax ka baxsan hal magaalo oo qudha..!!

Marka labaad in aan daraasayno waqtigaasi waxay inooga baahan tahay dedaal badan iyo in aan la socono xaaladihii kala duwanaa ee haystay ummadda Islaamka ah.

Waxyaabaha ka qayb qaatay in la garan waayo waqtigii Mamaaliikta waxa ka mid ahaa : xukunka iyo boqorada soo maray oo ku badnaa dawladda Mamaaliikta lafteeda, waxaana kaaga filan in aan tilmaano dawladdii Mamaaliikta ee u horreysay lana odhan jiray ((Mamaaliik_Albaxriya)) waan u imaan doonaa qeexitaanka magacan haddii ilaahay raalli ka noqdo insha Allaah, waxay talinaysay ilaa 144 sano,waqtigaas waxaa xukumay 29 Suldaan ama boqor..!! macneheedu waxaa weeye mid ka mid ahi ma haysan xukunka haddii waqtiga loo qaybiyo wax gaadha shan sano oo dhamaystiran.. haddiiba ay qaarkood muddo badan xukunka haysteen,intooda badani waxay xukumeen hal sano ama labo sano qudha..! waxaa dheer intaas waxaa ku badnaa inqilaabka iyo afgembi Mulateri xiligii ay xukunka haysteen,waxaa la dilay toban sano gudohood 29 Suldaan,waxaana xilka laga xayuubiyey laba iyo toban sidaas ayey awoodda iyo hubku u ahaayeen wadada keliya ee lagu beddelo madaxweyne ama Suldaan,waddankiina wuxuu noqday mid ay si fiican uga hirgashay qaaciidadii uu dhigay mid ka mid ah Suldaanadii Ayuubiyiinta (Mamaaliikta hortood) waana ((Suldaan Al Caadil Ayuubi)) qaaciidadaas oo odhanaysay ((xukunka waxa iska leh ciddii guuleysata))..!!

Waxaa laga yaabaa garasho la'aanta dad badan dawladdii Mamaaliikta waxa ugu muhiimsan, taariikhda Muslimiinta ee laga haajiray barashadeeda, ama lagaga mashquulay taariikhdahan reer galbeedka iyo kuwa Muslimiinta sheegta ee fitnoobay inagu dawikhiyeen,taariikhda Mamaaliikta waa cad ceed soo baxday calaacali ma qariso waxyaabaha ay qabteenna waxaa ka mid ah: inay istaageen Dayr adag,si ay isu hortaagaan labadii dawladood ee ugu sharka badnaa dunida,kuwaas oo isu soo raacay inay taariikhda ka saaraan wax sheegta ISLAAM iyo MUSLIM_ ba, waa Tataar iyo Kiristaan, waxay u ahayd Mamaaliikta Jihaad joogto ah oo ay kaga soo horjeedeen labadaas awoodood ee waaweyn, iyada oo lagu jiro marxado kala duwan,waxay noqotay inay xambaarsanaato dawladdii Mamaaliiktu calanka umadda Muslimiinta in ka badan saddex qarni,ilaa ay kala wareegtay khilaafadii Cusmaaniyiinta ee awoodda badnayd.

Aniguna umaan soo tafaxaydan in aan qaadaa dhigo oo sharxo dawladdii Mamaaliikta,waayo taasi waxay inala gelaysaa sharrx dheer iyo baadhis badan,laakiin halkan waxaan inaga oo aad usoo koobayna yare milicsan doonaa, soo bixitaankii dawladdii Mamaaliikta iyo waayaheedii, waa tii xukumaysay Masar xilligii ay Tataarna qabsanayeen Shaam,waqtigaasina wuxuu ahaa waqtigii ay qabsadeen caalamka Muslimiinta oo dhan Masar maahee.

Dawladdii Ayuubiyiinta

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Si aynu waqtigan si cad ugu fahamno waxay innagu khasbaysaa in aan wax yar dib u laabano oo ay dhacdooyinku isugu keen xidhmaan ilaa bilowgoodii.

Wuxuu aas aasay geesigii Muslimiinta Salaaxudiin Al Ayuubi dawlad sannadkii 569H,Wuxuu dawladdan xukumayey labaatan sano ilaa 589H, waqtigaas waxa uu mideeyey Masar iyo Shaam, jihaad ba'an ayuuna la galay boqoradii Kiristaanka,guulo aad u taariikhi ahna waa uu kasoo hooyey,kuwaas oo ay ugu caansan tahay goobtii Xadiin oo weligeed la xasuusan doono bishii Rabiicu saani sannaddii 583H, Wuxuu kale oo furtay Bay Al Maqdis furashadii Xaddiin saddex bilood ka dib,bishii rajab ee isla sannadkaas,ilaahay haw naxariisto Salaaxudiin wuxuu ka tegay dawlad awood badan oo maamusha Shaam,Masar,Xijaas, Yemen, sarena Ciraaq,qaybo ka mida Turkiga, qaybo ka mida laga bilaabo Liibiya ilaa Nuuba.. wuxuu ku canqabay Kiristaankii xeebta cidhiidhiga ah ee badda cad (eeg khariiradda 16).

Laakiin geeridii Salaaxudiin ka dib waxaa meesha ka baxay Jihaadkii lagaga soo horjeeday Kiristaanka,Muslimiintiina waxaa lagu fitneeyey dawlad balaadhan oo wayn, maalkii iyo xoolihii ayaa batay,adduunyo ayaa kusoo faruurantay,waddankii ayaa u balaadhay,waxyaabahaasi waxay keeneen inay dhacaan kala qaybsiyo ku yimaadda dawladdii Ayuubiya,waanay kala furfurantay dawladdii ayuubiyiintu geeridii Salaaxudiin رحمه الله. ka dib.

U geli mayno imminka khilaafaadkii, loolankii iyo mashaqooyinkii dhacay geeridii Salaaxudiin Ayuubi ka dib,waxaynu kaga warami doonaa inshaa allaahu buugaagta dambe ka sheekaynaya duullaamadii Kiristaanka reer Yurub ay kusoo qaadeen dunida Islaamka,buuggaas oo la yidhaahdo (dagaaladii Kiristaanka),laakiin halkan waa in aynu ku xusnaa in loolankii dhexmaray Ayuubiyiinta in uu socday ilaa lixdan sano oo xidhiidh ah geeridiisi oo ahayd 589H,Ilaa dumitaankii dawladdii Ayuubiya 648H,ma uu ahayn loollankaasi loollan hadal,cay iyo shaqaaqo oo keliya.. laakiin wuxuu gaadhay heer seefo lagu dagaallamay,loo daadiyey dhiigag Muslimiin ah,wuxuu keensaday kala degid daran.. wuxuu gaadhay inay markii dambe isu adeegsadeen Kiristaankii si ay ula galaan dagaalo ka dhan ah Muslimiinta!! Ama isu adeegsadaan Tataar!! Dhamaan waxaas oo dhamina waa inay Muslimiintu ku dhaceen fitnadii uu inooga digay Rasuulku ﷺ :

روى ابن ماجة والطبراني وابن حبان بإسناد صحيح عن زيد بن ثابت رضي الله عنه قال: قال رسول الله ﷺ: «من كانت الدنيا همه فرق الله عليه أمره، وجعل فقره بين عينيه، ولم يأته من الدنيا إلا ما كتب له، ومن كانت الآخرة نيته جمع الله له أمره، وجعل غناه في قلبه، وأتته الدنيا وهي راغمة». صدقت ـ والله ـ يا رسول الله.

waxaay kasoo weriyeen Ibn Maajah,Dabaraani, iyo Ibn Xabbaan,si saxeex ah in Sayid Bin Saabit (IRH) uu yidhi: Rasuulka ilaahay (NNKHA) wuxuu yidhi: "qofka ay adduunyadu noqoto hammigiisa ilaahay arrimihiisa ayuu ka kala firdhiyaa,faqrigana waxaa loo soo saaraa labada

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

indhood dhexdooda,adduunyadana kama helo intii loo qoray waxaan ahayn,qofkase aakhiro niyaddiisa ku jirto ilaahay ayaa arrimihiisa isugu soo ururiya,qalbigana waxaa loo dhex dhigaa qaninimo,adduunyaduna iyada oo sandulleysan ayey u timaaddaa" walaahi run ayaad sheegtay rasuulkii ilaahayoow.

Salaaxudiin (IHN) wuxuu saaray jihaadka labadiisa indhood dhexdooda,hadafkiisa koowaadna wuxuu ka dhigtay la dagaalanka Kiristaanka,iyo siday u sarrayn lahayd kelmedda ilaahay,markaas ayaa ilaahay u soo ururiyey arrimihiisi,qalbigana qino ayaa loo geliyey,adduunyadiina waa ay u timid dhab iyada oo u sandulleysan.

Laakiin badanka Suldaanadii ka dambeeyey isaga,waxay wayneeyeen adduunyadii oo hammigooda koowaad siiyeen, markaas ayey arrini ka baahday si cad,ilaa ay saxdii iyo khaladkii kala garan waayeen,xaqii iyo baadilkii kala saari garan waayeen,mar Muslimiinta ayuu raacsan yahay,mar Kiristaankuu dhinac la yahay,mar Tataar ayuu xigteysanayaa, faqrigiina ilaahay SW wuxuu u saaray laba indhood dhexdooda,waxaa ka mid ah mid ku dhintay dulli,waxaa ka mid ah mid ku dhintay faqiirnimo,waxaa ka mid ah mid ku dhintay isaga oo la eryanayo carar,waxaa ka mid ah mid ku dhintay xabsi.

Waa xaaladdii dhabta ahayd ee ku xigtay markii uu dhintay geesigii halyeyga ahaa Salaaxudiin Al Ayuubi رحمه الله.

Malik Saalix ((Najmudiin Ayuub)):

Halkaas markaynu joogno aan idinsoo boodsiiyo konton sano,isla markaana aan idin keeno tobankii sano ee u dambeeyey dawladdii Ayuubiya,oo noqonaysa ilaa 637H,waa waqtigii uu kursiga xukunka ee Masar la wareegay ((Saalix Najmudiin Ayuub)) ama ((Malik Saalix)) kaas oo lagu tiriyo ninkii ugu wanaagsanaa madaxdii Ayuubiyiinta Salaaxudiin ka dib,waxaase nasiib darro ah in badan oo Muslimiinta ka mid ah garan maayaan suldaankan wayn,xataa Masar oo xarun u ahayd xukunkiisa.

Wuxuu la wareegay xukunka Masar Najmudiin sannadkii 637H,waxaa sidii caadada ahayd waqtigaas isaga jirtay inay amiiradii kale ee Ayuubiyiinta Shaam dagaal la galeen khilaafadiisa Masar..dagaalo ayaa dhex maray soconayey 641H,markaas oo ay midowday awooddii Ayuubiyiintu ee Shaam iyaga oo kaashanaya Kiristaan la dagaalanka Malik Saalix Ayuubi..!!waxayna kula galeen heshiis Kiristaanka hadaad dagaalkaas nala gashaan waxaan idin siin doonaa Baytal Maqdis..!!

Dhab ahaan ma fahmi karo sida uu nin Muslimiin madax u ahi u aqbali karo in uu Baytal Madis ku wareejiyo Nasaaro, waxaanse si cad u fahmi karaa in qof Muslimadu dhab ka tahay aanay ka suurtoobin in uu dhul Muslim ku wareejiyo gaalo si kasta oo ay u yar tahay,bal ka waran Baytal Maqdis iyo cidda ku noolba_ sida aan la wada socono waxaa xoreeyey awoowgood Salaaxudiin,kana xoreeyey Kiristaankan ay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

leeyihiin waan idin siinaynaa_ xoreyntiisa waxaa u daatay dhiig Muslimiin oo badan,waxaa Muslimiintu u mareen dhib badan iyo dagaalo aan kala go' lahayn,laakiin sidan ayaa dhacday!.

Way isu tageen madaxdii Shaam,ciidan xoogleh ayey isu keeneen,wuxuu ciidankaasi usoo dhaqaaqay Masar..Malik Saalixna wuu diyaarsadey ciidamadiisi,wuxuu u dhiibay nin uu ku tebayey Hogaamin buuxda,waa Ruknu Diin Baybaras,wuxuuna u diyaar garoobay wax iska celin,waxa uu ahaa ciidanka Masaaridu mid yar oo taag daran marka loo eego quruumaha ka socda ciidanka Shaam iyo Siliibiyiinta(Kiristaanka) ee faraha badan,sidaa darteed wuxuu kaalmaystay Malik Saalix ciidamo reer Khawaarsim ah, oo kasoo cararay Khawaarsim markii ay qabsadeen ciidamadii Tataarku,ee aynu kaga soo warannay bogagii hore ee buugga.

Waxay ahaayeen ciidamadaasi kuwa awr kiraale-yaal ah..macnaha waxay raacayeen hadba cidda wax badan bixisa, awoodooda ciidanna waxay kusoo bandhigayeen maal iyo lacag,waa uu kaalmaystay Malik Saalix isaga oo soo kiraystay,waxaa dhex maray dagaal qadhaadh ciidamadii Malik Saalix iyo isbahaysigii Shaam iyo Kiristaanka,goobtaasina waxay ku caan baxday goobtii Qasa, waxayna dhacday sannadkii 642H, goobta laysku haleeleyna waxay u dhowayd Qasa_ Falastiin_ ilaahay ayeynu waydiisanaynaa in uu Xoreeyo Qasa iyo Falastiin gebi ahaanteedba_ waxaa ku guuleystay Saalix Najmudiin Ayuubi guul aad u qaali ahna kasoo hooyey dagaalkaas,waxaa lagaga laayey Kiristaanka tiro aad u badan oo gaadhays ilaa soddon kun oo dagaal yahan, waxaana laga qafaashay koox u badan madaxdii iyo boqoradoodii,sidoo kale waxaa laga qab qabtay koox madaxdii Ayuubiyiinta ah,fursaddan waa uu ka faa'iideystay Malik Saalax oo wuxuu u dhaqaaqay Baytal Maqdiskii ay Ayuubiyiintu siin lahaayeen Kiristaanka,wuxuu go'doomin saaray qalcaddii Kiristaanka ka dibna waa xoreeyey magaaladii barakeysnayd isaga oo kaashanaya ciidamadii Khawaarsimiya sannadkii 643H,sidaas ayaa lagu xoreeyey markii dambe Baytal Maqdis,ma ay awoodin inay galaan ciidamadii Nasaaradu muddo toddoba qarni oo buuro ah,ilaa ay soo galeen ciidamadii Ingiriisku dagaalkii koowaad ee dunida 16 November 1917m,taasina waxaa hubaal inay ahayd khiyaamadii Mustafe Kamaal Ataturki,ilaahay ayeynu waydiisanaynaa in uu gacanta Muslimiinta dib ugu soo celiyo AQSA.

Ka dib Malik Saalix waqooyi ayuu usii dhaafay,wuxuu gaadhay Dimishiq markaas ayuu mideeyey Masar iyo Shaam mar labaad,xataa wuxuu xoreeyey magaalooyin Muslimiin ah oo ay gacanta ku hayeen Kiristaanku,waxaana ka mid ahaa Dabriya,Casqalaan iyo kuwo la mida.

Waxaa dhacday arrin aad khatar ugu ahayd ciidamada Malik Saalix Ayuubi, arrintaasina waxay ahayd markii ay ka dhambalmeen ciidamada kooxdii Khawaarsimiya ee lasoo kiraystay..! waxaana sababay ka dib markii uu mid ka mida madaxdii Ayuubiyiinta ee Shaam u sheegay lacag ka badan tan ay imminka ku shaqaynayaan,kuma ay joogin kooxdani inay ka baxaan ciidamadiisa oo keliya,

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

waxayba la dagaalantay Malik Saalix laftiisa,kuma wehelin dagaalkan ciidamadiisi uu Masar kala yimid ee uu madaxda u ahaa Ruknu-diin Baybaras maahee cid kale.

Wuu iskaga baxay Malik Saalix dagaalkan foosha xun,wuxuuna gartay inay tahay lagama maarmaan in uu ku tiirsado ama kaashado ciidan u dagaalamaya qof ahaantiisa laakiin aan ku dagaalamaynin maalkiisa.. wuxuu keensaday ciidamo cusub oo uu soo geliyey booskii ay ka baxeen Khawaarsimiyiintu.. kooxdan cusubina waxay ahayd: ((AL MAMAALIIK)).

Wa'ayo Mamaaliiktu?

Al Mamaaliik luuqadda carabiga waa addoomo, gaar ahaan waxay sii noqonayaan kuwa la soo addoonsaday ee aan lasoo addoonsan aabbayaashood iyo hooyooyinkood.. markaa Mamaaliik waa koox marka aad mid sheegayso waa Mamluuk waana addoon lasoo iibsan karo,lana iibin karo, sidaa darteed kelmedda Mamaaliik guud ahaan waxay tilmaamaysaa waa dad la leeyahay oo aan xor ahayn.

Waqtigii uu khilaafadii Cabbaasiyiinta haystay khaliifkii caanka ahaa ee ((Al Ma'muun)) ee xukumayey sannadkii 198H ilaa 218hijriya, iyo walaalkiis ((Muctasim)) kaas oo xukumayey 218h ilaa 227h.. labadaas waqti ee ay xukunka u kala dambeeyeen labadaas khaliif ee walaalaha ahi,waxaa jiray dad aad u badan oo lasoo qabsaday, si ay ugu gataan Naxaasta, sidoo kale waxaa kale oo laga dhigi jiray koox ciidan oo kale,iyada oo hadafka laga leeyahayna ahaa inay wax iska celin karaan oo naftooda bad baadin karaan.

Wax waqtigu iska socdoba waxay noqdeen Mamaaliiktii mid ka mida laf dhabarta ciidamada Muslimiinta,mararka qaarkoodna ciidanka koowaad ee Muslimiinta_ meelo badan oo ka mida dhulalka Muslimiinta.. waxayba ahaayeen madaxdii dawladdii Ayuubiyiintu ciidamada khaaska u ah ee ay ku ledaan,awoodooda iyo xirfadooda darteed,waxay u adeegsan jireen dagaaladooda,laakiin tiradoodu may badnaynin ilaa xad,ilaa uu yimid Malik Saalix ka dibna ay ku dhacday fitnadii Khawaarsimiya, waxa uu badiyey Mamaaliiktii,ciidankiisi ayuu ku xoojiyey,sidaas aawadeed way badatay tiradii Mamaaliiktii, gaar ahaan Masar.

Xaggee ayey kasoo jeedaan Mamaaliiktu?

Waxay ahayd meesha ugu wayn ee ay kasoo jeedeen Mamaaliiktu ama qaar dagaal lagu soo qafaashay ama laga soo iibsaday suuqa addoomaha.. gobolada ugu badan ee laga keeni jirayna waxay ahaayeen dalalka ka dambeeya webiga (webiga loo jeedaa waa webiga Jayxoon,waana kan mara waqooyiga Turkuministaan iyo Afganistaan,isagaana kala qaybiya laba aan soo sheegnay iyo Osbakistaan iyo Djakistaan) qolyaha ku noolaana waxay ahaayeen badanaa qabiilo Turki ah,goboladaasina waxay ahaayeen badanaa dhib u joog aan xasillooni ka jirin,sidaas darteed ayey u badatay maxaabiista laga soo qabsan jiray,iyo suuqyada lagu kala iibsan jiray Addoomada,magaaladii Addoomada ee ugu caan sanayd waqtigaas waxay ahayd ((Sabarqanda)), ((Furqaana)), ((Khawaarsim)) iyo meelaha la midka ah..sidaa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

darteed asal ahaanta Mamaaliiktu waxay ugu badnayd Turki,wax diidayaana ma jiraan inay jireen Mamaaliik asal ahaan kasoo jeeda Armiiniya,Mangooliya,siday u jireen Mamaaliik asal ahaan reer Yurub ah, Mamaaliiktaas reer Yurub waxaa loo yaqaanay Saqaalibah, waxayna ka iman jireen Yurubta bari khaas ahaan.

Dhamaan waxyaabahaas ayaa si caadiya isaga dhacayey tobanaan ama boqolaal sano,laakiin arrinta cusub ee uu daahfuray Malik Saalix_ ka dibna ay kaga daydeen Suldaanadii ka dambeeyey ee Ayuubiyiintu waxay ahayd wuxuu soo qaadan jiray Mamaaliikta yar yar,marka uu wiil yar yahay,intooda badanina ay ka soo jeedeen waddamo aan Muslimiin ahayn,inkasto ay mararka qaarkood dhici jiray in lasoo qafaasho wiilal yar yar oo Muslimiin ah laakiin aan ku hadlin afka Carabiga,garanaynin,markaa ay adkaato in la garto waddanka uu kasoo jeedo ama diinta uu haysto,markaasna loola dhaqmi jiray sida addoon lagu qabsaday dagaal sidiisi.

Rabbayntii Mamaaliikta:

Saalix Ayuub wuxuu ahaa isaga iyo madaxdii ka dambaysayba_ ulamay dhaqmi jirin Mamaaliikta sidii addoomadii oo kale.. laakiin lidkeeda oo kale ayey ula dhaqmi jireen..way soo dhoweyn jireen, ilaa heer u dhow inta ay caruurtooda soo dhoweeyaan oo kale.. mana ahayn dabarka ka dhexeeyaa kan la leeyahay iyo kan wax leh mid iyaga ka dhexeeya Abadan..laakiin wuxuu ahaa dabarka u dhaxeeya ardayga iyo macalinka, ama aabaha iyo inankiisa, qoyska kan ugu wayn ee masuulka ka ah iyo caruurta qoyska.. sidaas ayuu u noqday dabar dhamaantiis jacayl iyo kalgacal lagu aas aasay.. maaha mid lagu aas aasay khasab iyo dano kale.. heer ay gaadheen inay ugu yeedhaan qofka iibsanaya erayga (macalin) maaha (Seyid).

Waxa sharrax inga siin doona Al Maqriisi (IHN)_ sida ay u taba bari jireen Mamluuk_ga yar isaga oo weli wiil yar ah wuxuu yidhi: “ marxaladaha ugu horeeyaa waxay ahaayeen in horta la baro luuqadda Carabiga,ku hadalkeeda,qoraalkeeda,iyo akhriskeeda, ka dib ayaa la siin jirey qof bara Quraanka kariimka, intaas ka dib ayuu baran jiray arrimaha Fiqiga iyo adaabta shareecada Islaamka la hal maala.. muhiimaddana waxa la saari jirey in lagu taba baro Salaadda,sidoo kale dikrigii Nebiga, waxaa lagu hayn jiray il gaar ah qofka leh, edbinaya wiilka ama waxbaraya, hadduu khalad ku sameeyo,waxaa loo mari jirey edaabta Islaamka arrintaas ka dibna waa looga goyn jirey si caddaalad ah”.

Tarbiyaddaas wanaagsan darteed waxay gurboodkaas yar yari isaga kori jireen si caadi ah,iyaga oo arrinta diintu la wayn tahay, ayna u dhisan tahay khilaafo balaadhan oo ay si fiican uga faa’iideysan karayaan fahamka Fiqiga Islaamka,meel sare ayey ka gaadheen Mamaaliiktu,heerka ay cilmiga iyo Culimadaba ka gaadheen wuxuu noqday mid aad iyo aad u sareeya,taasina waa waxa aynu ku fasiri karno baraarujinta, toosinta iyo dib u nooleynta umadda ee ku salaysan cilmigu waa taas, si xaqiiqo ahna waxay u dhacday sabankii Mamaaliikta, sida ay u qadderin jireen culimada xataa haddey ku khilaafaan ra’yigooda.. taasina waxay keenstay in waqtigii

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Mamaaliikta ay culimadu batay tusaale ahaan Alcizi Bin Cabdi Salaam,Nawawi,Ibn Taymiya,Ibn Alqayim Aljawsi,Ibn Xajar Alcasqalaani,Ibn Kasiir,Almuqiisi,Ibn Jamaacah,Ibn Qudaamaha, رحمهم الله جميعا ,sidoo kale waxaa soo baxay Culimo kale oo aad u badan.

Ka dib marka uu wiilku qaan gaadho waxaa iman jiray macalimiintii farda-fuulnimada iyo tababarka dagaalka,markaasay bari jireen sida fardaha loo fuulo,leebka loo gano,seefaha wax loogu garaaco,ilaa ay ka gaadhaan mustawe aad u sareeya kaartooyinka dagaalka,awoodda jidh ahaaneed,iyo karti ay u leeyihiin inay xamili karaan duruufaha adag iyo dhibaatooyinka.

Intaas ka dib ayaa loo taba bari jirey arrimaha maamulka iyo hogaaminta,sidoo kale waxay baran jireen sida loo dhigo qorsheyaasha dagaallada,sida loo xalliyo mashaakilka ciidamada,loolana tacaalo arrimaha adag,wuxuu korayaa Mamaalikigii yaraa isaga oo si buuxda uga dhamaystiran, dhinaca aqoonta,ciidamada,maamulka iyo maareynta,weliba ku darsoo qiiro aad u badan oo diineedna ay ku jirto_ shaki kuma jiro markaa in ay sugmayaan gomodaha Mamaalikgu,macnaha ku sugmayaan garoomada dagaalka.

Dhamaan waxyaabahan aan soo tilmaanay waxay ina dareensiinayaan in doorka ugu wayn ee qofka ay ka qayb qaataan cidda rabbaynaysa,aabayaasha iyo macalimiintu, doorkaasina waa in fiiro gaara la siiyo ilmuhu inta uu yar yahay, si fudud ayuu u qaadanayaa waxa lagu rabbeeyo inta uu yar yahay, waayo weli caqligiisa ma gelin afkaar is khilaafayaa,caqiidooyin xun xun, wuxuu iskaga raaxaysanayaa xiisaha dhalinyaro iyo firfircoonida jidhkiisa,waxyaabahaasi waxay u sahlayaan in uu si fiican u guto waajibaadka laga rabo,weliba sida ugu wanaagsan ee uu u gudan karo.

Marxaladaas kala duwan ee aan soo sheegnay waxaa daba socday in Malik Saalix uu si qoto dheer ula socday ugana war hayey, mararka qaar waxay niyaddiisu ku degi jirtay in uu iyaga wax la cuno,cabbo oo iskala raaxaysto,inta ugu badanna iyaga ayuu wax la cuni jirey lana sheekaysan jiray,Mamaaliiktuna way jeclaayeen si xaqiiqo ah Saalix Ayuub, markaas ayey si buuxda ugaga dambayn jireen xukunkiisa iyaga oo raalli ka ah maamulkiisa.

Waana sida weligeedba dhacda.. haddii uu hoggaamiyuhu ku milmo shacbigiisa,uu la dareemo waxay dareemayaa,ku farxo farxadooda,la murugoodo waxay la murugoonayaa,ka damqado waxay ka damqanayaan_ shaki kuma jiro_ inay jeclaanayaan, soona dhoweysanayaan,shakina kuma jiro inay ku kalsoonaanayaan,haddii uu jahaad amro si deg deg ah ayey u ajiibayaan, arrin kale haddii uu ku diryo waxay u deg degayaan fulinteeda,waxay ku beddelan doonaan nafahooda si uu u xaqiijiyo hadafkiisa.. laakiin haddii uu hogaamiyuhu ka dhex baxo shacabkiisa,uu noqdo noloshiiba mid ay kala fogyihiin dadkii uu masuulka ka ahaa.. iska raaxaysto macmacaanka nolosha,iyaga oo ku jira qahar iyo qato,la tacaalaya dhibaatooyin xanuun badan,ma dareemi doonaan dhinaciisa xataa inyar oo niyad ah

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

uma qabanayaan,xataa waxay ilaabi doonaan dareenkii wadaniyadda oo waxay nici doonaan dhulkoodii ay ku noolaayeen (waa sida haysata maanta dhalinyaradii Soomaalida oo aad aragtid iyaga oo ka yaacaya waddankoodii ilaahay ku abuuray,ugana baxaya wadamo shisheeye,sababtu waa dhulkan ayaanay waxba ku haynin,waxba ku haynin markaan leeyahay,waxaan u jeedaa hoggaamiye abuura (Human Capital) tayeynta dadka loo sheego inay wax qabsan karaan waddankooda ka dhigi karaan waddan waxkasta oo ay u baahan yihiin iyagu suurto geliya).. markaas ayaa wanaagii iyo dhismihii bulshaduna noqonayaa Mushkilad gaarkeeda u taagan.

Marka uu noqdo Mamaaligii mid halyey ku ah ciidamadii diintiisuna dhisan tahay wuxuu korayaa mansabyadii dawladda talaabo talaabo,wuxuu noqonayaa hogaamiye maamula inta ka hoos shaqaysa ee Mamaaliita kale ah, ka dib intaas ayaa la arkayaa sida fiican ee uu shaqadaas uga soo baxay xil kii hore ka wayn ayaa loo dhiibayaa,markaas ayuu iyadana ka gaadhayaa guul aad u sarraysa,sidaas ayey u socotaa ilaa uu ka gaadhayo Amiir,markaas ayey noqdeen amiirada gobollo kala duwan,sida Amiirada ciidamada iyo wixii la mid ah.

Mamaaliiktu waxay badanaa ku abtirsan jireen magaca ninka iibsaday.. tusaale ahaan kuwii uu soo iibsaday ee barbaariyey Saalix Ayuub waxaa la odhan jiray Al Saalixiyah,kuwii uu soo iibsaday ee soo rabbaystay boqor Kaamil waxaa loo yaqaanay Al Kaamiliyah.

Way badatay tiradii Mamaaliikta Al Saalixiya,wuu waynaaday arrinkoodii iyo sidoo kale warkoodii cahdigii Malik Saalix.. xataa Qasri uu ka dhistay Niilka wuxuu dhinaciisa uga sameeyey Qalcad Mamaaliikta..Qasriga iyo Qalcaddu waxay ku yaaleen xaafadda Al Rawda(garden city) ee Qaahira,webiga Niilna waxaa loo yaqaanay bad (al baxar) sidaa darteed ayey kula magac baxeen ((Al Mamaaliik Al-baxriya)) sababtoo ah waxay deggan yihiin badda dhinaceeda(oo webiga ooga jeedo).

Sidaas ayuu Malik Saalix xukunkiisu u saldhigtay isaga oo kaashanaya Mamaaliikta,Mamaaliiktuna ay markaas ka hayaan dawladda mansabyo aad u sareeya, dhinaca hogaaminta ciidamada iyo dhinaca dawladaba,wuxuu ku wareejiyeyba casrigiisi hogaaminta ciidamada oo dhan mid ka mida Mamaaliikta rag ka soo dhexbaxay oo la odhan jiray ((Faaris Diin Aqdaay)) derejo ahaanna waxaa hoos u xigay ((Ruknudiin Baybaras)) labadoodubana Mamaaliik Albaxriya ayey isku yihiin.

Duullaankii ((Luwis Taasic)) ama Luwiskii sagaalaad:

Aan idinka boodsiiyo sannadahan aan ku jirno ilaa 647hijriga.. sannadkan waxaa ku dhacay Malik Saalix xanuun aad u daran,waxaa ku dhacay xanuun sambabada ah,da'diisa oo waynaatayna way u raacday labadaas arrimood oo laysu geeyey ayaa oggolaysiiyey furaashka Qaahira,waqtiyadan lagu jiray iyo ka horba boqorka Faransiiska ((Luwis Taasic)) ayaa doonayey in uu ka faa'iideysto gacan ku dhigistii bariga Islaamka ee Tataarka,markaas ayuu u dhaqaaqay inuu isaguna gacanta ku dhigo qaar ka mida dhulka Muslimiinta gaar ahaan dhinaca Masar iyo Shaam isaga

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

oo ka gelaya hore waxaan usoo sheegnay in uu_yacni: Luwis_ isku dayey in uu Hogaamiyihii waynaa ee Tataarku ciidamo ku kaalmeeyo Kiyuuk Okitay,laakiin uu ku fashilmay isku daygaas.. balse halkaas kagama hadhin olilihiisi.

Wuxuu ku khiyaarkiisi magaalada Damiyaata(Dumyat) ee Masar inuu ka dego ka dibna halkaas duullaamada ka bilaabo waayo magaaladani waa deked bariga badda cad (mediterranean sea) oo dhexdhexaad ahayd waqtigaas, sidaas waxaa ku bilaabay dullaamadii taariikhda kula caanbaxay ((duullaamadii Kiristaanka ee Toddobaad)) (eeg khariiradda 17).

Geli mayno tafaasiisha duullaamadan,inkasta oo ay ku jiraan tafaasiil aad u muhiim ah,dhacdo ahaana ka mida dhacdooyinka ugu muhiimsan taariikhda Muslimiinta,laakiin ujeedadeenu imminka way ka duwan tahay sheegitaankeeda,waxaynuse si balaadhan ugaga warami doonaa buugga la yidhaahdo dagaalladii Kiristaanka insha allaah.

Waxay kasoo degeen ciidamadii Luwis Taasic Dumiyaat 20 bisha Safar 647h, nasiib darro waxay u maleeyeen kooxdii magaalada difaacisteeda lagu ogaa ee joogay ,in boqorkoodii xanuunsanayey uu geeriyooday, markaas ayey dib uga gurteen,dib u gurasho aan loo baahnayn, Dumiyaatna waxay u gacan gashay Faransiiskii si sahlan,waa magaaladii hadda ka hor dawikhisay duullaankii Kiristaanka ee Shanaad.

Intaas ka dib ayuu ka war helay Malik Saalix_ aad ayuu uga xumaaday,wuxuu ciqaabay raggii lahaa masuuliyadda gacan u gelista Faransiiska ee Dumiyaat,wuxuu saadaaliyey in Kiristaanku kusoo jeedaan Qaahira,intay kasoo gudbaan webiga Niil caasimadda soo weerari doonaan, ka dibna ay dawladdu siday u dhan tahay ridi doonaan.. ka dib wuxuu si xikmadeysan u go'aansadey inay kaga hortagaan wadada u dhaxaysa Dumiyaat iyo Qaahira,wuxuuna ugu talo galay goobtaasi inay noqoto magaalada Al Mansuura (Al Mansurah) sababtoo ah webiga ayey ku dultaal,Kiristaankuna waxay soo xeelayaan dhinaca webiga si ay ugu helaan meelay soo mariyaan doonyohooda faraha badan.

Markaa Malik Saalix Ayuubi (IHN) wuxuu faray in dadka loo raafo magaalada Mansuurah,ee ku taalla dacalka webiga kasoo farcamay Dumiyat,halkaasna lagu sugo ciidamada Kiristaanka,looguna diyaar garoobo dagaal lagu kala baxo isla magaaladaas.. dabcan Malik Saalix oo aad u xanuunsanayana waa lasoo qaadey_Al Mansuurah ayaa la keenay_ waxay bilaabeen Faarisu Diin Aqdaay,iyo Ruknudiin Baybaras inay dejiyaan kaartada dagaalka ee ugu munaasib san si loola kulmo Faransiiska.

Geeridii Malik Saalix:

Waxay kasoo baxeen ciidamadii Nasaaradu magaaladii Dumiyat 12 Shabcaan 647h,iyaga oo ku jiheysan koonfur soona raacaya webiga Niil si toos ahna u qaabilsan Qaahira,laakiin waxaa khasab ah inay soo marayaan magaaladii Almansuurah sidii uu filayey Malik Saalix..laakiin subxaana Allah habeenkaas kala badhkiisi Shabcaan

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

647h,ayuu geeriyooday Malik Saalix Najmudiin Ayuub رحمه الله ,isaga oo jooga Mansuurah oo diyaarinaya qorshihii dagaalka, dhufeysna ka dhigtay magaaladaas,ilaahay ayaan u waydiinaynaa dembi dhaaf iyo Naxariis iyo in uu siiyo ajarkii Shuhadada.. wuxuu leeyahay ((Ibn Taqri Albardiyi)) buuggiisa (xidigihii aan dhacayn ee boqorada Masar)) ee isaguna geeriyooday 874h “haddii aanay jirin wanaagii Suldanadii Saalix Najmudiin……..) hadana wuxuu yidhi “ yaa ka dulqaad badnaa kana duulaan dheeraa.!”.

Waxay geeridaasi ku ahayd Muslimiinta masiibo aad u khatar badan,maha waayitaanka hogaamiyahoodii wanaagsanaa oo qudha, laakiin waayitaanka cid lagu beddelo booskiisi, khaas ahaan waqtigan, dalkii ku jiro mashaakil badan,magaaladii Dumiyaat la qabsaday,gaaladii ay wadada kusoo jiraan.

Waxaa qaaday gabadhii Najmudiin Ayuub talaabo aad u xikmad badan.. waxaa la odhan jiray gabadhan ((Shajaratu Al Durr)) gabadhani waxay ahayd _qof aad u maskax badan_ asal ahaan kasoo jeeda Armiiniya ama Turkiy waxaa soo iibsaday Malik Saalix ka dib inta uu xoreeyey ayuu guursaday,sidaa darteed iyada ayaa asal ahaan ugu dhow Mamaaliikta.

Maxay samaysay Shajratu Durr geeridii Malik Saalix ka dib?

Way qarisay geeridii boqorka warkeedii,waxaanay tidhi dhakhaatiirtii ayaa mamnuucday in la booqdo boqorka,si deg deg ah ayey warqad ugu dirtay inan uu dhalay boqorku oo xukumi jiray magaaladii loo yaqaanay ((Xisna Kiifa)) (Turkiga ah imminka) magaciisana la odhan jiray ((Tawraan Shaah Najmudiin Ayuub)) waxay gaadhsiisay geerida aabihiis iyo inuu si deg deg ah u yimaaddo si uu ula wareego xukunka dawladda Shaam iyo Masar,ka dib waxay la faqday wasiirkii ugu waynaa wasiirada boqortooyadii Malik Saalix ((Fakhrudiin Yuusuf)) in uu maamulka si ku meel gaadha usii hayo inta uu imaanayo Tawraan Shaah, ka dibna waxay amar ku siisay Faarisu-diin Aqdaay iyo Ruknu-diin Baybaras, inay wadaan u diyaar garowga dagaalka ka dhici doona Al Mansuurah,ciidamaduna ugu jiraan heeggan,sidaas ayey arrimihii isugu beddeleen weji wanaagsan geeridii Malik Saalix ka dib,wax dhibaato ahina kama dhicin geeridaas lama filaanka ah,ee waqtigan adag kusoo beegantay.

Inkasta oo ay dedaal badan gashay Shajratu Durr,haddana geeridii Malik Saalix way soo gaadhay shacabkii, xataa waxay gaadhay Kiristaankii duullaanka kusoo jiray,taasina waxay keenaysaa inay xamaasadda Faransiisku kor u kacdo,hoosna ay u dhigto mooraalka Muslimiinta Masar,walowba ay joogaan Almansurah.

Waxay dhigeen Faarisu-diin Aqdaay iyo Ruknu-diin Baybaras qorshe dagaal oo aad u sarreeya,lagagana hortegayo ciidamada Kiristaanka ee Faransiiska,ka dib wuxuu usoo ban dhigay Shajratu Durr,markaa Shajratu Durr waxay metelaysaa madaxweynaha dhabta ah ilaa inta uu soo gaadhayo Tawraan Shaah,way la qaadatay qorshii ay soo bandhigeen,ciidankii Masaaridii waxay kala qaateen goobihii ay ka dagaal geli lahaayeen,kulankana way u diyaar garoobeen.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Dagaalkii Mansuurah:

Maalintii afraad ee bisha Dilqicda sannadkii 647h ayuu dagaalkii Mansuurah ka bilaabmay Muslimiinta ayaa ka gaadhay guul aad u wayn,goobtani waxay leedahay tafaasiil iyo wacdaro yaab leh,laakiin halkeedii maaha halkani.

Ka dib weerar labaad ayuu soo qaaday ciidankii Faransiisku ee uu watay boqor Luwis Taasic,oo markaa joogay magaalada Mansuurah duleedkeeda,dagaalkanina waxa uu dhacay sagaalkii Dilqicda sannadkii 647h, waxaase kala kulmay dhirbaaxo xanuun badan ka dib dagaal qadhaadh.

Waxaa yimid Tawraan Shaah Najmudiin Ayuub, weerarkaas dambe ka dib toban cisho 17Dilqicdah 647h, waxaa lagu wareejiyey hogaankii Xukunka,wuxuu si rasmi ah ugu dhawaaqay geeridii aabihiis iyo in uu la wareegay xukunkii Masar iyo Shaam.. ka dib wuxuu bilaabay in uu dhigo qorshe dagaal oo ku wajahan dagaal cusub oo lagu qaado Siliibiyiinta.. xaaladdii ciidamada Kiristaankuna way xumaatay,waxay bilaabeen inay dib ugu gurtaan dhinaca Dumiyaat,halka ciidamada Masaaridana ay kor u kaceen dareenkoodii iyo mooraalkoodiiba,guulihii ay ka gaadheen dagaaladii hore,gaar ahaan guushii Mansuurah,iyo imaatinka Tawraan Shaah xilli Munaasib ah.

Ka dib markii uu dhigay qorshe khibradeysan oo dagaal Tawraan Shaah ina Saalax Ayuub,wuxuu awooday ciidankii Masaaridu inay mar kale geesaha is daraan Faransiiska oo jooga magaalada ((Faariskuur))English ((Fariskur)) bilowgii Muxarram 648h,ka dib wax ka yar goobtii Mansuurah ee waynayd laba bilood!

Waxaa halkaas ka oogsadey dagaal aad u culus oo lagu burburiyey ciidankii Kiristaanka ahaa siduu u dhamaa, xataa waxaa lagu soo qabtay boqorkii watay ee Luwis Taasic,ciidankoodiina waxa uu ku dhacay wax la laayey iyo wax la qafaashay,waxaa loo soo kaxeeyey boqorkii Luwis isaga oo ku jeebbaysan silsado waxaana la keenay Almansurah,halkaas oo lagu xidhay gurigii ((Fakhrudiin Ibraahim,Luqmaan)).

Waxaa lagu xidhay shuruudo aad u adag si uu naftiisa uga furto qafaalashada,waxaana ka mid ahaa, in uu naftiisa ku furto siddeed boqol oo kun oo diinaar oo dahab ah,kala badh uu imminka bixin doono badhka kalena dib ka bixin doono,Tawraan Shaahna uu intaas raham ahaan u haysan doono ciidamada dagaalka lagu qabsaday ee Kiristaanka inta uu baaqiga soo bixinayo,welibana imminka lasoo daayo ciidamada lagaga qabsaday dagaalka dhinaca Muslimiinta, in uu ku wareejiyo magaalada Dumiyaat Muslimiinta,dagaalka Masar iyo Faransiisna xabbad joojin uu ka saxeexo ilaa muddo toban sano ah.

Wuxuu ahaa guul lama maqal ah dhinac kasta oo laga eego.

Ka dib waxaa lasoo dhamaystiray ururintii madax furashada ahayd,waana lasii daayey boqorkii Luwis Taasic dhinacaas iyo magaalada Caka..halkaas oo ay ka jirtay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks
imaarad Kiristaan ah waqtigaas.. ilaahay ayeynu waydiisanaynaa in uu uskagga Yuhuudda ka xoreeyo.

Dilkii ((Tawraan Shaah)):

Inkasta oo uu guul aad u weyn usoo hooyey waddankiisa Tawraan Shaah,haddana waxaa lagu tilmaamaa nin aan u qalmin jagadan, weliba waqtigan karaya ee umaddu ku jirto.

Waxa uu ahaa Tawraan Shaah shakhsi ahaa qof dhalanteedle ah..! waxaa lagu sifeeyey boqorkan dhalinyarada ah,akhlaaq xumo,jaahilnimo ka haysatay dhinaca arrimaha siyaasadda iyo xukunkaba,indho la'aan iyo baadinimo uu ku kacay guushii Luwis Taasic ka dib,isu arkay qofkii ugu wanaagsanaa ee kelidiis gaadhay guushaas,hadaanu joogina canka la dhigi lahaa,wuxuu bilaabay inuu la ficiltamo gabadhii aabihiis ka dhintay Shajratu Durr ama iyadiiba colaadiyo,wuxuu ku tuhmay inay qarsatay xoolihii aabihiis,wuxuuna ku yidhi soo saar xoolahaa,hajabaad iyo cago jugleyn aad u daran ayuu ku sameeyey ilaa ay cabsi iyo baqdini gashay,uma uu ilaalin sidii ay xukunka ugu ilaalisay markuu aabihiis geeriyooday ka dib,siday ugu ilaalisay inay arrimuhu u socdaan sidii loogu talo galay ilaa inta uu kasoo gaadhayo,taasi waa dhinac,dhinaca kale wuxuu bilaabay inuu yaso raggii ugu waaweynaa Mamaaliikta ee madaxda ahaa oo ay ugu horeeyaan Faarisu-diin Aqdaay iyo Ruknu-diin Baybaras,kuma uu Ixtiraamin guushii quruxda badnayd ee kasoo hooyeen goobtii Mansuurah,wuxuu bilaabay in uu gebigoodaba kasoo qaado waxan jirin oo aad u yaraysto,nuqsaan u sameeyo masuuliyadoodii,taas lidkeeda wuxuu bilaabay inuu wayneeyo raggii la socday ee kala yimid Turkiga,ka dibna wuxuu ku dhawaaqay inuu is beddel wayn ku samayn doono qaab dhismeedka dawladda masar gebi ahaanteedba.

Dhamaan waxyaabahaas oo dhammi waxay dhacayaan saddex bilood gudahood intay ku jirtay Masar..! ka dib dagaalkii Fariskuur.

Nafteeda ayey u baqday Shajratu Durr, waxayna si hoos ahaaneed ugu sheegtay arrintaas Mamaaliiku Albaxriya,gaar ahaan Faaris-diin Aqdaay iyo Ruknudiin Baybaras,nimanka Mamaaliik Albaxriya aad ayey u ixtiraami jireen una qadderin jireen maadaama oo ay tahay gabadhii hogaamiyahoodii wanaagsana.. oo ay ka dhaxaysay xidhiidh macalinnimo oo aad u xoogeystay raadkiisuna uu muuqdo xataa geeridiisi ka dib.. ka dib waxay nafteeda ka dareentay Shajratu Durr was waas, sidoo kale waxay u baqday nafaha Mamaaliikta kale ee la noolaa waqtigan ka dib arrintii markii la celceliyey waxay go'aan ku gaadheen inay ((Tawraan Shaah)) ka takhalusaan..inta aanu iyaga ka takhalusin.. waxay go'aamiyeen dilkiisi..!!

Sida xaqiiqadu tahayna guud ahaan Mamaaliikta waxa la yarayd waynida dhiigu leeyahay..waxay wax ku dili jireen shaki oo keliya!! Haddii ay ka shakiyaan qof in uu ku daba jiro waxay ka cabbir qaadanayaan qofkan in ay dilaan,mana garanaya sida uu guud ahaanba ugu fududaaday Mamaaliikta dhexdooda arrinkaasi,dhamaan

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

sidaas ayuu u fududaa intay dawladahoodu jireenba,immisa madaxdoodii ah,immisa muran isku dilay,xataa immisa ka mida kuwii ugu waaweynaa ayaa lagu dilay shaki,taasina waxa keliya oo lagu sababayn karaa rabbaayaddii askarinimada ee qallalayd ee adkayd ee ay Mamaaliiktu kusoo koreen,waxaa ka maqnayd oo qallalayd xeerintii nasabka,lafa guriddii amuuraha,waxay aaminsanaayeen waxkasta in lagu xalliyo seefta ay ku jeeniqaaran yihiin hadh iyo habeen.. waxaynaan hilmaamsanayn sidoo kale in lagu soo barbaariyey diinta iyo fiqiga..mana garanayno sanad Fiqi oo taageersan in qof lagu dilo shaki,xataa haddii malahaagu u badan yahay run in qofkaasi dhagar kuu maleegayo sida in uu ku casilo,ama isku deyayo dilkaaga, in aan shaki lagu dili Karin baynu naqaan!

Muhiimaddu waxay tahay in sebenkaas ay badnaayeen mu'aamaraadku, dhagaraha qarsoon,eek a daran dilku,ilaa la arkayey kii wax dilay oo dadka hortooda kaga faanaya khaarajintiisi hebel, xataa ay ahayd sabab lagu koro kursiga xukunka welibana ku faanaya,damiirtiisuna inyar aanu dareemaynin,waxaadba moodda in dhiigga dareerayaa aanu wax miisaan ah ku lahayn ilaahay agtiisa,iyo dadka agtoodaba.

Igama aha difaac aan difaacayo ((Tawraan Shaah)) iyo mid kale oo la dilay toona,wuxuu noqon karaa qofka la dilay shakhsi xun oo la neceb yahay,laakiin ciqaabta ka taalla iyo macneyaasha ay Islaamka agtiisa ka leedahay waa kuwo khaas u ah.. miisaanadaas la saarayona maaha kuwo aan innagu xadayn karno,laakiin waxaa xadeeyey rabbiga samooyinka iyo dhulalka.. Tuuggu_ hadduu yahay dambiile xun oo la necebyahay_ lama gaadhsiinin xadkiisa dil laakiin gacanta ayaa laga jarayaa,sidaas oo kale hadday sino tahay,hadday dhaawac tahay iwm.

Umana haysto in waswaaska galay in badan oo ka mid ah nafihii Mamaaliiktu,aanay marna banaynayn qof dhan in lagu waayo,oo qudha la waydaariyo.. haa waa la casili karaa,xidhi karaa,oo xabsi lagu hayn karaa.. laakiin gaadhsiinta ilaa xad qudhgooyo waa arrin wayn.

Cumar bin Khadaab (RC) wuu diiday in shaki wayn oo lagu hayo dartiis loo dilo addoonkii Majuusiga ahaa,wuxuu ahaa addoonka Majuusiga ahi ((Abu Lu,Lu)) ku nool magaalada Maddiina,wuxuu aad u nebcaa ((Cumar Bin Khaddaab)) nebcaansho xad dhaaf ah,Cumarna رضي الله عنه waa Amiirkii Mu'miniinta, nacaybka inankan yari u hayona waa uu ogaa,laakiin kuma fekerin,dilkiisa,xadhigiisa,iyo dulmigiisa sawir kasta oo dulmigu leeyahay,waayo arrinku weli wuxuu ku jiraa shaki wax xaqiiqo ahna lama hayo.

Wuxuuba soo werinayaa ((ibn Sacad)) buugiisa (dabaqyadii waaweynaa) qiso senedkeedu saxeex yahay in Cumar ku yidhi majuusigaa yar maalin: "haddii la uu doono..... Ka dib waxaa (manjuusigani wuxuu ahaa farsamo yaqaan xariif ah), markaas ayuu si cadho leh u eegay,oo ku yidhi: "waan kuu samaynayaa anigu mid dadku ku sheekaystaan" wuxuu kelmaddan ku yidhi luuqad Cumar ka

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

yeeshay in uu soo jeediyo kuwii la socdey oo yidhaahdo : ma addoon ayaa ii hanjebaya..!! Macnaha cumar wuxuu shakiyey shaki wayn,in addoonkani dil ugu hanjabayo, Cumar laakiin ma ahayn sida dadka kale ee Muslimiinta ah.. oo shakigiisu ka xoog badan yahay yaqiinta kuwa kale,Cumar waa ninka Quraanka lagu ilhaamiyey dhawr meelood ay ra'yigiisa is waafaqeen,Quraanka Kariimka.

Isaga oo kaas ah Cumar رضي الله عنه shakigiisina ma aaminin marnaba dilka_xataa ma xabsin ((addoonkii Majuusigii) Muslim asal ahaan maaha, laakiin xaaraanta dulmiga,iyo caddaaladda oo laga fogeeyo asalkeedii,waayo caddaaladdu way u siman tahay Muslimka iyo ka aan ahayn Muslim.

﴿وَلاَ يَجْرِمَنَّكُمْ شَنَآنُ قَوْمٍ ـ أي كراهيتهم ـ عَلَى أَلاَّ تَعْدِلُوا﴾ [

Cumar Malihiisi wuu rumoobay رضي الله عنه majuusigii waa uu dilay Cumar ((Cumar Bin Khaddaab رضي الله عنه)) laakiin waxba kama beddelayso qaaciidada Islaamiga ah..lama dilayo,lama xidhayo,ciqaabna laguma fulinayo haba yaraatee, nin ha noqdo,ama naag ha noqdo, addoon ama xor,qani iyo faqiir,daliil mooyaane.

﴿إِنَّ الظَّنَّ لاَ يُغْنِي مِنَ الْحَقِّ شَيْئًا﴾[يونس:٣٦]

Maluhu waxba kama taro xaqiiqada.

Waxaad u fiirsataa waxa ku dhacay ((Cali Bin Abi Daalib رضي الله عنه)) aad ayuu uga cajiib badan yahay dhacdadii Cumar, waayo Cumar wuxuu ka shakisanaa Abi Lu,Lu, shakigaasina wuxuu jiray ka hor intaanay dhicin wax isku day dil ahi.. laakiin Cali رضي الله عنه ma amrin in la dilo kii waranka geliyey kaasina waa ((Cabdi Raxmaan Ibn Muljim)) ilaa ay Muslimiintu yaqiinsadaan in Cali dhintay,halkaas ayaa lagu dilayaa,waxaana loo dilayaa dilka uu isagu ku fuliyey Cali..haddiise aanu Cali رضي الله عنه geeriyoonin lama dilayo!..

Wuxuu yidhi Cali: ka dib markii uu waranka ku dhuftay ((Cabdi Raxmaan ibn Muljim)): "naf waxaa loo dilayaa naf, haddii aan anigu dhinto dila,una dila sida uu aniga ii dilay,haddii aan noolaadona waxaad sugaysaan ra'yigayga".

Ka dib waxa uu la dardaarmay caruurtiisi iyo qaraabadiisi "Caruurtii Cabdi Mudaliboow idinkuma ogi in aad dhumbataan dhiiga Muslimiinta, idinka oo leh (waxaa la dilay Amiirkii Mu'miniinta, waxaa la dilay Amiirkii Mu'miniinta,lama dilayo geeridayda ka dib mooyaane eeg ((Xasanoow)) haddii aan dhinto ku dhufta darbaddii uu igu dhuftay oo kale,hana jarjarina (googoynina) waayo waxaan maqlay Rasuulk ﷺ leh: waxaan idiinka degayaa googoynta,haba ahaado Ey dad cun ah)).

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Islaamku waa kaas,halka ay qaar ka mid ah basharku ay bani aadamka u adeegsadaan inay Ciqaabaan iyaga oo dembi ku jirin iyo kuwo kaleba,Islaamkuna wuxuu xaaraantimeynayaa xataa Eyga!!

Aan ku noqonno qisadeenii.

Way ku waafaqday Shajratu Durr,Faaris Diin Aqdaay, iyo Ruknudiin Baybaras iyo kuwii kale ee kula socday kana midka ahaa Mamaaliikta, in la dilo ((Tawraan Shaah)) ka dibna waxay arrintii fushay dilka ahayd maalintii 27Muxarram ee sannadkii 648h, ka dib toddobaatan maalmood markii uu ka yimid Xisnu Kiifa,iyo la wareegista Kursiga Masar..! waxaadba moodaa in aanu masaafadaas u soo marin (Xukun) laakiin u yimid si loogu (aaso)!!.

Dilkani wuxuu ka dhigayaa inay ka dabar go'aan dhamaan Ayuubiyiintii dalka Masar.. waxaana ugu dambeeyey Tawraan Shaah..waxaa xidhantay baal meel muhiim ah kaga jiray taariikhda Islaamka.

Dawladdii Mamaaliikta:

Geeridii Tawraan Shaah waxay keentay aragtiyo siyaasadeed oo aad u kala fog fog, Masar kuma hadhin Ayuubi la wareega hoggaanka dawladda,dhinaca kale Ayuubiyiinta Shaam weligoodba damac ayaa kaga jiray Masar,waxayba u diyaar garoobayeen inay qabsadaan si ay isugu daraan Masar iyo Shaam, shakina kuma jiro in Ayuubiyiinta Shaam iyo Mamaaliikta aanay nabadi dhex oollin waayo waxay dileen Ayuubi.. sidoo kale shaki kuma jiro inay fahamsanaayeen Mamaaliiktu in Ayuubiyiintu ku dedaalayaan inay soo fara-geliyaan,siday u fahamsanaayeen oo kale inay sharafta iyo karaamada ay ku leeyihiin ciidanka Masaarida dhexdiisa ay tahay mid aad iyo aad u wayn,iyo in awoodda dhabta ah ee Masar aanay ahayn Ayuubiyiin iyo cid kale toona,ee ay iyaga tahay, isla markaana la dulmiyey guulihii ay kasoo hooyeen Mansuurah iyo Fariskor waayo iyaga ayaa iska lahaa guulahaas,laakiin la xaqiray doorkii ay lahaayeen.

Tabashooyinkaas iyo kuwo kale ayaa ka dhigay Mamaaliikta_Masar_ markii ugu horeysay Taariikhda inay ku fekeraan inay iyaga laftoodu qabtaan Hoggaanka dawladda si toos ah..!! maadaama arrintu ahayd "xukunka waxa iska leh ninkii gacan sareeya" iyaguna ay awoodaan inay gacan sareeyaan,maxaa iyaga u diiday hoggaanka?!.

Waxaa adeegsaday Mamaaliikta Masar iyaga oo lagu shaqeysanayey,kuwii xukunka haystay sannadkii 254hijriga ilaa 292H,macnaha xilliga ay dhacdooyinkani dhacayaan ka hor ilaa afar qarni oo buuro ah,sidoo kale waxaa la adeegsaday waqtigii dawladdii la odhan jiray ((Akhshiidiya)) ee laga bilaabo Sannadkii 323h ilaa 357h,waxaa sidaas oo kale adeegsaday casrigii ((Faadumiyiinta)) Shiicadii xukunka haysatay laga bilaabo 357h ilaa laga soo gaadho Saalaxu-diin Ayuubi halkaas oo ay ku dhamaatay Khilaafadoodii sannadkii 567h (wax aan ka badnayn laba qarni oo buuro ah).. waxaa la adeegsaday ayna ugu badnaayeen cahdigii Ayuubiyiinta sida aan soo aragnay.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Xilliyadaas oo dhan ciidanka keliya ee laysku hallayn jiray waxay ahaayeen Mamaaliikta,laakiin ciidan ahaada mooyaane marna kuma fekerin xukun iyo hogaamin midna,waxay badanaa iska ahaan jireen kuwa boqorada caawiya, halmarna maskaxdooda kuma soo dhicin intii ay jireen Mamaaliiktu fekredda boqor inay u noqo kuwii soo gadanayey ee sii iibinayey,may lahayn xigaal iyo tol ay ku abtirsadaan taasina waa tan ka dhigeysay qariib jooga waddan cusub oo ku dhexnool,sida aanay marna u dareemin inay u yihiin dawladdii cusub ee dhalataba daba socdeyaal,iyo sida aanay u lahayn wax hadaf ahba, imminkase mu'aamaraadkii ayaa xasuusiyey,wareegtaduna iyagay ku dulwareegaysaa,boqoradii waa taag daran yihiin awoodii oo dhamina gacantooda ayey ku jirtaa.. maxay nasiibkooda ugu tijaabin waayeen Xukunka?!

Laakiin koritaanka kursiga Masar si toos ah waxay ku noqonaysaa dawakh Masar dhexdeeda,dadku may ilaawin inay Mamaaliiktu_aas aaskoodii_ ahaayeen addoomo la soo iibsan jiray lana iibin jiray,shardiga xornimaduna waa shardiga aasaaska u ah madaxwaynaha Muslimka ah..xataa haddii la xoreeyo aqbalitaanka dadku u aqoonsadaan (sidii Madaxdii) way adkaanaysaa..xataa haddii ay aad u badan yihiin adduunka iyo xoolaha gacantooda ku jirinaa..markaa koritaanka kursiga xukunka waxaa ka horeysa in dadka la tuso xujo lagu qanciyo shacabka aan iyagu marna tegin kursiga Salaadiinta.

Waxyaabahaas dhamaantood waxay keensadeen inay Mamaaliiktu rajeeyaan fuulista kuraasta sarsare amaba qasriga madaxtooyada,ka dib dilkii Tawraan Shaah (si ku meel gaadh ah) si ay gogol xaadh ugu sii noqoto Mamaaliikta xooga badan,waqtigaasna adduunyada cidina kama gacan saraynin Masar ama caalamka Islaamka.

Arrimahaasi waxay ahaayeen xisaabaadkii ay isku dhufsadeen Mamaaliik Albaxriya Alsaalixiya.

Laakiin maxay ahayd xisaabtii Shajratu Durr?!.

Shajratu Durr waa gabadh dabeecad gaar ah leh.. waxbadan xuskeedu kuma soo noqnoqdo taariikhda.. waa gabadh awood badan..geesiyad ah..waxay leedahay caqli badan oo wax rog roga.. kuna raaxaysata xikmad xeel dheer..sida ay awood u leedahay oo kale maamulka iyo maaraynta..waxay ahayd Shajratu Durr mid ka warhaysa dhamaan waxyaabahaas aan soo sheegnay oo dhan inay leedahay.. markaa si aan xad lahayn ayey isugu qanacsan tahay(taasina waxay ahayd waxyaabihii ugu waynaa mushkiladeheeda).. waana arrinta ku sababtay inay ku dhaqaaqdo dhacdo aad ugu cusub fekerrada Islaamka, khaas ahaan waqtigan taariikhda umaddan.

Waxay ku fekertay Shajratu Durr inay fuusho kursiga xukunka Masar..!! waa yaab arrin ah,waa arrin ku cusub dhaqanka Muslimiinta isla markaana si wayn uga soo horjeedda.. laakiin sida aynu soo sheegnay waxay isku aragtay waxyaabo badan oo u sahli kara inay xukun qabato..! waxay nafteeda ugu sheekaysay: waxaad dalka u

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

xukumaysay si sir waqtigii lagu jiray dagaalkii Almansuurah,imminka maxaad si cad ugu xukumi wayday?

Waqtigaas ayey Mamaaliiktu ka dhex heleen fekreddii (xukun ku meel gaadh ah) Shajratu Durr ee ay doonayeen.. waa xaaskii (Macalinka).. Malik Saalix Ayuub ninkii aas aasayba(shacabkuna u haniyeeyey dhamaan) karaamo,ixtiraam iyo jacayl,sidoo kale waxay ahayd waqti ay u arkeen Mamaaliiktu inay Shajratu Durr lafteedu ka mid tahay Mamaaliikta,laakiin ay kaga duwan tahay oo qudha in la xoreeyey iyada,marka ugu dambaysase waa gabadh,Mamaaliiktuna ay waqtigeeda xukumayaan Masar oo mindida daabkeeda hayaan,isla markaana aan cidi laynaynin oo ay amaan buuxa helayaan inta ay xukunka hayso.

Sidaas ayey isku waafaqeen doonistii Mamaaliikta iyo rabitaankii Shajratu Durr.. waxay si wada jira u go'aansadeen inay Shajratu Durr ugu dhawaaqaan madaxwaynaha Masar ka dib dilkii Tawraan Shaah ayaamo yar waana bilowgii bisha safar sannadkii 648h..!

Adduunyadii ayaa kacday fadhina diidday..!!

Waxaa ka qarxay kacdoono cadho ah meel walba.. guud ahaanna waxa arrintaas laga diiday dacallada caalamka Islaamka.. waxay isku dayday Shajratu Durr inay sawir qurux badan u yeesho inta ay karto,markaas ayey ku abtirsatay ninkeedii shacabku aadka u jeclaayeen Malik Saalix Najmudiin Ayuubi,markaas ayey isku magcawday boqoradda Muslimiinta ee Saalixiyah.. iyada oo uga jeedda Saalixiyah odeygeedii Malik (SAALIX).. Haddana waxay is tidhi malaha intaasi kuma filna kolkaas ayey ku abtirsatay inankeedii yaraa ina Saalix Ayuub ee la odhan jiray ((Khaliil)),markaas ayey isu bixisay "boqoradda Muslimiinta Saalixiya,hooyada Suldaan Khaliil amiirkii Mu'miniinta" hadana waxay fahamtay in aanay waxaasi ka soconaynin,waxay misana ku dartay oo isku ladhay khaliifkii Cabbaasiyiinta ee waqtigaas xukumayey Baqdaad((Almuctasim Billah)) waa ninkii ay la duntay Baqdaad ee Tataarku dileen, waxay isugu yeedhay Shajratu Durr "boqoraddii Muslimiinta ee Al Muctasimiyah (waxay uga jeeddaa Almuctasimiyah_almuctasim)al Saalixiya (waxay u jeeddaa Saalix Ayuub) hooyaddii Suldaan Khaliil amiirkii Mu'miniinta"..!!

Midig bay ka saartay oo bidix bay ka saartay inay bulshadu caamo iyo culimo madaxnimadeedaas aqbasho oo way ka quusatay,waxaaba cirka isku sii shareertay cadhadii,waxaana u caddaatay mustawayaasha laga taagan yahay.. gaar ahaan waddanka oo ku sugan amaan darro khatar ah, duullaamadii Kiristaanku ma joogsan,imaaradihii Kiristaanka Falastiin oo sii fidaya,aadna ugu dhow Masar,madaxdii Ayuubiyiinta Shaam oo damac ka hayo Masar, loollan xooganina ka dhexeeyey iyaga iyo boqorkii geeriyooday ee Najmudiin Ayuub,sida ay Tataarna u qabsadeen Umaddii Islaamka laga soo bilaabo barigeeda ilaa galbeedkeedii,qulqulkii dhiigii Muslimiinta oo aan weli istaagin,Tataarna ay imminka u garaacayaan albaabkii Cabbaasiyiinta si xun.. Masar lafteeda waqtigan looga baqayo in uu ka qarxo Foolkaano khatari.. cidina aanay ka warhaynin qofka qarxin doona Foolkaanahaas..!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa bilaabmay mudaaharaadyo xoogan oo shacabku ka bilaabeen magaalada Qaahira dacalladeeda oo dhan,haddana waxay dooneen Mudaaharaadayaashii inay debedda ula soo baxaan mudaaharaadkooda ilaa xadka magaaladana socdaan,halkaas oo laamihii dawladdu amreen in la xidho dhamaan albaabada magaalada Qaahira,iyada oo la diidayo in mudaaharaadku ku fido ilaa baadiyaha.

Waxaa ka kacay masaajidada Culimadii oo Mimbarada isla taagay fatwooyinkii,goobihii bulshadu isugu imaan jirtay ayey kaga hadleen, gooni gooni ayey uga hadleen, ragga culimadaas ugu cadhada badnaa ee inkaarayeyna waxaa ugu horeeyey Sheekhii waynaa ((Cizi Bin Cabdi Salaam)) رحمه الله hormoodkii culimadii waqtigaas.

Cadhadii ayaa kusii badatay madaxdii Ayuubiyiinta Shaam, aadna waxay dibinta uga qaniinsan yihiin kursigoodii Masar oo gabadhi qabsatay.

Waxaa timid jawaab celintii khaliifkii ay magaca ku darsatay ((Muctasim Billah)) aad isaga oo u cadhaysan,dhamaana shacabka reer Masar guubaabinaya ayuu ku yidhi warqaddiisi : “haddii ay raggii ka dhamaadeen xagiina,ii soo sheega,aniga ayaa nin idiin soo dirayee!”.

Ma joogsan mucaaradadii lagaga soo horjeeday boqoradda.. kumana dhadhamin hal maalin wax raaxo ah,waxay markaa ka baqday inay nafteeda halis gelisoba arrintani, gaar ahaan waqtigan sida keliya ee wax lagu beddelaa ay ahayd Seef iyo gawrac aanay jirin baryo iyo waan..halkaas ayey si deg deg ah boqoraddii Shajratu Durr u go’aansatay inay uga tanaasusho xukunkan….nin..!! nin uun..!!

Laakiin yaad uga tanaasushaa?!

Xukunkii weli way rabtaa,wayna jeceshahay,may illaawin awoodeheedii caqli,maamul iyo hogaamineed inay leedahay weli.. awoodo la dayacona maaha runtii.. maxay samaysaa?!

Waxay go’aansatay boqoraddii Masar inay usha dabada qabsato_ sida ay yidhaahdaan marka ay sifeynayaan,gudaha ayey ka xukumaysaa guudkana way iska qarinaysaa,waxay ku fakartay inay ciyaarto siyaasad khatar ah,oo ah inay guursato nin.. ka dibna ay xukunka uga tanaasusho si uu muuqaal ahaan ugu joogo..ka dib iyada ayaa waddanka xukumaysa inta uu joogo.. ama (daaha dabadiisa ayey ka xukumaysaa) sida inta badan miidaanada siyaasadda,immisa madax ah ayaan xukunka ku lahayn wax aan ahayn magac,immisa madaxweyne ayaan lahayn wax aan ka ahayn ‘madaxweyne’ badanaa ragga oggolaanayaa in loola dhaqmo sidaas,inuu noloshiisaba kursiga ugu fadhiyo :sawir ahaan..!!

Sidaa darteed Shajratu Durr guurkan kama aha guri dhis,mana doonayso nin xaqiiqdii,waxay keliya oo rabtaa ((sawir nin)).. waayo haddii ninkaasi yahay mid ku awood badan xukunka,isaguna qaban karayo hoggaanka dalka oo dhan kelidiis.. taasi waxay haddana u baahan tahay isaguna in uu kasoo jeedo qoys awood badan asal

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ahaan,taasi markaa raad kuma yeelanayso caa'iladdiisa,xukunka ayuu ka maroojinayaa gacanta Shajratu Durr..haddii uu ka mid yahay ninkaas la doortay nasiib wanaag Mamaaliikta,waxay noqonaysaa in xukunkii si fudud ugu gacan galo Mamaaliikta,taasina waa arrin muhiimadeeda leh,haddii uuse noqdo ninkaasi mid lagu keenay meesha sifo sharci ah,Mamaaliiktuna waxay yeelanayaan sifadoodii ahayd askarinimo iyo dawlad ilaalin.

Cissu-Diin Aybak:

Waxay maskaxdeeda gelisay Shajratu Durr arrimaha aan kor kusoo sheegnay,ka dib waxay dooratay nin ka mid ah Mamaaliikta,oo ku caan ah guul-wadaynta,kana fogaada khilaafka iyo loollanka, shakhsi ahaana ah nin deggan,dhamaantoodna waa wax loo baahan yahay aragtida Shajratu Durr,waxay Hangoolkii ay sidatay ee aan gadhka lahayn,ka heshay gadhkiisi ninkan.. ninkani waa ((Cissu-Diin Aybak Al Turkumaani Alsaalixiyi)).. wuxuu ka mid yahay Mamaaliikta Albaxriya Alsaalixiya.. macnaha wuxuu ka mid yahay Mamaaliiktii uu ka qabay boqorkii tegay ee Najmudiin Saalix Ayuub..may dooran Shajratu Durr Mamaaliiktii awoodda badnayd tusaale ahaan Faaris-Diin Aqdaay iyo Ruknu-Diin Baybaras,sidaasina waa xukunka hayska haysto si aan muran ku jirin.

Waanay guursatay Cissu-Diin Aybak, ka dibna waxay uga tanaasushay xukunkii sidii ay sii qorshaysatay,arrintaasina waxay dhacday ka dib markay dalka xukumaysay siddeetan maalmood oo keliya,wuxuuna tanaasulkaasi dhamaystirmay aakhirkii Jamaadu saani ee sannadkaas laftiisa 648h, guud ahaan waxaas aan soo sheegnay waxay dhacayaan sannad gudihiis,macnaha sannad gudihiis waxaa kursiga xukunka Masar ku fadhiistay afar madaxweyne.. waa Malik Saalix Ayuub ka dib wuu dhintay,Tawraan Shaah ka dib waa la ditay , Shajratu Durr ka dib way ka tanaasushay, iyo Cissu-Diin Aybak Alturkumaani Alsaalixiyah.!

Wuxuu la baxay Cissu-Diin Aybak ((Malik Almuciss)) heshiiskiina waxaa lagaga qaaday Masar.

Waxaadba moodaa in Ilaahay SW_ u sakhiray caqliga Masaarida inay aqbalaan koritaanka kursiga ee Mamaaliikta.

Shacabkii reer Masarna way soo dhoweeyeen isbeddelka cusub..isagu,haddiiba aanu ugu muuqan tusaale ra'yigooda_ marlayba waa uu dhaamaa inay naagi na haysato ayey leeyihiin,mar haddii aanu joogin nin ka mid ah Ayuubiyiinta oo beddelaa,mana joogo ninka mid ah madaxdii Ayuubiyiinta oo xukunka lagu wareejiyaa,madaxdii Ayuubiyiinta Shaam waxay la dacdarraysan yihiin awood darri ba'an,maamul xumo iyo khiyaamo.. waxaa inna soo martay fashilkooda dartiis iyaga oo kaalmaysanaya Tataar,mar kale waxaa ina soo martay jabkooda dartiis iyaga oo gargaarsanaya Kiristaan.

Masar way iska oggolaatay hoggaaminta Cissu-Diin Aybak,waxaana la yidhaahdaa waa ninkii ugu horeeyey ee Xukun boqornimo ka qabta Masar,inkasta oo

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

taariikhyahannada qaar yidhaahdaan Shajratu Durr inay ahayd qofkii ugu horeeyey ee Mamaaliikta Masar xukun qabta,waayo asal ahaan waa jaariyad Mamaalik ah oo la xoreeyey.

Waxay ka bilowday Shajratu Durr xukunkeedii daaha dabadiisa_siday rabtay_waxay ka mid tahay taageerayaasha Mamaaliikta ee awoodda badan,gaar ahaan _sidaan soo sheegnay_Faaris-Diin Aqdaay iyo Ruknu-Diin Baybaras.

Laakiin waxaad moodaa in caqli badnaantii Shajratu Durr ay ku guul-darraysatay doorashada ninkan,boqor Malik Almuciss uma ahayn daciif sida ay moodeysay Shajratu Durr iyo Mamaaliiku Albaxriyaba,markiiba boqorkan cusubi waxa uu fahmay qorshii koowaad ee ay dejisatay boqoraaddan uga tanaasushay xukunka,wuxuu gartay khatarta ay ku yihiin walaalihiisa Mamaaliiktu iyo awoodooda ay Masar ku leeyihiin,wuxuu bilaabay in uu dib u tartiibsado waraaqihiisa.. laakiin si aad u digtoon.

Boqorkan cusub ee Cissu-Diin waxaa ku tusaysa in uu caqli badnaa markiiba iskuma soo jeedin Shajratu Durr iyo madaxdii Mamaaliikta midna.. wuxuuse bilaabay in uu awoodiisa dhiso,una diyaar garoobo diyaar garoow qunyar socod ah, wuxuu bilaabay in uu soo iibsado Mamaaliik u khaas ah isaga,wuxuu diyaarsaday awood boqor oo ciidamaysan,kuna xejin karta kursiga,wuxuu kala baxay Mamaaliiktii Masar ciddii wax kala qaban karta hammigiisan,wuxuu dhisay markaa wixii taariikhdu u taqaannay ((Al Mamaaliiku-Almucissiyah)) uguna magac daray ((Almuciss Cissu-Diin Aybak)) wuxuu madax uga dhigay kooxdan ninkii ugu khatarsanaa uguna dagaal yahansanaa,uguna halyeysanaa raggiisa waa ((Sayfu-Diin Quddus)) رحمه الله.

Waxay ahayd markii koowaad ee la maqlo geesigii Muslimiinta ee caanka ahaa :Sayfu-Diin Quddus,waxaa ka shaqayn jiray xafiiska madaxtooyada koox Mamaaliikta ka mid ah oo khaas ahaan uu leeyahay Cissu-Diin Aybak.. wuu inoo imaan doona inshaa allaah_warka_ Quddus iyo asalkiisu goor dhow.

Boqorkan cusubi isaga laf ahaantiisu wuxuu ka mid yahay Al Mamaaliiku Albaxriya haddana waxaa isaga iyo iyagii ku kala dhacday kala fogaansho.. Isagu waa uu ka warqabaa awoodooda iyo dhega jalaqsanaantooda gabadhan aan doonaynin inay ula dhaqanto sidii boqor oo kale laakiin sidii ((sidii Sawir boqor)).. iyaguna waxa aan shaki ku jirin in waxyaabo kala duwani ka karayaan qalbigooda,oo ku wajahan xasad iyo gacan kale oo iyaga ka baxsan ee miskiinkan Mamluuk ((addonka ahi) kartidiisuna kooban tahay_waa aragtidooda_ee imminka ku fadhiya carshiga Masar,waxaa loogu yeedhayaa boqor..iyaguse waxay ugu yeedhayaan addoon..kala fogaa..!!

Laakiin boqorkan caqliga badani gelin horeba ma qaylin.. si deggan ayuu isaga watay arrimihiisa,ku badsaday tirada Mamaaliikta Aamus.

Waa uu iska socday waqtigu,waxaa dhacday inay is ururSadaan madaxdii Ayuubiyiinta Shaam si ay ugu soo duulaan Masar..sababtuna waa in la marin

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

habaabiyey xukunkii ay iska lahaayeen Ayuubiyiintu.. Shaamna waxay si buuxda uga baxeen maamulkii Masar ka dib geeridii Tawraan Shaah.. waxay isku haleeleen ciidankii Mucis iyo ciidankii Shaam goobta la yidhaahdo ((Alcabbaasiyah)) dhinaca bari uga jirtaa labaataneeyo kiiloomitir Saqaasiida imminka(Az Zaqaziq) taariikhduna waa tobankii Dilqacda ee sannadkii 648h, waa afar bilood keliya ka dib xukunkiisa,wuu ka guuleystay boqor Muciss qoladii kasoo horjeedday guul wayn,guushaasina waa khasab inay kor u qaaday magaciisa dhinaca shacabka reer Masar,badineysona kalsoonida iyo ku negaansha kursiga.

Sannadkii 651h (saddex sano ka dib xukunkii Aybak) waxaa mar labaad soo cusboonaadey colaadii ka dhaxaysay Cissu-Diin Aybak iyo madaxdii Shaam,laakiin intii aan wax dagaal ahi dhicin ayaa waxaa soo gashay khilaafadii Cabbaasiyiinta ee uu madaxda ka ahaa Almuctasim Billah_ heshiisna loogu dhameeyo labada dhinac,waxyaabihii heshiiskaas kasoo baxayna waxaa ka mid ahayd inay Falastiin dhamaanteed xataa Aljaliilta ku taalla dhinaca waqooyi ay hoos tagto xukunka Masar,tanina waxay muujinaysaa awood loo siyaadiyey boqor Muccisi,Cissu-Diin Aybak,ka dib waxaa dhacday arrin kale oo ah inay khilaafada Cabbaasiyiintu aqoonsatay isla markaan ictiraaf buuxa siisay boqornimada Mucisi Cissu-Diin Aybak ee Masar,khilaafada Cabbaasiyiintuna inkasta oo ay taag daran tahay,inkasta oo aanay iyadu magcaabin,ictiraafkeedu wuxuu siinayaa aqoonsi sharciya oo aad muhiim ugu ah boqorkan.

((Aybak)) iyo ((Aqdaay)):

Arrimahaas oo dhammi waxay jirridaha u aaseen xukunkii Almucisi,in uu si fiican majaraha ugu hayo xukunka Masar,ka dib waxaa sii batay nacaybkii Mamaaliiktii waaweynayd,gaar ahaan Faaris-Diin Aqdaay,kaas oo kula kici jirayba afxumo aanu kaba qarsanaynin, si toos ah ayuu u caayaa..sida uu ku sheegay ((Maqriisi))buuggiisa (anshaxa lagu barto dawladihii boqortooyooyinka ahaa) “wuxuu ka gaadhay Faaris-Diin Aqdaay xaqiraadda Aybak,bahdilaadiisa,wuxuu ugu yeedhi jiray magiciisa oo keliya” taasina waxay caddeynaysaa in Faaris-Diin leeyahay boqor kani maahee waa sawir boqor oo aan wax qiimo ah lahayn,bal ka waran hoggaamiyihii ciidamada oo boqorkii ugu yeedhaya sidan oo kale : “waaryaa Aybak” oo sidaasna aanu ugu yeedhaynin saaxiibtinimo laakiin ay ka tahay xaqiraad.

Dhaqamadani waa kuwii Aqdaay,dareenka uu ka qaatay Aybakna waa _in Mamaaliiktu_ oo dabcan ay ku jiraan shicibka reer Masar ay u arkaan in uu yahay ((odeyga)) qaba boqoradda dalka xukunta.. arrintaasi ayaa keensatay in uu si xeel dheer uga fekero,ka dibna waxaa u soo baxday in uu ka takhaluso Aqdaay si uu amaan ugu helo naftiisa,una haysto awooddiisa si buuxda.. sidaas ayaanay badanaa boqoradu u jeclayn inuu ka soo baxo agtiisa siyaasi uu oggol yahay shacabku kartidiisa iyo xukunkiisa.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Wuxuu la sugay Aybak jaanis ku haboon,ilaa uu ogaaday in Aqdaay isu diyaarinayo in uu guursado gabadh ka mida dumarkii Ayuubiyiinta,wuxuu fahmay in uu doonayo Aqdaay in uu sawir wanaagsan isla soo hortaago shicibka,gabadhiisuna ay tahay gabadh ka mida Ayuubiyiintii dalka soo xukumayey muddo ka badan siddeetan sano,halka ay ahayd Shajratu Durr mid dalka ku xukuntay oo keliya inay ahayd gabadhii Saalix Ayuub oo keliya,maxaa u diidaya Faaris-Aqdaay in uu Masar oo dhan xukumo marhaddii gabadhiisuna kasoo jeeddo Ayuubiyiinta,intaasna ay u dheertahay, dhegta,sumcadda,taariikhdiisa,hogaamiyenimadiisa ciidan,guulihii Almansuurah?!.

Waxaa halkaas uga muuqatay boqor Aybak khatar aad u ba'an,taasina ay dabada ku wadato inqilaab lagu rido,inqilaabkuna waa uun Seef,wuxu ka fekeray wixii uu hore ugu geystay boqorka oo xaqiraad ahayd iyo tan uu imminka wado ee ah inuu guursanayo gabadh Ayuubiyad ah wax kale in aanay ahayn aan ahayn sidii uu xukunka kaaga fara-maroojin lahaa,ka dib wuxuu soo saaray Aybak amarkiisi oo ah ((in la dilo)) hogaamiyihii ciidamadii Almaamaaliik Albaxriya sababtoo ah ((inqilaab ayaa looga shakiyey))..!!

Waxaa la fuliyey amarkan dilka ee kasoo baxay boqorka Cissu-Diin (3dii shabcaan sannadkii 653h).

Dilka Faarisu-Diin Aqdaay,wuxuu jidka u banneeyey Almucissi Cissu-Diin,markaas ayuu bilaabay inay awooddiisi soo shaacbaxdo,kelmeddiisu noolaato,waxa uu bilaabay doorkii ay lahayd Shajratu Durr in uu soo yaraado,wuxuu intaasba korodhsanayey waxay ahayd khibrad,waxaa badatay awooddii Almamaaliik Almucsiyah,xukunkiisuna si deggan ayuu dalkii ugu faafay,dadkii ayuu kasbaday oo ka raalli noqday,aqoonsi wuxuu ka helay khilaafadii Alcabbaasiyah oo ku qanacday hoggaamintiisa Masar,waxaa kale oo ka raalliya xukunkiisa ka ah imminka Ayuubiyiinta heshiiskii ka dib.

Dilka Faarisu-Diin waxay u kala qaybisay Mamaaliiktii laba qaybood oo waaweyn iskuna lid ah: Almamaaliik albaxriya,waa kuwa xukunka la doonaya Shajratu Durr iyo Almamaaliik almucisiyah,waa qolada taageersan boqorkan Almucisi Cissu-Diin Aybak.

Halka Faarisu-Diin Aqdaay laf ahaantiisu_ ahaa ninka ugu awoodda badan Almamaaliik albaxriya,uguna haybadda waynaa_ isagii la dilay in kuwa hadhay la laayona ka fududahay wax kaleba.. waxa lasoo dersay Mamaaliik albaxriya siday u dhamaayeen waswaas iyo shaki.. madaxdoodii Shajratu Durrna waxba way u samayn kari wayday,halkaas ayey ku go'aansadeen madaxdii Mamaaliik Albaxriya inay u cararaan Shaam iyaga oo ka baqaya boqorkan Almuciss Cissu-Diin,waxaa watay kooxdaas cararay oo madax u ahaa Ruknu-Diin Baybaras- kaasoo u tegay Naasir Yuusuf_ khaayinkaas xukumayey Xalab ka dibna Dimishiq kuwaas ayuu iskaga biiray Ruknu-Diin Baybaras.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Sidaas ayey boqorkan hawadu saafi ugu noqotay,inkasta oo cadaawadda u dhaxaysa isaga iyo Mamaaliik Albaxriya soo dhaaftay shakigii iyo wax la filayo, isla markaana noqotay mid laysu badheedhay,mar labaad ayey khilaafadii Cabbaasiyiintu soo saartay qaraar sheegaya in laysku daro Shaam iyo Masar,waayo isku daranka Mamaaliikta Albaxriya iyo madaxda Shaam waxay sii hurinayaan cadaawadda iyo fitnada dhextaalla Masar iyo Shaam,way guuleysatay aragtidii khilaafadu,waxaa laysku afgartay inay ku noolaadaan Mamaaliik albaxriya Falastiin oo hoos timaadda maamulka Almucissi,boqorka iyo taageerayaashiisuna waxay joogayaan Masar_ marka laga reebo Ruknu-Diin Baybaras oo dilkii Faarisu-Diin Aqdaay go'aansaday in uu u tago Alnaasir Yuusuf Al Ayuubi.

((Shajratu Durr)) baqdin la gubanaysa!!

Waqtiga ayaa sannado badan socdey,boqortooyadii Mucissi Cissu-Diin way xasishay kursigiisa ayuu iskaga negaaday,waxaa isna noqday hogaamiye Sayfu-Diin Quddus weliba hoggaamiye caan ah oo la wada garanayo,si gaar ahaaneed iyo si guudba,waxaa qarsoomay doorkii boqoraddii hore ee Shajratu Durr,qarsoomidaasina_ shaki kuma jiro_ in qalbigeedu la holcanayo xiqdi,iyo xasad,Cissu-Diin Aybakna wax kasta oo ay usoo bandhigto sida xun ayuu ugu rogaa,sababta oo ah wuu ogyahay in aanay wax kale u guursan aan ahayn inay Masar hoosta ka xukunto inta uu taagan yahay isagu,laakiin xilli ayey dabayli iska soo dhacdaa aanay doonyuhu rabin.!!

Waxay soo dhacday dabayshaasi sannadkii 655h, waqtiga uu xukunka haystay Mucisina waxay maraysaa siddeed sano,oo buuro ah, isaguna waxa uu doonay in uu kursiga imminka u maamulo sidiisi hore si ka balaadhan,waxaa kordhay damaciisi ku wajahnaa deriskiisa,Falastiin,iyo Shaam,mana awoodo in uu riyadiisa ka run sheego kelidiis,wuxuu markaa doonay in uu heshiis la galo mid ka mida madaxdii ugu waaweynayd gobolka si uu kaalmo uga helo fulinta arrimahaas, khiyaamada ballamuhuna waxay ahaayeen waqtigaas wax iska dabiici ah,wuxuu doonay markaa in uu ku xidho heshiiska dabar adag dabarkaasina waa...guur..!!

Wuxuu doonay Almucisi Cissu-Diin gabadh uu dhalay amiirka Mawsil, amiirkii khaayinka ahaa ((Bedru-Diin Lu,Lu)) waa ninkii aynu wax badan kasoo warranay,kaalmeyntiisii iyo daba-dhilifnimadii Tataarka.

Arrintaas ayey ka warheshay Shajratu Durr olol ayaa qalbigeeda laga shidey.. wer wer iyo walaac ayaa la duldhigay,waxay ogaatay haddii guurkaasi dhamaado inay si buuxda safxadda taariikhda uga qarsoomi doonto,waxaa guud ahaan ka qarsoomay inay iska sugto khayr ba u noqon doontee war uma haysee,waa qoftii lagu wada bartay xikmadda iyo caqli badnaanta,maxay xikmadeedii u tusi wayday inay qarsoomeen madaxdii Mamaaliik albaxriya,awoodda dhabta ahina ay gacanta ugu jirto imminka Almucisi Cisu-Diin Aybak,waxaas oo dhammi isma tusine waxaa qaadday caadifad dumarnimo,waxay go'aansatay inay qaaddo tallaabo aanay shiilin

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

waxbadanna ka fekerin,laakiin ay iyadu ka gaadhay maskaxdeeda oo keliya,horena ay ugu samaysay Tawraan Shaah,wiilkii uu dhalay odeygeedii hore,imminkana waxay ku samaynaysaa odeygeedii..tallaabadaasina waa: dilka odeygeeda Almucissi Cissudiin.. dil wixii dhacayaaba ha dhacaan..!! waa taas fekreddii Shajratu Durr..!!

Waxay falkisay Mu'aamarad khatar ah si ay ugu khaarajiso odeygeeda,waxaana la fuliyey mu'aamaradeedii qasrigeeda dhexdiisana lagu fuliyey bishii rabiical awal sannadkii 655h,kuna afgo'ay xukunkiisi ka dib toddoba sano oo uu ku fadhiyey kursiga madaxnimada Masar,sidaas ayey Shajratu Durr u noqotay gacan ku dhiigle laba madaxweyne oo xukumayey dalka Masar: Tawraan Shaah iyo Cissu-Diin Aybak.

Markiiba waa la ogaadey warkii dilka,waxaa soo cararay hogaamiyihii ciidamada ahaana garabka midig ee boqor Almucissi Cissu-Diin Aybak,isaga oo uu la socdo wiil uu dhalay boqorka la dilay oo la odhan jiray Nuuradiin Cali.. way soo carareen iyaga oo ay la socdaan koox ka mida Almamaaliik Almucisiyah, waxay gacanta ku dhigeen gacan ku dhiigle Shajratu Durr.

Dalab ayaa ka yimid Nuuradiin hooyadiis,xaaskii hore ee Cissu-Diin Aybak, inay iyada u daayaan ka aargoosiga Shajratu Durr, waa laga aqbalay dalabkeedii inta loo xidh xidhay ayaa looga tegay,ka dibna Nuuradiin hooyadiis waxay ku amartay dumarradii jaarkeeda inay gabadhan Shajratu Durr ku dilaan siday kab ula dhacayaan (kabo qadhaafiic ah oo loox laga samayn jiray ayaa sidii loola dhacayey jaantooda nafta lagaga saaray Shajratu Durr)..!!

Waxaa laga yaabaa in dhacdooyinkii dilka kani uu yahay kan keliya ee sida sharciga ah loo fuliyey, waxay dishay Shajratu Durr Cissu-Diin Aybak wax uu dil ku mutaystayna uma hayso.. maaha haddii uu gabadh kale guursadey dembi uu dil ku mutaystay, maaha haddii uu xukunka isku keli yeelay oo aanu gabadhiisa wax xil ah u dhiibin dembi uu dil ku mutaystay,sidoo kale may haynin wax u sharciya oo u banneynayey khaarajinta boqorka.. laakiin waxa khalad ah sida loo dilay ayaan ahayn si sharcigu banneeyey.. waxay ahayd arrin ku salaysan mab'da haween oo foolxun.. may ahayn in la dilay oo qudha,laakiin waxaa ku jirtay xaqiraad iyo dulleyn,waa sidii lagu sameeyey khaliifkii Almuctasim ka dib dhicitaankii Baqdaad oo isagana lagu dilay haraati!.

Ka dib markii la dilay boqorkii Mucisu-Diin Aybak,ka dibna la raaciyey Shajratu Durr,ayaa xilkii la saaray wiilkii uu dhalay boqorkii dhintay oo la odhan jiray Nuuradiin Cali oo da'diisu gaadhay shan iyo toban sano jir,waana arrin aad u khilaafsan sharciga,laakiin malahayga waxaa kursiga loogu fadhiisiyey wiilka yar si loo joojiyo muranka ka dhalan doona Mamaaliikta doonaya inay xukunka qabsadaan.. waxaa loo bixiyey Suldaanka yar naanays ah ((Almansuur)) waxaana si buuxda ugu wareejiyey mid ka mida raggii ugu awoodda badnaa Masar casrigaas, waa Sayfudiin Quddus,hoggaamiyaha ciidamada iyo guddoomiyaha Almamaaliik Almucisiyah.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa ilmahaas yar lagu wareejiyey xilka kursiga,bishii rabiic alawal sannadkii 655hijriga.

Madaxweynaha rasmiga ee Masarna wuxuu noqday.. Sayfudiin Quddus رحمه الله.

Waa kuma Sayfu-Diin Quddus?

Sayfudiin Quddus waa mid ka mida shakhsiyaadka ugu taariikhda wayn Muslimiinta.. magaciisa asalka ahina waa ((Maxamuud Ibn Manduud)) wuxuu kusoo koray guri boqortooyo oo Muslim ah..subxaanallah.. alla adduunyo daba yaraa..!! waxaa dhashay alaalu-Diin Khawaarsim Shaah walaashii..!! Jalaal-Diin waa boqorkii Khawaarsimiyiinta ee caanka ahaa,ee aynu wax badan kaga soo warranay buuggan qaybihiisi u horreeyey,waa ninkii u badheedhay Tataarka ee guuleystay laakiin mar dambe la jebiyey, isla jabkaasna ula cararay waddanka Hindiya,ka dib cararkiisii Hindiya ay Tataarku qabteen qoyskiisi birtana ka asleen intoodii badnayd,qaarna ay kaxaysteen,waxa uu ka mid ahaa Maxamuud Ibn Mamduud kuwaas la kaxaystay,markaas ayey u bixiyeen magac Magooli ah ((Quddus)) waana kelmed macneheedu yahay ((Ey dad qaad ah)) yaraantiisiiba waxaa laga arkayey calaamado awoodeed iyo raganimo ba'an,ka dib waxay ka iibiyeen Tataarku suuqa addoomada lagu kala iibsado ee Dimishiq,waxaa iibsaday mid ka mida Ayuubiyiinta,ka dibna wuxuu la yimid Masar,ka dibna waxaa kala wareegay nin kale,ilaa uu soo gaadhay kama dambaystii boqorkan Almucissu Cissu-Diin Aybak uguna noqday kan ugu xoogga badan hogaamiyeyaashiisa sida aynu arki doono.

Waxaa aynu ka arki doonaa qisada Quddus maamulka ilaahay iyo sida uu isagu rabo u ged gediyayo arrimaha Subxaanah..Tataar way dhagreen Muslimiinta,waxay soo xadeen wiil yar oo ka mid ah caruurtii Muslimiinta ka dib iyagii ayey dib uga gadeen Dimishiq.. ka dib waxaa iibsaday mid ka mida ilaa uu u gudbiyo kuwo kale si ay usoo tusaan waddan aanu hore u arag.. waxaaba laga yaabaa da'diisa oo yarayd ogiis in aanu maqalba waddankan hore.. geba gebadiina waddankaas uuba ka noqdo boqor.. ka dibna ay noqoto soo afjarankii Tataarkii ka keenay meel ka mida meelaha dunida ugu fog ilaa Masar oo uu isagu gadh wadeen ka noqdo soo afjarankooda.. ilaahay ayaa xumo ka nasahan si fudud isugu beddela arrimaha, ku dhagra xikmaddiisa,waxbana kagama qarsoona samooyinka iyo arlooyinka midna..((waxay dhagreen dhagar,annaguna waanu dhagraynay iyaga oo aan dareensanayn)).

Wuxuu usoo barbaaray Quddus sidii ay u soo barbaari jireen Mamaaliiktu, tarbiyad diini ah oo xooggan ayaa la siiyey,jibbo Islaamiyah oo diineed ayuu ka dhergay,yaraantiisi ayaa lagu tababaray qaababka dagaalka,iyo kaartooyinkiisaba,qaybo ka mid ah Maamulka iyo wadada Hogaamintaba.. wuxuu koray isaga oo ah wiil dhinac walba ka dhisan oo raganimo u dhamaystiran tahay.. jecel diintiisa, waynaya..wuxuu ahaa رحمه الله mid ka adag naftiisa oo sabir iyo dulqaad leh.. intaas waxaa u dheer wuxuu ku dhashay guri boqortooyo,dhallaannimadiisi wuxuu ka mid ahaa dhallaanka madaxda,taasina waxay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

siineysaa in uu wax badan naftiisa ku kalsoonaado,waayo qariib kuma ahayn maskaxdiisa maamulka iyo hoggaamintu,iyo weliba xukunka laftiisu.. waxaaba waxa usii dheer,waxa gurigiis iyo garaacdiisba bi'iyey Tataar oo qoyskiisi xasuuqay,sababtaas darteed_ waxaan shaki ku jirin in uu si xeel dheer u fahamsan yahay Tataar iyo masiibooyinkooda.. kan looga sheekeeyey lama mid ah kan soo arkay.

Arrimahaas kala duwan ee ku kulmay Quddus ayaa ka dhigay Shakhsiyad nooc gaar ah.. waxyaabaha adagi way u fudud yihiin isaga,kama cararo cadawgiisa,si kasta oo ay u badato tiradoodu ama xad-dhaaf u tahay quwadoodu.

Wuxuu leeyahay tarbiyad Islaami ah oo ciidamaysan,wuxuu qabaa rabbaayad ah in uu ilaahay ku kalsoon yahay,diinta ku kalsoon yahay,kalsoonida naftiisuna raad weyn ayey ku lahayd Sayfudiin Quddus laftiisa.

Aynu ku laabanno Masar.

Waa la dilay boqorkii Almucissu Cissu-Diin Aybak, ka dibna waxaa la dilay Islaantiisi Shajratu Durr,waxaa dalkii la wareegay wiilyar oo lagu magcaabo Nuuradiin Cali oo uu dhalay boqorkii la dilay,waxaana kursiga ku wareejiyey Sayfudiin Quddus.

Sidii mar horeba koritaanka kursiga Shajratu Durr ay uga dhaceen Mashaakilaadku,khal khalna ay u gelisay dunida Islaamka oo dhan,ayuu mar labaad koritaanka xukunka Masar Nuuradiin Cali ayey uga dhasheen buuqii iyo sawaxankii hore oo kale,rabshadaha ugu badanna waxaa waday nimankii la odhan jiray Almamaaliik Albaxriya ee dalka ku sugnaa waqtigaas,ee aan raacin qolyihii u yaacay Shaam markii uu talada hayey boqor Almucissi,waxaa madax u ahaa markaa Mamaaliikta Albaxriya ee joogtay Masar nin la odhan jiray ((Sinjar Alxalabi))_kacdoon, wuxuuna ka mid ahaa raggii xukunka doonayey ka dib markii la dilay boqorkii Cissu-Diin Aybak,Quddus ayaa wuxuu amray in lasoo qabto ka dibna jeelkuu dhigay..sidoo kale Quddus wuxuu soo qab qabtay raggii kale ee kacdoonnada hoggaaminayey ee kala duwanaa, ka dib intii soo hadhay ee ka midka ahaa Almamaaliik Albaxriya si deg deg ah ayey uga baxeen dalka una aadeen Shaam,sidaasna waxay u sameeyeen inay madaxdoodii ugu tagaan halkaas,markii ay halkaas ugu yimaadeen madaxdoodii soo fakaday waqtigii Cissu-Diin ayey ku dhiiri geliyeen madaxdii Ayuubiyiinta inay dagaal ku qaadaan Masar,qaar badan oo madaxdaas ka mid ahina way ka aqbaleen,waxaana ka mid ahaa kuwa soo dhoweeyey arrintaas ((Muqiisu-Diin Cumar)) amiirkii ALKARK ((Urdun_ imminka ah) ciidankiisi ayuu markiiba soo dhaqaajiyey si Masar!! loogu duulo,wuxuu ahaa amiir aad u taag daran,laakiin wuxuu lahaa damac ka wayn oo ka badan taagtiisa..! wuxuu gaadhay ciidankiisi durba Masar, waxaa ka hor tegay Quddus si uu isaga hortaago gelitaanka Masar,waqtigu waa Dilqicda sannadkii 655h,ka dib wuu iska noqday Muqiisu-Diin si uu ugu soo xaabo iyo biyo dhaansado kusoo duulitaanka Masar,duullaankiisi labaadna waxaa joojiyey Quddus bishii rabiic Alaakhir sannadkii 656hijriga.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa lagama maarmaan ah in la sheego isku dayga labaad ee Muqiisu-Diin Cumar Ayuubi,waxay ahayd sidaan sheegay bishii rabiic aakhir sannadkii 656h,macnaha waa laba bilood wax ka yar markii la riday ((Baqdaad)) caasimaddii khilaafada Islaamiga..!! bal awooddan miyuu u yeesho Tataar,inta uu dagaal kusoo ekaynayo dadka Muslimiinta!! Waxaa ku dhacay xanuunkii indho la'aanta siyaasadda,kaas oo dunida Muslimka oo dhan waqtigaas ku fidayey ayaamahaas,fidina doona waqti kasta oo ay Muslimiintu ka fogaadaan Rabbigood.!

Baqdaad waxay dhacday sidii inna soo martay,safar 656h, wuxuu bilaabayaa Holaakona duullaankii Shaam,inankiisi Ashmudna wuxuu go'doomin saaray Miyaafarqiin bilowgii Rajab 656,wuxuu bilaabay Holaako,in uu kasoo amba baxo Faaris isaga oo bartilmaameedkiisu yahay Shaam soona maraya waqooyiga Ciraaq,sannadkii 657h,wuxuu soo qabsadey Nisabii, Raha,Ilbiira, oo u dhow magaalada Xalab ((Aleppo)).. waxaa iska cad in aanu Holaako seexanaynin ilaa uu Shaam dhamaanteed dhulka la simo,Shaam dabadeedna waxaa khasab ah inay tallaabada ku xigtaa Shaam tahay Masar.

Quddus inkasta oo uu ahaa xaakimka dhabta ah ee kala debberaya arrimaha Masar,haddana cidda ku fadhidaa kursiga waa wiil yar,taasna shaki kuma jiro inay hoos u dhigeyso haybadda waddanka,gilgileysona kalsoonida dadka reer Masar, isla markaana xoojineyso go'aanka cadawga Masar markay arkaan waddan ilmo yari haysto.

Waxaa muuqata khatar Tataar oo aad u cabsi badan,mashaakilka waddanka gudihiisuna aad ayey u badan yihiin una cakiran yihiin, kacdoonnada ay wadaan Almamaaliik Albaxriya.. damaca waddankan kaga jira madaxda Ayuubiyiinta Shaam..muuqaalladaas oo dhan wax uu ku macneeyo wuu waayey Quddus maadaama uu xukunkii haysto wiil yari ((Nuura-Diin Cali)) macnaha kursigii dawladdii ugu muhiimsanayd mandaqaddam,dawladdaas oo la hubo haddaan lays hortaagin inay shaki la'aan soo gelayaan Tataar.

Halkaas ayuu qaatay Quddus go'aan aad u afaysan,go'aankaasina waa in uu casilo Suldaanka yar Nuuradiin Cali,isla markaana uu isagu qabsado oo ku fadhiisto Carshiga Masar,go'aankani ma uu ahayn mid la yaab ah,waayo wuxuu ahaa maamulaha dhabta ah ee waddanku Quddus,dhamaan inta kale oo uu ku jiro boqorkan yarina way ogaayeen si buuxda,laakiin waxaa kasoo horeeya oo qariyey Quddus sawir yar oo u eg kuwii laga maadeysan jiray,sawirkaasina waa Suldaankan yar ee fadhiya halkii dawladda laga wadi jirayba,Quddus ilaa uu iska qaado sawirkaas yar si uu Libaaxu gacmihiisu adduunyada beddeli doonaan u muuqdo,ninka beddelay Juquraafiyaddii caalamka, wax weynna ka beddelay taariikhdii dunida ee waqtigaas.

Arrintaasi waxay dhacday afar iyo labaatankii Dilqicda ee sannadkii 657h, waxyar ka hor intii aanu Holaako soo gaadhin Xalab.. waa mudadii uu kursiga ku fadhiistay Quddus isaga oo u diyaar garoobaya la kulanka Tataar.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa dhici doona dhacdooyin ka mid noqday jidhka dhulka Masar.

Waxaa soo bixi doona jiil cusub oo sebenkaas loo baahnaa.

Waxaa kor loo qaadi doonaa calan aan muddo badan la taagin.

Waxaa la diyaarin doonaa ciidamo aan muddo dheer la diyaarin.

Waxaa imaan doonta maalin ka duwan maalmihiis sebenkaas.

Siday u dhici doonaan waxyaabahaas oo dhammi?!!

Taas waxaa dheeraanaya sharrexeeda,waxaynuse ka dhigi doonaa mawduuca soo socda.

((u diyaar garoowgii Caynu Jaaluut)).

u diyaar garowgii Caynu Jaaluut

((Masar)) maxaa ku xeeran.. dagaalka ka hor: waxay ahayd xaaladda waddanka Masar markii ay Tataarku qabsadeen Shaam una soo dhowaadeen daaraha Masar mid aad laga naxo.. masraxa siyaadda gudaha waxaa ku dhacaysay tarshadda mawjado dabaylo xooggani wadaan, waxaa ka jirtay isfaham la'aan kala fog oo aad u daran.. fitnada keliya ee ka masuulka ahaydna waxay ahayd kursi jacayl loo kala tartamayey kursigaas xukunka_ gaar ahaan tobankii sano ee u dambeeyey_ tartan ba'an oo weliba soo noqnoqonayey.. haa way degtay arrintaasi ka dib markii uu xukunka qabsadey boqor Cissu-Diin Aybak taasina waxay ahayd toddoba sano oo xidhiidh ah,laakiin waxaa dabkii dib u shidmay,ololkiina samada ku xidhmay markii la dilay Cissu-Diin Aybak,ka dibna Shajratu Durr, ka dibna xilkii lagu wareejiyey Nuradiin Cali Cissu-Diin,ka dibna uu kursigii inqilaabay Quddus.. inkasta oo uu kursigii ku fadhiyo Quddus imminka,laakiin waxaa badan inta damacu ka hayo kursigan,waxaa kale oo aan shaki ku jirin inta xiqdi iyo xaasid dartiis aan u oggoleyn kursiga shakhsiyadda Quddus,waxaase hubaal ah in kuwan iyo kuwaasba uu dhowaan dhaqaajin doono_ ama ay dhaqaaq isku deyi doonaan_ oo ay candhuuftooda

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ka liqi doonaan kursiga iyo Quddus,ama dilkiisaba xataa.. sidii ay isku deyayeen in badan oo ka mid ah Mamaaliiktu inay sameeyaan.

Waa inay maskaxda kuugu jirtaa in fiintu dhex miranayso labadii qaybood ee Mamaaliikta,taasina ay lafteedu qayb ka tahay hurinta fitnada: Almamaaliik Albaxriya oo taageersanaa Shajratu Durr iyo Almamaaliik Almucisiyah oo taageersanaa boqorkii Almucissi Cissu-Diin Aybak, qaybo badan oo ka mid ah Almamaaliik Albaxriyana ay u kala baxsadeen imaarado kala duwan oo ku yaalla Shaam,inta joogta ee Masar ku hadhayna waxay la joogtaa damac iyo doonitaan kursi..sidaas ayaa loo kala qaybsan yahay_ shaki kuma jiro kala qaybsanaantaasi inay wiiqayso awooddii Masar,sababtoo ah Almamaaliik Albaxriya waxay ahaayeen ciidanka laf dhabarta iyo aas aaska u ahaa Masar waqtigaas.

Haddii xaaladda siyaasadeed ee gudaha iyo ciidan ee Masar ay muuqaalkaas khatarta badan lahayd .. masraxa siyaasadda arrimaha debedduna waxaa curyaamiyey mashaakilaad badan.. waxaa ka mid ahaa in xidhiidhkii u dhaxeeyey Masar iyo jaarkeedu uu gebi ahaanba taagnaa oo googo'ay.. cilaaqaadka dibloomaasiyadeed ee imaaradaha Shaam oo dhamina wuu go'naa, haddii ay jirto cadaawad aad u darani, waxay ahayd tan ka dhaxaysay Masar iyo Shaam,sidoo kale may jirin Masar cid ay ku tiirsato oo ka mid ah dawladaha waqooyiga Afrika sida Suudaan.. taas macneheedu waxaa weeye in arrimahan casilan ee liita u sahli doonaan dugaagga reer Tataar inay si dhibyar u laqaan Masar siday ku sameeyeen qayrkeed.

Xaaladda dhaqaale ee Masar may ahayn iyaduna mid ku sugan xaalad ka wanaagsan siyaasadda arrimaha gudaha iyo ciidamada iyo weliba masraxa siyaasadda arrimaha dibedda,waxaa ka jirtay xaalad dhaqaale oo aad u xun,taas oo ay sabab u ahaayeen dagaaladii Kiristaanka ee soo noq noqonayey,iyo dagaaladii ay Masar kula jirtay jiiraankeeda Shaam,fitnooyinka ku salaysanaa loollanka siyaasadda oo cirka marayey gudaha waddanka.. dadka oo dhammi waxay ku mashquulsanaayeen gudahooda,iyo dhibaatooyinka ka taagnaa,dhibaatooyinka siyaasadda debedda,dhaqaalihii ayaa dhulka galay,ilaa uu gaadhay derejada ugu hooseysa,waddankii markaa wuxuu galay xaalkiisi Abataqan ay adag tahay si looga soo baxaa.. iska daa inay dagaal galaane.

Waxaas oo dhami iyaga oo jira,ayey cadawgii ummaddani isu soo habar wacdeen, waxaa khasab ah in Kiristaanku nacayb aad u daran u hayaan Masar,waayo waxay gaadhsiisay Masar jabab ay ku yar yihiin noocooda oo kale taariikhda Caalamka,weliba muddo ka yar toban sano gudohood oo ay ka mid ahaayeen Almaansuurah,iyo Fariskoor,markaa shaki kuma jiro inay Kiristaanku doonayaan aargoosi,isla markaana uga faa'iideystaan kacdoonadan waddanka ka jira,si ay riyadooda u rumeeyaana waa inay duullaan soo qaadaan.

Waxaa jirtay imaarad yar oo Kiristaan ah oo lagu beeray Falastiin muddo toban sano ah.. dhinaca kale ee barina waxaa kasoo socda Nibirigii waynaa … waa Tataar.

((Quddus)).. tallaabooyinkiisi wax beddelka:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waddan sidaas ah ayuu qabsaday Quddus,waxaa horyaalla Culays hammi iyo mashaakilaad aan la koobi Karin,

Laakiin sidee_Quddus u maareeyey xaaladdan si looga baxo dhibaatooyinka?!

Maxayse ahaayeen tallaabooyinkii uu qaaday si uu wax u beddelo?

Muxuu ahaa talaabooyinkii diyaar garoow ee uu qaaday si uu u waajaho Tataar?

Dhibta in dhan looga soo wada jeesto:

Tallaabada koowaad ee uu ku dedaalay Quddus_ in uu dejiyo xaaladda gudaha ee Masar,iyo in uu jaro damaca kuwa kale ee kursiga uu ku fadhiyo doonaya,waayo qofka damac kursi ku jiro naftiisuna degi mayso,xaaladdiisuna sugmi mayso ilaa uu kursiga ku fadhiisto,arrintaas hadaba sidee ayuu u maareeyey رحمه الله؟!?

Kuma uu goynin damacii dadka doonaya kursiga dariiq hanjabaad iyo cago jugleyn ah_ laakiin wuxuu sameeyey taas mid lid ku ah,waayo waxay kusii shubaysaa dabkii baxayey gaas,waxaa si wayn u huraya xiqdii quluubta iyo xasadkii markaas ayey isla karaysaa,kuma gooynin in uu soo bandhigay doonista shacabka,oo ma odhan kursigan waxaa fadhiyaya cidda shacabku raalli ka yahay,waayo dhamaantood way wada ogyihiin in shacabku doonayo majoorati isaga,sidoo kale kuma goynin khiyaamo,qish, xal raadin dhagaraysan iyo mu'aamaraad midna laakiin_Quddus رحمه الله؟! wuxuu kor usoo qaaday ((Akhlaaq)) aan muddo badan hore loogu arag waddanka Masar.

Quddus wuxuu shir u wacay hoggamiyeyaashii,dadkii ugu waaweynaa,culimadii, iyo waxgaradkii reer Masar,dhamaantoodna waa dadkan uu isagu yeedhay waa dadkii xukumi jiray shacabkan kala duwan ee iswada khilaafsan, wuxuuna si cad ugu yidhi: "anigu wax kale ugama jeedo (kursigan aan inqilaabay iyo xukunkan) aan ahayn in aan u midowno dagaalka Tataar,taasina dhici mayso haddii aanan kursigan ku fadhiisan,markaynu ka baxno ee aan jebino cadawgaas, arrintu idinka ayey idiin taalla, cidda aad doontaan u dhiibta".

Bulshada intii hogaamin jirtay ayaa maraysa arrinkaasna raalli ayey ka noqdeen oo way la qaateen.

Wuxuu ku dedaalay Quddus sidii uu ugu ban bixi lahaa cadawgaas soo socda,iyo siduu uu u muujin lahaa xeeldheeraanta fekerkiisa fog ee uu darteed u fuulay kursiga.. waxaa la ogyahay dhibaatooyinka umadi ku jirto si kasta oo ay u badan yihiin in la mideyn karo haddii uu hoggaamiyuhu wanaagsan yahay,isla markaana si wanaagsan uga faa'iideysto shacabka.. waxaana ugu muhiimsan horta in dadka la mideeyo ooh al saf la noqdo: ((JAHAAD)).. sidaa darteed hoggaamiyaha shacabkiisa mideyn kari waaya iyada oo jihaad la gelayo,wuxuu ku guuldarraystaa badanaa sida caadada ah jacaylkii shacabkiisu u hayey.. xilkii ay ku aamineen laftiisa waa uu ku

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

gabood falay ka dibna wuu waayaa xilkaas laftiisa,qalaaqalka iyo fitnaduna way ku bilaabmaan,waayo dadku way dhibaataysan yihiin haddii laga saari waayo waxay ula soo jeesanayaan dhanka hoggaamiyaha markaas ayey kula kacayaan waxkasta oo ay xumaan u arkaan..dhinac kale koru ma taagin hogaamiye Muslim ah_taariikhda Muslimiinta_ calanka jihaadka isaga oo qalbiga run ka sheegaya ilaa waddankiisu wuu xasilaa oo cago dhigtaa,shacabkiisuna waxay la daba istaagaan jacayl iyo hambalyeyn.

Intaas waxaa dheer inuu Quddus arrinka xukunka shacabka gacmaha u geliyey isaga oo aan kusoo koobin qoys mucayin ah iyo Mamaaliikta laftooda midna.

Mana wanaagsana in aan arrintaas ku fasilo sida falanqeeyayaasha reer galbeedku u shaandheeyaan ama hogaamiyeyaal Muslimiin ah oo badanaa ka shidaal qaata afkaarta malcaamadaha reer galbeedka oo tusaale ahaan ay yidhaahdaan: wuxuu sidaas u sameeyey Quddus si uu ugu beer laxawsado dadka, kursigiisana ugu xasilsado isaga oo ka faa'iideysanaya jacaylka dadku ay jecelyihiin jihaadka.. inooma toosna inaynu dhexgallo niyadda Quddus_ رحمه الله؟!_iyo inaynu ka dhigno kelmedahani waxaa ka dambaysa ujeeddooyin kale,intaas waxaa dheer in malaha wanaagsan laga qaato qofka Muslimka ah waa arrin sharci ah oo fiican,hadalka iyo ficilka waa laysu miisaama badanaa si ay taariikhda shakhsi iyo noloshiisaba u iftiimiso,waxaynu aragnay Quddus taariikhdiisa markii uu xilka qabsaday ka dib,waxaynu aragnaa tallaabooyinkiisi u diyaar garoobista Caynu Jaaluut,waxaynu arki doonaa iyada oo lagu gudo jiro goobtii Caynu Jaaluut lafteeda, waxaynu arki doonaa Caynu Jaaluut dabadeed.. waxaas oo dhan marka aynu aragno waxaa kuusoo bixi doonta in hadalkiisani uu yahay mid run ah,iyo jacaylkiisa in uu la dagaallamo Tataar diintanina ay guuleysato,ay ka sarreyso jacaylkiisa kursigan uu u qabo.. iyo in uu ilaahay SW guusha ummaddan u geliyey gacmihiisa sida aan arki doono, sunnada ilaahayna maba aha_ in uu guusha umadda gacanta u geliyo munaafiqiin iyo faasidiin.

﴿إِنَّ اللَّهَ لَا يُصْلِحُ عَمَلَ الْمُفْسِدِينَ﴾[يونس: ٨١].

Ilaahay ma wanaajiyo shaqada faasidiinta

Waxa kale oo aan dhicin in uu taariikhda Muslimiinta ku jiro shakhsi qalbigiisu aanu daahir ahayn oo waxyaabo badani iskaga dhex daadsan yihiin,oo dabayli iska wadato marbana dhinac u janjeedha,sidaa darteed ayuu u yahay Quddus nin aynu khayr u xisaabino,Ilaahay cidna uma daahirsiinayno,waayo isaga ayaa uga aqoon badan cidwalba,laakiin waxay isku raaceen culimadii umaddu caddaaladiisa,wanaagiisa iyo alle ka yaabkiisa.

Waxaaba laga yaabaa mar kale inay falanqeeyayaasha siyaasadda ee reer galbeedku yidhaahdaan Quddus wuxuu u jeeday boqornimada laakiin jihaad uma jeedin,waayo

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

siyaasadooda ayaan arkin wax aan ka ahayn xukunkaas,waayo wax ka dambeeya kuma xisaabtamaan,haddii ay qollada Muslimiintu ugu cudur daaraan ma aqbalayaan,in tusaalahaas yaabka leh ee aan qofna la jeclayn naftiisa uu sameeyo,sababtoo ah Quddus wuxuu u hibeeyey naftiisa ilaahay,diintiisa,shacabkiisa,iyo dhibaatada ummaddiisa haysatay.. tusaalahaasi aad ayuu ugu badan yahay umaddeena dhexdeeda,si waynna wuu ugu soo noqnoqdaa taariikhdeena.. waxbadan ayuu Quddus arrintaas kaga tegay geesiyaasheena,halka kuwo kalena ay gaadheen khayrkaasina umadda wuu ku dhex jiri doona ilaa maalinta Qiyaame.

Ka dib wuxuu dib ugu noqday dawladdiisi isaga oo isticmaalaya akhlaaq aad u sarreysa,ujeeddo fogna leh,wuxuu eegay hoggaamiyeyaashi ciidamada iyo dhamaan dadkii aan xamilli karaynin hawshan adag ee uu diyaar garoobayay.. sidaa darteed wuxuu casilay qaar ka mida madaxdii dawladdii uu hogaaminayey waxaana ka mid ahaa ((Ibn Bint Alacis)) wuxuuna ku beddelay wasiir kale oo uu ku kalsoon yahay kartidiisa iyo awooddiisaba waa ((Saynudiin Yacquub Bin Cabdi Rafiic)) isla waqtigaas wuxuu hoggaanka ciidamada u dhiibay jagadiisi ((Faarisu-Diin Aqdaay Alsaqiir Alsaalixi)) (oo ka mid ahaa Almamaaliik Albaxriya),haka mid ahaado laakiin wuxuu ku qancay kartidiisa iyo hogaamintiisa ciidan,daacadnimadiisa iyo waxyaabo badan oo daruuri ka dhigtay in uu xilkaas mutaysto.. dabcan Faarisudiin Aqdaay Saqiirkani maaha hogaamiyihii ciidamada ee Almamaaliik albaxriya ee la dilay sannadkii 652h (dhacdooyinkan ka hor lix sano).

Quddus wuxuu ku caan baxay Amaano,xilkana wuxuu u dhiibay ciddii xaq u lahayd,isaga waxba kama gelin ciddii ka mid ahayd Almamaaliik albaxriya, ama almucsiyah..arrintaasi waxay si cad inoo tusaysaa shakhsiyadda Quddus.. sida uu u lahaa khibrad dhinaca siyaasadda ah.. wuxuu kusoo jiidanayaa quluubta Mamaaliiktii u baxsaday Shaam iyo Turki,sidoo kale waxay arrintaasi gelinaysaa naftooda xasillooni iyo degganaan,shaki kuma jiro inay arrimahaasi ka qayb qaadanayaan degganaanshaha xaaladda Masar,sidoo kale wuxuu dalka uga faa'iideynayaa khibradaha ay leeyihiin Almamaaliik Albaxriyah.

Sidoo kale wuxuu Quddus u dhaqaaqay qabqabashada raggii madaxda ka ahaa foodooyinka iyo kacdoonada dhamaantoodna xabsi ayuu cagaha u dhigay,sidaas ayey arrimihii oo dhami u qaboobeen.

Wuxuu ogaadey Quddus,haddaan dadka lagu mashquulin Jihaad inay iyagu isku mashquulayaan,sidaa darteed markii uu magcaabay wasiir Saynudiin iyo hogaamiyaha ciidamada ee Faarisudiin Aqdaay wuxuu amar ku siiyey inay diyaariyaan ciidamada oo heeggan geliyaan,oo ay aad u diyaar garoobaan,safafka nidaamiyaan,dadkii waxay ku mashquuleen arrimahaas cajiibka ah..aadna muhiimadeeda u leh waayo waa ((aljihaad fii Sabiilillaah)) sidaa darteed talaabadii koowaad ee Quddus waxay noqotay gacan ku dhigista xaaladda gudaha ee dalka,dadkiina wuxuu ku mashquuliyey arrimo mideeyey,iyo inay u banbaxaan hadafka xaqiiqada ah ee looga baahan yahay hoggaamiye Muslim ah,hadafkaasina

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

waa in uu nooleeyo sharciga,isla markaana difaaco waddanka,iyo in uu isku mashquuliyo maxastiisa iyo biri-mageydada Muslimiinta,iyo ilaalinta danaha shacabkiisa,muhiimadda xilku maaha xoolo ururs i,iyo in aad caruurtaada u damaanad qaadid inay xukunka kaa dhaxlaan,ama si caruurtaada looga sii dhaxlo Abadan..!!

Sidaas ayey ku xasileen arrimihii gudaha ee Masar..kuna midoobeen safafkii ummaddu,taasina waa tallaabo aad muhiim ugu ah dhisid umadeed.

In lays cafiyo si dhab ah:

Tallaabada labaad Quddus_ u diyaar garawgiisi dagaalka Tataar waxay ahayd tallaabo aad u qiimo badan xikmadina ay ku duugan tahay,sheegaysana akhlaaqda Quddus ee sarraysa.

Wuxuu soo saaray go'aan sheegaya in dhamaan cafis ((xaqiiqo)) la cafiyey Almamaaliik albaxriya gebi ahaantoodba..!!

Marka uu leeyahay _xaqiiqo_ wuxuu uga jeedaa cafis aanay ku jirin khiyaamo siyaasadeed oo dabin lagu soo ridayo, sidoo kale cafis kaasi ma uu ahayn mid bishii ((malabka oo kale ah)) oo ku dhamaanaya waqti cayiman oo inta amuuruhu kala degayaan oo kale ah.. balse wuxuu ahaa mid hadafkiisu yahay in lagu bartilmaameedsado danaha Muslimiinta ee dhabta ah in laga fekero,runina ay asal u tahay,ka dibna wuxuu iska xidhay dhamaan ilihii xumaanta oo dhan.

Waa go'aan yaab leh.. isla markaana lid ku ah siday ay sameeyaan qaar ka mida Siyaasiyiinta aan waxbadan ka fahamsanayn siyaasaddu,sidoo kale ay seegtay inay kasi karaan meelaha ay ku jirto awoodda dalkoodu,ka dibna si aan dibloomaasiyadi ku jirin isku daya inay u tacaalaan dhacdooyinka..markaa waa in uu awoodda ku koobo in isaga khaas u ah isaga oo aan dan kala hayn cid kale,waxayna keenaysaa khilaaf iyo kala tagsanaan! Mararka qaarkood wuxuu ka xannibayaa xorriyaddaba,markalena waxaa uu ka saaraya waddankaba kuna suntayaa qaswadayaal,waa in uu sidaas sameeyo,iyo inuu iska indho tiro sidii waxaan jirinba kasoo qaado.. madaxa ayuu tamuuxda gelinayaa..ma oga joogitaankooda.. wuxuu dafirayaa awoodooda iyo kartida ay leeyihiin..qarinayaa waxay galaan iyo waxay gudaanba…

Dhamaantood ficilladaasi_ shaki kuma jiro in aanay ka dhalanaynin maslaxadda waddanka ama maslaxadda Shacabku.

Quddus miyaa,waa nin naftiisa Ilaahay u bandhigay.. jecel waddankiisa iyo umaddiisa.. wuxuu samaynayaa waxa maslaxada waddanku ku jirto,xataa hadday khatar gelinayso kursiga uu ku fadhiyo.

Way ina soo martay siday u dhacday fitnadii dhexmartay Almamaaliik Albaxriya iyo Almamaaliik Almucisiyah,bilowgeeduna ahaa (652h) ka dib markii la dilay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

hoggaamiyihii Faarisu-Diin Aqdaay ee Almamaaliik Albaxriya,ka dibna ay noqotay in sida digada ay hoostaas ka hullaaqdo ilaa ay gaadhay markii dambe kuruskii oo la dilay boqor Cissu-Diin Aybak,ka dibna Shajratu Durr,ka dibna ku xigeenkii Faarisu-Diin ee dhinaca ciidamadu Ruknu-Diin Baybaras,ay u kala yaaceen imaarado kala duwan oo ka jiray Shaam,ayna ka mid ahaayeen qaar ku dhiirigelinayey madaxda Shaam inay duullaan ku qaadaan Masar,arrintuna ay gaadhey meel khatara..markii uu kursiga qabsaday Quddus ilaahay haw naxariistee uu soo saaray go'aan xikmad badan oo ah in la cafiyo dhamaan Almamaaliik Albaxriyah,uguna baaqay inay kusoo noqdaan waddankoodii Masar.

Waa go'aan geesinimo leh,isla markaana uu ku illaabay dhamaan wixii hore u dhacay,isaga oo awooddu gacantiisa ku jirto,Edaabta ugu sarraysaa waxa weeye ((adiga oo awooddii haysta marka aad iska saamaxdo)) sidoo kale wuxuu soo bandhigayaa qodobkani siyaasadda Quddus iney ahayd siyaasad fog oo gun dheer,xoogagga Masar ee Almamaaliik Almucisiyah,may ahayn kuwo ku filan iska celinta Tataar,shakina kuma jiro in awoodda Almamaaliik Albaxriyah,ay ahaayeen awood wayn oo aad u xoog badan,khibrad ballaadhanna ay u leeyihiin dagaallada,uuna kala qayb galay waxbadan oo dagaalladii Kiristaanka ah ee ay ugu caansanayd ((Almaansuurah)) taas oo imminka laga joogo muddo toban sano ah (648hijriyah) isku darka labada Mamaaliik ay kasoo dhexbaxaso awood wayn oo loogu babac dhigi karo Tataar weerarkooda,waxa kale oo aan cidna shaki kaga jirin in midowgu ka mid yahay asbaabaha guusha,halka kala tagga iyo tafaraaruquna yahay waxyaabaha jabka,iyo fashilka horseeda.

Quddus wuxuu ogaa in xaaladda Almamaaliik Albaxriyah ee Shaam aanay degganayn,waxa keliya ee halkaas geeyayna ay tahay amaankooda,hantidooda,noloshooda oo ay u baqeen,isaguna go'aankaas aadka u heerka sareeya,wuxuu keeni doonaa tiro badan oo aan wax dhib ahi kasoo horeyn lana gaadhsiinaynin,wuuna kaga dhabeeyey sidii uu sheegay,waqtigii uu shaaciyey go'aankaas Mamaaliik Albaxriyana waxay isaga habar wacdeen wadamada Alsalaajiqa Ruum,(Turkiga imminka), Alkark,(Urdun imminka),Dimishiq iyo meelahaas kale,waxay noqdeen awood cusub mar labaad,si wanaagsanna wuu usoo dhoweeyey Quddus,iskamana uu waynayn sababtoo ah dawladdii ayuu gacanta ku hayaa,wuxuu ula dhaqmay sidii uu yahay mid ka mid ah.

Haddii uu ficilka Quddus ee ku aaddan Almamaaliik Albaxriya ahaa mid qaaliya,mid kasii qaalisan ayuu haddana ku qaabilay hoggaamiyahoodii Ruknu-Diin Baybaras.. Baybaras waa ninka ugu khatarsanaa,haddii uu Quddus ku yaqaanay khiyaamo,dano kale in laga leeyahay oo siyaasadeysan weligiis ma yimaaddeen Masar..

Baybaras markii uu Masar ka firdhaday wuxuu u tagay Naasir Yuusuf-kii khaayinkii garabka siiyay marar badan Tataarka, oo sheeganayay Jihaad in uu imminka kala hor tegayo marar kale, Naasir Yuusuf waa ninkii Baybaras iska indhotiray fekreddiisi ahayd inaynaan Tataar isu dhiibin, dagaalkana iska diidey,ka dibna markay usoo dhowaadeen Tataarku Dimishiq wuxuu u cararay isaga iyo ciddii la socotay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Koonfur,ee uu iskaga hadhay Baybaras markii uu arkay in uu fekerka jihaadka keli ku yahay,isaguna wuxuu iska aaday koonfur isaga oo u jeeda Falastiin,halka uu cararkii ku galay Naasir Yuusuf Kark ka dibna ilaa saxaraha.. ka dibna keli ayuu Baybaras ku noqday Qaza wuxuu sameeyona wuu garan la'aa!!.

Isaga oo xaaladdaas adag ku jira,adduunyadiina kusoo yaraatay,waa ninkii ahaan jiray taliyaha ciidamada Almamaaliik Albaxriya sida ay u dhan yihiin,yacnii wasiirka dagaalka ee Casrigeenan oo kale, isaga oo maskaxdiisu kala maarayn kari la'dahay dawladdii adduunka ugu xoogga waynayd oo ku soo maqan iyo boqorkiisii oo saxaraha u cararay,Masarna waa tii uu kasoo cararay..halkaas adag iyada oo arrini u taagan tahay_ ayuu imanayaa hadalkii Sayfu-Diin Quddus,oo usoo bandhigaya inuu soo galo Masar,isaga oo sharaf iyo karaamo leh madaxana sare u taagaya oo jagadiisina uu qabsanayo..!! sharaf Quddus yaa kaa akhlaaq wanaagsan..! sidaad siyaasad u fahamtay!.

Quddus wuxuu fahamsan yahay arrimo badan oo muhiim ah:

Kow_ isku fillaansho dhinaca dagaalka ah oo aad u saraysa,kaartooyinka hoggaamineed oo heer sare ah ayuu ku tebayey Ruknu-Diin Baybaras,qiirada Islaamiga ah ee uu leeyahay hogaamiyahani waa mid dhif ku ah dadka.

Labo_ caqli iyo garasho badnaan uu caan ku yahay Baybaras,ayuu doonayaa Quddus in uu kaga faa'iideysto dagaalka Tataarka halkii uu gudaha waddanka kusoo weerari lahaa isla markaana u adeegsan lahaa Almamaaliik Almucisiyah.

Saddex_ xukunka loogu dhiibaa Mamaaliik Albaxriyah Ruknu-Diin Baybaras,haddii uu ka maqan yahay oo debed wareegyahay dhamaantood aamin lagama qabo inay kaaga baxaan dagaalka marka ay doonaan, markaa waxaa aas aas looga dhigay in uu madax u ahaado ciidankiisa,qadderkiisana la sheego oo lagu sharfo xilka,si looga faa'iideysto khibraddiisa iyo awooddiisaba,sidoo kale waxay tani damaanad qaadeysaa in shakigii laga qabay nimankan uu meesha ka baxo,sidoo kale in loo midoobo dagaalka Tataar,waayo dagaal gudaha ah oo weliba dhinac ahi macno ma samaynayo.

Sidaa darteed markii uu soo galay Baybaras Masar,intii aanu soo gaadhin Quddus,arrinkiisa ayuu waynayey si aad ah,wuxuu dejiyey daarihii wasiirada mid ka mid ah,wuxuu sheegay qadderkiisa iyo qiimaha uu leeyahay,xataa wuxuu jarayba ((Qaliyuub)) iyo degaamada ku xeeran,wuxuu ula dhaqmay sidii in uu soo socdo amiir ka mid ah amiiradii waaweynaa,wuxuu u dirayaa sida aynu arki doono ciidamo ka hortaga,halkaas waxaynu ka ogaaneynaa Quddus_ saamaxaaddiisa isaga oo awooddii gacanta ugu jirto waa sharaf, sida uu dadka u garanayo qof walba martabaddiisa,fahamkiisa siyaasadda oo xikmadeysan,iyo sida uu ugu dedaalayey midnimada,waxaynu kale oo ka baranaynaa shay aad u muhiim ugu ah Islaamnimada: macno ma sameeyo haddii uu qofku barto siyaasaddo oo weliba ku noqdo ragga ugu horeeyo haddii aanu asluub iyo akhlaaq lahaynin,siyaasadda Islaamku maaha munaafaqnimo,siyaasadda Islaamku maaha dulmi,siyaasadda

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Islaamku maaha kibir,maaha siyaasadda Islaamku in aad damiirkaagii waydo,oo ballanta aad ka baxdid,ama heshiis aad gashay burisid.. laakiin siyaasadda Islaamku waa inaad oofisaa dhamaan waxyaabaha diinta ku salaysan.. macquul maaha xaalad kasta oo aad ku jirtid in aad kala saartid diinta iyo siyaasadda,iyo in aad u isticmaashid wejiyo ka duwan Islaamnimada.. sida aan ka baranay Quddus in hogaamiyaha ku kalsoon naftiisu uu oggolaado xataa hadday ka cad cad yihiin inay awoodaha kale dhinaciisa ka muuqdaan,taasina waa arrin lidku ah sida ay sameeyaan in badan oo ka mid ah hogaamiyeyaasha daciifka ahi,ma oggolaan karaan inay awood kale wax ka daahfurto agtooda amaba taagan tahayba,taasna waxay uga baqayaan in aanay dadku jeclaan kartidooda iyo caqligooda ama siyaasadoodaba oo aanay adigana kuu nin qofkan kalena u jeclaanin,wax kalena sidaas uma dareemayaan quluubta madaxdaasi aan ahayn waxay ogaadeen daciifnimadooda,iyo inay ku guuldarreysteen hanashada jacaylka shacabkooda,laakiin Quddus ma ahayn noocan oo kale..wuxuuse ahaa hogaamiye awood leh,caqli badni iyo ikhlaas isku darsaday,soo jeeda oo aan seexan waqti hore,jecel diintiisa,waddankiisa iyo umaddiisa..waxyaabahaas oo dhan ee naftiisu leedahayna wuu fahamsanaa,dadkuna way ku ogaayeen oo waa ay yaqiineen,ka dibna jiri maayo wax uu uga warwareegaa ama uga cabsadaa.

Sidaas ayey ugu soo darmeen ciidamadii _Mamaaliik Albaxriya oo uu hogaaminayo Ruknudiin Baybaaras ciidankii_Masar ee Muslimka ahaa, shakina kuma jiro inay taasi kor u qaadayso mooraalka Masaarida.

Waxay ahayd tallaabadii lagu cafinayey Mamaaliik albaxriyah,tallaabooyinkii ugu waaweynaa ee uu Quddus qaaday noloshiisa_ waxay ahayd talaabo wayn.

Hadaba tallaabadii u horeysay ee Quddus waxay ahayd inuu dejiyo xaaladda gudaha ee waddanka,tallaabadii labaadna waxay ahayd in la soo celiyo xoogagii baxsaday ee Almamaaliil Albaxriya,si looga faa'iideysto khibradooda iyo kartidooda awoodeed,isla markaana lagu xoojiyo ciidamada waddanka.

Qorshihii in laysku daro Masar iyo Shaam:

Tallaabadiisa saddexaad waxay ahayd mid wax ku ool ah..! waxay ahayd tallaabo aad cajiib u ahayd..!!

Markii uu dejiyey xaaladdii ((gudaha)) ee dalka Masar, wuxuu ku dhaqaaqay sidii uu xasillooni ugu soo dabbaali lahaa arrimaha ((debedda)) ee dalka Masar oo ay ka mid yihiin jiiraankeeda Muslimiinta ah.

Xidhiidhka ka dhaxeeyey Masar wuxuu ahaa xidhiidh aad u liita sidii aynu soo sheegnay imaaradaha Ayuubiyiinta ee Shaam,oo ay ku fekereen in ka badan halmar inay ku duulaan Masar,way jabiyeen xidhiidhkii ka dhaxeeyey Shaam iyo Masar waqtigii Saalix Ayuub,waxayna soo dhoweeyeen Mamaaliiktii kasoo fakatay Masar,waxayna baasaysanayeen oo sharka oo dhan saarayeen Masar maalintii ilaahay keenoba,waxaynu soo aragnay Naasir Yuusuf amiirkii Dimishiq iyo Xalab oo Tataarka

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ka dalbanayey markii ay Baqdaad dhacday waxyar ka dib inay ka kaalmeeyaan duullaan uu ku qaado Masar..!!

Iyada oo khilaafaadka intaas le'egi dhexgalay Masar iyo dawladihii yar yaraa ee Ayuubiyiinta,ayuu hadana Quddus doonay in uu dib u unko(bilaabo) xidhiidhkii labada waddan ka dhexeeyey,wuxuu ku dedaalay mideynta labada dal,ama xataa ugu yaraan inay ballan qaadaan madaxda Ayuubiyiintu in aanay usoo raacayn Tataarka,ee ay isaga dhexbaxaan, oo aanay dhabarka ka toogan sidii ay damacsanaayeen inay sameeyaan.

Wuxuu ogaadey Quddus_ in qoladan madaxdooda iyo ninka ugu weyn ee xidhana furana in uu yahay Naasir Yuusuf Ayuubi amiirkii dawladdii Dimishiq iyo Xalab,in uu isagu ugu wayn yahay xukumona labadii magaalo ee ugu waaweynaa Shaam, Quddus wuxuu si fiican uga dheregsanaa sida uu isaga u neceb yahay Naasir Yuusuf, wuxuu ogyahay in uu Tataarka ka dalbanayey taageero uu kusoo weeraro Masar..isaga oo Quddus waxaas oo dhan ka warhaya ayuu haddana waraaq u dirayaa debecsan oo hadal aad u qaboow oo deggani ku qoran yahay,waxaadba mooddaa in uu la hadlayo qofkii dadka ugu dhowaa.. wuxuu u dhiibay waraaqdan nin la yidhaahdo ((Almaqriisi))si xudhmadeysan.

Warqaddan waxaa la soo diray intii aanay Tataarku qabsan Xalab,codsigii gacansiinta ahaa ee Naasir Yuusuf Tataar u dirsadeyna weli taagan yahay,ayuu Quddus damcay inay iyagu is gaashaan buureystaan isaga iyo Naasir Yuusuf,isaga oo og ceebtiisa iyo khaladaadka uu galay_ oo ay ka mid tahay in uu kusoo jahayn lahaa ciidamada Shaam,oo laba ciidan oo Muslimiin ahi isku jabi lahaayeen, laakiin Quddus wuxuu ka warhayaa in hadafka ugu wayn Naasir Yuusuf uu yahay in uu kursiga iskaga fadhiyo,wax kasta oo dhacana aan laga furfuraynin,sidaas darteed ayuu Quddus ugu diray warqad aad u cajiiba.!

Warqadda wuxuu kusoo bandhigayaa inay midoobaan,oo Naasir Yuusufna uu noqdo boqorka Masar iyo Shaam..!! wuxuu u sheegayaa in uu isagu_ Quddus_ daba-gale u noqon doono Naasir Yuusuf,iyada oo xaaladda Ciidan iyo awoodeedba uu Quddus kaga wanaagsan yahay Naasir Yuusuf,sidoo kale iyada oo Masar ay tahay dawlad aad uga awood badan labadan magaalo ee Xalab iyo Dimishiq..!!

Wuxuu ku yidhi Quddus warqaddiisa ilaahay haw Naxariistee_ in aanu kula murmaynin boqor Naasir boqortinimada ee uu noqon doono wakiilkiisa Masar uga wakiila,boqor Naasirna marka uu yimaaddo si degdega ugu fadhiisan doono kursiga xukunka Masar..!!

Arrintan oo kale ma malayn karo qofka saaraa miisaanka siyaasadda ee reer galbeedku,suurta galna ma aha inaad fahamto ilaa aad gashid xisaabaadka fog fog ee Imaanka iyo akhlaaqda_ maaha siyaasad oo keliya_ Quddus.

Ka dib Quddus wuxuu u sheegay in Naasir Yuusuf uu shaki ka gelayo arrinta midoobista,ama imaatinka Masar,markaasna wuxuu usoo bandhigay in uu kursiga

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

uga kici doono si ay Tataar isaga celiyaan,inay is gaashaan buursadaan danta ugu jirta ayuu u cadeeyey oo ah inay jebin doonaan Tataar,laakiin haddii aanay iskaashan ay adag tahay in guul laga gaadho la dagaalanka Tataar.

Ka dib si edaab iyo akhlaaqi ku jirto ayuu Quddus u yidhi: “haddii aad I doorato inaad ii timaaddo waan kuu adeegi, haddii aad doorbiddo in aan kuu imaaddona waan kuu imaan aniga iyo ciidamadeyduba si aan kaaga gargaarno cadawga kugu soo maqan,haddii aadan ka aamin qabin imaatinkayga oo shaki kaaga jirona waxaan kuusoo dirayaa ciidamadeyda in alla iyo inta aad ka rabto!!”.

Wuxuu siinayaa arrimo badan oo dani ugu jirto Naasir Yuusuf hoggaamiyihii ciidamada ee Masar si uu uga gargaaro badbaadinta Shaam..!!

Laakiin Naasir Yuusuf ma ajiibin yeedhmadaas aragtida fog,wuxuuna ka doortay kala maqnaanshaha isku darsiga, muxuuse ka dhaxlay?

Waqtigii ayaa iska gurmay,Xalay ayaa la riday,Dimishiq ayaa la gilgilay,Naasir Yuusuf ayaa u cararay isaga oo khasaysan ilaa Falastiin,Falastiina waxaa kaga dhacay wixii ay khasab ahayd inay kaga dhacaan waqti.. way baxeen ciidamadii Naasir Yuusuf ee adeeci jiray,waxayna doorteen inay ku darsamaan ciidamadii Masar ee uu hogaaminayey hoggaamiye dhaarsan Muslim khaalis ah ((Quddus)) oo ay u caddahay ujeedadiisu,jihaad dar ilaahayna u socda maaha dan kursi.

Qaddarta ilaahay dartiisna noqday hoggaamiyaha keliya ee guuleystay halka Naasir Yuusufna ku guul-darraystay imtixaankiisi, wuxuu ku guuldarraystay Tataarka hortoodii,Quddus hortiisa,ciidamadiisi hortoodii,shacabkiisa hortiisa,imminkay ciidamadiisi u dhaqaaqeen Masar,halka uu kelidiis u cararay dhufeys ku yaallay Alkarki oo Urdun ah,ka dib halkaasina way hayn wayday oo wuu ka cararay dhufeyskii,wuxuu aadey saxaraha lama degaanka ah!.

Cidhib dambeedkii((Naasir Yuusuf)):

Markii uu Yuusuf soo gaadhay meeshii uu kaga dhuuntay saxaraha dhexdiisa_ meel yar oo lagu magcaabo ((Aljafar)) oo koonfurta Urdun ah,waaba koox Tataarkii ka mid ah oo Holaako soo diray ayaa kula kulantay halkaas,way qabteen isaga oo dulleysan isaga iyo wiilkiisi ((Casiis!!)) waxay u dheel miyeen dhinacaas iyo Holaako,laakiin Holaako wuxuu uga amba-baxay Xalab dhinacaas iyo Tabriis,oo ku taalla Faaris sidii aan hore usoo sheegnay,waxay haddana kala daba tageen Holaako oo Tabriis Jooga,intii aan loo geynin Holaako ayuu ka fekeray inaanu dilin ee nolosha ku daayo si uu ugu isticmaalo dalyaqaan Shaam u jooga, waayo khibrad dheer ayuu u leeyahay,khasoobistiisa darteed iskagama wasakhaynin gacmaha ee wuxuu dib ugu dhiibay ciidankii waday si ay Shaam ugu celiyaan,wadada dhexe isaga oo la sii wado ayaa waxaa ka hor yimid qaar ka mida Tataarkii kasoo baxsadey Shaam,ka dib markii lagu jebiyey sida inoo imaan doonta Caynu Jaaluut Naasir Yuusuf ayey arkeen ka dibna iyagaa dilay!.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waa dullinimo halkii ugu dambaysay madaxdii la doonayey inay istaagaan meel madaxa ka saraysa oo aanay sahal ugu gaadheyn Seefuhu,la doonayey inay taariikhda ku waaraan,haddii ay kor u qaadi lahaayeen calankii jihaadka si dhab ah,laakiin waxay ka doorteen dullinimada sharaftii,nolol cidhiidhi ah,hoog iyo hallaag ayey ka doorbideen inay iyaga oo sharaf leh hal mar ku dhintaan jidka ilaahay.

Sidaas ayey ugu siyaaddey Quddus tiradii Muslimiinta ka dib markii ay u yimaadeen ciidamadii Shaam, lana dilay Naasir Yuusuf kii aad moodeysay dhagax yaalla dariiqa Muslimiintu mari doonaan.

Intaas kagama hadhin Quddus waraaqihii uu u dirayey Naasir Yuusuf,laakiin madaxdii hadhayna waa uu u diray waraaqihii ku wajahnaa dedaaladiisi dibloomaasiyadeed,waxaa soo aqbalay amiirkii ((Almansuur)) Xamaa ninkii haystay,isaga oo wata ciidamadiisi qaar ka mid ah si ay u soo haleelaan ciidamada Quddus ee Masar.

Muqiisu-Diin Cumar miyaa waa ninkii Urdun haystaye,wuxuu doortay isagu in uu iska joogo,wuxuu ka mid ahaa raggii ku dhaliyey Naasir Yuusuf fekreddii jihaadka ee sheegashada ahayd,isla markaana uu ku dhaqaaqay Naasir,markii uu cararay Naasir Yuusufna wuxuu Muqiisu-Diin Cumar iskaga soo noqday dhufeyskiisi Urdun,maba aha dadka jihaadka,wuxuuna u hayaa nacayb wayn Mamaaliikta,waana in aan maskaxda ku haynaa in uu labo jeer isku deyay qabsashada Masar,oo labadaas jeerba uu jebiyey Quddus,wuxuu doortay in uu arrimaha dushaas ka daawado si uu hadhoow u raaco kan guuleysta,ha ahaado Muslimiinta ama Tataar.. waajibna may ahayn in uu Quddus kaga maqnaado goobtaas oo kale waynideeda,maadaama oo uu Quddus iska illaaway isku daygiisi ahaa in uu Masar qabsado, wax tafaraaruq ahse kuma keenin dhabbacashadiisa xumi Muslimiinta.

Waxaa yimid ninkii la odhan jiray Ashraf Ayuubi waa ninkii haystay Ximsa isagu waa ka badheedhay si buuxdana waa uu u diiday dalabkii Quddus,wuxuuna doorbiday gacan siinta Tataar si cad,dabcan Holaakona wuxuu siiyey dhamaan dawladaha ka jira Shaam oo dhan in uu ku xukumo magaca Tataar!.

Kan ugu dambeeyaa waa boqor Saciid ((waa naaneystiisa)) ((Xasan Bin Cabdi Casiis)) ninkii haystay Baaniyaas,wuu ka gacan taagtay in uu kaalmeeyo Quddus,waa ninka labaad ee si cad u diidey,wuxuuba ku daray ciidankiisi ciidamada Tataarka,si ay uga kaalmeeyaan furashada wadamada Islaamka..!!

Sidaas ayey uga soo baxeen dedaalladiisi dibloomaasiyadeed arrimo muhiim u ahi.. waxaa la garab noqday amiirkii Xamma ee ((Almansuur)).. waxaa kusoo darsamay ciidamadii Naasir,waxa ka hakadey arrinkiisa Muqiis Cumar Urdun.. natiijooyinkaas waxaynu u arkaynaa guulo aad u muhiim ah inuu ka gaadhay, xataa Ashraf Ayuubi iyo boqor Saciid ku darsigooda Tataar aad ayey muhiim u ahayd,waayo waxay daaha ka qaaddey mawqifkooda,Quddusna waxay ka caawineysaa in uu qorsha ku darsado.

Quddus iyo qorshihiisi:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Kow: arrimihii gudaha ee waddanka oo xasilloon,xukuumadda cusub oo hogaamiye buuxa u aqoonsatay Quddus.

Labo: muhiimadda koowaad ee dawladda xilligan hortaalla way caddahay waana laysla ogyahay,waa diyaarinta ciidan ballaadhan oo xoogan si loogu qaabilo Tataar dagaal wayn oo la kala calaf qaado (waa hadaf cad).

Saddex: saamaxaaddii loo fidiyey Mamaaliik Albaxriya oo keentay jawi degganaanshiinyo ah kalsoonidii naftana buuxiyey qalbiguna ku xasilay dhamaan shacabka reer Masar,maaha oo keliya Mamaaliikta Baxriga oo qudha, waxaa hubaal ahayd inay jireen qolo dhabcaaliin ah oo ku hinaasi sanayd Quddus,kuwaas ayey ka masaxdey fekeradii xumaa,maba aha ciidanka oo qudha,shacabka dhamaantiis,shakina kuma jiro inay aad niyaddu ugu dejisay midoobidda labada dhinac ee Mamaaliiktu shacabka reer Masar.

Afar: waxaa kusoo darsamay ciidamadii Masar ee badnaa,ciidamadii reer Shaam.. kuwaas oo ay ugu badan yihiin ciidankii Naasir Yuusuf,ciidankii Xamaat oo uu hogaaminayo amiirkii Xamaat ee Almansuur.

Xaaladda siyaasadeed iyo ciidan ee Masar sidaas ayey ahayd bilowgii sannadkii 658h,xilligaas oo ay dhacday Xalab,Dimishiq iyo dhamaan Falastiin xataa Gasa waxay ku jirtaa gacanta Tataar,waxaana laysla garanayaa inay Gasa waxyar u jirto xuduudka Masar (wax ka yar shan iyo soddon kiilomitir).

Shacabka.. dagaalka ka hor:

Haddii uu ahaa arrinka madaxda iyo ciidamadu sidaas aan soo tilmaamnay.. sidee ayey ka ahayd marka laga eego dhinaca shacabka arrintu waqtigaas?.

Sidee ayey ahayd xaaladooda naf ahaaneed,mooraalkoodu,dareenkooda iyo hadafkooduba?

Miyey filayeen shacabku inay imaan doonto guusha lagama sheekayaanta ah ee ayaamo yar ama bilo laga soo hoyn doono dawladdii ugu waynayd adduunka korkiisa waqtigaas? Ma awoodeen shacabka Masar inay is hortaagaan dawladaas adduunyada badhkeed ay gacanteeda ku jirto?!

Dhab ahaan shacabku waqtigaas waxay la daala-dhacayeen dhibaato dhaqaale oo aad u qadhaadh,cida caadiga ahna xaaladaha dhaqaale xumadu waa waxyaabaha saameynta ugu badan gaadhsiiya shacabka,wax walba way ka rajo go'aan,wax kale oo aan ahayn sidii ay u soo helilaaheen quutal daruurigooda ma eegaan,ilaa uu yimaaddo hogaamiye agtooda ku wayneeya sharafta ay leedahay dhimashada ilaahay dartiisa loo dhintaa,ee kor u qaada agtooda qiimaha diinta,taasi waxay ka caawineysaa inay la yaraato mashaakilka dhaqaale marka laga eego dhinaca hadafka ka sareeya ee ay tahay inay gaadhaan ((aljihaad fii Sabiilillaah)).. agtooda ayey geeridu ka noqonaysaa wax wanaagsan oo u amaan badan.

Laakiin arrinta uu ku sugnaa waddanka Masar ka dib markii uu la wareegay Quddus waxay ahayd arrin aad u adag; kacdoono iyo mashaakil badan ayaa ku wareegayey

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

kursiga muddo ku dhowaad toban sano ah,ka dib waxay ahaayeen madaxdu kuwo aan ahmiyad badan siineynin shacabkooda'e ee keliya ku mashquulsan sidey u gufeyn lahaayeen ceebta laga sheego xukunkiisa iyo kursiga,waxay ahaayeen shacabku kuwo ugu jira meelo danbe muhiimaddisu halkii ay ugaga jirilaaheen horraanta..sidaa darteed may ahayn shacabka reer Masar kuwo la riyaaqsan dagaalka Tataarka,kuna riyoonaya inay ka guuleysan doonaan, waxay shacabkani murugada iyo niyad jabka kala mid ahaayeen shucuubta kale ee Muslimiinta, waxayna u arkayeen in Tataar qabsan doono maalmo qadhaadhina soo mari doonaan,holacna laga waraabin doono, arrintaasna waxaa sababay markay maqlaan tirade ciidamada Tataarka iyo badnaantooda,mar kasta oo ay soo dhowaadaan ciidamada Tataarka tiradoodu way ku badanaysay maskaxdooda,kolkaas ayey qalbiga ka argagaxaan naftuna ka diddaa.

Qofkii ay laakiin muhiimad u leedahay in uu hanka shacabka kor u qaado,korna u qaado sidoo kale mooraalkooda, kuna abuura xamaasad ay wax iskaga celiyaan.. muhiimaddani waxay ahayd tii ugu adkayd ee ka hor timid Quddus رحمه الله. ciidan aan shacabkiisu aanu taageersanayn weligiis ma kob caleen leh kama soo durduriyo.

Waxaa lagama maarmaan ah inay isku tiirsadaan shacabka, ciidanka, hogaamiyaha,haddii kale guuli kaa dheer.

Waxay ka mid ka go'an Quddus_ in uu dedaalkiisa ugu badan siiyo tarbiyeynta shacabkiisa,laguna tarbiyeynayo,jahaadka iyo qiimihiisa,nafta oo la bixiyo waxa laga helayo,laguna helayo,in diinta laysku furto,iyo xamaasadda Islaamnimada.

Inkasta oo ay muhiimaddani ahayd mid adag, haddana ilaahay labo shay ayuu ku galladeystay waqtigaas reer Masar oo u fududeysay Quddus inay la fahmaan Muhiimaddaas.

Tan hore waa galladda ilaahay reer Masar u siiyey oo ah qiimaha cilmiga sharciga ah iyo culimo diineed,waqtigii dheeraa ee Ayuubiyiintu Masar xukumayeen,waqtigaas Salaaxu-Diin Ayuubi waxaa biyo dhigey reer Masar madhabka sunniga ah, ka dib markii uu meesha ka tuuray dawladdii Faatidimiyah ee faasidadda ahayd.. qiimihii culimadu lahayd ayaa kor u kacay oo dadkii ayaa bartay qiimaha caalimku leeyahay axkaamtuna waxay noqdeen kuwo siman.. xataa markii ay qabsatay kursiga xukunka Shajratu Durr,culimadii ayaa inkaartay,maraasay ka qoreen kitaabo ayey qoreen ka dhan ah boqoraddan, dadkana ku dhiiri gelinayaan inay kasoo horjeestaan arrintaas oo diidaan, may awoodin Shajratu Durr iyo qof kasta oo kale inay hal tallaabo oo xun u qaadaan dhinaca culimada,lagama arag xorriyad noocaas oo kale ah caalamka weligeed,lagumana ridin mugdiyada jeelasha,lagamana hor istaagin bixinta cilmiga iyo khudbadahooda..!! ka dib waxay caado u lahaayeen Ayuubiyiintu inay Mamaaliikta ku rabbeeyaan cilmiga yaraantooda,ka dibna fardo-fuulka iyo dagaalka,intii ay taliyeyaashu mar walba u baahan lahaayeen culimo.. ka dibna raadeynta intaas le'eg ay ku samaysay tarbiyaddii diintu Mamaaliikta laftoodii,markaas ayey wayneeyeen

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

culimadii iyo cilmigii diintaba,haddii uu nin istaago oo yidhaahdo : ilaahay wuxuu yidhi sw_ ama rasuulka ayaa yidhi: ﷺ dadka iyo madaxduba way aamusayaan oo si isku mid ah u dhegaysanayaan.

Kala fogaa shacab ka fogaadey diinta laakiin weli qadderinaya diinta iyo culimada,iyo shacab kale oo lagu rabbeeyey inay diin ahaan u qaataan ku dayasho odayo laga soo gaadhey,oo loo wayneeyo sida loo ilaaliyo meelaha taariikhiga ah oo kale diin dhabana aan ahayn..!!

Waxa ahayd wax aan dhici Karin waqtigii Ayuubiyiinta Masar ama Mamaaliiktaba in qof u damdamleeyo caalim diineed ama Sheekh masaajidka ku jira amaba mu'din sharci ah iyo qofkasta oo haya shaqadiis Islaamka ee u gaarka ahayd.. sidaas ayey waxaan ka suurtoobin u ahayd shacabkaas inay diidaan mabd'a Islaamiyah ama qaanuun sharci ah.. haa kol kol way diidayeen shacabku doonista yar darteed,ama wax laab la kac ah oo aan cago adag ku taagneyn,laakiin wuu diidayey isaga oo garanaya arrin caadi ah ahayn,laakiin may dhacayn in uu qofna yidhaahdo: "waxyaabaha la xaaraan timeeyey sida ribada,cabbista khamriga,jaaska iyo qoobka ciyaarka,Sinada Nasaarada.. may dhacayn qof yidhaahdaa waa xalaal.. mana dhacayn qof xaaraantimeeyaa wax xalaal ahaa,muuqaal ahaan iyo macno ahaan labadaba..lamana joojin xalaqadaha masaajidka marna,loomana diidin caalim inuu Mimbarka koro oo arrin ka sheego.

Shacabku waxay ahaayeen kuwo qadderiya diinta.. kuwo wayneeya Islaamka.

Qiimahaas aadka u wayn ayaa yaallay Masar,sidoo kale waxaa Masar ka buuxay culimo cilmiga laga raacanayey kuwaas oo waqti u waayey inay dadkoodii iyo dhulkoodii la aadaan cilmiga,waayo ma helayaan cid ka celisa madaxdooda haddii ay isku qabtaan arrin ka mida arrimaha diinta,sidaa darteed waxaa aad ugu badatay Masar culimada iyo cilmigii Azhar ee sharfoonaa,kaas oo noqday waxa keliya ee lagu kala sareeyo, ka dibna markii la riday dawladdii Faadimiyah_ waxaa Masar yimid culimadii ugu fadliga badnaa waqtigaas oo Masar uga yimid waddamo kale,shakina kuma jiro inay culimadaasi kusoo kordhiyeen dhaq dhaqaaqyadii aqoonta wax badan.

Waxaa madax ka ahaa culimadaas sheekhii caanka ahaa,caalimka ahaa,dhif raggii dunida soo maray ka mid ahaa,imaamkii waynaa ((Alcissi Bin Cabdi Salaam)) ee lagu naaneysi jiray ((Suldaankii Culimada)).

Waa inaynu xoogaa ka taabanaa caalimkaas wayn mawqifkiisi.

Suldaankii Culimada!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

((Alcissi bin Cabdi Salaam)) wuxuu ka mid ahaa culimadii ugu waaweynaa ee Muslimiinta,wuxuu ku dhashay Dimishiq sannadkii 577h,macnaha waqtigan uu xukunka la wareegay Quddus wuxuu kor u dhaafay da'diisu siddeetaneeyo,Cissi bin Cabdi Salaam wuxuu ka mid ahaa culimada aan sheegista xaqa waa lagu canaanayaa uga cabsan jirin ee sheegi jiray,inta ugu badanna wuxuu diiradda saari jiray khaladaadka iyo boqorada iyo Salaadiintu sameeyaan,markaas ayuu la talin jiray oo wax u sheegi jiray isaga oo aan inyar oo cabsi ahi ku jirin,waxaa lagu naaneysi jiray ardaygiisi ugu horeeyey oo loogu magac daray caalamka Islaamka oo dhanna waa looga yaqaan ((Ibn Daqiiq Alciid)) oo lahaa naaneysta ((Suldaankii Culimada)) wuxuu isku darsaday Alcissi Bin Cabdi Salaam_cilmigii iyo ku shaqayntiisi,si aad ahna wuxuu u raaci jiray sunnada,iyo ku dedaalidaa saxeexa markii loo baahan yahay,wuxuu u qaban jiray fatwo uu kaga hadlayo arrimaha cibaadada,sidoo kale wuxuu fatwooyin kasoo saari jiray arimaha siyaasadda iyo bulshada..dhab ahaan wuxuu ahaa suldaankii culimada,hormoodna wuxuu u ahaa daaciyiinta,wuxuu ku tegay amrista wanaagga iyo reebista xumaanta.

Wuxuu noloshiisa ku qaatay ilaahay haw naxariistee Dimishiq ilaa markii uu xukunka qabsaday ((Saalix Ismaaciil Ayuubi)) waxay walaalo ahaayeen Saalax Ayuubkii Masar ka ahaa xaakimka,wax badan ayeynu ka soo warannay wanaaggiisa iyo taqwadiisa,laakiin Saalix Ismaaciil isagu wuxuu ahaa maarkad ka duwan sida walaalkiis,wuxuu ahaa khaayin dadkiisa iyo diintiisaba khiyaameeya,wuxuu kaashaday Kiristaankii si uu duullaan ugula qaadaan walaalkiisa Masar,Najmudiin Ayuubi,waxaa ka mid ahayd shuruudaha uu Siliibiyiinta la galay si ay isu gaashaan buursadaan,in uu siin doono labada magaalo ee Siidaa iyo Shaqiif,iyo in uu u oggolaado inay hubka ka iibsan karaan Dimishiq,in uu ciidankiisana ku dari doono dagaalka ay ku qaadayaan Masar,dabcan waxay arrintaasi raad ku samaysay caalimkii waynaa Cissi bin Cabdi Salaam,wuxuu ula baxay mimbarka khudbad si aad u adagna wuxuu uga soo horjeestay arrintaas una cambaareeyey Saalix Ismaaciil,si cad oo aan mugdi ku jirin ayuu u sheegay in aanu bixin Karin isaga oo boqor ah magaalooyin ay leeyihiin dad Muslimiin ahi waayo waa shakhsi markaa ma banaana,sida aanay u banaanayn inay Kiristaanka laga iibiyo hubka Muslimiinta,weliba dadka Muslimiinta ahina ay si cad ula socdaan in aanay Kiristaan hubka u iibsanayn inay la dhacaan walaalohood maahee.. sidaas ayuu runta ugu sheegay Suldaankii culimadu weliba boqor xun oo madax adag hortiisa uga sheegay Saalax Ismaaciil.. boqorkiina wuxuu ka qaaday mansabkii uu haystay sheekhu ee Xaakimnimada,wuxuu kale oo ka mamnuucay khudbadihiisi,ka dibna wuxuu amray in la qabto oo la xidho,muddo ayuu Caalimkii Muslimiinta ee waynaa ku qaatay Jeelka,ka dibna waa laga soo saaray laakiin waxaa laga mamnuucay wax dhigistii, ka hadalkii Diinta,khudbadihii,wuu iskaga tegay sheekhii waynaa Dimishiq wuxuuna usoo amba baxay Bayt Almaqdis,si uu u helo fursad uu dadka wax ku baro,intii uu Dimishiq joogi lahaa isaga oo aamusan,muddo ayuu joogay,laakiin si lama filaan ah ayuu Saalix Ismaaciil u yimid Bayt Almaqdis isaga oo ay la socdaan boqorro Kiristaan ah iyo ciidamadoodii iyaga oo ujeedkoodu yahay inay Masar qabsadaan,wuxuu Saalax Ismaaciil u diray mid ka mida raggiisi Sheekha,in uu si deggan ula hadlo dhamaan

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

mansabyadiisi oo dhan lagu celin doono laakiin uu hal shardi ku xidhan yahay in aad Sheekh raalli gelisa,ugana cudur daaratid wixii aad ku hadashay Saalax Ismaaciil oo qudha ayaa kaa xigta,shardiga kalena waa in aadan ka hadlin arrimaha siyaasadda haddii kale waa lagu xidhayaa.

Ninkii lasoo diray wuxuu u tegay Sheekh Cissi bin Cabdi Salaam رحمه الله- wuxuuna ku yidhi: (waxaa kaa xiga adiga iyo in lagugu celiyo dhamaan mansabyadaadii oo dhan iyo weliba dheeraad in aad u cudur daarato boqorka gacantana aad ka dhunkato bess!).

Wuxuu ugu jawaab celiyay Cissi Bin Cabdi Salaam si cissi iyo sharafi ku jirto: رحمه الله- "Walaahi miskiin yohow kama raalli noqdeen in uu gacantayda dhunkado,iska daa in aan gacantiisa dhunkado'e ,waar dhegaysta idinkuna tog baad maraysaan,anigu tog kale,ilaahay ayaa mahad leh iga nabad geliyey waxa uu idinku imtixaamay".

Allaahu Akbar..!! kuwaas uunbaa ahaa culimadii dhabta ahayd!

Wuxuu kaga jawaabay Saalix Ismaaciil wax la filayey,wuxuu amray in sheekha lagu xidho Bayt Almaqdis,waxa la geeyey teendho ku qabsan teendhadiisa,Sheekhu wuxuu teendhadiisa ku akhrisan jiray Quraanka Kareemka ah,Saalax Ismaaciilna waa uu maqlayaa,maalin maalmaha ka mida Saalax Ismaaciil oo la sheekaysanaya qaar ka mida madaxdii Kiristaanka sheekhiina quraankiisi akhrisanayo,ayuu Saalax Ismaaciil ku yidhi boqoradii Kiristaanka isaga oo kaga doonaya amaan: "ma maqlaysaan sheekhaa quraanka akhrinaya? Waxay yidhaahdeen: "haa" wuxuu yidhi "waa caalimkii ugu waynaa culimada Muslimiinta,waxaan u xidhay eedaynta uu igu eedayey bixinta dhufeysyada Muslimiinta,waxaan kale oo ka casilay khudbaddii Dimishiq iyo mansabyadii kale ee uu hayey,ka dibna waxaan u soo eryay Quddus,imminka ayaan xadhigii u cosboonaysiiyey idinka dartiin".

Hadalkan wuxuu u leeyahay Saalix Ismaaciil si uu ugu raalli geliyo boqoradan Kiristaanka,waxay ku yidhaahdeen boqoradii Kiristaanku iyaga oo la yaabban: "haddii uu annaga ahaan lahaa wadaadkayga diinta Kiristaanka ugu cilmiga badan,cagaha ayaan u maydhi lahayn ka dibna waanu cabbi lahayn biyaha aanu cagaha ugu maydhnay".

Waxa lagu xidhay sheekhii waynaa Bayt Almaqdis, ilaa uu yimid Malik Saalix Najmudiin Ayuub,ee uu Kiristaankii ka xoreeyey Baytal Maqdis sannadkii 643h,markaas ayaa sheekhii laga saaray xabsigii oo la geeyey Masar.

Waxaa Masar loogu qaabilay si wax loo qaabilo sida wanaagsan, boqorkii Najmudiin Ayuub wuxuu usoo dhoweeyey si heer sare ah,wuxuu khadiib uga dhigay masaajidkii Cumar bin Alcaas,wuxuu kale oo u dhiibay maxakamaddii.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa ka mid ahayd goobihii Sheekha ee caanka ahaa oo ay xataa isku jiidheen Malik Saalix laftiisa,in markii uu arkay in maamulkii guud,imaaradihii yar yaraa mansabyada shaqada dhamaantood la leeyahay waxaa leh Mamaaliikta,waa nimankii uu soo iibsadey Saalix Ayuub waqtigan ka hor, halkaas wuxuu ka fahmay xukunkii addoonka iyo dadka lasoo iibsado,ma banaana inay maamulaan addoomadu dadka xorta ah,wuxuu si cad u soo saaray Fatwo kasoo horjeedda maamulka Mamaaliikta waayo waxay ka mid yihiin addoomada,Masar oo dhammi waxay la kartay cadhadii madaxda mansabyada sarsare wada haysta,xataa wakiilka madaxwanuhu wuxuu ka mid ahaa Mamaaliikta, waxay u yimaaddeen sheekhii Cissi Bin Cabdi Salaam_ waxay isku dayeen inay ku qanciyaan ka noqoshada fatwadan,ka dib waxay ku dayeen cago jugleyn,laakiin dhamaan waxyaabahaas oo dhan waa uu ka diiday,waayo uma arko nolol in la bed beddelo kelmedda xaqa ah,arrintii waxay gaadhay Saalax Ayuub,wuxuu la yaabay hadalkii sheekha,wuuna diidey,wuxuuna ku yidhi arrintani kama mid aha waxyaabaha la oggol yahay in laga hadlo,waxa halkaas sheekhii uga soo baxdey in aan la dhegaysanayn hadalkiisa,wuxuu iska casilay shaqadii maxakamadda ee loo dhiibay,isaga oo diidaya in uu noqdo sawir caalim oo meesha iska yaalla mar haddaan la dhegaysanaynin hadalkiisa,isaguna uu ogyahay in Ilaahay SW waydiin doono haddii uu ka aamuso, laguna warsan doono sababta uu uga hadli waayey,go'aan wuxuu ku gaadhay caalimkii Muslimiintu in uu iska casilo qaadinimadii,isaga oo aan u joojinayn xaaladda uu joogo,xaaladda bulshada,xaaladda dhaqaale ee kasoo gelaysay shaqadiisa iyo adduunyadii oo dhanba.

Wuxuu fuulay sheikh Cissi Bin Cabdi Salaam dameerkiisi, reerkiisina wuxuu ku qaaday dameer kale, wuxuu goostay in uu Qaahira iskaga baxo gebi ahaanteedba,isla markaana tuulooyinkaas mid ka mida iska dego marhadaanu fatwooyinkiisa la dhegaysanayn,laakiin shacabkii reer Masar ee culimada qadderin jiray ayaa arrintaas diidey oo kasoo horjeestay,ka dib maxaa dhacay?

Waxaa ka daba guuray Sheekhii Caalimka ahaa kumanaan culimadii reer Masar ah dadkii Saalixiinta ahaa,ganacsatadii,raggii,xataa dumarkii oo caruurtii wata ayaa daba galay sheekhii iyaga oo taageersan arrinkiisa,inkaarna u arka in la khilaafo hadalkiisa.

Waxay wararkii gaadheen boqor Najmudiin Ayuub,wuxuu si deg dega uga dabo tegay Sheekhii Alcissi bin Cabdi Salaam,wuu raalli geliyey mase uu aqbalin illaa fatwadiisa uu fuliyo,wuxuuna ku yidhi : "waxaad rabtaa inay mansabyadooda kuusii hayaan nimankaasi saw maaha,waxaa lagama maarmaan ah horta in la iibiyo,ka dibna uu xoreeyo ninkii soo iibsadey,haddii lacagtooda nimankan madaxda ah markii hore lagu dari jiray baytu Almaalka Muslimiinta,waxaa lagama maarmaan ah in lacagtaas laga soo celiyo bayta maalka Muslimiinta" Malik Saalixna wuu la qaatay,waxaa loo dhiibay sheekha laftiisu in uu fuliyo hawshan lagu iibinayo madaxdii Muslimiinta,si aanay u noqon wax lagu dheel dheelayo oo kale,wuxuu bilaabay in uu soo bandhigo hadba mid ka mida madaxdii,ka dibna mid kale,ka dibna mid kale,waa suuqa kala iibsiga addoomada ayuu madaxdii keenay,lacagtoodiina qaali ayuu ka dhigay,waxay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

shacabkii u kala tartameen kala iibsiga madaxda ilaa qiimahoodii kor u kacay,wuxuu ka iibsaday jeebkiisi khaaska ahaa Malik Saalix Amiir,ka dib waa uu xoreeyey,lacagtiina wuxuu ku shubay bayt almaalka Muslimiintu,sidaas ayaana lagu sameeyey dhamaan madaxdii wasaaradaha haystay,maamulka kale haystay ciidamada maamulayey iwm,laga bilaabo maalintaas waxaa loo bixiyey sheikh Alcissi Bin Cabdi Salaam

((iibiyihii madaxda!))

Waxay inoo iftiiminaysaa qisadan Sheekh Cissi bin Cabdi Salaam guud ahaan,qiimaha cilmiga iyo culimadu Masar ku lahaayeen waqtigaas,dadku sida ay u ixtiraami jireen kelmedda sharciga,dhamaan waxyaabahaasi raad ayey ku lahaayeen dhismaha shacabka reer Masar,iyo sida loo dhegaysan jiray talooyinka culimada.

Hadaba warkeena ku saabsanaa culimada iyo Alcissi bin Cabdi Salaam wuxuu tusaale inooga yahay qiimaha cilmiga iyo culimadu aad ayey u sarraysay,wayna ilaalin jireen shacabka reer Masar waqtigii Ayuubiyiinta iyo Mamaaliiktaba,arrintaasi markaa shaki kuma jiro inayka caawin doonto Quddus -رحمه الله ku dhiirigelinta jihaadka iyo inay shacabku hibeyaan nafta iyo maalkaba.

Jihaadka jidka Ilaahay:

Qiimaha labaad marka laga yimaaddo qiimaha cilmiga iyo culimada ee la ilaalin jiray Masar dhexdeeda waxay ahayd qiimaha jihaadka jidka ilaahay loo jihaado.

Waxay ahaayeen Muslimiinta Masar ee waqtigaas noolaa kuwo si qotto dheer u aaminsan ilaalinta jihaadka haddii ay umadi doonayso inay sii jirto..marna qiimaha jihaadku dhulka kuma dhicin xataa xilliyadii ay taagta darnayd,xataa waqtiyadii lagu loollamayey kursiga,xataa xilliyadii mashaakilka dhaqaale jiray.

Waxay ahaayeen duullaamada Kiristaanku isdaba joog Masar iyo Shaam sababtuna waxay ahayd dareenkaas dhexyaallay Muslimiinta Masar ee Jihaadka,waxay ogaadeen markaa in aanay jiri doonin wax lagu magcaabo ((nabad waarta)).. taasi waa arrin aan dhacayn..waayo waxaa ka mida sunnooyinka ilaahay SW_ in uu jirayo loollan ka dhaxeeya dadka xaqa wada iyo kuwa baadilka hoggaaminaya ilaa maalinta qiyaame.. xaquna uu joogayo ilaa Qiyaamaha,sidoo kale baadilkuna uu jirayo ilaa Qiyaamaha, markaa loolankaasi uu ka dhaxaynayo xaq wadayaasha iyo baadil wadayaasha,sidaa darteed waa been waxa loogu yeedho ((nabad waarta)) waa been danta laga leeyahay oo keliyana ay tahay in la khiyaameeyo Shacabka iyo dejin si looga dheereeyo inay u diyaar garoobaan dagaal waaraya.

Waxay Muslimiintu waqtigaasi si wayn u ilaalin jireen kelmedda (jihaad fii sabiilillaah) ilaahayna way ku xidhnaayeen si wayn,ciidamada Kiristaanku mar walba way ka badnaayeen kuwa Muslimiinta tiro ahaan,ciidamada Muslimiintuna si adag ayey ilaahay SW ugu xidhnaayeen goobta dagaalka dhexdeeda,si daran ayey isugu dhul dhigi jireen xaggiisa,waxay ku dedaali jireen inay la yimaaddaan niyad dhamaystiran_

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

taasi waxay sababtay in wax kasta oo dhaca aanay marna hoos u dhicin qiimaha jihaadku,waqtigaasna ma jirin cid arrinta jihaadka iska dhegoolaysaa, ama lagu sunto ciddii jihaad ka hadasha ((argagixiso)) ama ((xag-jir)) ama ((asal-raac)).. may lahayn kelmedda jihaad wax cay ah,waxay ahayd wax lagu faano iyo hadaf la higsado.

Sidaa darteed waxay ahaayeen ciidamada Masaaridu intaas oo dhan kuwo ku jira diyaar garoow,mar walbana ku dedaalaya sidii ay u dhamaystiran lahaayeen awoodohooda oo dhan iyo diyaar garoow buuxa,lagama yaabayn inay ciidamada u kala dareeraan si ay arrin magaalada uga soo dhamaystaan,sida ay samayso dawladda aan jahaadin,ama aan jihaadku niyadda ka ahayn,waxay ku kala mashquulsanaayeen ciidamadu tababarro Milateri,hubka casriyeyntiisa,kala doorashada qorshoyaal dagaal oo kala duduwan,iyo soo bandhigista hogaamiyeyaasha cusub ee dagaalka khibradahooda,sidii dalka laga bilaabo bari ilaa galbeed loo difaaci lahaa,laga bilaabo waqooyi ilaa koonfurna sidoo kale,iyo u gargaarista Muslimiinta ku kala nool meelaha kale.

Waxay ku jireen ciidamada Masaaridu diyaar garoow joogto ah.. sidoo kale shacabka Masarna waxay ku jireen diyaar garoow joogto ah.

Kala fogaa shacab macneyaashan lagu rabbeeyey,iyo shacab kale oo lagu rabbeeyey in aanay jirin wax nabad lagu beddeshaa,doorasho dagaalna aanay ahayn wax loo baahan yahay,iyo inay istiraatijiyadda saxda ahi tahay wada hadal iyo in la aqbalo nabad ha gaabnaato ama ha dheeraatee,raadinta dedaallo nabadeed oo aan macno lahayn, iyo is afgarad quudhsi ah.

Shacabka lagu barbaariyo sawirkan dambe oo kale wuxuu noqdaa shacab bisil,nugul oo aan wax midab ah lahayn,dhadhan lahayn,hadaf lahayn, wax wanaagsanina agtiisa aanay oollin.

Shacabka Masar ayaamihii Quddus -رحمه الله- sawirkan ma lahayn.

Hadaba..shacabka Masar waxay ahaayeen waqtigii uu kursiga koray Quddus iyada oo ay haysatay dhibaato dhinaca dhaqaalaha ahi,duruufo ad adag, iyo argagaxa akhbaarta Tataarku,iyo iyaga oo kalsooni aan ka helin wax badan oo madaxdoodii ka mid ahaa.. waxay ahaayeen shacab soo jeeda,fahmad leh,qadderiya cilmiga iyo culimada,ixtiraam dheeraada siiya Jihaadka jidka ilaahay,aaminsanna in uu yahay wadada lagu dhamayn karo loollanka dawladaha kusoo xad gudba wadamada Muslimiinta.

Quddus -رحمه الله- wuxuu dhigay arrinta Tataarka laga bilaabo maalintii uu xukunka qabsaday labadiisa indhood dhexdooda,waxaynuba odhan karnaa waxa uu dhigay labadiisa indhood dhexdooda dhamaan noloshiisaba,laga soo bilaabo waqtigii uu ahaa wiilka yar ee ay Tataarku geba gebeeyeen waddankiisi,dadkiisina xasuuqeen,isaguna uusoo maray marxalado nololeed oo ad adag,nolol dhib badan oo addoonimo,kuna soo geba gebootay inuu qabsaday derejadii ugu sarreysay ee waddanka Masar.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaynu soo aragnay sida uu u qorsheeyey Sayfudiin Quddus xoojinta ciidamada,iyo sida uu dhan ugu wada jeediyey arrimihii gudaha ee waddanka Masar,wanaajinta cilaaqaadkii debedda Masar weliba qaar ka mida fidmo walayaashii Muslimiinta,waa hubaal in uu u baahnaa waqti dheer,laakiin inta badan, ilaa maalintii la faray Muslimiinta faralkan,maba ay helaynin waqti ku filan dhoolatus iyo diyaar garoow,sidaa awgeed hadday umadi doonayso inay sii jirto waa inay ku jirtaa diyaar garoow joogto ah weligeedba..

((Quddus)) oo jiheystay!

Xili uu Quddus ku jiro diyaar garowgiisi xamaasadeysnaa,iyo tallaabooyinkiisi dhakhsaha badnaa,ayaa waxaa yimid niman uu soo diray Holaako oo sida war sheegaya in dagaalku dhici doono xilliga ugu dhakhsaha badan ee la malayn karo,dagaalkuna shaki la'aan dhacayo..Quddus wuxuu ku darsan lahaa dhawr bilood si uu u dhamays tirto diyaar garoowgiisa,waase haddii uu waqtiga gacantiisa ku maamulayo,dagaalkuna waa hubaal,galab ama arooryo aan fogeyn ayuu qabsan doonaa weerarkii wuxuushta Tataar Masar,ha diido Quddus ama ha yeelo,ha galo ciidanku ama ha diido,shacab ha diidaan ama ha yeelaan,weerar wuu ku haystaa, weliba waqti dhow ayey kulmayaan koox mu'minad ah iyo quwaddii Caalamka,haddii ay quwaddani tahay mid daalimad ah oo gardarro wadda,waa daalimiin qab wayn, weligoodba ma aqbalin saaxiibtinimo,heshiis iskaashi,xataa hadaanad waxba ku darsan kaama yeelaan,waxay keliya oo doonayaan in iyaga la daba galo,khasabna dabagale waa dulleysanayaan..!!

Waxaa yimid nimankii ka socday Holaako _ilaahay naxariistiisa haka dheereeyee_,oo sida warqad la odhan karo waxay ahayd Sun,sababtoo ah waxa ka buuxa hanjabaad iyo cago juleyn,gooddi iyo yabooh arga gixin iyo baqo gelin.. kuma dhiiranayo akhriskeeda mid ilaahay sugo maahee SW.

﴿وَلَوْلاَ أَن ثَبَّتْنَاكَ لَقَدْ كِدتَّ تَرْكَنُ إِلَيْهِمْ شَيْئًا قَلِيلاً﴾[الإسراء

haddii aanaan ku sugin waxaad ku sigatay inaad u debecdo xoogaa.

Ilaahay galladiisa_wuxuu ku sugay Quddus,warqaddii ayuu akhristay isaga oo uu u xidhan yahay xadhig cajiib ahi,addoonka mu'minka dhabta ahi haddii uu baqo geliyo mid ka mid ah daalimiintu,wuxuu is horkeenaa haybadda iyo awoodda ilaahay,markaas ayuu la yaraadaa daalin kasta iyo mid kasta oo kibir badani.

Way timid warqaddii Holaako waxaa sida afar nin oo Tataari..wuu akhriyey Quddus_ رحمه الله mise waxaa ku qoran sidan soo socota:

"**waxaan ku bilaabay magaca ilaaha cirka leh, ee ay waajib tahay in la addeeco,ee dhulka na dhaxalsiiyey,nagu salliday khalqigiisa,boqoryohow loo yaqaanno Almalik almudfir,ee ((addoomada)) ka midka ahi,ninka Masar haysta iyo dhamaan**

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

madaxdeeda,askarteeda,qoraayadeeda,muruqmaalkeeda,reer miyigeeda,reer magaalkeeda,saqiirkeeda ilaa saancaddeheeda.

Waxaanu nahay askartii ilaahay ee dhulka u joogtay,waxaa nalaka abuuray cadhadiisa,waxaa nalaku salliday ciddey ku habsato nacaybka ilaahay,waxaad ogtihiin masiirkii dunidii aan cagta soo mariyey ee ku cibro qaata,qayrkiin ku waano qaato oo arrinkiina noo soo dhiiba,ka hor intaan ceebtiinu muuqan,khaladkana aydaan naasnaasin,

Waayo annagu

Uma naxariisanno mid ooya.

Uma jidh debecno mid noo ashkatooda.

Waddamo ayaanu furannay,dhulkiina waanu ka nadiifinnay fasaadkii.

Orod ayaa idinku waajib ah,annagana eryasho ayaa nagu waajib ah.

Dhulkee idin hoyn kara?waddankeese wax idinka celin?

Halkee ayaa ku aragtaan? Annaguna waxaan sidanaa baad iyo biyoba?

Xagaad ka geli doontaan seeftayada? Gacmahayagana lagama baxsado.

Fardahayagu waa Hilaac,seeftayadu waa Danab,Warmahayagu haankay wax jaraan,leebabkayagu way haleelaan,quluubtayadu waa sida buuraha,tiradayaduna waa sida ciidda!

Dhufeysyadu waxba nagama celiyaan,ciidamaduna la dagaalankayaga waxba yahay ayey noqdaan,baryadiina dhegaysan mayno! Waayo xaaraanta ayaad cuntaan,waxaad diideen in aad salaanta celisaan,iimaankii ayaad khiyaamayseen,waxaa dhexdiina ku faafay caasinimada iyo dhego adayga waalidka.

Ku bushaaraysta dulli iyo wax daran (maanta waxa laydinku abaal marinaya cadaab wax dulleeya wixii aad samayseen darteed) (kuwa dulmiga sameeyaa way garan doonaan meesha ay u noqonayaan)

Way sugan tahay in annagu aanu nahay gaalo,idinkuna faajiro aad tihiin

Waxaase nagu kiin imtixaamay ka ay gacantiisa ku jirto maamulka shay kasta,ee xukuma qadderta,

Badnaantiinu agtayada way yartahay,sharaftiinu agtayada waa dullinimo,wax aan dullinimo ahayn boqorradiina iyo boqortooyadiina uma hayno.

Hadalkana ha badinin jawaabtana illa soo dhakhsada.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Inta aan ololka dagaalu bilaabmin,oo aanu dhimbiilo tuurin,

Wanaag iyo sharaftoona agtayada idiinma taallo,xirsi iyo kitaabtoona naga heli maysaan,waxaad la deyeebi doontaan warma-hayaga, waddankiinu wuxuu noqon doonaa mid aad ka madhan tihiin,oo afka u dhacay,waanu idin siffeynay hadiiba aanu idiin soo dirnay ragayagii sharfoonaa".

Way dhamaatay warqaddii yaabka lahayd ee aan haba yaraatee lahayn wax dibloomaasiyad ah,waxay siddey war cad oo dagaal ah,ama beddelkeeda oo ah inaad is dhiibtaan idinka oo duuleysan,khasab isdhiibistuna waxay noqonaysaa is dulleyn,waayo macneheedu waxaa weeye is dhiib adiga oo aan wax shuruudah igu xidhin, wax dalab ahina aanu kaa iman aad ku raadinayso xaq aad leedahay.

Quddus wuxuu qabtay kulan wada tashi ah,wuxuu isugu yeedhay raggii hogaamiyeyaasha ugu waaweynaa iyo madaxdii wasaaradaha waxay deg deg u bilaabeen inay falanqeeyaan,arrintan khatarta badan ee hor taalla,doorashooyinka la siiyeyna aad ayey u kooban yihiin,waxaad isku haysaan dagaal aydaan waxba la hadhin la kaalaya,ama is dhiiba shuruud la'aan.

Quddus laakiin arrinta maskaxdiisa ugu jirtay way caddahay,waana waadax,isaga markaa kuma qaadan wax waqti ah in uu kala doorto labadan arrin,doorasho nabadgelyo oo marxaladdan oo kale taagan ama ((isdhiibis)) weligiiba kuma soo dhicin maskaxdiisa,si buuxdana wuxuu u garanayaa in aan xuquuq laysa siin,ee layska qaado,iyo in aan ciidan xad-gudubsani kaaga noqon "waar nooga noqda dhulkayaga"laakiin lagu muquuniyo inay xoog kaga noqdaan.

Mawqifkaas cad ayuu iska taagay arrintaas Quddus.

Laakiin madaxdan shirka kasoo qayb galay iyagu may joogin derejadan aadka u sarraysa ee fahamka iyo xeeldheeraanta wadata..haa way lahaayeen xamaasad diineed oo sarraysa,haa waxay u jeclaayeen Islaamnimada si aan caadi ahayn,haa waxay ka joogeen farda-fuulnimada iyo dagaalyahannimada derejo aad u sarraysa,laakiin imtixaanka ayaa adag.

Faraqa u dhexeeyaa waa faraqa cirka iyo dhulka u dhexeeya,Tataar dawladd laga soo bilaabo Kuuriya bari ilaa Boland galbeed,Masarna si kasta oo ay u badato waxay isu keeni kartaa waa wax kooban.. waxay ku kala tagsan yihiin tirada Tataarka iyo hubka Tataarka,tirada Masaarida iyo hubka Masaarida,intaas waxaa u dheer sumcadooda baqdinta leh iyo waxay dunida badeen,iyo Malaayiin Muslimiin ah oo ay Tataar gawraceen,intaas waxaa sii dheer,in ciidamadii Khawaarsimiya,Armiiniya,Joorjiya,Cabbaasiya,Yurub,Shaam ay dhamaantood ku jabeen Tataarka hortooda.

Waxay gaadheen heer dadku ay ku wada sheekaystaan kelmedo ay ka mid ahaayeen "haddii uu qof kugu yidhaahdo Tataar waa laga adkaaday ha rumeysanin!!".

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Dhamaan waxyaabahaas oo laysu geeyey ayaa ka dhigtay inay ka meermeeraan mawqifka Quddus oo kale, arrin runtii waadax ah oo cad labac labacna aan lahayn.. waxaa kasoo ifbaxay cago jiidid,daciifnimo iyo inay dhulka isku dhejinayaan!

Sidee ayuu u maareeyey hogaamiyihii maskaxda badnaa arrintan?

Sidee ayuu quluubtii uga siibay baqdintii iyo argagixii?

Sidee ayuu ugu qanciyey hogaamiyeyaashii arrin ay u haysteen waxaan caqli gal ahayn?

Kaalay aan ka baranee Quddus.

Aniga ayaa la kulmaya Tataar..!

Wuxuu raacay Quddus laba waddo oo aad ugu waaweyn waddooyinka tarbiyadda,uguna xeel dheer xaaladahaga dadka lagu abaabulo,shaqo dadku isku adkeeyaan,

Wadada koowaad,waa (dariiq ku dayasho mudan)

Si geesinomo leh ayuu Quddus u goostay oo yidhi: (aniga Tataar la kulmaya).

Quddus isaga oo ku fadhiya kursiga dawladdii waynayd ee Masar,laftiisa ayaa u soo baxaya oo hogaaminaya ciidamada la dagaalami doona Tataar!.

Quddus ((kuma raaxaysan))ama kama ((faa'iideysan)) kursigiisa iyo mansabkiisa ee wuxuu uga baxayaa Jihaad!

Quddus waa dhalinyaro weli waqti badani u hadhay_ sida ay sheegaan_ wuxuu u baxayaa geeri ilaahay dartiis ah..!!

Ma uu dirin ciidankiisi isaguna Qasrigiisa amaanka ku ah Qaahira iskama dhexfadhiyin,laakiin wuxuu shacabkiisa la qaybsanayaa waxay ku sugan yihiin,wuxuu la tacaalayaaa waxay la tacaalayaan.. haddii uu Quddus diro ciidan isaguna iska joogo Qaahira cidna canaani ma saarna,laakiin Quddus way u cuntami wayday waddo aan ahayn sidan,si uu u dhiiri geliyo quluubta cabsidu ku jirto, iyo si uu u dejiyo laabaha baalla daymoonaya.. Sidiisa oo kalena inay ugu wada hiloobaan jihaad iyo janno.

Xaalad kasta oo uu galona dhiman maayo waqti aan ahayn waqtigii ilaahay u xadiday.

Quddus wuxuu fahmay cilmi aan aragtida Muslimiin badani aanay qaban.. waana (nafina in aanay dhimanaynin ilaa ay dhamaysato risiqeeda iyo ajasheeda).. laakiin waa kuma kan ka mida Muslimiinta ee noloshiisa waaqica ah Noolaanayaa welibana sidaas u fahmay noloshu,?!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Weligoodba dadku waxay u beritamayaan sidii ay u siyaadsan lahaayeen risiqa,waxay kale oo u baritamayaan sidii ay u kordhisan lahaayeen cimriga,laakiin dad badan oo Muslimiinta ka mid ahi garan maayaan in aan geesinimadu waxba ka dhimin risiqa,waxbana aanay ka dhimin cimriga,fulleynimadu ma badiso maalka loo qaybiyey Insaanka,noloshana ma waariso.

Sida uu fahmay Quddus_ xaqiiqa jaciiba, nolosha sharafteeda halsaacadna ha noqotee waxay ka wanaagsan tahay,in aad weligaa ku noolaatid dulli.

Maxay ugu jawaabeen madaxdii?

Shaki kuma jiro in madaxdu markii ay arkeen derejada uu Quddus joogo inay quluubtooda xamaasadi gelayso.

Waa sidan ku dayashadu Mu'miniintooy.

((ficil hal nin sameeyo ayaa saameeya kun qof,halka hadal nin yidhaahdo kun saameeyo)).

Haddii uu hogaamiye olole ku qaado hogaamiyeyaashiisa ciidamada ,shacabkiisa oo xamaasad geliya,dar dar geliyo laakiin ay ogyihiin markay cidhiidhi gasho ama ay adkaato inay ka waayayaan garaabkooda,waxa aaminaya oo keliya inta si gaar ah u jecel iyo naftiisa,laakiin ciidamadiisa iyo shacabkiisu waxay aadayaan meesha ay dan moodaan,waayo dar dar gelinta iyo xamaasaddani saamayn mayso dadka.

Ku dayashadeena ugu waynina dhinaca diinta waa hogaamiyihii ku hamiyayey shacabkiisa ,isla markaana la qaybsanayey xaalad kasta hadday yar tahay iyo hadday wayn tahayba,waa Rasuulkii ilaahay(NNKHA).

روى البخارى عن أنس ﷺ قال: كان النبي ﷺ أحسن الناس، وأجود الناس، وأشجع الناس، ولقد فزع أهل المدينة ذات ليلة، فانطلق الناس قِبَل الصوت، فاستقبلهم النبي ﷺ، وقد سبق الناس إلى الصوت وهو يقول: «لن تراعوا، لن تراعوا»، وهو على فرس لأبي طلحة، عُري ما عليه سرج، في عنقه السيف، فقال: «لقد وجدته بحراً».

Wuxuu soo weriyey bukhaari oo Anas ka soo weriyey (Rc) in uu yidh: wuxuu ahaa Nebigu (NNKHA) kan dadka ugu wanaagsan,ugu quruxbadan ,uguna geesi san dadka, habeen ayey argagexeen reer Madiina,dadkii waxay u baxeen dhinacii qayladu ka yeedhay,waxaa ka horyimid Nebiga nabad geliyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee isagoo dadkiiba uga dheereeyey dhinacii qayladu ka yeedhay dadkiina ku leh: "ha cabsanina,ha cabsanina"isaga

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

oo saaran faraskii Abi Dalxa,oo uu leeddo fuulay isla markaana bilaa koore ah seeftiisuna ay qoorta u sudhan tahay,ninkii faraska lahaana wuxuu ku yidh "waxaan ka helay bad faraskan".

Wuxuu maqlay rasuulku ﷺ qaylo naxdin leh habeen Madiina dhexdeeda,cid kale ma amrin oo ma odhan bal soo eeg waxa ay qayladu tahay, waa hogaamiyihii Madiina Almuniira,Rasuulkii Muslimiinta,soo bixitaankiisuna waxa uu ahaa deg deg,faraskii Abi Dalxa xataa ma awoodin in uu koore saaro,laakiin keliya waxa uu haleelay Seeftiisi keliya,faraskii ayuu fuulay,wuu baxay isaga oo baadhaya waxa sababay qaylada yeedhay..markii uu soo hubiyey in aanay jirin wax laga cabsado,dadkiina way soo baxeen iyaga oo argagaxsan,mise waaba isagii oo dejinaya "ha cabsanina" ka dibna wuxuu yidhi kelmed uu ku amaanayo faras ku caan baxay gaabis oo lagu yaqaanay oo wuxu yidhi "waxaan ka helay bad" yacnii orodkiisa oo xawaare ahaa..wuxuu leeyahay Saabit mid ka mida asxaabta soo weriyey xadiithka ibn Maajah ((faraska Abi Dalxa wuxuu ahaa mid ku caan baxay gaabis,habeenkaas ka dib lagama dheerayn faraskaas)).

Waxaad meeshas ka arkaysaa in rasuulku ﷺ ku hamiyayey shacabkiisa,ruuxdiisana ku furanayey,u hibeynayey noloshiisa,mana samaynin sida ay sameeyaan qaar badan oo ka mid ah madaxda Muslimiinta oo haddii shacabkooda oo dhan la madhinayo isaguna bad baadayo odhan lahaa madhiya.

Imam axmed wuxuu kasoo weriyey Cali Bin Abi Daalib oo ka mid ahaa geesiyaashii Muslimiinta uu yidhi: "marka dagaalku xumaado waxaanu ku dabo gabban jirnay Rasuulka NNKHA cidi ugama dhowaan jirin cadawga".

Waa tarbiyadda ((ku dayashada)).

Sidaa ayuu ku sameeyey Quddus_ hogaamiye yaashii ciidamada iyo madaxda markii uu ku yidhi ((anaa Tataar gelaya))

Taasi waa waddadii hore ee uu maray Quddus_ si uu u dardar geliyo dadka:

Islaamku wa'ayo?haddii aynaan ahayn innagu??

Wadada labaad ee uu u maray waa xasuusinta waynaanta hadafka loo abuuray insaanka,iyo ujeedada wayn ee aynu darteed dunida dusheeda ugu noolnahay.

Wuxuu kor uga qaadayaa nafaha bani Aadanka naftooda damaceeda ku mashquulsan waxyaabo kooban si uu u gaadhsiiyo heer aad uga muhiimsan oo uga sareeya derejada ay joogaan.. wuxuu ku xidhayaa inay qabtaan shaqo ay ilaahay ku raalli gelinayaan SW_ wax ka wayn oo la qabtaana ma jirto_ iyo u gargaarista Diinta.

Haddii mid kasta oo innaga mid ah uu ku waynaan lahaa arrinka Islaamku qalbigiisa waxaa la yaraan lahayd wax kasta in uu u haniyeeyo u hiilinta Diinta.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Wadadani waxay ka mid tahay waddooyinka ugu xeesha dheer ee ummad lagu kiciyo dareenkooda.. in aad waynaysato hadafkaada iyo bartilmaameedkaagu ilaa meesha ugu fog..wuxuu noqonayaa dedaalkaaga,diyaar garowgaaga iyo dhaq dhaqaaqaagu mid ka mida nooc cibaadada Ilaaha caalamiinta ah.

Quddus ololaha(campaing) kuma gelin adduunyo,kuma gelin in la raaco shakhsi gaar ah,kuma gelin qoomiyadda reer Masar iyo wax la mid ah,kuma gelin qoomiyadda Carbeed iyo wax la mida,xataa kuma gelin jacayl uu nolosha u qabo in uu sii joogo,iyo naftiisa oo uu geeri kala baxsanayey.. laakiin wuxuu u ololeeyey sidii loogu dedaali lahaa in la dhinto..!!

Kala fogaa mid ku dedaalayaa sidii uu u dhiman lahaa,iyo kan ku dedaalaya sidii aanu u dhinteen..!! way kala fog yihiin runtii .

Si cad ayuu Quddus ugu yidhi:

“madaxdii Muslimiintaay,waxaad cuneyseen wax badan Bayt Almaalkii Muslimiinta dagaalkana waad ka cago jiideysaan,ee anigu waan baxayaa,qofkii jihaad doonayaa wuu I raaci,kii kalena gurigiisi hayskaga noqdo,laakiin waxaad ogaataa dembiga dumarka Muslimiinta ahi waxay sudhan yihiin qoorta ku ka hadhay dagaalka”.

Arrinku waa cad yahay_ waa arrin iimaan ku xidhan.

Haddii aad ogtahay in ilaahay kula socdo,oo aad khilaafto wixii ku gaadha cidna haku canaanan.

Rasuulkuna ﷺ marna ma khasbin Munaafiq in uu dagaalka ula baxo..arrinta uun ayuu soo bandhigi jiray,xataa haddii ay hadhaan Muslimiin Mu’miniin ah (sidii dhacday Qazwatu Atabuuk Mu’miniinta qaarkood) ma uu karahsanaynin,ee marka loo sheego mid ka mida wuxuu odhanayey: “iskaga taga oo daaya haddii uu khayr leeyahay ilaahay ayaa idin soo gaadhsiinaya,haddii uu yahay mid aan khayr lahayna ilaahay ayaa idinka reebay”.

رحمه الله.

Quddusna sidaas ayuu sameeyey .

Ciddii doonaysa inay u baxdo jihaad dar ilaahay ah ha baxdo,qofkii doonayaa in uu cidhibtiisa ka laabtona,ee isku sii dhejiyaa adduunyada ha ogaado in uu ilaahay la socdo arrinkiisa,hana ogaado in dumarka Muslimaadka ee la hatigayo dembigoodu in uu dhakadiisa yahay.

Yeynaan halmaamin tilmaantii muhiimka ahayd ee Quddus u jeediyey kuwaas madaxda ah,waxay sannado badan wax ka cunayeen Bayt Almaalka Muslimiinta,wayba ka badsan jireen cunitaan iyo ururs iba,ilaa ay meeshaba ka baxday shaqadii ay hayeen macneheedii oo ku ururtay macno kale.. macnahaasina waa ka faa’iideysiga mansabka ilaa derejadii ugu sarraysay wax badsi iyo khayraad

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

boobis, ha noqoto xalaal ama xaaraan ay isugu mid noqotay,wasiiraduna iskaba ilaaween in shaqada loogu dhiibay inay ummadda ugu adeegaan ee aanay u ahayn madax oo keliya, iyo in sida uu isagu u leeyahay xuquuq oo kale waajibaad u saaran yahay, iyo in uu yahay masuul,masuuliyaddaasna ilaahay uun ka xisaabin doono, shacabkiisa tallaabo kasta iyo Dirham/Diinaar kasta..Kelmedahani waxay Quddus ka ahaayeen in uu damiirkooda kiciyo, nooleeyo amaanada,kelmedahani waxay daaha uga qaadeen wasiiradan wadada ka horeysa naftooda.. Quddus wuxuu tusay wasiirada mid kasta oo ka mida waxa gudihiisa ku jira..!!

Ka dib waxaa dhaqaaqay dareemayaashi Quddus si wayn ka dibna si kasii wayn_ ILAAHAY HAW NAXARIISTO ilaa uu istaagay isaga oo u khudbadaynaya madaxdii oo ilmaynaya lehna:

“Madaxdii Muslimiintaay, Yaa ah diyaacaya Islaamka Haddaynaan innagu Dagaalamin”

Kelmedo yaab leh.. kelmedo waaweyn..!!

Waa kelmed keligeed kaaga dhigi karta Manhajka nolosha.

Haddii uu Muslim kasta yidhaahdo weligeed may dhacdeen ummadda Muslimiintu.

Mararka qaarkood ayey Muslimiintu guusha ka sugaan Muslimiin kale..wuxuu sugayaa in uu Islaamka dhaqaajiyo hebel iyo wax la mid ahi,way yartahay inta ku fekertaa in uu isagu dhaqaajiyo Muslimiinta.. waxaaba badan inta isticmaasha hadalladii dadkii Islaamka usoo shaqeeyey hadalladoodii,ficilladoodii, muu Islaamka u soo baxo hebel oo kale si uu ugu gar gaaro.

Mararka qaarkood Muslimku wuxuu sugayaa in uu Islaamka u soo baxo Salaaxudiin,Khaalid iyo Quddus oo kale ama Alqacqaac oo guriga deriskiisa ah ka dhasha amaba dal kale,kumana fekerayo inay kuwaasi kasoo baxaan gurigiisa oo ka dhashaan shakhsiyan.

Maxay baad adigu u noqon wayday Salaaxudiin Ayuubi?

Maxaad adigu u noqon wayday Yuusuf Bin Tashafiin?

Maxaad adigu u noqon wayday Nuuradiin Maxamud Shahiid?

Maxaad?

Yaa Islaamka u maqan,haddaynaan inagu u kicin?

Waxay kelmeddani ku dhacday quluubtii madaxda.. waxay isku dareen Oohin..!!

Quluubtii ayaa jidhiidhicootay..qofka qalbigiisu khushuucona khayr ayaa loo rajaynayaa.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa istaagay qaar ka mid ah madaxdii khayrna way ku hadleen,waxaa kacay kuwo kale oo ku caddeynaya hadalkooda mawqfika ay jihaadka ka taagan yihiin iyo inay ku raaceen madaxweynaha go'aankiisa,iyo inay la dagaalamayaan Tataar lacag kasta oo ay ku joogto,sidaas ayuu arrintaas ugu guuleystay Quddus,tallaabadii ugu adkayd noloshiisa,isla markaasna tallaabadii ugu waynayd noloshiisa.

Markan Masar waxay ogeysiisay Tataar dagaal..!!

Go'aan ka mida go'aamadii ugu khatarta badnaa taariikhda Masar.. waa go'aan aan waxba iska beddelayn haddii uu madaxweynuhu ka noqdo,ama ciidanku ka noqdo,amaba shacabku ka noqdo,Quddusna رحمه الله. wuu ogyahay in ay kelmidihiisi fadhiisteen qalbiga madaxda raadna ay ku sameeyeen,raadkale ay ku samaysay xasuusinta ilaahay waajibna ay ku tahay dhinaca Islaamka,laakiin Malaga yaabaa inay quluubtan ged geddoon ku dhaco,haa sidaa darteed ayuu Quddus u sameeyey arrin aan suurto gelinaynin inay mar labaad fekeraan madaxdani,rajo kale oo isdhiibis dhaxalsiisanaya waaba uu ka qariyey,hortoodana wuxuu keenay hal go'aan oo keliya go'aankaasina waa dagaal..!!

Muxuu go'aansaday Quddus?!

Ka dib markii uu golihiisi ciidamada la tashaday waxa uu go'aansaday in qoorta laga gooyo afartii Tataari ee uu Holaako warqadda hanjabaadda ahayd u soo dhiibay isla markaana ahaa ergada,ka dibna madaxyadooda laga laalaadiyo Baab Alsuwaylah ee Qaahira,halkaasna waxa uu ugu dooray inay tirada ugu badan shacabku arkaan,taasina waxay keenaysaa in ay shacabku ku xasilaan,in hogaamiyahoodu wax cabsi ah ka dareemaynin dhinaca Tataarka,taasina kor ay u qaadeyso rajadooda iyo mooraalkooda,sidoo kale tani waxay jawaab celin qadhaadh u tahay Tataar,sheegaysona inay Masar ka duwan tahay waddamo badan oo si ka duwan sidan u qaabilay Tataar,raadeynta ay Tataar ku samaynaysona ay tahay mid xun, ugu yaraan quluubta Tataarka haba yaraatee ay ku ridi doonto wax ka mid ah cabsi ama inay ka laabtaan go'aankoodii,arrintani waxay kale oo jaangoysay in aan laga fekerin haba yaraatee wax wada hadal nabadeed ah,sidoo kale diyaar garoow buuxa oo ku wajahan Jihaad ayey tilmaamaysaa,waayo haddii la laayey ergadii Tataar Masar kama aqbalayaan isdhiibis,xataa haddii ay Muslimiintu aqbalaan.

Taasi waxay ahayd dedaalladii _Quddus رحمه الله. _ iyo madaxdiisi.

Balse aan dhacdadan is yar dultaagno.

Mawqifka Ergada la laayo:

Ma garanayo waddo sharci ah oo uu Quddus u adeegsaday gawricista ergadan_ Islaamka dhexdiisa lama laayo Ergada.. ergay Muslim ah iyo ergay gaal ah labadaba,xataa ergada qolada diinta ka baxday ee loo yaqaano (Murtadiinta).!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

يقول عبد الله بن مسعود ﷺ: جاء ابن النواحة وابن أثال رسولا مسيلمة إلى النبي ﷺ فقال لهما: «أتشهدان أني رسول الله؟» قالا: نشهد أن مسيلمة رسول الله، فقال رسول الله ﷺ: «آمنت بالله ورسوله، لو كنت قاتلاً رسولاً لقتلتكما».

wuxuu leeyahay Cabdullaahi bin Mascuud (Rc) waxaa Nebigu u yimid Ibn Nawaaxa iyo Ibn Uthaal iyaga oo ah ergo ka socda Musaylama Kaddaab,wuxuu ku yidhi Nebigu: "**ma qirsan tihiin in aan ahay Rasuulkii ILAAHAY"?** waxay yidhaahdeen : "waxaanu qirsannahay in Musaylama yahay Rasuulkii Alle" Wuxuu yidhi Rasuulku (NNKHA): "**ILAAHAY iyo Rasuulkiisa ayaan rumeeyey,haddii aan ahay mid ergada laaya waan idin layn lahaa".**

Wuxuu leeyahay ibn Mascuud(Rc) waxaa xadiiskan ka Sunnoowday in aan la laynin ergada.

Riwaayad kale oo Axmed iyo Abi Daa'uudna waxay sheegaysaa in uu Rasuulku (NNKHA) yidhi : " ilaahay baan ku dhaartaye haddii ergada la laynayo qoorta ayaan idiin dheerayn lahaa".

Sidaa darteed xukunka sharciga ah ee Islaamku waa in aan la dilin Ergada,ma garanayo markaa Quddus xujada sharciga ah ee uu u adeegsaday dilka ergadan! Sidoo kale ma garanayo waxay uga aamuseen culimadii sebenkaas joogtay?waase laga yaabaa inay ka hadleen laakiin aanu inna soo gaadhin hadalkoodii,waxaa kale oo laga yaabaa in uu Quddus arkay Tataarka oo qawaaniintii dunida iyo shuruucdii dagaalada iyo miisaankii caadiga ahaaba jebiyey oo ay laayeen dumarkii,caruurtii odayadii,curyaamiintii aan dagaalba geli karaynin,weliba ka laayeen tirooyin aan la koobi Karin,oo ay Baqdaad oo keliya ku dileen Malyuun Muslim,marka aan la eegin magaalooyinkii ka horeeyey iyo kuwii ka dambeeyeyba, waxaa kale oo laga yaabaa in uu sidan u sameeyey markii uu arkay warqadda inay u soo qoreen Muslimiin abwaanno ahi,hadalka ay ku adkeeyeen,isla markaana isla wayni iyo cago jugleyni ka buuxday oo uu ka xumaaday..waxaa laga yaabaa inay ku kallifeen arrimahaasi,waase lama huraan in aan tilmaano weligeen waa inaynaan daba gelin wadada xun ee siyaasadda maadiga ku salaysani ay marto.. tusaale ahaan haddii ay gaaladu laayaan caruurta Muslimiinta.. uma banaana Muslimiinta inay laayaan caruurta gaalada,haddii ay gaaladu laayaan dumarka Muslimaatka ah sharaftoodana meel kaga dhacaan looma oggola Muslimiintu inay sidaas oo kale ku sameeyaan dumarka Kaafiraatka ah ee aan dagaallada ku jirin,in sharafteeda la xumeeyaana waa xaaraan haddii ay dagaallamaysay iyo haddii aanay dagaallamaynba,haddii ay gaaladu ballantii ay Muslimiinta kula jireen jebiyaan Muslimku ma jebin karo ballankii uu gaalada kula jiray, sidaas oo kale waxaa xasuus mudan Muslimiintu sida aanay u laynaynin ergada.. ayaanay ugu bannaanayn inay laayaan dadka magan gelyo ahaan ugu dhex nool Muslimiinta amaba si nabad gelyo ah u dhex deggan Muslimiinta.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxyaabahaas oo dhan waxaa looga jeedaa inay diinta Muslimiintu ahaato mid saafi ah oo aan ku dhex qasmin wasakhda iyo qawaaniinta liidata ee dunidu sheegato..iyo si uu Islaamku Tusaale sarreeya u noqdo, dabeecadda Muslimku u noqoto mid heer sare ah isla markaana dadyawga kale usoo jiidi karta inay galaan Diinta Islaamka.

Isku soo wada duuboo waxa aan kasoo qaadaynaa tallaabada Quddus iyo madaxdiisa khalad ka dhashay dedaal.. waxaana khasab ah in Insaan kasta si kasta oo uu u dedaalo khalad ka dhacayo marka laga reebo Nebiyada.. waxaana qofka ugu filan faan in aad tirisid ceebihiisa.

Mushkilad Dhaqaale:

Shirkaas khatarta ah ka dib,ka dib qaadashada go'aankaas adag,ka dib dilkii Ergada..wuxuu bilaabay Quddus (IHN) deg deg in uu ciidamadii u diyaariyo,waayo waxaa soo dhowaaday dagaalkii waqtigiisi.

Laakiin Quddus waxaa ka hor timid mushkilad dhaqaale, oo aan ka dhib yarayn kuwii hore ee uu kasoo gudbay.. ogowna Quddus wuxuu xukunka qabsaday afar iyo labaatankii bishii Dilqicda ee sannadkii 657h,warqadda Holaakona waxay u timid ka hor intii aanu Holaako ka bixin Shaam oo aadin Mangooliya madaxweynihii Tataar geeridiisi awgeed,Holaakona wuxuu ka tegay Shaam markii ay dhacday Xalab waxyar ka dib,waxyarna lagu jiro furashadii Dimishiq,Xalabna waxay dhacday bishii Safar 658h,Dimishiqna waxay dhacday Rabiic alawal 658h.. macnaha intii uu Quddus qabsaday ka dib Masar saddex bilood keliya.

Dhamaan tarbiyadaha tallaabooyinka uu qaaday oo dhammi waxay ku qaadatay saddex bilood,mashaakilkii ka hor yimid waa caddaan inay u baahnaayeen sannado_ waqti dheer oo dhamaystiran,si uu u dhamays tirto dhinac walba xaaladaha Masar.. laakiin wuxuu kaalmaystay Ilaahay SW,wuxuu u isticmaalay karti dheeraad ah iyo firfircooni kagana hor tagayey mushkilad kasta oo ka hor timadda hadafka maskaxdiisa ka guuxayeyna waa u caddaa:

((khasab waa in awooddan dhan loo kala dhacaa..Tataar, dhulka Muslimiintana la xoreeyaa)).

Mushkiladda Cusub ee hortaalla Quddusna waa.. ((Mushkilad dhaqaale!!)).

Waxaa khasab ah in la diyaariyo ciidamo Muslim ah,loona diyaar garoobo imtixaan ay khasab tahay in uu imaanayo,la hagaajiyaa dhufeysyadii,qalcadihii iyo biriishyada,si buuxda loogu diyaar garoobaa dagaal khasab dhici doona, dadkii in loo xasiliyo kayd ay cunaan xaaladda go'doominta.. waa arrimo aad u culus oo weliba tiro badan.. Dhibaatooyin dhaqaale iyo dalka oo ku sugnaa xaalad dhaqaale oo aad u daran,ma jirto waqti qorshe shan sannadood ah ama toban sano ah lagu xallilo dhibaatadan.. Tataar ayaa albaabada Masar taagan..waayo Tataar waxay ku sugan yihiin Gasa..!!

Muxuu samayn doonaa Quddus رحمه الله?

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Quddus iyo mar labaad ayuu isugu yeedhay golihiisi wada tashiga wuxuuna uga yeedhay madaxdii ciidamada iyo culimada iyo foqohadii Muslimiinta, oo uu ugu wayn yahay Suldaankoodii Cissi bin Cabdi Salaam رحمه الله _ Lagagana wada hadlayo sidii dadka looga qaadi lahaa cashuur dheeraad ah oo ciidamada lagu dagaal geliyo.. waxay guda galeen inay arrinta falanqeeyaan oo rog rogaan si ay dhibaatadan daran xal ugu helaan,iyo sidii lagu heli lahaa dhaqaale ciidanka xoogga leh ee loo diyaariyey inay iska celiyaan Tataar lagu dagaal geliyo.

Quddus wuxuu soo jeediyey in dadka laga qaado cashuur dheeraad ah ay u baahan tahay Fatwo sharci ah,waayo dawladda Muslimiinta ahi ma bixiyaan waxaan ahayn Sako,mana bixiyo qof aan awoodini,shuruudaha sakaduna waa la wada yaqaan,markaa amridda cashuur dheeraad ahi waa mid aan la oggoleyn illaa duruuf khaas ah maahaane,waqti cayimanna leh,waxaa lagama maarmaan ah in la helo tiir loo cuskado oo bannaynaya.. haddii kale waxay noqonaysaa cashuurtii la mamnuucay,iyo amar cashuureed oo aan xaq loo lahayn cadaab kululna lagu mudanayo.

Waxay soo weriyeen Axmed iyo Abu Daa'uud ilaahay haw naxariisto labadoodaba,kana soo weriyeen Cuqba bin Caamir (Rc) wuxuu yidhi: "waxaan maqlay Rasuulka(NNKHA) oo leh "Jannada ma galo cashuur qaaduhu".

Markii ay sineysatay gabadhii guriga lahayd_ ee dhagaxa lagu dilay ka dib markii ay qiratay inay samaysay sinnada isla markaana doonayso in laga maydho dembigeedii wuxuu yidhi Rasuulku ﷺ: isaga oo waynaynaya sida ay u toobad keentay " **ilaaha Naftaydu gacantiisu ku jirto ayaan ku dhaartaye waxay toobad keentay toobad haddii uu toobad keeni lahaa ninka cashuurta qaadaa toobad keeni lahaa loogu dembi dhaafi lahaa**".

Sidaa darteed si xun ayaa loo maagay in dadka laga qaado cashuur aan xaq loogu lahayn,isla markaana si aan sharci ahayn loo isticmaalo.

Wuxuu leeyahay imam Nawawi_ isaga oo sharraxaya xadiiskan "cashuurtu waa macaasida ugu foosha xun,waxay ka mid tahay dunuubta lagu halaagsamo,sababtuna waa su'aasha badan ee dadka iyo mugdiyadooda aan la ogeyn xaaladda ay ku sugan yihiin,qaadashada xoolohooda si aan sharci ahayn, u isticmaalideeda wejigii loogu talo galay weji aan ahayn".

Sidaa darteed Quddus wuxuu su'aal ahaan usoo bandhigay arrintan.. sugayna ra'yiga culimada ee ku saabsan arrintan.

Isaga oo aad u baahan,lacagtanna lagu diyaarin doono ciidamada gelaya dagaalka dar ilaahay ah,Sheekh Alcissi bin Cabdi Salaamna si dhugle ayuu ula socday arrintan iyo go'aankan adag,sidaa darteed kuma raacin ilaa labo shardi maahee.. labo shardi oo adag!!.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Fatwadii kama dambaysta ahayd:

Wuxuu yidhi: Sheekh Alciss bin Cabdi Salaam_ “haddii cadawgu uu dal weeraro caalamka Islaamka oo dhan waxaa waajib ku ah inay cadawgaas la dagaalamaan,wayna bannaan tahay in maatada iyo shacabka laga qaado (wax ka badan Sakada) si loogu diyaar garoobo dagaalka,waxaase shuruud ah in aan khasnadda dawladda waxba ku hadhin”,(shardiga koowaad) shardiga labaadna waa kasii adagyahay..! wuxuu yidhi Sheekh Alciss bin Cabdi Salaam:- “waa in aad iibisaan waxyaabaha aad haysataan,ee alaabtu iyo waxyaabaha la midka ah(macnuhu waa madaxdu markay keento wixii hanti lacageed ay haysay,haddana waa inay qalabkooda iibiyaan) mid kasta oo idinka mid ahina uu la hadhaa oo keliya Faraskiisa iyo hubkiisa oo qudha, si aad arrintaas iskaga mid u noqotaan idinka iyo shicibku,qaadashada xoolaha dadwaynuhuse haddii alaabtiinii quruxda badnayd guryaha idiin taallo idiinma banaana!!”.

Waa fatwadii geba gebaynta..!!

Wuxuu ku yidhi Sheekh Alcissi bin Cabdi Salaam Quddus_ ma banaana in dadka lagu soo rogaa Cashuur ilaa ay sinmaan hantida ay wasiiradu haystaan iyo hantida shacabku haysto,ciidankana waxaa lagu diyaarinayaa xoolaha madaxda laga soo qaado,marka ay ku filaan waydo ayey banana tahay in shacabka laga qaado wax ku filan ciidamada,intaas wax ka badanse maya.

Haddii ay fatwadan jaangoynteedu ahayd mid yaab badan,sida uu u aqbalay Quddus oo markiiba u fuliyey ayaa kasii yaab badnayd..!!

Waa uu aqbalay Quddus_ hadalkii sheikh Cissi bin Cabdi Salaam ilaahay labadoodaba haw naxariisto.. weliba si fudud..!! naftiisa ayuu kaga bilaabay dhamaan wuxuu iibiyey wixii uu hanti haystay,madaxdiina waxa uu amray inay sidaas sameeyaan!.. iyaguna way oofiyeen,waxaa dhamaystirmay diyaarintii ciidamada si sharci ah.. waxay Muslimiintii Masar daahfureen daahfur cajiiba.. waxay daahfureen in Masar ay hodon tahay,waddankana ay yaallaan xoolo fara badani,inkasta oo ay jirtay dhaqaale xumo daran oo waddanka ku baahday,haddana waxaa ka buuxay jeebabka wasiirada iyo madaxda xoolo faradhaaf ah.. maalkoodiina qaarkood wuxuu leekaaday miisaaniyadda dawladda oo kale.. waxay gaadhay qaar ka mida madaxda iyo wasiirada xoolohoodii doonyaha waaweyn ee waddanka u soo gooshaa xoolaha ay keenaan oo kale..qaar kale hantidoodii waxay gaadhay inay ku filaan lahayd dhamaan foqorada reer Masar.. waxayba ku filaan lahayd waxka qabashada dhaqaale xumada waddanku ku jiray.

Laakiin nasiib darro waxay maalkan iyo xoolahani gelayeen jeebabka madaxda iyo wasiirada,weliba waxay u gelayeen sifo aan sharci ahayn,iyo weji aan xaq ahayn, waa bakhayl nimo iyo laaluush cunid,waa dulmi,wuxuu u qaadanayaa reer hebelnimo,wuxuu ku bixinayaa wax aan maslaxadi dadka ugu jirin naftiisa mooyaane,wuxuu siinayaa cid aan xaq u lahayn.. sidaas ayey kusoo burqadeen

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

xoolihii Masar oo qaraq ahi..waxay noqotay Masar dawlad faqiirnimo ku seexata iyada oo hantideedu gaadhayso inay noqon lahayd ilaha dhaqaalaha waddankaba!!

Ka dib waxa uu bilaabay Quddus hawl gal ku wajahan sidii uu u nadiifin lahaa nidaamka waddanka.. nadiifinta quluubta iyo gacmahaba.

Kama dambaystiina wuxuu ku guuleystay hogaamiyehani in uu isku xidho madaxdii iyo shacabkii muddo sannado dheer ah ka hor kala xidhiidh furtay.. isku xidhkaasna midhihii kasoo baxay waxay noqdeen in la diyaariyo ciidan xooggan oo haybadleh.. maalka ay cunayaanna xalaa yahay.. ducada dadwaynuhuna u dheer tahay.. si wacanna u diyaar garoobay.

Sidee ayaan loogu gargaarayn ciidan noocaas oo kale ah?

Hal-beegga guushu Islaamka dhexdiisa maaha wax adag. Halbeegaasina wuxuu leeyahay: ﴿إِن تَنْصُرُوا اللهَ يَنْصُرْكُمْ وَيُثَبِّتْ أَقْدَامَكُمْ﴾ [محمد: ٧]

Haddaa ilaahay u gargaartaan,wuu idiin gargaari,gomodihiinana wuu sugi

Nasriga ilaahay SW_ wax kale ma aha ee waa ku dhaqanka sharcigiisa,ciidanka Muslimiinta ah ee garab mara sharciga ilaahayna macquul maaha in uu guuleysto.. bilaabista waxa laga doonayaa gacanta Muslimiinta.. u gargaar ilaahay SW_ ilaahayna waa kuu gargaari doonaa_.

Sidaas ayuu ku diyaar garoobay ciidankii Masar ee Muslimka ahaa.. si waynna ugu diyaar garoobay.

Xatmiyadii Jihaadka Falastiin dhexdeeda:

Waxaa yimid waqtigii la diyaarshay qorshaha dagaalka, ee loo jeexay ciidanka khariiraddii ay ku dhaqaaqi lahaayeen.

Wuxuu isugu yeedhay Quddus madaxdii ciidamada,si uu ugala tashada wadada ugu wanaagsan ee loola dagaal geli karo Tataar,iyo inay baadhaan qorsheyaal lagu xaqiijin karo guul dhaba.

Quddus ayaa istaagay رحمه الله si uu golaha usoo dhex dhigo ra'yigiisa ku aaddan qorshaha milateri ee dagaalka..dabcan markii uu sheegayna golihii oo dhan ayaa kacay fadhina diidey.. wuxuu ra'yigii Quddus golaha ka abuuray dood culus.

Quddus muxuu doonayey رحمه الله ?

Wuxuu doonayey in uu la baxo ciidankiisa si ay ugaga hortagaan Tataar....Falastiin!.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Wuxuu go'aansaday in aanu ku sugin Masar intay soo gelayaan Tataarku,laakiin ay isaga iyo ciidankiisu ka hortagaan.

Intii badnayd ee goluhuna way kasoo horjeesteen.. intii badnayd ee madaxdu waxay go'aamiyeen in uu Quddus joogo Masar oo iyada ka difaac galo..Masar..ra'yigii madaxda,waa dalkiisi laakiin Falastiin waa jamhuuriyad kale..!! waxay madaxdani arrinta iska taageen dhinac reeraysan runtii, macnaha haddii aanay Tataarku soo gelin Masar oo ay iskaga negaadaan Falastiin waxaynu ka nabad gelaynaa dagaal dhiig badani ku daato.. haddiise aynu innagu doonano miyaa,markaa doorasho kuma lihin dagaalka.

Quddus laakiin ilaahay haw naxariistee_ aragtidiisu way ka ballaadhnayd sidan.

Wuxuu bilaabay Quddus_ in uu arrinta la niqaasho madaxdan,oo u sharraxo sababaha uu ku saleeyay qorshihiisa dagaal,iyo fogaanshaha aragtidiisa,iyo ujeeddooyinka dagaalka laga leeyahay ra'yigiisa,iyo sida ay ciidanka muhiim ugu tahay fekreddiisan uu qabaa,wuxuu fahamsiiyey Quddus_ waxyaabo hore ka maqnaa sannado fahamkooda_maskaxo badan.

Waana xaqiiqooyinkan:

Kow: Amaanka Masar degaan ahaan wuxuu ka bilaabmaa xuduudeheeda bariga,laakiin maaha gudeheeda,midda kale sidee ayey Masaaridu amaan uga noqon karaan dawladda awoodda badan ee jaarkeeda Falastiin deggan?!.. caqligu waxa uu hubaa in la fili karo weliba si weyn,in dawladdan quwadeysani fursad kasta oo taag darro way ka faa'iideysan doontaa,Masarna waxay ka qabsan doontaa dhinaca bari,muddo koobanna ay ku qabsan karaan Siinaay, Masarna ay dhuuxa ka gilgilan doontaa,markaa waxaa lagama maarmaan ah in halkaas lagu jilciyo laguna daciifiyo,ama halkaas in lagula dagaalamo,ama taageero lagu siiyo ciddii halkaas kula dagaalamaysa..kaasi waa caqli ku fekeraya gobolka oo dhan.

Labo:waxaa u wanaagsan ciidanka in Quddus meeshan ka kaxeeyo isla markaana hogaamiyo ilaa goobta dagaalka,waayo arrintaasi raad xun ayey ku samaynaysaa cadawga,sidoo kalena ay u bannaan tahay waddo uu hadhow dib usoo maro haddii ay dhacdo in la jebiyo ciidanka Muslimka,laakiin haddii ay guul darro kula kulanto ciidanka Masaarida ee Muslimka ah Masar dhexdeeda,waxay u furaysaa waddo cadawgu uu socon karo ilaa Qaahira.

Saddex:waxaa u wanaagsan ciidanka_ inay kaga naxsadaan,isla markaana ay iyagu doortaan meesha ay noqonayso goobta dagaalku,halkii uu cadawgu ka dooran lahaa,inay kaga naxsadaan Muslimiintu waxay ka faa'iidayaan inay helaan fursado badan oo lagu guuleysan karo,waayo ciidankaas iska deggani heli maayaan fursad ay si fiican ugu diyaar garoobaan,markaa taasi waxay dhinac ka noqonaysaa inay ka bish tidhaahdo marka laga naxsado,ka dibna laga guuleysan karo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Afar:(qodob aad muhiim u ah) Muslimiinta Masar waxa door muhiim ah u ah dhinaca walaalohooda, Falastiin,Suuriya,Lubnaan,Ciraaq,Afgaanistaan,Adriibayjaan,Shiishaan..ma dhacayso in lagula kaco gawricitaan wadamadaas Muslimiinta ah, oo la hatigo dumarkooda,la dumiyo daarohooda,oo aanay usoo dhaqaaqin walaalaha reer Masar..dhaqaaqa ciidamada Muslimiintu si ay ugu gargaaraan walaalohooda reer Falastiin maaha wax wanaagsan uun ama loo baahnaa,laakiin waa faral dushooda saaran..fardul kifaayona maaha,ee waa fardul cayn.. wuxuu ku habsaday cadawgu dhulkii reer Falastiin markaasuu dagaalna ogeysiiyey,haddii aanay reer Falastiin ku filneyn dagaalka la sheegay waxaa ka caawin doona mandaqadda jaarkeeda ee ugu dhow mandaqadaha Islaamka,yacni Masar iyo wadamada kale ee ay jaarka la tahay sida Suuriya,Lubnaan,iyo Urdun,haddii ay Masar iyo magaalooyinkaas kale ku filaan waayaan waxaa caawinaysa jamhuuriyadda ugu fog ee Islaami ah.. sidaasayna u soconaysaa ilaa dagaalka looga baahdo Muslim kasta oo dunida korkeeda Saaran.
Waa arrin aad u khatar badan.

Hatigaadda dumarka Muslimiinta ee dal,iyo ka aamusitaanka wadamada kale,ay ka aamusaan hatigaaddaas, waa dembi wayn,iyo sharciga oo si wayn loo baal maray.. sidaa darteed Quddus_ wuxuu u baxayaa sidii uu u caawin lahaa Falastiin,Suuriya iyo dhulalka la midka ah,si aanayba ugu fekerin Tataar duullaanka Masar.

Shan: Muslimiintu door kale ayey ku leeyihiin dhinaca Tataarka..haddii ay Islaamnimada diidaan ama inay bixiyaan cashuur joogitaankooda dhulka Muslimiinta, waxaa waajib ah in lala dagaalamo,walawba ha joogaan dhulkoodiiye,balk a waran hadday joogaanba dhul Muslimiini leedahay..joogitaankooduna ay yihiin caqiidooyin foolxun oo faasidnimo ah,iyo dagaaladan gumaadka ah ee u eeg fitno dunida loo soo diray.. khasab waxaa ku ah Muslimiinta inay fitnadan wax ka qabtaan,waayo doorka Muslimiinta dunida loogu soo saaray waa uu ka wayn yahay keliya inay ilaashadaan xuduudahooda ay ku noolyihiin,maya ee waxaa weeye inay diintan fidiyaan oo gaadhsiiyaan adduunyada inta bashar ku noolyahay,dadkana ay baraan Islaamka,iyo inay dadka gacmaha soo qabtaan meel kasta oo dunida korkeeda ah haku noolaadeen ilaahay dhankiisana usoo kaxeeyaan.
Ilaahayna wuxuu leeyahay:

﴿كُنتُمْ خَيْرَ أُمَّةٍ أُخْرِجَتْ لِلنَّاسِ تَـأْمُرُونَ بِـالْمَعْرُوفِ وَتَنْهَوْنَ عَنِ الْمُنْكَرِ وَتُؤْمِنُونَ بِاللهِ﴾[آل عمران:١١٠].

waxaad tihiin umaddii ugu khayrka badnayd,ee loo soo saaray dadka,waxaad faraysaan wanaagii,waxaad ka reebaysaan xumaantii ilaahayna waad rumeyseen.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Wuxuu leeyahay Abi Hurayra isaga oo aayaddan sharraxaya sida saxeexa Bukhaari ku soo aroortay: "waxaad tihiin dadka ugu wanaagsan dadka,waxaad u imaanaysaa iyaga oo silsilado qoorta kaga xidh xidhan yihiin markaas ayaad Islaamka soo gelinaysaan".

Macnaha looga jeedaana waa furashooyinkii Islaamka.. ka hor dadku way nebcaysan jireen in waddankooda lagu soo duulo,ka dib waxay bartaan Islaamka markaas ayey diinta soo galaan,sidaas ayey naar kaga badbaadaan oo janno ku galaan,haddiise layska dayn lahaa iyaga oo caabudaya Sanam,Loox,Sac,bashar,janona ma galeen udgoonkeedana ma uriyeen.

﴿إِنَّ اللهَ لاَ يَغْفِرُ أَن يُشْـــرَكَ بِـــهِ وَيَغْفِرُ مَا دُونَ ذَلِكَ لِمَن يَّشَاءُ﴾[النساء:٤٨]

ilaahay ma dhaafo haddii wax lala wadaajiyo cibaadadiisa,intaas wixii ka sokeeya wuu u dhaafaa cidda uu doono.

Isku soo wada duuboo shantan arrimood ayaa Quddus ku hogaamisay fekerka ah in ciidamadu hinqadaan,una kicitimaan garoomada dagaalka ee Falastiin halkii ay Masar noqon lahayd.

Dhinac kale waxaa khasab ah in uu Quddus ogaa in haddii Tataarka Masar lagu sugona ay faa'iidooyin kale ugu jireen Muslimiinta,kasoo ambabaxa ciidamada Tataarka min Falastiin ilaa Masar geedigu ku dheeraanayo ciidamada Tataar,xidhiidhkuna ka go'ayo sidoo kale ay qaaciidooyinkii Tataarku burburi doonaan,waayo waxay soo marayaan saxaraha balaadhan ee Siinaa,waa saxare ay ku halaagsamaan ciidamada aan garanaynin waddooyinkiisa,halka sugitaanka Tataar ciidamada Masar ay sii marayaan saxaraha Siinaay oo saamayn ku yeelan doona awoodda ciidanka.

Sidaa darteed faa'iidooyinka dhabta ah ee kujira in ciidamada la geeyo Falastiin, iyo faa'iidooyinka marka lagu sugo Masar ciidanka Tataar markii uu isu qiyaasay waxa maskaxdii Quddus isku sawirtay arrimihii oo kala caddaaday,arrimihii shanta ahaa ee aan soo sheegnay ayaa waxay taageereen in ciidanka loo dhaqaajiyo ilaa Falastiin.. wuxuu garanayey inay quwadaha Tataar sugi doonaan ku kalsoon yihiin isku filaanshohooda oo aad u sarreeyey furashadooda dhulal dabeecad ahaan aad u adag oo kala duwan darteed,iyo inay wiilal badan oo Muslimiin adeegsanayaan oo ku raacay dhulballaadhsigooda deg dega ah,ama xukun jacayl ku raacay,amaba amaan biday,kuwaasina ay tusi doonaan waddooyinka ugu dhow dhow dhinac Masar ,uguna nabadgelyo fiican,markaa inay soo dhambalaan Siinaay ciidamda Tataarku waa shay laga filan karo_ inkasta oo Quddus niyaddu ugu degsanayd askartiisa,kuna kalsoonaa awoodda ciidankiisa soconaya,iyo aqoontiisa tababar ee sarraysay,wuxuuna ogaa socdaalkiisa uu kaga gudbayo Siinaay ilaa Falastiin inay u suurto gelayso,weliba markuu ciidankiisa arkay ay aad u fududdahay Inshaa Allaah.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Sidaa darteed ayey u cuslaatay in la dhaqaajiyo Ciidanka ilaa Falastiin..golihiina si wanaagsan ayey ugu qanceen sharraxaaddii Quddus, wuxuu bilaabay markaa Quddus,in uu diyaariyo ciidanka,una diyaar garoobaan socod lagaga talaabayo Siinaay ka dibna lays haleeli doono Tataar.

Quwadda koowaad..Iimaan:

waxaa bilaabmay ololihii laysku wargelinayey dagaalka maaha oo qudha hogaamiye yaasha iyo ciidamada oo keliya..

Laakiin shacabka dhamaantiis!

Waa khasab in shacabka loo diyaariyo dagaalkaas wayn.

Waa khasab inay shacabku ku noolaadaan nolol san iyo guul, waa inay ka tagaan lahwiga iyo nolosha khiyaalka ah oo ay waaqici noqdaan.

Waa khasab inay shacabku jeclaadaan jihaad.. ayna u caddaato hawsha hortaallaa.

Markaa waxaa khasab ah inla guubaabiyo,ogeysiiyo,lalana dhexmaro dhawaaqyo wargelineed oo rag u gaara loo saaray oo daacad ka ah..mararka qaarkood waxaa dhacaysay qaar ka mida munaafiqiinta oo ka sheekaynaya jihaadka,iyo dhibaatada lagu dhiirigelinayo,loogana jeedo siyaasad muddeysan,marka laga dhamaysto danta laga leeyahayna ay wacdigan iyo waxani iska dhamaan doonto,dibna aanay u maqli doonin ka hadal jihaad iyo dagaal.

Qoladaas munaafiqiinta ah ee lasoo kiraystay dhoob dhoobistoodu ummaddan jihaadku ka go'an yahay kama dhex shaqaynayso.. balse waa khasab in dad u gaara loo sheegaa oo dadka ku wargelinaya dagaalka Tataar warkaasna ay sheegaan culimadii waddanku.

Waxaa baxay Sheekh Alcissi bin Cabdi Salaam iyo culimadii umadda,waxay fuuleen Mimbaradii masaajidda, waxay dadka kor ugu sharraxeen dareenka Jihaadka..jihaadka ayey uga sheekeeyeen maxaa ka wanaagsan warka jihaadka.

Dadkii ayey jeclaysiiyeen jannada.. adduunyada ayey ka jeediyeen..waxay u waynayeen Ajarka shuhadada.

Waxay uga sheekeeyeen Muslimiintii waaweynayd ee Mujaahidiinta ahayd.. waxay uga sheekeyeen Khaalid iyo Qacqaac,Subayr,iyo Nucmaan.. waxay uga warameen,Daariq ibn Siyaad,Muusa Ibn Nusayr,Yuusuf bin Tashafiin,Cumaadudiin Sinki,Nuuradiin Maxmuud,Salaaxudiin Ayuubi.

Waxay xasuusiyeen maalmihii ilaahay..Beder..Axsaab…furashadii Maka..Tabuuk.. Qaadiisiya..iyo Nahaawund.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxay xasuusiyeen goobtii Xaddiin oo aanay kasoo wareegin wax ka badan shan iyo toddobaatan sano.

Sidoo kale goobtii Almansuurah,Faariskoor,oo ay toban sano oo keliya kasoo wareegtay.

Quluubtii shacabka ayaa xamaasad la holcatay.

Waa lagama maarmaan Mu'miniitooy in maalintan oo kale shacabka la guubaabiyaa.

Waa lagama maarmaan in lagu rabbeeyaa caruurta,iyo dhalinyarada inay jeclaadaan dhimashada dar ilaahay,iyo waynaynta arrinta Jihaadka,iyo jacaylka jannada.

Waa lagama maarmaan inay aabbayaasha iyo hooyooyinku ku rabbeeyaan caruurta jacaylka jihaadka,maaha inay caruurta ka fogeeyaan dhamaan wixii keeni kara ((Mashaakil)) naftana biime gelin kara,diinba ha ahaadee..!!

Waa lagama maarmaan dabcan in dumarka la jeclaysiiyo jihaadka..oo gabadhu ay ku faanto in saygeedii uu u baxay jihaad,caruurteedana ay si fiican usii ilaalinayso inta uu jihaadka ku maqan yahay odeygu,waxaa sidoo kale ah in la baro inay aqbasho haddii ninkeedu shahaado qaato Samir,khayrna ay xisaabsato..!! waayo ninkeedii wuxuu uga amba baxay goobtii dagaalka Janno si toos ah.

Shacabka oo heegan la geliyaa maalinta jihaadka waa muhiimad wayn.. wax sahlan oo fududna maaha.. waxay u baahan tahay dedaal wayn..manaahij culus,iyo Ikhlaas qotodheer..waqti dheerna way qaadanaysaa..

Haddii aan dareenkaas lagu abuurin shacabkuna Samir kuma yeelanayaan Jihaadka,iyo nolosha colaadeed,sidoo kale iyo nolosha go'doominta.

Waa xaalad xaasaasi ah.

Ma jirto dheel dheel,ciyaar, iyo nolol fakahaadsi ahi!

Taas macneheedu maaha dheeldheelista,ciyaarta iyo fakahaadsigu waa xaaraan.. laakiin ummad dedaalaysaa oo nolosha hadafka lehi lama mid ahaa nolosha umadaha kale..ummadda halganka iyo dedaalka ku jirtaa noloshoodu waa nolol tayo leh.. nolosheeduna waa mid qiimo ugu fadhida isla markaana ka madhan hawaawi iyo khayaal.

Noloshan ay xarunta u tahay rabbaayadda noocaas ahi waxay keenaysaa in isbeddel xididada ku dhaco shacabka,hab feker oo waaqici ah,taasina waxay u baahatay cid sidan u rabbaysa shacabka oo khaasa..waxaa lagama maarmaan noqotay in culimadu ay qabato hawshaas,si ay u gutaan waajibaadkaas culus.

Waxaa baxday culimadii Alazhar si ay u gutaan muhiimadooda qaaliga ah.. waxay fahmeen aqoonyahannadii Alazhar in aanay shaqadoodu ahayn qudha inay la

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

tacaalaan dalabka nolosha,in aaya shaqadoodu ahayn inay ka muuqdaan xaflado kala duwan,in aanay shaqadoodu ahayn raalli gelinta amiirka iyo madaxweynahooda,waxase fahmeen inay shaqadoodu tahay addoonimada_dadka oo dhami_ addoomo u yihiin Rabbiga caalamiinta,addoonimadana uga soo baxaan sidii uu faray Rabbiga Caalamiintu.

Way baxeen culimadii Azhar iyaga oo doorkooda uga qayb qaadanaya sidii ay uga qayb qaadan jireen waqtigii Salaaxudiin Ayuubi_madhabkii Sunniga ee Masar.. doorkoodii ay kaga jireen waqtigii dagaaladii Kiristaanka ay ku jireen,Ayaamihii Tataarka,doorkii ay ka dhaxleen Muslimiintu dagaaladii ka dib ay la galeen Kiristaanka.. ay kula galeen Faransiiska Masar,ay la galeen markii Ingiriisku Masar kusoo duulay,ay la galeen markii Yuhuuddu Masar Kusoo duushay.

Ilaahay ayeynu waydiisanaynaa in uu Culimada inoogu gargaaro hogaamin ku salaysan dariiqadii saxeexa ahayd,si ay umadda uga saaraan waqtiga ay cidhiidhiga gasho, iyo xaaladaha khatarta ah.

Waxay noqdeen shacabkii reer Masar kuwo si buuxda ugu kalsoon dagaalka.

Waxaa soconaya diyaarintii ciidamada iyo dar dar gelintoodii,soo ururintii dadkii dagaalka gelilahaa ee iyagu goostay inay ku biiraan dagaalyahannada Muslimiinta,tababarkii Mujaahidiinta,intaasina waxay qaadatay muddo shan bilood ah,laga bilaabo bishii rabiic awal 658h ilaa dhamaadkii Rajab ee isla sanadkaas.

Dhibaatadii ((Caka)):

Waqtigii lagu gudo jiray_ diyaarinta ciidamadu inay isla helaan jiibta iyo jaanta,waxaa garab socotay dedaalo dibloomaasiyadeed oo uu waday Quddus,uguna gogol xaadhaya dagaalka wayn ee uu la geli doono Tataar.

Waxaa jiray qaybo aan yarayn oo Falastiin,Lubnaan iyo Suuriya_ gaar ahaan xeebta badda cad ee dhexe_oo ay markan ka hor qabsadeen imaarado Kiristaan ahi,waxaa halkaas ku taallay imaarad Kiristaan ah Caka,Xiifa,Siidaa,Suur,Bayruut,Laadiqa,Andaakiya iyo kuwo kale..imaaradda ugu awoodda badanina waxay ahayd Caka oo ku taallay Falastiin,imaaraddani waxay ku taalla wadada uu sii mari doono Quddus,haddii uu doonayo in uu Falastiin kula dagaalamo Tataar.. muxuu ku sameeyey Quddus_Siliibiyiintii (Kiristaankii) Caka?

Bal aan la eegno fekerka Quddus.

> **Kow**: waxaynu ognahay inay Kiristaanku Yihiin cadawga umaddan,sida ay Tataarku u yihiin cadawga ummadda, weliba sidii aynu soo sheegnay inay Kiristaanku ahaayeen kuwo uga khatar badan Islaamka marka la eego khatarta Tataarka,waayo dagaalka Tataarku waa ku habso,aan lahayn ujeeddo, hadaf iyo qaaciido,waa uun burburin,ma jirin wax dhaafsiisan burburin,laakiin mashruuca Kiristaanka ee dhulka Muslimiintu waa mid ka duwan,Kiristaanku

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

waxay kula dagaalamayaan Muslimiinta Caqiido,nacayb xeel dheerna waxay u hayeen Muslimiinta,qorshohooda la dagaalanka Muslimiintuna waa mid bartilmaameedleh,Tataarkuse cid walba oo basharka ka mid ah way la dagaalamayeen,ilbaxnimo kastana way baab'inayeen,mashruuca Kiristaankuse wuxuu ku ekaa dhulka Muslimiinta,iyo in Nasaaro qabsato degaannada Muslimiinta,ee asal ahaan u lahaayeen,ha ahaato Falastiin ama Lubnaan ama Suuriya,wayna kala duwan tahay qabsashada ciidamada iyo qabsashada Shacabku..!! ciidamada Tataarku malahayn mustaqbal,khasab waa kuwii guura,laakiin shacabka Kiristaanka ee deggani waxay goosteen inay halkan ku noolaadaan.. la dagaalanka Kiristaankuna waa mid caqiido,dhinac kalena waa degaamayn, la noolaantooduna waxay ka dhigaysaa in khatartoodu ka xuntahay khatarta Tataarka, walaw ay dagaalada Tataarku ka masiibo badnaayeen,ka burburin badnaayeen dagaalada Kiristaanka,labadoodubase waa qadhaadh..Quddus wuxuu fahansanaa in Siliibiyiintu yihiin cadawgiisa sida Tataarna u yihiin cadawgiisa,waxaana iska cad in uu laba badood ku dhici doono.

Labo: iskaashiga Kiristaanka iyo Tataar waa mid soo jireen ah oo la garanayo,waa kuwii markoodii hore jeclaysiiyey Tataarka dhulka Muslimiinta waqtigii Jingiskhaan,waa kuwii ka kaalmeeyey Holaako duminta Baqdaad iyo magaalooyinka Shaam,la midowgii Tataarka ee Armiiniya,Joorjiya iyo Andaakiyana inagama foga.. waa wax dhici kara inay Tataarku istiraatijiyad xulufaysi la samaystaan Kiristaanka Caka,oo hadday dhacdo khatar ah.

Saddex: iyada oo la fili karo isgaashaan buuraysiga Siliibiyiinta iyo Tataar haddana Quddus wuxuu ogaa Kiristaanka Caka nacaybka ay u qabaan Tataar,in uu la mid yahay nacaybka ay u qabaan Muslimiinta,maaha nacayb oo keliya ee wayna ka cabsanayaan.. waayo weligoodba Tataar ma ilaalin ballan iyo axdi..gawracooduna waa mid siman,jabkii iyo halaagii ay badeen bariga Yurub iyo Raashiyana lama hilmaamsana,tirada Nasaaro eek u maqan gacanta Tataarna lama koobi karo,boobkii iyo burburintii Bayruut iyo Siidaa kama soo wareegin bilo yar mooyaane..intaas waxaa dheer cadaawadda ay Kiristaankani gaar ugu hayaan Holaako,waayo wuxuu usoo magcaabay Kiniisadoodii waynayd ee Andaakiya iyo Itaaliya isla markaana ahayd Kaatoligga(Catholic) Baaderi haysta mabd'a Ortodhogoska (orthodox)oo Giriig ah,taasoo ahayd markii ugu horeysay,weligeedna aan hore u dhicin,waana la wada garanayaa loollanka u dhexeeya Ortodhogoska iyo Kaatoligga,Nasaarada Caka-na waxay ahaayeen Kaatolik weliba aad ugu adag,mana ay rabin inay ku dhacdo sidii ku dhacday Andaakiya,dhamaan faro gelinahaas iyo dhaqamadaasi waxay geliyeen dareen cabsiyeed,waxayna bilaabeen inay u macaamilaan si aad u feejigan.

Afar:Kiristaanku waqtigaas 658h waxa haysatay tamar darro aad u daran,mudadii dagaalkii Almansuurah,iyo mudadii boqorkii Faransiisku ku noqday waddankiisi,tiro faradhaaf ahna ciidamadiisi lagaga laayey dagaalkaas,dhamaanna gacanta lagu dhigay intii hadhay ciidankiisi..dhamaan dhacdooyinkaas oo dhan Kiristaankuna waxay ku jireen jaahwareer isdaba joog

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ah.. weliba aan ku ladhno intaas aan soo sheegnay xureyntii Bayt almaqdis waqtigaas ka hor sannadkii 643h, uu xoreeyey Saalix Ayuub (IHN) waxay caddeynaysaa xaaladda Siliibiyiinta ee waqtigan..dhirbaaxooyinkaas is daba joogga ahi waxay keensadeen,inay hoos u dhacdo awooddii,kartidii,tamartii iyo mooraalkii ciidamadii Kiristaanka ee Caka..halkaas ayuu Quddus ku goostay in macaamil la sameeyo cadaw nacayb badan u haya,laakiin aan awood lahayn.

Shan: imaaradda Caka waa imaarad leh dhufeysyo aad loo adkeeyey.. waa magaalada ugu adag dhamaan magaalooyinka Shaam gebi ahaanba,waxay la wareegeen Nasaaradu sannadkii 492h,waa muddolaga joogo boqol iyo lix iyo lixdan sano,mudada intaas le'eg madaxdii Muslimiinta ee ay ka midka ahaayeen Salaaxudiin Ayuubi way ku guuldarraysteen inay furtaan,shakina kuma jiro in uu Quddus ogyahay inay ku adkaanayso furashada magaaladani,xataa iyada oo ku jirta derejadii ugu hoosaysay tamar darrida.

Hadaba isku soo wada xoori arrimahan Kiristaanku waa cadawga Muslimiinta sida ay Tataarkuba u yihiin cadawga Muslimiinta,is xulufaysiga Tataar iyo Kiristaan waa mid dhici kara,waxay Siliibiyiinta Caka ka cabsi qabeen Tataarna aadna way u necebyihiin,Kiristaanku waxay ku jiraan xaalad tamar darro tii ugu xumayd,waxase ay magaaladoodu tahay dhufeyska ugu adag Shaam iyo Falastiin.

Iftiiminta arrimahan oo dhan wuxuu ka dhex arkay Quddus_ in la dagaalanka Kiristaanka Caka saamayn xun ku keenayo ciidamadiisa..haa hadafka guud iyo gebagebada Quddus waa in uu xoreeyo dhamaan dhulka Muslimiinta ee la haysto ama Kiristaan ha noqdeen ama Tataare,laakiin hadafka marxaladdani taaganiwaa la dagaalanka Tataar, go'doomin magaaladan dhufeyska ah ee Caka la saaro,dadka ilaalinaya oo lala dagaalamo waxay daciifinaysaa ciidankiisa,waqtina wuu kaga lumayaa,ciidankuna wuu ku daalayaa ka hor dagaalka wayn ee Tataar.

Laakiin Quddus isla markiiba_ kulama dagaalami karo Tataar Falastiin isaga oo aan dhamayn mushkiladda Caka, haddii uu is xulufaysi dhexmaro (Siliibiya_Tataar) arrintaasi waxay ku rideysaan ciidanka Muslimiinta laba seefood dhexdood.. dhinac waa Tataar,dhinacna waa Kiristaan.

Quddus markan wuxuu u deg degay in uu heshiis muddeysan la galo Kiristaanka Caka intaanay la midoobin Tataar,isla markiiba wuxuu u diray wefdi lasoo saxeexata Kiristaanka heshiiskaas,haddii ay ka aqbalaan Siliibiyiintu wefdigan heshiiskaas, dhinac waxay ka xoojinaysaa ciidamada taagta daran ee Kiristaanka,waxay meesha ka saaraysaa dhabar jebintii ay ka baqayeen ciidamada Muslimiintu dhinaca kale,wefdigii waxay la fadhiisteen madaxdii Kiristaanka iyaga oo isla lafo guray arrinta heshiiskan, madaxdii Kiristaanku tamar darridooda darteed waxay ka baqeen in aan laysku hallayn Karin heshiiska Muslimiinta haddii lagaga adkaado dagaalka,Siliibiyiintu taag darridooda awgeed waxay deg deg u aqbaleen heshiiskii,inkasta oo qaar ka mid ahi ay soo jeediyeen inay la midoobaan Tataar,laakiin fekreddaas labada dhinacba waa la saluugay waana laga xoog

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

batay..madaxdii Saliibiyiinta intoodii badnayd waxay ka cabsadeen in ciidankoodu ka baxaan Caka oo Muslimiintu soo galaan haddii ay ka guuleystaan Tataarka,Muslimiintuna khiyaamo la'aan ma damaanad qaadi karaan inta dagaal Kiristaan uu jiro,gaar ahaan shaki kuma jiro in ciidamada Tataarku gacansiin ka helayeen qaar ka mida boqoradii iyo amiiradii Kiristaanka(boqorkii Armiiniya,Amiirkii boqorkii Joorjiya,Amiirkii Andaakiya) sidoo kale hogaamiyaha ciidamada Tataar ee waqtigan waa Nasaari Katbuqa.

Sidaas ayey labadii dhinac isku afgarteen heshiis muddeysan,waxay soo jeediyeen wefdigii Muslimiintu in heshiiska waqtigiisu ahaado inta dagaalka lagula jiro Tataar, waayo sharci maaha in heshiis waara lala galo cid kusoo duushay dhulka Islaamka oo weliba deggan,sharcina maaha inay Muslimiintu oggolaadaan dawlad Kiristaan ah ama cid kaleba inay degganaato dhulka Muslimiinta si kasta oo waqtiga ay degganayd u badan yahay,xasuusona inay Kiristaanku imminka deggan yihiin Caka muddo ah boqol iyo lix iyo lixdan sano,macnaha jiilal ayaa ku dhashay, ku noolaaday, ku dhintay,haddana Quddus uma aqoonsana dawlad degaan ahaan u deggan dhulka Muslimiinta ee Falastiin.

﴿لاَ يَرْقُبُونَ فِـــي مُـــؤْمِنٍ إِلاًّ وَلاَ ذِمَّةً﴾

Laakiin Quddus wuu ogyahay in aan kuwani muslim uma dhawraan ballan iyo wacad midna

Digtoonidiisa ayuu ka qaatay,isaga oo dhinacna ka cabsi gelinaya,dhinacna iska jeclaysiinaya Saliibiyiinta..waxay u sheegeen wefdigii Muslimka ahaa haddii ay inyar ka buriyaan heshiiska in Muslimiintu ka jeesan doonto Tataarka oo iyaga kusoo jeesanayaan,kana tegi maayaan ilaa ay Caka xoreeyaan,sidaas ayuu heshiiskani ahaa mid ku salaysan awood sheegasho iyo hanjabaad ka duwan kuwii hore ee daciifka ahaa kuna salaysnaa dood iyo hadalka.. weligeed kii awood badan ayaa shuruudaha yeedhiya,qolada taagta daranina shardi bay dhiibataa,hadaba marka ay Muslimiintu heshiis la gelayaan qolo kale ha noqdaan Tataar,Kiristaan,Yuhuud,waa inay haystaan waxay ku ciqaabaan haddii ay qoladaasi ka baxdo heshiiska,ama ay u buriyaan sidii ay u burin jireen,haddii kale macno samayn maayo heshiiskaasi,waayo waa hubaal inay ka baxayaan markay jaanis helaan.

﴿أَوَ كُلَّمَا عَاهَدُوا عَهْدًا نَّبَذَهُ فَرِيقٌ مِّنْهُمْ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لاَ يُؤْمِنُونَ﴾

mar kasta oo ay idinla galaan heshiis,qaar iyaga ka mida ayaa burinaya intooda badani ma rumaysna.

Dhinacaasi waxay ahayd cabsi gelintii..dhinaca is jeclaysiinta wuxuu u ballan qaaday marka uu ka guuleysto Tataar,in uu kaga iibin doono fardaha reer Magooliya magaalada Caka sixir hoose.. waa kasbasho,waayo baahida dadka madaxda ciidamada ay u qabeen fardaha oo aad u darnayd ayuu ka warqabay.. fardaha Tataarkuna waxay caan ku ahaayeen awood.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Mar labaad Quddus wuxuu ka saxeexay inay ciidamada Muslimiinta u fulin doonaan waxay u baahdaan sida cuntada iyo alaabta kale intay ku sugan yihiin Falastiin,sidaasna way oggolaadeen Saliibiyiintu.

Sidaas ayey ku noqotay wadadii loo mari lahaa dagaalka Tataar Aamin,Quddusna رحمه الله ,wuxuu bilaabay in uu dhigo kaartadii ugu dambaysay ee ciidanku ku dhaqaaqi lahaayeen.

Nadiifintii ciidanka Muslimka:

Waxaa layaab ah.. waxaas oo diyaar garoow muuqda,waxaas oo dibloomaasiyad ah,waxaas oo la tacaalid dhaqaale ah si ciidankaas loogu dagaal geliyo,iyo weliba dhiiri gelintii ballaadhnayd ee culimadu dadka mimbarada iyo shaaricyada uga akhrinayeen kuna boorinayeen jihaadka,waxaa jirtay koox daciifiin ah oo aan rumaysnayn in dagaalkii noqday waaqici..dabcan marka aan leeyahay daciifiin waxaan uga jeedaa qalbiga ka daciif ah maaha jidhka,waqtigaas dheer waxay aaminsanayeen inay ololahan wadaan koox jibbaysani,maalin dhowna ay iska degi doonaan sidii caadada ahayd,waxay u arkayeen hadalladan uu Quddus leeyahay,hadalladii madaxdii hore ee riwaayadda ahaa ee shicibkooda ku nefisin jiray markay cidhiidhi galaan si aanay u dhicin qarax , shacabku waxa uu la aamusan yahay kacdoon ka qarxin,weligoodba ma rumaysan in Quddus_ si dhab ah dagaal ugu diyaar garoobay.. markii ay saacaddii ku dhowaatay eber ayey yaqiinsadeen in arrintu tahay xaqiiq dagaalkiina soo dhowaaday..weliba uu saaran yahay.

Halkaas ayaa balbaliso qalbiga loogu riday raggaas,ama rag la moodkaas,waxay bilaabeen inay feker ah inay ka cararaan ciidanka.. ka dib badhkood wayba kaga dhabeeyeen orod,iyaga oo iska eegaya indhaha dadka,weliba waxaa ka mid ahaa qaar ka baxay Masar gebi ahaanteedba oo waddan kale cararkii ku galay,waxaa ka mid ahaa qaar u cararay Xijaas,waxaa ka mid ahaa qaar u cararay Yemen,waxaa ka mid ahaa qaar cararkii ku galay Maqrib..!!

Kuwa wax falanqeeya qaar ka mid ah ayaa odhanaya waxay ahayd Khasaare.. oo dad badan ayaa ka baxay ciidankii oo muhiim ahaa,ama ugu yaraan tirada ciidanka ayaa yaraanaysa markay arkaan indhaha cadawgu.

Laakiin Subxaanallaah.. waxa khayrku ku jiray inay cararaan kuwaas weliba waqtigan ka horeeya bilowga dagaalka!..waxaaba laga yaabaa in Ilaahay SW dagaalka ku adkayn lahaa Muslimiinta haddii aanay safafku nadiif noqon,dagaal uma baxo qof aan hubin in uu sugmayo.

Maxaa dhici lahaa haddii qoladan labac labacle yaasha ahi ku dhex jiraan ciidanka Muslimiinta?

ILAAHAY ayaa kaga jawaabay su'aashan suuradda Altawba:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

فقال:﴿لَوْ خَرَجُوا فِيكُم مَّا زَادُوكُمْ إِلاَّ خَبَالاً ولأوْضَعُوا خِلاَلَكُمْ يَبْغُونَكُمُ الْفِتْنَةَ وَفِيكُمْ سَمَّاعُونَ لَهُمْ وَاللهُ عَلِيمٌ بِالظَّالِمِينَ﴾ [التوبة:٤٧].

Haddii ay baxaan dhexdiina idinku kordhinayaan waxaan ahayn fasaad,waxay u deg degi lahaayeen dhexdiina,iyaga oo idinla doonaya fitno,waxaana idinku dhex sugan kuwo u dhegaysi badan ilaahayna isagaa u cilmi badan daallimiinta.

Haddii labac labacleyaashaasi ciidanka raacaan waxay daciifin doonaan quwaddiisa,waxay dhexdiisa ku fidinayaan niyad jab iyo werwer,mar way u badheedhayaan cabsidooda iyo fuleynimadooda,mar kalena ogaan ayey fitno u abuurayaan,iyaga oo jeclaysanaya inay safafka daciifiyaan,maaha mushkiladdu intaas oo keliya,ee mushkiladda kasii wayni waxa weeye,in qaar Muslimiinta dhabta ah ka mid ahi ay dhegaysanayaan hadalkooda,oo ku qancayaan waxa ay afuufayaan,markaas ayey Muslimiintu waayayaan awood kale oo muhiim ahayd..sidaasina waa tii ilaahay inoo sheegay ﴿.. وَفِيكُمْ سَمَّاعُونَ لَهُمْ﴾ qaar dhegaysanaya ayaa idinku jira.

Haddaba bixitaanka qoladani ay ka baxday safka Muslimiinta xilli hore waxay u ahayd dan ciidanka Muslimiinta,sidaa darteed Quddus iskuma hawlin qoladaas soo celintooda,waayo askariga dhabta ah ee Islaamku maaha kan ka carara jihaadka.. waase kan ku carara.

Sidaas ayuu ku safoobay ciidankii Muslimiintu.

Amba bixii ciidamada ee dhanka Falastiin:

Waxaa ciidamadii laysugu keenay taliskii si ay uga amba baxaan,taliskaas ugu waynina wuxuu ku yaallay gobolka Alsaalixiyah ee dhinaca bari,waana gobol saxare balaadhan oo ciidamadu wada mari karaan qaybohooda kala duwan leh,waana goobta ay ka dhaqaaqayeen ciidamada Masaaridu iyaga oo uga dhaqaaqay jihada bariga.

Waxaa ciidamadii laga soo raray galdhigyadoodii badnaa ee ku kala yaallay Qaahira dacaladeeda,iyo magaalooyinka waaweyn,ka dib Quddus wuxuu siiyey tilmaantii iyo habkii ay u dhaqaaqi lahaayeen markay Falastiin u baxayaan.

Ilaahayoow noo fududee safarkayagan..noo soo dhowee fogaantiisa.

Ilaahayoow adiga ayaa wehel noogu ah safarkayagan.. ehelkayagiina adigaanu kuu wakiilannay.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Ilaahayoow waxaanu kaa magan gelaynaa safarka dhibtiisa,wax xun aragtidood,dhib inay noo daba marto maalkii iyo ehelkii.

Waxay ka dhaqaaqeen ciidamadii Muslimiintu Saalixiya iyaga oo uga kacay waqooyi bari ilaa ay soo gaadheen Siinaay,ka dib waxay u jeesteen waqooyi qumman si ay u haleelaan waddo xeebeedda marta waqooyiga Siinaay ee xaaxiga badda cad ee dhexe.

Dhaqaaqan ciidamadu wuxuu ahaa bilowgii bisha shabcaan ee sannadkii 658h,oo ku beegan luuliyo sannadkii 1260m,macnaha socdaalkani waxa uu ahaa bilaha ugu kulul sannadka,iyo maritaanka saxaraha Siinaay oo qaawan aadna u dheer,wadadana kuma yaallaan magaalooyin la deggan yahay wax aan ahayn carshaan..laakiin way u dhabar adaygeen ciidankii Mujaahidiintu..dhamaanteen waxaan xasuusan karnaa dagaalkii Tabuuk,iyo wixii dhibaato iyo adayg ku xeernaa ayaa goobtanna ku gedaaman,Muslimiintii Tabuuk waxaa la kulmay kulayl iyo mushkilad dhaqaale,waxay sii mareen Saxaare aad u dheer iyaga oo la dagaalami rabo quwadd awood badan waa quwaddii Roomaanka,markanna waa la mid Muslimiintu waxay jarayaan masaafo aad u dheer oo Saxare ah,waxa haysata dhibaato dhaqaale oo ay ku qaabilaan awoodda ballaadhan ee Tataar.. taariikhduna iyada ayaa isku soo noqnoqta.. waxay ku kala duwan yihiin Muslimiintii Tabuuk is may helin Roomaankii oo may sugin, markaa ma dhamaystirmin duullaankii,maantase Tataarku way sugayaan.

Quddus ILAAHAY HAW NAXARIISTO_wuxuu ciidamadiisa ku wataa shax.. macnaha ciidanku markan ay socodka ku jiraan waxay u kala habaysan yihiin sidii ay u dagaal geli lahaayeen,hadiiba dagaal qabsado,xataa haddii si lama filaan ah ciidamada Tataar uga naxsadaan.

Quddus ilaahay haw naxariisto_ wuxuu ciidanka ugu horeeya u dhiibay Ruknudiin Baybaras,waa hogaamiyihii ciidamada ee halyeyga ahaa,si ay u noqdaan kuwa ugu horeeya ee dhirbaaxa Tataar,guulina ay uga dhalato,haba yaraatee,wax mooraalka ciidamada Muslimiinta kor u qaada.

Quddus_ mar kale _ wuxuu tartiibta ciidamadiisa ku soo daray arrin aan waqtigiisi la aqoonin,waana waddo uu ku cusboonaysiinayo hogaanka,iyo diyaar garoow lagu wanjalayo cadawga,Quddus wuxuu ugu horeysiiyey ciidanka koox xoog badan oo uu gadhwadeen ka yahay Ruknudiin oo ah hogaamiye khibrad aan lagu gaadheyn,waxa kooxdan la faray in ay wax badan ka goosato (hormarto) ciidamada kale,si iyada uun loo arko muuqaalkeeda,ciidamada kalena loo qariyo,si haddii ay jiraan Ilaalo Tataar ahi ay kooxdan horbaxansha u ah ciidanka u moodaan dhamaan ciidamadii inay intan ku dhan yihiin, isla markaana awood intan qaabisha ku diyaar garoobaan,ka dibna uu kusoo baxo Quddus,si ay lama filaan aanay u diyaar garoobin ugu noqoto Tataar.

Guushii ugu horeysay..Gasa!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Sidaas ayuu kaga gudbay Ruknudiin Baybaras xuduudka Masar 12Luuliyo 1260m,kuna galay xuduudka barakaysan ee Falastiin,Quddusna raadkiisi ayuun buu soo raacay.. waxay jareen Rafax (Rafah),Khaan Yuunas,(Khan Yunus),Diir Albalax (Dahr al-Balah) waxay kaabi u saareen Gasa,sidii aan horeba u soo sheegnay Tataarna way haystaan Gasa,waxaa dhacay wixii uu saadaaliyey Quddus,waxay arkeen Tataar ciidankii horbaxanshaha u ahaa Muslimiinta ee uu hogaaminayey Ruknudiin Baybaras,waxaanay aamineen in ciidankii Muslimiinta intan ku dhan yahay,wararkiina sidaas ayey ayey ugu gudbiyeen ilaaladii Tataarkii Gasa, waxaa deg deg ah u soo baxay ciidamadii Tataar ee Gasa oo xammaysan si ay foodda isu daraan Ruknudiin Baybaras,dabcan waxaa dhexmaray labadii dhinac dagaal degdeg ah, kuwani way dhan yihiin,ciidankii Ruknudiin Baybaras ee rasmiga ahaase wuxuu kasoo gudbayaa xuduudka Falastiin iyo Masar,laakiin,sidaan tilmaamnay kooxdani waa hurin xooggan oo awood leh,hogaamiyohooduna waa hogaamiye tababaran,saldhiggan ciidamada Tataar ee Gasana waa waxyar,ciidanka Tataar ee dunida oo dhan soo qabsaday Katbuqaana hogaaminayey wuxuu deggan yahay Lubnaan xarun ku taalla oo saddex boqol oo kiiloomitir u jirta Gasa,wuu geba gebooday dagaalkii Gasa ee u dhaxeeyey ciidamadii Ruknudiin Baybaras iyo Tataar,fadliga ilaahay dartiisna waxay awoodday kooxdii hordhaca u ahayd ciidamada Muslimiintu inay ku guuleysato dagaalkan yar,waxaa laga laayey ciidamadii Tataar ee faranta Gasa joogay askar,intii kalena waxay u baxsadeen waqooyi si ay warka u gaadhsiiyaan Katbuqaa oo Lubnaan jooga.

Lama filaan ayaa lagu qabtay ciidankan Tataar ee Qasa deganaa..! kedisadanina waatan sabab u noqotay jab qadhaadh inay la kulmaan,lama filaan ma ahayn dagaalkan Qasa oo qudha,waxay ahayd kediso xeel dheer,qorshe dagaal oo dhamaystiran,istiraatijiyad aragti fog,oo ku salaysan xataa inay iyagu doortaan goobaha dagaalku ka dhici doono iyo waxyaabaha kale eek u saabsan kaartooyinka dagaalka..waxay layaab xaqiiqo ah ku ahayd Tataarka,waayo waxay sheegaysay inay weli jirto koox Muslimiinta ka mid ah oo dagaalami karaysaa,welina xambaarsan Seefihii,sidoo kale ay difaacayso diintooda,dhulkooda,sharaftooda,iyo karaamadooda..waayo waxay Tataar in Muslimiintu dhamaantood marka laysu geeyo ay ka baxsadaan,cararaan Tataarka, waxay kale oo arki jireen madaxda Tataarku,madaxdii Muslimiinta oo kala hororsanaysa inay isu dulleeyaan,la midoobaan,u rukuucaan isla markaana daba rableeyaan iyaga oo duuleysan..umaba haysan inay jirto koox difaacan kartaa xaqooda.

Sidaasi waxay ahayd malihii Tataar,waana male maangaab oo aan rasmi ahayn,waayo ummadani si kasta oo ay u daciifto dhiman mayso,markasta oo rag rukuucaan oo dayaana waxaa jiraya rag kale oo difaacaya inta nololi jirto.

روى الإمام مسلم عن ثوبان ﷺ قال: قال رسول الله ﷺ: «لا تزال طائفة من أمتي ظاهرين على الحق، لا يضرهم من خذلهم، حتى يأتي أمر الله».

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Wuxuu ka soo weriyey imaamu Muslim Sawbaan (Rc) in uu yidhi: Rasuulka ilaahay (NNKHA**): "Ummadeyda lagama waayo doono koox xaq u dirir ah,aanu dhibayn kan hoojiyaa,ilaa uu amarka ilaahay ka imaanayo".**

Sida kusoo aroortay riwaayadda imam Axmed kana soo werinayo Imaamata (Rc) waxaa dheeraad ku ah weedh aad u muhiim ah,waxayna tahay inay asxaabtu su'aaleen kooxdan uu nebigu sheegay iyaga oo leh: "Rasuulkii ilaahayoow halkay joogaan kooxdaasi"? wuxuu yidhi : "**Bayt Almaqdis,iyo ag agaarka Bayt Almaqdis".**

Ogoow halka Tataarka lagu jebinayaana waa Qasa,ka dibna Caynu Aljaaluut,kuwan jebinayaana intooda badani waa reer Bayt Almaqdis iyo Falastiin,waayo ilaahay SW ayaa dhulkan ka dhigay dhul daahir ah Muslimiintuna guulo badan kasoo hooyeen.

Waa run dhulkan wuu ka jiraa kacaa kuf badani.. laakiin waa khasab inay ka kacdo.

Waxaan la soconaa Falastiin inta ku wareegsan ee ay Shaam ku jirto inay dhirbaaxooyin culculus oo Islaamiya la dhaceen imbiraadooriyaddii Roomaanka,qaybo ka mida Bisaan,Yarmuuk iyo weliba Bayt Almaqdis.

Falastiin iyo dhulalka ku xeeran dadkoodu guulo waaweyn kaga soo hooyeen dagaaladii Xiddiin,Dabriya iyo Bayt Almaqdis.

Falastiin iyo dhulalka ku xeeran dadkeedu,waxay ku jebiyeen Tataarka Qasa,ka dibna Caynu Jaaluut sida aynu arki doono.

Falastiin iyo hareereheeda dadka ku xeerani waxay iskaba raaciyeen intii Kiristaan ahayd ku hadhsanayd Caka,Casqalaan iyo Xiifa markii dambe.

Falastiin iyo dhulka ku xeeran dadkoodu waxay lama ilaawaan ku dhigeen Faransiiska meesha la yidhaahdo Caka.

Falastiin iyo hareereheeda dadka ku dhaqani waxay cashar u dhigeen Ingiriiskii dhawr dagaal oo kala duwan ayna ugu caansanayd 1936,dagaalkaas oo soconayey ku dhowaad afar sano.

Falastiin waxbay iska celisay_wayna iska celin doontaa_ welibana xusuus ku dhigi doontaa Yuhuudda.

Dagaalka ugu dambeeya ee Yuhuud iyo Muslimiintuna dhulkaas ayuu ka dhici doonaa,Muslimiintuna way layn doonaan Yuhuudda.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

روى الإمام مسلم عَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ أَنَّ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ قالَ: «لا تَقومُ السَّاعَةَ حَتَّى يُقَاتِلَ الْمُسْلِمُونَ الْيَهُودَ، فَيَقْتُلُهُمْ الْمُسْلِمُونَ.. حَتَّى يَخْتَبِئَ الْيَهُودِيُّ مِنْ وَرَاءِ الْحَجَرِ وَالشَّجَرِ، فَيَقُولُ الْحَجَرُ أَوْ الشَّجَرُ: يَا مُسْلِمُ.. يَا عَبْدَ اللَّهِ.. هَذَا يَهُودِيٌّ خَلْفِي فَتَعَالَ فَاقْتُلْهُ... إِلاَّ الْغَرْقَدَ فَإِنَّهُ مِنْ شَجَرِ الْيَهُودِ»..

Imam Muslim wuxuu ka soo werinayaa Abi Hurayra (Rc) in Rasuulka ilaahay (NNKHA) yidhi: “**Saacadda Qiyaame dhici mayso ilaa ay Muslimiintu la dagaalamaan Yuhuud,oo ay Muslimiintu laayaan Yuhuudda..ilaa uu Yuhuudigu ku dhuunto dhagxaanta iyo dhirta dabadooda,oo dhagaxa ama geedku yidhaahdo: “Muslimkoow..Addoonkii Ilaahayoow..Yuhuudi ayaa dabadayda ku jira ee kaalay oo dil”..marka laga reebo geedka la yidhaahdo Qarqadka,isagu waa geed Yuhuudeed”..**

Aan ku laabanno Baybaras,Quddus iyo ciidankii Muslimka ahaa.

Way ka guuleysteen Muslimiintu Tataar,inkasta oo ay ahayd guul aan badnayn oo marxaladeed.

Taariikh yahannada qaar ka mid ahi way bal ballaadhiyaan guusha Qasa,qaar kalena wayba iskaga boodaan isla markaana is illowsiiyaan,waxayse ay runtii ahayd_ ra’yigeyga_ goobaha ugu muhiimsan taariikhda dagaal ee Muslimiinta mid ka mida,wax badan kama dilin Tataar,maaha inay qabsadeen Qasa oo Istiraatiji ah,iyo wax kale toonna muhiim kuma ahayn,waxayse muhiimaddaas u yeelatay waxay daaweysay Muslimiintii u jabay Nafsiyan.

Waxay Muslimiintii ku arkeen indhohooda Tataarkii oo yaacaya,waxaa burtay hal-dhegii waqtigaas faafay ee odhanayey “ciddii kugu tidhaahda Tataar baa laga adkaaday ha rumeysan”.

Imminkase waa la rumaysan karaa..waa markii ugu horreysay ee la jebiyo Tataar muddo dheer.

Waxay ku yeelatay goobtani ciidamadii Muslimiinta saamayn togan,sidoo kale waxay saamayn taban gaadhsiisay ciidamadii Tataar.

Mana aha waajib inay Muslimiintu yaraystaan shaqo la qabtay oo ka mida shaqooyinka.

Yaan la yaraysan dhagaxa Yuhuudda lagu tuurayo ee ay ku cararayaan.

Yaan la yaraysan in la dilo Askari Yuhuudi ah.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Jabka dhabta ahi_waa jabka niyadda iyo nafta laga rajo dhigo..dagaalada yaryarina waxay dib u nooleeyaan yididiiladii Muslimiinta si kasta oo uu basiid u yahay wax wayn ayuu kor usoo qaadaa dareenkii Muslimiinta.

Ilaa Caynu Aljaaluut:

Wuxuu u dhaqaaqay ciidankii Muslimiintu ka dib markuu ku guuleystay dagaalkii Qasa waqooyi,iyaga oo raacaya xeelliga badda cad ee dhexe,si ay u sii maraan magaalooyin Muslimiin ah oo waaweyn iskuna xig xiga,waxay sii mareen Casqalaan ka dibna Yaafaa (magaalo Muslim oo qurux badan ayey ahayd) _ ilaahay ayeynu waydiisanaynaa in uu xoreeyo,sidoo kale dhamaan Falastiin in uu ka xoreeyo uskagga Yuhuudda_ magaalada Talaabiibna waxay waqooyi toos ugaga beegan tahay magaaladan Yaafaa_ ka dib wadadii ayey hore usii qaadeen ciidamadii Quddus iyaga oo u jeeda waqooyi qumman,waxay sii mareen Doolokaram,ka dib wuxuu gaadhay magaalada Xiifa,wuxuu iyadana uga baxay waqooyi magaaladii Muslimka ah ee ay markii hore haysan jireen Kiristaanku.

Wuxuu degay Quddus oo saldhigyo ka dhigtay beero ku wareegsanaa dhufeysyadii magaaladan Caka ee dhinaca bari ka xigay magaalada Caka lafteeda,ka dib waxaa dhexmaray xidhiidho Quddus iyo madaxdii Kiristaanka ee Caka,xidhiidhadaas oo ku saabsanaa sii adkayntii heshiisyadii hore ay u galeen labada dhinac,Quddus wuxuu u diray wefdi Muslimiinta ka mid ah,waxay galeen dhufeyskii Caka wefdigii,si wanaagsan ayey usoo dhoweeyeen wefdigii madaxdii Caka,waxay labada dhinac si wada jir ah u adkeeyen wixii hore loogu heshiiyey,booqashadooduna way ka badnayd halkaas mar si ay isaga hubiyaan gaalo ballan ma laha'e, markuu arrinka nimankan meel ku hubsadayna waxa uu goostay Quddus in uu iskaga guuro Caka si uu u doorto meesha dagaalka Tataar iyo isagu ka dhici doono..

Markii uu Quddus bilaabay inay ciidamadu dhaqaaqaan ayaa mid ka mida madaxdii Muslimiintu soo jeediyey in ay Caki ku jirto waqtigan taag darro tii ugu xumayd,ballantii Muslimiintu la gashayna ay isku hallaynayaan,dagaalna aanay diyaar u ahayn,haddii uu Quddus ku kala wareego imminka aanay waxba ku qaadayneyn furashadeedu,dibna ay u xoreeyaan magaaladan Muslimadda ah ee la haystay muddo boqol lix iyo lixdan sano ah,wuxuu Quddus ugu jawaabay si cad oo waadix ah : "Ballanka ma khiyaamayno annagu!"

Allaah aragtidiisu si wayn bay ugu caddahay Quddus.

Hogaaminta noocan oo kale ahi waxay ka mid tahay asbaabaha keena in laguu gargaaro xaqiiqada ah.. gargaarka xaqiiqada ahna waxaa keena raacitaanka sharciga ilaahay,mid yar iyo mid waynba,ballanta oo la ilaaliyo iyo fulinta heshiisyada ilaahay sharciyeeyey.

Ilaahayna wuxuu leeyahay:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

﴿يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا أَوْفُوا بِالْعُقُودِ﴾ kuwii imaanka laga helayoow ballanta oofiya.

Waxaan usoo jeedin lahaa Yuhuudda,Kiristaanka,Tataarka iyo caalamka dhamaantii inay raacaan xadiiskii nebiga Calayhi Salaatu Wa Salaam.

رواه الترمذي وأبو داود، وقال الترمذي: حسن صحيح،
عن عمرو بن عبسة ﷺ قال: قال رسول الله ﷺ: «من كان بينه وبين قوم عهد، فلا يَحُلنَّ عهداً، ولا يشدنه (أي لا يغيرن العهد بأي طريقة) حتى يمضي أمده، أو ينبذ إليهم على سواء».

wuxuu soo weriyey Tirmidi,Abu Da'uud, si saxeex ah kana soo weriyeen Cumar Bin Cabsah (Rc) in uu yidhi: Rasuulka ilaahay (NNKHA) ayaa yidhi **"kii qolo la gala ballan,yaanu xeeladeynin ballanka,sidoo kale yaanu xirfadeyn** (yaanu sina u beddelin ,waddo kasta ballankaas ku beddelin) **ilaa uu waqtigiisa dhamaysto,ama ay si siman uga wada baxayaan".**

Ama waxaad dhamaysanay waqtigii aad ballanka ku gashay,ama waxaad uga warramaysaa cadawgaaga in sababahaas dartood aad ballankii u jebisay..laakiin khiyaamo ballan meelna kaga jirto sharciga diinta Islaamka.

Waa taas diinta Islaamku.. waa kaas sharciga Islaamku.. waa ku waas qawaaniinta Islaamku.. waana kuwaas hogaamiyeyaashii Islaamku.

Sidaas ayuu Quddus ilaahay haw naxariistee kaga tegay Caka,wuxuu uga dhaqaaqay Koonfur bari, si uu u baadho meel ku wanaagsan in uu ka dhaco dagaalka foodda innagu soo hayaa.

Waqtigay Katbuqaa waxaa gaadhay firdhadkii dagaalkii Qasa,iyaga oo uga waramaya dhaq dhaqaaqii ciidamadii Muslimiinta,wuxuu ka cadhooday jabkii Qasa Katbuqaa cadho aad u daran,wuxuu kale oo aad uga sii cadhooday Muslimiin ayaa isu ursaday inay kula dagaalamaan,waxaadba mooddaa in aanay Muslimiintu lahayn xaq ay wax iskaga celiyaan,haddii Muslimiintu u diyaar garoobaan cadawgooda waxay ku dhalinaysaa cadho Katbuqaa iyo Tataarka kaleba..!! wuxuu qabtay Katbuqaa kulan uu kula tashanayo madaxdiisi,waxaa madaxdaas ka mid ahaa kasoo qayb galay shirkan Al Ashraf Ayuubi,waa ninkii Ximsa haystaye,wuxuu go'aan ku gaadhay Katbuqaa in uu deg deg ula dagaalamo kooxdaas xag-jirka ah,ee khal khalka gelinaya hawl gallada nabad raadinta ee u dhaxeeya Katbuqaa iyo madaxda Muslimiinta.. isla markaana isku deyaya inay badhi furaan dedaalada Tataarka_Muslimiintii guuldarraystay.

Waxaa caddaan ah in soo bixitaanka Tataar ay ahayd habsan,waayo Quddus wuxuu soo jaray dhamaan xeebta Falastiin isaga oo kasoo galay koonfurtiisa gaadhayna

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

waqooyigiisa ugu fog,halka aanay Tataarna sooba gelin xuduudda Falastiin,masaafada u dhaxaysa boqcadda Sahal ee Lubnaan xaruntana u ah ciidamada Tataar iyo xuduudka Falastiinna waxay isu jiraan fogaan ah boqol kiiloo mitir, waa masaafo ciidamadu ay socon karaan sida caadiga ah labo maalmood ama saddex.

Quddus oo ah kii soo qaaday duullaanka ayaa raadinaya meeshii dagaalka ugu habboonayd,taasina waa talaabo muhiim u ah,wuxuu jaanis u haystaa in uu ciidankiisa u kala tartiibsado sida ugu wanaagsan,meeshana uu waraysto,ogaadona dabeecadda dhulkan iyo meelaha wax lagu qarsan karo.

Wuxuu usoo dhaqaaqay Katbuqa koonfur,isaga oo kasoo dhex gudbaya buuraha Lubnaan,wuxuu kasoo galay Falastiin waqooyi bari,galbeedka buuraha dhaadheer ee Juulaan (Galilee) ka dib wuxuu kasoo tallaabay webiga (Jordan Valley) Urdun,wuxuu soo gaadhay dhinaca bari ee Jaliil,Katbuqaa waxaa u muuqatay yididiilada Islaamiga ah ee ka muuqata gobolka,wararkii ayaa markiiba la gaadhsiiyey Quddus oo Caka uga amba baxay koonfur bari,Quddusna wuxuu u deg degay in uu uga dheereeyo magaalada Naasirah,wuxuu uga sii dhumbaday(muquuray) koonfur bari ilaa uu soo gaadhay gobolkii ama meeshii loo yaqaannay Caynu Jaanuul,waxayna ku taallaa badhtamaha labada magaalo ee Bisaan oo waqooyi ah iyo Naabulis oo koonfur ah dhexdooda,waxayna aad ugu dhowdahay saldhigga Jiniin ee imminka ah,waana goobta loo malaynayo inay ka dhici doonto dagaalkii ugu Muhiimsanaa taariikhda Muslimiinta,maalmo aan fogeyn ayuu goobtan Jiniin dagaal ku dhex maray mujaahidiin Falastiin iyo Yuhuudda sannadkii 2002,Muslimiintii ku shahiidaydana waxay tiradoodu kor u dhaaftay shan boqol ka dib markii ay dagaalkii ku si fiican ugu samreen.

Waxay koonfur Caynu Jaaluut 65kiilo mitir ka xigtaa goobtii Xadiin,waa goobtii ay ka dhacday dagaalkii taariikhda wayn lahaa ee dhacay sannadkii 543h,ka hor shan iyo toddobaatan sano markan ay dhacayso Caynu Jaaluut,sidoo kale waxay galbeed ka xigtaa masaafo 60km Yarmuuk oo ay ka dhacday dagaalkii ay hogaaminayeen Khaalid Bin Waliid iyo Abaa Cubayda Bin Jarraax_labadoodaba ilaahay raalli haka ahaado_ ay la galeen Roomaanka muddo lix qarni ka hor ah.

Sidaas ayey taariikho mooraalka dadka kor usoo qaadaya u leedahay goobtani.

Wuxuu arkay Quddus_raximahullaah_ inay Caynu Jaaluut tahay meel ku habboon dagaalka soo dhowaaday,banaanka Caynu Jaaluut waa goob balaadhan oo ay dhinac walba kaga teedsan yihiin buuro meel dhexaad ahi marka laga reebo dhinaca waqooyi oo ah dhinaca keliya ee uu ka furan yahay inta kale waxaa ku wareegsan buuro.. kurahan yaryar waxaa aad ugu badan dhirta,geed yar iyo geed waynba sidaa darteed in ciidamada Muslimiintu ku dhuntaan aad ayey ugu habboon tahay,ka dibna waxay u sahaylaysaa inay dhinac walba ka soo galaan dagaalka iyagoo kasoo baxaya buurahaas iyo dhirtaas dhexdooda kuna soo degaya banaanka dagaalku ka socdo ee ballaadhan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Si deg deg ay ayuu quddus u tartiibiyey ciidankiisi.. dhinaca waqooyi wuxuu dhigay ciidankii hor baxanyaha ciidamada Muslimiinta ahaa ee uu watay Ruknudiin Baybaras,wuxuuna u saaray meel muuqata si ay u arkaan ciidamada Tataarku markay soo socdaan,halka uu ku qariyey Quddus_ilaahay haw naxariistee_ciidamadii kale oo dhan dhirta iyo buuraha dabadooda.

Tartiibtaas iyo diyaar garowgaasi wuxuu dhacayaa 24 Ramadaan ee sannadkii 658h,tobankii cisho ee u dambeeyey bisha Ramadaan ee barakaysan.. inta badanna waa bishii ay dhaceen guulo badan oo taariikhda caan ku ah dhinaca Muslimiinta imminka ka hor.. waxaa ka mida Beder,furashadii Maka,furashadii Andalus.. halkaas ayey ku sugeen Muslimiintu iyaga oo aan waxba dhulka ka oollin..ilaaladoodiina ay soo laba dhigayso wararkii Katbuqa iyo ciidamadii Tataarka inay aad ugu soo dhow yihiin Caynu Jaaluut.

Saacado yar ayuun baa ka hadhay markii ay foodda is dari lahaayeen awooddii Muslimiinta iyo Quwaddii Tataarku.

Ilaahay ayeynu waydiisanaynaa in uu gargaar daa'im ah siiyo Islaamka iyo Muslimiinta

****

Dagaalkii Caynu Jaaluut

Waxaa yimid ciidankii Katbuqaa oo kibir iyo isla wayni cirka isla maraya,iyaga oo weliba adeegsanaya sumcadoodii aadka u sarraysay ee dhiigya-cabnimada,burburinta daaraha iyo tirtiriska basharka..waxay isla wayn yihiin isla wayni xadka ka baxsan.. waxay ciidanku dhinaca galbeed kasoo mareen magaalada Biisaan,ka dibna waxay uga soo jeesteen koonfur si ay u qaabilaan Caynu Jaaluut,halkaas oo ay fadhiyaan ciidamadii Islaamigu una doorteen inay noqoto goobta dagaalka,ku tartiibsadeen ciidamadoodii,laguna ballamay sugnaansho iyo sabir dagaalka,isla markaana lagu sugayo ciidamadii Tataar.

Quddus isaga oo jooga barxaddii Caynu Jaaluut,ayaa waxaa raabe raabe ugu yimid mutadawiciin Muslimiintii reer Falastiin iyo magaalooyinka ku xeeran ka yimid oo

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

doonaya inay la dagaal galaan ciidamada Muslimiinta,ka dib markii ay yaqiinsadeen in uu dhici doono dagaal xaqiiqo ahi dhowaan.

Subxaanallaah..!!

Waa lagama maarmaan in aan is waydiino:

Xagee ayey jireen mutadawiciintani markii ay koox yar oo Tataar ahi Falastiin waqooyi intay kasoo gashay gaadhay ilaa koonfurteeda,ilaa ay qabsatay magaalo ka mid ah magaalooyinka ugu dambeeya Falastiin: magaalada Qasa?

Sidee ayey kooxdani imminka ugu timid ilaa fagaaraha Caynu Jaaluut?

Maxay markii hore u fadhiisteen?maxayse imminka kusoo keceen?!!

Wajaabtu way iska fududdahay

Waa hogaamin.

((hogaamin ku dayasho mudan)).

Kelmedahan waxaan ka hadallay wax badan ka hor intaynaan sooba qaadin Quddus_ilaahay haw naxariiste_ iyo ciidankiisa runta ka sheegay dagaalka.

Waxaa jira Mu'miniin badan oo run ay ka tahay u adeegista diinta,iyo kor u qaadista Islaamka,laakiin aan haysan hogaan wanaagsan oo ay ku daydaan,ama hoggaan daacad ah oo ay ku raacaan.. waxay dadkan reer Falastiin markhaati ka ahaayeen madaxdoodii oo heshiis dulleysi ah la gelaya Tataarka,oo u furaya daarahooda iyo dhufeysyada,ka caawinaya dhisidda Biriishyada,waddooyinka tusaya oo iyagu dalyaqaano u ah Tataarka.

Waxay la'aayeen dadkani hogaan wanaagsan..oo aanay ku arag qalbigiisa khayr badan,markiise uu Quddus_ILAAHAY haw naxariistee_yimid iyo ciidankiisi Mu'miniinta dhabta ah ahaa ee la socday,ee dhulka intaas le'eg soo jaray ilaa ay soo gaadheen goobtii dagaalka,iskuna ballansaday inay sugmaan dagaalka,ee aanay samaynin sidii uu sameeyey Naasir Yuusuf Ayuubi,ee baxsaday markii uu maqlay in ciidankii Tataarku soo dhowaaday..waxaas oo dhan markii ay maqleen ayey quluubtoodii ruuxi gashay,waxaa soo baxay damiirkoodii qarsoonaa,waxaa dhaqaaqay xadhkihii diinta u qiiraysnaa,markaas ayey la yaraatay inay huraan nafta,waxaa la yaraaday jihaadkii.

Waa run oo qoladani may ahayn sida ciidamada nadaamsani awood u leeyihiin,kaartooyinka dagaalka u yaqaaniin,laakiin waxay doonayaan oo u riyaaqsan yihiin inay qabtaan shaqo loo gudanayo dar ilaahay..xamaasaddani waxay wax badan ka qabanaysaa fagaaraha dagaalka.. sida uu ugu adeegsaday Quddus_ILAAHAY haw naxariistee_inay adeegyada khaaska ah ugu qabtaan ciidamada Muslimiinta,wuxuu

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ku xoojistay ciidamadii shaqadan qaban jiray ciidankii dagaalka,ka dib markii ay shaqadoodii qabteen mutadawiciintani.

Waxay ka shaqaynayaan hubkii,waxay gurayaan dhaawacii,waxay ku dedaalayaan in aanay kala go'in cuntada iyo cabbitaankii,waxay u gurayaan ciidamada Leebabka iyo Warmaha,waxay ilaalinayaan fardaha,waxay qaadayaan dhaawicii iyo daawayntiisi.. shaqooyinkan badan waxaa lagu fuliyaa dedaal iyo waqti,waxana shardi looga dhigaa in aanu lahayn karti dagaal,kaarto dagaal midna_ laakiin keliya uu leeyahay hammi fog oo ku wajahan inay dagaalka ku guuleystaan..sidaas ayuu Quddus uga faa'iideystay dhamaan awoodihii mutadawiciinta reer Falastiin..mid walba halkii uu u wanaagsanaa.

Faa'iidadan ay u qabanayaan ciidamada waxaa u dheer inay badinayaan muuqaalka tirada ciidamda (higilka),higilkaasina wuxuu ugu muuqanayaa indhaha ciidamada gaalada laban laab,shakina kuma jiro in tiro badnidaas ay argagax ku ridi doonto qalbiga gaalada..badinta safafka Muslimiintu maaha arrin la sahlado.

Marka la eego dhinaca mutadawiciinta,waxaa ka mid ahaa beeraysato,kasoo ururay magaalooyin kala duwan oo aan awoodaynin dagaal iyo adeeg midna,gabow dartiis ama xanuun amaba cillado kale,waxaa kale oo isugu yimid dumar iyo caruur aad u badan ayaa soo habqamaya wadadii fagaaraha Caynu Jaaluut,isku soo wada duuboo waxaa isugu yimid barxaddii Caynu jaaluut tiro aad u badan oo dadkaas ah,waxaa cirka isku shareeray codkoodii ahaa takbiirta ALAAHU AKBAR,iyo duco,qayladoodii kor ayey usii qaadeen iyaga oo ku dhiirigelinaya ciidamada Muslimiinta,waxay ku dhaqaajiyeen carrabkoodii,gacmahoodii iyo quluubtoodiiba baryada Rabbiga caalamiinta,in uu u gargaaro Islaamka iyo ehelkiisa,dullina uu bado shirkiga iyo ehelkiisa.

Dhamaan dhacdooyinkani waxay dhacayaan maalintii 24 Ramadaan ee 658h,waana maalin ka hor dagaalkii Caynu Jaaluut dhicitaankiisi.

Askartii ILAAHAY ee Tataarka dhexdiisa!!

Iyada oo halkaas arrini botorinayso,ayaa waxaa ka soo dhacay nin reer Shaam ah oo gucle orod ku soconaya,wuxuu dalbaday in uu la kulmo hogaamiyaha ciidamada Muslimiinta iyo madaxda kale ee la joogta,wuxuu sheegay in uu soo diray ninka la yidhaahdo ((Saarimu-Diin Aybak)).

Saarimu-Diin Aybak wuxuu ka mid ahaa Muslimiintii ay qafaasheen ciidamada Tataarku,ka dibna wuxuu oggolaaday inuu u adeego ciidamada Tataarka,wuxuu kala qayb galay dagaaladoodii kala duwanaa,wuxuu imminkana u soo raacay dagaalkan Caynu Jaaluut ka dhici doona,ma garanayno in uu iskii u ogolaaday gacansiinta Tataarka iyo in uu ula in uu xogtooda ursado si uu ugu caawiyo Muslimiinta..taas ma garan karno,taasi waxay u dhaxaysaa isaga iyo Ilaahiisa abuurtay_CSJ.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Laakiin waxaynu garanaynaa waxyar ka hor dhicitaankii Caynu Jaaluut in uu go'aansaday u gargaarista ciidamada Muslimiinta waxa uu awoodo..Subxaanallaah.

﴿وَمَا يَعْلَمُ جُنُودَ رَبِّكَ إِلاَّ هُوَ﴾ **ILAAHAY uunbaa askartiisa yaqaan.**

Ninkan ma yaqaano Quddus,ma yaqaano cid kale oo hogaamiyeyaasha ciidamada Muslimiinta qaar ka mid ah laakiin ILAAHAY ayaa halkaas dhigay si Muslimiinta si uu ugu qabto shaqo wayn Muslimiinta..waxaa soo kaxeeyey wixii soo kaxeeyey Naciim Bin Mascuud (Rc)dagaalkii Uxud,markii uu islaamayba,haddana u noqday sababihii ugu waaweynaa guushii Muslimiint!!

Bal u fiirso maamulka Rabbiga Caalamiinta: markii ay yimaadeen xoogaga Muslimiintu Falastiin,Katbuqaana uu usoo dhaqaaqay dhinaca Caynu Jaaluut,ayuu soo diray Saarimu-diin Aybak ninkan,si uu Quddus usoo gaadhsiiyo macluumaad Muhiima oo ku saabsan ciidamada Tataar.

Waxaa ka mid ah wararka uu ninkani Quddus soo gaadhsiiyey kuwan hoos ku qoran:

> **Kow:**Ciidanka Tataar malaha awooddii lagu yaqaanay ee ay lahaayeen markii ay soo galeen Shaam,sababtoo ah ciidan fara-badan iyo taliyeyaal ayuu kaxaystay Holaako(markii uu aadayey gobolka Faaris magaalada Tabriis) sidaa darteed awooddii hore malaha ee haka cabsanina.

Qodobkani wuxuu xambaarsanaa muhiimad aad u qaaliya,waayo wuxuu kor u qaaday mooraalkii iyo ruuxdii ciidamada Muslimiinta,wuxuu kale oo ka saaray kuwii qalbiga ay cabsidu kaga jirtay,waxaana khasab ah ciidamadan Muslimiinta inay ku jiraan qaar joobjoogeyaal ahaa,iyo qaar looga warramay dagaaladii Tataarka ee hore, sidii ay dunida u halaageen belaayo iyo baasna u badeen..waxay noqotay arrintani markaa mid muhiima oo awood siisay ciidamadii Muslimiinta.

> **Labo:**dhinaca midig ee Tataarka ayaa ka awood badan dhinaca bidix,markaa ciidamada Muslimiintu waa inay xoojiyaan dhinaca bidix ee ay isku beegmi doonaan midigta Tataarka.
> **Saddex:** (waa war muhiim ah) Ashar Ayuub amiirkii Ximsa kooxdiisu waxay la socotaa ciidanka Tataarka waxaana la socda Saarim-diin Aybak,waxay la jebin doonaan Muslimiinta..macnaha fariintu waxay leedahay,ninkii la odhan jiray Ashraf Ayuubi dib ayuu isu canaantay wuxuu go'aansaday in uu ku biiro Quddus ciidankiisa,laakiin wuxuu ku dhexjiraa Tataarka si uu u dhagro,una kala furfuro safafka Tataarka.

Wararkani waa muhiim waxayna yimaadeen waqti ku habboon,laakiin waa arrin meesha taalla in aanay isku hallaynin Muslimiintu warkan,sababtoo ah waxay noqon kartaa khiyaamo ay soo maleegeen Tataarku ama Ashraf Ayuubi amaba Saamiru-diin laftiisu.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Sidaa darteed ayey madaxdii Muslimiinta qaar ka mid ahi markiiba kaga jawaabeen si xikmadaysan.

((ma noqonayso arrin ay Muslimiintu ku shaqaynayso wararkani)).

Yacnii arrintaasi uma shaqaynayso khiyaamada Tataarka oo waanu ku fahamsannahay.

Iyada oo warkaas la hayo haddana mar walba Muslimiintu digtoonidooda ayey iska qaateen,wayna ka faa'iideysteen arrimahan iyaga oo aan kala saarin,ama yaraysan taxadderkooda.

Intaas ka dib waxaa geba gebootay maalintii afar iyo labaatanaad ee Ramadaan.

Habeenkii oo dhanna Muslimiintu waxay u taagnaayeen salaad,duco iyo rabbi bari.

Habeenkani wuxuu ka mid ahaa habeenada ugu waaweyn ee sunnada,waayo waa tobankii habeen ee ugu dambeeyey Ramadaan mid ka mida.

Waxay kale oo ahayd habeen ka mida habeenada witirka ah,waxaana dhici karta in uu ku jiray Laylatul-Qadrigii.

Habeenkani wuxuu kale oo ugu waynaa habeenada dunida,waayo waa habeen ka horeeyey maalin Jihaad,subaxdeedana ay geli doonaan Muslimiintu dagaal ay doonayaan inay ugu aar gudaan kumanaan Muslimiin ah oo dhiigoodu dul sabbeeyey camuudda,ayna daadiyeen duulka ay Muslimiinta aroorta is haleeli doonaan.

Sidaasna wuxuu ku noqday habeen taariikhda ku waaray.

Waxaad eegtaa sida dareenka Quddus_ILAAHAY haw naxariistee_ ahaa habeenkan.

Dareemayaashiisu waxayba u dhowaadeen dareemayaashii Khaalid Bin Waliid (Rc) siday noqon jireen habeenada ka horeeya dagaalka!!

Wuxuu leeyahay Khaalid Bin Waliid (Rc): "habeenka aad caruuska tahay_waa habeen la jecelyahay,waxaad ku bushaaraysanaysaa wiil,laakiin anigu waxaan ka jecelahay habeen qabow darani dhacayo, gaade Muhaajiriin ahina ila socoto,subaxdeedana aan ku waaberiisan doono cadawga ILAAHAY".

Dareenka raaxada ee dhabta ah ma dareemaan cid aan ahayn Mujaahidiinta dhabta ahi.

Shaki kuma jiro in Quddus_ILAAHAY haw naxariistee_ uu habeenkii oo dhan dagaal kaga jiray baryada ILAAHAY SW, waydiisanayeyna in uu gargaarkiisa siiyo,in uu ku sugo gommodohooda dagaalka.. waa habeen in badan la sugayey.. waa habeenkii uu u diyaar garoobayey Quddus intii uu xukunka hayeyba ilaa caawadan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Habeenkii Quddus wuxuu ku dedaalay wanaajinta saraca, gurashadiisu noqon doonto berri.

Waa soo dhowaaday xilligii waagu beryi lahaa.. waxay Muslimiintu ku tukadeen salaaddii Fajarka khushuuc..safafkii ayey tartiibsadeen salaadda ka dib oo diyaar garoobeen,daqiiqado ka dibna waxaaba dilaacay waagii.. waa maalin Jimce ah shan iyo labaatankii Ramadaan ee sannadkii 658h,soo mudhitaankii cadceedda waxay Nuurkeedii ku caddaysay dunida,meel fog ayey Muslimiintu waxay ka arkeen…ciidamadii Tataar..!!

Waxay ka yimaadeen ciidamadii Tataar dhinaca waqooyi,waxayna usoo dhowaadeen fagaarihii Caynu Jaaluut,albaabkii keli ahaa ee uu banaanku lahaa ayey soo dhoobeen ciidamadii fara-badnaantooda laga qaadayey cabsidu,awoodoodana laga dhaxlayey niyad-jabka.

Goobtan banaan fagaaraha kuma jiro hal qof oo ka mid ah ciidamada Muslimiintu,ciidanka Muslimiintu dhamaantood waxay taagnaayeen buuraha dabadooda.

Laakiin_ sidii aan hore usoo tilmaamnay_ ciidanka Muslimiinta ee horbaxanshaha ahaa waxaa hogaaminaya Ruknu-diin Baybaras,iyaga looguma talo gelin inay is qariyaan,si basaasiinta Tataarku u maleeyaan in ciidankii intan hor dhaca ah ku dhan yahay.. sidaa darteed soo dhaqaaqitaankii Tataarka,kooxdanina hore ayey usoo kicitintay,ka dib Quddus wuxuu amar ku siiyey inay soo dhaadhacaan ciidankan Baybaras oo ay istaagaan albaabka fagaaraha ee ka horjeeda Tataarka (albaabkii Tataarku kaga soo jeedeen waqooyi,Muslimiintuna way is hortaagayaan iyaga oo koonfur kasii jeeda).

((Waxaan ku ridi doonaa Quluubta gaalada baqdin))!

Waxay bilaabeen ciidamadii Muslimiintu inay kasoo dhaadhacaan taagii ay saarnaayeen,iyaga oo kusoo degaya Caynu Jaaluut ka dibna ay qaabilaan waqooyi si ay ugu dhowaadaan ciidamada Tataarka.

Hurin ka mid ah ciidamada Muslimiintu masoo dhaadhacayn,ilaa waxay kusoo dhaadhacaysay xaalad gaar ah iyo muuqaal cajiib badan.

Waxaa inooga warramaya Saarimu-diin Aybak oo ku dhex jiray ciidamadii Tataarka_ wuxuu garab taagan yahay ((Katbuqaa)) isaga oo til tilmaamaya hurintii taagada ka soo dhaadhacdaba ee ka mid ah ciidamada Muslimiinta.

Wuxuu leeyahay Saarimu-diin Aybak: “markii ay cad ceeddu soo baxday waxaa soo muuqday ciidamadii Muslimiinta,hurinta ugu horreysaa waxay ku lebbisan tahay midabada casaan iyo caddaan,tiro go’an oo qurux badana way kusoo dhaqaaqeen”.

Maxaa nidaam iyo qurux ka muuqda.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa soo dhaqaaqday hurintii ugu horeysay ee ka mida xoogaga Muslimiinta,iyaga oo ku lebbisan midabo macaan casaan iyo caddaan.. kooxdani dhamaanteed waxaad mooddaa hal nin oo keliya,hubkooduna isku wada mid yahay,macnaha dharka (Duruucda hubka laysaga dhigo)Seefaha,warmaha,leebabka iyo Farduhuba aad ayey u qurux badnaayeen isku midna u ahaayeen..waxay kusoo dhaadhaceen tallaabooyin sugan iyo nidaam heer sare ah.

Ciidamada Muslimiintu saaxadda dagaalka waxay ku imaanayeen qurux halkii ugu dambeysay iyo tamashlayn.. waxaadna moodeysay inay damaashaadkii ciidamada meel fagaare ah ku marayaan.. waxay leeyihiin haybad..waxaa ka muuqata waynaan..waxay ku ridayaan ciddii indhoodu qabtaan cabsi.

Waa hurintii ugu horeysay.

Wuxuu leeyahay Saarimu-diin: “wuu wareeray Katbuqaa.. waxa kale oo wareeray ciddii la socotay”.

﴿فَبُهِتَ الَّذِي كَفَرَ وَاللهُ لاَ يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ﴾[البقرة:٢٥٨].

Wuu wareeray kii gaaloobay,ILAAHAY-na ma hanooniyo duulka daalimiinta ah

Waa markii koowaad ee uu arko Katbuqaa ciidan Muslimiin ah oo muuqaalkan leh,wuxuu ku arki jiray iyaga oo ku jira dhufeysyada dabadooda,iyo qalcado,kurbanaya oo argagaxsan,ama wuxuu arki jiray iyaga oo orod dhabarka jeediyey argagax dartii ay ka firdhanayaan ciidamada Tataarka,ama wuxuu usoo taagnaa iyaga oo qoorta soo dhiibta si dulli ahna loo gawraco..!! Katbuqaa wuxuu filayey in uu ku arki doono xaaladahaas dulleysan ee aan soo sheegnay mid ka mida,sidan uu ku arkayse ee quruxda badan,haybadda badan,sharafta badan, may ahayn mid uu weligiisba xisaabta ku darsaday!!

Wuxuu yidhi Katbuqaa isaga oo naxsan: “Saarim midabkan yaa leh”?

Isaga oo u jeeda hurinta midabkan leh waa tuma?yaase hogaaminaya?

Waxayna ahaayeen guutooyinkii Mamaaliiktu kuwo mid waliba midab u khaas ah sidato.. tusaale ahaan guutadan sidatay midabka casaan iyo caddaan calamadeeduna waxay ahaayeen casaan iyo caddaan,waxay midabkan ka mariyeen fardahoodii,iyo hubkoodii,sidoo kale waxaa midabkan leh teendhooyinkoodii ay deganaayeen,waxaa kale oo leh guryohoodii Masar iyo qolaalkii ay seexan jireenba.. guutadani midabbadaas gaar u leedahay oo caan ku tahay.

Wuxuu yidhi Katbuqaa isaga oo naxsan: “Saarim midabkan yaa leh”?

Wuxuu yidhi Saarimu-diin Aybak: “waa midabkii Sanqar Al Ruumi” waa mid ka mida madaxdii Mamaaliikta.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Mar kasta oo guuto Muslim ah oo nidaamsani ay soo dhaadhacdoba ma awoodno naxdinta iyo cabsida qabanaysay hogaamiyihii Tataarka ee dhiigya-cabka ahaa isla markaana hogaaminaya diigaan-yadii Tataar oo marka loo eego guutadan uu ka cabsanayo ay u noqonayso wax yar marka laysu qiyaaso,waxaase inoo caddaynaya arrintaas xadiiskiin Nebiga ﷺ ee uu Bukhaari kasoo weriyey Jaabir Bin Cabdullaahi (Rcm) in Nebigu yidhi:

«نُصِـــرت بالرعـــب مسيرة شهر».

waxaa la iigu gargaaray inay gaaladu argagaxdo markaan usoo jiro in bil loo socdo.

Wuxuu leeyahay imaamu Sanadi isaga oo sharraxaya xadiiskan: “waxaa lagu ganayaa cabsi quluubta cadawga,iyadoo aanay jirin wax asbaab muuqda ahi.

Laakiin Quddus_ILAAHAY haw naxariisto_ wuxuuba qaatay asbaab muuqata intii uu awoodayey,diyaar garowga ayuu wanaajiyey,muuqaalka ayuu qurxiyey,si xeel dheer ayuu u nadaamiyey,si habsami ahna wuu u tartiibiyey..dhamaan waxyaabahaas oo laysu geeyey ayaa ka dhigtay cabsida Tataarka arrin xaqiiq ah.

Wuxuu leeyahay Imaam Sanadi: “arrintaasi waxay gaar u ahayd Rasuulka ilaahay ﷺ laakiin arrintan raadkeedii wuxuu joogay waqtigii khulafada,waanu joogayaa inta ay ku sugan yihiin xaaladdiisi.

Aynu ku laabanno Katbuqaa dhiigya-cabkii Tataar isaga oo daawanaya soo degitaanka guutooyinkii Muslimiinta.

Markii ay soo degtay guutadii u horeysay ee Muslimiintu: guutadii Sanqar Ruumi, waxaa soo bilaabantay guuto kale oo ku lebbisan midabka huruudda ah,haybadooda iyo quruxdooda aan caqligu sifeyn Karin.

Katbuqaa isaga oo kurbanaya ayuu yidhi : “midabkan yaa leh”?

Wuxuu ugu jawaabay Saarimu-diin Aybak: “Liibaan Alrashiidi”waa mid ka mid ah madaxdii Mamaaliikta.

Ka dib guutooyinkii way iska soo daba dhaceen iyaga oo dhamaantood kala wada duwan dhinaca midabada aadna u wada qurux badan,mar kasta oo ay guuto kasoo dhaadhacdo buurta wuxuu yidhaahdaa Katbuqaa: “midabkanina waa kuwama”?.. markaas ayuu Saarimna yidhaahdaa : “waa guuto heblaayo” isaga oo iskaga jeedinaya ayuu ku jawaabaa hadba wixii carrabkiisa kusoo dhaca.. yacnii wuxuu bilaabay magacyo been abuur ah, sababtoo ah wuu kala garan waayey guutooyinkan faraha badan ee kala duwan,markaas wuxuun buu iska sheegaa.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Dhamaan guutooyinkan_ waa horbaxanyihii ciidanka Muslimiinta keliya,aad ayeyna uga yar tahay diigaanyada Tataarka tiro ahaan, ciidankiisi rasmiga ahaana Quddus wuxuu ku qarsaday buuraha dabadooda,wuxuuna go'aan ku gaadhay in aanay ka qayb gelin dagaalka illaa ay Tataarku soo jiidhaan kuwa hore mooyaane.

Ka dib markii ay buurtii kasoo wada dhamaadeen batalyankii(battalion) Ruknu-diin Baybaras,waxaa la biilaabay muusikadii ciidamada Mamaaliikta ee ku dhex sugan saaxaddii dagaalka,waxaa loo bilaabay Muusikadan si xooggan,waxaa la afuufay ABWAAQII,waxaa kale oo laysku garaacay suxuuntii ka samaysnayd Naxaasta.. ciidamada Mamaaliiktu waxay amarada ku kala qaadan jireen muusikadan,garaacistan iyo dhawaaqan si aanay cadawgu u fahmin..si gaar ah ayaa loogu garaacayaa dhinaca midig,si kale oo gaara ayaa loogu garaacayaa dhinaca bidix,dhexda si gaara ayaa loogu garaacayaa,horuu socda iyo dib u gurashadana waa nooc gaara sida loo garaacayaa qalabkan,waxaa kale oo jirtay garaacis gooni u ah talaabo milateri oo kasta,sidaas ayuu Hogaamiyihii Quddus u hogaaminayey intaas wixii ka dambeeyey gegida dagaalka,dhul aad u balaadhan ayuu hore u dhaafay ciidankiisi intii loo garaacayey qalabka.. intaasina waxay sii cabsi gelinaysaa Tataarka,waayo maqalka qalabkan kala duwan ee dananka iyo sawaxanka oo laysku daray ayaa dhul gariir qaadsiiyey dhegohooda, dhinaca kale ee Muslimiintana wuxuu u siyaadinayaa kalsooni iyo sugnaan,waxayna tusaysaa in madaxwaynahoodii la socdo talaabo kasta oo ay qaadayaan iyo dhamaan dhaq dhaqaaqooda.

Wuxuu joojiyey ciidamadiisi taliye Baybaras markay marayeen albaabkii dhinaca waqooyi kaga yaalay banaanka Caynu Jaaluut,meel fagaarihii oo dhamina ka dambeeyo saacadduna waxay ku dhowaatay eber.

Hirdankii dagaalka!

Wuxuu eegay Katbuqaa gaaskii hordhaca ahaa,isaga oo aan ka warqabin in ciidamadii Muslimiinta ee rasmiga ahaa ay ku dhuumanayaan buurahan ku wareegsan dabadooda,wuxuu naftiisa u sheegay in kooxdan hortaagan ee hordhaca ahayd marka ciidankiisa loo eego ay tahay wax yar.. iyada oo sidaas tahay haddana waxaa ka muuqata hanaan wanaag iyo haybad,wuxuu damcay Katbuqaa in uu dagaalkaba si kooban usoo afjaro..sidaa darteed ciidankiisi intuu tiro le'ekaa hal mar ayuu kusoo wada shubay saaxaddii dagaalka ee ay taagnaayeen hordhacii ciidamada Muslimiintu.

Sidaasina waa sidii uu doonayey boqorkii wanaagsanaa ee Quddus_ILAAHAY haw naxariisto_ .

Wuxuu tilmaan ku siiyey Katbuqaa ciidamadiisu inay hal mar wada galaan dagaalka,waxaa halmar wada yaacay dhamaan ciidamadii Tataar,iyaga oo ku qaylinaya qayladoodii argagixisada ahayd kuna soo yaacaya kooxdii Muslimiinta ahayd, tiro aan lasoo koobi Karin oo fardo ah yaa hal mar jeedalka lagu soo dhuftay.

Hogaamiyihii cawaandiga ahaa ee Baybarasna ma dhaqaaqin ee dhidib adag ayuu ku taagan yahay,ciidamadiisi Muslimiintuna si fiican ayey u sugan yihiin,ILAAHAY-na

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

qalbigooda wuxuu ku riday xasilooni iyo deganaansho,waxaadba mooddaa in aanay arkaynin Ayaxan Tataar ee kusoo yaacaya.

Markii ay waxyar usoo jireen ayuu Ruknudiin amar siiyey inay bilaabaan dagaalka Muslimiintu..waxay ugu dhaqaaqeen geesinimo nooceedu dhif yahay dhinacii Tataarka,weliba ha hilmaamin kooxdani waa hordhicii ciidamada Muslimiinta oo waxyar ah marka loo eego Tataarka,waxaa laysu daray madaxa labadii kooxoodba si qofkii daawanayaa cabsiyi geli lahayd.

Siigadhii ayaa cirka isku shareertay saaxaddii dagaalka,waxaa dhawaaqoodii kor u kacay qalabkii la garaacayey iyo muusikadii Mamaaliiktu isku afgaran jireen,waxaa hal mar Takbiirta isku daray beeraysatadii tubnaa buuraha ku wareegsan fagaaraha dagaalka,way iska caabiday kooxdii Muslimiintu Quwaddii Tataar,deg deg ayaa laysu haleelay dhiigna loo daadshay,danankii Seefaha iyo codadkii ciidamada ayaa kor u kacay.

Dagaalkii waa lays loodin waayey cabbaar.. Tataarkiina waxaa la kulmay wax aanay weligood arag.

Waxay ahayd guutadan Muslimiinta ahi guutadii ugu wanaagsanayd guutooyinka Muslimiinta,Quddusna_ILAAHAY haw naxariistee_waa uu hubay markii uu sidan u dooranayey inay iska caabbin karayso mawjadaha Tataarka ee u horreeya.. qofkii ku dedaala bilowga guul wuxuu awoodaa in uu guushaas haysto ilaa geba gebada..maaha oo keliya tirada ciidamada,laakiin dhinaca niyadda xataa.

Taliyeyaasha ugu badan ee kooxdan hordhaca ah hogaaminaya_ ee Ruknu-diin Baybaras ka midka yahay_ waa raggii ka qayb galay labadii dagaal ee Almansuurah,iyo Faariskor,duullaamadii Kiristaanka ee uu gadh wadeenka aha ahaa madaxwaynihii Faransiiska ee Luwis Taasic muddo toban sano laga joogo 643h, waxay leeyihiin khibrad dagaal,xeelado milateri,hogaamin ciidan oo aad u sarraysa iyo qorsheyaasha dagaalka.

Wiiqistii Awoodda!

Waxay sugnaatay sugnaansho yaable kooxdii Muslimiinta ee dagaalka ku jirtay walaw ay tiradoodu yarayd,wayna u babac dhigeen dhamaan ciidamadii uu Katbuqaa soo wada geliyey gegida dagaalka isaga oo aan waxba kula hadhin kaydka.

Waxaas dhacaya oo dhan Quddus_ILAAHAY haw naxariistee_ dusha ayuu ka daawanayaa,isbeddel kasta oo dhacana wuu la socdaa,ciidankiisina wuxuu ku haystaa weli buuraha dabadooda,oo kulama deg degin inay soo galaan dagaalka ilaa ay timaaddo xilli ku munaasib ahi,daqiiqadihii iyo saacadihii ayaa noqday maalmo iyo bilo.

Dagaal aan waxba laysula hadhin ayaa dhexmaray labadii kooxood,laakiin dagaalku wuxuu u muuqdaa in aan weli cid la muquunin.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Wuxuu ahaa qorshihii koowaad ee dhinaca Muslimiinta: in horta la daaliyo ciidamada Tataarka,dhabar adaygna loogu badheedho weerarkooda iyo quwadoodaba.

Marka waxaa lasoo gaadhay in la fuliyo qorshihii labaad.. waxaa la garaacay muusikadii warka u kala qaadaysay Baybaras iyo Quddus si loo faro in uu bilaabo sidii loo fulin lahaa qorshaha labaad ee dagaalka.

Qorshaha qaybtiisa labaadna waxay ahayd in Muslimiintu isku dayaan gurasho dagaal si ay ciidamada Tataarku usoo wada galaan fagaaraha balaadhan ee Caynu Jaaluut ka dibna Muslimiintu dhinac walba kaga yimaaddaan oo go'doomin geliyaan (square).

Wuxuu bilaabay Ruknu-diin fulinta qorshaha labaad oo dhibaatadiisa leh,waxaa laga rabaa in uu iska dhiciyo Tataarka,dib dibna u baxo isaga oo dagaalamaya,haddii ay halmar si deg dega ah dib ugu baxaan,waxaa dhici karta inay Tataarku dareemaan dabinka lala rabo inay soo galaan,haddii ay si gaabis ah dib dib ugu soo baxaanna waxaa dhacaysa in ciidanka Muslimiintu ku halaagsamo oo lagu jebiyo..isu miisaamiddaasi waxay u baahan tahay hogaamiye hogaamin dagaal aan loo dabo fadhiisan,sidoo kale waxay u baahan tahay rag adag oo xarfaan ku ah dagaalka.

Qorshahani ILAAHAY mahaddiisu wuu u hirgalay ciidamadii Muslimiinta_ dabcan hirgelistaasi waxay ahay tawfiiqda ILAAHAY_ iyo u gargaarista ciidankaas.

Qorshahani _walaalayaal_ waa qorshihii ay u dagaal galeen xoogagii Muslimiintii gashay dagaalkii caanka ahaa ee Nahawund ee lagula dagaalamayey Faarisiinta,sannadkii 19h,roolka uu matalayey Ruknu-diin Baybaras wuxuu ahaa roolkii hogaamiyihii dagaallada ee Muslimiinta,Saxaabigii waynaa ee Alqacqaac Bin Omar Altamiimi (RC),roolka uu dagaalkan kaga jiray Quddusna wuxuu ahaa roolkii dagaalkaas laftiisa uu kaga jiray Saxaabigii waynaa,fardo fuulkii Muslimiinta ee caanka ahaa Nucmaan Bin Maqarin (RC) waxaa dib u gurashaad ku hoday ciidamadii Faarisiinta xoogga badnaa Alqacqaac Bin Cumar,ka dibna dhamaantood waxaa ciidamadii Faarisiinta ka takhalusay ciidamadii Muslimiinta meesha la yidhaahdo Nahawund.

Halkanina waa Caynu Jaaluut oo Quddus_ka faa'iideysanayo tijaabooyinkii ay sameeyeen Muslimiintii ka horeysay,wuxuu ku dabbakhayaa qorshihiisa qorshii Nahawudi lagu jebiyey,wuxuu bilaabay Baybarasna dib u gurasho khibradeysan oo uu taariikhda Muslimiinta kala dhex baxay,mar kasta oo uu talaabo dib u qaado,waxaa meeshiisi imaanayey Tataar.

Waxay Muslimiintu dib ugu gurteen si wanaagsan,waxaa gashay firfircooni Katbuqaa iyo ciidankiisiiba riixitaanka ay ku sameeyeen Muslimiinta,waxay bilaabeen inay soo galaan fagaarihii balaadhnaa iyaga oo cadaadinaya Muslimiinta,waqtigii ayaa is guraya labada dhinacba,laakiin geba gebadii waxay gudaha usoo wada galeen ciidamadii Tataarku bannaankii Caynu Jaaluut dhamaantood,Baybarasna wuxuu dib ugu saaray ciidankiisi dhinaca Koonfureed ee banaanka,iyada oo ay xamaasaddii

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Katbuqaa kor u kacday isla markaana ay ka go'an tahay soo afjaridda ciidamada Muslimiinta,laakiinse hal qof aanu u joogin kaydka, ama goobta dagaalka debeddiisa ee macaa Kabuqaa laftiisu ka dhinac dagaallamayo ciidamadiisa!!

Muxuu sidan u sameeyey Katbuqaa?!

Waa khalad ciidan oo aan shaki ku jirin!!

Katbuqaa waa hogaamiye ciidan oo aan hawl yarayn,wuxuu leeyahay khibrad aad u fog dhinaca dagaalada,waxay da'diisu kor u dhaaftay lixdaneeyo,amaba toddobaataneeyo,waa raggii dagaalada ku jiray waqtigii Jingis-Khaan, Jingiskhaana marka dagaalkani dhacayo wuxuu sii mootan yahay afar iyo soddon sano,waqtigaas oo dhan Katbuqaa wuxuu ku dhamaystay dagaal iyo hogaamin ciidan.

Waxaa khasab ku ahayd in uu ciidan dhigto kaydka,si ay ugu ilaaliso waddo ay ka baxaan haddii ay Jabaan,ama ay u celiso haddii gurmad u yimaaddo ciidamada Muslimiinta,sidoo kale si ay dusha ugala socdaan dhamaan dhaq dhaqaaqyada tababar ee ciidamada Muslimiinta oo gargaar siin kara.

Laakiin arintaasi ma dhicin**!**

Caqligii sida wanaagsan u fekerayey ee Tataarku waa istaagay,weliba wuxuu istaagay waqti xaas xaasi ah oo dagaal lagu jiro..waxaa lagu fasiri karaa Katbuqaa ayaa jeclaystay in aan wax badanba laysa sii jiid jiidan ee uu dagaalka si hawl yar usoo afjaro,waxaa la odhan karaa waa daciifnimo ka timid dhinaca basaasiinta Tataarka oo ogaan kari waayey tirada ciidamada Muslimiinta ee rasmiga ah,waxaa kale oo lagu fasiri karaa waa kibir iyo isla wayni ka buuxday Katbuqaa tin iyo cidhib,taas oo dhaxalsiisay in uu waxba kama jiraan kasoo qaado xoogaga Muslimiinta,waxaan meesha ka maqnayn oo lagu fasiri karaa khibrad dagaal oo leh hadaf cayiman innaguse aynaan fahmi karayn ayaa ka guuxaysay maskaxda Katbuqaa.

Mid kasta oo aan sheegnay iyo kuwo kaleba waa lagu fasiri karaa.. laakiin dhamaan tafaasiishaasi cudur daar la aqbali karo ma siinayso khaladkaas cad ee faashilka ah, khalad aan laga aqbalayn hogaamiye dagaal oo noloshiisaba ku qaatay dagaal, ruug-caddaa dagaal oo ah sida ((Katbuqaa)).

Laakiin waxaa inoo hadhay hal tafsiir oo la aqbali karo,midkaasina waxaa weeye burburinta rabbiga Caalamiinta SW,isaga ayaa ka dhexsaara maanka basharka inay si caadiya u fekeraan,kuna khasba qof walba in uu sameeyo ficil cayiman duruuf cayiman dhexdeeda..haddii ay arintaas lafteedu kusoo noqnoqoto qofkaas kun jeer waxaa laga yaabaa in aanu weligiis go'aan ka qaadan,laakiin ILAAHAY SW_ayaa la doonay ciidanka Tataarka jab iyo halaag,oo weliba lagu jebiyo gacanta ciidamada Muslimka,waayo wuxuu gaadhay Katbuqaa go'aan aan marnaba munaasib u ahayn marka loo eego khibraddiisa hogaamineed,oo aan munaasib u ahayn ciidamadiisa balaadhan,oo aan munaasib u ahayn miidaanka dagaalka oo aynu nidhi wuxuu lahaa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

hal albaab,haddii ay ciidamadu miidaanka soo wada galaan halkii albaabna la xidho waxaa mustaxiil noqonaysa sida looga baxo..

﴿وَيَمْكُرُونَ وَيَمْكُرُ اللهُ وَاللهُ خَيْرُ الْمَاكِرِينَ﴾[الأنفال:٣٠]

Waxbay dhagrayaan ILAAHAYna iyag ayuu dhagrayaa,ILAAHAY ayaana cid wax dhagarta ugu wanaagsan.

Imminka ka hor waxaynu ka warqabnaa dagaalkii Beder in Abaa Jahal uu ciidankii gaalada geliyey dagaalkii Beder ka dib markii ay ka diideen qolyihii kale..halaagii ugu waynaa wuxuu ku dhacay madaxdii gaalada Maka.

Mar kale waxaynu aragnay Musaylama Kaddaab dagaalkii caanka ahaa ee Yamaama,isaga ayaa ciidamadiisa ku amray inay yimaaddaan.

Waxaan kale oo aragnay Alfiirusan dagaalkii Nahawud isaga ayaa keenay ciidankiisa halkii lagu jebiyey.

Waxaynu kale oo ognahay Biihaan dagaalkii Yarmuuk isaga ayaa ciidamadiisa ku riday Haawiya.

Waa wax furan in la yidhaahdo: haddii hogaamiyuhu dhinacaas wax ka eegi lahaa waxay noqon lahayd sidan iyo sidaas,haddii hogaamiyuhu arrinta rogrogi lahaa..haddii uu talada dhegaysan lahaa ama fekerkii hebel..

Walaal_ waxaa loosoo kaxaynayaa dhinaca xabaashooda.

Inkasta oo awooddoodu gaadhsiisan tahay..si kasta oo tiradoodu u badan tahay.. si kasta oo hubkoodu casri u yahay marnaba kama baxsan karaan doonista ilaahay_ casaa wajal_ wuxuu gargaar la doonayaa addoomadiisa u gargaaray.

﴿إِن تَنْصُرُوا اللهَ يَنْصُرْكُمْ وَيُثَبِّتْ أَقْدَامَكُمْ﴾ [محمد: ٧]

Haddaad ILAAHAY u gargaartaan wuu idiin gargaari,gommodihiinana wuu sugayaa.

Waa qaaciido aan laysku khilaafi Karin.

Sidaas oo kale ayuu Katbuqaa ciidamadiisi ugu horseeday inay soo wada galaan miidaankii Caynu Jaaluut.

Sidoo kale sidaas ayey qaybtii labaad ee gorsha Muslimiintu u guuleystay sidii la rabay.

Waxaa bilaabantay fulinta qaybtii saddexaad ee qorshaha.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa yimid amarkii Quddus in la bilaabo si Dabuul iyo Abwaaq ah.

Ugaadhsigii Katbuqaa!!

Guutooyin farabadan oo Muslimiin ah ayaa kasoo baxay buuraha dabadooda oo kusoo dhaadhacay miidaankii dagaalka.. dhinac walba way kasoo degeen,guutadii ugu awoodda badnaydna waxay deg deg u xidhay albaabkii keli ahaa ee miidaankani ku lahaa dhinaca waqooyi,waqti daqiiqado ah ayey xoogagii Muslimiintu dhinac walba iskaga xeereen Tataarkii si dhamaystiran ayey xero u geliyeen.

Qorshahani wuxuu ku soconayaa xikmad xeeldheer iyo feejignaan,qorshahani wuxuu u xambaarsan yahay dhinaca Muslimiinta laftiisa khatar badan..waayo? go'doominta Tataar ee aan la siinin fursad ay ku cararaan,askari kasta waxay ku khasbaysaa in uu dhamaan awooddiisa debedda soo wada dhigo.. wuxuu dagaalami doonaa dagaal naf hurid ah.

Dagaal nin go'doonsan.. dagaal geeri iyo nolol, maaha dagaal guul iyo guul-darro.

Laakiin isla waqtigaas haddii qorshahani guuleysto waxaa ku dhici doona ciidamada ballaadhan ee Tataarka wax aan laga sheekayn.. waxaa ku dhici doonta dhirbaaxo aanay kasoo waaqsan isla markaana geba gebaysa ciidankan adduunyada ugu tunka wayn.

Goor xeedho iyo fandhaal kala dheceen ayuu Katbuqaa fahmay kaartada ay dagaalka kusoo galeen Muslimiintu,isaga iyo ciidankiisiina lagu go'doomiyey barxadda Caynu Jaaluut,oo aan meel lagaa baxaa jirin,wuxuu bilaabay ciddiyo ku dagaallan halkii ugu dambaysay,waxaa dhacay dagaalkii ugu adkaa inta taariikhda la ogyahay..carar ma jiro..xeelad kale ma jirto..dhuumasho ma jirto.. garoonku waa banaan cad oo wax waliba muuqdaan,waxa keliya ee wax ka celin karaa waa Seefo iyo duruuc.. wax aan dagaal ahayni uma banaana ilaa ay ka dhimanayaan.

Waa kululaaday dagaalkii..Tataari kastaana wuxuu la soo baxay wax alla iyo wixii karti ku jirtay,waxay bilaabeen inay cartamaan oo wisiisiyaan.. Muslimiintuna way sugmeen oo samreen.

Waxaa muuqatay awooddii lagu sheegayey dhinaca midig ee Tataarka_ sidii uu ku waramay ninkii uu soo diray Saarimu-diin Aybak waxay bilowday dhinacii midig ee Tataarku inay lasoo kacdo garabkii bidix ee Muslimiinta, garabkii bidix ee Muslimiinta ayaa cadaadis xoog badan lagu saaray inay dib u gurtaan,Tataarkiina waxay bilaabeen inay soo dhambalaan dhinacii bidix ee Muslimiinta,shuhadadii ayaa daadatay,haddii ay Tataarku si fiican usoo wada dhambali lahaayeen dhinaca bidix ee Muslimiinta waxay kor mari lahaayeen ciidamada Muslimiinta ka dibna waxaa isle'ekaan lahaa labada kefedood ee dagaalka,weliba waxaa cuslaan lahayd kefedda Tataarka.. xidhitaanka albaabka garoonku wuxuu khatar ku noqon lahaa Muslimiinta.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Quddus_ILAAHAY haw naxariistee_ wuxuu saaran yahay meel sare oo ka dambaysa ciidamada halkaas ayuu xaaladda kala socdaa dhamaanteed,wuxuu ka kala hagayaa ciidamada halkaa,Qorshaynta isaga ayaa wata mid yar iyo mid waynba.

Quddus_ILAAHAY haw naxariistee_ arkay in lasoo jabsanayo garabkiisi bidix,wuxuu ku xoojiyey ciidamadiisi kaydka ahaa,laakiin weli wuu sii socday riixitaankii Tataarku,waxay bilaabeen qaar Muslimiinta ka mid ahi inay xaalad adag ku jiraan,qaar kalena waxayba ka shakiyeen in laga guuleysto,weliba yaynaan hilmaamin halku dheggii cabsida badnaa ee ahaa ‘ciidamada Tataarka lama jebiyo’.

Tolla’ay Islaamkoow!!

Quddus_رحمه الله- wuu daawanayaa,wuxuu ku kordhiyey dhinaciisi bidix ciidamo,haddana wuxuu arkay inay xaaladdu sii xumaanayso,halkaas markay marayso Quddus_ILAAHAY haw naxariistee_ wuxuu helay hal xal oo aanu jirin wax lagu bedelaa.

Waa in Quddus_رحمه الله- _laftiisu miidaanka dagaalka gala.

Waa in uu ciidamadiisa tusaa si ay u sugmaan…ugu daydaan madaxwaynahooda!

Waa in uu ciidamadiisa u caddeeyaa dariiqa in ILAAHA dartiis loo dhintaa ay tahay wax la higsad,han iyo hadaf.

Innagu aakhiro ayeynu doonaynaa..iyaguna adduunyo ayey rabaan.. waynu kala fognahay!!

Quddus_رحمه الله- _ wuxuu ka sameeyey wax lagu daydo.

Wuxuu dhulka ku tuuray koofiyaddiisi dagaalka…waxay muujinaysaa in uu u hilowsanaa Shahaado,iyo in aanu geerida ka cabsanaynin,wuxuu ku dhawaaqay weedhii caanka ahayd ee miisaanadii dagaalka beddeshay.

Wuxuu ku qayliyey codkiisa ugu sareeyey: Tolla’ay Islaamkoow..Tolla’ay Islaamkoow..!!

Orod ayuu ku dhexgalay Quddus رحمه الله- mawjadihii hirdamayey ee basharka ahaa.

Waxay ku war heleen askartii madaxwaynihii oo dagaalka dhexda kaga jira.. la qaba waxay qabaan.. la dareemaya waxay dareemayaan.. una dagaalamaya siday u dagaalamayaan.

Waa taageero,sugnaansho,xasillooni,iyo deganaansho qalbiga ciidamada ah tii ugu wanaagsanayd!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Imminka ujeedadu way u caddahay dhamaantood.. ujeedadu waa keliya u gargaaridda Islaamka iyo difaaciisa..ujeedadu maaha ilaasashada kursiga boqortooyada.. ama difaacista kursiga..ujeedadu maaha inaad ku dedaashid in uu xilka kaa dhaxlo wiilkaaga iyo qoyskiinu.

Ujeedadu_ walaalayaal_ waa ujeeddo dhab ah.

Kala fogaa hogaamiye run sheeg ah oo u nool diintiisa iyo shacabkiisa.. iyo hogaamiye beenaale ah oo in badan ka hadla shaqooyinka khayrka badan,isaguna aan u nooleyn wax aan ahayn naftiisa.

Xamaasaddii Muslimiinta oloshay,waxaa la yaraaday ciidamadii Tataarka,naftoodii ayey garbaha ku qaateen,waxay ugu dhaqaaqeen xawli noociisu dhif yahay dhinacii Tataarka,waxay bilaabeen inay dumiyaan dayrarkoodii.

Maaha weerar ay naftooda ku weerarayaan.. laakiin Islaamnimo ayey u weerarayaan.

Dagaalkii ayaa ka holcay miidaankii Caynu Jaaluut dhexdiisa..waxaa mar kale isu baxay dhawaaqii takbiirta ee beeraleyda..Muslimiintuna waxay si dhab ah u magansadeen rabbigood maalintan khayrka badan ee Ramadaan.

Quddus رحمه الله- wuxuu dagaalamay dagaal yaableh.

Ka dib waxaa leeb kusoo ganay Quddus nin Tataari ah wuu la waayey laakiin wuxuu ku dhuftay faraskii uu korkiisa saarnaa,Faraskii ayaa saacaddiisi dhintay,wuxuu Quddus ku dhacay dhulka رحمه الله- _ wuu dagaalamay isaga oo soconaya oo aan Faras fuushanayn! Ma uu labac labaclayn,dibna uma cararin,noolaanshihiisana kuma dedaalin رحمه الله- .

Waxaa la sheegaa isaga oo socod ku dagaalamaya,ayaa waxaa deg deg ugu yimid mid ka mid taliyeyaashii ciidamada oo uga degay faraskiisi,Quddus laakiinse wuxuu diiday isaga oo leh: “ma doonayo in aan waxtarkaaga ka horjoogsado Muslimiinta ee saarnow!!”

Socodkii ayuu kusii dagaalamayey ilaa ay u keeneen faras ka mid ah fardihii kaydka ahaa!!

Xaaladdaas isaga oo ku jira ayaa waxaa canaantay qaar ka mid ah madaxdii Muslimiinta iyagoo ku leh: “maxaad u fuuli wayday faraskii hebel,haddii ay cadawgu ku arkaan way ku dili lahaayeen islaamkuna wuxuu u halaagsami lahaa sababtaada”.

Wuxuu yidhi Quddus si yaqiini ka muuqato: “Anigu haddii lay dilo janno ayaan geli lahaa,Islaamkuna wuxuu leeyahay rabbi aan marnaba dayacaynin,waxaa la dilay hebel iyo hebel iyo hebel,ilaa uu madax badan tiriyey waxaa ka mid ahaa (Cumar,Cismaan,Cali ILAAHAY raalli dhamaantood haka noqdee) Islaamkana

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ILAAHAY ayaa taagay,marka kuwaas oo dhan la laayey yaa ilaalinayey,Islaamku dayacmi maayo".

ILAAHAY hakuu Naxariisto Quddus.. walaahi waxaad mudan tahay qof Muslimiintu ku dayato.

Marka ay mawqifkaas arrini marayso Muslimiintu waxay ka dhigeen goobtii dagaalka wacdaro,dhamaan waxay awood lahaayeen ayey lasoo baxeen,qaddiyadooduna may ahayn geeri iyo nolol sida Tataarka ee waxay ahayd guul ama shahaado.

Waxay bilowday kefeddii ILAAHAY fadligiisa inay inay kor ugu kacdo dhinacii Muslimiinta..cadaadiskiina waxaa dib loo saaray Tataarkii.. waxay bilaabeen Muslimiintu inay diiqad geliyaan Tataarka,waxaa lagu dhejiyey naqaskii ciidanka Tataarka.. imtixaan adag ayaa ILAAHAY mariyey maalintaas gaalada.

Maydadkii xad-gudbeyaasha!

Waxaa hore u soo dhex jibaaxay safafkii ciidamada Tataarka mid ka mida madaxdii Mamaaliikta ee la joogay Naasir Yuusuf iskagana yimid markii uu cararid go'aansaday, isla markaana u yimid Quddus ciidamadiisa,waxaana la odhan jiray ((Jamaalu-diin Aaquush Shamsi)) waxdaro yaable ayuu ka dhigay dagaalkii,wuxuu dhambalay safafkii Tataarka isaga iyo koox isku duuban oo uu watay,ilaa ku gaadhay jibaaxiisi..Katbuqaa...!!!

ILAAHAY ayaa soo kaxeeyey!! Kor ayuu u qaaday Seeftiisi geesigii Muslimka ahaa, labadiisa gacmood intii si awood leh uga buuxsaday ulana hubsaday ayuu la eegtay goortii kibraagii waynaa,daalinkii waynaa,xadgudbihii Tataarka ee Katbuqaa..wuxuu madaxii Katbuqaa ku duulay gegidii dagaalka..madaxwaynihii Tataarkuna waa uu dhacay..dhicitaankiisana waxaa la dhacay dhamaan mooraalkii ciidamadii Tataarka..

﴿وَمَا رَمَيْتَ إِذْ رَمَيْتَ وَلَكِنَّ اللهَ رَمَى﴾

Maad tuurin adigu markaad tuuraysay,ee ILAAHAY baa tuuray.

Waxaa majare habaabay dagaalkii dhinaca Tataarka..fekerkoodii oo dhan waxay isugu geeyeen sidii ay u heli lahaayeen meel ay ka baxaan,sidaa darteed waxay ujeedadooda koowaad noqotay siday u heli lahaayeen meel ay ka baxaan si ay naftooda ula baxsadaan,markaa waxay xooggoodii ugu badnaa saareen wadadii keli ahayd ee dhinaca waqooyi ee wadadii keli ahayd ee ka banaanayd fagaaraha Caynu Jaaluut,si carar ugu suurto galo..Muslimiintuna cagta ayey cagta u saareen,qaar way laynayaan,qaarna way qafaalanayaan.

Huwantii Tataar way u jabeen Muslimiinta,waa kuwaa meel walba daadsan,sidii jirrid Timireed oo dabayli ridday.. waa luntay sumcadoodii..haybadoodii ayaa dhulka gashay..waa la qurbay ciidamadii cabsida lahaa ee Tataar.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Dagaal kale ayaa ka cusboonaaday ((Bisaan))!!

Way ku guuleysteen Tataarku dedaalkii ay ku furanayeen wadadii dhinaca waqooyi uga bixi jirtay fagaarihii dagaalka ee Caynu Jaaluut..waxay awoodeen dagaal naf hurid ah ka dib inay ku bannaystaan saf Muslimiin ah oo taagnaa albaabka,hal haleel ayey u yaaceen iyaga oo dhabar jeediyey,waxaa ka baxday albaabkii tiro aad u badan oo u yaacay dhinaca waqooyi si ay u helaan meel looga cararo..Muslimiintuna kama hadhin ee way eryanayaan ciidamadii Tataarka..ka hadhi maayaan..ujeedadu may ahayn in hal goobood lagaga guuleysto,iyo in la xaqiijiyo kasbasho siyaasadeed oo hadhow lagu doodo.. laakiin ujeedadu waxa weeye in lagu xoreeyo dhamaan dhulka Muslimiinta iyada oo loo marayo dariiq Jihaad.

Tataarkii oo u firdhaday dhinaca waqooyi iyo Muslimiinta oo baacsanaya.

Waxay gaadheen firdhadkii Tataarku magaalada Biisaan (waxay jirtaa labaatan kiiloo mitir oo dhinaca waqooyi bari ka xigta Caynu Jaaluut) waxay Tataar yaqiinsadeen in aan Muslimiintu ka hadhayn,waddo kale oo ay kaga baxsadaanna uma muuqato,sidaa darteed mar kale waa in lays gala,waxaa ka curtay dagaal kale Biisaan,taariikh yahannadu waxay sheegaan in dagaalkani ka qadhaadhaa kii hore ee Caynu Jaaluut,waxay dagaalameen Tataarkuna dagaal kama dambays ah,awood kasta way ku bixiyeen sidii ay u noolaan lahaayeen,waxay bilaabeen inay cadaadiyaan Muslimiinta,waxayba ku sigteen inay arrinta bogga kale u dhigaan,waa la imtixaamay Mu'miniinta,waxa la gilgilay gilgilid aad u daran,daqiiqadahani waxay ahaayeen daqiiqadihii ugu adkaa ee soo mara xoogaga Muslimiinta.

Quddus wuu arkaa waxaas oo dhan.

Dhacdooyinkan kuma uu dhowayn.. laakiin ((badhtanka ayuu ugu jiray)).

Quddus wuxuu bilaabay in uu dadka guubaabiyo,kuna dhiiri geliyo inay sugmaan oo cagaha dhulka ku adkeeyaan.

Ka dibna wuxuu ku dhawaaqay kelmaddiisi waartay: Tolla'ay Islaamkoow..Tolla'ay Islaamkoow..Tolla'ay Islaamkoow.

Wuxuu yidhi saddex jeer ka dibna wuxuu raaciyey si isdulleyni ku jirto: "ILAAHAYOOW uga gargaar addoonkaaga Quddus Tataarka"..ILLAAHU AKBAR.

Bal u fiirso sida uu ILAAHAY ugu xidhan yahay isaga oo xaaladdan ku sugan.

ILAAHAYOW.. uga gargaar ((addoonkaaga Quddus))Tataarka.

Ma ihi anigu boqor wanaagsan.. ma ihi Suldaankii Masar.. ma ihi Amiirkii Muslimiinta.. ee waxaan ahay addoonkaagii oo keliya.

Ilaahay ayaan idinku dhaarshee..sidee ayey u dhici kartaa addoon ILAAHAY sidaas u magan galay..in ILAAHAY ka jeesto?.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

روى البخاري ومسلم عن أبي هريرة ﷺ قال: قال رسول الله ﷺ: «يقول الله تعالى: أنا عند ظن عبدي بي، وأنا معه إذا ذكرني؛ فإن ذكرني في نفسه ذكرته في نفسي، وإن ذكرني في ملأ ذكرته في ملأ خير منهم، وإن تقرب مني شبراً تقربت إليه ذراعاً، وإن تقرب إلي ذراعاً تقربت إليه باعاً، وإن أتاني يمشي أتيته هرولة».

bukhaari iyo Muslim waxay Abii Hurayra(RC) kasoo weriyeen in uu yidhi: wuxuu yidhi Rasuulka Ilaahay ﷺ: "**ilaahay wuxuu leeyahay: anigu waxaan ahay waxa uu addoonkaygu iga malaysto,waan la joogaa marka uu I xusayo,haddii uu kelidii I xuso aniguna keli ayaan u xusaa,haddii uu shir igu xusona waxaan ku xusaa shir ka khayr badan shirkiisa,haddii uu iisoo dhowaado taako waxaan u dhowaadaa dhudhun,haddii uu dhudhun ii soo dhowaadona baac (**waa marka aad labadaada gacmood ballac ahaan u kala bixiso cabbirkooda) **haddii uu ii yimaaddo isaga oo soconayana waxaan ugu tagaa gucle".**

Wuxuu garaacay Quddus albaab haddii run lagu garaaco lagaa furayo.

Quddus wuxuu u dhowaaday cidda ay gacantiisa ku jiraan maamulka samooyinka iyo dhulalku.

Marka ay walaalayaal,khushuucaan boqorada dhulku,waxaa khasab ah in Jabbaarka samada iyo arladu u naxariisanayo..khushuucdii dhabta ahayd ee Quddus waxay noqotay buurtii ku fadhiisatay ciidamadii Tataarka ee halaagtay.

Geba-gebayntii Hirdanka!!

Ma uu geba gebayn ducadii iyo dalabkii_ILAAHAY haw naxariistee_ waaba awooddii Tataarka oo si buuxda u duntay.

Waaba askartii dunida saska qaadsiisay hadda ka hor oo dhulkii Biisaan ugu daadanaya sida Duqsiga.. Muslimiintu ciidankii aan la loodin jirin gebi ahaantiisba way ka faraxasheen.

Waxaa kor u kacay calankii Muslimiinta,waxaa dhulka galay calankii Tataarka.. waa imminka waqtigii ay Muslimiintu sugayeen muddo afartan sano ah ama ka badan..

﴿وَيَوْمَئِذٍ يَفْرَحُ الْمُؤْمِنُونَ * بِنَصْرِ اللهِ يَنصُرُ مَن يَشَاءُ وَهُوَ الْعَزِيزُ الرَّحِيمُ﴾ [الروم: ٤، ٥].

Maalintaas way farxi doonaan Mu'miniintu,waxay ku farxi doonaan gargaarka

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ILAAHAY,cidda uu doono ayuu u gargaaraa,ILAAHAY waa ka aan laga adkaan ee naxariista badan.

Ma garanaysaan inta ka hadhay ciidankii Tataarka Caynu Jaaluut ka dib?!

Dhamaantiis waa la tirtiray ciidankii Tataarka!! Hal askari nolol laguma daynin.. weligaa ma maqashay arrintan oo kale?! Waa la tirtiray ciidankii kubbadda dhulka jeexa haystay..ciidankii daadiyey Malaayiin dhiig,burburiyey boqollaal magaalo,ee adduunyada fasaadka ku maasheeyey..

Ciidankii Muslimiinta ee waynaana wuu guuleystay.

Hambalyo Muslimiintoow guusha wayn ee aad gaadheen!!

Hambalyo Quddus.. waxaa soo dhowaaday waqtigii aad guran lahayd midhaha.

﴿ وَمَا النَّصْرُ إِلاَّ مِنْ عِنْدِ اللهِ.. ﴾

Wax guul ahi ma jirto,haddii ay jirtona ILAAHAY uun baa bixiya:

Muxuu sameeyey Quddus رحمه الله markii uu arkay dhamaan Tataarkii oo wadhan dhulkii Biisaan ee barakaysnaa?.

Wuu soo degay geesigii waynaa,Mujaahidkii ilaahayna ka cabsan jiray xalaal miiradkana ahaa..wuu kasoo degay faraskiisi.

Wejiga ayuu dhulka ku xoqay..ILAAHAY ayuu u sujuuday isaga oo u shukri naqaya_SW.

May gelin isla waynida kuwa guuleysta.. madaxana kor uma taagin libinta uu gaadhay darteed.

Ismaba dareensiin in uu wax sameeyey.

Gallad iyo manno sheegasho oo dhan waxaa iska leh ILAAHAY SW_ ugu nimceeyey in uu ka dhigo Mujaahid..isaga ayaa ku irsaaqay inay sugmaan..isaga ayaa ku ilhaamiyey xikmadda ay dagaalka ku galeen,waafajiyeyna ra'yigii toosnaa..isaga ayaa wadadaas ku hanooniyey.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waa nashiido hal meeris ah oo aan carabigeedii u soo qaatay ka dibna macneeyey iyo weliba Aayad Quraan ah.

أن تعرف أنك عبد الله.. لا تُنصر إلا بنصره.. ولا تنجو إلا برحمته، ولا تتحرك إلا بإرادته..﴿لِلَّهِ الأَمْرُ مِن قَبْلُ وَمِن بَعْدُ﴾ [الروم:٤].

si aad u ogaatid in aad tahay addoon ILAAHAY..laguma guuleysto waxaan ahayn gargaarkiisa..lagumana badbaado waxaan ahayn naxariistiisa,lagumana dhaqaaqo doonistiisa waxaan ahayn **ilaahay ayey arimuhu u sugnaadeen horeysiyo dambaysoba.**

Haddii aad doonaysaan inaad garataan Quddus_ILAAHAY haw naxariistee_ waxaad eegtaan madaxda kale faraha badan,ee kibir,isla wayni iyo santaagis la dirgan waayey,isla markaana doonaya inay ILAAHAY arrimihiisa farageliyaan.. dhulkana ku mara is qaad qaad..sidii oo aad moodid inay dhulka daloolinayaan ama dhererka buuraha ay leeyihiin..!! umadahoodana u samayn kari waayey dareenka uu Quddus u sameeyey رحمه الله.

Waxayba ku ahaayeen shacabkooda laf dhuun gashay,iyo masiibo dhakada ka saaran ummadooda.

Halkaas ayey kaaga soo bixi doontaa qiimaha dhabta ah ee uu Quddus lahaa.

((Caksigiisa eeg shayga isagaa kuu caddaanayee,shay kasta)).

Layaab maaha in Quddus ku guuleysto,qayrkiina ku fashilmaan waayo

Ilaahay axadna ma dulmiyo.

﴿وَهَدَيْنَاهُ النَّجْدَيْنِ﴾[البلد:١٠].

ILAAHAY wuxuu leeyahay:

Basharku isaga ayaa doorashada leh.

Kuma iman Quddus dhaxal iyo Seyidnimo midna..uma imaan duruufta oo wanaagsan iyo meel lagu raaxaysto midna,xukunka dalka ma uu qabsan isaga oo xooggan oo ah dal dhisan hadaf qudhana wada leh.. kursiga kuma fadhiisan iyada oo dhaqaalaha dawladda aanu tiro iyo xisaabtoona lahayn badnaan darteed.

Waxay duruufahaas oo dhami ahaayeen sida caksiga ah.

Laakiin ilaahay ayuu gargaarsaday,wuxuu ku shaqeeyey run iyo badhaxtirid,wuxuu ku dhiirigeliyey dadkii kale inay sidaas kula shaqeeyaan..markaa khasab waxa ahayd in uu gaadho halkan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Maalinta ay Muslimiintu u shaqeeyaan sida uu Quddus u shaqeeyayna waxaan shaki ku jirin inay gaadhi doonaan halka uu gaadhay.

Daruurina maaha in isbeddelku u baahan yahay sannado iyo qarniyo.

Waxay dhacday Caynu Jaaluut toban bilood oo keliya ka dib markii Quddus la wareegay hogaanka waddanka.

Muhiimaddu waxaa weeye in la helo runsheegayaal,khaalisiin,Caalimiin ku shaqeynaya intaas hore.

Ilaahayna ballanka kama baxo.

إِنَّا لَنَنصُرُ رُسُلَنَا وَٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا وَيَوْمَ يَقُومُ ٱلْأَشْهَٰدُ ﴿٥١﴾ waanu u gar gaari doonaa rasuulladayada iyo kuwa iimaanka laga helay adduunyada korkeeda iyo maalinta markhaatigu istaagi doono.

****

casharradii Caynu Jaaluut

Waa la jebiyey ciidankii Tataarka abaalkiisiina wuu helay.

Wuxuu dunida ku faafiyey Ciidanka Tataar fasaad aad u wayn,ILAAHAYna SW ma hagaajiyo camalka mufsidiinta,iyada oo ay jirto inay fasaad wadayaal ahaayeen Tataarku ayaa haddana lagu salliday Muslimiinta muddo ku dhow afartan sano,boqollaal dagaal ayey ku jebiyeen Muslimiinta.. waxay sidaas ahaatoba waxaa curtay dagaalkii Caynu Jaaluut..guul lagama Sheekeeyaan ah ayey Muslimiintu ku guuleysteen.

﴿وَتِلْكَ الأَيَّامُ نُدَاوِلُهَا بَيْنَ النَّاسِ﴾[آل عمران: ١٤٠] **taasi waa maalmo,waxaanu dhex warwareejinaynaa dadka dhexdiisa**.

Halkaas waxaa laga yaabaa inay u soo baxaan labo su'aalood qollada dhacdooyinka falanqeeya,isla markaana maareeya arrimaha.

Labadaas su'aaloodna waxay leeyihiin hal jawaab oo keliya.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Su'aasha kowaad waxay tahay:maxaa ciidamada Tataarka oo ahaa xuma wadayaal kuwii ugu xumaa ee dunida fasahaadiyey loogu salliday ummadda Islaamka oo ka khayr badan si kastaba haw daciifaane,si kastaba hawga gaabiyaan waajibaadkoodiiye?

Su'aasha labaadna waxay odhanaysaa: ciidamadii Tataarka ee Muslimiinta goob kasta kaga gacan sareeyey dunida Islaamka oo dhan qabsaday,maxaa goobtan dhamaantiis loogu dabar-jaray.. maxayse u guuleysan jireen dagaaladii hore?.

Labadan Su'aaloodba jawaabahooda waxaynu ka helaynaa hadalkii Amiirkii Mu'miniinta Cumar Bin Khaddaab (RC) saxaabi waynaa,wuxuu u dirayaa hadalkan Sacad Bin Abi Waqaas (RC) oo hogaaminaya ciidamadii Muslimiinta oo duullaan ku qaadaya Furus dagaalkii Qaadiisiya.

Saxaabigii Xigmadda badnaa wuxuu ku leeyahay Sacad:

"sacadoow waxaan kuu dardaarmayaa adiga iyo cidda kula socota ee ciidamada ka mid ah Cabsida ILAAHAY xaalad kasta oo aad ku sugan tihiin,waayo ALAAH ka cabsigiisu isaga ayaa ka wanaagsan inaad cadawgaaga u diyaar garoowdo,waa hubka ugu fiican goobta dagaalka..waxaan kale oo kuu dardaarmayaa adiga iyo cidda kula socotaba inaad aad uga feejignaataan macaasida,waayo dunuubtu waxay idiin jilcinaysaa cadawgiina,waxay Muslimiintu uga guuleystaan cadawgooda macaasida ay ILAAHAY ka galeen,haddii aanay arrintu sidaas ahayn kama awood badnin,kama tiro badnin,kama diyaar garoow badnin,markaa haddii aynu ka simannahay dhinaca Macaasida,waa laynaga awood badan yahay,kagana guuleysan mayno fadli aynu dheernahay iyo awood..waxaad ogaataan in socodkiina ay idinku weheliso Malaa'ig ILAAHAY,og waxaad samaynaysaan,waa inaad ka xishootaan,macaasina ha gelina idinka oo ILAAHAY jidkiisa u socda,ha odhanina cadawgayagu way naga shar badan yihiin oo nalakuma sallidayo,waxaa laga yaabaa in qolo lagu sallido kuwo ka shar badan,sidii reer Banii Israa'iilba loogu salliday kolkii ay ILAAHAY kaga cadhaysiiyeen kuwii dabka caabudi jiray,markaasay dhulkoodii iyo guryohoodii siday doonaan u dhex mushaaxeen,waana ballan ILAAHAY qaaday oo fulaya..".

Tani waxay ahayd qayb ka mida waraaqdii Faaruuq,waa warqaddii ugu faseexsanayd hadal qof yidhaahdo,sidoo kale waxay ka mid ahayd waraaqaha ugu waaweyn ee dunida korkeeda soo maray..waxay ahayd warqad dheer.. haddii warqaddaas waxa ku qoran dadka lagu rabbayn lahaana waxay qayb wayn ka qaadan lahayd dhismaha umadda Islaamka oo dhan.

Qaybtaas aan sheegnay waxay inoo caddaynaysaa in ILAAHAY ku sallidayo gaalada iyo xumo wadayaasha Muslimiinta,hadday Muslimiintu ku kacaan arrimo ay ILAAHAY ku caasiyayaan,haddiise ay laasimaan cabsida ILAAHAY_oo ay raacaan manhajka Rabbi iyo manhajka Rasuulka (NNKHA) way ka guuleysanayaan ciidamada gardarrooleyaasha ah.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Kaga guuleysan maayaan tiro badni,saanad badni,awood jidheed,xeelad dagaal,iyo diyaar garoow wanaagsan midna,laakiin waxay kaga guuleysanayaan ku xidhnaantooda ILAAHAY,iyo ka fogaanshaha ILAAHAY ay cadawgoodu ka fogyihiin.

Halkaas ayeynu ka fahmaynaa waxa Tataarka loogu salliday Muslimiinta muddo afartan sano ah.

Halkaas ayeynu ka fahmaynaa waxaa ay Muslimiintu ugu jebiyeen Caynujaaluut,ciidankii tobanaanka sano dawikhiyey dunida Islaamka.

Mar kale halkaas ayeynu ka fahmaynaa dhacdooyin badan oo taariikhda ku sugan iyo dhacdooyin badan oo maanta taaganba.

Markaad ku aragtaan_walaalayaal_ daciifnimo,isdhul dhigis,fuleynimo iyo is dhiibid dhinaca ciidamada Muslimiinta.

Markaad ku aragtaan_ iyaga oo waqti taageersan reer galbeedka,reer barigana waqti kale raacsan.

Markaad aragtaan weedh itaal yar iyo ra'yi jilicsan,haybadoodii oo dhulka gashay,dullinimo xaalad kasta ay ku jiraan.

Markaad aragtaan madaxwaynahoodii oo dhiigga Muslimiinta daadinaya,la safanaya kuwii burburiyey dhulkii Muslimiinta,la saaxiibaya nin malaayiin Muslimiin ahi ku maqan yihiin,gargaar laga dalbayo nin dhaqaalihii Muslimiinta kharribay.

Markaad aragtaan ummad wayn oo badan taariikh ahaan iyo tiro ahaanba oo aan indhaha cadawgu waxba iskaga tirinaynin.. oo ay la waynaadaan dadyawga dunida ugu liita ee ay ka midka yihiin kuwa doofaarada iyo daayeerada yidhaahda waan kasoo jeednaa,kuwa Lo'da caabuda,kuwo basharka caabuda iyo kuwa diinlaawayaasha ahiba.

Markaad waxyaabahaas oo dhan aad aragtaan,waxaad ogaataan in ummadani ku kacday ILAAHAY macaasidiida,iyo in aanay raacaynin sharcigii ILAAHAY.. in ummaddan ay ka jeesteen indhihii ILAAHAY_ ILAAHAY laftiisuna ku salliday xumawadayaashii,Yuhuuddii,Kiristaankii,kuwii haystay diinta Hindooga,(Hinduism) iyo kuwa la midka ahba.

Taasi markaa miyey tahay wax lagu qaado quus iyo qanac?

Ha sheegin.. waxay u baahan tahay feker iyo lafagurid iyo in laga faa'iideysto taariikhda iyo camalladii.

Waxaa inna hortaalla Caynu Jaaluut warkeedii.. horta maxay baynu u akhrisanaynaa dhacdooyinkii taariikhda ee dhacay qarniyo iyo quruumo hortood?!!

In ILAAHAY loo noqdaa xaggiisa maaha wax adag!!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Si kasta oo ay ummaddu u dhumbato macaasida ILAAHAY,si kasta oo ay uga fogaato kitaabkii uga yimid xagga Rabbi,si kasta oo ay uga lunto wadadeedii,waxay ugu noqonayaan ILAAHAY sw_ hal tallaabo oo keliya.

Waase haddii aad rabtid inaad noqotid.

Waa haddii aad doonaysid inaad noolaatid.

Xataa waa haddii aad doonaysid inaad soo kabatid,dunida hogaamisid,madaxa kor u qaadid ama aad sharaf yeelatid.

Si kasta oo aan ILAAHAY_ uga fogaano walaal_ soo laabadkeena ILAAHAY wuu inaga aqbalayaa haddii aynu soo laabano.. xataa wuu inagu farxayaa_ subxaanah.

روى البخاري عن عبد الله بن مسعود ﷺ قال: قال رسول الله ﷺ: «لَلَّهُ أَفْرَحُ بِتَوْبَةِ عَبْدِهِ مِنْ رَجُلٍ نَزَلَ مَنْزِلاً وَبِهِ مَهْلَكَةٌ وَمَعَهُ رَاحِلَتُهُ عَلَيْهَا طَعَامُهُ وَشَرَابُهُ، فَوَضَعَ رَأْسَهُ فَنَامَ نَوْمَةً فَاسْتَيْقَظَ وَقَدْ ذَهَبَتْ رَاحِلَتُهُ حَتَّى إِذَا اشْتَدَّ عَلَيْهِ الْحَرُّ وَالْعَطَشُ أَوْ مَا شَاءَ اللَّهُ قَالَ: أَرْجِعُ إِلَى مَكَانِي فَرَجَعَ فَنَامَ نَوْمَةً ثُمَّ رَفَعَ رَأْسَهُ فَإِذَا رَاحِلَتُهُ عِنْدَهُ».

Bukhaari wuxuu kasoo werinayaa Cabdullaahi Bin Mascuud (RC) inuu yidhi: Rasuulka ILAHAY (NNKHA) wuxuu yidhi: "ILAAHAY wuu uga farxad badan yahay toobadkeena addoonkiisa nin kusoo beegmay meel lama degaan ah isla markaana wata gaadiidkiisi ay u saarnaayeen cuntada iyo cabbitaankiiba,ka dibna dheega yare dhigay oo gam'ay isla markaana toosay hashii saadku u saarnaa oo ka tagtay,doon doonay kolba dhinac u cararay,ilaa kulayl iyo harraad dartii ay naftu isugu timid ka dibna markii ILAAHAY doonay yidhi: meeshaydii baan iskaga noqonayaa,wuu iska noqday seexday,markii uu madaxa la kacayna arkay hashiisi oo dultaagan saadkiina u sidda".

Keliya waxaa waajib innagu ah in aan ILAAHAY u laabanno..waxaynu arki doonaa Caynu Jaaluut.. iyo Kumanaan Caynu Jaaluut.

Waa middaas oo keliya qeexidda keliya ee sharciga ah kuna salaysan jabka iyo guusha Islaamka.. waxaa guuleeya Muslimiinta xadhig xidhashada ILAAHAY,waxaana jebiya kala fogaanta sharciga ILAAHAY..ILAAHAYna dadka waxba kama dulmiyo,laakiin dadku iyaga ayaa naftooda dulmiya.

Xoreyntii ((Dimishiq))..

Waxaynu ku laabanaynaa Quddus_ رحمه الله _ka dib markii uu guul wayn ka soo hooyey dagaalkii Caynu jaaluut.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Boqorkii wanaagsanaa ujeedadiisi may dhamaanin.. waayo Tataar waxay joogaan dhulkii Muslimiinta oo ay ka mid tahay Dimishiq,Ximsa,Xalab,iyo kuwo kale oo la mid ah oo ka mida magaalooyinka Shaam..kama tegin Tataar,Ciraaq,Faaris,Turkiga,iyo kuwo kale oo badanba.

Inta ay joogaanna Quddus raaxo uma taallo.

Iyada oo aanay yarayn dadka kaga shahiiday,dhaawacmay,dagaalka..iyada oo dhibta soo gaadhay aanay yarayn ciidamadan geesiyaasha ah..waa raggii kasoo tallaabay saxaraha Siinaay bishii Luuliyo ee Qasa ka dagaal galay,ka dibna usoo dhaafay Falastiin ee dhameeyey gebi ahaanteedba koonfur ilaa waqooyi,ilaa ay soo gaadheen Caka,ka dibna dib ugu laabtay Caynu Jaaluut,ka dibna halkaas kula galay dagaalkii ugu adkaa ciidamadii adduunyada ugu xoogga waynaa.

Isaga oo ay haysato dhamaan mashaakilaadkaasi haddana tallaabadii labaad ee Quddus waxay ahayd in uu toos u abbaaro Dimishiq oo waqooyi kaga beegan..!!

Dimishiqna waxay noqonaysaa goobtii ugu horeysay ee ka midka ah dhulka ay Tataarku gacanta ku hayaan imminka,waxayna u jirtaa masaafo boqol iyo konton kiilomitir ah Caynu Jaaluut oo waqooyi bari kaga beegan.

Waxaa khasab ula muuqatay in magaaladan laga maydho uskaggii Tataar..waxaa kale oo khasab ula muuqatay in laga faa'iideysto jabkii ciidamada Tataar,lana xoreeyo Dimishiq iyo magaalooyinkii kaleba ka hor intaanay dib isu soo abaabulin isagana soo habar wacan Faaris,Yurub iyo Shiinahaba.

Quddus_ ILAAHAY haw naxariistee_ wuxuu goostay in uu uga faa'iideysto jabka ciidamada Tataarka xoreynta Dimishiq,isaga oo ogsoon in uu ciidamadii Tataarka dhamaantoodba ku dabar jaray Caynu Jaaluut,cidina warkaas ma gaadhsiinin Dimishiq,markaa wuxuu goostay in uu gaadhsiiyo warkaas guusha ee farxadda leh Dimishiq,si uu kor ugu qaado mooraalka dadka Muslimiinta,hoosna uu ugu dhigo mooraalka guutadii Tataarka ee joogay Dimishiq taasina ay u fududeyso furashada magaalada Muslimiinta ee wayn..

Dabcan wuxuu u diray waraaq sidda bushaarooyinkii guushii waynayd..warqaddani waxay la timid sidan soo socota:

"guushii laga markhaati kacay miyaa warkeedii,iyo sidii warmaha laysaga aslay,Tataarkii ILAAHAY waa uu hoojiyey(u fiirso guusha wuxuu u tiirinayaa ILAAHAY) ayaamahoodii way inna haysteen waxaanay soo dhunbadeen dhulkii Shaam dadkeediina waxay ka dhigeen Qariib.

Ciidamadan Muslimiintuse waa muwaadiniin,deggan dhulkoodii,haddii uu Mu'minka addin ruxmo waxaa u aasan addinkii kale ee Iimaanka ayaa u dhaaban, haddii xujo ay ku oogantayna waxaa jirtay waxaa ka dabo yimid aayado nasakhaya.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Wararkii Muslimiintuna waxay si isdaba joog ah u gaadhayaan gaaladii,wararkii gaaladuna si isdaba jooga ayey ugu soo dhagaha Muslimiinta,ilaa ay markii dambe isku dhex walaaqmeen,oo naxaasta haystay uu u maleeyey in uu dahabkii haysto,maantuna ay noqotay shalay oo kale,mugdigii habeenkana ay cadceeddu eryatay.

Ilaa arrintu ay gaadhay in si cad laysu arkay,dagaalkii dhimbilo tuuray labada dhinacba,waxaad arkaysaa uun garaacista seefta oo aad moodid sida hilaaca,waxaa kuu muuqanaya calooshii gaalada oo looga tegay sidii xeedho aan dabool lahayn (afqaynaysa) dhamaan waa la dilay mid kasta oo isla waynaa madaxana taagi jiray,sababtoo ah waa waxay geysanayeen (ILAAHAYna ma dulmiyo addoomada..”

Warqaddaas bushaarada sidda ayaa soo gaadhay reer Dimishiq,sida loo badinayona warqaddu waxay soo gaadhay 27ramadaan ama 28ramadaan,waxay warkan ku qaabileen Muslimiintii farxad aan la sifeyn Karin,waxaa ku quustay waxbadan jabka ku yimid Tataar,Muslimiintu markii ay maqleen guusha dagaalkii Muslimiintu kasoo hooyeen waxaa samada isku xidhay hammigoodii,waxay arkeen indhihii Tataar halkay kasii laad laadaan,shacabkii oo xamaasadeysanina waxay weerar xooggan ku qaadeen ciidamadii Magoolka ee Dimishiq degganaa,wayba qabqabsadeen askartii Tataarka oo xidhxidheen,ciidamadaasina sarajoogsina way awoodi waayeen cid u gargaartana ma helin.

Way dhacday haybaddii Tataar,Muslimiintuna way nefiseen,ka dib markii ay cidhiidhi iyo diiqad aan kala go’lahayn ku jireen lix bilood.

Guutadii Tataarka ee Dimishiq degganayd si deg deg ay ayey Muslimiintu usoo afjareenba,waxay ka dhigeen wax la dilay,wax la addoonsaday,wax fakaday oo cararay,ka dib waxay kusoo jeesteen Muslimiintu Kiristaankii si ay uga aargoostaan jeesjeeskoodii foosha xumaa ee ay kula kaceen Muslimiinta markii Tataarku Dimishiq qabsaday,waxaynu ka xusnay hore arrintaas dacal..waxayba gaadhsiiyeen arrintii qaar Muslimiinta ka mid ahi inay gubaan Kiniisadihii iyo daarahoodii,iyagii qaar ka mid ahna laayaan,waxayba u dhowaatay inay ka baxaan waddanka,dhalinyaro kale oo jibbeysanina waxay damceen inay Yuhuuddii Dimishiq degganaydna udbaha u saaraan, haddii aanay culimadu ku wacdiyin inay iska ilaaliyaan dulmiga,sababtoo ah Yuhuuddu kuma raacsanayn Nasaarada dhibka ay Muslimiinta u geysanayeen maalmihii Tataarka,waxaa Dimishiqba hadheeyey jawi salaq-weedhaan ah,waxayba ku sigatay in fitnadu dalka wada gaadho..waxay nafihii dadka reer Dimishiq ka hirqadeen dareen farxadi ka buuxdo,waxay hiraabteen aargoosi aan socdaal loo gelin.

Marka halkaas xaal marayo_ ayaa maalintii soddonka bisha ramadaan ee 658h, buuxsamay waxaa soo dhigtay oo Dimishiq soo gaadhay geesigii waynaa,boqorkii wanaagsanaa Quddus_ ILAAHAY haw naxariistee_ shan cisho ka dib dagaalkii Caynu Jaaluut.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxay dadku kusoo dhoweeyeen soo dhoweyntii lagu soo dhoweyn jiray Mujaahidiintii dhulka furan jirtay,quruxda ayaa la mari waayey suuqyada Dimishiq,waxaa soo baxay raggii,dumarkii,caruurtii magaalada si loo soo dhoweeyo boqorkan geesiga ah.

Waataas farxadda xaqiiqada ahi.

﴿قُلْ بِفَضْلِ اللهِ وَبِرَحْمَتِهِ فَبِذَلِكَ فَلْيَفْرَحُوا هُوَ خَيْرٌ مِّمَّا يَجْمَعُونَ﴾[يونس:٥٨].

waxaad dhehdaa,galladda ILAAHAY iyo naxariistiisa darteed haw farxaan,ILAAHAY ayaa uga wanaagsan waxay ururinayaan.

Waa farxad lagu farxayo u gargaarista diinta,Islaamka kor u qaadistiisa,iyo sharafta Muslimiinta.

Haku dhererin farxaddan,farxadda cuntada iyo cabbista,maalka xilka iyo saldannadda lagu farxo.

Ciidkii dhabta ahaa..

Waxaa soo galay ciidamadii Mamaaliikta ee Muslimka ahaa Dimishiq.. waxaa si degdega ah oo cajiiba cagaha u dhigtay amaankii waddanka.. kama dhicin wixii ka dhacay markay gumeystayaashu soo galeen,ee waddanka oo dhami foodo darteed oodaha goostay,ee qool iyo mareeg laysku guray,la hatigay dumarkii Muslimaatka ahaa iyaga oo arkaya,la boobayey guryahoodii iyaga oo markhaati ka ah.

Waxaas oo dhammi ma dhicin_ ee waxaa si deg dega u bilaabantay xasilooni,xataa waxaa loo nabadgeliyey Kiristaankii iyo Yuhuuddii naftoodii iyo maalkoodiiba,wuxuu bilaabay Quddus in uu ka qaado xilka Ibnu Saki oo Tataarku u magcaabay qaadiga magaalada,wuxuuna u shaqayn jiray iyaga,wuxuuna u magcaabay jagadaas Najmudiin Abaa Bakar Sadri,wuxuu bilaabay in uu dadkii kala saaro isaga oo u kala xukumaya,wuxuu xukumay waxyaabaha ay isku hayaan Muslimiinta iyo Kiristaanku.. si aan loogu dulmiyin na Kiristaan ah dhulka Muslimiinta.. iyaga oo og waxay Kiristaanku dhibaato u geysteen Muslimiinta waqtigii Tataarka.

Maalintii labaad ee soo gelitaanka Quddus ee Dimishiq waxay ahayd ciidkii Fidriga,wuxuu ahaa ciidkii ugu waynaa Muslimiinta ee soo mara muddo laga joogo afartan sano imminka,may ahayn ciidkii fidriga oo keliya,ee waxay ciid u ahayd guul iyo gargaar ILAAHAY…

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

﴿وَجَعَلَ كَلِمَةَ الَّذِينَ كَفَرُوا السُّفْلَى وَكَلِمَـةُ اللهِ هِيَ الْعُلْيَا وَاللهُ عَزِيزٌ حَكِيمٌ﴾[التوبة:٤٠].

ILAAHAY ayaa hoosta mariyey kelmeddii gaalada,kelmeddii ILAAHAYna kor u qaaday,sababta oo ah ILAAHAY waa mid awoodna leh xikmadna badan.

Waqti iskama luminin Quddus ee wuxuu ka daba diray ciidankiisi hordhaca ahaa ee uu hogaamiyaha u ahaa Baybaras kuwii cararay ee ka midka ahaa Tataarka,si looga nadiifiyo magaalooyinka kale ee Shaam Tataar,waxay gaadheen ciidamadii Muslimiintu Ximsa,waxay soo beegeen saldhigyadii Tataarka iyagu baqe dartii ayey yaaceen,waxay soo furteen Muslimiintii qafaalasho ahaan ay hore u qabsadeen Tataarku,ka dibna waxay ka daba baxeen kooxihii sii yaacayey ee Tataarka,intoodii badnaydna way laayeen wixii hadhayna way soo qafaasheen,cidi kama baxsan xabbad xabbad firdhad ku baxsatay maahaane.

Sidaas ayaa deg deg loogu xoreeyey Ximsa,ka dib xoogagii Muslimiintu waxay u jeesteen dhinaca magaalada Xalab,waxay uga yaaceen Tataarkii iyaga oo aad moodidjiir qaxaya,lagama hadhin ee cagta ayaa cagta loo saaray,waxaa xumaan ka hufan ALLAHA xaaladaha kala beddela.

Ilbidhiqsi wax ka yar ayuu xaalad ka beddelayaa sideedii oo xaalad kale u beddelayaa!!

Waxay Muslimiintii nadiifiyeen wax ka yar dhawr toddobaad Shaam gebi ahaanteedba,waxay dib ugu laabatay Shaamna xukunkii Muslimiinta..ILAAHAY waxaynu waydiisanaynaa in uu dunida Islaamka oo dhan xornimo ku waariyo iyo sharaf.

Wuxuu ku dhawaaqay Quddus in labadii dawladood ee Masar iyo Shaam midnimadoodii mar labaad oo labadooduba xukunkiisa soo hoos galaan,ka dib markii ay kala maqnaayeen toban sano,waqtigaasina waa markii xukunka labadoodaba uu haystay Najmudiin Saalax Ayuub,sannadkii 648h.

Wuxuu badiyey Quddus xilalkii uu u dhiibayey madaxdii Muslimiinta,waxaana ka mid ahaa waxyaabihii tusinayey xeeldheeridiisa,in uu xilalkii kusoo celiyey madaxdii Ayuubiyiinta,isaga oo uga jeeday in aanay ka dhicin foodo iyo fitno waddanka Shaam,waayo shaki kuma jiro in qoladaasi ay leeyihiin taageerayaal ka mida ciidamada Muslimiinta,markaa isaga oo aanu ka cabsaynin Quddus khiyaamadooda,oo weliba ay usii caddaatay in aanay wax tamar ahba lahayn oo ay iskaga celiyaan ciidamadiisa.

Wuxuu u dhiibay Quddus maamulkii Ximsa Ashraf Al Ayuubi_ waa daba-dhilifkii Tataarka_ laakiin ka murugooday arrintaas oo ka toobad keenay,waa ninkii Quddus

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ugu soo dhiibay wararkii muhiimka ahaa intii aanay dhicin goobtii Caynu Jaaluut Saarimu-diin Aybak,haddii uu yahay nin heshiis dhab ah la leh Tataarka arrintaas ma uu sameeyeen,laakiin wax markii hore niyaddiisa ku jiray iyo waxa imminka ku jiraba waxaa og ILAAHAY oo kala xisaabtami doona,laakiin muhiimaddu waxaa weeye imminka wuxuu garwaaqsaday khaladkiisi hore iyo inuu wakiil u noqday Tataarka,waanu ka aqbalay xukunka Ximsa ee hoos imaanaya Quddus,waxaa kale oo u dhiibay magaalada Xalab Calaa'udiin bin Bedrudiin LuLu,oo haysan jiray imminka ka hor Mawsil,ninkani wuxuu geeriyooday bilo yar ka dib,maamulkii magaalada Xamaana wuxuu u daayey ninkii hore u haysan jiray Almansuur,waa ninkii ciidamadiisa kusoo xoojiyey ciidamada Muslimiinta kana qayb galay dagaalkii Caynu Jaaluut,wuxuu u magcaabay Amiir cusub xeebta Falastiin iyo Qasa amiirkaasina wuxuu noqday Jamaalu-diin Aaqoosh Shamsi,waxaa timid Dimishiq waxaa madax looga dhigay Cilmudiin Sinjer Al Xalabi.

Sidaas ayey ku cago dhigatay si buuxda xaaladii Shaam iyo Falastiin,ku xoogaysatay awooddii Muslimiintu,waxaa la waayey dhamaan hanjebaadihii iyo cago-jugleyntii kaga imaan jirtay Muslimiinta dhinaca Kiristaanka iyo Yuhuudda amni buuxana loo helay.

Maalintii lix iyo labaatanaad ee bisha Shawaal 658h,bil buuro ah ka dib Caynu Jaaluut ayuu bilaabay ILAAHAY haw naxariistee Quddus dib safarkiisi uu dib ugu noqon lahaa Qaahira.. waxyaabo badan oo arrimo siyaasadeed ah ayaa u baahnaa in dib u habayn lagu sameeyo,waxyaabo kale oo badanina waxay u baahnaayeen maamulid.. waxay gaadhay dawladdii Quddus ILAAHAY haw naxariistee laga soo bilaabo webiga Furaat ilaa xuduudda Liibiya markaa lagama maarmaan waxaa noqonaysa in qorshe cusub la dejiyo..waxa kale oo aynaan marnaba ilaawi Karin ilaa imminka in aanu xukunka haysan Quddus wax aan ka badnayn kow iyo toban bilood,waayo wuxuu xukunka la wareegay afar iyo labaatankii Dilqicda sannadkii 657h,markaa waxaa khasab ah inay sugayaan kumanaan hawlood.

Sidaas ayaa guul cad loogu soo geba gebeeyey Tataarkii,Muslimiintana ay uga kacday dhedadii dusha laga saaray ee naanaabisay dhamaan sannadihii afartaneeyada ku dhawaa ee tegay.

Raadkii ((Caynu Jaaluut)).

Subxaanallaah.. dagaalkan Caynu Jaaluut wuxuu ahaa hal dagaal isla markaana ku geba geboobay hal maalin,laakiin raadadkeeda ayaa waxay lahaayeen awoodo aan la malaysan Karin,waxay u badnaayeen si aan la koobi Karin..raadadkii Caynu Jaaluut waxay lahaayeen muhiimaddooda qaaliga ah,laakiin ma awoodna in aan halkan kusoo wada bandhigno,waxaynuse kasoo goosanaynaa qaybo ka mida.. qolyaha cilmi baadhista sameeyaa waa inay lafa-guraan oo dersaan tafaasiishooda oo dheeraadana raadiyaan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Raadka koowaad: waxay Muslimiintu u noqdeen ILAAHAY markii lagu gudo jiray u diyaar garowga dagaalkan iyo markii lagu dhexjiray dagaalka laftiisaba,dagaalka ka dib iyo waqti dheerba..waxa si cad ugu muuqatay dadka abaal marinta,markii ay Muslimiintu ka fogaadeen rabbigooda,ayaa waxaa dushooda hoy ka yeeshay oo qabsaday Tataar,markii ay xagga ILAAHAY u laabmeena guushii ayaa laga siiyey,arrintan dad badan oo ka mid ah falanqeeyayaashu waxay ku tilmaamaan inay tahay mucjiso..arrinkiina wuxuu u dhacay sidii uu u dhici jiray,waayo dadka Muslimiinta ah waxay weligeedba guushu u jiri jirtay inta ay ILAAHAY u jiraan Muslimiintu,haddii ay ILAAHAY u laabmaan waa khasab inay cadawgooda ka gaadhaan guul dhamaystiran. Waxaa Muslimiinta mar kale u caddaaday in ay diintu u baahan tahay in loo dagaalamo si sharafteedu u dhawrsanaato(halkan waxaan uga jeedaa dagaalka diintu waa mid aan gar-darro ahayn ee lagu soo xad-gudbo),Kiristaan badan ayaa la gaashaan buuraystay Tataarka,iyada oo danaha ugu jiraa ay ka fogaayeen intay doonaan danaha Muslimiinta ugu jira,maaha dhinaca Tataarka,waayo Tataarku axdi ma laha,halka ay Muslimiintu ixtiraamaan heshiisyada,halka ay Muslimiintuna aad u ixtiraamaan heshiisyada,taasi waa asalka diintooda,waa sidoo kale noloshooda dhabta ah Kiristaanka ee aad ku arki kartid dhacdooyinka taariikhda oo dhan, sidoo kale ka bixitaanka Muslimiinta ee ballamaha iyo heshiisyadu aad ayey u yar yihiin,wuxuuna dhinacooda ka leeyahay shuruudo ad adag.. sidaa darteed waxaa iska degay Muslimiinta nafahooda,ka dib guushii Caynu Jaaluut,ee ka dhex qaraxday Muslimiinta iyo Tataarka,Nasaaradana dani uguma jirin oo qudha dagaalada,sida ay reer galbeedka iyo cilmaaniyiintu sawiraan,ama sida ay jecel yihiin inay iska dhigaan mishiinka dagaalkani ku soconayey ee ugu muhiimsanaa.. ama inay ka dhigaan ujeeddooyinka milateri iyo istiraatijiyadeed, ujeedada ugu wayn ee laga lahaa dagaalka.. inaga oo ku aragnay buuggan iyo kuwo kale oo badanba in ay diintu raad badan ku lahayd dhaq dhaqaaqa Kiristaanka, Kiristaanka laftiisuna raad badan ku lahaa dhaqaajinta Muslimiinta,ILAAHAYna arrintaas waxa uu inoogu caddeeyey kitaabkiisa markii uu yidhi:

وَلَن تَرْضَىٰ عَنكَ ٱلْيَهُودُ وَلَا ٱلنَّصَٰرَىٰ حَتَّىٰ تَتَّبِعَ مِلَّتَهُمْ kaama raalli noqonayaan Yuhuud iyo Nasaaro illaa aad diimahooda raacdid.

وَلَا يَزَالُونَ
يُقَٰتِلُونَكُمْ حَتَّىٰ يَرُدُّوكُمْ عَن دِينِكُمْ إِنِ ٱسْتَطَٰعُوا۟ kama suulayaan dagaalkiina illaa ay idinku celiyaan diintooda haddii ay awoodaan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa iska cad in aan dagaalku istaagayn (joogsanayn) ilaa ay Muslimiintu diintooda ka tagaan, intaas ka horse dagaalku istaagi maayo, kumana filna Nasaarada,Yuhuudda,Tataarka,Hindida,dhulka daaraha beeraha,shidaalka iyo dhamaan hantida Muslimiinta inay haystaan iyo dadkaba..dhamaan waxaas oo dhami kuma filna..laakiin waxaas oo dhami waa magac u yaallo marka loo eego dhinaca Islaamka ama waxaad tidhaahdaa (Ujeedada Islaamka),waxa aynu aragnaa daba galkooda ururada Islaamiga ah,khudbadaha diiniga ah oo ay si dhow ula socdaan,waxaynu aragnaa isku daygooda inay beddelaan manaahiijta waxbarashada Islaamiga ah,waxaynu aragnaa dagaalkooda ay warbaahinta kaga jiraan eeka dhanka ah Islaamka..waxaas oo dhami waxay tusinayaan nacaybka ay u qabaan Islaamka joogitaankiisa iyo siday u jecelyihiin inay meesha ka saaraan Diinta laakiin maaha inay neceb yihiin awooddiisa ama xuduuddiisa ee waa joogitaanka diinta waxa karaahiyada ku ahi.

Macnaha dagaalka asalkiisu waa dagaal (diineed) aas aas ahaan,ma doonayaan inay oggolaadaan inay dunida korkiisa ka muuqato diinta Islaamku..sidaa darteed ayuu weligeed dagaalku u soconayaa..waayo diinta Islaamku dhamaan mayso idanka ALLE.. markaa ma wanaagsana in nabaddu ahaato Istiraatijiyad doorasho ah si kasta oo ay isu beddesho duruuftu.. mar haddii aanay aqbalaynin hadaad wax kasta ka tanaasusho si aad ugu beddelato nabad.. ilaa aad ka tanaasusho ((Diinta)).

Muslimiintu arrintaas ayey si fiican u fahmeen ka dib dagaalkii ((Caynu Jaaluut)) waxay fahmeen in loollanka diineed yahay ka mudnaanta koowaad iska leh,markaa haddii aad doonaysid inaad ku guuleysato loollankaas waa inaad noqotaa nin diineed..macnaha waa inaad noqotaa nin si fiican girgirka u haysta diintiisan sharafta badan.

Taasi waxay ahayd raadkii koowaad ee uu ka tegay dagaalkii Caynu Jaaluut.

Raadka labaad: waxay dagaalkan ku gawraceen Muslimiintu jabkii dhinaca nafta ahaa ee ay la dac-darraysnaayeen mudada badan.. waa jabkii aynu kaga soo sheekaynay buuggan horaantiisi.


Waxay ka baxeen Muslimiintu quus aad u daran oo ay ku jireen,quustaas oo dhaxal siisay inay goob walba iyagu qoorta dhiibtaan_imminkase waxay xaqiiqsadeen in aan marna laga quusan rajada ILAAHAY oo aanay ahayn mid go'aysa,sidoo kale si kasta oo ay u korto awoodda gaaladu waxaa khasab ah inay meesha ka bixi doonto awooddaasi.

لَا يَغُرَّنَّكَ تَقَلُّبُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ فِى ٱلْبِلَٰدِ ﴿١٩٦﴾ مَتَٰعٌ قَلِيلٌ
ثُمَّ مَأْوَىٰهُمْ جَهَنَّمُ ۚ وَبِئْسَ ٱلْمِهَادُ ﴿١٩٧﴾

yaanay ku dagin baal rogaaleynta gaaladu ay dunida ku haystaan, wax yar ayey ku raaxaysanayaan,ka dibna hoygoodu waa jahannama meel loo dheelmadona waxaa ugu xun jahannama.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaa si cad ugu muuqday Muslimiinta dagaalkan Caynu Jaaluut ka dib in ILAAHAY uu wax kasta awoodo, iyo in aanay jirin cirka iyo dhulkaba wax culays ku ahi ILAAHAY,haddiba dagaalkan ka hor ay aqoon ahaan uun u haysteen,waxaa dagaalkani la yimid inay si I tus oo I taabsii ah ugu qaataan casharro (practical implementation) oo aan cidna shaki kaga jirin.



haddii ILAAHAY dhibaato kugu dul furo ma jirto cid kaa dulqaadaysaa (faydaysaa) oo aan isaga ahayni,haddii uu khayr kula doonana,ma jirto cid is hor taagi kartaa galladdiisa,wuxuu haleel siiyaa khayrkaas cidda uu isagu doono eek a mida addoomihiisa,waayo isaga uun baa ah dembi dhaafe naxariis badan.

Raadka Saddexaad:waxaa soo laabatay haybaddii Muslimiinta ka dib markii ay maqnayd muddo lixdan sano ah,ka dib markii ay umadda Islaamku gaadhay dabayaaqadii qarnigii lixaad ee hijriyada meel aad u wayn oo dhinaca guulaha dagaallada ah,dhinaca hoggaamita iyo hormuudka dunida ah,oo ay ugu wacnaayeen guushii Xiddiin bariga (Falastiin) iyo Arak galbeedka (Andalus) labadaas oo guulood oo aad u waaweynaa ka dib waxaa ku dhacay kala jajabid aad u daran umadda Muslimiinta, waxaa luntay haybadeedii,ilaa ay gaadhay in ay Eydu fadhato u kala beritamaan jidhkeedii, kuna soo qamaamaan wuxuushtu dhulkoodii.

Laakiin Caynu Jaaluut waxay gelisay waynaan iyo haybad ummaddii Islaamka,ilaa heer Holaako oo ku sugan Tabriis ee dalka Faaris oo weliba ay weheliyaan ciidamo aad u tiro badan oo Tataariyiin ah uu ku fekeri kari waayo in uu mar labaad qabsado dhulka Shaam,wuxuu ku dhici waayey in uu hal guuto oo aargoosi ah u soo diro Xalab, isla markaana ay dhamaan waxa deggan dhegta dhiiga u daraan,waayo waxaa qalbigiisa ku dhacday haybaddii Muslimiinta,markaas ayuu talo ku gaadhay in aanu ciidankiisa mar labaad halaag u horseedin.

Haybadda Islaamkuna soo laaban mayso ilaa ay dhacaan maalmo la mida kuwii Caynu Jaaluut oo kale.

((ILAAHAY wuxuu tirtirayaa haybadda;inta aanu Quraanka tirtirin ka hor)).

Raadka Afraad: waxaa ka dhamaatay quwaddii milateri ee Tataarka Shaam,Turkiga, iyo Falastiin.. lagama maqlin magaca Tataar dhulka tobanaan sano dagaalkan ka dib,waxaa si wanaagsan u qarsoomay amarku-taagleyntii iyo dulmigii,dig digtii iyo arga-gax gelintii iyo dig digtii ayaa la waayey,waxay dadku amaan u heleen nafahoodii maalkoodii dhulkoodii iyo sharaftoodii..hal

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

qof laguma arga gax gelin dhulkaas ka dib Caynu Jaaluut muddo gaadhaysa boqol iyo afartan sano,ka dib markii uu soo galay dhiigya-cabkii Tataarka ahaa ee Taymoor dhulka Shaam,wuxuu qabsaday Xalab iyo Dimishiq sannadkii 804h,ka dib markii uu soo qabsaday bariga caalamka Islaamka oo dhan.

Ka warranka Taymoorlink waxaynu soo ban dhigi doonaa _haddii ILAAHAY idmo_ markaynu ka warramayno dawladdii Mamaaliikta,ka dibna ku xejin doonaa warka dawladdii Cusmaaniyiinta.. laakiin waxa uu qodobkani muhiim inoogu yahay in dagaalkii Caynu Jaaluut laga dhaxlay amaan xaqiiqo ah boqol iyo lix iyo afartan sano oo buuro ah.

Raadka Shanaad: dagaalka Caynu Jaaluut wuxuu u ahaa warqad dhalasho oo xaqiiq ah dawladdii Mamaaliikta ee waynayd, ee sidday calankii ummadda Muslimiinta ku dhowaad saddex qarni (laba boqol iyo toddobaatan sano).. haa waxay ahayd bilowgii dhalashadii dawladdii Mamaaliiktu 643h,markay qabsatay Shajratu Durr ee ay ku wareejisay odeygeedii Al Cissu-diin Aybak ee kana midka ahaa Mamluukta, laakiin ((Caynu Jaaluut waxay ahayd middii sharci ahaan u xaqiijisay dawladnimadooda,dhamaan shucuubtii Muslimiinta hortooda..waxay soo hooyeen Mamaaliiktu laba guulood oo aad u waaweyn muddo toban sano ah.. tan hore waxay ahayd dagaalkii Almansuurah iyo Fariskor ee ay ku jebiyeen ciidamadii Faransiiska oo ay xataa madaxwaynihii gacanta kusoo dhigeen,tan labaadna waxay ahayd Caynu Jaaluut, in kasta oo hogaamiyeyaasha ugu badan ee ciidamada hogaaminayey Almansuurah ay ahaayeen Mamaaliikta,ka dibna Faariskoor waxay u badnaayeen Ayuubiyiinta,haddana ciidamada lagu tiirsanaa waxay ahaayeen Mamaaliikta,Caynu Jaaluutse guusha waxaa iska lahaa Mamaaliikta oo khaas ah, cid kasta markaa waxaa u muuqatay inay nimankaasi oo keliya ay leeyihiin awooddii dadka lagu hogaamin lahaa.

Sidaas ayey ku barbaartay dawladdii Mamluukiyah ee raqabadda sudhatay u babac dhigidda duullaamadii cadawga ILAAHAY ha ahaadaan Tataar ama Kiristaane,waxay ahayd dawlad u taagan Jihaad waqtigeedii ugu badnaa.

Intaas waxa u dheeraa inay dawladdani isku dayday inay sii ballaadhsato sharcigeeda dawladnimo si ka wayn sidan ay tahay,markaas ayey soo ururiyeen khulafadii Bani Cabbaas oo geysteen Qaahira,laga bilaabo 659h, ka dib dagaalkii Caynu Jaaluut,waqtigii Baybaras,haddana dawladda Mamaaliiktu may ahayn mid u meteli karta Khilaafo dhab ah Muslimiinta,sababtoo ah may xukumaynin dunida Muslimka oo dhan,waxayse haysatay qaybo tirsan oo ka mida caalamka Islaamka,xukunkeedu wuxuu gaadhayey Masar, Shaam,Xijaas(Sucuudi Careebiya),Yemen,qaybo ka mida Ciraaq iyo qaybo ka mida Liibiya,inta kale ee soo hadhay miyaa waxay ku kala filiqsanaayeen kooxo kala du duwan, may helin Muslimiintu khilaafo xaqiiq ah oo mideysa ka hor khilaafadii Cusmaaniyiinta ee waynayd,khilaafadaas oo awoodday inay isku soo celiso ummaddii Islaamka oo sannado kala tagsanayd.

Laakiin guud ahaan.. waxay ahayd dawladdii Mamaaliiktu,dawladdii ugu xoogga badnayd waqtigii ay jirtay,uguna nidaam sarraysay,ugu haybad waynayd,sidaa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

darteed ayey qaar badan oo ka mid ah taariikh-yahannadu ugu yeedhaan waqtigii ay talinaysay dawladda Mamaaliiktu ((casrigii Mamluukta)) iyaga oo iska indho tiraya dawlado yar yar oo badan oo jiray cahdigii Mamaaliikta.

Raadka Lixaad: waxa soo laabatay midoobid xooggan oo dhex marta Masar iyo Shaam, heshiis istiraatijiyadeed oo xoojinaya inay iska dhiciyaan weerarada Ajanebiga.. Masar iyo Shaam iyo waxa hoos yimaadda ee Falastiin ka midka tahay_ waxay metelayaan wadnihii Caalamka Islaamka,Istiraatiji ahaan,siyaasad ahaan,juquraafi ahaan,akaademiyad ahaan iyo taariikh ahaanba..midoobista Masar iyo Shaam wuxuu metelayaa in gobol kasti amaan helayo,xataa wuxuu wax badan ka hoos u dhigayaa damacii dad badani ka lahaayeen dunida Islaamka,gaar ahaan in badan oo ka mid ah cadawga Islaamku waxay diiradda saari jireen kuna fekeri jireen wadamada Masar iyo Shaam sababo diineed,dhaqaale,iyo milateriba dartood..sidaas ayey u caddaatay in aanay badbaadin karaynin haddii aanay midoobin iyaga iyo mid walba waxa hoos yimaadda ee ay ka midka tahay Suuriya,Urdun,Falastiin, Lubnaa.. iyo Masar.. sidaas ayey samaysay kuna barbaartay dawladdii Mamaaliiktu.

Raadka Toddobaad:waxaa saaxaddii Islaamka ka qarsoomay oo laga waayey madaxdii Ayuubiyiinta oo waqtigaas ahaa laf dhuun gashay,waqtigan waxaa noolaan kara uunruug-caddaayo.. waxaa ay dayaceen madaxdani amaano uu kaga tegay awoowgood Salaaxu-diin Ayuubi _ILAAHAY haw naxariistee_ hammigooduba wax kale ma ahayn aan ahayn xukun doon,xoolo ururs,inay xukunka dhaxal uga dhigaan ubadkooda.. waxay ku qaateen noloshoodii mu'aamaraad iyo dhagaro,dhamaan waxay sharaf iyo karaamo lahaayeena waxay ku lumiyeen loollankaas,ilaa ay dhexdooda ku fidday inay isu soo bahaystaan gaalo,una kaalmaystaan la dagaalanka walaalohooda Muslimiinta ah,mararka qaarkood walaalohooda dhibta badan..!! waxay noqdeen waxma tarayaashaasi inay dhadhansiiyaan shacabkoodii xanuun badan,dulmi,cidhiidhi,khiyaamo, waxay keliya oo kaga ururtay inay kasoo horjeestaan mashruuc kasta oo ku saabsan in lagu midoobo calan keliyana la hoos tago,waayo waxay diiddan yihiin cidda keliya ee kursiga la wada samaystay fuuli doonta haddii ay dhacdo midnimo,waxay kale oo caadeysteen inay la dagaalamaan xukuumadda Mamaaliikta ee Masar ka talisa,waxay la dagaalankeeda u kaalmeysanayeen Kiristaan ilaa ay dhacday Caynu Jaaluut..waxaa ka mid ahaa raadadkeeda ugu waaweynaa inay u quus goyso dhamaan afkaartaas liidata,mid kasta oo ka mid ahina wuxuu gartay tamartiisa,wuxuuna raalli ku noqday in uu xidho kabo isaga laale'eg.. sidaa darteed ayey goobtii Caynu Jaaluut kaga filaatay dadka sharkii wiilashooda,waxay kale oo kaga filaatay sharkii cadawga Muslimiinta.

Raadka Siddeedaad:midhihii kasoo baxay midowga Masar iyo Shaam,natiijada kasoo baxday madaxdii waxma-tareyaasha ahaa oo laga waayey saaxadda,natiijada kasoo baxday kacaamista dawladdii Mamaaliikta,natiijada kasoo baxday dawladdan dabeecadeedii ahayd jihaadka.. natiijooyinkaas oo is biirsaday waxaa ka dhex dhashay arrin aad u qiimo badan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxay go'aansadeen Mamaaliiktii oo muhiimadda koowaad saareen inay ka xoreeyaan Shaam iyo Falastiin dhamaan dawladaha yar yar ee Kiristaanka ah, ee dhulkan degganaa ilaa 491h,macnaha waa muddo gaadhaysa boqol iyo lixdan sano ka hor Caynu Jaaluut.. iyada oo dhulkan Cumaadu-diin Sinki,Nuura-diin Maxamuud iyo Salaaxudiin Al Ayuubi_ILAAHAY haw naxariisto dhamaantoode_ ay dedaal aad u badan geliyeen inay xoreeyaan dhulkan laakiin ay ku guuleysan waayeen inay xoreeyaan in badan oo ka mid ah dhulkan,caruurtoodiina iska daa inay xoreeyaan ee dhulkii waalidiintoodii hore xoreeyeen ayey dib usoo dejiyeen gaaladii laga xoreeyey,sidaa darteed ka dib ((Caynu Jaaluut)), ka dib markii ay xasishay dawladnimadii Mamaaliikta,waxay bilaabeen inay ciidamadooda ku jaheeyaan xoreynta dhulalkii Muslimka laga haystay mid markay xoreeyaanba tan ku xigta ayey u gudbayeen, waa Falastiin,Suuriya,Lubnaan,Urdun,Turkiga..waxaynu ILAAHAY u waydiinaynaa xornimo abid ah inuu siiyo dhulalkaas.

Wuxuu bilaabay Daahir Baybaras weeraradiisi ku salaysnaa xoreynta dhulka Muslimiinta laga bilaabo 659h,bilo yar ka dib dagaalkii Caynu Jaaluut,Jihaad joogto ah ka dib waxay bilaabeen dawladihii yar yaraa inay kusoo hoobtaan gacantii Muslimiinta ee mujaahidiinta ahayd,waxay xoreeyeen Muslimiintu sannadkii 664h, Qisaariya,Xiifa,dhufeyskii waynaa ee Arsuuf kuna yaallay koonfurta Qisaariya,magaalooyinkani waa Falastiin,ka dib sannadkii 665h,waxa la xoreeyey Safad oo ku taalla waqooyi bari Falastiin,waqtiga uu Baybaras ku foognaa xoreynta dhulkan Falastiin,waxaa kale oo jiray mujaahid Sayfu-diin Qalaawuun oo xoreeyey Qaliiqiyah oo ku taalla Turkiga,halkaas oo uu kaga guuleystay ciidamadii Armiiniya oo uu hogaaminayey boqor Haysuum,waxay ka furteen xoolo aan tiradooda la koobi Karin, waxay kale oo kasoo qafaasheen Nasaaradii Armiiniya dad tiradoodu gaadhayso afartan kun oo ruux, sannadkii 666h,wuxuu xoreeyey Daahir Baybaras Yaafaa,sannadkii 667h,waxaa la xoreeyey Andaakiya,waa magaaladii uu haystay boqorkii Bohmaan ee ku jiray gaashaan buurtii Tataar,waxay kale oo tahay imaaraddii ugu horeysay ee qabsatay dhulka Muslimiinta sannadkii 491h,waxay kale oo noqotay imaaraddii qaniimada ugu badan laga soo helay,sidaa darteed markii la qaybsanayey xoolaha laga helay imaaraddan oo dahab iyo maar ahaa looma tirinaynin raggii furtay ee waa laysaga xaab xaabinayey..!!

Geeridii Baybaras ka dib may jirin magaalo la haystaa marka laga reebo Caka,waxayna ahayd imaaraddii ugu awoodda badnayd ee haystay dhulka Muslimiinta,waxaa iyana la dhinac ahaa Suur, Siidaa, Daraabulis,Bayruut, oo dhamaantood ku yaalla Lubnaan,dhinaca Suuriyana waxaa kaga hadhsanaa Darsuus iyo Laadiqiya.

Waxaa la xoreeyey Daraabulis 684h Caynu Jaaluut ka dib lix iyo toban sano,waxaana xoreeyey Suldaankii Mamluugga ahaa ee Almansuur Qalaawuun,ka dib waxaa xukunkii qabsaday wiil uu dhalay Almansuur oo la odhan jiray Khaliil bin Qalaawuun oo mabda'ii xoreynta halkaas kasii qaaday 690h wuxuu furtay dhufeyskii aadka u adkaa ee Caka oo ku dhowaad laba qarni ay haysteen Nasaaradu,ka dib markii ay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

dhamaan labadaas qarni ku fashilmeen furashadeeda madaxdii Muslimiinta ee ka horeeyey isaga,furashada Caka waxay Nasaaradii ku noqotay shinni boqorkii laga qabtay waxaa kale oo waxyar Caka dabadeed la furtay Suur,Siidaa,Bayruut,Jabiil,Darduus,Laadiqiya,sidaas ayey kaga safoobeen Kiristaankii Shaam gebi ahaanteed,dhamaan waxaa laga takhalusay Nasaaradii laba iyo soddon sano ka dib Caynu Jaaluut oo keliya, waxaasina waxay ka dhasheen faa'iidadii dagaalka Caynu Jaaluut.

Dabcan waxaa muhiimadeeda lahayd inaynu ka warrano sida ay u dhaceen furashooyinkani laakiin waxaynu insha ALAAHU kaga warrami doona markaynu ka sheekaynayno dagaaladii Nasaarad buugga la yidhaahdo oo dhowaan soo bixi doona.

Raadka Sagaalaad: waxa qiimaheeda iyo magaceedu cirka isku shareeray magaaladii Qaahira ee Masaarida,ka dib markii ay dawladdii Mamaaliiktu guushaas wayn kasoo hooyeen dagaalkii Caynu Jaaluut,gaar ahaan nimankii gacantooda ku burburiyey Baqdaad ee Tataar sannadkii 656h, ka dib markii la burburiyey Qurduba sannadkii 636h, ee ay u gacan gashay Nasaaradii Isbayn (Spain).

Waxay noqotay Qaahira qiblada Culimada,abwaanada,waxaa ka bilaabmay dhaq dhaqaaqyo cilmi ah,doorkii Ashar ay lahayd ayaa kor u kacay,waxay noqotay_welina ka mid tahay_ jaamacadaha Muslimiinta kuwa ugu waaweyn, waxaa tuurta lagu qaatay masuuliyadda ah difaacista diinta,dacwaddii ayaa la fidiyey,waxaa si cad ugu dhaqmay xaqa madaxdii, dadkii ayaa xuquuqdoodii lala raadiyey,waxaa bilaabmay ururo Jihaadka u dooda,lana dagaallama cadawga umadda.

Sidaas ayaa jiilba jiil uga dhaxlay magaaladan qottada dheer ((AL QAAHIRA)) inay dadka ka wacdiyaan oo xagga ILAAHAY ugu yeedhaan,qiimeynta iyo Jacaylka Islaamnimada,dhamaan waxay Muslimiintu xambaarteen hammiga diinta Islaamka maaha Masar oo keliya laakiin dunida oo dhan.

Raadka tobnaad: waa raadka ugu yaabka badan,waana raadka ugu wayn!!

Waxay arkeen Tataarku diinta Islaamka dhowaanshaheeda,waxay akhriyeen asalkeeda,qawaaciideeda iyo qawaaniinteeda,waxay ogaadeen edaabteeda iyo asluubteeda wacan,waxay arkeen akhlaaqdeeda iyo mabaadideeda..markay ayey si yaab leh u qancisay,khaas ahaanna iyagu _sida dadka caamada ah oo kale_ ayey dhibaato ka haysatay diin la,aantooda,may haysanin wax u sharciyeynaya inay usoo dhowaadaan oo fiirfiiriyaan diinta Islaamka, markaa dabcan kuwoodii raac raacay ee fiir fiiriyey diinta Islaamkuna wuu ku xidhmayey diinta.. haddii baadhitaankiisu run ka yahay, isla markaana xaqiiqo raadis uu yahay.

Waxay bilaabeen qaar ka mid ah Tataarku inay rumeeyaan diinta Islaamka,ka dibna waxa uu doonay ILAAHAY inuu Islaamnimada geliyo qalbiga mid ka mida madaxdii kasoo jeedday qabiilka Dahabi.. waa mid ka mida laamihii waaweynaa ee qabaa'ilka Tataar_, waxaa weeye ninkaas madaxda ahaa wiil uu adeer u ahaa Holaako waayo waxaa dhalay Holaako walaalkiis ((Baato)) hogaamiyihii caanka ahaa,ninkan waxaa

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

lagu naaneysi jiray ((Barka)) wuxuu Islaamay sannadkii 650h, ka dib waxaa lagala wareegay ((Barka)) madaxnimadii sannadkii 652h, magiciisiina wuxuu noqday ((Barka Khaan)) qabiilka uu ninkani kasoo jeedo waxay ku lahaayeen dawladdii Tataarka miisaan aan la yaraysan Karin,waxayna xukumi jireen qobolka ku yaallay waqooyiga badda Qaswiin,waxayna u yaqaaneen kutubtii qaddiimiga ahayd ee Muslimiintu ((dhulkii Al Qabjaaq)) imminkana waxay ku taalla Ruushka,Islaaminada odeygaasi waxay diinta soo gelisay dad aad u badan oo ka mid ah qabiilkiisi,waa arrin yaabkeeda leh,waayo soo gelitaanka diinta Islaamka ee dadkoo dhami waxay dhacaysaa dagaalkii Caynu Jaaluut hortiis,Tataarkuna waqtigaas waxay surka kaga taagnaayeen Muslimiin meelay joogaanba marka laga reebo Masar,Muslimiintana meel walba waxay ku ahaayeen kuwo la tunjaleecsado,taariikhdana waa wax dhif ku ah in dadkii soo duulay ay qaataan mabda'ii dadkii lagu soo duulay,oo uu kii xoogga badnaa gelayo diin taag daran,laakiin diinta Islaamku waa wax ku tallaalan basharka abuurkiisi hore,waxaan iyana la illaawi Karin inay masuuliyad aad u culus qaadeen ducaaddii Muslimiinta ee waqtigaasi,waxay qaadeen masuuliyad ah inay diintan gaadhsiiyaan basharka dunida saaran oo dhan,waayo cidda ay gaadho diin sax ah oo badhax-tirani waxaa la rajaynayaa Islaamnimadiisa si kasta oo uu ugu madax adkaa diinta Islaamka iyo dadkeeda ilaa bilowgii noloshiisa.

Waxaa ka mid ahaa raadadkii Caynu Jaaluut inay badiso tiradii Muslimiinta maadaama oo ay soo Islaameen qabiilkii Aldahabiya,ilaa ay dhamaantood marka waxyar laga reebo soo Muslimeen,waxay la midoobeen Baybaras si ay Holaako uga soo horjeestaan,dagaalo badanna waxay la galeen Holaako_ waxaynu kusoo bandhigi doonaa _insha ALLAH_ markaynu ka warramayno taariikhda dawladdii Mamaaliikta.

Waxaa lama dhaafaan ah inaynu sheegno in qabiilladii Dahabiya ay joogeen,samaysteen imaarado Islaami ah sida imaaraddii Qaasaan,imaaraddii Alqaram,imaaraddii Istir-khaan,imaaraddii Alnoogaay,imaaraddii Alkhawaarsim,dhamaan imaaradahan oo dhan ilaa maanta waxay ku jiraan gacanta Raashiya,mana ay awoodin inay is xoreeyaan mar dambe,ka dib markii uu kala furfurtay midowgii Soofiyati (soviet union) waxaan ILAAHAY u waydiinaynaa iyaga iyo dhamaan wadamada Muslimiinta ee kale in uu siiyo xoriyad waarta isla markaana ay u madax banaanaadaan gacan ku haynta dhulkooda.

Intaasi waxay ahayd toban raad oo uu reebay dagaalkii Caynu Jaaluut,

Waxaad iga haysaa toban buuro ah (TILKA CASHARATUL KAAMILA).

Shakina kuma jiro inay jiraan raadeyn kale oo badan isla markaana ay ka tagtay goobtani.. arrintaasina waxay gacanta ugu jirtaa baadhayaasha iyo dadka wax daraaseeya.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

*****



Haddii dagaalkii Caynu Jaaluut lahaa waxaas oo raadayn ee aan soo sheegnay waxa lagama maarmaan ah in aynu raadino sirta ka dambaysa ee sababta u noqotay guushaas wayn.

Waxaynu si faah faahsan u sharraxnay tallaabooyinkii Quddus _ILAAHAY haw naxariistee_ heegganka uu umadda ku abuuray iyo ciidamadii guushan keenay _arrimahan u fiirso_ halkan waxaynu kusoo bandhigaynaa sababihii uu qaatay Quddus si uu u guuleysto, markii dambena dhaxalsiisay guushan…

> **Sababta koowaad** (waana sababta ugu waynayd): **ILAAHAY** oo si dhaba loo **rumeeyey**:
> In si biyo kama dhibcaan ah loo aamino in aanay guushu oollin meel aan ILAAHAY agtiisa ahayn.. sidaas darteed ayuu Quddus_ILAAHAY haw naxariistee_ awoodda saaray dhinaca iimaanka ciidamadiisa iyo ummaddiisaba,wuxuu waynayey doorkii culimada,dadkiina wuxuu ku dhiirigeliyey la dagaallanka Tataarka isaga oo kula hadlaya afka Islaamka aan kula hadlaynin af qoomiyadeed ama jinsiyadeed,waxaana arrintaas ka marag kacaya dagaalkii Caynu Jaaluut kelmeddiisi ahayd ((Tolla'ay Islaamkoow)) ma uu odhan: Tolla'ay reer Masaroow..ama Tolla'ay Mamaaliiktooy..ama Tolla'ay Carabeey..!! hadafka Quddus wuxuu ahaa mid cad ujeedadiisuna waxay ahayd Islaamnimada.. diiraddiisu meel bay haysatay si saafi ah oo ka madhan khiyaal

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

si toos ah waxay u noqonaysaa ujeedadiisaasi asbaabaha guusha,waxaa ay tahay sababta ugu wayn.

Waxaa muuqatay sida ay arrintaasi ugu fogeyd nafsadda Quddus,markii uu ILAAHAY u qayshaday kolkay xaaladdu adkaatay dagaalka dhexdiisa,waa markii uu isu taagay Rabbigiis isaga oo is dhul-dhigaya oo leh “yaa ALLAAH.. uga hiili addoonkaaga Quddus Tataarka”.. ducadu waa cibaado.. ducadu waa aqoonsiga addoonku xaqiiqsado addoonimadiisa..ducadu waa ogeysiiska addoonku ku sheegayo u baahi uu u qabo Rabbiga caalamka iska leh.

Quddus wuu fahamsanaa arrintan tallaabo kasta oo ka mida tallaabooyinkiisi diyaar garowga in aan lagu guuleysan waxaan ahayn doonista ILAAHAY,sidaas ayey lagama maarmaan ugu noqotay in uu ku celceliyo,isu dhul dhigo isaga oo aad u khushuucsan.. marna guusha uma tiirin dhinaca naftiisa.. mar kasta wuxuu u tiirinayey xagga ILAAHAY SW,waayo waxa uu ogaa inta jeer ee uu ILAAHAY ka dalbaday,ILAAHAYna wuxuu ku galladay oo ku karaameeyey guushaas wayn.. mar kasta ILAAHAY ayaa fadli iyo galladba iska leh.

Sababta labaad:Mideyntii Muslimiinta:

Ummad kala tagsan lama guuleeyo,Quddus wuxuu ku dedaalayey ilaa maalintii ugu horeysay ee uu fuulay kursiga Masar siduu u mideyn lahaa Muslimiinta inta uu ka awoodo,wuxuu saamaxay Mamaaliiktii baxriga, wuxuuna la mideeyey Mamaaliiktii Almucsiyah,wuxuu waraaqo u diray madaxdii Ayuubiyiinta Shaam waanu soo dhoweeyey,wuxuu isku daray xoogaggii Shaamiyiinta,Khawaarsimiyah,mutadawiciinti,

Isaga oo aan asalkooda iyo halka ay kasoo jeedaan u eegaynin.. sidaa darteed ayuu kaga dhabeeyey arrin ay wax badani u arkayeen in aanay suurta gal ahayn.

Sababta saddexaad: Soo nooleyntii Jihaadka ummadda dhexdeeda:

Wuxuu yaqiinsaday Quddus in wadada aas aasiga ah ee lagu soo celin karo xuquuqda Muslimiintu inay tahay Jihaad, nabaddana la qaadan karo haddii aad danahaaga ka dhex aragto duruufaha qaarkood,laakiin lama qaadan karo haddii la dhacay xuquuqdii Muslimiinta,haddii la daadiyo dhiiggooda,dhulkoodiina la haysto.. markaa nabaddu marnaba masoo wada celiso xuquuqdaadii kaa maqnayd,nabad gelyona suurta gal inooma aha illaa inaga oo sharaf leh maahaane,heshiis nabadeedna ma geli karno inaga oo seefteenu af leedahay oo cadawga aan cashar ugu dhigi karayno haddii ay heshiiska jebiyaan maahaane.. sidaasi haddaanay jirin miyaa,heshiis nabadeed ma noqonayo laakiin wuxuu noqonayaa heshiis is dhiibis ah.

Taasi waa wax aan laga oggolayn dhinaca sharciga.

Sida xaqiiqadu tahay shacabka reer Masar waxay ahaayeen dad jihaadka u laylyan,way waynayn jireen sababtoo ah waxay ku jireen dagaalo is daba joog ah oo kaga imaan jiray dhinaca Siliibiyiinta (Kiristaanka),sidaa darteed ayey Quddus ugu fududaatay in uu dadka xasuusiyo jihaadku in uu yahay sababta

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ugu wayn ee ka mida asbaabaha guusha lagu helo,waana khasab in aad fahamsiiso ummad Islaami ah in wadada keliya ee ay madaxooda kor ugu qaadi karaan intay uuman yihiin inay tahay Jihaad,sidaa darteed ayuu jihaadku u noqday kuruska Islaamnimada.. macnaha ugu sarreeya waxa uu ka kooban yahay Islaamku,qofka qabsadaana wuxuu noqonayaa qofka ugu sarreeya dadyawga dunida.

Sababta afraad: si wanaagsan oo loo diyaar garoobo:

Quddus wuxuu qaaday tallaabo kasta oo xoojinaysay ciidamadiisa, waxaa ka mida talaabooyinkaas diyaarintii hubka,tababarkii ciidamada,hagaajintii safafka dagaalka,dejinta qorshe dagaal oo munaasib ah,heshiisyo dibloomaasiyadeed oo uu sameeyey,dejinta jawigii isla wada kacsanaa sidii ugu wanaagsanayd ee uu awooday,arrintaasna waxaa inagaga filan oo qudha markaan ka xusno sidii haybadda iyo sawirka quruxda badan lahayd ee ay Mamaaliiktu ku galeen dagaalkii Caynu Jaaluut,oo la moodayey inay marayaan dhoolla-tus milateri, ee aan la moodeynba inay gelayaan dagaalkii ugu xumaa.

Kan aan si fiican u diyaar garoobin guulna filan shaki kuma jiro in uu riyoonayo.. waayo intaas wax aan ahayni kama mid aha sunnada ILAAHAY.

Sababta shanaad: Ku Dayasho:

Quddus wuxuu tusaale ku dayasho mudan oo hormoodah u noqday ciidamadiisi iyo ummaddiisiba dhinac kasta oo kamida shaqooyinkii.. hoggaan fiican oo lagu daydaana wuxuu ka sarreeyaa kumanaan khudbadood iyo maqaallo la qoro..Quddus waxay mudnayd ku dayasho akhlaaqdiisu,waxay mudnayd ku dayasho hufnaantiisu,wuxuu mudnaa ku dayasho jihaadkiisu,wuxuu mudnaa ku dayasho iimaankiisu,waxay mudnayd ku dayasho saamaxaaddiisu..

Marnaba ciidamadiisu may dareemin inay qariib ku yihiin Quddus agtiisa,wuxuu kusoo dhaadhacay Quddus godkii ay ka dagaalamayeen ciidamadiisu,markaasuu ka dhinac dagaallamay,waxaa si cad u dhacday inay iska dhinac dagaallameen.

Sababta lixaad:in aan gacan-saar lala yeelan cadawga ummadda:

Quddus wax heshiis ah lama gelin Tataarka,isaga oo aan awood lahayn xataa, laakiin hortooda ayuu ku diyaar garoobay,sidoo kale wax heshiis ah lama gelin markii uu Kiristaanka Shaam la degganaa ka xoreynayey,sababtoo ah madax badan oo isaga ka horeysay ayaa ku hoobatay isku hallaynta heshiisyada diin-laaweyaasha.. waxay ka duulayeenna wuxuu ahaa marka hore inay naftooda xasarad ka foogeeyaan,ka dibna shacabkooda ka fogeeyaan_sida ay ku andacoonayeen_ dagaalka dhibtiisa.. waxayse khalad foolxun ka galeen shareecadda..xataa waxay galeen khaladaad is dulfuushan,marka koowaad in layska fogeeyaa jihaadka waqti loo baahan yahay waa khalad,marka labaad in ummadda lagu dhiiri geliyo inay gaalada u hogtaan waa khalad labaad,marka saddexaad in heshiisyada gaalada la aamino lagana dhigto saaxiib waa khalad saddexaad..

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Laakiin Quddus ujeedadiisu way caddahay.. wuxuuna ku xaqiijiyey sidii ugu wanaagsanayd isaga oo u lig ligga haysta sharcigii ILAAHAY sw, wuxuu akhriyey Kitaabka ILAAHAY:

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ لَا تَتَّخِذُواْ ٱلۡيَهُودَ وَٱلنَّصَٰرَىٰٓ أَوۡلِيَآءَۘ بَعۡضُهُمۡ أَوۡلِيَآءُ بَعۡضٖۚ وَمَن يَتَوَلَّهُم مِّنكُمۡ فَإِنَّهُۥ مِنۡهُمۡۗ إِنَّ ٱللَّهَ لَا يَهۡدِي ٱلۡقَوۡمَ ٱلظَّٰلِمِينَ ٥١

Kuwii ILAAHAY rumeeyayoow ka dhiganina Yuhuud iyo Kiristaan saaxiibbo,badh ayaa saxiib la ah badhka kale (macnaha iyaga ayaa saaxiibbo ah) midkii idinka mida ee saaxiib ka dhigtaa iyaga ayuu ka mid yahay ILAAHAYna ma hanooniyo qoomkii dulmi ku dhaqma.

Waa digniin.. weliba waa digniin khatar ah.. oo ka timid rabbiga Caalamka iska leh.

Waa doqon_ xataa wuxuu daciif ka yahay dhinaca iimaanka_qofka goodigaas maqlay ee aan waxba kasoo qaadin.

Sababta toddobaad: rajo iyo yididiilo ayuu ku abuuray ciidankii iyo shacabkiiba dhexdooda:

Ummad is dhiibtay macquul maaha inay guuleysato..quusasho,is dhiibis,iyo waxyaabaha la midka ahiba maaha sifaadka mu'miniinta.

﴿إِنَّهُ لاَ يَيْأَسُ مِن رَّوْحِ اللهِ إِلاَّ الْقَوْمُ الْكَافِرُونَ﴾[يوسف:٨٧].

ILAAHAY rajadiisa kama quustaan cid aan ahayn gaalada.

Quddus wuxuu ka shaqeeyey_ILAAHAY haw naxariistee_ siduu u nooleyn lahaa nafaha ciidankiisa iyo ummadda gebi ahaan rajadoodana kor ugu qaadi lahaa.. wuxuu u caddeeyey in guusha ILAAHAY ay iska leeyihiin ummaddii raacda dariiqiisa.. arrintaasina waa mid la hubo.. yaqiin iyo dhab ah inay imaanayso..caqiidaduna ay saldhig u tahay.

﴿كَتَبَ اللهُ لأَغْلِبَنَّ أَنَا وَرُسُلِي إِنَّ اللهَ قَوِيٌّ عَزِيزٌ﴾ [المجادلة: ٢١]

ILAAHAY wuxuu ballan qaaday in ay guuleysanayaan isaga iyo Rasuulkiisu,waayo ILAAHAY waa awood badane aan laga guuleysanin.

Arrintani_mu'miniintani_ arrintani waa qaddiyad muhiim ah!!

Sababta siddeedaad:wada tashi xaqiiqo ah:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Wadadii uu u Quddus ku hanoonay_ILAAHAY haw naxariistee_ tallaabooyinkiisi oo dhami ku dhowaad.

Wada-tashigii uu sameeyey Quddus_ xaqiiqo_ ayey ahaayeen,si loo gaadho ra'yiga ugu wanaagsan,ma ahayn aniga hallay dhegaysto iyo madaxweynahay waxba lagama beddeli karo fekerkiisa,wada tashigu asalka xukunka marka laga eego dhinaca Islaamka.. qofka aan samaynina wuxuu dayacayaa malaayiin awoodood shacabkiisa dhex yaallay,naftiisana wuxuu gelinayaa isku fillaan runta ka fog,wuxuu khilaafayaa wadadii nebiyada,waxaa kale oo ku jirta bahdillaad ay arrintaasi ku beerayso qalbiga taageerayaashiisa,khaladaad badan oo isku xig xigana wuu ku dhacayaa..intaas oo dhanna waxaa dheer wuxuu khilaafayaa amarkii ILAAHAY, amarkaas oo si cad uu inoogu caddeeyey kitaabkiisa.

﴿وَشَاوِرْهُمْ فِي الأَمْرِ﴾[آ

arrimaha kala tasho.

Sababta sagaalaad: arrimaha oo loo daayo cidda ku habboon:

Quddus wuxuu shaqaalaystay dadkii laga helay laba sifo oo aad muhiim u ah,shaqo kastana wuxuu u dirtay qofkii labadaas arrimood laga helay,labadaas arrimood ee qaaliga ahina waxay ahaayeen.. hawl-karnimo iyo amaano.

﴿إِنَّ خَيْرَ مَنِ اسْتَأْجَرْتَ الْقَوِيُّ الأَمِينُ﴾ [القصص:٢٦].

cid la shaqaaleysto waxaa ugu wanaagsan qof awood iyo amaano xafid leh.

Awood u leh shaqadiisa uguna fiican dadka aqoontiisa oo kale lehna ugu sarreeya..kaga horeeya..shaqadiisana hagaajin kara welibana wax kasuu kordhin kara cusub,amaana xafidna ah oo aan dayacaynin xaqa ILAAHAY, xaqa addoomada ILAAHAY,xaqa ummadda iyo xaqa naftiisaba.

Immisa umadood ayaa ku khasaaray markii ay arrimihii gacanta u geliyeen cid aan u ehel ahayn.. xataa arrintaasi waxay ka mid tahay calaamadaha saacadda Qiyaame.

روى البخاري عن أبي هريرة ﷺ أن أعرابياً سأل رسول الله ﷺ: متى الساعة؟ فقال: «إذا ضُيعت الأمانة فانتظر الساعة، قال: كيف إضاعتها؟ قال: إذا وُسِّد الأمر إلى غير أهله، فانتظر الساعة..»

wuxuu Bukhaari kasoo werinayaa Abii Hureyrat (Rc) in nin reer miyi ahi su'aalay

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Rasuulka(NNKHA): Saacaddu waa goorma? rasuulku wuxuu ku yidhi: "marka amaanada la dayaco saacadda sug",markaas ayuu ninkii yidhi: "sidee ayaa amaanada loo dayacayaa"? wuxuu yidhi: "marka arrimaha gacanta loo geliyo cid aan u ehel ahayn..".

Marka arrimaha lagu wareejiyo cid aan wadi karayn isla markaana aan ku sifoobin amaano xafidnimo,derejooyinka ay haystaana aan ku gaadhin waxaan ahayn wasto,qaraabo iyo laaluush..marka arrintaasi dhacdo waxaad ogaataa in guuli dheertahaay!!

Waxaynu qisadeenan kusoo aragnay in uu madaxa ciidamada ugu doortay Quddus ninka la yidhaahdo Faarisu-diin Aqdaay,weliba isaga oo ka mid ah Mamaaliik Albaxriya,sidoo kale wuxuu xukunkii ciidankii hor baxanshaha ahaa u dhiibay Ruknu-diin Baybaras,sababta oo ah wuxuu ahaa halyeey awood leh taariikh iyo sumcad badanna u saaxiib ah,welibana wuxuu ka mid ahaa madaxdii Mamaaliik Albaxriya,sidoo kale waxaynu aragnay sida uu madaxdii Shaam waddankoodii iyaga ugu magcaabay..uma magcaabin saaxiibadiis iyo dadkii u dhodhowaa..sawirkan cidda leh waxaa lagama shakiyaan ah loo gargaari doono..

Sababta oo ah cidda amaanada xafidda waxaa xafidi doona rabbiga caalamka iska leh. ((ilaahay xaffid isaga ayaa ku xafidi doona'e)) waa qaaciido sugan oo guusha lagu helo.

Sababta tobnaad: adduunyada oo laga saahido:

Wax kale kuma fashilmin madaxdii indhowgaradka ahayd ee waqtigii Quddus,ama samaankeenan amaba ilaa maalinta Qiyaame

_keliya waxay ku qarraqmeen adduunyada..way ku dhex dhego beeleen..wax kalena uma dulmin shacabkooda,waxay ula midoobeen cadawgooda..waxaan ahayn siday u daba guclaynayeen maaddo iyo adduunyo baacsasho.

Sidaa darteed ayuu Nebi Maxamed (NNKHA) uu uga digi jiray adduunyada.. waxay soo weriyeen Bukhaari_Muslim_ tusaale ahaan,iyaga oo kasoo werinaya Abii Saciid Alkhudri (Rc) in uu yidhi: Rasuulka (NNKHA) ayaa fadhiistay Mimbarka annaguna waxaanu fadhiisannay hareerihiisa.. markaasuu yidhi: **"waxan aan idiinka baqayaa dabaday waa in laydiin furo adduunyada nimcadeeda iyo quruxdeeda.."**

Tani ma aha marka keliya ee uu Rasuulku (NNKHA) inooga digay xaaladda adduunyo,laakiin waa arrin lagu soo celceliyey,weliba si xeeldheer laynoola hadlay,digniinahaas oo dhamina wax kale maahee waa khatarta ay leedahay adduunyadu weliba ay u leedahay Muslimiinta.. maya ee Mu'miniinta.

Qisadeenan dhexdeeda waxaynu ku aragnay kuwii isku xidhay adduunyada sida ay noloshoodii ku dambaysay rajooyinkoodii iyo riyooyinkoodiiba, iyo siday u iibiyeen shacabkoodii,akhlaaqdoodii iyo nafahoodiiba,xataa caqiidadoodii qiime aad u yar ku gateen..waxaynu aragnay siday ugu noolaayeen dullinimo iyo yaraan,waxaynu aragnay siday ugu dhinteen dullinimo.. waxaynu aragnay Maxamed Bin Khawaarsim,Jalaaludiin Bin Maxamed Khawaarsim,Naasir Li Diinillaahi ee haystay khaliifkii Cabbaasiyiinta,Almuctasim Billaah,Bedru-diin Lu'Lu,Naasir Ayuubi iyo kuwo kale oo la mid ah..

Quddus miyaa; waxa uu xaqiiqsaday in xanuunkan lagu imtixaamay qolyahan ducafada ah markaas ayuu adduunyadiiba ka saahiday oo ka fogaaday,wuxuu ogaaday in raaxada adduunyadu_si kasta oo ay u badato_ waqtigeedu yar yahay,nimcadeeduna _si kasta oo ay u wanaagsan tahay_ ay istaagi doonto lana waayi doono,sidaa darteed kuma fidnoobin adduunyo hal ilbidhigsi oo noloshiisa,xataa damac kama gelin

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

kaydsasho adduunyo,waxaan soo aragnay isaga oo xaraashaya adduunyadiisi, janno dalabkeed ayuu ku jiray,maalkiisi wanaagsanaa ee gacantiisa ku jirayna wuxuu ku gadanayey janno,wax damac ah oo kaga jirayna ma jirin..waxaad ogtahay dhamaan wixii uu haystayba in uu iibiyey si uu ciidamada jihaadka gelaya ugu diyaariyo..

Sidoo kale damac kama gelin kursiga xukunka,waxaad ogtahay in uu usoo bandhigay kursigan in uu ku fadhiisto Naasir Yuusuf Al Ayuubi_ sababta oo ah kursiga ayaaba agtiisa ka yaraa_ haddii uu oggolaado inay midoobaan Masar iyo Shaam,wax dan ahna kama lahayn deganaanshaha qoyskiisa ama kooxdiisa taabacsan ama nabad iyo nabad-gelyo midna,wuxuu naftiisa u kireeyey Jihaad iyo dagaal khatartiisa iyo adkaantiisa leh, damac kama lahayn in ay noloshiisu sii dheeraato,isaga ayaa ciidamada hoggaanka u dhiftay si uu uga qayb galo jihaadka lala gelayo Tataar,shakina kuma jiro in uu ka war hayey in uu noqon doono kuwa ugu horeeya ee dilkooda lagu dedaali doono,shakina sidoo kale kuma jirin haddii aanu bixin oo cid kale wakiisho in aanay jirin cid canaanaysaa Quddus oo kale,waayo waa boqorkii dawladda naftiisa wuxuu u dhawrayaa danaha umadda,laakiin wuxuu kalgacal iyo hilow u qabaa in uu jidka ILAAHAY ku jihaado,wuxuu niyeysanayaa in uu ku dhex geeriyoodo seefaha dhexdooda iyo ilkaha warmaha,wuxuu ka saahiday adduunyadan dhamaanaysa,sidaa darteed daqiiqad ma ged gedoomin(labac-labaclayn) weligiisna ma diir-nixin,noloshiisuna waxay ku koobnayd waafajinta si dhamaystiran ficilkiisa hadalladiisa iyo kelmedihiisa.. waana sababta ILAAHAY cw u siiyey oo gacanta u geliyey adduunyadii uu ka cararayey,wuxuu dhaxalsiiyey kursigii uu ka saahiday,wuxuu ku karaameeyey qaniimo fara-badan iyo maal aan la koobi karin,oo aan maskaxdiisa iyo fekerkiisa midna ku jirin in uu helayo..!!

Sidaas ayuu Quddus u noolaadaay _رحمه الله_ isaga oo Casiis Sharaf leh ah,madaxiisuna kor yahay ku karaamaysan diinta ILAAHAY,shacabkiisu jecelyahay,cadawgiisuna ka cabsanayo..

Wuxuu fahmay Quddus in risiqa qofka la kafaala-qaaday intii aanu dhalan ka hor,iyo in nasiibkiisa xoolo,maal iyo mulkiba aanu marna seegaynin, weliba in ay iyagu daba carari doonaan,sababahaas awgood ayaanu halmar u dulleynin naftiisa,mar walbana waxa uu ku xidhnaa ALLAHA gacantiisa risiqa iyo maamulkuba ku jiraan isaga ayaa xumaan ka nasahan,waydiisashadiisana wuu wanaajistay;uma rukuucin bashar si kasta oo ay awooddiisu u waynaato,ciidanna kama cararin si kasta oo tiradiisu u badato,si qoto dheer ayuu u fahmay hadalkii rasuulka (nabad gelyo iyo Naxariisi Korkiisa Ha ahaatee) hadalkaas oo uu ka soo weriyey Ibn Maajah saxaabiga la yidhaahdo Jaabir Ibn Cabdullaah(ilaahay labadoodaba raalli haka ahaadee) hadalkaas oo uu ku yidhi”

«أيها الناس، اتقـــوا الله وأجملوا في الطلب؛ فإن نفسًا لن تموت حتى تستوفي رزقها، وإن أبطأ عنها.. فـــاتقوا الله، وأجملوا في الطلب.. خذوا ما حَلَّ، ودعوا ما حَرُمَ..».

“waar dadoow ILAAHAY ka yaaba,dalabkana iska qurxiya,sababtoo ah nafina dhiman mayso ilaa ay laasato risiqeeda,.....ILAAHAY ka yaaba,dalabkana iska wanaajiya.. qaato wixii xalaal ah,iskaga taga wixii xaraam ah”.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

ILAAHAY haw naxariisto caalimkaa wayn iyo hogaamiyahaa qaaliga ah ((Quddus)) waa ninkaas aan soo barannay waxna ka barannay,kamana suuleyno in aynu barayano_ sida uu Muslimku ula noolyahay Quraanka,iyo sida ay dhamaan dareemayaashiisa ula falgaleen hadalladii xabiibkeena Almusdafaa ﷺ iyo dhan kasta oo laga eego noloshiisaba.

Waxaan ILAAHAY u waydiinaynaa in uu aakhiradiisa ugu wanaagaajiyo sida uu adduunyadiisa u wanaajiyey,in uu ku karaameeyo hortooda khalaa'iq fara badan maalinta bandhigga wayni dhacayo (qiyaame) sidii uu ugu karaameeyey Caynu Jaaluut,in uu kitaabkiisa ugu qoro magaca Mujaahidiinta runsheegayaasha badhaxa-tiran,sida loogu qoray kutubta taariikhda ee waaraysa weligoodna la akhriyi doono,ILAAHAYOOW adigaa u weli ah arrimahaas oo dhanna awooda.

Taasina waxay ahayd sababtii tobnaad ee kamidka ahayd sababihii dhaliyey guushii waynayd..... halkaas toban buuro ah iga dheh..ILAAHAY ayaan waydiisanaynaa in uu u gargaaro Islaamka iyo Muslimiintaba.

*****

Intaas ka dib

Waa dhambaalkii Tataarka.

Waa qisadii Caynu Jaaluut.

Waa door dabiici ah oo ka mida doorarka taariikhda.

Dabciga taariikhda waxaa ka mida in ummadi jaran jarada nolosha kor u fanato illaa derejada ugu sarraysa,ka dibna ay soo hoobato illaa ay gaadho halka ugu hooseysa.

﴿وَتِلْكَ الأَيَّامُ نُدَاوِلُهَا بَيْنَ النَّاسِ﴾ waa Ayaamo aanu dadka dhexdooda warwareejinayno.

Waxaa kor u baxay Tataar,ka dibna way soo hoobteen,Muslimiinta ayaa hoos u hoobatay ka dibna kor ayey u soo baxeen,kor u bax kastana waxaa ku xigaya soo dhaadhicid.. sidoo kale hoobasho ka dib waxaa jiraya soo koritaan... sidaas ayey u soconaysaa illaa inta ILAAHAY adduunyadan iyo waxa dulsaaranba dhaxli doono.

Umasoo bandhigayno taariikhda daawashada hayaan iyo dhaadhicitaan keliya..laakiin waa in la daraaseeyo sababaha keena inay ummadi kor u kacdo iyo in ummad kale dullowdo.. Taariikhduna waxay usoo noqnoqotaa sawir cajiib ah iyada oo wadata..

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Qofka taariikhda akhiryaana wuxuu ku korodhsanayaa khibraddiisi khibrad sannado ah (macnaha haddaad taariikhda akhrido waxaa cimrigaagii kuugu siyaadaya cimri oo waxaad wax ka ogaanaysaa waxyaabihii dhacay abuurkii dunida) khibradaha ummadaha,khibradaha waqtiga iyo dunida.

Qisadan waxaynu ku aragnay in ay taariikhdu majiireheedii ka weecatay dhamaanteed,waxaana weeciyey soo bixitaankii nin cayiman,ninkaasina uu yahay Quddus _ILAAHAY haw naxariistee_ sidii ay hore uga leexatay majiireheedii markii uu soo baxay ninkii la odhan jiray Jingis-khaan_ ILAAHAY naxariistiisa haka dheereeyee… waa laba shakhsiyadood oo aad u kala fog.. laakiin labadooduba waxay ka mideysan yihiin inay lahaayeen raadeyn..labadooduba waxay raadeyeen malaayiin..labadooduba waxay raadeeyeen Juquraafiyaddii dhulka.. labadooduba waxay raadeeyeen socodkii taariikhda.. laakiin kala fogaa labada raadeymood.. raadka koowaad wuxuu ku kacaamay awood jidheed iyo hub ku dhaqmaya sharcigii kaynta.. raadka labaadna wuxuu la kacaamay awoodd Iimaaneed,ruux nool iyo sharciga Islaamka.

Akhristoow waxaa aad u fudud in aad wax dumiso,laakiin way adag tahay inaad dhistaa…

Waxaa aad u fudud in aad dulmido,laakiin way adag tahay in aad caddaalad samayso.

Waxaa aad u fudud in aad cadhooto,laakiin way adag tahay in aad cafido.

Sidaas ayaan Islaamka loogu gaadheynin wanaagga.

Quddus waa Iinsaan,Jingis-khaan waa Insaan.

Kan hore waxaa qurxiyey Islaamnimada,kan labaadna waxaa xumeeyey Islaamka.

Is beddelka hannaan socodka taariikhduna labadaas waddo ayuu raacay.

Quddus wuxuu dhisay xaddaaraddii Iinsaaniyadda markaas ayuu mutaystay in uu dunida oo dhan wakiil uga noqdo ILAAHAY.

﴿إِنِّي جَاعِلٌ فِي الأَرْضِ خَلِيفَةً﴾

Anigu waxaan adduunyada kaaga dhigayaa wakiil.

Jingis-khaan wuxuu burburiyey xaddaaraddii Iinsaanka markaas ayuu noqday wasakh nacaladi kusoo degtay.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

﴿قَالَ اذْهَبْ فَمَن تَبِعَكَ مِنْهُمْ فَإِنَّ جَهَنَّمَ جَزَاؤُكُمْ جَزَاءً مَّوْفُورًا﴾[

wuxuu yidhi tag,ciddii ku raacda ee iyaga ka mid ah,abaal marintiinu waa Jahannama,abaal marin aad mutaysateen.

Kuwa la mid ah Jingis-khaan dunida way ku badan yihiin.. sida cagsiga ahna: qaar la mida Quddus way ku yar yihiin; sababtuna waa sidaan soo sheegnay wax burburin aad ayey u fududdahay in wax la dhisona wax ka adagi ma jiraan!!

﴿وَإِن تُطِعْ أَكْثَرَ مَن فِي الأَرْضِ يُضِلُّوكَ عَن سَبِيلِ اللهِ﴾ haddii aad addeecdid inta badan ee dhulka joogta waxay kaa luminayaan jidkii ILAAHAY.

﴿وَمَا أَكْثَرُ النَّاسِ وَلَوْ حَرَصْتَ بِمُؤْمِنِينَ﴾

Dadka intooda badani mu'miniin noqon maayaan walaw aad ku dedaasho.

Taariikh yahannada waxaa ka mida qaar shaki kaga jiro in qofku taariikhda gacmihiisa ku samaysan karo..qof keli ahina ma laha karti uu mujtamacaadka wax kaga beddeli karo.. taariikhdana dhan kale u dhigi karo.. Laakiin taariikhda lafteeda ayey ku caddahay fekreddaas cagsigeedu.

Si buuxda ayey socodka taariikhdu isu beddeshay waqtiyo badan,iyo meelo badan sababna ay u ahaayeen soo bixitaanka dad cayiman.. kuma odhanayo waxay is beddeshay waqti Rasuul ama Nebi,taasi way caddahay waana wax la fahamsan yahay in waxyi jiro,toosin rabbaani ahi ay ka dhigeyso waqtigaas waqti ka duwan sebennadii kale ee taariikhda..laakiin waxaan ku odhanayaa waxaa beddelay taariikhda shakhsiyaad caadi ah oo aan ahayn nebiyo iyo rasuulo midna.. waxaa beddelay taariikhda hal nin joogitaankiisa sida Abi Bakar Al sidiiq,

Bal dib u milicso dagaalladii uu la galay qolyihii diinta ka noqday.. way is beddeshay taariikhdu joogitaanka hal nin oo la mid ah Cumar Bin Al khaddaab,bal dib u eega furashadii Islaamka..waxaa geddiyey taariikhda soo bixitaankii Cumar Bin Cabdi Al Casiis,soo bixitaankii Muuse Ibn Nasiir, soo bixitaankii Cabdi Raxmaan Al daakhil, soo bixitaankii Cabdi Raxmaan Al Naasir,soo bixitaankiiCumaadu-diin Sinki, soo bixitaankii Nuura-diin Maxamuud, soo bixitaankii Salaaxu-diin Al Ayuubi, soo bixitaankii Cabdullaahi Bin Yaasiin, soo bixitaankii Yuusuf Ibn Tashafiin,Maxamed Al Faatix..soo bixitaankii kuwo kale oo badan..ilaahay dhamaantood haw naxariisto.

Waa run waxay soo baxeen waqti kala fog fog .. laakiin raadeyntoodii waxay saameysay meelo fog.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Bukhaari wuxuu kasoo weriyey Cabdullaahi Bin Cumar ILAAHAY raalli haka ahaadee labadoodaba in uu yidhi: waxaan maqlay rasuulka ILAAHAY ﷺ oo leh: “dadku waa sida boqol halaad oo geela misna aanad ka dhex helaynin hal aad fuusho”.

Laakiin hashaas la raacayo haddii la helo,maxay liibaan u keenaysaa adduunyada!.

Abuu Daa’uud wuxuu kasoo werinayaa Abii Hurayra (Rc) in uu yidhi: wuxuu yidhi Rasuulka ﷺ: “ILAAHAY wuxuu kasoo saarayaa ummaddan boqolkii sanoba mid u cusboonaysiiya diintooda”.

Quddusna _shaki la’aan_ wuxuu ka mid ahaa kuwaas diinta cusboonaysiinaya

Hadaad ka sheekayso khushuucdiisa iyo iimaankiisa,hadaad ka sheekayso suhdigiisa iyo dhowrsoonaantiisa,hadaad ka sheekayso kartidiisa iyo khibraadkiisa,hadaad eegto runtiisa iyo ikhlaaskiisa,hadaad rabto ka sheekee jihaadkiisi iyo dhiibistiisi nafta,hadaad doonayso milicso dulqaadkiisi iyo samirkiisi,hadaad rabto dhugo debecsanaantiisi dabeecad wanaagiisi.

Wuxuu ahaa nin ka mida cusboonaysiiyeyaasha macnaha kelmeddu sida uu u dhigan yahay.

Waxa uu ahaa sida uu ku sifeeyey Imaamu Dahabi_رحمه الله kitaabkiisa ((Siiru Al Iclaam Al Nublaa)) oo uu ku yidhi: “wuxuu ahaa fardo-fuul geesi ah,siyaasi ah diini ah,dadkiisu jecel yahay,wuxuu jebiyey Tataar,Shaam oo dhanna wuu ka safeeyey ka dib dagaalkii Caynu Jaaluut,ILAAHAYna wuu u xaqiijin doonaa Jihaadkiisa Iinshaa Allaah,wuxuu ahaa dhalin yaro dhuubo wayd ah, gadh isku jooga ayuu lahaa,wuxuu shabaabnimadiisi ugu beddelayaa Janno,raallina wuu ka noqday”.

Wuxuu kale oo ku sifeeyey Ibnu Kasiir رحمه الله kitaabkiisa Bidaaya wa Nihaaya: “wuxuu ahaa geesi khayr badan, jecel Islaamka iyo dadkiisa,dadkuna way jeclaayeen,in badanna way u ducayn jireen”.

Waxaad u fiirsataa in taariikh yahannadu isku xidhaan masalada jacaylka dadku jecel yihiin shakhsiga iyo hogaamiyaha oo jecel dadka uu masuulka ka yahay..waa qiyaas xeel dheer oo ka mida waxyaabaha xaqiiqada lagu qiyaaso.. waayo dadka wanaagsan ee ummaddani ma jeclaadaan cid aan ahayn dadka wanaagsan..mana nacaan cid aan faasid ahayn..cidda markaa ay ku kulmaan jacaylka dadka wanaagsani waa mid laga jecel yahay ILAAHAY agtiisa,qofka ay isku raacaan dadka wanaagsani nacaybkiisana waa mid laga neceb yahay ILAAHAY agtiisa.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

روى مسلم عن أبي هريرة ﷺ قال: قال رسول الله ﷺ: «إن الله إذا أحب عبداً دعا جبريل فقال: إني أحب فلاناً فأحبَّه.. قال: فيحبه جبريل، ثم ينادي في السماء فيقول: إن الله يحب فلاناً فأحبوه.. فيحبه أهل السماء. قال: ثم يُوضع له القَبول في الأرض. وإذا أبغض عبداً دعا جبريل فيقول: إني أُبغض فلاناً فأبغضه، قال: فيُبغضه جبريل، ثم ينادي في أهل السماء: إن الله يبغض فلاناً فأبغضوه، قال: فيُبغضونه، ثم توضع له البغضاء في الأرض».

wuxuu kasoo weriyey Muslim Abii Hurayra (Rc) in uu yidhi: Rasuulka ILAAHAY ﷺ wuxuu yidhi: "ILAAHAY haddii uu jeclaado addoon wuu u yeedhaa Jibriil,wuxuu ku yidhaadaa: anigu waxaan jeclaaday hebel ee jeclaw..wuxuu yidhi: markaas ayaa waxaa jeclaada Jibriil,ka dibna wuxuu ka dhawaaqaa samada isaga oo leh: ILAAHAY wuxuu jeclaaday hebel ee jeclaada.. markaas ayaa samada laga jeclaadaa. Wuxuu yidhi: ka dibna waxa dhulka loogusoo rogaa aqbalaaddii. Haddii uu naco ILAAHAY addoon wuxuu u yeedhaa Jibriil markaas ayuu ku yidhaadaa: anigu waxaan nacay hebel ee adiguna nac,wuxuu yidhi: waxaa naca Jibriil addoonkaas,ka dibna wuxuu ka dhawaa samada isaga oo leh: ILAAHAY wuxuu nacay hebel ee idinkuna naca,wuxuu yidhi: markaas ayaa samada laga nacaa,ka dibna dhulka ayaa loogu soo dejiyaa aqbalkii nacaybka".

Halkaas waxaynu si cad uga aragnaa inay jiraan rag gacmahooda ku beddelay habkii ay taariikhdu u socon jirtay..laakiin iyada oo arrintaasi caddahay haddana waxaa cajiib ah in dadku ay raggaas ka doonayaan meel ka baxsan gurigooda,suuqyadooda iyo magaalooyinkooda.. waxay aamineen inay raggaasi ka imaanayaan meel fog.. weliba aad u fog.. ka fog goob ahaan kana fog waqti ahaan.. amaba laga yaabee inay ka yimaadaan meel ka baxsan dhulka!! Maxaybuu mid kasta oo innaga mid ahi raggaas uga dhigi waayey naftiisa,caruurtiisa,ehelkiisa,walaalihiis iyo gurigiisa dhexdiisa?!

Maxay buu Quddus u noqon waayey adiga?!

Quddus muxuu u noqon waayey wiilkaaga?!

Quddus muxuu u noqon waayey walaalkaa?!

Taariikhda maxaynu u baranaynaa walaal?!

Miyeynaan u baranayn si aynu u raacno raadkii saalixiinta ugana fogaano waddooyinkii faasidiinta?!

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Maxay baynu u raaci la'nahay talaabooyinkii Quddus_رحمه الله sugnaa ee cad caddaa si aynu u gaadhno Caynu Jaaluut gaar ahaan waqtigan oo ay Tataaradu badan yihiin iyo kuwo la midka ah Tataarba?

Walaahi ma haysanno wax cudur daar ah… Xujo ayaa innagu Oogan!!!

﴿لِّيَهْلِكَ مَنْ هَلَكَ عَن بَيِّنَةٍ وَيَحْيَى مَنْ حَيَّ عَن بَيِّنَةٍ﴾ si ciddii halaagsamaysaana si cad u halaagsanto,ciddii noolaanaysaana si cad u noolaato

Taasi waxay ahayd qisadii Quddus_رحمه الله

Laakiin waxaa hadhsan qisadii yaabka badnayd!!

Qaybtii ugu dambaysay!!

Lama filaanta yaabka lahayd ee qisadii Quddus ILAAHAY haw naxariistee waxay ahayd in aanu kursiga kusii fadhiyin wax ka badan kow iyo toban bilood iyo toddoba iyo toban maalmood keliya!! Ma dhamaysan halsano!!

Dhamaan taariikhdaa wanaagsani,diyaar garowgaa lagu qancay ee quruxda badnaa,tababarkaas heerkiisu sarreeyey,guushaas magaceedu taariikhda ku waaray,raadeyntaas ballaadhan ee saamaysay quluubta malaayiin qof..dhamaan waxyaabahaasi waxay ku dhaceen wax ka yar halsano!!

Wuxuu geeriyooday Quddus ILAAHAY haw naxariistee_ ka dib guushii Caynu Jaaluut konton maalmood qudha.

Sidaa darteed wuxuu dalka xukumayeyba waxay ahayd mudadaas kooban..haddana wuxuu ku biiray dadka ugu waaweyn dunida.

Qiimaha raganimada iyo waynaantiisa laguma qiyaaso cimrigaasa oo dheeraaday darteed,xoolo badan oo uu leeyahay, saldannada oo uu xejistay darteed.. waxaa lagu qiyaasaa oo miisaan lagu saaraa shaqooyinka waaray ee uu qabtay kuwaas oo taariikhda dunida wax ka beddelay,Juquraafiyadda caalamkana daba geddiyey,isla markaan ku culus miisaanka Ilaahay agtiisa yaalla.

Quddus kuma ayuu ahaan lahaa haddii aanu qabsan sharciga ILAAHAY,oo aanu ku guuleysan Caynu Jaaluut sharciga uu qabsaday darteed guul ku helin,oo aanu ku dheganaan haysashada dariiqa ILAAHAY?

Quddus ka aan wadadan haysani kuma ayuu noqon lahaa?

Shaki kuma jiro inay taariikhdu iska indho tiri lahayd sida ay isaga indho tirtay kuwo kale oo badan oo sida daad xoortay iska baaba'ay waxyar ka dib,oo iyagu mashaakil ku ahaa shacabkooda,wadamadooda,xukunkooda iyo cimrigooduna aad u dheeraa..

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

shaki kuma jiro in xaradka keliya ee magac ah isla markaana taariikhdu u baahan tahay waa rag culculus.

Daruurina maaha inay loo baahan yahay waqti dheer.

Dadku waxay aaminsan yihiin in isbeddelku u baahan yahay waqti dheer.. sidaas darteed ayey u quusteen.. xaqiiqaduna sidaas way ka duwan tahay.. isbeddelku kuma xidhna seben laakiin waxay ku xidhan tahay sida ay yihiin ragga wax beddelayaa.. haddii la helo raggaas waaweyn oo kale guushii ha sugi waayin,is beddelna waa suurto gal..weliba waa hubaal in uu imanayo..insha Allaah.

Haddii la waayo raggaas miyaa..ummaddu waxay sidaas ku jiri doontaa tobanaan sano iyada oo aan hal tallaabo hore u qaadin.. xataa waxay u socon doontaa gadaal.

Sheekhii waynaa ee Cissu-diin Cabdi Salaam wuxuu u cabsaday ummadda markii ay sidaas deg degga ah u wayday Quddus, wuxuu ka baqay in ay dayacanto guushii waynayd ee uu soo hooyey Quddus ka dibna ay burburto ummaddu mar labaad.. waxa uu lahaa markii uu Quddus dhintay ka dib isaga oo ilmaynaya: “ILAAHAY haw naxariisto shabaabkaas,haddii uu muddo dheer sii noolaan lahaa wuxuu ku soo celin lahaa Islaamka shabaabnimadiisi”.

Laakiin Quddus ILAAHAY haw naxariistee wuu cusboonaysiiyey Islaamka,isga oo aan waqti badan nooleyn..waxay sii jirtay dawladdii Mamaaliiktu muddo ku dhow saddex qarni oo ay ilaalinaysay Muslimiinta,korna u taagaysay calankii Islaamka.. Quddus wuxuu u taagay dawladdan dhidibbo adag..halkii ayey kasii amba qaadeen qolyihii kalena oo ay ka dhiseen dhisme qurux badan oo tiirar adag ku taagan.. dhismena haddaan aas aaska laga hagaajin isma taago si qumman.

Wuxuu leeyahay Sheekh Cissi-diin Bin Cabdi Salaam_ILAAHAY haw naxariistee_ : “gacanta kuma dhigin arrinta Muslimiinta ka dib Cumar Bin Cabdi Casiis nin ka caddaalad wanaagsan Quddus..wanaag iyo caddaaladba”.

Waxaynu hadaba leenahay: Quddus sidee ayuu wanaaggan oo dhan u sanceeyay?!

Waxaynuba leenahay: sancada ((Quddus))_رحمه الله_ _maxay ahayd?!

Quddus sancadiisu waxay ahayd kitaabka ILAAHAY Quraanka iyo Sunnada Nebiga ﷺ.

Mucjisooyinka ugu waaweyn ee diintani leedahay waxaa ka mida((inay samayso rag))!!

Cumar muxuu noqon lahaa Islaam la’aan?!

Khaalid muxuu noqon lahaa Islaam la’aan?!

Muxuu ahaan lahaa Daariq Ibn Siyaad Islaamnimo la’aan?

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Quddus muxuu noqon lahaa Islaamnimo la'aan?

Kitaabkii iyo Sunnadiiba gacmeheenna ayey ku jiraan ILAAHAY ayaa inoo xafiday.. sidaas ayeyna inoo ahaanayaan ilaa maalinta Qiyaame.

Ummaddanina lumi mayso inta ay haystaan Quraanka iyo Sunnada.

Imaamu Maalik wuxuu Mawda'iisa kusoo werinayaa in Rasuulku ﷺ yidhi**: "waxaan idiinka tegay labo arrimood oo hadaad qabsataan aydaan lumayn waa: Kitaabka ILAAHAY iyo sunnada Nebigiina".**

ILAAHII abuuray hogaamiyeyaashii lahaa Khaalid,Qacqaac,Salaaxu-diin,Quddus,weligiis wuu abuuri doonaa rag waaqicooda wax ka beddela diintana u cusboonaysiiya shabaabkeeda,maanka caruurtoodana geliya rajo iyo yididiilo,ummadana gaadhsiiya heerka koowaad ee umadaha dunida iyo hogaaminta caalamka inay qabtaan.. u hogaamiya janooyin nimco badan.

Islaamkuna _WALAAHI_ sharafta adduunyo isaga ayaa iska leh sharafta aakhirona isagaa iska leh.

Geba-gebadii..

Way dhamaatay qisadii Tataar.. way dhamaatay qisadii Caynu Jaaluut.

Way dhinteen kuwii wanaagsanaa..kuwii xumaana kama hadhin ee le'de..way dhinteen ciidamadii daalimiinta ahaa.. way dhinteen ciidamadii Mu'miniinta ahaa..sannado iyo sannado ayaa tegay qarniyo iyo qarniyo ayaa socday.

Way tageen dhismayaashii waqtigaas,ragoodiina kaba horey,Qalcado baabe'e iyo dhufaysyoba.

Farxad iyo murugoba is raace.. qosol iyo ilmoba galbade.

Wax kasti way tageen.. waxaa ka hadhay oo keliya ku waano qaadasho (Cibro)

﴿لَقَدْ كَانَ فِي قَصَصِهِمْ عِبْرَةٌ لأُولِي الأَلْبَابِ﴾ warkooda waxaa ugu sugan ku waano qaadasho kuwa caqliga u saaxiibka ah.

Waxa keliya ee ka hadhay waa hadalkii Rasuulka ﷺ ee ay Bukhaari iyo Muslim kasoo weriyeen Abii Hurayrat (Rc) wuxuu yidhi: rasuulka ayaa yidhi : "ILAAHAY wuxuu u ballan -qaaday ciddii ku jihaadda jidkiisa,ee aan u bixin waxaan ahayn jihaad jidkiisa ah oo run ka sheegaya hadalladiisa in uu gelin doono Janno,ama uu kusoo celin doono hoygiisi uu ka baxay isaga oo gaadhay Ajar amaba Qaniimo".

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Yabooha ILAAHAY ee aan doorsoomin waxna laga beddelin wuxuu ku leeyahay:

﴿إِن يَنْصُرْكُمُ اللهُ فَلاَ غَالِبَ لَكُمْ﴾ haddii ILAAHAY idiin hiiliyo cidina idinka gacan sarrayn mayso.

Ilaahay ayeynu waydiisanaynaa in uu nolosheena dhamaanteed inoogu dhameeyo jidkiisa.

In uu hadalkeena iyo waaqiceenaba ka dhigo hadalkii saxaabada rasuulka ﷺ iyo waaqicoodii markii ay u jawaabeen rasuulka ﷺ iyaga oo leh:

نحن الذين بايعوا محمداً على الجهاد ما بقينا أبداً.

Waxaannu Nahay duulkii Maxammed kula ballamay Jihaad inta aanu noollahay.

ILAAHAY ayaan waydiisanayaa in uu innaga dhigo addoomadiisa taariikhdu xusto.

******

labadii burbur ee ..Baqdaad.

Ka dib markii ay kusoo geba gebootay qisadii Tataar marxalad ILAAHAY ku karaameeyey addoomadiisa kuna dulleeyey cadawgiisa.. waxaa lagama maarmaan ah in aan fahamno si qoto-dheer masiibadii ku lammaanayd qisadaas..masiibadii ku burburisay Baqdaad gacmihii Tataar.

Innagu wax kale ugama waramayn qisadan in aynu ogaano dhacdooyinkii hore uga dhacay adduunyada.. ama aynu eegno innaga oo aan falanqaynayn,u fiirfiirsanayn,ka duuleynin ama aan is dultaaginba..waxaynu uga waramaynaa ku cibro-qaadasho,ka feker-qaadasho iyo ka faa'iideysi..waxaynu qisada uga waramaynaa in aan ku ogaano mustaqbalka (Aayaha).

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Xalay caawa u ekaa!!

Isu ekaa markii ay Baqdaad burburiyeen Maraykanku iyo markii ay dumiyeen Tataarku..!!

Isu ekaa Muslimiinta maanta iyo Muslimiintii noolayd waqtigii Tataarka.

Madaxda Muslimiinta ee maanta u ekaa madaxdii talinaysay casrigii Tataar.

Xukuumadaha Maraykan u ekaa xukuumadihii Tataar.

Taswiirtu waxay taariikhda ugu soo noqnoqonayaan hab cajiib ah.

Maraykaan ayaa si lama filaan ah ugu soo biiray saaxaddii dhacdooyinka si dhinac kasta ula mida soo bixitaankii Tataar.. Ummad aan taariikh lahayn.. ku kacaantay boob iyo dhac.. waxay dileen Maraykaan tobanaan.. mayee boqolaal kun oo Hindida Cas cas ah (red Indian) si ay dawlad ugu samaystaan.. waxay boobeen khayraad aanay lahayn.. waxay kula kaceen waxay ku magcaabaan (ilbaxnimadoodii) oo ah inay dadkii ka dhigeen Qalfoof iyo wada raq dadyawgii deganaa dhulkan asal ahaan.

Wax waqtigu socdoba waxay noqdeen ((qudbiga koowaad)) ee dunida si la mida sidii ay Tataar ku noqdeen.. cid kalena weligoodba derejadaas uma oggolaanin.. waxay dhunbadeen dulmigii,cadaadin, iyo inay adduunyada oo dhan cagta hoosteeda gelinayaan weliba iyaga oo sheeganaya in aanay wax kale doonayn oon ahayn inay dunida caddaalad u horseedaan xorriyad iyo nabadgelyona ay siiyaan shucuubta dunida ku dhaqan.

U ekaa miisaska wada hadallada ee Maraykaanku miisaskii wada hadallada ee Tataar! Ballan qaadyo ka madhan damiir.. dar daaranno aan laga aamin qabin.. hadallo qallalan oo hawada lagu fasaxayo si loo dejiyo shucuubta Caalamka illaa waqti cayiman.. khiyaamaynta basharka ilaa muddo..farsamooyin cad cad oo lagu jebiyo ballamaha ay galaan..kala tagsanaan afkooda iyo uurkooda.

Waxay soo galeen Maraykaan dhulka Muslimiinta sannado aanay wanaagsanayn,sidii ay Tataarba u soo galeen waqti aanay xaalad wanaagsan ku jirin Muslimiintu.

Kumay qabsan sabab uu caqligu qaadan karo,ama daliil in la dumiyo ay ku mutaysteen..waxay ku galeen male awaallo loo geeyey male awaallo kale,dacaayado lagu dhoob dhoobay dacaayado kale.. mar waxay la dagaalamayaan argagixiso.. mar kale waxay hore marinayaan dimquraadiyadda.. mar kale waxay xoreynayaan shucuubta.. mar kale waxay raad-goobayaan hubka wax gumaada..!! muhiimad uma aha sababta ka dambaysa in waddankaas ay galaan,laakiin waxaa muhiim u ah inay galaan.

Waxay la galeen Maraykaan wadamada Muslimiinta dagaalo la mida dagaaladii ay la galeen Tataar.. dagaalo bilaa naxariisa.. dagaalo aan loo kala eegayn billaawe qaad iyo biri-ma geydo..aan loo kala eegayn rag iyo dumar.. aan loo kala eegayn

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

canug,caruur,dhalin yaro iyo duq gaboobay midna..waxay la wareegeen Maraykaan khayraadkii Muslimiinta si buuxda sidii ay Tataarka oo kale.. haddii aanay sidaas ahayn waa maxay farqiga u dhaxeeyaa Baatroolka dahabkii iyo maartii Tataar guranayeen?! Maxay ku kala duwan yihiin beddelidda Manaahiijta, kala huf iyo kala haadinta manhajkaagii waxbarashada iyo gubitaankii maktabaddii Baqdaad?!!

Shiiqinta wax kasta oo Islaam lug ku leeyahay.. nooleynta wax kasta bahalnimo ah isla markaan aan aqbalin xaddaarad.

Subxaanallaah.. waxaadba mooddaa in uu ILAAHAY doonay is waafajinta dhaqanka Maraykaanka iyo dhaqankii Tataar,markaas ayuu ka dhigay talaabooyinkoodii inay dumiyaan Baqdaad si aad ugu eg sidii ay u dumiyeen Tataar.

Sidii ay Tataar u qabsadeen Afgaanistaan burburinta Baqdaad ka hor.. ayey Maraykaankuna u qabsadeen Afgaanistaan intii aanay Baqdaad qabsan ka hor,dumintii nidaamkii Daalibaan intii aanay Baqdaad qabsan ka hor!! Waxay u dejiyeen qawaacid ay samaysteen Osbakistaan iyoBakistaan.. sidii ay Tataar

أَتَوَاصَوْا بِهِۦ ۚ بَلْ هُمْ قَوْمٌ طَاغُونَ

sameeyeen oo kale ka hor dhawr qarni!!!

miyey isu dardaarmeen,mayee waa duul xad-gudubsan.

Sidii ay u ahaayeen ciidamada Tataarku kuwo aad u tiro badan oo u awood badan ayey ahaayeen Maraykaankuna..kalama ay bakhaylin dagaaladooda xoolo,hub iyo feker..gaadiid xoog badan. hub casri ah..diyaar garoow,tababarro,go'doomin,qorsheyaal.

Sidii ay Tataar ballanka ugu galeen ayey Maraykaanna ballan ugu galeen.

Haddii uu Monko-khaan ahaa madax waynihii ugu sareeyey dawladdii Tataar wuxuu dawladihii u qaybiyey dawlad ((ku tiirsan)): iyaga magan gelaysa iyo dawlad ((saaxiibad la ah)): iyaga raacsan,sidaas si la mida ayuu madaxwaynihii Maraykaanku ee ((George Bush!!)) wuxuu ka dhigay qaar basaasiin u ah iyo qaar gaashaan buur u ah oo ballan iyo heshiis u dhaxeeyo.

Sidii ay Tataarku u gaashaan buuraysteen Nasaarada ((Siliibiyiinta)) si ay ula wada dagaalamaan Muslimiinta iyada oo ay kala duwan yihiin afkaartooda,siyaasadooda,Istiraatijiyadooduba..sidaa si la mid ah ayey Maraykaankuna gaashaan buuraysteen Yuhuudda iyada oo la ogyahay nacaybka daran ee u dhaxeeya Nasaarada iyo Yuhuudda.. wuxuu kaalmaystay Maraykaan Ruushka iyada oo ay dhex taallo taariikh madaw oo u dhaxaysa labada waddan.. wuxuu la fadhiistay Maraykaan Shiinaha miiska wada hadalka iyaga oo dhinacba dhinaca kale basaasayo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Sidii uu Tataarku u dhisay quwado isbahaysi ah isaga oo la midoobay dawlado Nasaaro ah oo taag daran_ uu soo dhowaysto_ sida Armiiniya iyo Joorjiya.. sidaas oo kale ayuu Maraykaankuna la bahoobeen Ingiriiska,Isbayn, iyo dawlado yar yar oo kale isla markaana daciif ah marka loo eego Maraykaanka! Waxay uga faa'iideysteen dawladahan sidii ay Tataarku uga faa'iideysteen Armiiniya_ Ingiriisku tusaale ahaan_ wuxuu khibrad ballaadhan u leeyahay dhulka Muslimiinta,taariikh dheerna way lahaayeen,waxay qabsadeen gobollo khatar ku ahaan lahaa Maraykaanka,ma jirin Ingiriiska wax u diidayaa inay gobollo bixiyaan iyaga oo dumar ku beddelanaya oo keliya inay jaar la noqdaan Maraykaanka.

Sidii ay ballan qaadyada ula galeen Tataarku qaar ka mida madaxdii Muslimiinta.. sidaas oo kale ayey sameeyeen Maraykaanku lafteedii..waxay gaashaan buuraysteen qaar ka mida madaxdii Muslimiinta.. weliba intoodii badnayd ee Muslimiinta..sidii uu Bedru-diin Lu'lu hogaamiyihii Kurdida deggan waqooyiga Ciraaq ula xulufaystay Tataarka..ayey maantana Kurdidii waqooyiga Ciraaq u raaceen Maraykaanka, sidii uu u furtay Kiikooskii labaad iyo Qarji Arsalaan Raabic dhul ballaadhan oo Turkiga ka mida iyaga oo ku tiirsanaya Tataarka, si la mid ah ayey maantana wadaan Turkidu..sidii ay u soo dhambaleen ciidamada Tataarku dhul baaxad leh oo Muslimiintu leeyihiin ilaa ay kasoo gaadheen Ciraaq iyaga oo aan cidina iska waabin,sidaa si lamida ayey imminkana ciidamada Maraykaanku usoo dhex jibaaxeen wadamo Muslimiin ah,weliba markan mushkilladdu maaha in aan cidina waabin,laakiin waxaa loo soo dhoweeyey si maqaam sare ah,waxay Muslimiintu ku qaabileen ciidamadii Maraykaanka xaflado iyo soo dhowayn halkii ugu sarraysay.

Xaqiiqdii.. xalay u ekaa caawa!!

Siday Tataarku ugu fekereen inay kaalmaystaan shiicada Ciraaq si la mida ayey Maraykaankuna ugu fekereen.

Siday Tataarku uga faa'iideysteen qaar Munaafiqiin ah inay shaaciyaan wararka dagaalka,waa warar jebinaya Muslimiinta nafahooda,dhulkana ku ridaya yididiiladooda,quluubtoodana arga-gax gelinaya,ayey arrintii lafteedii adeegsadeen Maraykaankuna,ilaa aan aragnay wargeysyada dalalka Muslimiinta kasoo baxa oo ka waramaya tababarka Maraykaanka,hubkooda,adeegyadooda oo isu dhamaystiran, iyo faraqa aadka u wayn ee u dhaxeeya Maraykaanka iyo Muslimiinta,isla markaana ay Muslimiintu halkaas iska dhigeen isku day kasta oo ay islahaayeen wax iskaga celiya.

Sidii uu Holaako kula dardaarmay Mu'ayidiin Calqami wasiirkii Shiicada ahaa in uu yareeyo tirade ciidamada Muslimiinta,sidaas si la mida ayey Maraykaanku ka sameeyeen wadamo badan oo ka mida wadamada Muslimiinta,waxay cunaqabatayn kaga soo rogeen dhinacii hubka,dhinacii tirada ciidamada iyo dhinacii tababarradaba.

Sidii ay u go'doomiyeen Baqdaad Tataarku ayey Maraykaanna u go'doomiyeen,siday u duqeeyeen Baqdaad Tataarku ayey Maraykaankuna u duqeeyeen,siday dayrarkii

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Baqdaad u dumiyeen madaafiicdii Tataar ayey u dumiyeen Maraykaanka madaafiicdoodii.

Siday Tataar u dalbadeen in lasoo dhiibo mujaahidiintii ayey sameeyeen Maraykaankuna.

Siday u dalbadeen Tataarku in hubka la burburiyo si la mida ayey sameeyeen Maraykaankuna.

Sidii uu u cararay Muctasim Billaah markay xaaladdu adkaatay ayuu u baxsadey Saddaam Xuseen.

Sidii loo dilay labadii wiil ee uu dhalay Muctasim Billaah intii aan isaga la qaban,waxaa loo dilay ka hor intii aan isaga la qaban labadii wiil ee uu dhalay Saddaam Xuseen..!!

Sidii ay uga baxeen Tataarku ballan qaadkoodii ahaa inay amaan siinayaan Baqdaad ayey Maraykaankuna uga baxeen.

Sidii ay Tataarku kusoo galeen waddanka in aanay dib uga bixin.. ayey Maraykaan u soo galeen Ciraaq si aanay uga bixin.

Is waafiqid yaable oo ka dhaxaysa taariikhda iyo waaqica taagan!!

Laakiin dhamaan isu ekaanshaha ka dhaxeeya Tataar iyo Maraykaan ima cabsi gelinaya igamana bajinayo.. waayo milladda gaaladu waa hal mid.. xaaladaha gaaladuna mar weligoodba waysu egyihiin,laakiin waxaa I cabsi gelinaya igana bajinayaa waxaa weeye isu ekaanshaha Muslimiinta maanta iyo Muslimiintii joogtay maalmihii Tataar.. innaga weligeenba laynaguma jebinayo awood gaalo ha ahaadaan Tataar,Faransiis,Roomaan,Raashiyaan,Maraykaan iyo kuwa la midka ahba..waxaa laynagu jebiyaa ducfigeena..waxay sameeyeen Muslimiintii waqtigii Tataar dhamaan waxyaabihii Nasriga ka fogeynayey,waxaa markaas imaanaya dullinimo,liidasho, iyo sabsaabnimo oo dhan..sidoo kale Muslimiinta waqtigan joogtaa waxay ku dhaqmayaan waxyaabihii ka fogeynayey gargaarka ILAAHAY,arrimahaas ay samaynayaan natiijadii kasoo baxday waxay noqotay in diinlaaweyaasha Maraykaan,Raashiyaan,Hindi,Yuhuud,Seerbiyaan ay ku amar ku taagleeyaan wadamadii Muslimiinta.

Xanuunada dhinaca akhlaaqda ah ee kala furfuray ummaddii Islaamka ayaa sabab u noqday dumitaankii waqtigii Tataarka,maanta waxaa ay la kala meehanaabayaan Muslimiintu waa xanuuno dhinaca akhlaaqda ka asiibay ummaddan.

Waxaa lagama maarmaan ah inay Muslimiintu si dhab ah uga shaybaadhaan naftooda xanuunada khatarta ah.. maxay dadwaynaha dunida nagula nooli noogu samaynayaan waxay doonaan innaga oo tiradeennu kor u dhaaftay Bilyan?...

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Maxay baanay noogu aabbo yeelaynin reer bari iyo reer galbeedba? Maxaybaa ILAAHAY uga siibay haybaddayadii quubta cadawgayaga,quluubtayadana maxaa ku riday wahniga,daciifnimada iyo jaahwareerka?.

Bal walaal aan taariikhda iyo tan dhacaysaba dib u milicsanno.

Xanuunnada Ummadda:

Xanuunka koowaad: Muslimiinta oo aan hamigoodu caddayn:

Qaaciidada Islaamiga ah asal ahaa waa :

إِن تَنصُرُوا۟ ٱللَّهَ يَنصُرْكُمْ وَيُثَبِّتْ أَقْدَامَكُمْ hadaad ILAAHAY u hiilisaan wuu idiin hiilinayaa,gomodihiinana wuu sugayaa.

U hiilinta ILAAHAYna waxay noqonaysaa sharcigiisa oo aad fulisaan, iyo inta dalladda Islaamka ku hoos jirtaa inay mid ahaadaan.. aan midab takoor lahayn..qabiil lahayn..qoomiyadna lahayn.

Ka fogaanshahase ILAAHAY manhajkiisa, iyo qaadashada shuruucda xalalka ku dhisan ee reer galbeedka,iyo ka jeesashada kitaabka ILAAHAY iyo sunnadii Nebiga(NNKHA) waa belaayadu halkay asal ahaan ka abuurantay iyo xanuunada hadheeyey wadamada Islaamka.. Muslimiintuna ismay beddelin illaa uu soo baxay nin hal ku dheg ka dhigtay ((Tolla'ay Islaamkoow!!))..ILAAHAY ayaa waafajiyey Quddus _ILAAHAY haw naxariistee_ kelmedahan si uu uga abaal mariyo noloshiisa oo dhan,si uu ugu guubaabiyo ciidamadiisi wanaagsanaa ee ku raacay Islaamnimada calankeeda in kor loo qaado oo keliya,calanka Muslimkuna haddii uu hal mid yahay ummaddii hoos gashaa waa shaki la'aan inay guuleysanayso.

Laakiin si kasta oo uu hogaamiye Muslim ahi isugu dayo in uu ummaddiisa ku dhiiri geliyo waxaan Islaamnimo ahayn kuma guuleysanayo weligiis..

ILAAHAY ayaa diidey in uu guul inna siiyo illaa aan isku xidhno uurkeena iyo oogadeena.. oogadeennu Muslim uurkeenu Muslim..ciidankeenu Muslim..sidaas u caddahay.. innaga oo aan qarsanaynin,sakati iyo wax cabsi ahina innagu jirin. Wax aynu ka xishoonaa aanay jirin.. qofka diintiisa oo badhaxl'a raacay isaga ayaa mudan in laga xishoodo..

Subxaanallaah!! Bal u fiirso maanta.. mid kasta oo diinta ka hadlayaa waa in uu aad u digtoonaadaa kelmed kasta oo uu yidhaahdaana way u xisaabsan tahay,waa in uu kelmedihiisa si xeeldheer u kala hufaa..waa in aanay ahayn kelmedo cid kale damqaya.. kuwa ka hadla waxyaabaha ALLE ka fogaadka ah ee ay bannaysteen waa siday doonaan xilma saarna.. fiidyoow_ yada_ barnaamijyadooda waallida ah,

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

warbaahintooda xun xun.. iyada oo aan kormeer iyo xisaabtoona lahayn! Siday u guuleysanaysaa ummad wayday hadafkeedii ilaa heerkan?!

Siday u guuleysanaysaa ummad caalimkeedii ka xishoonayo in uu sheego xaqa,faajirkeediina aanu ka xishoonayn in uu iskaga baxo qudhunkan iyo waallidan?

Waxaa lagama maarmaan ah Muslimiintooy.. hadafkaaga Islaamnimo oo aad dayacdaa waa xanuun wayn oo inna dhaxal siiyey in dhulkii Muslimiinta cadawgeenu gacanta ku hayaan.

Xanuunka Labaad:Tafaraaruqa Muslimiinta:

Sidii loollanku uga dhex taagnaa dhamaan gobollada Muslimiinta ayaamihii Tataar,sidii Jalaaludiin fasaadka uga dhex waday Muslimiinta isaga oo Tataar raad gurayo..sidii si la mida ayeynu arkaynaa khilaaf iyo shaqaaqooyin ka dhex taagan waddan kasta oo Muslimiin ah dhowaan.. hadaad aragtid laba dawladood oo waaweyn Muslimiinna ah oo jaar wadaag ah waxaad arkaysaa loollan ayaa ka dhexeeya dhinaca xuduudka ah ama qaddiyad ay ku kala taggan yihiin sababtay..iyagii ayaa isku Mashquulay Muslimiintu..markaas ayey illaabeen ciidamadii haystay ee iska barqanaya afar meelood oo meel caalamkii Islaamka,hammigoodii iyo tamartoodiina waxay ku ururtay kelmedo iyo khudbado.. mararka qaarkood dhagxaan iyo hub ayey u adeegsanayaan walaalohooda Muslimiinta ah.. shakina kuma jiro labo qolo oo Muslimiin ah haddii muran dhex yaallo inay fashil mayso ILAAHAY wuxuu inna leeyahay:

﴿وَلاَ تَنَـــازَعُوا فَتَفْشَلُوا وَتَذْهَبَ رِيحُكُمْ وَاصْبِرُوا إِنَّ اللهَ مَعَ الصَّابِرِينَ﴾[الأنفال: ٤٦].

ha murmina,si aad u fashilantaan,awooddiinuna aanay meesha uga bixin,samra ILAAHAY wuxuu la jirtaa kuwa samrayee.

Xanuunka saddexaad: adduunyadii oo layska daba-riday:

Adduunyadii ayaa si aad ah ugu waynaatay indhihii Muslimiinta waqtigii Tataarka..sidoo kale waqtigeenan laftiisa.. jiilal dhan oo aan u nooleyn wax aan ahayn adduunyadooda ha ahaato adduunyadaasi mid dulleysan.. mid kasti waxa uu u noolaaday sidii uu maal u ururs an lahaa u qurxin lahaa u wanaajisan lahaa maciishadiisa.. uguna nimcaysan lahaa noocyada cuntada iyo cabbitaanada gaadiid uu raaco iyo guri uu dego.. sidoo kale ugu raaxaysan lahaa noocyada heesaha kala duwan iyo qalabka muusikada cusub.. sidaas ayey Muslimiintii ugu qarraqmeen adduunyadii.. dhalinyarada intooda badani waxay ka xafideen heesaha in ka badan Quraanka.. dhalinyarada intooda badani waxay si tafaasiil leh uga waramayaan

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

taariikhda fannaaniinta rag iyo dumarkoodaba,wuxuu u yaqaan taariikhda ciyaartooyda in ka badan inta uu naftiisa ka yaqaano waddan keenan iyo wadamo kale oo Muslimiin ahba,wax allaale iyo wax uu ka yaqaanna ma jirto noloshii geesiyaashii,culimadii,hogaamiyeyaashii Muslimiinta..xataa waxba kama yaqaano saxaabadii Rasuulka ﷺ .. xataa wax uu ka garanayaa ma jirto Rasuulka ﷺ laftiisa!!

Ma taasaan ahayn xanuun u baahan daaweyn?

Adduunyada oo lagu dhegsanaadaa waxay sabab u tahay halaag..ILAAHAY wuxuu kitaabkiisa ku leeyahay:

﴿وَإِذَا أَرَدْنَا أَن نُّهْلِكَ قَرْيَةً أَمَرْنَا مُتْرَفِيهَا فَفَسَقُوا فِيهَا فَحَقَّ عَلَيْهَا الْقَوْلُ فَدَمَّرْنَاهَا تَدْمِيرًا﴾ [الاسراء:١٦].

Marka aanu doonayno in aanu magaalo halaagno waxaanu amarnaa madaxya wayntooda markaasay ku dhex fasaqmaan ka dib waxaa ku dhabooba hadalkii,ka dib ayaanu burburinaa burburin.

Maanta ku dhegsanaantii adduunyadu guud ahaan way saamaysay ilaa uu gaadhay kuwii waxma haysatada ahaa..!! nin aan maalintii helaynin quutal daruurigii,mana awoodo xabbad sigaar ah in uu shaqaysto..!! wuxuu u dhow yahay in aanu helin wax uu naftiisa ku asturo iyo caruurtiisa ayuu haddana fadhiyayaa saacado maqaaxiyaha iyo fadhi ku dirirka,isaga oo aan awoodin in uu barto caruurtiisa ayuu haddana dedaalkiisa ugu badan ku bixinayaa in uu fiidyowga iska hor fadhiyo oo daawado dayax-gacmeedyada iyo sida loo daah furay.

Ku dhegsanaanta aduunyada iyo ku dhego beelka shahwaadkeeda.. uma toosna ummad doonaysa inay istaagto inay muuqaalkan lahaato.

Xanuunka Afraad: Jihaadkii oo laga tegay:

Sidii midhaha laga dhaxlay ku dhegsanaanta adduunyada, doon doonista duxdeeda iyo ku foorarkeedii ayaa gaadhay inay Muslimiintu ka tagaan jihaadkii..raallina ay ku noqdaan inay ummadaha ka daba socdaan halka geela dabadu kaga taallo.. waxay oggolaadeen Muslimiinta waxa ay cadawgoodu ugu yeedhaan ((Nabad)) iyada oo cad inay tahay: ((Is-dhiibis)).

May fahmin Muslimiintii cahdigii Tataar,sida aanay wax badan oo sebenkeenan nooliba u fahamsanayn_ in_ sababta keliya ee si sharfoon lagu soo celin karaa xuquuqdii Muslimiintu ay tahay Jihaad iyo in nabaddu haddii ay saxtahay aad dooran kartid duruufaha qaarkood aanayse ahayn doorasho aad qaadan karto haddiiba meel lagaga dhacay xuquuqdii Muslimiinta,ama dhiigoodii la daadiyey,ama dhulkoodii lagu

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

qabsaday,ama diintoodii lagu dheel dheelay afkaartoodii iyo jiritaankoodaba, weliba si badheedh ah.

May fahmin Muslimiintu in aan nabad gelyo si dhamaystiran usoo wada celin xuquuq,aanayna inoo sugnayn innaga oo sharaf leh mooyaane,aanayna inoo sugnayn innaga oo awood aynu iskaga waabino cadawga leh mooyaane haddii ay khilaafaan nabadgelyadii la wada galay, haddii aanay taasi jirin nabad gelyadu noqon mayso nabad gelyo laakiin waa is-dhiibid waana wax aan lagaa oggolayn dhinaca sharciga.

Waxaa loo baahan yahay in ay Muslimiintu fahmaan in kelmedda Jihaad aanay ahayn ceeb,sidaa darteed aynu la xishoono ama la cabsanno.. maaha kelmed xun oo ay tahay in aan ka saarno manaahijka waxbarashada,warbaahinta,saxaafadda , wargeysyada iyo bugaagta weligeed.. Jihaad waa kuruska Islaamka!.. Jihaad waa halka ugu sarraysa Islaamnimo.. ha doonaan ama ha diidaan cadawga Ummadani waa isugu mid haddii haddii ay gudeheeda joogaan iyo hadday debed ka joogaanba.

Kelmedda Jihaad waxay kusoo aroortay Quraanka ILAAHAY in ka badan soddon jeer.

Sidoo kale waxay ugu soo aroortay kelmedda dagaal.

Xagee ayeynu uga tegaynaa Aayadahan.

﴿يَا أَيُّهَا النَّبِيُّ حَرِّضِ الْمُؤْمِنِينَ عَلَى الْقِتَالِ﴾

Nebi Maxamedoow ku dhiiri geli Mu'miniinta dagaalka.

Halkee ayaynu ka dhaafaynaa hadalka ILAAHAY ee ah.

﴿يَا أَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا قَاتِلُوا الَّذِينَ يَلُونَكُم مِّنَ الْكُفَّارِ وَلْيَجِدُوا فِيكُمْ غِلْظَةً وَاعْلَمُوا أَنَّ اللَّهَ مَعَ الْمُتَّقِينَ﴾[التوبة:١٢٣].

kuwa iimaanka laga helayoow la dagaallama kuwa idin canaanaya ee gaalada ka mida hana ka arkaan agtiina ad-adayg,waxaadna ogaataan in uu ILAAHAY la jiro kuwa ka cabsada.

Halkaynu ka dhaafaynaa hadalka ILAAHAY ee

﴿وَقَاتِلُوا الْمُشْرِكِينَ كَافَّةً كَمَا يُقَاتِلُونَكُمْ كَافَّةً﴾ la dagaalama gaalada gebi ahaantood sida ay iyaguba idiinla dagaalamayaan gebi ahaantiin.

Walaal:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Ummad doonaysa inay nafteeda ilaaliso,difaacdo sharafteeda,karaamadeeda iyo jiritaankeedu sidee ayey dagaal iyo jihaad uga tegi kartaa?!

Garashadee iyo qaanuunkee iyo milladee ugu yeedhaysa ummad la haysto barigeeda iyo galbeedkeedu hayska dhaafto ka hadalka jihaadka,dagaalka iyo weliba u diyaar garoow dagaal.

Waxaan aaminsannahay inay tahay xanuun..ka tegidda jihaadka iyo warkiisu,u diyaar garoowgiisu waxay ka mid yihiin kuwa ugu waaweyn xanuunada ummadda ku dhacay.

Lagumana arag taariikhdeeda inay ku istaagto waxaan isaga ahayn.. taariikhdana waxaa inoogu sugan wax ku qaadasho.

Xanuunka Shanaad:ka gaabinta u diyaar garoowga maadiga ah ee dagaallada:

Waxay ku dedaaleen Tataar inay diyaar sadaan wax kasta oo guul u keeni kara,ha ahaato taasi ciidamo,hub ama diyaarsashadooda wadooyinka iyo xaalaha ay muhiimad u leedahay xulufaysigu si ay ugu galaan dagaal nafsi ah iyo qorsheyaasha degaannada.

Wuxuu ahaa diyaar garoow isu dhamaystiran oo wanaagsan runtii.

Dhamaan waxaas oo dhan waxay samaynayeen waqti ay Muslimiintuna qar kale jafayeen..!!

Waxaa la yaraystay ciidamadii Islaamiga ahaa,sidoo kale waxaa la hilmaamay derejadii ay lahaayeen.. kuma fekerayn madaxwaynuhu cusboonaysiinta hubkiisa iyo tababarka ciidamadiisa.. lama dejin qorshe habboon,lama samayn basaasiin xeeldheer.. aad ayey u yaraysteen Muslimiintu diyaar garoowgoodii..waxay u tartiibiyeen arrimuhu siday u kala mudnaayeen sawir foolxun.. iyada oo ay ku baxayeen Qasriyada,hudheellada,beeraha malaayiin lacag ah.. halka aan shilin lagu bixinayn diyaarinta ciidamada,aqoonta iyo dhaqaalaha waddanka..markaas ayaa waxaa yaraaday soo bixitaanka rag heer sare ka gaadhay aqoonta iyo hogaaminta,iyo maamulkaba,waxaa batay soo bixitaankii jilayaasha aflaam aan waxba kusoo kordhinayn nolosha oo rag iyo dumarba leh, qoob ka ciyaare yaashii ragga iyo dumarka ahaa,ciyaar yahannadii,ehelkii khiyaalka oo dhan!!

Waxaa khasab ah inay jabto ummad diyaar garoowgeedu muuqaalkan lahaa.. Ummad Islaam oo aan diyaar garoow lahayni isma taagto.. macnuhu maaha in aad ummadda rabigooda ku xidho oo ay isaga uun iskaga xidhan yihiin laakiin aanay wax diyaarsan ka mida maadiga dagaalada lagu galo,diyaarsan bashar u dagaal gala.. waxaa lagama maarmaan ah inay casharkan si fiican u fahmaan Muslimiintu.

Xanuunka Lixaad: Muslimiinta oo wayday hoggaamin fiican:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Tababarka hogaaminta fiicani wuxuu ka sarreeyaa kumanaan tababar oo ku saabsan khudbado iyo maqaallo..ciidamadu waxay dareemayaan martinimo aad u daran iyo guubaabin la'aan haddii ay waayaan hogaamin.

Kun aftahan oo u khudbadeeya ciidamo si ay dagaal ugu guubaabiyaan waxba ma tarayso,haddii ay arkaan hogaamiyahooda oo ka mida kuwii ugu horeeyey ee dhuuman jiray markay masiibo jirto!!

Kun aftahan oo xammili kara duruufaha adag,wax yar raalli ku ah ,ka saahiday adduunyada,dhabarka u dhigi kara masiibooyinka dhaqaale,waxba ma tarayaan haddii ay shacabku arkaan hogaamiyahoodii oo ku raaxaysanaya qasriyada,oo ku bixinaya malaayiin raaxadiisa liibaantiisa ,fakahaadsigiisa iyo xafladihiisa.

Kun aftahan oo akhlaaq wanaagsani meelna ma gaadhsiiyaan ummad,mar haddii ninkii ummadda horkacayey uu yahay salaad-laawe,Soon-laawe,dan aan ka gelin nadiifinta gacantiisa iyo carrabkiisa, iyo daahirinta damiirkiisa…….

Sidee ayey shacabku u qabatimayaan diintiisa iyo sharciga rabbigood haddiiba ay ku yar tahay maqalkooda kelmedda "ALLAAH" oo kasoo yeedhaysa hogaamiyahooda,macalinkooda iyo tababarohooda?!

Dhalinyaro sidee ayey u hagaajin karaan xaaladahooda iyaga oo arkaya in hogaamiyayaashoodii waaweynaa ee caanka ahaa ay in badan u marayaan wadadii hagaajinta?!

Hogaamiyaha aan hogaamin nool u noqon shacabkiisa dhinaca jihaadka,edaabta,samirka,

Suhdiga,caddaaladda yaanu ka filin shacabkiisu inay la baxsadaan waqtiga adag, sidoo kale yaanu is agtaagin sebenka masiibooyinka.

Taariikhdana waxaa inoogu sugan Cibro!!

Xanuunka Toddobaad: heshiisyada cadawga ummaddan oo la aamino:

Waxay ku jabeen qaar badan oo ka mid ah madaxdii Muslimiinta ee waqtigii Tataarka inay ku qancaan heshiisyadii cadaawaha ummadda Islaamka,ujeedada ay sidaas u samaynayeenna waxay ahayd waxay ka fogeynayeen naftooda asaas ahaan,ka dibna waxay ka fogeynayeen shacabkooda dhibaatooyinka dagaallada.. markaas ayey ku dhaceen khaladdo waaweyn oo dhinaca sharciga iyo caqligaba ah oo foolxun..weliba waxay galeen khaladdo badan oo is kor saaran.. jihaadka oo laga cararaa waqti loo baahan yahay waa khalad,shacabka oo lagu rabbeeyo inay cadawgooda u hogtaan waa khalad kale,cadawga in la aamino isla markaana laga loo arko saaxiib la rumeysto hadalkiisa iyo ballantiisa waa khalad saddexaad.

Rabbigeen sareeyoo kor ahaaye wuxuu ku caddeeyey kitaabkiisa:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

﴿يَا أَيُّهَـــا الَّـــذِينَ آمَنُـــوا لاَ تَتَّخِذُوا الْيَهُودَ وَالنَّصَارَى أَوْلِيَاءَ بَعْضُهُمْ أَوْلِيَاءُ بَعْضٍ وَمَن يَتَوَلَّهُم مِّنْكُمْ فَإِنَّهُ مِنْهُمْ إِنَّ اللّهَ لاَ يَهْدِي الْقَوْمَ الظَّالِمِينَ﴾[المائدة:٥١]

ku ILAAHAY rumeeyayoow haka dhiganina awliyo Yuhuudda iyo Nasaarada badhkoodba badhka kale ayey u yihiin awliyo,qofkii ka dhigta ee idinka mid ahina iyaga ayuu ka mid yahay ILAAHAYna ma hanooniyo daallimiinta.

Xanuunka Sideedaad: Quusasho:

Ummad is dhiibtay suurto gal ma aha inay guuleysato,quusashada,is-dhiibista iyo baasaysiguna kama mid aha sifaadka Mu'miniinta.

﴿إِنَّهُ لاَ يَيْأَسُ مِن رَّوْحِ اللّهِ إِلاَّ الْقَوْمُ الْكَافِرُونَ﴾

ILAAHAY agtiisa kama quustaan qolo aan gaalo ahayni.

Waxay Tataar u dhaqmeen siday u dhaqmaan Maraykaan, siday u dhaqmeen daba-dhilifyadii Tataarka iyo Maraykaanba.

_ inay hoos u ridaan mooraalka ruuxda Muslimka ilaa iyo derejada ugu hooseysa ee suurto gal ah.. waxay wayneeyeen oo kor u qaadeen wax kasta oo Tataar leeyahay iyo Maraykaan,waxay hoos u dhigeen wax kasta oo Muslim leeyahay.. waxay dhex dhigeen faraq aad u wayn waxay hastaan cadawga ummaddu iyo waxay ummadda Islaamku haysato,markaas ayey u sawireen in aanay jirin waddo lagu badbaadi karo ilaa hogasho,is dhul-dhigis iyo is-dhiibis waxaan ahayn.

Innaga oo taariikhda soo aragnay.. waxaynu soo aragnay masiibadii raacday Tataar iyo guushii ballaadhnayd ee kusoo hoyatay gacantii Quddus _رحمه الله_ sababaha ugu waaweynaa ee guushaas keenayna waxaa ka mid ahayd_رحمه الله_wuxuu kor usoo qaaday mooraalkii ruuxiga ahaa ee ciidamada,wuxuu baray in Tataar ay yihiin bashar ka mida basharada ILAAHAY uuntay oo aan cajsi gelin karin,Muslimiintuna haddii ay ILAAHAY isku xidhaan,in aan cidina ka guuleysanaynin,cidina ha ahaato Tataar,ha ahaato Yuhuud,ha ahaato Maraykan ha ahaato kuwa kale ee la midka ah.. wareegtada ugu dambaysana inay Muslimiintu iska leeyihiin.

Diyaar garoowgaas nafta ah iyo in lagu cashariyo rajo,yididiilo niyad wanaag ummadda dhexdeeda waxaan ahayn guuli inay ka fog tahay shaki kuma jiro.

Xanuunka Sagaalaad: arrimaha oo gacanta loo geliyo cid aan ehel u ahayn:

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Waxaynu ku aragnay qisadii dumitaankii Baqdaad ee koowaad siday arrimihii oo dhan cid aan garanayni isugu cuno duubtay,amaanadii oo la dayacay ,mansabyadii ugu sar sareeyey dawladda oo ay qabsadeen dad ka madhan karti iyo waxqabad,dad ka madhan ALLE ka cabsi iyo taqwa.. awoodina ma jirto amaanona ka daran.. labadanina WALAAHI waa adhax-jabka ugu wayn..!!

Haddii ay xarumaha hogaamineed gaadhaan dadkii wastada,qaraabada,laaluushka lagu keenay waa arrin aad u khatar ah..weliba ay aad u daran tahay khatarnimadeedu.

Hadaad aragto qofka oo soo dhoweysanay kii u dhowaa,boosaska sar sarena lagaa iibinayo ama lagaa iibsanayo,dadkii hanan lahaana laga faa'iideysan waayey kartidoodii,mudnaantoodana aan la siinaynin,waxaad ogaataa inay guuli kaa dheer tahay.

Haddii aynu is aragno inaynu ummadaha kaga naal halka geela dabadu kaga taal_ siday xaaladdu ahayd waqtigii Tataarka_ aan fiirinno cidda ku fadhida boosaskii hogaamineed,aan eegno siday kusoo gaadheen derejooyinkan.. waxaad heli doontaa shaki la'aan sida badan inay kusoo gaadheen asluub aan ILAAHAY raalli ka ahayn.

Waddo guul loo marona la heli maayo illaa shaqo walba cidda ugu wanaagsan loo dabo fadhiisto, haddaan arrimaha gacanta loo gelin mid ku caan baxay cilmi qoto-dheer iyo camal wanaagsan,damiirkiisuna saafi yahay taariikh nololeed wanaagsanna leh.

Xanuunka Tobnaad: Wada-tashi la'aan:

Wada tashigu waa asal ka mida assallada xukun ee Islaamka,cidda ka tagtaana waxay luminaysaa malaayiin awoodood oo ku dhex jirtay shacabkiisa,naftiisana wuxuu gelinayaa uu dhinac kasta ka dhamaystiran yahay,wuxuu khilaafayaa wadadii Anbiyada, wuxuu gelinayaa diiqad quluubta dadka la socda markuu ka dhegaysan waayo ra'yigooda,khaladba khalad kale ayuu usii dhiibi doonaa,intaas oo dhan waxaa dheer wuxuu hareer marayaa amarkii ILAAHAY ee sida cad loogu yidhi Kitaabka:

﴿وَشَاوِرْهُمْ فِي الأَمْرِ﴾ kala tasho arrimaha.

Halkan taynu u jeednaa waa wada-tashigii xaqiiqada ku salaysnaa.. maaha wada-tashigii ham hamta ahaa ee aan wax faa'iido ahi ku jirin aan ahayn ra'yi ururin si ay u taageeraan ra'yiga hogaamiyaha.. sidoo kale maaha ra'yi ku dhisan filasoofinimo ay diktooraadku ka dhigaan dahaadh lagu qurxiyo dimquraadiyadda..dahaadh aan wax qiimo ah lahayn,ra'yi lagu tuurayo kiishka xashiishka marka la soo jeediyo ka dib.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Kaasi wuxuu ahaa xanuunkii tobnaad ee ka mida xanuunada ummada Islaamka hoos geeyey addimadii Tataar,halkaasi waa toban buuro ah,waxayna ahaayeen sababaha jabka iyo liidashada u aabbe ah/ahaa/ahaan doona waqti kasta oo la joogo ama lasoo maray..waxaad ii xasuusnaataan in aan marna awood laynagu jebinayn,laakiin daciifnimadeena iyo diyaar garoow xumadeena ayaa laynagu jebinayaa.

Wadada guusha:

Arrin aaf u fudud.. kac iyo kuf midna ma leh..!!

Guushu waa in aan daaweyno tobankaas xanuun ee aan kor kusoo sheegnay.. in aad si dhab ah oo runa u daaweyso..laakiin waxaa horta khasab ah in aan isla aqoonsanno inay jiraan xanuunadani,ka dibna aan u cararno inaga oo u dedaalayna run ka sheegayna daaweyntooda,ummaddana cashar loo tufo, in laga shaqaysiiyo awood kasta si ay umaddani u hanato dhulka.

Guushu markaan soo koobno waxay noqonaysaa tobankaas xanuun ee aan soo sheegnay ((daaweyntoodii oo aan hore uga soo warrannay)):

1.In si buuxda oo aan shuruud lahayn loogu laabto ILAAHAY iyo sharcigiisa xakiimka ah.

2.in la mideeyo dhamaan Muslimiinta iyada oo aas aas looga dhigayo diinto.

3. in la rumeeyo Janno,adduunyada oo laga saahido, ku dhegsanaanteeda layska dhaafo.

4. waynaynta jihaadka iyo isku boorintiisa,da'yarta iyo dhalinyaradana lagu rabbeeyo jacaylka inay dar ILAAHAY u dhintaan.

5.in muhiimad la siiyo diyaar garoowga maadiga ah ee hubku ka mid yahay,cilmiga dejinta qorsheyaasha dagaalku ka mid yahay,dhaqaalihii ka mid yahay…,…siyaasaddii kale ka mid tahay.

6.in lasoo saaro hogaamiyeyaal waaweyn,jirrid ahaan iyo asal ahaanna Islaamiyiin ah, Muslimiinta agtoodana lagu waynayo.

7. in aan marnaba la aaminin cadaawaha ummaddan,si dhab ahna loo kala fahmo cadawga iyo saaxiibka.

8.in Muslimiinta dhexdooda lagu faafiyo saadaal wanaagsan,hankooda iyo ruuxdoodana kor loo qaado.

9.arrimaha oo gacanta loo geliyo dadkooda..dadkooduna waa dad karti iyo amaano leh.

10.wada-tashi xaqiiqo ah isla markaana diiradda lagu saarayo sidii ugu wanaagsan ee lagaga baxayo.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Iyadoo dhamaan isu ekaanshaha labadii burbur ee Baqdaad kii fogaa iyo ka dhowba hadana waxaa jira kala duwanaansho aad u muhiim ah oo u dhaxeeya labada Qiso,kala duwanaanshahaasina wuxuu gelinaya nafaha rajo wayn,wuxuuna ka saarayaa niyad-jabka dhintay.. kala duwanaanshaasina waa si fudud: waa iska caabbin..!! waxaynu arki karnaa iska caabbintii darnayd ee ka timid shacabkii reer Ciraaq ka dib markii ciidankoodii burburay,gaar ahaan marka la eego saddex-geeskii Sunni-ga,waxaynu kale oo arkaynay maydadkii kufsadeyaashii Maraykaanka,waxaynu kale oo arkaynay jabkii Maraykanka inay burburiyaan safafkii iska caabbinta,waxaynu kale oo arkaynay damqashadii Muslimiinta caalamku ay u damqanayeen mujaahidiintii Ciraaq,waxaan kale oo aragnay werwerkii Maraykaanka si cad xukuumadooda, mucaaridkooda, askartooda,shicibkooda,ilaa uu gaadhay heer ay is dilaan ciidamadii jiidaha dagaalka ee Maraykan!!

Dhamaan waxyaabahaas aan soo sheegnay kuma aynu arkin qisooyinkii hore,kuwaas oo inna siinaya yididiilo ah in aan xaaladdeenu ka wanaagsan tahay tii ay ku sugnaayeen Muslimiintii waqtigaas, iyo in arrinteenu aanay gaadhin heerkii labac-labacleynta ee ay gaadheen Muslimiintii waqtigii Tataar,dhamaan waxyaabahaasina waxay nafta gelinayaan rajo fiican,waxayna xoojinayaan go'aanka ah in mar labaad lays taagi karo,gar gaarka ILAAHAYna uu u imaan doono Ummaddan si shaki la'aan ah gooray ahaatoba,iyo si kasta oo ay u adkaato dantu,haddii ay ummadani awoodday inay ka baxdo waqtigeedii xumaa ee Tataarka innaguna_ haddii ILAAHAY yidhaahdo_ inaynu ka baxno dhibaatadeena ayaa ka sahlan toodii,ALLIHII kasoo saaray Quddus safafkii Mu'miniinta wuu karaa in uu mid la mida kasoo saaro safafkeenna

﴿وَلَتَعْلَمُنَّ نَبَأَهُ بَعْدَ حِينٍ﴾

warkeedana waad ogaan doontaan.

ILAAHAY ayeynu waydiisanaynaa in uu nolosheena dhamaanteed ku hanooniyo jidkiisa.. in uu hadalkeena iyo waaqiceenana ka dhigo hadalkii asxaabta Rasuulka ﷺ iyo waaqicoodii markay u jawaabayeen rasuulka ﷺ iyaga oo leh:

نحن الذين بايعوا محمداً على الجهاد ما بقينا أبداً.

waxaannu nahayd duulkii kula heshiiyey Maxammed jihaadka inta aanu nool nahay.

Waad xasuusan doontaan waxaan idin leeyahay..arrintayduna waxay gacanta ugu jirtaa ILAAHAY..waayo ILAAHAY wuu arkaa adoomada.

*****

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks



Qisadii Tataarka bilowgeedii ilaa Caynu-Jaaluut oo kooban.

603 hijriyada: soo bixitaankii dawladda Tataar oo uu hogaaminayo Jingiskhaan.

616hijriyada: waxaa bilaabmay qabsashadii Tataarku ay qabsadeen Ummadda Islaamka.

- Qabsashadii Bukhaara.

617hijriyada: Qabsashadii Sabar-qanda.

- Baacsashadii Maxamed Khawaarsim Shaah madaxweynihii dawladdii Khawaarsimiya.
- Geeridii Maxamed Khawaarsim Shaah uu ku geeriyooday jasiirad yar oo ku dhex-taal badda Qaswiin.
- Qabsashadii Maasandaraan.
- Qabsashadii Ray.
- Qabsashadii Adriibayjaan.
- Qabsashadii Armiiniya.
- Qabsashadii Joorjiya.
- Burburinta gobolladii Furqaana.
- Baabi'intii magaaladii Tirmid.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

- Burburintii Qalcaddii Kilaabah.
- Soo gelitaankii Tataarku ay soo galeen magaaladii Balkh ee Muslimka ahayd,iyo dadkeedii oo lagu khasbay inay la dagaal galaan si ay u wada weeraraan inta kale ee Muslimiinta ah.
- Qabsashadii Daaliqaan.
- Masiibadii ka dhacday Marwa.
- Qabsashadii Niisaabuur.
- Qabsashadii Harraat.
- Masiibadii la baday reer Khawaarsim.
- Guushii ay ka guuleysteen Muslimiintii is bahaysatay ee uu hogaaminayey Jalaalu-diin Maxamed Khawaarsim Tataarka ee Balaq.
- Guushii Jalaalu-diin mar labaad ee Kaabuul.
- Kala jabkii ciidanka Muslimiinta ka dib markii ay isku khilaafeen qaybsashada xoolihii laga furtay Tataarka.
- Jabkii ciidankii Jalaalu-diin xeeliga webiga Sindi (Bakistaan).
- Cararkii Jalaalu-diin u cararay Hindiya.
- Qabsashadii Magaaladii Qasna (Afganistaan).

618H : Burburintii Muraaqa.

- Hanjabaaddii in duullaan lagu qaado khilaafadii Cabbaasiyiinta ee Ciraaq.
- Qabsashadii Hamadaan.
- Qabsashadii Arada-wiil.
- Tabriis oo ku dhawaaqday Jihaad uu hogaaminayo Shamsu-diin Daqraawi iyo Tataarkii oo ka cabsaday dagaalkaas.
- Qabsashadii Biilqaan (Iiraan).
- Tataarkii oo isa soo taagay afaafka magaaladii Kunja.
- Qabsashadii Daaqistaan.
- Qabsashadii Shiishaan (chechnia).
- Qabsashadii koonfur galbeed Raashiya.

619H: Tataarkii oo iskaga nastay dhulka u dhaxeeya Ciraaq iyo Shiinaha.

620H: Tataar oo lagu jebiyey Bulgaar oo Raashiya ah.

- Muslimiinta oo dagaal la galay Joorjiya ka dib markii dhib wayni kala gaadhay labad dhinacba ku dhamaaday heshiis.
- Soo bixitaankii Qiyaasu-diin Khawaarsim ,Jalaalu-diin walaalkii ee waqooyiga Faaris (Iiraan).

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

- Qiyaasu-diin oo qabsaday dhamaan Faaris ka dib markii Tataar lagu jebiyey Raashiya.
- Qiyaasu-diin oo qabsaday dhamaan Karmaan (koonfurta Iiraan).
- Fitnadii dhex martay Qiyaasu-diin iyo abtigiis Iiqaan Daa'isi oo uu lacag siiyey khaliifkii Cabbaasiyiinta ee Al Naasir Li Diinillaah.
- Waxaa lagu guuleystay in loo guuriyo wiil uu dhalay Muqiisu-diin Daqral Shaah (oo ka mid ahaa boqorradii Salaajiqada) boqoradda Joorjiya.
- Waxaa lagu salliday Ayax wadamadii Muslimiinta ee ay ka midka ahaayeen Ciraaq,Shaam,Faaris iyo Jasiira.

621H: dagaalkii Qiyaasu-diin Khawaarsim iyo Sacadu-diin Dakla ayaa ku dhamaaday inay kala qaybsadaan Faaris.

- Saddex kun oo askari oo Tatari ah ayaa baabi'yey shan magaalo oo Muslimiin ah (Ray,Saawa,Qum,Qaashaan iyo Hamadaan_ Iiraanka imminka ah.
- Roobabkii ayaa yaraaday,Ayax ayaa soo baxay,sixir barar ayaa dhacay.

622H: Jalaalu-diin ayaa kasoo laabtay Hindiya.

- Jalaalu-diin oo la bahooday Sacaadu-diin Dakla si uu ula dagaalamo walaalkiis Qiyaasu-diin.
- Jalaaludiin ayaa qabsaday Faaris.
- Jalaalu-diin ayaa ku duulay Basra una hanjabay Baqdaad.
- Khaliifkii Cabbaasiyiinta ee Naasir Li Diinillaahi ayaa caawimo ka dalbaday Tataar.
- Jalaalu-diin ayaa qabsaday Joorjiya iyo Adriibayjaan.
- Heshiis muddaysan ayey wada galeen walaalihii Jalaalu-diin iyo Qiyaasu-diin.
- Waxaa geeriyooday khaliifkii Cabbaasiyiinta ee daallinka ahaa Alnaasir Li Diinillaah.
- Xukunkii khulafada oo uu la wareegay caadilkii Daahir Billaah.

623H:waxaa geeriyooday khaliifkii Daahir Billaah,xukunkiina waxaa la wareegay Muntasir Billah.

- Jalaau-diin ayaa go'doomiyey magaaladii Khulaad ee Muslimka ahayd.

624H: waxaa ka geeriyooday Tataarkii Jingis-khaan,xukunkiina waxaa la wareegay Okitaay.

- Okitay ayaa duullaamadii ka joojiyey in muddo ah wadamadii Islaamka si uu dib u dhis ugu sameeyo dawladdiisi.
- Waxaa dib u cusboonaaday dagaaladii u dhaxeeyey Jalaalu-diin iyo walaalkiis Qiyaasu-diin.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

626H: madaxdii Ayuubiyiinta ee Shaan ayaa heshiis ku bixiyey Baytal Maqdis oo siiyey Nasaaradii.

628H: duullaankii Tataarka ee labaad oo uu hogaaminayey Shoormo-jaan ayaa lagu soo qaaday wadamadii Muslimiinta.

- Jebintii Jalaalu-diin ay Tataarku ku jebiyeen Faaris.
- Cararkii Jalaalu-diin u cararay dhulka Jasiira ee waqooyiga Ciraaq.
- Jalaalu-diin ayuu dilay beer-wale Kurdi ahi.

629H: Tataarkii oo soo ceshaday haysashadii waqooyiga Faaris.

- Tataar ayaa soo ceshaday haysashadii Adriibayjaan.
- Shoormo-jaan ayaa joojiyey dagaaladii dhul-ballaadhsiga ahaa si ay u xasiliyaan dhulkan Muslimiinta ee ay qabsadeen in muddo ah.

634H: Shoormo-jaan ayaa soo celiyey dagaaladii dhul-fidsiga ahaa isla markaana wuxuu qabsaday Armiiniya,Joorjiya,Shiishaan iyo Daaqistaan.

- Ciidan Tataar oo cusub isla markaana uu hogaaminayo Baato Jiiji ayaa qabsaday webiga Foolga ee Raashiya hareerihiisa.

635H: duullaamo nidaam ayuu Baato ku qaaday Raashiya oo ku qabsaday.

Waxaa burburay magaalooyinkii Raashiya Riidaan ka dibna Kolulumuuna ka dibna Falaadimiir ka dibna Suudaal.

636H: waxaa la burburiyey Mooskow.

- Dhicitaankii Raashiya dhamaanteed (Yuuriif, Jaaliish,Birisalaaf,Rostof,Yaarusalaaf,Toorsook).
- Qabsashadii Yukrayn iyo burburintii caasimadda Kayiif (Kyiv).

639H: qabsashadii Boolaan oo uu hogaaminayey Baydar.

- Jebintii ciidamadii Jarmalka iyo Boolaan oo is bahaystay ay Tataarku ku jebiyeen galbeedka Boolaan.
- Baato oo qabsaday wadadii la mari jiray ka dib markii ciidamadeedii uu ka adkaaday.
- Baydar ayaa qabsaday Isloofaakiya(Slovakia) gebi ahaanteedba.
- Qabsashii Kuraweeshiya iyo gaadhistii badda Adriyaati (Adriatic see) ee u dhaxaysa Talyaaniga iyo Kureeshiya(Croatia).
- Waxaa geeriyooday Okitay Khaan isla markaana waxaa istaagay furashadii Yurubta.
- Waxaa xilkii la wareegay Kiyuuk Okitay wuxuuna hakiyey duullaamadii dhul-ballaadhsiga.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

640H: geeridii khaliifkii Cabbaasiyiinta Almuntasir Billaah, iyo la wareegistii Almuctasim Billaah.

643H: wefdi uu diray Inoosant-kii afraad ayaa gaadhay Kiyuuk Khaan iyaga oo u soo bandhigaya inay u midoobaan Muslimiinta dhinacna uga soo wada jeestaan.

645H: wefdi kale ayuu u soo diray Inosant-kii afraad Biijo hogaamiyihii ciidamada Tataarka ee qabsaday Raashiya.

646H: wefdi ayuu u soo diray Luwis Taasic madaxweynihii Faransiisku Kiyuuk Khaan.

- Waxaa geeriyooday Kiyuuk Okitay.
- Tataar waxaa la wareegtay Oogool Qamiish.

647H: Luwis Taasic ayaa qabsaday Diimaad oo ku taalla dalka Masar.

648H: dagaalkii Almansuurah iyo siday Muslimiintu uga guuleysteen Faransiiska.

649H: waxaa xukunkii Tataarka qabsaday Monko-khaan.

- Holaako ayaa loo dhiibay ciidamadii Tataarka ee haystay Faaris kuna sii jeeday caasimaddii khilaafada Cabbaasiyiinta.
- Waxaa bilaabmay u diyaar garoowgii in la burburiyo khilaafadii Cabbaasiyiinta.

650H: waxaa la qabsaday dhulka Jasiira ee ku yaalla waqooyiga Ciraaq.

651H: wefdi uu soo diray Luwis Taasic boqorkii Faransiiska ayaa u timid Monko-khaan.

654H: waxaa dhamaystirmay diyaar garoowgii lagu dumin lahaa Ciraaq iyo khilaafadeeda.

655h: Waxaa isu habar-wacday ciidamadii Tataarka ee ku kala daadsanaa,Shiinaha,Raashiya,Yurub,Faaris iyo Joorjiya.

656H: waxaa go'doomin lagu bilaabay Baqdaad.

- Baqdaad ayaa la qabsaday.
- Khaliifkii ugu dambeeyey Banii Cabbaas ayaa lagu dilay Baqdaad.
- Waxaa la riday khilaafadii Islaamiga ahayd markii ugu horeysay ee taariikhda la hayo.
- Kaamil Maxamed Ayuubi ayaa jihaad kaga dhawaaqay Miyaafarqiin.
- Waxaa la go'doomiyey Miyaafarqiin.
- Waxaa khilaaf ka dhex dhashay Naasir Yuusuf Ayuubi iyo Holaako.

657H: waxaa bilaabmay qabsashadii Shaam.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

- Waxaa la qabsaday Niisabiin.
- Waxaa la qabsaday Ilbiira.
- Waxaa la go'doomiyey Xalab**.**

658H: waxaa la dilay Kaamil Maxamed Ayuubi.

- Waxaa dhacday Xalab.
- Waxaa la qabsaday Dimishiq.
- Waxaa la qabsaday Qasa.
- Tataar ayaa u hanjebay Masar.
- Quddus ayaa dagaal go'aansaday.
- Ciidamadii Muslimiinta ayaa kasoo baxay Masar iyaga oo usoo jeeda Qasa.
- Baybaras ayaa guul la taaban karo kasoo hooyey dagaalkii ay Tataarka kula galeen Qasa.
- Quddus ayaa guul aad u wayn kasoo hooyey dagaalkii Caynu Jaaluut.
- Waxaa la xoreeyey Dimishiq Xalab iyo dhamaan dhulkii kale ee Shaam.
- Waxaa midoobay Masar iyo Shaam.

****

Taariikhdii Mamaaliikta oo kooban

198Hijriga: markii uu la wareegay khaliifnimadii Cabbaasiyiinta ninkii la odhan jiray Alma'muun waa ninkii ugu horeeyey ee bilaabay keenista Mamaaliikta.

218H: markuu xukunka Cabbaasiyiinta la wareegay Almuctasim waa ninkii sii badiyey soo waaridista Mamaaliikta.

637H: waxaa xukunka Masar la wareegay Najmu-diin Ayuub.

641H: madaxdii Ayuubiyiinta Shaam ayaa la midoobay Kiristaanka si ay ula dagaalamaan Najmu-diin Ayuub oo Masar haystay.

643H: Najmu-diin ayaa kaga guuleystay isbahaysigii Ayuubiyiinta iyo Kiristaanka dagaal ka dhacay Qasa.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

643H: Najmu-diin Ayuubi ayaa xoreeyey Bayt-Almaqdis.

- Waxaa bilaabmay dhismihii Mamaaliikta bariga oo ay hogaaminayaan Faarisu-diin Aqdaay iyo Ruknu-diin Baybaras.
- Waxaa Masar soo gaadhay Alcissi Bin Cabdi Salaam.

647H: boqorkii la odhan jiray Luwis Taasic ee Faransiiska ayaa qabsaday dekedda Diimaat (20 Safar).

- Waxaa ku geeriyooday Malik Saalix Najmu-diin Ayuub meesha la yidhaahdo Almansuurah ((15 Shabcaan)).
- Waxaa dagaalkii Mansuurah agaasintay gabadhii Shajratu-Durr ka dib markuu odeygeedii geeriyooday.
- Muslimiinta ayaa guul wayn kasoo hooyey dagaalkii Mansuurah ((4 Dilqacdah)).
- Waxaa soo gaadhay Almansuurah Tawraan Shaah oo ina Najmu-diin Ayuub ahaa safarkiisana kaga soo kicitimay Turkiga markuu ogaadey geeridii Aabihiis ((17 Dilqacdah))

648H: Muslimiinta oo uu hogaaminayo Tawraan Shaah ayaa si wayn ugaga guuleystay ciidamadii Faransiiska meesha la yidhaahdo Faariskoor((bilowgii Muxarram)).

- Dagaalkaas waxaa lagu qabsaday boqorkii Faransiiska ee Luwis Taasic.
- Tawraan Shaah oo cabsi geliyey Shajratu-Durr,Faarisu-diin Aqdaay iyo Ruknu-diin Baybaras.
- Tawraan Shaah ayaa la dilay((27 muxarram)).
- Shajratu-Durr ayaa noqotay boqoraddii ugu horeysay ee xukunta Masar oo Islaam ah ((bilowgii Safar)).
- Shajratu-Durr ayaa guursatay Cissu-diin Aybak.
- Shajratu-Durr ayaa boqor isaga casishay xilkii ay qabatay ka dib ((80)) maalmood oo keliya markii ay ahayd boqorad ((dhamaadkii bisha Jamaadu-Saani)).
- Xukunkii Masar ayaa waxaa la wareegay Cissu-diin Aybak.
- Boqorkii Cissu-diin Aybak ayaa dagaal kaga guuleystay madaxdii Shaam goobtuna waxay ahayd Cabbaasiya oo Masar ku taalla ((10 Du-Alqacdah)).

650H: waxaa dhamaystirmay dhismihii Mamaaliik Almucsiyah oo uu hogaaminayo Quddus.

651H: Boqorkii Mucissi wuxuu Falastiin kusoo daray dhinaca Masar.

652H: boqorkii Mucissi ayaa dilay Faarisu-diin Aqdaay ((3 Shabcaan)).

- Mamaaliiktii Baxriga oo uu hogaaminayo Baybaras ayaa u baxsaday Shaam.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

655H: boqorkii Mucissi ayaa wuxuu go'aansaday in uu guursado gabadh uu dhalay Bedru-diin Lu'lu amiirkii Mawsil.

- Shajratu-Durr oo dishay boqorkii Cissu-diin Aybak ((Rabiic Al Awal)).
- Shajratu-Durr ayaa laga qisaasay dilkii ay geysatay ((Rabiic Al Awal)).
- Waxaa kursigii xukunka ee Masar fuulay wiil yar oo la odhan jiray Nuura-diin Cali oo uu dhalay boqorkii ay dishay Shajratu-durr maamulkana waxaa la waday Quddus.
- Al muqiis Fatxu-diin amiirkii Kurdiga ayaa Masar kusoo duulay,waxaana dagaalkaas ku jebiyey Quddus ((Du-Al qacdaha)).

656H: Baqdaad ayaa duntay.

- Amiirkii Kurdiyiinta oo mar labaad kusoo duulay Masar ((Rabiic Al aakhir)).

657H: waxaa bilaabmay qabsashadii Shaam oo uu hogaaminayo Holaako.

- Quddus ayaa ku fadhiistay kursigii looga talin jiray Masar ((24 Du-Alqacdah)).

658H: Quddus ayaa bilaabay hagaajinta arrimaha gudaha ee waddanka Masar.

- Saama-xaad ballaadhan ayuu u fidiyey Mamaaliiktii Baxriga wuxuuna la mideeyey Mamaaliiktii Almucsiyah.
- Daahir Baybaras oo loogu yeedhay in uu ka yimaaddo Shaam isla markaana soo galo Masar.
- Quddus ayaa isku deyay in uu mideeyo Shaam iyo Masar isaga oo isticmaalay waraaqo uu u kala diray madaxdii Shaam.
- Waxaa duntay Xalab ((Safar)) waxaa iyana duntay Dimishiq ((Rabiic Al Awal)).
- Waxaa Masar soo gaadhay warqad Masar loogu hanjabayo inay Tataarku qabsan doonaan.
- Quddus ayaa go'aansaday in uu la dagaalamo Tataarka.
- Quddus ayaa go'aansaday in uu dagaalka u baxo Tataarkana kula dagaalamo Falastiin maaha Masar gudeheeda in uu ku sugo.
- Ciidamadii Masaarida ayaa loo diyaariyey dhinac milateri iyo dhinac dhaqaaleba.
- Shacabkii reer Masar ayey culimadii ku guubaabiyeen inay fekredda in lala dagaallamo Tataarka aqbalaan.
- Ciidamo ka mida reer Shaam ayaa Masar yimid si ay dagaalka uga qayb galaan.
- Waxaa laysugu keenay ciidamadii Muslimiinta kobta la yidhaahdo Al Saalixiyah.
- Ciidankii Masaarida ayaa u dhaqaaqay dhinaca Falastiin ((Shabcaan)).
- Ciidamadii Muslimiinta ayaa ka adkaaday guutadii Tataarka ahayd ee joogtay Qassa.
- Wada-hadallo ayaa lala galay Kiristaankii deganaa Caka.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

- Quddus ayaa doortay in ay Caynu Jaaluut noqoto meesha dagaalka wayni ka dhici doono.
- Muslimiinta ayaa guul lama maqal ah kasoo hooyey dagaalkii Caynu Jaaluut ((25 ramadan)).
- Dimishiq ayaa Tataarkii laga xoreeyey ciidankana waxaa hogaaminayey Quddus ((30ramadaan)).
- Xalab ayaa laga xoreeyay Tataarkii ciidanka xoreeyayna waxaa watay Baybaras((bilowgii Shawaal)).
- Shaam iyo Masar ayaa la mideeyay waxaana wada xukumay Quddus.
- Noqoshadii Quddus ee dhinaca Masar ((26 Shawaal)).
- Waxaa la dilay Quddus.

***

Tix-raac

1 Quraanka Kariimka ah iyo Tafsiirkiisa.
2 Kutubta xadiisyada Nebiga ee sharafta badan iyo sharraxooda.
3 Dhamaystirka taariikhda_ Ibnu-Atheer Aljarasi.
4 Bilowgii iyo dhamaadkii _ Ibn Katheer.
5 Taariikhdii khulafada _ Suyuudi.
6 Taariikhdii Ayuubiyiinta Masar iyo dhulka Shaam_ Dr Maxamed Sahiil Alduquusi.
7 Taariikhdii Mamaaliita Masar iyo dhulka Shaam _ Dr Maxamed Sahiil Alduquusi.
8 Suldaankii wanaagsanaa_ Dr Qaasim Cabdoo Qaasim.
9 Taariikhda Islaamka_ Maxamuud Shaakir.
10 Atlaska taariikhda Carabta ee Islaamka_ Dr shawqi Abu Khaliil.
11 Atlaska dawladaha caalamka ee Islaamka__ Dr shawqi Abu Khaliil.
12 Taariikhdii Ibn Khalduun_ Cabdi Raxmaan Khalduun.
13 Xadaaraddeenii _Dr Mustafe Sibaaci.
14 Goobihii xamaasadda lahaa ee ku jira Taariikhda Islaamka_ Dr maxamed Cabdullaahi Canaan.

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

15 Xidigihii quruxda badnaa ee ku jiray boqorradii Masar iyo Qaahira_ Ibn Taqri Bardi.

....D h a m a a d.....

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks

Ku Baadh Telegramka @Somalibooks